

# INJIILKA SAYID CIISE MASIIX

Bashir Muse Version (BMV)

ISBN 978-9914-708-39-4

**The New Testament in Somali**
**Published as *Injiilka Sayid Ciise Masiix***
**(The Gospel of Lord Jesus Christ)**

**First Edition, 2021**
***Maxaad Tidhi Dialect***

**Pastor Bashir A. Muse**
**Translation Committee Chairman**

**Rev. Aweis A. Ali, BTh, MDiv, PhD, candidate**
**Editorial Committee Chairman**

KENPRO Publications

**Nairobi, Kenya**

Kenya Projects Organization [KENPRO] is membership organization founded and registered in Kenya in the year 2009 under the Ministry of Gender, Culture and Social Development. The mandate of the organization is to build human and institutional capacities in the fields of Development Projects, Research and Publishing.

Kenya Projects Organization (KENPRO)
Off Magadi Road, Ongata Rongai
P.O. Box 15509 – 00503, Mbagathi - Nairobi
Tel. +254 202319748 | Mobile: +254 725 788 400
Email: infokenpro@gmail.com | Website: www.kenpro.org

EDITING, LAYOUT, FORMAT AND DESIGN
Anthony M. Wanjohi and Erastus K. Irungu

ISBN: 978-9914-708-39-4
© Somali Bible Society
First Published, 2021
Cover photo credit: Aweis A. Ali

SOMALI Bible Society

This book has been published under the auspices of the Somali Bible Society, Mogadishu, Somalia

Email: info@SomaliBibleSociety.org | Website: www.SomaliBibleSociety.org

*This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 Licence. You are free to copy, communicate and adapt the work, as long as you attribute the author.*

## DEDICATION

This Somali translation of the New Testament is dedicated to the memory of Aadan Jim'aale Faarah and Warren and Dorothy Modricker. The Modrickers helped Aadan and his Somali team translate the Bible into Somali during the 1960s and 70s. Aadan's translation of the Bible was the first ever complete Bible into the Somali language.

# TABLE OF CONTENT


DEDICATION ........ iv
TABLE OF CONTENT ........ v
INJIILKA SIDA MATAYOS U QORAY ........ 1
INJIILKA SIDA MARKOS U QORAY ........ 46
INJIILKA SIDA LUUKOS U QORAY ........ 75
INJIILKA SIDA YOOXANAA U QORAY ........ 122
WAX QABADKII XAWAARIYIINTA ........ 155
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER ROOMA ........ 199
WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER KORINTOS ........ 218
WARQADDII LABAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER KORINTOS ........ 236
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER GALATIYA ........ 248
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER EFESOS ........ 254
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QOAY DADKII REER FILIBOY ........ 260
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER KOLOSAY ........ 264
WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER TESALONIIKA ........ 268
WARQADDII LABAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER TESALONIIKA ........ 272
WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY TIMOTEYOS ........ 275
WARQADDII LABAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY TIMOTEYOS ........ 280
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY TIITOS ........ 284
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY FILEMON ........ 286
WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII CIBRAANIYADA ........ 287
WARQADDII RASUUL YACQUUB ........ 301
WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS ........ 306
WARQADDII LABAAD EE RASUUL BUTROS ........ 311
WARQADDII KOWAAD EE RASUUL YOOXANAA ........ 314
WARQADDII LABAAD EE RASUUL YOOXANAA ........ 319
WARQADDII SADDEXAAD EE RASUUL YOOXANAA ........ 320
WARQADDII RASUUL YUUDAS ........ 321
MUUJINTII RASUUL YOOXANAA ........ 323

# INJIILKA SIDA MATAYOS U QORAY

## Abtirsiinta Ciise

**1** Kanu waa kitaabka Abtirsiinta Ciise Masiix ina Daa'uud ina Ibraahim 2 Ibraahim wuxuu dhalay
Isxaaq Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub Yacquubna wuxuu dhalay Yahuudah iyo walaalihiis
3 Yahuudahna wuxuu Tamaar ka dhalay Feres iyo Sarah Feresna wuxuu dhalay Esroom
Esroomna wuxuu dhalay Araam 4 Araamna wuxuu dhalay Caminadaab Caminadaabna wuxuu
dhalay Naasoon Naasoonna wuxuu dhalay Salmoon 5 Salmoonna wuxuu Raxab ka dhalay
Bocas Bocasna wuxuu Ruud ka dhalay Coobeed Coobeedna wuxuu dhalay Yesay 6 Yesayna
wuxuu dhalay boqor Daa'uud Daa'uudna wuxuu naagtii Uuriyaah qabi jiray ka dhalay
Sulaymaan 7 Sulaymaanna wuxuu dhalay Rexabcaam Rexabcaamna wuxuu dhalay Abyaah
Abyaahna wuxuu dhalay Aasaa 8 Aasana wuxuu dhalay Yoosafaad Yoosafaadna wuxuu
dhalay Yooraam Yooraamna wuxuu dhalay Cusyaah 9 Cusyaahna wuxuu dhalay Yootam
Yootamna wuxuu dhalay Axaas Axaasna wuxuu dhalay Xisqiyaah 10 Xisqiyaahna wuxuu
dhalay Manaseh Manasehna wuxuu dhalay Aamoon Aamoonna wuxuu dhalay Yoosiyaah
11 Yoosiyaahna wuxuu dhalay Yekonyaah iyo walaalihiis waagii Baabuloon loo kaxeeyay
12 Markii Baabuloon loo kaxeeyay dabadeed Yekonyaah wuxuu dhalay Salaatii'eel
Salaatii'eelna wuxuu dhalay Serubaabel 13 Serubaabelna wuxuu dhalay Abihuud Abihuudna
wuxuu dhalay Eliyaaqiim Eliyaaqiimna wuxuu dhalay Asoor 14 Asoorna wuxuu dhalay Saadooq
Saadooqna wuxuu dhalay Akhiim Akhiimna wuxuu dhalay Eliyuud 15 Eliyuudna wuxuu dhalay
Elecaasaar Elecaasaarna wuxuu dhalay Mataan Mataanna wuxuu dhalay Yacquub
16 Yacquubna wuxuu dhalay Yuusuf ninkii Maryamadii Ciisihii Masiixa loogu yeedhay dhashay
17 Haddaba Abtirsiinta oo dhan Ibraahim ilaa iyo Daa'uud waa afar iyo toban qarni Daa'uud ilaa
waagii Baabuloon loo kaxeeyayna waa afar iyo toban qarni waagii Baabuloon loo kaxeeyay
ilaa iyo Masiixana waa afar iyo toban qarni.

## Dhalashadii Ciise

18 Dhalashadii Ciise Masiix sidan ayay ahayd. Markay hooyadii Maryama u doonanayd
Yuusuf intuuna la aqal galin ka hor waxaa la arkay iyada oo Ruuxa Qudduuska ah ka
uuraysatay 19 Ninkeedii Yuusufna wuxuu ahaa Nin xaq ah oo ma uusan doonaynin in uu dadka
hortooda ku ceebeeyo wuxuuse ka fikirayay inuu si qarsoodi ah isaga fasaxo 20 Laakiinse intuu
arrintaas ka fikirayay bal eeg, malagii Rabbiga ayaa riyo ugu muuqday isaga oo leh Yuusuf ina
Daa'uudow ha ka cabsanin in aad Maryama guursato maxaa yeelay Ruuxa Qudduuska ah
ayay ka uuraysatay 21 Oo waxay umuli doontaa wiil magiciisana waxaad u bixin doontaa Ciise
waayo dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbaadin doonaa 22 Waxaas oo dhanna waxay u
dhaceen si waafaqsan waxyigii uu Rabbigu u waxyooday nebiga isaga oo leh 23 Bal eeg,
gabadh bikrad ah ayaa uuraysan doonta oo wiil bay umuli doonta Magiciisana waxaa loo bixin
doonaa Cimmaanu'eel (oo ah Eebbebaa inala jooga.)[1]* 24 Marka Yuusuf hurdadii ayuu ka
kacay oo sidii uu malaga Rabbigu ku amray ayuu yeelay oo Maryama ayuu guursaday 25
laakiinse uma uusan tagin iyada ilaa oy wiil ka umushay oo wuxuu magiciisa u baxshay Ciise.

---

1 Kitaabka Nebi Ishacyaah 7:14

## Booqashadii Nimankii Xigmadda Lahaa

**2** Markuu Ciise ku dhashay Beytlaxamtii Yahuudiya waagii uu Herodos boqorka ka ahaa
bal eeg, waxaa Quddus xagga bari kaga yimid niman xigmad leh iyaga oo leh [2] Xagguu
joogaa boqorka Yuhuudda ee dhashay? Waayo xiddigtiisa ayaannu xagga bari ka
aragnay oo waxaannu u nimid inaannu u sujuudno [3] Markuu boqor Herodos arrintaas
maqlay wuu welwelay isaga iyo reer Quddus oo dhan [4] Oo intuu isu keenay
wadaaddadii sare iyo culimadii dadka oo dhan ayuu waydiiyay meesha uu Masiixu ku
dhalan lahaa. [5] Waxayna ku yidhaahdeen Beytlaxamtii Yahuudiya waayo sidan ayuu
nebigii u qoray. [6] Adigu Beytlaxamtii dalka Yahuudiya ahaydeey Kuma yarid amiirrada
Yuhuudda dhexdooda, Waayo waxaa adiga kaa soo bixi doona taliye Kaasoo dadkayga
Israa'iil u talin doona[2*] [7] Markaasuu Herodos nimankii xigmadda lahaa hoos ahaan ugu
yeedhay oo ka hubsaday markay xiddigtu u muuqatay [8] Deedna Beytlaxam ayuu cid u
diray oo ku yidhi, Taga oo ilmaha aad u raadiya oo markaad heshaan isoo ogeysiiya si
aan anna ugu tago oon ugu sujuudo [9] Markay boqorkii maqleen ayay tageen oo xiddigtii
ay xagga bari ka arkeen ayaa hor kacday ilaa oy timid oy kor joogsatay meeshuu
ilmuhu joogay. [10] Oo markay xiddigtii arkeen aad ayay u farxeen [11] Markay gurigii
galeenna waxay arkeen ilmihii iyo hooyadii Maryama oo intay dhaceen ayay u
sujuudeen isaga oo kiishashkoodii intay fureen ayay hadiyado dahab iyo beeyo iyo
malmal ah isaga siiyeen [12] Marka riyo ayaa loogu digay inayna Herodos ku noqonin oo
intay jid kale mareen ayay dalkoodii ku noqdeen.

## Cararkii Xagga Masar

[13] Haddaba markay ka tageen bal eeg, malagii Rabbiga ayaa Yuusuf riyo ugu muuqday isaga
oo leh, Kac oo ilmaha iyo hooyadii kaxee oo Masar u carar oo halkaa joog ilaa oon kuu soo
sheego waayo Herodos ayaa doonaya inuu ilmaha dilo. [14] Marka intuu kacay ayuu ilmihii iyo
hooyadiiba xilli habeenimo Masar u kaxeeyay. [15] Oo halkaas ayuu joogay ilaa iyo dhimashadii
Herodos si uu u xaqiiqoobo waxyigii Rabbigu u waxyooday nebiga isaga oo leh
Wiilkayga Masar ayaan uga yeedhay.

## Herodos Carruurrtii Beytlaxam Ayuu Laayay

[16] Markuu Herodos ogaaday inay nimankii xigmadda lahaa ku jeesjeeseen ayuu aad u
cadhooday oo wuxuu amar ku bixiyay in wiilasha yar yar ee laba jir iyo kuwa ka yaryar ee ku
nool Beytlaxam iyo agagaarkeedaba la laayo wakhtigii uu nimankii xigmadda lahaa ka
hubsaday. [17] Marka waxaa xaqiiqoobay waxyigii Nebi Yeremyaah loo waxyooday isaga oo leh
[18] Cod baa Raamaah laga maqlay, oohin iyo baroor wayn, Raaxeel carruurteedii ayay u
ooyaysaa, mana doonayso in loo qalbi qaboojiyo waayo ma joogaan.

## Ka Soo Noqodkii Dalka Masar

[19] Laakiin markuu Herodos dhintay malagii Rabbiga ayaa Yuusuf oo Masar jooga riyo ugu
muuqday isaga oo leh, [20] Kac oo ilmaha iyo hooyadii kaxee oo Dalka Israa'iil tag waayo kuwii
doonayay inay ilmaha nafta ka qaadaan way dhinteen. [21] Markaasuu kacay oo ilmihii iyo
hooyadii kaxeeyay oo dalkii Israa'iil tegay [22] Laakiin markuu maqlay in Arkhela'os jagadii

2 Kitaabka Nebi Malaakii 5:2

aabbihii Herodos ee Yahuudiya qabtay ayuu ka cabsaday inuu halkaas tago Markaasuu Eebbe riyo ugu digay oo wuxuu u leexday dhinaca Galili. 23 Wuxuuna yimid oo degay magaalo Naasared la yidhaahdo si uu u xaqiiqoobo waxyigii nebiyada loo waxyooday, Waxaa loogu yeedhayaa Nasraani.

### Wacdigii Nebi Yaxye

**3** Maalmahaas waxaa yimid Nebi Yaxye biyo galiye isaga oo lama dagaanka Miyiga
Yahuudiya wax ka wacdiyaya, oo leh, 2 Toobadkeena, waayo, boqortooyadii jannadu way
dhawdahay. 3 Maxaa yeelay kanu waa kii uu Nebi Ishacyaah sii sheegay markuu yidhi,
Waa codka ka lama dagaanka kaga dhawaaqaya, Jidka Rabbiga hagaajiya,
Waddooyinkiisana toosiya.[3*] 4 Nebi Yaxye wuxuu guntanaa maro dhogorta geela laga
sameeyay oo suun magad ah ayuu dhexda ku xidhnaa, cuntadiisuna waxay ahayd ayaxa iyo
malabka kaymaha. 5 Marka waxaa u soo baxay dadkii Quddus iyo Yahuudiya oo dhan iyo kuwii
dalka Urdun agagaarkiisa daganaa oo dhan. 6 Markaasuu wabiga Urdun ku biyo galiyay iyaga
oo dembiyadooda qiranaya. 7 Laakiin markuu arkay kuwo badan oo Farrisiin iyo Sadukiin ah oo
biyo galinta u yimid wuxuu ku yidhi, Dhashii jilbiskaay, yaa idiinka digay inaad cadhada
imanaysa ka carartaan? 8 Midho toobadda istaahila soo bixiya. 9 hana ku fikirina inaad
istidhaahdaan, Waxaannu nahay ilmo Ibraahim. Waayo, waxaan idinku leeyahay, Eebbe wuu
awoodaa inuu dhagaxyadan Ibraahim carruur ka siiyo. 10 Hadda guduntu waxay saarantahay
geedaha guntooda. Sidaa darteed geed kasta oon midho wanaagsan soo bixinin waa la
gooyaa oo dabka ayaa lagu tuuraa. 11 Anigu biyo ayaan idin galiyay si aad u toobadkeentaan,
laakiin ka iga daba iman doona ayaa iga xoog badan, mana istaahilo inaan kabaha u qaado.
Isagu wuxuu idin galin doonaa Ruuxa Qudduuska ah iyo dab. 12 Masaftiisu gacantiisay ku
jirtaa, goobta wax lagu tumana aad buu u sifayn doonaa, sarreenkiisana bakhaar ayuu ku
uruurin doonaa, laakiinse buunshaha dab aan damaynin ayuu ku gubi doonaa.

### Biyo Galintii Ciise

13 Marka Ciise Galili ayuu ka yimid oo Urdun ayuu Nebi Yaxye ugu yimid si loo biyo galiyo.
14 Laakiinse Nebi Yaxye wuu diiday, isaga oo leh Anaaba u baahan in aad i biyo galisee
adiguna miyaad ii timid? 15 Laakiin Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Hadda oggolow, waayo
waxaa inoo habboon inaynu xaqnimada oo dhan samayno markaasuu u oggolaaday. 16 Ciise
markii la biyo galiyay, ayuu markiiba biyaha kor uga soo baxay, markaasay samooyinkii
furmeen, oo wuxuu arkay Ruuxii Eebbe oo qaabka qoollayda oo kale leh oo dushiisa ku
dagaya, 17 Oo cod ayaa samada ka yidhi, Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay, ee aan ku
faraxsanahay.

### Jirrabaaddii Ciise

**4** Marka Ruuxa ayaa Ciise lama dagaanka u kaxeeyay si Iblaysku u jirrabo. 2 Oo markuu
afartan maalmood iyo afartan habeen soomanaa, ayuu dabadeed gaajooday. 3 Markaasuu
duufsadihii u yimid oo ku yidhi, Haddaad Wiilka Eebbe tahay dhagaxyadan ku dheh, cunto

3 Kitaabka Nebi Ishacyaah 40:3

noqda.[4*] [4] Laakiin Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Way qorantahay dadku waa inayna cunto
oo kaliya ku noolaanin, laakiinse eray kasta oo afka Eebbe ka soo baxa[d]. [5] Marka Iblayskii ayaa
magaalada Quddus geeyay, oo wuxuu saaray minaaraddii macbudka [6] Oo wuxuu ku yidhi,
Haddaad Wiilka Eebbe tahay halkan hoos isaga tuur, waayo waxaa qoran Malaa'igtiisa ayuu
amri doonaa, Oo gacmahooda ayay sare kuugu qaban doonaan, si ayna cagtaadu dhagaxa
ugu dhicin.[5*] [7] Ciise ayaa ku yidhi, Waxaa qoran oo kale Rabbiga Eebbahaaga ah waa inaadan
jirrabin.[6*] [8] Haddana Iblayskii ayaa buur aad u dheer geeyay, oo wuxuu tusay boqortooyooyinka
dunida oo dhan iyo ammaantooda. [9] Wuxuuna ku yidhi, Waxaas oo dhan adiga ayaan ku
siinayaa haddaad ii sujuudo ood i caabuddo. [10] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Bax
Shaydaanyahow! waayo waxaa qoran Waa inaad Rabbiga Eebbahaaga ah oo keliya u
sujuuddo ood caabuddo. [11] Deedna Iblayskii wuu ka tegay oo malaa'igo ayaa u yimid oo u
adeegay.

### Ciise Adeeggiisii Ayuu Billaabay

[12] Ciise Maarkuu maqlay in Nebi Yaxye la qabtay ayuu Galili ku leexday, [13] Oo intuu
Naasared ka tegay wuxuu yimid oo degay Kafarna'umtii badda xeebteeda ahayd oo ku taallay
agagaarka Sebulun iyo Naftaali, [14] Si uu u xaqiiqoobo Waxyigii nebi Ishacyaah, isaga oo leh,
[15] Dhulka Sebulun iyo dhulka Naftaali, Xagga waddada badda, Urdun shishadeeda, Galilitii
Ummadaha, [16] Dadkii Mugdiga ku noolaan jiray iftiin wayn bay arkeen, oo kuwii ku noolaan jiray
dhulka hooska dhimashada Iftiin baa u soo baxay.[7*] [17] Markaas laga billaabo Ciise wuxuu
billaabay Wacdi isaga oo leh Toobadkeena, waayo, boqortooyadii jannadu way dhawdahay.

### Ciise Wuxuu U Yeedhay Xertiisii Ugu Horraysay

[18] Marka isaga oo badda Galili Ag maraya wuxuu arkay laba walaalo ah, Simoonkii Butros
lagu naanaysi jiray iyo walaalkii Andaros iyaga oo shabag badda ku tuuraya, waayo,
kalluumaysato ayay ahaayeen. [19] Oo wuxuu ku yidhi, Isoo raaca, waxaan idinka dhigayaa kuwa
dadka jillaabtee. [20] Markiiba intay shabagii ka tageen, ayay isaga raaceen. [21] Markuu meeshaa
in yar dhaafayna wuxuu arkay laba kale oo walaalo ah, Yacquub ina Sebedi iyo walaalkii
Yooxanaa, iyaga oo aabbahood doonnida la saaran oo shabagyadoodii hagaajinaya, wuuna u
yeedhay. [22] Markaasay doonnidii iyo aabbahood intay ka tageen isaga raaceen.

### Ciise Wuxuu Ka Adeegay Galili

[23] Ciise ayaa Galili oo dhan ku wareegay, isaga oo sunagogyada wax ku baraya oo Injiilka
boqortooyada ku wacdiyaya oo xanuun oo dhan iyo cudur oo dhan dadka ka bogsiinaya.
[24] Warkiisuna Suuriya oo dhan ayuu gaadhay, oo waxay u keeneen kuwii bukay ee cudurrada
kala duwan iyo xanuunyada qabay, iyo kuway shaydaanadu ku jireen iyo kuwii suuxdinta
qabay iyo kuwii curyaanka ahaa oo dhan wuuna bogsiiyay. [25] Marka waxaa raacay dad wayne
fara badan oo ka kala yimid Galili iyo Dekabolis iyo Quddus iyo Yahuudiya iyo Urdun inta ka
shishaysa.

---

4 Sharciga Kunoqoshadiisa 8:3
5 Sabuur 91:12
6 Sabuur 6:16
7 Ishacyaah 9:1-2

### Wacdigii Ciise Buurta Dusheeda Dadka Kaga Wacdiyay

**5** Markuu dad waynihii badnaa arkay ayuu buur fuulay, markaasuu fadhiistay oo xertiisa ayaa u
timid. 2 Deedna intuu afka furtay ayuu wax baray, isaga oo leh:

3 Waxaa barakaysan kuwa xagga ruuxda ka masaakiinta ah, waayo, boqortooyada jannada
iyagaa leh. 4 Waxaa barakaysan kuwa ooyaya waayo, waa loo qalbi qaboojin doonaa.
5 Waxaa barakaysan kuwa dabeecadda qabow, waayo, dhulkay dhaxli doonaan.
6 Waxaa barakaysan kuwa xaqnimada u gaajaysan ee u harraadan, waayo, way dhargi
doonaan. 7 Waxaa barakaysan kuwa naxariista, waayo, waa loo naxariisan doonaa.
8 Waxaa barakaysan kuwa qalbiga daahirka ka ah waayo, Eebbe bay arki doonaan.
9 Waxaa barakaysan nabad doonnada waayo, waxaa loogu yeedhi doonaa wiilashii Eebbe.
10 Waxaa barakaysan kuwa xaqnimada aawadeed loo dhibo waayo, boqortooyada jannada
iyagaa leh. 11 Waad barakaysantihiin markii la idin caayo, oo la idin dhibo oo wax walba oo xun
oo been ah la idinka sheego aawaday. 12 Farxa oo riyaaqa, waayo, jannada ayaad abaalgud
wayn ku leedihiin, maxaa yeelay sidaas ayay Nebiyadii idinka horreeyay u ciqaabi jireen.

### Waxaad Tihiin Milix Iyo Iftiin

13 Idinku waxaad tihiin Milixdii dhulka, laakiin hadday milixdu dhanaan beesho maxaa lagu
dhanaaniyaa? Markaa ka dib faa'iido ma laha in dibadda loo tuuro oy dadku ku tuntaan
mooyee. 14 Idinku waxaad tihiin iftiinka dunida. Magaalo buur ku taalla ma qarsoonto.
15 Faynuusna looma shido in sallad lagu daboolo, laakiinse meel sare ayaa la saaraa si ay
guriga oo dhan u iftiimiso. 16 Sidaas oo kale iftiinkiinnu dadka hortooda ha iftiimo, si ay
camalkiina wanaagsan u arkaan, oy Aabbihiinna jannada ku jira u ammaanaan.

### Waxyigii Hore Iyo Ciise Masiix

17 Ha u malaynina inaan u imid inaan sharciga iyo kutubtii nebiyada baabbi'iyo, uma imanin
inaan baabi'iyo, laakiinse inaan dhammays tiro 18 Runtii waxaan idinku leeyahay: Intay cirka iyo
dhulku dhisanyihiin xaraf ama dhibic keliya ka lumi mayso sharciga ilaa oy wada dhacaan.
19 Sidaa darteed kii jabiya amarrada ugu yar yar ee sharciyadan midkood, oo dadka kalena
bara inay jabiyaan waxaa loogu yeedhi doonaa ka ugu yar boqortooyada jannada, laakiin kii
adeeca oo dadka kalena bara inay adeecaan, waxaa loogu yeedhi doonaa boqortooyada
jannada qof wayn. 20 Waayo, waxaan idinku leeyahay, Xaqnimadiinnu haddayna ka sarraynin
xaqnimada culimada shareecada iyo Farrisiinta boqortooyada jannada galimaysaan.

### Cadhada Iyo Dilka

21 Waxaad maqasheen in kuwii hore lagu yidhi, Waa in aydaan qof dilin, qofkii qof dilana
wuxuu mutaystaa xukunka.[8*] 22 Laakiin waxaan idinku leeyahay, qof kasta oo walaalkii u
cadhooda wuxuu mutaystaa xukunka, oo kii walaalkii aflagaadeeya wuxuu mutaystaa in shirka
la geeyo, oo kii yidhaahda Doqonyahow wuxuu mutaystaa naarta jahannaba. 23 Marka
haddaad alla barigaaga meesha lagu alla baryo keento ood halkaas ku xusuusato in aad
walaalkaa isku dhacsantihiin, 24 Alla barigaaga meesha lagu alla baryo horteeda kaga tag oo

8 Baxniintii 20:13 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:17

horta walaalkaa la soo heshii, deedna alla barigaaga ku alla bari. 25 Deg deg ula heshii qofkii kiis dacwadeed kugu fura intaad waddada wada socotaan yuusan garsooraha kuu dhiibine, garsooruhuna booliska oon xabsi lagugu tuurine. 26 Runtii waxaan kugu leeyahay, halkaas ka soo biximaysid ilaa ood shilinka ugu dembeeya bixisid.

### Sinada

27 Waad maqasheen in kuwii hore lagu yidhi, Waa inaydaan sinaysanin.[9*] 28 Laakiin waxaan idinku leeyahay ninkii naag damac u eegaa qalbiguu ka sinaystay. 29 Marka hadday ishaada midig kugu kalifto in aad dembi ku dhacdo, iska bixi oo iska tuur, waayo, waxaa kuu roon in xubin keliya oo jidhkaaga ahu kaa dhimato intii jidhkaaga oo dhan jahannaba lagu tuuri lahaa.
30 Hadday gacantaada midig kugu kalifto in aad dembi gasho iska jar oo iska tuur, waayo, waxaa kuu wanaagsan inay xubin jidhkaaga ahu kaa dhimato intii jidhkaaga oo dhan jahannaba lagu tuuri lahaa

### Furniinka Dumaka

31 Waxaa la yidhi, Ninkii xaaskiisa fura waa inuu warqaddii dalaaqa siiyo.[10*]32 Laakiin waxaan idinku leeyahay Ninkii xaakiisa fura inay gogol dhaaf samayso mooyee, wuxuu ka dhigayaa saaniyad, oo ninkii garoob la furay guursada wuu sinaystaa.

### Dhaarta Iyo Nidarka

33 Sidoo kale waxaad maqasheen in kuwii hore lagu yidhi, Waa in aadan Nidarka ka bixin, laakiin waa in aad Rabbiga nidarkaaga u oofisaa.[11*] 34 Laakiin waxaan idinku leeyahay Samada ha ku dhaaranina, waayo, waa carshigii Eebbe. 35 Dhulkana ha ku dhaaranina, waayo, waa meeshuu cagihiisa dhigo; Quddusna ha ku dhaaranina, waayo, waa magaaladii Boqorkii waynaa.[12*] 36 Madaxaagana ha ku dhaaranin, waayo, tin keliya kama dhigi kartid caddaan ama madow. 37 Laakiin hadalkiinnu ha ahaado Haah haah ama maya maya wixii intaa ka badan wuxuu ka ahaday ka sharka leh.

### Aargudashada

38 Waxaad maqasheen in la yidhi, Il il ha loo rido, iligna ilig ha loo rido.[13*] 39 Laakiin waxaan idinku leeyahay ka sharka leh hayska celinina, laakiinse qofkii dhabanka midig kaa dhurbaaxa, ka kalena u jeedi. 40 Oo qofkii ku dacweeya oo go’aaga qaata macawistaadana ugu dar. 41 Oo qofkii kugu qasba in aad hal mayl la socoto laba mayl la soco. 42 Oo qofkii wax kaa barya, sii, oo qofkii doona inuu wax kaa amaahdo ha u diidin.

---

9 Baxniintii 20:14 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:18
10 Baxniintii 24:1-4
11 Laawiyiintii 19:12 iyo Tirintii 30:2
12 Boqor Daa’uud
13 Baxniintii 21:24 iyo Laawiyiintii 24:20

## Jacylka Iyo Dabeecadda Wanaagsan

[43] Waxaad maqasheen in la yidhi, Deriskaaga jeclow Cadowgaagana necbow.[14*] [44] Laakiin
waxaan idinku leeyahay, Cadowgiinna jeclaada, oo u duceeya kuwa idin habaara, oo u sama
fala kuwa idin neceb, oo Eebbe u barya kuwa idin caaya oo idin dhiba. [45] Si aad wiilashii
Aabbihiinna jannada ku jira u ahaataan, waayo, qorraxdiisa kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa
ahaynba wuu u soo bixiyaa, roobkana kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahaynba wuu u
da'siiyaa. [46] Waayo, haddaad kuwa idin jecel uun jeclaataan abaalkeed leedihiin? canshuur
qaadayaashuba miyayna sidaas oo kale samaynin? [47] Haddaad walaalihiin oo keliya
salaantaan, maxaad soo kordhiseen? Ajinabiguba miyayna sidaas oo kale yeelin? [48] Sidaas
aawadeed kaamil u ahaada sida Aabbihiinna jannadu kaamilka u yahay.

## Sadaqo Bixinta Qarsoodiga Ah

**6** Iska jira in aad sama falkiina dadka hortooda ku samaysaan si ay idiin arkaan oy idiin
ammanaan, haddii kale ajir iyo abaal toona kaga helimaysaan Aabbihiinna jannada ku jira.
[2] Haddaba markaad sadaqo bixinayso, buun dadka ha ku ogaysiinin sida ay labawejiilayaashu
sunagogyada iyo jidadka ku sameeyaan si ay dadku u ammaanaan. Runtii waxaan idinku
leeyahay, Abaal gudkoodii way heleen. [3] Laakiin adigu markaad sadaqo bixinayso, bidixdaadu
yayna ogaanin waxay midigtaadu bixinayso. [4] si ay sadaqaddaadu u qarsoonaato, oo
Aabbahaaga waxa qarsoon arka ayaa kaa abaal marin doona.

## Salaadda Qarsoon

[5] Oo markaad tukanaysaan, ha ahaanina sida labawejiilayaasha, waayo, waxay jecelyihiin
inay ku tukadaan sunagogyada iyo isgoysyada waddooyinka si ay dadka ugu muujiyaan. Runtii
waxaan idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen. [6] Laakiin adigu markaad tukanayso
qolkaaga gal oo albaabka xidho oo Aabbahaaga qarsoon bari, oo Aabbahaaga waxa qarsoon
arka ayaa kuu abaal gudi doona. [7] Markaad tukanaysaan hadal macna la'aan ah ha ku
celcelinina sida kuwa sanamyada caabuda, waayo, waxay u maleeyaan markay hadalka ku
celcelyaan in salaadooda la aqbalayo. [8] Sidaa darteed ha ahaanina sidooda oo kale, waayo,
Aabbihiin wuu ogyahay waxaad u baahantihiin intaydaan waydiinsanin ka hor. [9] Haddaba sidan
u tukada: Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu qudduus ha ahaado.
[10] Boqortooyadaadu ha timaaddo, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo.
[11] Maanta cunto nagu filan na sii. [12] Oo naga cafi daymahayaga sidaan annaguba u cafino
kuwa noo daymaysan. [13] Oo jirrabaadda ha innooga tegin, laakiin sharka naga ilaali. Waayo,
boqortooya iyo xoogga iyo ammaantaba adigaa leh weligaa. [14] Maxaa yeelay, haddaad dadka
xumaantooda u cafidaan, Aabbihiinna jannada ku jira ayaa idin cafiyi doona. [15] Laakiin
haddaydaan dadka cafiyin, Aabbihiinna xumaantiinna ma cafinayo.

## Soonka

[16] Markaad soomantihiin ha ahaanina sida labawejiilayaasha, waayo diif bay isu yeelaan si ay
dadka ugu muujiyaan inay soomanyihiin. Runtii waxaan idinku leeyahay, Abaal gudkoodii way
heleen. [17] Laakiin adigu markaad soomantahay, madaxa saliid marso oo wajiga dhaqo. [18] Si

aadan dadka ugu muuqanin inaad soomantahay laakiinse aad Aabbahaaga qarsoon ugu
muuqato, oo Aabbahaaga waxa qarsoon arka ayaa kuu abaal gudi doonaa.

### Hodannimada Dhabta Ah

19 Dhulka maal ha ku kaydsanina, meesha ay aboorka iyo miridhku ku baabbi'iyaan, oy tuugtu
intay jabsadaan oy xadaan. 20 Laakiin maalkiina jannada ku kaydsada meesha aboorka iyo
miridhku ayna ku baabbi'inin oyna tuugadu intay jabsadaan xadi karin. 21 Waayo, meesha
maalkaagu jiro ayuu qalbigaagu jiraa.

### Iftiinka Iyo Gudcurka

22 Ilayska jidhku waa isha; marka hadday ishaadu hagaagsantahay, jidhkaaga oo dhanna
wuu iftiimaa. 23 Laakiin hadday ishaadu xuntahay jidhkaaga oo dhanna waa gudcur. Marka
hadduu iftiinkaagu gudcur yahay gudcurkaasu waynaa!

### Eebbe Iyo Maalka

24 Ninna laba sayid uma wada adeegi karo, waayo, midkood ayuu nacaa, ka kalena wuu
jeclaadaa, ama mid buu daacad u noqdaa ka kalena wuu quudhsadaa. marka uma wada
adeegi kartaan Eebbe iyo maal. 25 Sidaa darteed waxaan idinku leeyahay, naftiinna waxaad
cuntaan iyo waxaad cabtaan ha uga welwelina, jidhkiinnana ha uga welwelina waxaad
xidhataan. Naftu miyayna ka qiima badnayn cunto, jidhkiinuna miyuuna ka qiima badnayn
dhar? 26 Bal eega shimbiraha cirka, waayo, waxba ma beertaan waxbana ma goostaan,
bakhaarrana waxba kuma kaydsadaan oo Aabbihiinna jannada ku jira ayaa quudiya. Idinku
miyaydaan shimbiraha ka qiima badnayn? 27 Kiinnee intuu welwelo dheerarkiisa hal dhudhun
ku dari kara? 28 Maxaad dharka uga welweshaan? Eega ubaxa kaymuhu siduu u baxo, ma
shaqeeyaan waxna ma toshaan.[15*] 29 Weliba waxaan idinku leeyahay Xataa Sulaymaan
wakhtigii ammaantiisa muusan xidhanin dhar ka qurux badan kuwan*[p]. 30 Marka hadduu Eebbe
cagaarka maanta duurka ku yaalla barrina engagaya oo dabka lagu tuurayo sidaa u huwiyay
intee in ka badan ayuu idin huwin doonaa rumaysad yarayaalyahow? 31 Sidaa darteed ha
welwelina, idinkoo leh Maxaannu cunaynaa? Maxaannu cabbaynaa? Maxaannu xidhanaynaa?
32 Waayo, kuwa sanamyada caabuda ayaa waxaas oo dhan raadiya. haddaba Aabbihiinna
jannada ku jiraa wuu ogyahay inaad waxaas oo dhan u baahantihiin. 33 Laakiinse marka hore
boqortooyada Eebbe iyo xaqnimadiisa raadiya oo waxaas oo dhanna waa laydinku dari
doonaa. 34 Sidaa darteed barri ha ka welwelina ee barri iyadu ha iska welwesho. Maalin walba
dhibaato inagu filan ayaa jirta.

### Dadka oo Xaqdarro Lagu Eedeeyo

**7** Ninna ha eedaynina si aan la idiin eedayn.[16*] 2 Waayo, sidaad u eedaysaan ayaa la idiin
eedayn doonaa, oo miisaankaad wax ugu miisaantaan ayaa la idiinku miisaami doonaa.
3 Maxaad saxarka isha walaalkaa ku jira u aragtaa, ood dogobka ishaada ku jira u arki
la'dahay? 4 Sideed walaalkaa ugu tidhaahdaa, I daa aan saxarka ishaada ku jira kaa saaree;

15 Boqor Sulaymaan waaguu boqorka ahaa.

16 Ninna xaqdarro ha ku eedaynina.

adiga oo uu dogob ishaada ku jiro? [5] Labawejiilayahow, horta dogobka ishaada ku jira iska
saar, markaasaad si bayaan u arkaysaa si aad saxarka isha walaalkaa ku jira uga saarto.
[6] Waxa qudduuska ah ayda ha siinina, dheemankiinnana doofaarrada hortooda ha ku tuurina,
si ayna ugu tumanin oyna idiinku soo jeedsanin oyna idiinku tumanin.

**Ku Dhiirri Gelinta Tukashada**

[7] Waydiista, waa la idin siine; oo doona waad helaysaane; oo garaaca waa la idinka furiye;
[8] Waayo, qof kasta oo waydiista waa la siiyaa, oo kii doonaa wuu helaa, oo kii garaaca waa
laga furaa. [9] Kiinnee hadduu wiilkiisu cunto waydiisto, dhagax siinaya? [10] Ama hadduu kalluun
waydiisto, abeeso siinaya? [11] Marka idinka oo shar leh haddaad garanaysaan inaad hadiyado
wanaagsan carruurtiinna siisaan, intee ka badan ayuu Aabbihiinna jannada ku jiraa wax
wanaagsan siiyaa kuwa isaga waydiista!

**Hal Ku Dhagga Dahabka Ah**

[12] Haddaba sidaad doonaysaan in la idiinla dhaqmo, idinkuna daka ula dhaqma, maxaa
yeelay taas ayaa ah sharciga iyo kutubtii nebiyada.

**Jidka Cidhiidhiga Ah**

[13] Jidka cidhiidhiga ah ka gala waayo, waddada halaagu way ballaadhantahay kuwa galana
way badanyihiin. [14] Laakiinse albaabku wuu dhuubanyahay waddaduna waa cidhiidhi, kuwa
helana way yaryihiin.

**Kuwa Nebinimada Sheegta**

[15] Iska jira nebiyada beenta ah ee idiin soo huwanaya dharka idaha, laakiinse hoosta yeey
wax boobaysa ka ah. [16] Midhahooda ayaad ku garan doontaan. Geed qodax leh miyaa midho
canab laga gurtaa? Bardena miyaa yamaarug laga guraa? [17] Sidoo kale geed kasta oo
wanaagsanu midho wanaagsan ayuu dhalaa, geedkii xunna midho xun ayuu dhalaa. [18] Geed
wanaagsanu midho xun ma dhali karo, geed xunna midho wanaagsan ma dhali karo. [19] Geed
kasta oo aan midho wanaagsan dhalin waa la jaraa oo dabkaa lagu tuuraa. [20] Sidaa darteed
midhahooda ayaad iyaga ku garan doontaan.

**Hadalka Iyo Ficilka**

[21] Ma aha qof kasta oo Rabbiyow, Rabbiyow igu yidhaahda, ka boqortooyada jannada
galaya, laakiin qofkii doonista Aabbahayga jannada ku jira sameeya. [22] Maalintaas kuwo badan
ayaa igu odhan doona Rabbiyow, Rabbiyow, miyaannaan magacaaga wax ku sii sheegin, oo
miyaannan magacaaga shayddaamo ku saarin, oo miyaannaan magacaaga mucjisooyin ku
samaynin? [23] Markaasaan ku odhan doonaa Weligay idinma aqoonin ee iga taga, xumo
falayaalyahow.

### Labada Aasaas

[24] Marka qofkii ereyadaydan maqla oo ku dhaqma wuxuu la midyahay nin caqli badan oo
gurigiisa dhagax ka dul dhisay. [25] Deedna roobkiibaa da'ay, daadkiina wuu yimid, dabayshiina
way dhacday, oo gurigaas ayay ku dhufteen, laakiin ma ayna duminin, waayo, waxaa laga dul
dhisay dhagaxa. [26] Qofkii ereyadaydan maqla oo aan ku dhaqminna wuxuu la midyahay nin
doqon ah oo gurigiisa bacaad ka dul dhisay. [27] Marka roobkiibaa da'ay, daadkiina wuu yimid,
dabayshiina way dhacday, oo gurigaas ayay ku dhufteen, wuuna dumay, dumis aad u wayn.
[28] Markuu Ciise hadalladan dhammeeyay dad waynihii ayaa wax bariddiisa la yaabay.
[29] Waayo, wuxuu wax u barayay sida mid awood leh oo muusan wax u baraynin sida culimada.

### Baraslihii La Bogsiiyay

**8** Markuu buurta ka soo dagay, dad fara badan baa soo raacay. [2] Oo waxaa u yimid nin baras
leh oo intuu u sujuuday ayuu ku yidhi, Sayidow, haddaad doonayso, waad i daahirin kartaa.
[3] Ciise intuu gacantiisa soo fidiyay, ayuu taabtay, oo ku yidhi, Waan doonayaa ee daahir noqo.
Isla markiiba baraskii ayuu ka bogsaday. [4] Oo Ciise ayaa ku yidhi, Cidna ha u sheegin, laakiin
iska tag oo wadaadka istus, oo bixi allabarigii uu Muuse amray, markhaati iyaga ha u ahaatee.

### Adeegihii Sarkaalka Waa La Bogsiiyay

[5] Markuu Ciise Kafarna'um galay, waxaa u yimid taliye urur isagoo baryaya. [6] Oo leh
Sayidow, adeegahaygii waa sakaraad oo guriguu jiifaa, isaga oo curyaan ah [7] Markaasuu Ciise
ku yidhi, Waan u tagayaa oo waan bogsiin doonaa. [8] Markaasuu sarkaalkii u jawaabay oo ku
yidhi, Sayidow, anigu ma istaahilo inaad saqafka gurigayga hoostiisa soo gasho laakiin eray
keliya dheh, adeegahaygu wuu bogsane. [9] Waayo, aniguba waxaan ahay nin laga sarreeyo oo
askar baa iga hoosaysa. Kan waxaan ku idhaahdaa, Tag, wuuna tagaa mid kalena, Kaalay,
wuuna yimaaddaa adeegahaygana Waxan samee, wuuna sameeyaa. [10] Markuu Ciise taas
maqlay wuu ka yaabay, wuxuuna ku yidhi, kuwii la socday Runtii waxaan idinku leeyahay,
Rumaysad sidan oo kale ah reer binii Israa'iil kama helin. [11] Waxaan idinku leeyahay, kuwo
badan ayaa bari iyo galbeed ka iman doona oo Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub boqortooyada
jannada la fadhiisan doona. [12] Laakiin wiilashii boqortooyada gudcurka dibadda ah ayaa lagu
tuuri doona. Meeshaasna waxaa jiri doonta oohin iyo ilko jirriqsi. [13] Markaasuu Ciise sarkaalkii
ku yidhi, Iska tag oo Sidaad aamintay ha kuu noqoto oo saacaddaas ayuu adeegihii bogsaday.

### Ciise Wuxuu Bogsiiyay Soddohdii Butros Iyo Dad Kale Oo Badan

[14] Ciise markuu guriga Butros galay, wuxuu arkay soddohdii Butros oo jiifta oo qandhaysan.
[15] Markaasuu gacanteeda taabtay, qandhadiina way ka baxday. Wayna kacday oo u adeegtay
isaga. [16] Markii makhribkii la gaadhayna waxay u keeneen dad badan oy shaydaanno ku jiraan.
Eray ayuuna ku saaray rooxaantii, kuwii bukay oo dhanna wuu bogsiiyay. [17] Si uu u
xaqiiqoobo waxyigii Nebi Ishacyaah loo waxyooday isaga oo leh xanuunyadeennii isagaa
qaaday, cudurradeenniina dusha ayuu u ritay.

### Qiimaha Ay Ku Kacayso Xernimada Masiixu

[18] Markuu Ciise dad fara badan oo ku wareegsan arkay, ayuu ku amray inay harada dhineceeda kale u tallaabaan. [19] Deedna mid wadaaddada ka mid ah ayaa u yimid oo ku yidhi, Macallinow, waan ku raacayaa meeshaad tagtaba. [20] Ciise ayaa ku yidhi, Dawacooyinku godad bay leeyihiin, shimbiraha cirkuna buulal bay leeyihiin, laakiin Wiilka Aadanuhu meel uu madaxiisa dhigo ma laha. [21] Mid kale oo xertiisa ah ayaa ku yidhi, Sayidow, horta ii oggolow inaan tago oon aabbahay soo aaso. [22] Laakiin Ciise ayaa ku yidhi, Isoo raac; oo iska daa meydadku meydkooda ha aasteene.

### Ciise Ayaa Duufaankii Dajiyay

[23] Marka doonni ayuu fuulay xertiisuna way raaceen. [24] Oo waxaa baddii ka kacday duufaan wayn, ilaa oy doonnidii hirarku qariyeen, Ciisena wuu hurday. [25] Markaasay xertiisii u timid oo way toosiyeen iyaga oo leh Sayidow, na badbaadi, waannu qaraqmaynaaye. [26] Markaasuu ku yidhi, Maxaad u cabsanaysaan rumaysad yarayaalyahow? Markaasuu intuu kacay duufaantii iyo baddiiba canaantay, oo markiiba way dageen. [27] Deedna nimankii way yaabeen, oo waxay isku yidhaahdeen Waa nin caynkee ah ninkan ay dabaysha iyo badduba yeelayaan?

### Laba Nin Oo Shaydaanno Ku Jiraan Ayuu Ka Saaray

[28] Markuu dhinaca kale u tallaabay xagga dhullka Gadareni, waxaa ka hor yimid laba nin oo shaydaanno ku jiraan oo xabaalaha ka soo baxay, waxayna ahaayeen niman aad khatar u ah oo wadadaas looga caagay. [29] Iyaga oo ku dhawaaqaya Maxaad naga doonaysaa Wiilka Eebbow? Ma waxaad halkan u timid wakhtigii oon la gaadhin inaad na cadaabto? [30] Waxaana meel aan sidaa uga fogayn daaqayay tirooyin doofaarro ah. [31] Shaydaanadii ayaa baryay iyaga oo leh Haddaad na saarayso tirooyinkaas doofaarrada ah noo dir. [32] Deedna wuxuu ku yidhi, Baxa Markaasay baxeen oo doofaarradii ayay galeen, oo tirooyinkii oo dhan ayaa gabiga hoos uga daatay oo biyihii badda ayay ku bakhtiyeen. [33] Markaasay kuwii daajin jiray carareen oo intay magaaladii galeen ayay wixii dhacay oo dhan iyo waliba wixii ku dhacay kuway shaydaanadu ku jireen u sheegeen. [34] Markaasay magaaladii oo dhan soo baxday oo Ciise ayay ka hor tageen. Markay arkeena, waxay ka codsadeen inuu dagmadooda ka noqdo.

### Curyaankii La Bogsiiyay

**9** Marka intuu doonni fuulay ayuu dhanka kale u tallaabay oo magaaladiisii ayuu yimid. [2] Oo bal eeg, waxay u keeneen nin curyaan ah oo sariir ku jiifa. Ciise markuu arkay rumaysadkooda ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, kalsoonow, dembiyadaadii waa la cafiyay. [3] Oo bal eeg, wadaaddada qaarkood ayaa isku yidhi, Ninkan gaalnimo ayuu ku hadlayaa! [4] Ciise oo fikirkooda garanaya ayaa ku yidhi, Maxaad wax shar ah qalbiyadiinna ugaga fikiraysaan? [5] Tee fudud in la yidhaahdo Dembiyadaadii waa la cafiyay iyo in la yidhaahdo Kac oo soco? [6] Laakiin si aad u ogaataan in Wiilka Aadanuhu dhulka ku leeyahay awood uu dembiyada ku cafiyo, markaasuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Kac oo sariirtaada qaado oo gurigaagii tag. [7] Deedna wuu kacay oo gurigiisii ayuu tagay. [8] Dadkii faraha badnaa markay arkeen, way yaabeen oo Eebbaha awooddan oo kale dadka siiyay ayay ammaaneen.

## U Yeedhiddii Matayos

[9] Ciise markuu meeshaas ka tegay wuxuu arkay Nin la yidhaado Matayos oo xafiiska
canshuuraha fadhiya oo wuxuu ku yidhi, Isoo raac. Markaasuu kacay oo wuu raacay. [10] Waxaa
dhacday markuu Ciise guriga cunto u fadhiistay, inay canshuur qaadayaal iyo dembiilayaal
badan u yimaaddeen oy Ciise iyo xertiisa la fadhiisteen. [11] Deedna Farrisiintii markay arkeen
xertiisa ayay ku yidhaahdeen Macallinkiinnu muxuu canshuur qaadayaasha iyo
dembiilayaasha wax ula cunaa? [12] Markuu maqlay, wuxuu yidhi,
Kuwa caafimaadka qaba dhakhtar uma baahna, balse kuwa buka. [13] Orda oo aayaddan
macneheeda barta Alla bari ma doonayee naxariis ayaan doonayaa,[17*] waayo uma imanin
inaan kuwa xaqa ah u yeedho, laakiinse dembilayaasha.

## Su'aal Soonka Ku Saabsan

[14] Deedna waxaa u yimid xertii Nebi Yaxye iyaga oo leh Annaga iyo Farrisiintu maxaannu in
badan u soonnaa, laakiinse xertaadu u soomi waayaan? [15] Markaasuu Ciise ku yidhi, Dadka
arooska lagu casuumo miyaa laga filaysaa inay murugoodaan iyada oo caruusku la joogo?
Laakiin waxaa iman doonta maalmo caruuska laga qaadi doono, markaasay soomi doonaan.[18*]
[16] Ninna karin cusub maro duug ah kuma tolo, waayo karintii marada lagu tolay ayaa soo
uruurta oo go'da, oo maradii way sii foolxumaataa. [17] Khamri cusubna qarbed duug ah laguma
shubo, haddii kale qarbedkii ayaa qarxa khamridiina way daadataa, laakiin khamrida cusub
waxaa lagu shubaa qarbed cusub, marka labaduba way raagaan.

## Gabadhii Dhimatay Iyo Naagtii Dhiigbaxa Qabtay

[18] Isaga oo hadalkii wada waxaa u yimid taliye oo intuu u sujuuday ayuu ku yidhi,
Gabadhaydii hadda ayay dhimatay laakiin kaalay oo gacantaada saar way soo noolaane.
[19] Markaasuu Ciise kacay oo raacay, isaga iyo xertiisuba. [20] Deedna naag laba iyo toban
sannadood dhiigbax qabtay ayaa intay dhabarka ka martay maradiisa darafteeda taabatay.
[21] Waayo, waxay is tidhi Haddaan maradiisa taabto waan bogsan. [22] Markaasuu Ciise ku soo
jeedsaday oo arkay, wuxuuna ku yidhi, Gabadhay, kalsoonow rumaysadkaaga ayaa ku
bogsiiyay. Oo naagtii isla markiiba way bogsatay. [23] Ciise markuu gurigii taliyaha galay oo
arkay kuwa buunka afuufa iyo dad buuqaya. [24] Wuxuu ku yidhi, Ka taga meesha yartu ma
dhimanine way huruddaaye. markaasay ku qosleen. [25] Laakiin markii dadkii faraha badnaa la
saaray, ayuu galay oo gacanteeda qabtay, yartiina way kacday. [26] Deedna warkaas ayaa
gobolkaas oo dhan gaadhay.

## Laba Nin Oo Indha La' Ayaa La Bogsiiyay

[27] Ciise markuu meeshaas ka tagayay, waxaa daba galay laba nin oo Indhala', iyaga oo kor u
dhawaaqaya oo leh: Ina Daa'uudow, noo naxariiso. [28] Markuu guriga galay ayay nimankii
indhaha la'aa u yimaaddeen. Markaasuu ku yidhi, Ma rumaysan tihiin inaan tan samayn karo?
Waxay ku yidhaahdeen Haah Sayidow. [29] Markaasuu indhahooda taabtay isaga oo leh Sida
rumaysadkiinnu yahay ha idiin noqoto. [30] Markaasay indhahoodii furmeen. oo Ciise ayaa uga

17 Kitaabka Nebi Hoosheeca 6:6

18 Caruusku waa isaga oo marka isaga samada loo qaado ayay xertiisu soomi doonaan.

digay in ayna dadka u sheegin. [31] Laakiin intay baxeen ayay warkiisa dhulkaas oo dhan ku
fidiyeen.

### Nin Carrab La' Oo Shaydaan Ku Jiro

[32] Markay baxeen, bal eeg, waxaa loo keenay nin Carrab la' oo shaydaan ku jiro. [33] Oo
markuu ninkii carrabka la'aa jinkii ka saaray wuu hadlay, dadkii badnaana way yaabeen oo
waxay yidhaahdeen Tan oo kale weligeed Israa'iil laguma arag. [34] Laakiin Farrisiintii waxay
yidhaahdeen Shaydaanada taliyahooda ayuu ku saaraa. [35] Ciise wuxuu ku wareegay
magaalooyinka iyo tuulooyinka oo dhan, oo sunagogyada ayuu wax ku baray, oo Injiilka
boqortooyada ku wacdiyay, oo xanuun walba iyo cudur walba wuu bogsiinayay:

### Ciise Masiix Dadka Ayuu U Naxariistay

[36] Laakiin markuu dadkii faraha badnaa arkay ayuu u naxariistay, waayo, way
dhibaataysnaayeen oo kala firidhsanaayeen sidii ido aan adhijir lahayn. [37] Markaasuu xertiisa
ku yidhi, Wax soo saarku aad buu u badanyahay laakiinse shaqaaluhu way yaryihiin. [38] Sidaa
darteed Sayidka beergoyska barya si uu shaqaale beertiisa ugu soo diro.

### Ciise Laba Iyo Tobankii Xerta Ahaa Ayuu Doortay

**10** Markaasuu isugu yeedhay laba iyo tobankii xertiisa ahaa oo wuxuu siiyay awood ay
shaydaanada wasakhda leh ku saaraan oy xanuun walba iyo cudur walba ku bogsiiyaan.
[2] Laba iyo tobankii Rasuul magacyadooduna waa kuwan, Ka ugu horreeya waa Simoon, oo
Butros la odhan jiray, iyo walaalkii Andaros, iyo Yacquub Ina Sebedi, iyo walaalkii Yooxanaa.
[3] Iyo Filibos, iyo Bartolomayos, iyo Toomas, iyo Matayos canshuurqaade iyo Yacquub Ina
Alfayos, iyo Tadayos. [4] Iyo Simoonkii reer Qaana, iyo Yuudas Iskariyodkii khayaanay.

### Shaqadii Rasuullada

[5] Ciise ayaa laba iyo tobankii xerta ahaa diray oo wuxuu ku yidhi, Ha u tagina kuwa aan
Yuhuudda ahayn, magaalooyinka reer Samaariyana ha galina. [6] Laakiinse waxaad u kacdaan
idaha reer banii Israa'iil ee lumay. [7] Oo wacdiya oo waxaad ku dhahdaan Boqortooyadii
jannadu way dhawdahay. [8] Kuwa buka bogsiiya, kuwa dhintayna sarakiciya, kuwa baraska
lehna daahiriya, shaydaanadana saara, bilaash baad ku hesheene bilaash ku bixiya. [9] Dahab
ama lacag ama nuxaasna jeebabkiina ha ku qaadanin. [10] Sahayna ha qaadanina, laba shaadh,
ama kabo, ama ulna ha qaadanina, waayo, xoogsaduhu cuntadiisa xaq buu u leeyahay.
[11] Magaalo alla magaaladaad gashaan iyo tuulo walba, ka raadiya qof istaahila in uu idin marti
galiyo, oo halkaas jooga ilaa ood ka tegaysaan. [12] Oo markaad guriga galaysaan, salaama.
[13] Oo hadduu gurigu salaantiinna istaahilo ha ku soo degto, laakiinse hadduuna istaahilin,
salaantiinnu ha idiin soo noqoto. [14] Oo ku alla kii aan idin soo dhawaynin, oo aan hadalkiin
maqlin, markaad gurigaas ama magaaladaas ka baxaysaan, siigada cagihiinna ka jafa.
[15] Runtii waxaan idinku leeyahay, Maalinta xisaabta, Sodom iyo Gomora ayaa ka xisaab
fududaan doona magaaladaas.

### Halista Iyo Dhibaatada

[16] Bal eega Sidii Ido Yay ku dhex jira oo kale ayaan idiin dirayaa, marka u xeelad badnaada
sida abeesada, oo u shar la'aada sida qoollayda. [17] Laakiin dadka iska jira, waayo, waxay idiin
dhiibi doonaan maxakamadaha oo sunagogyada ayay idinku dhex garaaci doonaan. [18] Oo
aawaday ayaa taliyayaal iyo boqorro la'idiin hor gayn doonaa si aad ugu marag furtaan iyaga
iyo dadka aan Yuhuudda ahaynba. [19] Laakiin markay idin gacan geliyaan, ha ka welwelina
waxaad ku hadli doontaan ama sidaad u hadli doontaan, waayo, waxaad ku hadli doontaan
ayaa saacaddaas la idin siin doonaa. [20] Maxaa yeelay idinku ma hadli doontaan, laakiinse
Ruuxa Aabbihiin ayaa idinka dhex hadli doona. [21] Walaalba walaalbuu shirqooli doonaa si loo
dilo, aabbuhuna wiilkiisa, carruurtuna waalidkood ayay ku kici doonaan oo layn doonaan.
[22] Dadka oo dhan ayaa magacayga aawadii idiin necbaan doona, laakiin qofkii ilaa ugu
dambaysta adkaysta ayaa badbaadi doona. [23] Markay magaalo idinku dhibaan magaalo kale u
carara. Runtii waxaan idinku leeyahay, Magaalooyinka reer banii Israa'iil ma wada gaadhi
doontaan ilaa uu Wiilka Aadanuhu yimaado. [24] Arday macallinkiisa kama sarreeyo,
addoonkuna sayidkiisa kama sarreeyo. [25] Ardayga waxaa ku filan inuu macallinkiisa oo kale
noqdo, addoonkuna sayidkiisa oo kale. Hadday odayga reerka Be'elsebul ugu yeedhaan intee
ka badan ayay kuwa gurigiisa jooga ugu yeedhi doonaan?

### Ha Cabsanina

[26] Sidaa darteed ha cabsanina waayo, wax qarsoon ma jiro oo aan la ogaanaynin, wax sir
ahna ma jiro oo aan la muujin doonin. [27] Waxaan gudcurka idiinku sheego, iftiinka ku dhaha, oo
waxaad dhegta ka maqashaanna, guryaha dushooda kaga dhawaaqa. [28] Ha ka cabsanina
kuwa jidhka dila, laakiin aan karin inay nafta dilaan, laakiinse waxaad ka cabsataan ka
awoodda u leh inuu nafta iyo jidhkaba jahannamo ku halaago. [29] Laba shimbirood miyaan
sumuni lagu iibinin? Midkoodna dhulka ku dhici maayo amarka Aabbihiin la'aantii. [30] Laakiinse
timaha madaxiinna oo dhan way tirsanyihiin. [31] Sidaa darteed ha cabsanina, waad ka qiima
badantihiin shimbiro badan. [32] Qofkii dadka hortooda igu qirta aniguna Aabbahayga jannada ku
jira hortiisa ayaan ku qiri doonaa. [33] Laakiinse ku alla kii dadka hortooda igu dafira aniguna
Aabbahayga jannada ku jira hortiisa ayaan ku dafiri doonaa.

### Doorashada Dhibka Badan Iyo Abaalgudkeeda

[34] Ha u malaynina inaan u imid inaan nabad dhulka u keeno; uma iman inaan nabad keeno,
laakiinse inaan seef keeno. [35] Waxaanse u imid inaan cadaawad dhex dhigo wiil iyo aabbihii iyo
gabadh iyo hooyadeed iyo gabadha la qabo iyo soddohdeed.
[36] Cadawga ugu xun ee qofkuna wuxuu noqon doonaa qoyskiisa iyo qaraabadisa. [37] Qofkii
aabbihii iyo hooyadii iga jeclaadaa ima istaahilo, oo kii wiilkiisa iyo gabadhdiisa iga jeclaadaa
ima istaahilo. [38] Qofkii aan iskutallaabtiisa soo qaadanin oon i soo raacinna, ima istaahilo.
[39] Qofkii naftiisa ilaaliya wuu waayi doonaa, laakiinse kii naftiisa aawaday u hura wuu heli
doonaa. [40] Qofkii idin aqbalaa wuu i aqbalaa, oo kii i aqbalana wuxuu aqbalaa kii i soo diray.
[41] Qofkii nebi ku aqbala nebinimada nebi ajirkii ayuu heli doonaa, kii qof xaq ah xaqnimada ku
aqbalana qof xaq ah abaalkii ayuu heli doonaa. [42] Ku alla kii kuwan yaryar koob biyo qabow ah
siiya maadaama oo ay xertayda yihiin runtii waxaan idinku leeyahay, abaalkiisu kama lumayo.

## Nimankii Uu Nebi Yaxye Soo Diray

**11** Markuu Ciise amarradiisa u dhammeeyay laba iyo tobankii xertiisa ahaa, waxaa dhacday
inuu meeshaas ka noqday si uu magaalooyinkooda wax u baro oo u wacdiyo. 2 Markuu Nebi
Yaxye xabsiga ku maqlay wax qabadka Masiixa, ayuu laba xertiisa ah u soo diray. 3 Oo ku
yidhi, waydiiya Ma ka imanayaad tahay mise mid kale ayaannu sugnaa? 4 Markaasuu Ciise u
jawaabay oo ku yidhi, Taga oo Nebi Yaxye u sheega waxaad aragteen iyo waxaad
maqasheen. 5 Kuwii indhaha la’aa wax bay arkeen, kuwii lugaha la’aana way socdeen, kuwii
baraska qabayna waa la daahiriyay, kuwii dhegaha la’aana wax bay maqleen, kuwii dhintayna
waa la sarakiciyay, masaakiintiina Injiilkaa lagu wacdiyay. 6 Waxaa barakaysan qofkii aan iga
xumaanin. 7 Deedna markay tageen, Ciise wuxuu billaabay inuu dadkii faraha badnaa Nebi
Yaxye wax uga sheego oo wuxuu yidhi, Maxaad cidlada ugu baxdeen? Ma waxay ahayd inaad
laan cidla ka baxday oy dabashu ruxayso soo aragtaan? 8 Laakiin waxaad u baxdeen Ma
waxay ahayd inaad soo aragtaan nin dhar qaali ah qaba? Kuwa dharka qaaliga ah qaba waxay
joogaan guryaha boqorrada. 9 Laakiin maxaad u baxdeen? Ma waxay ahayd inaad nebi soo
aragtaan? Haah, waxaan idinku leeyahay, mid nebi ka sarreeya. 10 Kanu waa kii laga qoray Bal
eeg, waxaan hortaada soo dirayaa wargeeyahayga, Ka hortaada jidkaaga kuu sii diyaarin
doona.[19*] 11 Runtii waxaan idinku leeyahay, Intay naaguhu dhaleen, mid Nebi Yaxye ka wayn
kama dhex kicin, laakiinse ka boqortooyada jannada ugu yar ayaa ka wayn. 12 Tan iyo wakhtigii
Nebi Yaxye boqortooyada jannada xoog ayaa lagala hor tagay, oo kuwii xoogga lahaa ayaa
xoog ku qaatay. 13 Maxaa yeelay, waxyigii nebiyada iyo sharciguba waxay wax ka sii sheegeen
ilaa iyo Nebi Yaxye. 14 Oo haddaad doonaysaan inaad tan aqbashaan Kanu waa Ilyaaskii iman
lahaa. 15 Qofkii dhego wax lagu maqlo leh ha maqlo. 16 Qarnigan maxaan u ekaysiiyaa? Wuxuu
u egyahay carruur suuqa fadhida oo kuwa kale u yeedhaysa. 17 Iyaga oo leh Turunbo ayaannu
idiin afuufnay oo waad qoobka cayaari waydeen, waannu oynay oo waad ooyi waydeen.
18 Waayo, Nebi Yaxye ayaa yimid isaga oon waxba cunaynin oon waxba cabbaynin oo waxay
yidhaadeen Jin baa ku jira. 19 Oo wiilka Aadanaha ayaa yimid isaga oo wax cunaya oo
cabbaya, oo waxay yidhaahdeen Eega waa cirwayne sakhraan ah oo canshuur qaadayaasha
iyo dembiileyaasha saaxiib la ah.! Xigmadda waxaa lagu ogaadaa wax qabadkeeda.

## Magaalooyinka Aan Toobadkeenin Way Halaagsameen

20 Deedna wuxuu billaabay inuu canaanto magaalooyinkii uu mucjisooyinka xoogga leh ku
dhex sameeyay, waayo, mayna toobadkeenin. 21 Halaag baa kugu dhacay, Khorasinay;
halaagbaa kugu dhacay Beytsayday; waayo, mucjisoonkii xoogga lahaa ee la idinku dhex
sameeyay, haddii Turos iyo Siidoon lagu samayn lahaa mar hore ayay toobadkeeni lahaayeen
iyagoo dhar jeexjeexan qaba oo dambas madaxa ku leh. 22 Laakiin waxaan idinku leeyahay,
maalinta qiyaamada Turos iyo Siidoon way idinka xisaab fududaan doonaan. 23 Adiguna
Kafarna’umtan cirka loo dhisaye, Dhulka ayaad ku hooban doontaa waayo, haddii
mucjisooyinkii xoogga lahaa ee lagugu dhex sameeyay, Sodom lagu dhex samayn lahaa, ilaa
maanta way jiri lahayd. 24 Laakiin waxaan kugu leeyahay, Maalinta qiyaamada Sodom ayaa
kaa xisaab fududaan doonta.

19 Kitaab Nebi Malaakii 3:1

## Ii Imaada Oo Waan Idin Nasin Doonaa

[25] Wakhtigaas Ciise ayaa hadalkan yidhi, Aabbow, Rabbiga samada iyo dhulkow, waan kugu
mahadnaqayaa, waayo, waxyaalahan ayaad kuwa caqliga iyo garashada leh ka qarisay, oo
waxaad u muujisay carruurta yaryar. [26] Haah, Aabbow, waayo, taas ayaa kaa farxisay.
[27] Aabbahay wax walbaba wuu i siiyay; Oo ninna Wiilka ma garanayo Aabbaha mooyee, ninna
Aabbaha ma garanayo Wiilka mooyee iyo qofkuu Wiilku doonayo inuu u muujiyo. [28] Ii kaalaya
kulligiin kuwiinna daallan ee culayska sidow oo waan idin nasin doonaa. [29] Harqoodkayga
dushiinna ku qaata oo wax iga barta; waayo, waan qaboobahay, qalbigayguna wuu
hooseeyaa, oo naftiinnaad nasasho u heli doontaan. [30] Waayo, harqoodkaygu wuu dhib
yaryahay, oo rarkayguna wuu fududyahay.

## Sharciga Maalinta Sabtida Ah In La Dhawro

**12** Wakhtigaas Ciise ayaa maalin Sabti ah beeraha dhex maray, xertiisuna way
gaajaysnaayeen oo waxay billaabeen inay sabuulladii jartaan oy cunaan. [2] Laakiin Farrisiintii
markay arkeen, waxay isaga ku yidhaahdeen Bal eeg, xertaadu waxay samaynayaan wax aan
xalaal ahayn in Sabtida la sameeyo. [3] Laakiin wuxuu ku yidhi, Miyaydaan akhriyin Daa'uud
wuxuu sameeyay markuu gaajooday, isaga iyo kuwii la socdayba. [4] Siduu intuu gurigii Eebbe
galay kimistii ducada oon xalaal u ahayn isaga iyo kuwii la socday toona wadaaddada mooyee
wax uga cunay? [5] Ama miyaydaan shareecada ka akhriyin inay wadaaddada macbudka ku jira
xurmada Sabtida jebiyaan iyaga oon dembaabaynin? [6] Waxaanse idinku leeyahay, mid
macbudka ka wayn ayaa halkan jooga. [7] Haddaad macnaha aayaddan garan lahaydeen Alla
bari ma doonayee naxariis baan doonayaa[20*] kuwa aan dembi lahayn maydaan eedayseen.
[8] Waayo, Wiilka Aadanuhu waa sayidkii Sabtida.

## Ninkii Gacanta Qallalaa Waa La Bogsiiyay

[9] Markaasuu halkaas ka tegay oo wuxuu galay sunagoga. [10] Waxaana joogay nin gacan
qallalan. markaasay waydiiyeen oy ku yidhaahdeen Ma xalaal baa in Sabtida wax la bogsiiyo?
Iyaga oo doonaya inay ku jirrabaan. [11] Markaasuu ku yidhi, Kiinnee lax leh oo hadday Sabtida
god ku dhacdo, aan ka soo bixiyeen? [12] Marka nin intuu lax ka qiima badan yahay! Sidaa
darteed waa xalaal in Sabtida wanaag la sameeyo. [13] Markaasuu ninkii ku yidhi, Gacantaada
soo fidi. Wuuna soo fidiyay, oo way bogsatay sida tii kale. [14] Laakiinse Farrisiintii intay baxeen,
ayay shirqooleen siday u dili lahaayeen.

## Adeegihii La Doortay

[15] Ciise markuu ogaaday ayuu halkaas ka tegay, oo waxaa raacay dad badan,
dhammaantoodna wuu wada bogsiiyay. [16] Wuxuuna amar ku siiyay inayna cidna u sheegin.
[17] Si uu u xaqiiqooobo waxyigii Nebi Ishacyaah isaga oo leh: [18] Bal eeg, adeegaha aan doortay,
Ka aan jeclahay oy naftaydu ku faraxsantahay. Ruuxayga ayaan dul saari doonaa, oo
caddaalad ayuu Ummadaha u sheegi doonaa. [19] Ma murmi doono, korna uma dhawaaqi
doono, ninna codkiisa jidadka kama maqli doono. [20] Laan jilicsanna ma jebin doono, Dubaalad

20 Hoosheeca 6:6

qiiqaysana ma demin doono, Ilaa oy caddaaladu guulaysato. 21 Ummaduhuna magiciisay
rajayn doonaan[21*]

## Ciise Iyo Be'elesebul

22 Marka waxaa loo keenay nin shaydaan ku jiro oo indha la' oo carrab la', wuuna bogsiiyay,
sidaa darteed ninkii carrabka la'aa wuu hadlay oo wax buu arkay. 23 Marka dadkii way yaabeen
oo waxay dhaheen, Kanu miyuuna Ina Daa'uud ahayn? 24 Laakiin Farrisiintu markay maqleen,
waxay yidhaahdeen, Kanu wax kale shaydaanada kuma saaro Be'elsebul oo taliyaha jinka ah
mooyee. 25 Markaasuu isaga oo fikirkooda garanaya ku yidhi, Boqortooyo walba oo kala
qaybsanta way burburtaa oo dhammaataa, oo magaalo walba iyo guri walba oo kala
qaybsama, ma jiri doonaan. 26 Hadduu Shaydaan Shaydaan saaro, way kala qaybsamaan,
marka siday boqortooyadiisu u jiri doontaa? 27 Anigu haddaan Be'elsebul jinka ku saaro
wiilashiinnu yay ku saaraan? Sidaa darteed iyagu way idin xukumi doonaah. 28 Laakiin
haddaan Ruuxa Eebbe shaydaanada ku saaro boqortooyada Eebbe ayaa idiin timid. 29 Siduu
qof mid xoog badan gurigiisa u geli karaa oo alaabtiisa u dhici karaa, hadduusan marka hore
ka xoogga leh xidh xidhin? Markaasuu gurigiisa dhici karaa. 30 Kii aan ila jirin wuu iga jiraa, oo
kii aan ila uruurinin wuu firdhiyaa. 31 Sidaa darteed waxaan idinku leeyahay, Dembi walba iyo
diin cay walba dadka waa laga cafiyi doonaa, laakiinse qofkii Ruuxa Qudduuska ah
aflagaadeeya lama cafiyi doono. 32 Qof kasta oo Wiilka Aadanaha af lagaaddeeya waa la cafiyi
doonaa, laakiin qofkii Ruuxa Qudduuska ah caaya adduun iyo aakhiraba lama cafiyi doono.
33 Geedka ama hagaajiya midho fiican buu dhaliye, ama xumeeya midho xun buu dhaliye,
maxaa yeelay geedka midhihiisaa lagu gartaa.[22*] 34 Dhashii abeesaday, sideed wax
wanaagsan ugu hadli kartaan idinka oo shar miidhan ah? Waayo, waxa uurka ku jira ayuu afku
ku hadlaa. 35 Qofka wanaagsan wanaaga qalbigiisa ku kaydsan ayuu wax wanaagsan ka soo
saara, qofka sharka lehna sharka qalbigiisa ku kaydsan ayuu wax shar leh ka soo saaraa.
36 Waxaan idinku leeyahay, Eray kasta oo xun oo dadku ku hadlo, maalinta qiyaamada waa la
waydiin doonaa. 37 Waayo, hadalladaada ayaa caddayn doonaa inaad xaq tahay, oo
hadalladaada ayaa lagugu xukumi doonaa.

## Ciise Markii La Waydiistay Inuu Mucjisooyin Sameeyo Wuu Diiday

38 Markaasay culimada iyo Farrisiinta qaarkood ka codsadeen oy ku yidhaahdeen Macallinow'
inaannu mucjiso kaa aragno ayaannu doonaynaa. 39 Laakiin wuxuu ugu jawaabay Qarni shar
leh oo faasiq ah ayaa mucjiso doonaya! mucjisana lama siin doono mucjisadii Nebi Yoonis
mooyee. 40 Waayo, siduu Yoonis saddex maalmood iyo saddex habeen Nimiriga calooshiisa
ugu jiray oo kale ayuu Wiilka Aadanuhuna saddex maalmood iyo saddex habeen caloosha
dhulka ugu jiri doonaa. 41 Dadka reer Naynawa[23*] ayaa istaagi doona oo maalinta qiyaamada
dadka qarnigan xukumi doona, waayo waxay ku toobadkeeneen wacdigii Yoonis, Laakiinse
mid Yoonis ka wayn ayaa halkan jooga. 42 Boqorraddii koonfureed ayaa qiyaamada u istaagi

21 Kitaabka Nebi Ishacyaah 42:1-4

22 Wixii uurka ku jiruu afku xada waa maahmaah Soomaaliyeed oo aayaddaas waafqasan

23 Waa magaalo gobolka Salaaxudiin ee dalka maanta Ciraaq loo yaqaanno ku taalla oy waagaas boqortooyo weyn ka dhisnayd. Eeg, kitaabka Nebi Yoonis

doontaa dadka qarnigan, oo xukumi doonta, waayo, meesha dhulka ugu fog ayay ka timid si ay
xigmadda Sulaymaan u maqasho, Laakiinse mid Sulaymaan ka wayn ayaa halkan jooga.[24*]

### Shaydaanku Meeshuu Ka Baxay Ayuu Ku Noqdaa

43 Shaydaanka wasakhda leh markuu qofka ka boxo, meelo aan biyo lahayn ayuu maraa isaga
oo nasasho doonaya, mana helo. 44 Markaasuu yidhaahdaa Waxaan ku noqonayaa gurigaygii
aan ka baxay oo markuu yimaado wuxuu helaa gurigii oo xaaqan oo nadiif ah. 45 Markaasuu
tagaa oo wuxuu kaxaystaa toddoba jin oo kale oo isaga ka xun, wayna galaan oo halkaasay
joogaan. Marka qofkaas cidhibtiisa dambe ayaa ka darriata wakhtigii hore. Sidaas oo kale ayaa
ku dhici doonta dadka qarnigan ee sharka leh.

### Walaalnimada Dhabta Ah

46 Isaga oo wali dadkii la hadlaya, bal eeg, hooyadii iyo walaaladii ayaa yimid oo dibadday
istaageen, iyaga oo doonaya inay isaga la hadlaan. 47 Deedna mid ayaa ku yidhi, Bal eeg,
hooyadaa iyo walaaladaa ayaa dibadda taagan oo doonaya inay kula hadlaan. 48 Laakiin
wuxuu ugu jawaabay oo kii u sheegay ku yidhi, Waa ayo hooyaday iyo walaaladay? 49 Deedna
Intuu xertiisa gacantiisa ku fiiqay ayuu yidhi, Bal eeg, kuwan ayaa hooyaday iyo walaaladay ah.
50 Waayo qof kasta oo doonista Aabbahayga jannada ku jira yeela ayaa walaalkay iyo
walaashay iyo hooyadayba ah.

### Tusaale Ku Saabsan Beer Qotaha

**13** Maalintaas Ciise ayaa guriga ka baxay oo wuxuu fadhiistay badda xeebteeda. 2 Oo waxaa
ku soo uruuray dad wayne fara badan, sidaa darteed intuu doonni fuulay ayuu fadhiistay,
dadkii faraha badnaana xeebtay taagnaayeen. 3 Markaasuu wax badan tusaaleyaal ugu
sheegay isaga oo leh Beer qote ayaa baxay si uu abuurka u beero. 4 Oo abuurkii uu beerta ku
firdhinayay qaar baa jidka geestiisa ku dhacay. markaasay shimbiro yimaaddeen oy cuneen.
5 Qaar kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax leh oo aan carro badan lahayn; islamarkiiba way
soo baxeen, waayo, carradu hoos uma dheerayn. 6 Laakiin markay qorraxdu soo baxday way
gubteen, wayna engegeen, waayo, xidid ma lahayn. 7 Qaar kalena waxay ku dhaceen qodax
dhexdeed, qodaxdiina way soo baxday oo way cunaqabataysay. 8 Qaar kalena dhul
wanaagsan bay ku dhaceen oo way midho dhaleen, mid boqol, midna lixdan, midna soddon.
9 Qofkii dhego uu wax ku maqlo leh ha maqlo.

### Ujeeddada Tusaalaha

10 Markaasay xertii u timid oo waxay ku yidhaahdeen Maxaad dadka tusaalaha ugula
hadashaa? 11 Wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Idinka waxaa la idin siiyay garashada asraarta
boqortooyada jannada kuwanse lama siinin. 12 Waayo, qof kasta oo wax haysta waa loo
siyaadin doonaa, waana loo badin doonaa, kii aan waxba haysanna waxa uu haysto ayaa laga
qaadi doonaa. 13 Sidaa darteed ayaan Tusaale ugula hadlaa, waayo iyaga oo wax arkaya
hadana ma arkaan, oo iyaga oo wax maqlaya hadana waxba ma maqlaan mana gartaan.

24 Waa boqorraddii Itoobiyadii hore ee Kantaaka

[14] Waxaa iyaga ku dhabowbay Waxyigii Ishacyaah ee yidhi, Inkastoo aad maqashaan hadana
ma fahmi doontaan, mana garan doontaan, inkastoo aad wax aragtaana hadana ma fahmi
doontaan. [15] Waayo, dadkan qalbigoodu wuu qallafay wayna dhaga cuslaadeen, Indhahana
way isku qabteen; Si ayna indhaha wax ugu arag, oyna dhegaha wax ugu maqal, oyna qalbiga
wax ugu garan oyna u toobadkeenin oonan u bogsiinin.[25*] [16] Laakiin waxaa barakaysan
indhihiinna waayo waxbay arkaan iyo dhagihiinna waayo waxbay maqlaan. [17] Runtii waxaan
idinku leeyahay, nebiyo badan iyo awliyo badan ayaa doonay inay arkaan waxaad aragtaan
mana ayna arag iyo inay maqlaan waxaad maqashaan mana ayna maqalin.

## Tusaalaha Beer Qotaha

[18] Haddaba maqla tusaalihii beer qotaha. [19] Qof kasta oo erayga[26*] boqortooyada maqla oo
aan garanin, waxaa u yimaadda ka sharka leh oo ka dhufta wixii qalbigiisa lagu beeray. Waana
abuurkii jidka geestiisa ku dhacay. [20] Abuurkii meesha dhagaxa leh ku dhacayna waa qofka
erayga maqla oo isla markiiba farxad ku aqbala. [21] Laakiin maadaama oo uusan xidid lahayn in
yar ayuu sii jiraa, oo markuu dhib iyo ciqaab la kulmo erayga aawadiis, markiiba wuu ridoobaa
oo ka noqdaa. [22] Abuurkii qodaxda lagu dhex beerayna waa qofka erayga maqla oo ka
welwelidda dunidan iyo isku hallaynta hantida ayaa erayga cunaqabateeya oo wuxuu noqdaa
qof aan midho lahayn. [23] Abuurkii dhulka wanaagsan ku dhacayna waa qofka erayga maqla oo
garta, oo isagu waa kan midho dhala, mid boqol, midna lixdan, midna soddon.

## Tusaale Ku Saabsan Gocondhada

[24] Tusaale kale ayuu u sheegay, oo wuxuu yidhi, Boqortooyada jannadu waxay u egtahay nin
beertiisa abuur wanaagsan ku abuuray. [25] Laakiin cadowgiisa ayaa u yimid oo intay dadku
hurdeen intuu sarreenka gocondho kaga dhex abuuray, ka tegay. [26] Deedna markuu sarreenkii
soo baxay oo uu midho dhaliyay, gocondhadiina way la soo baxday. [27] Marka ninkii Beetra
lahaa shaqaalihiisii ayaa u yimid oo ku yidhi, Sayidow, miyaadan beertaada abuur wanaagsan
ku abuurin? Xaggeebay gocondhadu uga timid? [28] Wuxuu ku yidhi, Nin cadow ah ayaa waxan
sameeyay. Shaqaalihii waxay ku yidhaahdeen Hadaba ma doonaysaa inaannu tagno oo ka
soo haramayno? [29] Wuxuu ku yidhi, Maya, waaba intaasood markaad gocondhada rujinaysaan
aad sarreenka la rujisaane. [30] Labadooduba ha isla baxeen ilaa iyo beero goosadka, oo
wakhtiga beero gooyska waxaan kuwa gooya ku odhan doonaa: Horta gocondhada uruuriya
oo xidhmo xidhmo isugu xidha si loo gubo, laakiin sarreenka bakhaarkayga ku soo uruuriya.

## Tusaale Ku Saabsan Iniinta Khardalka Iyo Khamiirka

[31] Tusaale kale ayuu u sheegay oo wuxuu yidhi, Boqortooyada jannadu waxay u egtahay Iniin
kherdal oo nin intuu qaaday beertiisa ku abuuray. [32] Inkastoy Iniinyaha oo dhan ugu yartahay
haddana markay korto way ka waynaataa midhaha oo dhan, oo waxay noqotaa geed ay
shimbiraha cirku intay yimaaddaan laamihiisa ku degaan. [33] Tusaale kale ayuu kula hadlay
Boqortooyada jannadu waxay u egtahay khamiir oo intay naagu qaadday ay saddex kiilo oo
bur ah ku dhex cajiintay oo cajiinkii oo dhan wada khamiiriyay. [34] Waxan oo dhan ayuu Ciise

25 Kittaabka Nebi Ishacyaah 6:9-10
26 Injiilka

dad fara badan tusaale ugu sheegay, isaga oon tusaale adeegsanina waxba uma sheegin. 35 Si
uu u xaqiiqoobo waxyigii Nebiga loo waxyooday Afkayga waxaan ku furayaa tusaaleyaal, Oo
waxii qarsoonaa ilaa iyo aasaaskii dunida ayaan ku dhawaaqayaa.[27*]

### Macnaha Tusaalaha Gocondhada

36 Markaasuu dadkii badnaa ka tegay oo guriga galay. Oo Xertiisii ayaa u timid oo waxay ku
yidhaahdeen Noo fasir tusaalaha gocondhada beerta. 37 Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, ka
abuurka wanaagsan abuuray waa Wiilka Aadanaha. 38 Beertuna waa dunida. Abuurka
wanaagsanna waa wiilasha boqortooyada, gocondhaduna waa wiilasha shaydaanka.
39 Cadowga gocondhada abuurayna waa Iblayska, beero goosadkuna waa dhammaadka
dunida, kuwa goyana waa malaa'igta. 40 Marka sida gocondhada loo uruuriyo oo dabka loogu
gubo oo kale ayay ahaan doontaa dhammaadka dunidu. 41 Wiilka Aadanaha ayaa malaa'igtiisa
diri doona, oo waxay boqortooyadiisa ka uruurin doonaan wax kasta oo shar ah iyo kuwa
dembilayaasha ah. 42 Oo waxay ku tuuri doonaan foornada dabka, halkaasna waxaa jiri doonta
oohin iyo ilko jirriqsi. 43 Kuwa xaqa ahna waxay ka iftiimi doonaan boqortooyada Aabbahood
sida qorraxdu u iftiinto. Qofkii dhego wax lagu maqlo leh ha maqlo.

### Tusaaleyaal Ku Saabsan Maalka Iyo Dheemanka Iyo Shabagga

44 Boqortooyada jannadu waxay u egtahay kansi dheeman ah oo qaali ah oo beer ku qarsoon
oo intuu nin helay qarsaday. oo farxad aawadeed intuu baxay oo wuxuu lahaa oo dhan iibiyay
deedna beertaas ku gatay. 45 Haddana boqortooyada jannadu waxay u egtahay ganacsade
dheeman wanaagsan doonaya. 46 Oo markuu xabbad qiima wayn leh helay baxay oo wuxuu
lahaa oo dhan iibiyay oo iyadii ku gatay. 47 Haddana boqortooyada jannadu waxay u egtahay
shabag badda lagu tuuray oo nooc walba oo kalluun ah soo qabatay. 48 Oo markuu buuxsamay
ay kalluumaysatadii xeebta ku soo jiideen oo intay fadhiisteen ayay kalluunkii fiicnaa weelal ku
uruuriyeen kii xumaana iska tuureen. 49 Sidaas oo kale ayay ahaan doontaa dhammaadka
dunida. Malaa'iga ayaa iman doona oo kuwa sharka leh ka dhex sooci doona kuwa xaqa ah.
50 Oo waxay ku tuuri doonaan foornada dabka. Halkaasna waxaa jiri doona oohin iyo ilko
jirriqsi. 51 Waxaas oo dhan ma garateen? Waxay ku yidhaahdeen Haah. 52 Markaasuu ku yidhi,
Sidaa darteed wadaad kasta oo boqortooyada jannada macallin ka noqda wuxuu la mid yahay
bakhaar haye, bakhaarkiisa wax cusub iyo wax duug ahba ka soo saara.

### Ciise Naasared Waa Laga Diiday

53 Markuu Ciise tusaalayaashaas dhammeeyay, ayuu halkaas ka tegay. 54 Oo intuu
magaaladiisii yimid, ayuu sunagogyada wax ku baray markaasay yaabeen oy yidhaahdeen
Ninkanu xagguu xigmaddan iyo xooggan uu mucjisooyinka ku samaynayo ka helay?
55 Miyuuna wiilkii Nijaarka ahayn? Oo miyayna hooyadii Maryama ahayn? Walaalihiina
Yacquub iyo Yuusuf iyo Simoon iyo Yuudas? 56 Gabdhaha walaalihii ahna miyayna inala wada
joogin? Marka xagguu waxan oo dhan ka helay? 57 Wayna diideen, laakiin Ciise wuxuu ku
yidhi, Nebi kuma sharaf waayo waddankiisa iyo qaraabadiisa dhexdooda mooyee.
58 Halkaasna mucjisooyin badan muuna ku samaynin rumaysad la'aantooda aawadeed.

---

27 Sabuur 78:2

## Dhimashadii Nebi Yaxye

**14** Waagaas gudoomiye Herodos ayaa warkii Ciise maqlay. 2 Oo wuxuu kuwii la joogay ku
yidhi, Kanu waa Nebi Yaxye oo kuwii dhintay ka soo saracay, sidaa darteed mucjisooyinkan
xoogga leh ayuu samaynayaa. 3 Waayo, Herodos ayaa Nebi Yaxye qabtay oo xabsiga ku
tuuray isaga oo u xidhay walaalkii Filibos xaaskiisa Herodiya aawadeed. 4 Maxaa yeelay Nebi
Yaxye wuxuu ku yidhi, Xalaal kuuma aha inaad guursato.[28*] 5 Oo markuu damcay inuu dilo
shacabka ayuu ka cabsaday maxaa yeelay, waxay aaminsanaayeen inuu nebi yahay. 6 Laakiin
maalintii dhalashada Herodos ayay Herodiya gabadheedu dadka hortooda ka qoobka
ciyaartay, oo Herodos ayay ka farxisay. 7 Markaasuu u ballanqaaday oo dhaar ugu maray inuu
waxay waydiisataba siiyo. 8 Hooyadeed baa u sheegtay inay ku tidhaahdo Madaxii Nebi Yaxye
oo Salad ku jira halkan iigu keen. 9 Boqorkii aad ayuu uga xumaaday oo uga naxay, laakiin
maadaama oo uu dadka hortooda u ballanqaaday wuxuu amar ku bixiyay in loo fuliyo
codsigeeda. 10 Markaasuu cid diray oo Nebi Yaxye ayaa xabsiga dhexdiisa madaxa lagaga
gooyay. 11 Oo madixii oo sallad ku jira ayaa gabadhii loo keenay iyaduna hooyadeed ayay
siiyay. 12 Marka xertiisii ayaa timid oo intay meydkiisii qaadeen oy soo aaseen ayay Ciise u
yimaadden oy u warrameen.

## Waxaa La Quudiyay Shan Kun Oo Nin

13 Ciise markuu maqlay wixii dhacay ayuu halkaa doonni kaga soo noqday, oo lama
dagaanka ayuu keligii tegay. Dadkii faraha badnaana markay warkiisa maqleen, ayay
magaalooyinka lug kaga soo raaceen. 14 Markuu degay ayuu dad badan arkay wuuna u
naxariistay oo kuwoodii bukay ayuu bogsiiyay. 15 Markii makhribkii la gaadhay xertiisii ayaa u
timid oo ku tidhi Meeshu waa cidla, wakhtigiina wuu dhammaaday ee dadka iska dir si ay
tuulooyinka u tagaan oy cunto uga soo iibsadaan. 16 Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, uma baahna
inay tagaane idinku waxay cunaan siiya. 17 Waxay ku yidhaahdeen Meeshan waxba kuma
hayno shan midh oo furin ah iyo laba kalluun ah mooyee. 18 Markaasuu ku yidhi, Halkan iigu
keena. 19 Deedna dadkii faraha badnaa ayuu ku amray inay cawska ku fadhiistaan. Isaguna
intuu shantii furinka ahayd iyo labadii kalluunka ahaa qaaday ayuu samada eegay oo ku
ducceeyay oo intuu furinkii jejebiyay ayuu xertiisii siiyay, xertiina dadkii faraha badnaa ayay
siiyeen. 20 Dhammaantoodna way wada cuneen oo ka dhergeen, oo markay soo uruuriyeen
hanbadii ka hadhay laba iyo toban saladood ayay ka buuxiyeen. 21 Kuwii cunayna waxay
qiyaastii ahaayeen shan kun oo rag ah oyna dumarka iyo carruurtu ku jirin.

## Ciise Biyo Ayuu Ku Dul Socday

22 Isla markiiba wuxuu xertiisii amar ku siiyay inay doonnida fuulaan oy intuu dadka kala
dirayo daanta kale isaga uga sii horreeyaan. 23 Markuu dadkii kala diray ayuu keligii buurta
koray si uu u tukado. Oo markii makhribka la gaadhay keligii ayaa halkaa joogay. 24 Doontiina
durba in badan ayay dhulka ka fogaatay marka duufaan ayaa ku kacday oo hirarkii ayaa qarqin
gaadhay waayo dabaysha ayaa ka hor timid. 25 Markay waabarigii ku dhawdahay ayuu u yimid
isaga oo biyaha badda ku dul socda. 26 Oo xertiisii markay arkeen isaga oo badda ku dul
socda, way naxeen oo waxay yidhaahdeen Waa rooxaan oo cabsi bay la qayliyeen. 27 Markiiba
Ciise ayaa la hadlay oo ku yidhi, War waa anigiiye, ha cabsanina. 28 Marka Butros ayaa la

28 Baxniintii 20:12 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:16

hadlay oo ku yidhi, Sayidow, haddaad adiga tahay, igu amar inaan biyaha kuugu dul imaaddo.
29 Markaasuu Kaalay ku yidhi, Oo Butros intuu doontii ka degay ayuu biyaha ku dul socday si
uu Ciise ugu tago. 30 Laakiin markuu duufaantii arkay ayuu cabsaday oo wuxuu billaabay inuu
quuso markaasuu qayliyay oo ku yidhi, Sayidow, i badbaadi 31 Deedna markiiba Ciise ayaa
gacanta u soo taagay oo qabtay oo ku yidhi, Rumaysad yareyahow, maxaad u shakiday?
32 Deedna markay doontii fuuleen duufaantii way joogsatay. 33 Deedna kuwii doonnida ku jiray
intay u sujuudeen isaga ayay ku yidhaahdeen Runtii, waxaad tahay Wiilka Eebbe.

### Dadkii Gennesared Joogay Waa La Bogsiiyay

34 Oo markay tallaabeen waxay yimaaddeen dhulka Gennesared. 35 Marka nimankii halkaa
degganaa markay garteen isaga waxay u cid direen dagmooyinkii ku wareegsanaa oo dhan,
oo waxay u keeneen kuwii bukay oo dhan. 36 Oo waxay ka baryeen inay kuwa buka faraqa
maradiisa taabtaan, kuwii taabtayna way wada bogsadeen.

### Ciise Ayaa Ka Jawaabay Eedayntii Ku Saabsanayd Xeerka

**15** Markaas waxaa Quddus Ciise uga yimid wadaaddo Farrisiin iyo culimo ah, oo waxay ku
yidhaahdeen. 2 Xertaadu maxay xeer dhaqameedka odayaasha u jabiyaan? Waayo, iyaga oon
fara xalanin ayay wax cunaan. 3 Wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Idinkuba maxaad amarka
Eebbe u jabisaan si aad dhaqankiinna u ilaalisaan? 4 Waayo, Eebbe wuxuu amray Aabbahaa
iyo hooyadaa maamuus, oo Kii aabbe ama hooyo caayaa waa in la dilo.[29*] 5 Laakiin waxaad
tidhaahdaan Kii aabbihii ama hooyadii ku yidhaahda Waxaan idin siiyo waa sadaqo aabbihii iyo
hooyadii ma xushmeeyo. 6 Xeerkiinna aawadii ayaad erayga Eebbe u jabisaan.
7 Munaafiqiinyahow, miyuuna Ishacyaah idin sii sheegin markuu yidhi, 8 Dadkanu dibnahooday
igu ammaanaan, Laakiin qalbigoodu wuu iga fogyahay. 9 Si aan macnee lahayn ayay ii
caabudaan, Iyaga oo dadka baraya amarrada dadka.[30*] 10 Markaasuu dadkii fara badan u
yeedhay oo ku yidhi, Maqla oo fahma 11 Waxa qofka afkiisa gala ma nijaaseeyo laakiinse waxa
afkiisa ka soo baxa ayaa nijaaseeya. 12 Deedna xertii ayaa u timid oo waxay ku yidhaahdeen
Ma ogtahay markay Farrisiintu hadalkan maqleen inay ka xumaadeen? 13 Laakiin wuxuu ugu
jawaabay oo ku yidhi, Geed walba oo uusan Aabbahayga jannada ku jira abuurin waa la rujin
doonaa. 14 Iska daaya; iyagu waa indhoolayaal indhoolayaal hagayaane. hadduu nin indha la'
nin indha la' hago, labaduba god bay ku dhacaan. 15 Marka Butros ayaa ku yidhi, Tusaalaha
noo fasir. 16 Markaasuu ku yidhi, Idinkuna weli miyaydaan fahmin? 17 Miyaydaan ogayn in wax
kastoo afka gala uu caloosha tago, oo musqusha lagu tuuro? 18 Laakiinse waxa afka ka soo
baxa, qalbigay ka yimaaddaan oo waxaas ayaa qofka nijaaseeyaa. 19 Waayo, waxaa qalbiga
ka soo baxa fikradaha sharka leh iyo dilka iyo sinada iyo Anshax xumada*[e] iyo tuuganimada
iyo maragga beenta ah iyo isku dirka.[31*] 20 Kuwan weeye waxa qofka nijaaseeyaa. Laakiinse in
faro aan la maydhin wax lagu cuno qofka ma nijaasayso.

29 Baxniintii 20:12 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:16

30 Ishacyaah 2:13

31 Akhlaaqda galmada la xidhiidha.

### Rumasadkii Naag Kancaaniyad Ah

21 Ciise ayaa meeshaa ka baxay, oo xagga Turos iyo Siidoon ayuu u leexday. 22 Oo bal eeg,
naag reer Kancaan ah oo dagmadaas ka soo baxday ayaa u timid iyada oo kor u
dhawaaqaysa oo leh Ii naxariiso Sayidow, Ina Daa'uudow. Gabadhayda jin baa si xun u
waalaya. 23 Laakiinse kalmad muusan ugu jawaabin. Markaasay xertiisii u timid oy baryeen
iyaga oo leh Eri, waayo, way inaga daba qaylyaysaa. 24 Laakiin wuxuu ugu jawaabay oo ku
yidhi, La' iima soo dirin, idaha lunsan ee reer banii Israa'iil mooyeee 25 Markaasay u timid oo u
sujuudday oo waxay tidhi Sayidow, i caawi. 26 Wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Ma habboona
in furinka wiilasha ayda loo tuuro. 27 Waxay tidhi Waa runtaa Sayidow, laakiinse ayduba jajabka
miisaska sayidadooda ka dhaca ayay cunaan. 28 Markaasuu Ciise u jawaabay oo ku yidhi,
Naagtaay, rumaysadkaagu waynaa! sidaad doonayso ha kuu noqoto. Oo isla markiiba
gabadheedii way bogsatay.

### Dad Badan Baa La Bogsiiyay

29 Deedna Ciise halkaas wuu ka tegay, oo meel badda Galili agteeda ah ayuu intuu buur
foolay fadhiistay. 30 Marka waxaa u yimid dad fara badan oo wada curyaamiin iyo kuwo indha
la' iyo kuwa carrab la' iyo qaar badan oo kale, oo waxay iyaga dhigeen lugihiisa agtooda,
wuuna bogsiiyay. 31 Marka dadkii way yaabeen markay arkeen kuwii carrabka la'aa oo hadlaya
iyo kuwii naafada ahaa oo bogsaday iyo kuwii curyaanka ahaa oo socda iyo kuwii indhaha
la'aa oo wax arka oo Eebbaha reer banii Israa'iil ayay ammaaneen.

### Afar Kun Oo Nin Ayaa Cunto La Siiyay

32 Ka dibna Ciise ayaa xertiisii u yeedhay oo ku yidhi, Dadkan faraha badan waan u
naxariisanayaa, waayo, durba saddex maalmood ayay ila joogeen, oo waxay cunaanna ma
haystaan, Iyaga oo sooman inaan iska dirnana ma aha, waaba intaasoy jidka ku itaal
beelaane. 33 Xertiisii waxay ku yidhaahdeen Dhul baadiya ah ayaynnu joognaaye xaggeen furin
intaa le'eg oo dad sidan u fara badan baahi tira ka helaynnaa? 34 Ciise ayaa ku yidhi, Immisa
midh oo furin ah ayaad haysaan? Waxay yidhaahdeen Toddoba midh iyo in yar oo kalluun yar
yar ah. 35 Markaasuu dadkii faraha badnaa ku amray inay dhulka fadhiistaan. 36 Deedna
toddobadii midh ee furinka ahaa iyo kalluunkii ayuu soo qaaday, oo intuu mahadnaqay ayuu
kala jajabiyay oo xertii siiyay, xertiina dadkii faraha badnaa ayay siiyeen. 37 Dhammaantoodna
way wada cuneen oy dhargeen, oo waxay soo uruuriyeen toddoba saladood oy ka buuxaan
jajabkii hanbada ahaa. 38 Dadkii cunayna waxay ahaayeen afarkun oo rag ah oyna dumarka iyo
carruurtu ku jirin. 39 Markuu dadkii faraha badnaa kala dirayna doon buu fuulay, oo wuxuu galay
dagmada Magadan.

### Ciise Markii La Waydiistay Inuu Mucjiso Sameeyo Wuu Diiday

**16** Waxaa u yimid Farrisiintii iyo Sadukiintii iyaga oo jirrabaya, oo waxay ka baryeen inuu
mucjiso cirka ka tuso. 2 Wuxuu ugu jawaabay Markay galabtii tahay waxaad tidhaahdaan,
jawigu saafi buu noqonayaa, waayo, cirku sagal buu leeyahay. 3 Aroortiina waxaad
tidhaahdaan, Maanta roob baa da'aya, waayo, cirku sagal buu leeyahay, wuuna naq kacsan
yahay. Waxaad taqaanaan sida muuqaalka cirka loo garto, laakiinse ma kala garan kartaan

calaamadaha wakhtiyada. [4] Waxaa mucjiso doonaya qarni shar leh oo faasiq ah, mucjisana
lama siinayo mucjisadii Yoonis mooyee. Markaasuu iska daayay iyaga oo ka tegay.

### Ciise Xertiisii Wuxuu Ku Canaantay Fahma Darradooda

[5] Markay xertiisu dhanka kale u tallaabeen waxay illoobeen inay furin sii qaataan. [6] Ciise ayaa
ku yidhi, iska ilaaliya khamiirka Farrisiinta iyo Sadukiinta. [7] Markaasay fikireen oo isku
yidhaahdeen Wuxuu sidaa u leeyahay waayo furin maynaan soo qaadanin. [8] Ciise oo gartay
ayaa ku yidhi, Rumaysad yarayaalyahow? Maxaad inaydaan furin haysanin uga hadlaysaan?
[9] Miyaydaan weli fahmin, oo miyaydaan xusuusnaynin shantii furinka ahayd ee shanta Kun, iyo
intii saladood eed hanbadooda ka soo uruuriseen? [10] Ama toddobadii midh ee furinka ahayd oy
afarta Kun cuntay iyo intii saladood eed ka soo uruuriseen hanbadoodii? [11] Sideed u garan
waydeen inaanan furin idinkala hadlaynin markaan idinku leeyahay Iska ilaaliya khamiirka
Farrisiinta iyo Sadukiinta? [12] Deedna way fahmeen in uusaa ka hadlaynin khamiir furin
laakiinse uu ka hadlayo wax baridda Farrisiinta iyo Sadukiinta.

### Qirashadii Butros Inuu Ciise Masiixa Yahay

[13] Ciise markuu dagmada Kaysariya Filibos yimid ayuu xertiisii waydiiyay oo wuxuu ku yidhi,
Dadku yay ku sheegaan Wiilka Aadanaha? [14] Waxay yidhaahdeen Qaar waxay yidhaahdaan,
Nebi Yaxye, qaarna Ilyaas, qaar kalena waxay yidhaahdaan, Yeremyaah, ama nebiyada
midkood. [15] Markaasuu iyaga ku yidhi, Idinkuna yaad igu sheegtaan? [16] Simoon Butros ayaa u
jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Waxaad tahay Masiixa Wiilka Eebbaha nool. [17] Ciise ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Waad barakaysantahay Simoon Ina Yoonisow! waayo, banii aadan
arrintan kuu sheegay ma jiro, laakiinse Aabbahayga jannada ku jira ayaa kuu muujiyay.
[18] Anigu waxaan kugu leeyahay waxaad tahay Butros, oo dhagaxan ayaan ka dul dhisi doonaa
kiniisaddayda, oo albaabbada jahanabo kama adkaan doonto. [19] Waxaan ku siin doonaa
furayaasha boqortooyada jannada, oo wax alla wixii aad dhulka ku xidho jannadaa lagu xidhi
doona, oo wax alla wixii aad dhulka ku furtana jannadaa laga furi doona. [20] Ka dibna xertii
wuxuu amar ku siiyay inayna cidna u sheegin inuu Masiixa yahay.

### Ciise Wuxuu Sii Sheegay Dhimashadiisa Iyo Soo Sarakicidiisaba

[21] Markaas dabadeed Ciise wuxuu billaabay inuu xertiisa u sheego inay waajib ku tahay inuu
Quddus tago, oo uu odayaasha iyo wadaaddada sare iyo culimada dhib badan iyo cadaadis
kala kulmo oo la dilo, oo maalinta saddexaad la soo sarakiciyo. [22] Marka Butros ayaa gooni ula
baxay oo billaabay inuu canaanto, oo wuxuu ku yidhi, Eebbe ha kaa hayo, Sayidow, waxaasu
waligaa kugu dhici maayaan. [23] Markaasuu intuu Butros ku soo jeedsaday ku yidhi, Dib iiga
joogso, shaydaanyahow! caqabad baad igu tahaye, waayo waxyaabaha Eebbe kama fikirtid,
laakiinse waxyaabaha dadka ayaad ka fikirtaa.

### Waa In Damaca Nafta La Diido

[24] Markaasuu Ciise xertiisii ku yidhi, Qofkii doonaya inuu iga daba yimaado waa inuu
doonistiisa dafiro oo uu iskutallaabtiisa soo qaato oo i soo raaco. [25] Qofkii doona inuu naftiisa
badbaadiyo wuu waayi doonaa, oo kii naftiisa aawaday u hura wuu heli doonaa. [26] Waayo
maxay qofka ugu taallaa hadduu dunida oo dhan helo oo uu naftiisa waayo? Ama muxuu qofku

naftiisa ku furtaa? 27 Waayo, Wiilka Aadanuhu isaga oo ammaanta aabbihii wata oy
malaa'igihiisu la socdaan ayuu iman doonaa, oo qof kasta siduu camalkiisu ahaa ku abaal
marin doonaa. 28 Runtii waxaan idinku leeyahay, Kuwa halkan taagan qaarkood sinaba
dhimasho uma dhadhamin doonaan ilaa oy arkaan Wiilka Aadanaha oo boqortooyadiisa ku
imanaya.

### Ciise Muuqiisu Wuu Isbeddelay

**17** Lix maalmood dabadeed Ciise wuxuu kaxaystay Butros iyo Yacquub iyo walaalkii
Yooxanaa, oo wuxuu keligood geeyay buur dheer. 2 Oo hortooda ayuu isku beddelay, wejigiisu
sida qorraxda oo kale ayuu u iftiimay, dharkiisuna sida nuurka oo kale ayuu u caddaaday. 3 Oo
waxay arkeen Muuse iyo Ilyaas oo la hadlaya isaga. 4 Marka Butros ayaa Ciise ku yidhi,
Sayidow, inaan halkan joogno way fiicantahay. Haddaad doonto saddex teendho aan halkan
ka dhisno, mid adiga, midna Muuse, midna Ilyaas. 5 Isaga oon weli hadalkii dhammynin daruur
ayaa hadhaysay, oo cod baa daruurtii ka dhex hadlay oo yidhi, Kanu waa Wiilkayga aan
jeclahay een ku faraxsanahay ee Maqla isaga! 6 Xertii markay taas maqleen ayay cabsi la
sujuudeen. 7 Markaasuu Ciise u yimid oo taabtay oo ku yidhi, Kaca oo ha cabsanina. 8 Markay
kor eegeenna cidna mayna arag Ciise keligii mooyee. 9 Deedna makay buurta ka soo
daadageen, Ciise ayaa amar ku siiyay oo ku yidhi, Cidna ha u sheegina wixii aad aragteen
intuunna Wiilka Aadanuhu kuwii dhintay ka soo sarakicin. 10 Xertiisii waxay ku yidhaahdeen
Marka maxay culimadu u yidhaahdaan, Waa inuu Ilyaas marka horay yimaado? 11 Deedna
wuxuu ku yidhi, Dhab ahaantii, Ilyaas wuu imanayaa, oo wax walba wuu soo celin doonaa.
12 Laakiin waxaan idinku leeyahay, Ilyaas horay buu u yimid, wayna garan waayeen, oo waxay
doonaan bay isaga ku sameeyeen. Sidaas oo kalena Wiilka Aadanuhu dhibaatuu kala kulmi
doonaa iyaga. 13 Markaasay xertiisu garteen inuu Nebi Yaxye ka hadlayo.

### Wiil Shaydaan Ku Jiro Ayaa La Bogsiiyay.

14 Markay dadkii faraha badnaa u yimiddeen, nin ayaa intuu u jilba joogsaday ku yidhi,
15 Sayidow, wiilkayga u naxariiso, waayo, suuxdin buu qabaa oo aad buu u xanuunsadaa, oo
marar badan dabkuu ku dhacaa marar badanna biyaha. 16 Oo xertaadaan u keenay wayna
bogsiin kari waayeen. 17 Ciise wuxuu ku yidhi, Qarniyahow rumaysadka daran oo madaxa adag
ilaa goormaan idinla joogi doonaa, oo ilaa goormaan idiin dulqaadan doonaa? Halkan iigu
keena wiilka. 18 Deedna Ciise shaydaankii ayuu canaantay, oo wiilkii wuu ka baxay, isla
markiiba wiilkii wuu bogsaday. 19 Marka xertii ayaa Ciise gooni ugu timid oo ku tidhi Annagu
maxaannu u saari kari waynay? 20 Wuxuu ku yidhi, Waa rumaysad yaridiinna aawadeed. Runtii
waxaan idinku leeyahay, Haddaad rumaysad Iniin kherdal le'eg leedihiin buurtan waxaad ku
odhan doontaan: Halkan ka dhaqaaq oo halkaas tag, wayna dhaqaaqi doontaa, oo waxba
idinkuma adkaan doonaan. 21 {Laakiin noocan waxba kuma soo boxo tukasho iyo soon
mooyee}.

### Ciise Mar Labaad Ayuu Dhimashadiisa Sii Sheegay

22 Oo markay Galili ku uruursanaayeen, Ciise ayaa ku yidhi, Wiilka Aadanaha dadka ayaa loo
dhiibi doonaa. 23 Wayna dili doonaan, maalinta saddexaadna waa la sarakicin doonaa.
Markaasay aad uga murugooddeen.

## Ciise Canshuurtii Macbudka Ayuu Bixiyay

24 Markay Kafarna'um yimaaddeen, kuwii canshuurta labada dirhan ah qaadi jiray ayaa
Butros u yimid oo waxay ku yidhaahdeen Macallinkiinnu labadii dirhan ee canshuurta sow ma
bixiyo? 25 Wuxuu yidhi, Haah wuu bixiyaa Deedna markuu Butros guriga galay Ciise ayaa kala
hor maray oo ku yidhi, Maxay kula tahay, Simoonow? Boqorrada dhulku yay canshuurta iyo
baadba ka qaadaan; ma Wiilashooda mise shisheeyaha? 26 Wuxuu yidhi, Shisheeyaha, Ciise
ayaa ku yidhi, Marka wiilashu waa xor. 27 Laakiin si ayna inooga xumaanin, badda tag oo
sinaarad ku tuur, oo kalluunka ugu horayaa ee soo baxa soo qabo, markaad afkiisa furtana
waxaad ka heli doontaa in lacag ah; marka taas qaad oo aniga iyo adigaba inooga bixi.

## Qofkee Ugu Wayn?

**18** Saacaddaas xertii ayaa Ciise u timid oo waxay ku yidhaahdeen Yaa boqortooyada
jannada ugu wayn? 2 Dabadeedna intuu ilma yar u yeedhay oo soo dhex istaajiyay ayuu ku
yidhi, 3 Runtii waxaan idinku leeyahay, Haddaydaan is badalin oydaan sida carruur oo kale
noqonin, boqortooyada jannada galimaysaan. 4 Ku alla kii isu hoosaysiiya sida ilmahan oo kale,
kaas ayaa ugu wayn boqortooyada jannada. 5 Oo qof kasta oo magacayga ilmahan oo kale ku
aqbala, wuu i aqbalaa.

## Ciise Wuxuu Ka Digay Inaan Dadka La Duufsaninin

6 Laakiin ku alla kii kuwan yar yar ee i rumaystay midkood duufsada waxaa u roon in dhaga-
shiid qoorta loo galiyo oo badda salkeeda lagu tuuro. 7 Dunidu way halaagsantay duufsashada
aawadiis! Duufsashadu way imanaysaa, laakiinse qofkii sabab u noqda ayaa halaagsamay.
8 Hadday gacantaadu ama lugtaadu ku dembaajiso iska jar oo iska tuur. Waxaa kuu
wanaagsan inaad gacan la'aan iyo lug la'aan nolosha ku gasho intii adiga oo laba gacmood iyo
laba lugood leh naarta daa'imka ah lagugu tuuri lahaa. 9 Hadday ishaadu ku dembaajiso iska
bixi oo iska tuur. Waxaa kuu wanaagsan inaad IL keliya nolosha ku gasho intii adiga oo laba
indhood leh jahannabada dabka ah lagugu tuuri lahaa. 10 Iska ilaaliya in aad kuwan yar yar
midkood quudhsataan waayo, waxaan idinku leeyahay, Mar walba malaa'igahooda jannada ku
jira ayaa wejiga Aabbahayga jannada ku jira eegaya. 11 {Waayo, Wiilka Aadanuhu wuxuu u
yimid inuu kuwii lumay badbaadiyo}.

## Tusaale Ku Saabsan Lax Luntay

12 Maxay idinla tahay, hadduu nin tiro ido ah leeyahay oy lax ka lunto, miyuuna sagaal iyo
sagaashankii kale buuraha dushooda kaga tegaynin oo uusan laxdii luntay raadinaynin? 13 Oo
markuu soo helo runtii waxaan idinku leeyahay si uusan sagaal iyo sagaashankii aan lumin
ugu farxin ayuu ugu faraa. 14 Sidaas oo kale, Aabbihiinna jannada ku jira doonistiisa ma aha in
kuwan yar yar midkood halaagmo.

## Hadduu Walaalkaa Kugu Xadgudbo Sidaad Yeeli Lahayd

15 Hadduu walaalkaa kugu xadgudbo kaligaa u tag oo gafkiisa u sheeg. Hadduu ku maqlo,
walaalkaa waad soo ceshatay. 16 Laakiin hadduu ku diido mid kale ama laba u kaxayso si arrin
kasta ay laba markhaati ama saddex goob joogayaal uga ahaadaan. 17 Oo hadduu iyagana

diido, kiniisadda u bandhig, oo hadduu kiniisaddana diido, sida qof sanab caabude ah iyo
canshuurqaade ha kuu ahaado. [18] Runtii waxaan idinku leeyahay, Wax alla wixii aad dhulka ku
xidhaan ayaa jannada ku xidhnaan doona, oo wax alla wixii aad dhulka ku furtaan ayaa
jannada ku furnaan doona. [19] Weliba waxaan idinku leeyahay, Hadday laba idinka mid ahu
dhulka ku heshiiyaan wax kasta oy baryaan, Aabbahayga jannada ku jira way ka heli doonaan.
[20] Waayo, meeshay laba ama saddex qof ay magacayga aawadii isugu yimaaddaan, halkaas
ayaan anigu dhex joogaa.

### Tusaale Ku Saabsan Shaqaalihii Abaalka Darraa

[21] Marka Butros ayaa u yimid oo ku yidhi, Sayidow, immisa jeer baan walaalkay cafiyaa
hadduu i xumeeyo? Ma toddoba jeer? [22] Ciise ayaa ku yidhi, Kuma odhanayo toddoba jeer,
laakiinse ilaa iyo toddobaatan jeer oo min toddoba ah. [23] Sidaa darteed boqortooyada jannadu
waxay u egtahay boqor doonaya inuu shaqaalihiisa xisaabiyo. [24] Oo markuu billaabay inuu
xisaabiyo waxaa loo keenay nin uu toban Kun oo diinaar ku lahaaa. [25] Laakiinse wuu iska bixin
kari waayay. Marka sayidkii ayaa amar ku bixiyay in isaga iyo xaaskiisa iyo carruurtiisa iyo
wuxuu lahaa oo dhanba la xaraasho oo daynta lagu bixiyo. [26] Deedna shaqaalihii ayaa intuu
sujuud la dhacay yidhi, Sayidow, daynta waan iska wada bixin doonaaye ii dulqaado. [27] Marka
sayidkiisii ayaa u naxay, oo iska sii daayay, oo dayntii ka cafiyay. [28] Laakiin shaqaalihii markuu
baxay kuwii la shaqayn jiray midkood oo uu boqol dinaar ku lahaa ayuu arkay. Markaasuu
intuu cunaha ku dhagay oo ku yidhi, War iska Bixi daynta aan kugu leeyahay. [29] Deedna
shaqaalihii la shaqayn jiray ayaa isku hoos tuuray oo baryay, oo ku yidhi, War waan iska bixine
ii dulqaado. [30] Laakiinse muusan cafiyin ee intuu qabtay ayuu xabsiga ku tuuray ilaa iyo intuu
wixii lagu lahaa bixinayo. [31] Deena kuwii la shaqayn jiray markay wixii dhacay arkeen aad bay
uga xumaadeen, oo intay sayidkooda u yimaaddeen ayay wixii dhacay oo dhan uga
warrameen. [32] Marka sayidkiisii ayaa u yeedhay oo ku yidhi, Shaqaalayahow sharka leh!
Waxaan kugu lahaa oo dhan ayaan kaa cafiyay, waayo, waad i bariday. [33] Inaad kii kula
shaqayn jiray sidaan aniguba kuugu naxariistay ugu naxariisato sow ma ahayn? [34] Markaasuu
sayidkiisii oo cadhaysan u dhiibay kuwa dadka karbaasha ilaa iyo intuu wixii lagu lahaa oo
dhan bixinayo. [35] Sidaas oo kale ayuu Aabbahayga jannada ku jiraa idinku samayn doonaa,
hadduusan midkiinba mika kale walaalkii qalbiga ka cafiyin.

### Furriinka Dumarka

**19** Ciise markuu hadalladan dhammeeyay ayuu Galili ka baxay, oo wuxuu tagay gobolka
Yahuudiya ee Urdun ka shisheeya. [2] Waxaana soo raacay dad fara badan, oo halkaas ayuu
iyaga ku bogsiiyay. [3] Deedna Farrisiintii ayaa u yimid, iyaga oo jirrabaya, oo waxay ku
yidhaahdeen Ninku inuu xaaskiisa sababtuu doono ku furo ma banaantahay? [4] Wuxuu ugu
jawaabay Miyaydaan akhriyin Kii Bilowgii iyaga uumay wuxuu ka dhigay lab iyo dhadig. [5] Oo
wuxuu yidhi, Sababtaas aawadeed ninku wuxuu ka tegayaa aabbihii iyo hooyadii, oo wuxuu la
midoobayaa xaaskiisa, oo labadoodu isku jidh bay noqonayaan [6] Hadaba sidaa darteed iyagu
mar dambe laba ma aha ee waa hal jidh. Marka wuxuu Eebbe isku xidhay, ninna yuusan kala
furin. [7] Deedna waxay ku yidhaahdeen Haddaba muxuu Muuse u amray intii iyada warqaddii
dalaaqa la siiyo in layska sii daayo? [8] Wuxuu ku yidhi, Maxaa yeelay, Muuse wuxuu idiinku
fasaxay inaad xaasaskiinna furtaan qalbi adaygiinna aawadeed, laakiinse Bilowgii sidaas ma
ahayn. [9] Waxaan idinku leeyahay, Ku alla kii xaaskiisa wax aan sino ka ahayn ku fura, oo mid

kale guursada, wuu sinaystaa. Oo kii garoob la furay guursada wuu sinaystaa. [10] Xertiisii waxay ku yidhaahdeen Hadduu xaalka ninka iyo xaaskiisu sidan yahay in la guursadaba ma fiicna. [11] Laakiin wuxuu ku yidhi, Dadka oo dhan hadalkan ma wada aqbali karaan, kuwii la siiyay mooyee. [12] Waayo waxaa jira bohonno sidaa uurkii hooyadood kaga soo dhashay iyo kuwo ay dadku dhufaaneen, iyo kuwo boqortooyada jannada aawadeed isu dhufaanay. Kii hadalkan aqbali kara, ha aqbalo.

### Ciise Carruur Yar Yar Ayuu U Duceeyay

[13] Marka carruur yar yar ayay u keeneen si uu gacmiihiisa u saaro oo ugu duceeyo, laakiinse xertii ayaa iyaga canaanataye. [14] Deedna Ciise ayaa ku yidhi, War daaya carruurta oo ha u diidina inay ii yimaaddaan, waayo, kuwan oo kale ayaa boqortooyada jannada leh. [15] Deedna intuu gacmaha saaray iyaga, ayuu meeshaa ka tegay.

### Nin Dhallinyaro Ah Oo Hodan Ah Ayaa Damcay Inuu Jannada Galo

[16] Oo bal eeg, nin ayaa intuu ku soo dhawaaday ku yidhi, Macallin, maxaan camal wanaagsan sameeyaa si aan nolosha weligeed ah u helo? [17] Wuxuu ku yidhi, Maxaad camal wanaagsan ii waydiinaysaa? Mid wanaagsan mid keliya ayaa jiree? Haddaad doonayso inaad nolosha gasho amarrada sharciga addeec. [18] Wuxuu ku yidhi, Amarradee? Ciise ayaa ku yidhi, Waa inaadan qof dilin oo Waa inaadan sinaysan oo Waa inaadan waxba xadin oo Waa inaadan marag been ah furin. [19] Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, oo Waa inaad deriskaaga u jeclaato sidaad naftaada u jeceshahay.[32*] [20] Ninkii dhallin yarada ahaa ayaa ku yidhi, Kuwaas oo dhan waan ilaaliyay ee Maxaa kale? [21] Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad inaad kaamil noqoto doonayso, bax oo hantidaada oo dhan xaraash oo masaakiinta u qaybi jannadaad kayd ku yeelane, deedna kaalay oo i soo raac. [22] Ninkii dhallin yarada ahaa markuu hadalkaa maqlay wuu iska baxay isaga oo murugaysan, waayo, nin hanti badan ayuu ahaa. [23] Marka Ciise ayaa xertiisii ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, taajir inuu boqortooyada jannada galo way ku adagtahay. [24] Haddana waxaan idinku leeyahay, taajir inuu boqortooyada Eebbe galo waxaa ka fudud inuu Awr Irbad daloolkeed ka duso. [25] Xertii markay taas maqleen aad bay u yaabeen, oo waxay ku yidhaahdeen Oo haddaba yaa badbaadi doona? [26] Ciise intuu eegay ayuu ku yidhi, taasu dadka agtooda suurta gal kama aha, laakiinse Eebbe wax walba way u suurta galaan. [27] Marka Butros ayaa ku yidhi, Annagu wax walba waannu ka soo tagnay oo waanu ku raacnay. Marka Maxaannu heli doonnaa? [28] Ciise ayaa ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay Kuwiinna i soo raacay markuu dunida cusub Wiilka Aadanuhu carshiga ammaantiisa ku fadhiisto, idinkuna waxaad ku fadhiisan doontaan laba iyo toban carshi, idinka oo xukumi doona laba iyo tobanka qabiil ee reer banii Israa'iil. [29] Oo mid kasta oo guryo ama walaalo, ama aabbe, ama hooyo, ama xaas ama carruur, ama beero, magacayga aawadii uga tegay, wuxuu heli doonaa boqol laab, oo wuxuu dhaxli doonaa nolosha weligeed ah. [30] Laakiin kuwo badan oo horrreeeya ayaa dambayn doonaan, kuwo dembeeyana way horrayn doonaan.

32 Baxniintii 20:13 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:17-19

### Tusaale Ku Saabsan Shaqaalaha Beerta Canabka Ah

**20** Boqortooyada jannadu waxay u egtahay mulkiile beer leh oo aroor hore baxay si uu
shaqaale beertiisa canabka ah ugu helo. 2 Oo intuu shaqaalihii maalintii dinaar kula heshiiyay
ayuu beertiisii canabka ahayd u diray. 3 Oo saddexdii saac[33*] ayuu baxay, oo wuxuu arkay
kuwo kale oo suuqa shaqo la'aan iska taag taagan. 4 Markaasuu iyagana ku yidhi, War orda oo
idinkuna beerta canabka ah taga oo ka shaqeeya xaqiinna waan idin siine.
Wayna tageen. 5 Haddana lixdii saac iyo sagaalkii saac[34*] ayuu baxay oo sidaas oo kale ayuu
sameeyay. 6 Kow iyo tobankii ayuu haddana baxay oo wuxuu arkay qaar kale oo iska taag
taagan, oo wuxuu ku yidhi, War maxaa maalintii oo dhan shaqo la'aan halkan idin taagay?[35*]
7 Waxay ku yidhaahdeen Wax na shaqaaleeya ayaannu waynay. Wuxuu ku yidhi, Orda oo
idinkuna beerta canabka ah ka shaqeeya. 8 Markii makhribkii la gaadhay, sayidkii beerta
canabka ah ayaa wakiilkiisii ku yidhi, Shaqaalaha u yeedh oo mushaharkooda sii, oo kuwii ugu
dambeeyay ka billow ilaa iyo kuwii ugu horreeyay. 9 Markay yimaaddeen, kuwii kow iyo tobanka
saac baxay, waxay wada heleen dinaar. 10 Kuwii hore markay yimaaddeenna waxay u
malaynayeen inay wax ka badan helayaan, iyaguna sidaas oo kale dinaar bay heleen. 11 Oo
markay qaadanayeen ayay mulkiilihii beerta ku gunuunuceen. 12 Oo waxay ku yidhaahdeen
Kuwan dambe saacad keliya ayay shaqeeyeen waanad nala mid dhigtay annaga oo kulaylka
maalintii ku shaqaynay. 13 Laakiin wuxuu midkood ugu jawaabay Saaxiibow, kumaana
dulminin. Sow diinaar maadan igula heshiinin? 14 Waxaaga qaado oo iska tag. Waxaan
doonayaa inaan ka ugu dambeeya siiyo intaan ku siiyay oo kale. 15 Miyaana xaq u lahayn inaan
hantidayda sidaan doono ka yeelo? Mise waxaad doonaysaa inaad wanaagayga xasaddo?
16 Sidaasay kuwa dambe u horrayn doonaan, kuwo horena u dambayn doonaan. Waayo, kuwo
badan baa loo yeedhay, laakiinse kuwo yar baa la doortay.

### Mar Saddexaadkii Ayuu Ciise Dhimashadiisa Sii Sheegay

17 Ciise intuu Quddus ku sii socday, laba iyo tobankii ayuu gooni ula baxay oo intay jidka ku
jireen ayuu ku yidhi, 18 Quddus ayaynu ku soconnaa, Wiilka Aadanahana waxaa loo dhiibi
doonaa wadaaddada sare iyo culimmada; oo dil bay ku xukumi doonaan. 19 Waxayna u dhiibi
doonaan shisheeyaha oo way ku jeesjeesi doonaan oo garaaci doonaan oo iskutallaabta ayay
ku qodbi doonaan. Maalinta saddexaadna waa la sarakicin doonaan.

### Ciise Jago Adduun Ayaa La Waydiistay

20 Marka ilma sebedi hooyadood oo wiilasheedii wadata ayaa u timid oo intay u sujuudday
ayay codsi waydiisatay. 21 Oo Wuxuu ku yidhi, Maxaad doonaysaa? Waxay ku tidhi Amar in
labadaydan wiil midna midigtaada, midna bidixdaada, boqortooyadaada ka fadhiistaan.
22 Laakiin Ciise ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Waxaad i waydiisanaysaan ma
garanaysaan. Ma karaysaan koobka aan ku dhawahay inaan ka cabbo inaad ka cabtaan iyo in
biyogalinta lay biyogalinayo laydin biyogaliyo?  Waxay ku yidhaahdeen Waannu karrnaa.
23 Wuxuu ku yidhi, Runtii koobkayga waad ka cabbi doontaan, oo biyogalintaydana waa laydin
biyogalin doonaa, laakiinse inaad midigta iyo bidixda iga fadhiisataan idinma siin karo, laakiin
kuwa Aabbahay u diyaariyay ayaa la siin doonaa. 24 Tobankii markay taas maqleen ayay

33 Sagaalkii saac ee subaxnimo
34 Saddexdii saac ee galabnimo
35 Shantii saac ee galabnimo

labadii walaalaha ahaa u cadhoodeen. [25] Marka Ciise ayaa isugu yeedhay oo ku yidhi, Waad
ogtihiin inay ummadaha madaxdoodu u taliyaan, oy kuwooda awoodda leh xukumaan.
[26] Laakiinse idinka dhexdiinna sidaas ma aha, balse ku alla kii doonaya inuu dhexdiinna ku
waynaado waa inuu idiin adeego. [27] Oo ku alla kii doonaya inuu idiinku horreeyo, waa inuu
adeegihiina noqdo. [28] Sida Wiilka Aadanuhu uusan ugu iman in loo adeego laakiinse inuu
adeego oo naftiisa kuwo badan ku furto.

### Ciise Laba Nin Oo Indhala' Ayuu Bogsiiyay

[29] Markay Areexo ka tegayeen waxaa raacay dad fara badan. [30] Oo bal eeg, laba nin oo indha
la' oo jidka ag fadhiyay ayaa markay maqleen inuu Ciise ag marayo kor u dhawaaqay iyaga oo
leh Sayidow, Ina Daa'uudow, noo naxariiso. [31] Dadkii ayaa si ay u aamusaan canaantay,
laakiinse kor bay u sii dhawaaqeen iyaga oo leh Sayidow, Ina Daa'uudow, noo naxariiso.
[32] Marka Ciise intuu istaagay ayuu u yeedhay oo ku yidhi, War maxaad doonaysaan inaan idiin
sameeyo? [33] Waxay ku yidhaahdeen Sayidow, inay indhuhu noo furmaan ayaannu doonaynaa.
[34] Ciise intuu u naxariistay ayuu indhahooda taabtay oo isla markiiba wax bay arkeen, wayna
raaceen.

### Ciise Quddus Ayuu Guul Ku Galay

**21** Markay Quddus ku soo dhawaadeen oy Beytfaage xagga Buurta Saytuun ka galeen ayuu
Ciise laba xer ah diray. [2] Oo wuxuu ku yidhi, Tuulada idinka horraysa taga, oo isla markaaba
waxaad ka helaysaan dameer xidhan iyo qayl la jooga. Soo fura oo ii keena. [3] Oo hadduu qof
wax idin yidhaahdo waxaad ku tidhaahdaan Sayidkaa u baahan oo isla markiiba wuu soo diri
doonaa. [4] Sidaas ayay wax u dhaceen si waafaqsan waxyigii nebiga loo waxyooday markuu
yidhi, [5] Gabadha Siyoon u sheega. Bal eeg, Boqorkaagu wuu kuu imanayaa, Isaga oo is-
hoosaysiin leh, oo dameer iyo qayl dameer saaran.[36*] [6] Markaasay xertii tageen, oo siduu Ciise
ku amray ayay yeeleen. [7] Dameertii iyo qaylkii ayay keeneen, oo dharkoodii ayay dusha ka
saareen, wuuna ku fadhiistay. [8] Dad aad u fara badan ayaana dharkoodii jidka ku goglay, qaar
kalena laamo ayay geedaha ka soo jareen oy jidka ku gogleen. [9] Deedna dadkii ayaa xagga
hore iyo xagga dembaba ka socday ayaga oo ku dhawaaqaya Hoosanna ha u ahaato Ina
Daa'uud. Waxaa barakaysan ka magaca Rabbiga ku imanaya, Hoosanna ha u ahaato
meelaha ugu sarreeya. [10] Oo markuu Quddus galay, magaalada oo dhan ayaa isla kacday
iyaga oo leh Kanu waa ayo? [11] Dadkii fara badan ayaa yidhi, Kanu waa Nebi Ciise oo ka yimid
Naasaredii Galili.

### Ciise Macbudka Ayuu Nadiifiyay

[12] Ciise macbudka ayuu galay oo kuwii wax ku iibinayay iyo kuwii wax ka iibsanayay oo dhan
ayuu wada eryay, oo wuxuu dabada u rogay miisaskii sarriflayaasha iyo kuraastii kuwa
qoollayda iibiya. [13] Wuxuuna ku yidhi, Way qorantahay Gurigayga waxaa loogu yeedhi doonaa
guriga salaadda, laakiinse waxaad ka dhigteen god tuugo.[37*] [14] Waxaana macbudka ugu yimid
kuwa indha la' iyo kuwa luga la'; wuuna bogsiiyay. [15] Laakiin wadaaddada sare iyo culimadu

---

36 Sakariye 9:9

37 Ishacyaah 56:7 iyo Yerehmyaah 7:11

markay arkeen waxyaalaha la yaabka leh ee uu sameeyay iyo carruurta macbudka ka
dhawaaqaysa ee leh Hoosanna ha u ahaato Ina Daa'uud, way xanaaqeen. 16 Oo waxay ku
yidhaahdeen Ma maqlaysaa kuwanu waxay leeyihiin? Ciise ayaa ku yidhi, Haah, miyaydaan
weligiin akhriyin Afka carruurta yar yar iyo caano nuugyada ayaad Ammaan iigu diyaarisay[38*]?
17 Markaasuu iskaga tegay iyaga magaaladii dhinaca Beytaniya uga baxay, oo halkaasuu u
hoyday.

### Berde Aan Midho Dhalin

18 Aroortii markuu magaalada ku soo noqonayay, wuu gaajaysnaa. 19 Oo wuxuu arkay geed
berde ah oo jidka ku ag yaalla, markaasuu u yimid, oo caleemo keliya mooyee waxba wuu ka
waayay. Oo wuxuu ku yidhi, Hadda ka dib weligaa midho kaama soo baxaan oo isla markiiba
geedkii berdaha ahaa wuu engegay. 20 Xertii markay arkeen way yaabeen oo way is
waydiiyeen: Geedkii berdaha ahaa siduu isla markiiba u engegay? 21 Ciise ayaa u jawaabay oo
ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Haddaad rumaysad leedihiin oydaan shakiyaynin,
waxa geedka berdaha ahaa ku dhacay oo keliya ma samayn doontaan, laakiinse haddaad
buurtan ku tidhaahdaan, Ruq oo badda ku dhac way noqonaysaa. 22 Oo wax kasta ood salaad
ku waydiisataan idinka oo rumaysan waad heli doontaan.

### Ciise Amarkiisa Iyo Awooddiisa Ayaa Wax Laga Waydiiyay

23 Ciise macbudka ayuu galay oo intuu wax barayay waxaa u yimid wadaaddadii sare iyo
odayaashii shacabka, oo waxay ku yidhaahdeen Amarkeed waxan ku samaysaa? Oo yaa
amarkan ku siiyay? 24 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Aniguna su'aal baan idin
waydiinayaa. Marka Haddaad taas iiga jawaabtaan, aniguna waan idiin sheegi doonaa amarka
aan waxan ku sameeyo. 25 Biyogalintii Nebi Yaxye xaggay ka timid?[39*] Ma xagga jannada mise
xagga dadka? Markaasay wada hadleen iyaga oo leh Haddaynu nidhaahno, Xagga jannada
wuxuu inagu odhan doonaa, maxaad u rumayn waydeen? 26 Laakiin haddaynu nidhaahno,
Xagga dadka, shacabka ayaynu ka cabsanaynaa waayo, Yaxye inuu nebi ahaa ayay
aamminsanaayeen. 27 Markaasay Ciise u jawaabeen oo ku yidhaahdeen Ma garanayno.
Isaguna wuxuu ku yidhi, Aniguna idiin sheegi maayo amarka aan waxan ku samaynayo.

### Tusaale Ku Saabsan Laba Wiil

28 Maxay idinla tahay? Nin ayaa laba wiil lahaa. Marka Wuxuu u yimid kii hore oo wuxuu ku
yidhi, Wiilkaygiiyow, orod oo beerta canabka ah tag maanta oo ka shaqee. 29 Wuxuu ugu
jawaabay Ma tagayo laakiinse markaa dabadeed ayuu ka qoomamooday oo tegay.
30 Markaasuu kii labaad u yimid, oo sidii oo kale ku yidhi, Isaguna wuxuu ugu jawaabay oo ku
yidhi, Haye, waan tegayaa, sayidow, laakiin muuna tegin. 31 Marka Kee labadooda doonistii
aabbihii yeelay? Waxay yidhaahdeen, Kii hore. Ciise ayaa ku yidhi, Runtii waxaan idinku
leeyahay Canshuur qaadayaasha iyo kuwa jidhkooda ka ganacsada ayaa boqortooyada Eebbe
idinka hor geli doona. 32 Waayo, Nebi Yaxye ayaa jidka xaqnimada idiinla yimid oo waad

38 Sabuur 8:2

39 Farriintii Nebi Yaxye ma Eebbe bay ka timid mise isagaa jeebkiisa kala yimid?

rumayn waydeen isaga, laakiin canshuur qaadayaashii iyo kuwa jidhkooda ka ganacsada ayaa
isaga rumayay. Oo markaad taas aragteena maydaan qoomamaynin oo rumaynin.

### Tusaale Ku Saabsan Beer Canab Ah

[33] Tusaale kale maqla. Waxaa jiray nin reer madax u ah, oo beer canab ah beertay, oo intuu
ood ku wareejiyay oo god macsareed ka dhex qoday oo minaarad ka dhex dhisay ayuu
shaqaale beeralay ah u xil saaray ayuu dal kale u dhoofay. [34] Haddaba markay xilligii midhuhu
soo dhawaadeen ayuu shaqaalihiisii beertii u soo diray si ay midhihiisii u soo qaadaan.
[35] Deedna beeralaydii ayaa intay shaqaalihii qabteen mid ay garaacaan iyo mid ay dilaan iyo
mid ay dhagax kala daalaan ka dhigeen. [36] Haddana shaqaala kale oo kuwii hore ka badan,
ayuu diray, iyagiina sidaas oo kale ayay u galeen. [37] Ugu dambaystii wuxuu u soo diray wiilkiisa
isaga oo leh Mindhaa wiilkayga way xushmayn doonaan. [38] Laakiin beeralaydii markay wiilkii
arkeen, waxay isku yidhaahdeen Haa waakan kii dhaxalka lahaa, kaalaya aan dilnee oon
dhaxalkiisa qaadannee. [39] Marka intay qabteen oy dileen ayay beertii canabka ahayd
dibaddeeda ku tuureen. [40] Marka sayidkii beerta canabka markuu yimaado, muxuu
beeralaydaas ku samayn doonaa? [41] Waxay ku yidhaahdeen Nimankaa sharka leh si xun ayuu
u baabbi'in doonaa; beerta canabkana beeralay kale oo midhihiisa xilligooda u keena ayuu u
dhiiban doonaa. [42] Ciise wuxuu ku yidhi, iyaga Miyaydaan weligiin kitaabka ka akhriyin
Dhagaxii ay kuwa wax dhisa diideen ayaa rukunka aasaaska ah noqday. waana wax xagga
Rabbiga ka yimid, oo indhahayaga ka yaabiyay?[40*] [43] Sidaa darteed waxaan idinku leeyahay
Boqortooyada Eebbe waa la idinka qaadi doonaa, oo waxaa la siin doonaa dad midhihii
boqortooyada bixiya. [44] Oo kii dhagaxan ku dhaca, wuu jajabi doonaa, kii uu ku dhacana, wuu
burburin doonaa. [45] Wadaaddadii sare iyo Farrisiintii markay tusaalihiisa maqleen waxay
garteen inuu iyaga ka hadlayo. [46] Markay damceen inay xidhaanna dadka ayay ka cabsadeen,
waayo, waxay aamminsanaayeen inuu nebi yahay.

### Tusaale Ku Saabsan Casuumaddii Arooska

**22** Ciise ayaa mar kale Tusaale kula hadlay, oo wuxuu yidhi, [2] Boqortooyada jannadu waxay
u egtahay sidii boqor wiilkiisa aroos u dhigay. [3] Marka shaqaalihiisii ayuu diray si ay ugu
yeedhaan kuwii arooska lagu casuumay. laakiinse way diideen inay yimaaddaan. [4] Haddana
shaqaale kale ayuu diray oo wuxuu ku yidhi, Kuwii la casuumay waxaad ku tidhaahdaan
Casuumaddaydii waan diyaariyay, dibiyadaydii iyo xoolahaygii shishlaana waa la qalay, oo wax
walba waa diyaare arooska kaalaya. [5] Laakiin way fududaysteen, oo way iska tageen, mid
beertiisii aada iyo mid ganacsigiisii taga ayay noqdeen. [6] Kuwii soo hadhayna intay
shaqaalihiisii qabteen ayay caayeen oy laayeen. [7] Boqorkii markuu maqlay wuu cadhooday, oo
intuu askartiisii diray ayuu gacan ku dhiiglayaashii baabbi'iyay, magaaladoodiina dab
qabadsiiyay. [8] Markaasuu shaqaalihiisii ku yidhi, Arooskii waa diyaar, laakiinse kuwii lagu
casuumay mayna istaahilin. [9] Marka isgoysyada jidadka taga oo qof alla qofkaad heshaan
arooska ugu yeedha. [10] Deedna shaqaalihii intay isgoysyada tageen ayay kuwii ay heleen oo
dhan soo uruuriyeen, kuwii xumaa iyo kuwii wanaagsanaaba; gurigii arooskana marti baa
buuxisay. [11] Laakiin boqorkii markuu soo galay si uu martida u eego, wuxuu meesha ku arkay

40 Sabuur 118:22-23

nin aan labiskii arooska qabin[41*]. 12 Oo wuxuu ku yidhi, Saaxiib, adiga oon labiskii arooska
qabin sideed halkan u soo gashay? markaasuu shib iska yidhi. 13 Deedna boqorkii ayaa
shaqaalihiisii ku yidhi, Intaad lugaha iyo gacmahaba ka xidhaan dibada gudcurka ah ku tuura;
halkaasna waxaa jiri doona oohin iyo ilko jirriqsi. 14 Waayo, kuwo badan ayaa loo yeedhay,
laakiinse kuwo yar ayaa la doortay.

### In Canshuurta Kaysar La Siiyo

15 Marka Farrisiintii ayaa intay baxeen, ka wada hadlay siday hadalkiisa ugu shirqooli
lahaayeen. 16 Deedna xertoodii iyo Herodosiin ayay u soo direen oo waxay ku yidhaahdeen
Macallinow, waannu ognahay inaad xaq tahay, ood dadka jidka Eebbe si xaq ah u barto,
oodan ninna u eexanaynin, waayo, dadka darajadooda ma qiimaysid. 17 Marka noo sheeg
waxay kula tahay, Ma xalaal baa in canshuurta Kaysar la siiyo mise ma aha? 18 Laakin Ciise
shirqoolkoodii ayuu fahmay oo wuxuu ku yidhi, Maxaad ii jirrabaysaan labawejiilayaalyahow?
19 I tusa lacagta canshuurta. markaasay dinaar u keeneen. 20 Deedna wuxuu ku yidhi, Sawirkan
iyo fartan yaa iska leh? 21 Waxay ku yidhaahdeen Kaysar baa leh. Markaasuu ku yidhi, Marka
Kaysar siiya wuxuu Kaysar leeyahay, Eebbena siiya wuxuu Eebbe leeyahay. 22 Oo markay
taas maqleen, way yaabeen, wayna iska daayeen oo way ka tageen.

### Sarakicidda Kuwii Dhintay

23 Maalintaas waxaa u yimid Sadukiin, oo odhan jiray qiyaamo ma jirto, 24 Oo waxay ku
yidhaahdeen Macallinow, Muuse wuxuu yidhi, Hadduu nin dhinto isaga oon carruur lahayn waa
inuu walaalkii xaaskiisa dumaalo oo uu walaalkii farcan u reebo. 25 Marka waxaa nala joogay
toddoba walaalo ah. Kii ugu horreeyay ayaa guursaday, oo isaga oon ubad ka tagin ayuu
dhintay, xaaskiisiina walaalkii ayuu uga tagay. 26 Marka kii labaad, iyo kii saddexaad ilaa iyo kii
toddobaad sidaas oo kale ayaa ku wada dhacday. 27 Ugu dambaystii naagtiina way dhimatay.
28 Marka maalinta qiyaamada toddobadoodii kee bay xaas u noqon doontaa? Waayo, kulligood
way soo wada guursadeen iyada. 29 Deedna Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waad
khaldantihiin, waayo Kitaabka iyo awoodda Eebbe toona ma garanaysaan. 30 Waayo,
qiyaamada cidna ma guursato cidna looma guuriyo, laakiinse waxay noqon doonaan sida
malaa'igaha Eebbe ee jannada ku jira. 31 Laakiin arrinta qiyaamada miyaydaan akhriyin
waxyiga Eebbe idinkula hadlay markuu yidhi, 32 Anigu waxaan ahay Eebbaha Ibraahim iyo
Eebbaha Isxaaq iyo Eebbaha Yacquub[42*]? Isagu ma aha Eebbaha kuwa dhintay, laakiinse waa
Eebbaha kuwa nool. 33 Dadkii markay taas maqleen wax bariddiisa way ka yaabeen.

### Amarka Ugu Wayn

34 Laakiin Farrisiintii markay maqleen inuu Sadukiintii aamusiiyay ayay isu yimaaddeen. 35 Oo
mid sharci yaqaan ah ayaa isaga oo jirrabaya wax waydiiyay, oo wuxuu ku yidhi, 36 Macallinow,
sharciga amarkee ugu wayn? 37 Deedna wuxuu ku yidhi, isaga Waa inaad Rabbiga
Eebbahaaga ah ka jeclaato qalbigaaga oo dhan iyo naftaada oo dhan iyo caqligaaga oo dhan.
38 Kaas ayaa amarrada sharciga ugu wayn oo ugu horreeya. 39 Amarka labaad ee la midka

41 Labiska aroosku waa rumaysadka Sayid Ciise Masiix.

42 Baxniintii 3:6

ahna Waa inaad deriskaaga sida naftaada u jeclaato. 40 Labadan amar ayaa Sharciga oo dhan
iyo nebiyadaba soo koobaya.

### Masiixu Ma Ina Daa'uud Baa?

41 Markay Farrisiintu isu yimaaddeen Ciise ayaa su'aal waydiiyay. 42 Oo ku yidhi, Masiixa
maxaad ka aaminsantihiin? Waa Ina ayo? markaasay ku yidhaahdeen Waa Ina Daa'uud.
43 Wuxuu ku yidhi, Marka Daa'uud isaga oo Ruuxu ka dhex hadlayo siduu isaga Rabbi ugu
yeedhaa, 44 Isaga Oo leh Rabbigu wuxuu Rabbigayga ku yidhi, Midigtayda fadhiiso, Ilaa oon
cadowgaaga cagahaaga hoostooda geliyo. 45 Marka hadduu Daa'uud isaga Rabbi ugu
yeedhay, siduu wiilkiisa u noqon karaa? 46 Marka nin juuq yidhaahda ayaa la waayay,
maalintaa dabadeed ninna kuma dhicin inuu mar dambe wax waydiiyo.

### Ciise Culimadii Iyo Farrisiintii Ayuu Canaantay

**23** Dabadeed Ciise ayaa dadkii iyo xertiisii la hadlay. 2 Oo ku yidhi, Culimada iyo Farrisiintu
waxay ku fadhiistaan kursigii Muuse.[43*] 3 Marka wax walba oy idiin sheegaan inaad samaysaan
yeela, laakiinse siday u dhaqmaan ha kaga dayanina waayo waxaa ma yeelaan, mana
sameeyaan. 4 Waxay isku xidh xidhaan waxyaabo culculus oo waxay saaraan dadka
garbahooda, laakiin iyagu ma doonayaan inay fartooda ku dhaqaajiyaan. 5 Maxaa yeelay
waxay samaynayaan oo dhan waxay u sameeyaan inay dadku arkaan, cumaamado waawayn
iyo khamiiso dhaadheer ayay xidhaan. 6 Oo waxay jecelyihiin safka hore ee alla bariyada iyo
kuraasta hore ee sunagogyada. 7 Iyo in suuqyada lagu salaamo oy dadku ugu yeedhaan,
Macallinow. 8 Laakiin yaan la idiinku yeedhin, Macallin, waayo macallin kaliya ayaad leedihiin
idinkuna kulligiin walaalaad tihiin. 9 Ninna dhulka aabbe ha ugu yeedhina, waayo Aabbe kaliya
ayaad leedihiin waana ka jannada ku jira. 10 Yaan la idiinku yeedhin sayiddow, waayo, sayid
kaliya ayaad leedihiin waana Masiixa. 11 Laakiinse ka idiinku wayn waa inuu adeegihiina
ahaado. 12 Oo ku alla kii kor isu qaada hoosbaa loo dhigaa, kii hoos isu dhigana korbaa loo
qaadaa. 13 Laakiin halaag baa idinku dhacay culimada iyo Farrisiinta labawejiilayaasha ahow
waayo, boqortooyada jannada ayaad dadka ka xidhaan: oo idinkuna ma gashaan, kuwii geli
lahaana uma deysaan inay galaan. 14 Halaag baa idinku dhacay culimada iyo Farrisiinta
labawejiilayaasha ahow, waayo waxaad boobtaan cuntada carmallada, oo salaado dhaadheer
oo istustus ah ayaad tukataan sidaa darteed xisaab aad u daran ayaad la kulmi doontaan.
15 Halaag baa idinku dhacay culimada iyo Farrisiinta labawejiilayaasha ahow, waayo, badda iyo
barrigaba waxaad u wareegtaan inaad hal qof soo hanuunisaan oo markaad soo hanuunisaan
waxaad ka dhigtaan wiilka jahannabada in idinka laban laab ka badan. 16 Halaag baa idinku
dhacay, hoggaamiyayaalyahow indhaha la' oo leh, Ku alla kii macbudka ku dhaarta, ma
dembaabo, laakiin ku alla kii dahabka xaramka ku dhaarta, waa waajib waa inuu dhaartiisa
oofiyo. 17 Doqomayahow indhaha la' keebaa wayn, ma dahabka mise macbudka dahabka
qudduus ka dhiga? 18 Oo weliba waxaad tidhaahdaan Ku alla kii meesha allabariga ku dhaarta
ma dembaabo, laakiin ku alla kii ku dhaarta alla bariga dulyaalla waa waajib inuu dhaartiisa
oofiyo. 19 Indhoolayaalyahow, marka kee wayn. ma alla bariga mise meesha allabariga ee alla
bariga qudduus ka dhigta? 20 Marka kii meesha allabariga ku dhaarta, wuxuu ku dhaartay iyada

43 Nebi Muuse

iyo wixii dul saaranba. [21] Oo kii macbudka ku dhaarta, wuxuu ku dhaartay isaga iyo ka dhex
degenba. [22] Oo kii jannada ku dhaarta, wuxuu ku dhaartay carshiga Eebbe iyo ka ku fadhiyaba.

[23] Halaag baa idinku dhacay culimada iyo Farrisiinta labawejiilayaasha ahow, waayo,
Xawaashka iyo kabsarta iyo kamuunta ayaad toban meelood meel ka bixisaan, oo waxaad ka
tagteen wixii sharciga ugu cuslaa oo ah caddaalada iyo naxariista iyo amaanada. Waxay
ahayd inaad tanna samaysaan taana aydaan ka tagin. [24] Hoggaamiyayaalyahow indhaha la'a
oo kaneecada iska daahiriya awrkana liqa! [25] Halaag baa idinku dhacay culimada iyo Farrisiinta
labawejiilayaasha ahow, waayo, koobka iyo saxanka dushaad ka nadiifisaan iyada oy
gudohooda ka buuxaan dulmi iyo damac. [26] Farrisiyahow indhaha la'a, horta koobka gudaha ka
nadiifi si ay dushiisuna nadiif u ahaato. [27] Halaag baa idinku dhacay culimada iyo Farrisiinta
labawejiilayaasha ahow, waayo, waxaad u egtihiin xabaalo dusha laga nuuradeeyay oo dusha
ka qurux badan, laakiinse hoostooda ay ka buuxaan lafo dad dhintay iyo wasakh oo dhan.
[28] Sidaas oo kale idinku dusha waxaad dadka ugu muuqataan kuwo xaq ah, laakiinse gudaha
waxaa idinka buuxa labawejiilanimo iyo dembi. [29] Halaag baa idinku dhacay culimada iyo
Farrisiinta labawejiilayaasha ahow, waayo, xabaalaha nebiyada ayaad dhistaan oo qubuuraha
awliyada ayaad qurxisaan; [30] Oo waxaad tidhaahdaan Haddaanu waagii awowayaashayo joogi
lahayn, annagu maannan kala qayb galleen dilkii nebiyada. [31] Sidaas ayaad isugu marag
furtaan inaad tihiin farcankii kuwii nebiyada laayay. [32] Haddaba idinku dhammaystira miisaankii
awowayaashiin. [33] Abeesooyinyahow, dhasha jilbiska ah sideed uga badbaadii doontaan
ciqaabta jahanaba? [34] Sidaa darteed, waxaan idiin soo dirayaa nebiyo iyo kuwo xigmad leh iyo
culimo. Qaarkood waad dili doontaan oo iskutallaabta ayaad ku qodbi doontaan, qaarkoodna
sunagogyada ayaad ku dhex garaaci doontaan, oo magaalo ka magaalo ayaad eryan
doontaan. [35] Si uu dushiinna ugu soo dego dhiiggii xaqa ahaa ee dhulka ku daatay oo dhan,
lagasoo billaabo dhiiggii Haabiilkii xaqa ahaa ilaa iyo dhiiggii Sakariye ina Barakiyaskii aad ku
disheen meesha qudduuska ah iyo meesha allabariga inta u dhaxaysa. [36] Runtii waxaan idinku
leeyahay, Waxan oo dhan qarnigan ayay ku dul degi doona.

### Ciise Quddus Ayuu Ooyay

[37] Qudduseey, Qudduseey, nebiyada dishoy oo kuwa loo soo diro dhagaxaysoy! In badan
baan jeclaystay inaan carruurtaada u soo uruuriyo siday digaagaddu carruurteeda
baalasheeda hoostooda ugu soo uruuriso, laalkiinse idinku maydaan doonin. [38] Gurigiinnii waa
laydiin daayay isaga oo cidla ah. [39] Waayo, waxaan idinku leeyahay, hadda ka dib Ima arki
doontaan ilaa ood tidhaahdaan Waxaa barakaysan ka magaca Rabbiga ku imanaya.

### Ciise In Macbudka La Burburin Doono Ayuu Sii Sheegay

**24** Ciise ayaa macbudka ka baxay, oo isaga oo sii baxaya ayay xertiisii u timid si ay u tusaan
dhismaha macbudka. [2] Laakiin wuxuu ku yidhi, Waxan oo dhan ma aragtaan? Runtii waxaan
idinku leeyahay, dhagax dhagax dul saarraan loo dayn maayo oo waa la dumin doonaa. [3] Oo
markuu Buurta Saytuun fadhiistay, xertii ayaa keli ahaan ugu timid oo waxay ku yidhaahdeen
Noo sheeg Goormay waxaasu dhici doonaan, oo calaamadda imaatinkaaga iyo dhammaadka
dunidu maxay tahay? [4] Ciise ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Is ilaaliya oo yaan laydin
khiyaanin. [5] Waayo, qaar badan ayaa magacayga ku iman doona, oo waxay odhan doonaan:
Anigu waxaan ahay Masiixa, oo qaar badan ayay khiyaani doonaan. [6] Oo waxaad maqli

doontaan dagaallo iyo dagaallo hadalhayntood. Ha cabsanina, waayo, waxaasu waa inay
dhacaan, laakiin dhammaadku waa wali. 7 Maxaa yeelay, ummadba ummad bay ku kici
doontaa, oo boqortooyoba boqortooyo ayay ku kici doontaa, oo waxaa meelo kala duwan ka
dhici doona abaaro iyo dhulgariirro. 8 Waxan oo dhan waa billowga dhibaatooyinka. 9 Deedna
waa laydiin dhibi doonaa, waana laydin layn doonaa, oo magacayga aawadii ayay ummadaha
oo dhan idiin nebcaan doonaan. 10 Deedna kuwo badan ayaa iimaanka ka noqon doona, oo
midba mid buu shirqooli doonaa, wayna is nebcaan doonaan. 11 Waxaa iman doona nebiyo
badan oo been ah, oo kuwo badan bay khiyaani doonaan.[44*] 12 Dembiguna wuu fidi doonaa,
sidaa aawadeed kuwo badan jacaylkoodu wuu yaraan doonaa*[r]. 13 Laakiin qofkii ilaa iyo ugu
dambaysta adkaysta, ayaa badbaadi doona. 14 Oo Injiilkan boqortooyada ayaa dunida oo dhan
lagu wacdiyi doonaa si uu ummadaha oo dhan marag ugu noqdo, dabadeedna dhammaadka
ayaa iman doona. 15 Haddaba markaad aragtaan burburkii uu Nebi Daanyeel sii sheegay oo ka
dhacaya meesha qudduuska ah {qofkii akhriyaa ha garto.[45*] 16 Markaa kuwa Yahuudiya joogaa,
buuraha ha u carareen. 17 Qofkii guri dushiisa fuushanna yuuna u soo degin si uu wixii gurigiisa
ka yaalla u qaato. 18 Kii beerta joogaana yuuna dib u noqonin si uu dharkiisa u qaato. 19 Waa u
hoog maalmahaasu dumarka uurka leh iyo kuwa nuujinayaba. 20 Ku ducaysta inuuna
cararkiinnu wakhtiga qabowga ama Sabti noqonin. 21 Maxaa yeelay, waxaa jiri doona dhib
wayn oon horay loo arag tan iyo Bilowgii dunida ilaa iyo hadda, mana jiri doonto weligeed.
22 Oo haddaan wakhtigaa la soo gaabinin ninna ma badbaadeen, laakiinse kuwa la doortay
aawadood ayaa wakhtigaa loo gaabin doonaa. 23 Marka haddii laydin ku yidhaahdo Masiixii
waa kann ama wa kaas, ha rumaysanina. 24 Waayo, waxaa soo bixi doona Masiixyo been ah
iyo nebiyo been ah, oo waxay samayn doonaan calaamooyin waawayn iyo mucjisooyin la yaab
leh si ay xataa kuwa la doortay u khiyaanaan hadday u suurta gasho. 25 Bal eega, horaybaan
idiinku sii sheegay. 26 Marka hadday idinku yidhaahdaan Bal eeg, wuxuu joogaa baadiyaha, ha
u bixina. bal eega, wuxuu joogaa qolalka qarsoon, ha rumaysanina. 27 Waayo, sida hillaacu bari
uga yimaado oo galbeed u ifiyo oo kale ayuu imaatinka Wiilka Aadanuhu ahaan doonaa.
28 Meel alla meeshuu bakhtigu yaallo halkaas ayay gorgorradu isugu tagaan.

### Imaatinka Wiilka Aadanaha

29 Dhibaatada wakhtigaas dabadeed isla markaaba qorraxdu way madoobaan doontaa,
dayuxuna ma iftiimi doono, xiddiguhuna cirkay ka soo daadan doonaan, awoodda cirkana waa
la gilgili doonaa. 30 Markaasay cirka ka soo muuqan doontaa calaamadda Wiilka Aadanaha,
dabadeedna qabiilooyinka dhulka oo dhan ayaa barooran doonaan, oo waxay arki doonaan
Wiilka Aadanaha oo daruuraha cirka ku imanaya isaga oo xoog iyo ammaan wayn leh. 31 Oo
malaa'igihiisa oo buun waynn wata ayuu soo diri doonaa oo kuwa uu doortay ayay bari iyo
galbeed iyo koonfur iyo waqooyi, iyo cirka meesha ugu fog ilaa iyo meesheeda kale ka soo
uruurin doonaan. Soo Jeeda. 32 Marka geedka berdaha ah ku tusaala qaata. Markay laantiisu
curdanka tahay oy caleen soo bixiso, waxaad garanaysaan inuu xilligii roobku dhawyahay.
33 Idinkuna sidaas oo kale markaad waxan oo dhan aragtaan, garta inuu dhawyahay oo uu
albaabbada joogo. 34 Runtii waxaan idinku leeyahay, Qarniganu ma dhammaan doono ilaa oy
waxan oo dhan dhacaan. 35 Cirka iyo dhulkuba way dhammaan doonaan, laakiinse ereyadaydu
ma dhammaan doonaan

44 Jecaylka ay Masiixa iyo Farriintiisa u hayaan wuu yaraan doonaa.

45 Daanyeel 9:27; 11:31

### Maalinta Qiyaamada Iyo Saacaddeeda Ninna Ma Oga

[36] Laakiin maalintaas iyo saacaddaas ninna waxba kama oga, malaa'igaha jannada iyo Wiilka
toona ma oga, Aabbahay keliya mooyee. [37] Sidii wakhtigii Nuux oo kale ayuu imaatinka Wiilka
Aadanuhu ahaan doonaa. [38] Waayo, maalmahaas intuuna daadku imanin waxbay iska
cunayeen oy iska cabbayeen, oo way guursanayeen oo way isu guurinayeen ilaa iyo maalintuu
Nuux doonnida galay. [39] Mana ayna ogayn ilaa uu daadkii yimid oo uu kulligood wada qaaday,
sidaas oo kale ayuu imaatinka Wiilka Aadanuhu ahaan doonaa. [40] Markaas laba nin ayaa
beerta ku jiri doona, oo midbaa la qaadi doonaa, ka kalana waa laga tegi doonaa. [41] Laba
naagood oo dhagax wax ku shiidaya ayaa mid la qaadi doonaa, ta kalana waa laga tegi
doonaa. [42] Marka soo jeeda, waayo, maalinta uu Rabbigiinnu iman doono ma garanaysaan.
[43] Laakiinse tan ogaada, odayga reerku hadduu ogaan lahaa wakhtiga tuuggu imanayo, wuu
soo jeedi lahaa, oo ma ogolaadeen in gurigiisa la jabsado. [44] Sidaa darteed idinkuna diyaar
ahaada, waayo, saacad aydaan u malaynaynin ayuu Wiilka Aadanuhu iman doonaa.

### Tusaale Ku Saabsan Shaqaalaha Aan Aaminka Ahayn

[45] Marka waa kee adeegaha aaminka ah oo caqliga badan oo sayidkiisu dadka gurigiisa
mas'uul uga dhigay si uu wakhtiga ku habboon cuntada u siiyo? [46] Waxaa barakaysan
adeegahaas markuu sayidkiisu yimaado uu u imanayo isaga oo shaqadaas qabanaya. [47] Runtii
waxaan idinku leeyahay, Wuxuu leeyahay oo dhan ayuu isaga mas'uul uga dhigi doonaa.
[48] Laakiin hadduu adeegahaasu mid shar leh yahay oo uu is yidhaahdo Sayidkaygu wuu raagi
doona. [49] Oo uu billaabo inuu kuwii la shaqayn jiray garaaco oo uu sakhraamiinta wax la cuno
oo wax la cabbo. [50] adeegahaas sayidkiisu maalin uuna filaynin iyo saacad uuna ogayn ayuu
iman doonaa. [51] Oo labuu u kala goyn doonaa, oo labawejiilayaasha ayuu ku dari doonaa.
Halkaasna waxaa jiri doona oohin iyo ilko jirriqsis.

### Tusaalihii Tobanka Gabdhood Ee Bikrooyinka Ahaa

**25** Marka boqortooyada jannadu waxay u egtahay toban gabdhood oo bikrooyin ah oo intay
faynuusyadooda qaateen, u baxay inay ninka caruuska ah ka hor tagaan. [2] Shan ka mid ahu
doqomo ayay ahaayeen, shanna kuwo caqli badan. [3] Kuwii doqomada ahaa faynuusyoodii
ayay qaateen, laakiin saliid mayna qaadanin.[46*] [4] Kuwii caqliga lahaase faynuusyadoodii iyo
weelal saliid ku jirto ayay qaateen. [5] Laakiin markuu arooskii raagay way wada lulmoodeen oo
seexdeen. [6] Habeen badhkii ayay qaylo yeedhay Caruuskii wuu soo socdaay soo baxa oo ka
hor taga. [7] Markaasay bikradihii oo dhan wada kaceen oo faynuusyadoodii hagaajiyeen. [8] Kuwii
doqomada ahaa waxay kuwii caqliga lahaa ku yidhaahdeen Saliiddiinna wax naga siiya,
waayo, faynuusyadayo way demayaan. [9] Laakiin kuwii caqliga lahaa ayaa u jawaabay oo
waxay ku yidhaahdeen Maya, waaba intaasoy annaga iyo idinka nagu wada fillaaan waydaa;
laakiinse u taga kuwa saliidda iibiya oo ka soo iibsada. [10] Markay tageen si ay u soo iibsadaan,
caruuskii ayaa yimid, oo kuwii diyaarka ahaa ayaa guriga arooska la galay, albaabkiina waa la
xidhay. [11] Ka dibna bikradihii kale ayaa yimid oo waxay yidhaahdeen Sayidow, Sayidow, naga
fur. [12] Laakiin wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Anigu idinma

46 Gaas

garanayo. [13] Marka soo jeeda, waayo, ma garanaysaan maalinta ama saacadda uu wiilka aadanuhu iman doono.

### Tusaale Ku Saabsan Wakaaladda Ganacsi

[14] Boqortooyada Jannadu Waxay u egtahay nin dal kale u dhoofaya oo intuu shaqaalihiisii u yeedhay ayuu xoolihiisii ku wareejiyay. [15] Mid wuxuu siiyay shan garaan, midna laba, midna hal, Mid walba intay awooddiisu ahayd markaasuu dhoofay.[47*] [16] Isla markiiba kii shanta garaan helay ayaa tegay oo ku ganacsaday wuxuuna faa'iiday shan kale. [17] Sidaas oo kale kii labada helayna, laba kale ayuu faa'iiday. [18] Kii halka helayse wuu baxay oo intuu dhulka u qoday ayuu lacagtii sayidkiisa ku aasay. [19] Wakhti dheer dabadeed sayidkii shaqaalahaas ayaa yimid oo xisaabbiyay. [20] Kii shanta Talenti helay ayaa yimid oo shan kale ayuu keenay, oo wuxuu sayidkiisa ku yidhi, Sayidow, waxaad ii dhiibtay shan talenti oo shan kale ayaan ka faa'iiday. [21] Sayidkiisii ayaa ku yidhi, Si wanaagsan baad yeeshay, adeegayahow wanaagsan oo aaminka ah. Wax yar baad aamin ku ahayd, wax badan ayaanse madax kaaga dhigayaa. Farxadda sayidkaaga gal. [22] Kii labada talenti helayna isna wuu yimid oo wuxuu yidhi, Sayidow, waxaad ii dhiibtay laba talenti laba kale ayaan ka faa'iiday. [23] Sayidkiisii ayaa ku yidhi, Si wanaagsan baad yeeshay, adeegayahow wanaagsan oo aaminka ah. Wax yar baad aamin ku ahayd, wax badan baanse madax kaaga dhigayaa. Farxadda sayidkaaga gal. [24] Kii halka talenti helayna wuu u yimid oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, waan ku garanayay inaad nin qallafsan tahay ood wax ka goosato meel aadan wax ku beeran ood wax ka uruursato meel aadan wax ku firdhin. [25] Marka waan cabsaday, oo intaan tegay ayaan talentikaagii dhulka ku aasay, waana kan. [26] Deedna sayidkiisii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Adeegayahow sharka leh oo caajislowga ah, waad ogayd inaan wax ka goosto meel aanan wax ku beeran, oon wax ka uruursado meel aanan wax ku firdhin. [27] Marka waxaa ahayd inaad lacagtayda bangilayda u dhiibto si markaan soo noqdo aan waxaygii iyo faa'iido u helo. [28] Marka talentiga ka qaada oo u dhiiba ka tobanka talenti haya. [29] Waayo, mid walba oo wax haysta waa loo siyaadin doonaa, oo wax badan ayuu heli doonaa, kii aan waxba haysanna waa laga qaadi doonaa xataa wuxuu haysto. [30] Adeegahan aan wax tarka lahayna dibadda gudcurka ah ku tuura. Halkaasna waxaa jiri doonta oohin iyo ilko jirriqsi.

### Maalinta Qiyaamada

[31] Markuu Wiilka Aadanuhu ammaantiisa ku yimaado, isaga iyo malaa'igaha oo dhan, carshiga ammaantiisa ayuu ku fadhiisan doonaa. [32] Ummadaha oo dhanna hortiisay ku soo uruuri doonaa, markaasuu sida adhijirku idaha iyo riyaha u kala sooco oo kale u kala sooci doonaa. [33] Idaha wuxuu joojin doonaa midigtiisa, riyahana bidixdiisa. [34] Markaasuu Boqorku kuwa midigtiisa jooga ku odhan doonaa Kaalaya, kuwiinna Aabbahay barakeeyayow, oo boqortooyadii tan iyo Bilowgii dunida laydiin diyaariyay dhaxla. [35] Waayo, waan gaajooday oo cuntaad i siiseen, oo waan harraaday oo waad i waraabiseen, qariib baan ahaa oo waad i soo dhawayseen. [36] Waan qaawanaa oo dhar baad i huwiseen, waan bukay oo waad i soo booqateen, xabsi baan ku jiray oo waad ii timaaddeen. [37] Markaasay kuwa xaqa ahu u jawaabi doonaan iyaga oo leh Sayidow, goormaannu ku aragnay adiga oo gaajaysan oo aannu cunto ku siinnay, ama adiga oo harraadan oo aannu ku waraabinnay? [38] Oo goormaannu ku aragnay

47 Talantigu wuxuu u dhigmayay toban kun oo doolar oo maanta joogta.

adiga oo qariib ah oo aannu ku soo dhawaynay ama adiga oo qaawan oo aannu dhar ku huwinnay?
[39] Oo goormaannu ku aragnay adiga oo buka ama adiga oo xabsi ku jira oo aannu ku soo
booqannay? [40] Markaasuu Boqorku ugu jawaabi doonaa oo ku odhan doonaa Runtii waxaan
idinku leeyahay, wax kasta oo aad walaalahaygan yar yar u samayseen anigaad ii samayseen.
[41] Markaasuu kuwa bidixdiisa jooga ku odhan doonaa Iga taga kuwiinan sharka leh, oo dabka
weligii ah oo Iblays iyo malaa'igihiisa loo diyaariyay gala. [42] Waayo, waan gaajooday, oo
maydaan cunto isiinin, oo waan harraaday oo maydaan i waraabinin. [43] Qariib baan ahaa, oo
maydaan isoo dhawaynin, oo waan qaawanaa, oo dhar maydaan i huwinin, oo waan bukay oo
xabsibaan ku jiray mana aydaan isoo booqanin. [44] Iyaguna markaasay ugu jawaabi doonaan
oo ku odhan doonaan Sayidow, goormaannu ku aragnay adiga oo gaajaysan ama harraadan
ama qariib ah ama qaawan ama buka ama xabsi ku jira oo aannu kuu adeegi waynay?
[45] Deedna wuxuu ugu jawaabi doonaa oo ku odhan doonaa Runtii waxaan idinku leeyahay,
wax kasta ood mid kuwan yar yar ka mid ah u samayn waydeen, anigaad ii samayn waydeen.
[46] Kuwaasu waxay geli doonaan ciqaabta weligeed ah, kuwa xaqa ahuna waxay geli doonaan
nolosha weligeed ah.

### Shirqoolkii La Damacsanaa In Ciise Lagu Dilo

**26** Markuu Ciise hadalladan oo dhan dhammeeyay, ayuu xertiisii ku yidhi, [2] Waxaad ogtihiin
inay laba maalmood dabadeed Ciiddii Kormaridda tahay oo Wiilka Aadanaha waa la qaban
doonaa si iskutallaabta loogu qodbo. [3] Marka wadaaddadii sare iyo odayaashii shacabka ayaa
wadaadkii sare oo Kayafas la odhan jiray gurigiisa barxaddiisa isugu tegay. [4] Oo waxay ka
wada hadleen siday Ciise u qaban lahaayeen oy shirqool ugu dili lahaayeen. [5] Laakiin waxay
yidhaahdeen Ciiddu hayna dhaafto si uuna dadku rabshad u kicinin.

### Ciise Magaalada Beytaniya Ayaa Lagu Subkay

[6] Ciise markuu Beytaniya joogay ee uu guriga Simoonkii baraska qabay ku jiray. [7] Waxaa u
timid naag cadar qaali ah dhalo ku wadata oo isaga oo cuntada u fadhiya ayay madixiisa ku
shubtay. [8] Laakiin xertu markay arkeen, way cadhoodeen oo waxay yidhaahdeen
Khasaarahanu waa maxay? [9] Waayo cadarkan lacag badan oo masaakiinta la siiyo ayaa lagu
iibin karay. [10] Ciise markuu gartay ayuu ku yidhi, Maxaad naagta u dhibaysaan? Wax
wanaagsan bay ii samaysay. [11] Waayo, masaakiintu mar walba way idinla joogaan, balse
aniguse mar walba idinlama joogo. [12] Si ay aaskayga iigusii diyaariso ayay cadarkan jidhkayga
ugu shubtay. [13] Runtii waxaan idinku leeyahay, Dunida oo dhan meel kasta oo Injiilkan lagu
wacdiyo, waxay samaysay ayaa la sheegi doonaa oo lagu xusuusan doonaa iyada.

### Khiyaanadii Yuudas

[14] Marka mid laba iyo tobankii ka mid ahaa oo Yuudas Iskariyod la odhan jiray ayaa intuu
wadaaddada sare u tegay. [15] Ku yidhi, Maxaad i siinaysaan Aniga ayaa gacanta idiin soo gelin
isagee? Markaasay sodon lacag ah siiyeen. [16] Ka dibna saacaddaas laga billaabo wuxuu
raadiyay fursad uu ugu soo dhiibo.

## Cashadii Sagootinta

[17] Maalintii ugu horraysay ee Ciidda furinka aan khamiirka lahayn ayay xertii Ciise u
yimaaddeen oo waxay ku yidhaahdeen Xaggeennu cashada Ciidda Kormaridda kuugu
diyaarinaa? [18] Wuxuu yidhi, Magaalada gala oo hebel u taga oo waxaad ku tidhaahdaan,
Macallinkii wuxuu leeyahay Wakhtigaygii wuu dhawyahay oo gurigaaga ayaan cashada Ciidda
Kormaridda aniga iyo xertaydu ku samaysan doonnaa. [19] Xertiina waxay samayeen siduu Ciise
ku amray oo cashadii Ciidda Kormaridda ayay diyaariyeen. [20] Markii makhribkii la gaadhay
isaga iyo laba iyo tobankii xerta ahaa ayaa cunto u fadhiistay. [21] Oo iyaga oo cuntadii afka ku
haya ayuu ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Midkiin ayaa i shirqooli doona.
[22] Markaasay aad iyo aad u murugoodeen oo waxay billaabeen inuu mid walba ku yidhaahdo
Sayidow, ma anigaa? [23] Wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Ka saxanka gacanta igula jira ayaa i
khiyaani doona. [24] Wiilka Aadanuhu wuu baxayaa, siday u qorantahay, laakiinse waxaa
halaagmay ninka Wiilka Aadanaha shirqoola. Waxaa ninkaas u wanaagsanaan lahayd inuusan
dhalanba. [25] Yuudas oo ah kii shirqoole ayaa ku yidhi, Ma anigaa Sayidow? Wuxuu ku yidhi,
Waad tidhi.

## Cashadii Rabbiga

[26] Oo intay wax cunayeen, Ciise ayaa intuu furin qaaday oo ku duceeyay oo jejebiyay xertiisa
siiyay oo ku yidhi, Qaata oo cuna, waa jidhkaygiiye. [27] Haddana koobkii ayuu qaaday oo intuu
mahadnaqay ayuu siiyay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, Kulligiin cabba. [28] Maxaa yeelay kanu waa
dhiiggayga axdiga cusub oo kuwo badan dembi dhaafkooda aawadii loo daadiyay. [29] Laakiin
waxaan idinku leeyahay Hadda ka dib anigu kama cabbi doono midhahan geedka canabka ah
ilaa iyo maalinta aan iyaga oo cusub boqortooyada Aabbahay dhexdeeda idin kula cabbi
doono. [30] Deedna intay qasiido ammaan ah qaadeen ayay Buurta Saytuun u keceen.

## Ciise Wuxuu Sii Sheegay Inay Xertiisu Ka Tegi Doonaan

[31] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Caawa kulligiin waad iga wada shakiyi doontaan, waayo, waxaa
qoran Adhijirkaan dili doonaa idaha adhiguna way kala firxan doonaan.[48*] [32] Laakiin markaan
kuwii dhintay ka soo sarakoco dabadeed ayaan Galili idiinka sii horrayn doonaa. [33] Butros ayaa
u jawaabay oo ku yidhi, Hadday kullgood kaa wada shakiyaan anigu weligay kaa shakiyi
maayo. [34] Ciise ayaa ku yidhi, Runtii waxaan kugu leeyahay, habeenkan Caawa intuuna diiqu
ciyin, saddex jeer ayaad i dafiri doontaa. [35] Butros ayaa ku yidhi, Xataa hadday igu kalifto inaan
kula dhinto marnaba ku dafiri maayo. xertii oo dhanna sidaasay wada yidhaahdeen.

## Ciise Wuu Tegay Oo Wuxuu Ku Tukaday Beertii Getsemane

[36] Marka Ciise meel Getsemane la yidhaahdo ayuu iyaga la tagay oo wuxuu xertii ku yidhi,
Halkan fadhiista intaan halkaas ku soo tukanayo. [37] Oo wuxuu kaxaytay Butros iyo labadii wiil
ee Sebedi, oo wuxuu billaabay inuu murugoodo oo tiiraanyoodo. [38] Deedna wuxuu ku yidhi,
iyaga Naftaydu aad bay u murugaysan tahay ilaa iyo heer dhimasho; halkan jooga oo ila soo
jeeda. [39] Oo intuu in yar ka durkay ayuu wejiga u dhacay oo tukaday isaga oo leh Aabbow,
hadday suurta gal tahay koobkan i dhaafi, laakiinse yayna noqonin doonistayda ee
doonistaada ha noqoto. [40] Xertii ayuu u yimid, oo wuxuu arkay iyaga oo hurda, oo wuxuu

48 Kitaabka Sakariye 13:7

Butros ku yidhi, War Waa idin sidee! ma kari waydeen inaad hal saac ila soo jeeddaan? 41 Soo
jeeda oo tukada si aan la idiin jirrabin. Ruuxu waa diyaar, laakiin jidhku wuu itaal daranyahay.
42 Haddana mar labaad ayuu tegay oo tukaday isaga oo leh Aabbow, haddayna suurta gal
ahayn in aan koobkan cabbo mooyee, doonistaada ha noqoto. 43 Mar kale ayuu yimid oo
wuxuu arkay iyaga oo hurda, waayo, indhahoodu lulmay la cuslaayeen. 44 Wuuna iska daayay
oo intuu haddana ka tegay, ayuu mar saddexaad tukaday isaga oo haddana hadalkii oo kale
ku hadlaya. 45 Deedna xertii ayuu u yimid oo ku yidhi, Hadda seexda oo nasta. waayo
saacaddii way dhawdahay, Wiilka Aadanaha dembiilayaasha ayaa lagu shirqooli doonaa.
46 Kaca aan tagnee. bal eega, kii i shirqooli lahaa wuu soo dhawyahaye.

### Qabashadii Ciise

47 Marka isaga oon hadalkii dhammaynin ayuu Yuudas oo laba iyo tobanka ka mid ahaa
yimid, isaga iyo dad fara badan oo seefo iyo ulo wata. kuwaas oo wadaaddada sare iyo
odayaasha shacabka ka yimid. 48 Kii shirqooli lahaa ayaa calaamad siiyay oo ku yidhi, Kaan
dhunkan doono weeyee qabta. 49 Isla markiiba Ciise ayuu u yimid oo ku yidhi, Waa nabad,
Macallin; wuuna dhunkaday. 50 Deedna Ciise ayaa ku yidhi, Waxaad u timid inaad samayso
samee saaxiib? Markaasay ku soo dhaqaaqeen, oo Ciise ayay gacanta ku dhigeen oo
qabteen. 51 Marka mid ka mid ah kuwii Ciise la joogay ayaa gacanta la soo booday oo intuu
toorri iska jaray ayuu wadaadkii sare adeegihiisa ku dhuftay oo dhegta ka gooyay. 52 Marka
Ciise ayaa ku yidhi, War toorridaada galkeeda ku celi, waayo, kuwa toorri qaadta oo dhan toorri
bay ku dhammaan doonaan. 53 Ma waxaad u malayn inaanan Aabbahay baryi karin oo uusan
laba iyo toban guuto oo malaa'iga ah hadda ii soo diri karin? 54 Haddaba siduu kitaabka leh
waa inay sidan wax u dhacaan u dhici karaan? 55 Saacaddaas lafteeda ayuu Ciise dadka ku
yidhi, Ma waxaad iila soo baxdeen seefo iyo ulo si aad i qabataan sidii anigoo tuug ah? Maalin
walbaba macbadkaan idin la fadhiyi jiray oon wax ku bari jiray, mana aydaan iqaban. 56 Laakiin
waxan oo dhan waxay u dhaceen si wixii ay kutubtii nebiyadu sii sheegeen uu u dhoco.
Markaasay xertii oo dhan ka wada tageen oo carareen.

### Ciise Wadaadka Sare Hortiisaa Ayaa Maxkamad Lagu Saaray

57 Kuwii Ciise qabtay waxay u geeyeen wadaadkii sare ee Kayafas, oy culimada iyo
odayaashu kulan la lahaayeen. 58 Deedna Butros ayaa meel fog ka soo daba galay ilaa iyo
barxadda guriga wadaadka sare, oo intuu soo galay ayuu askartii gaadhka ahayd la fadhiistay
si uu u ogaado siduu xaalku noqonayo. 59 Wadaaddadii sare iyo shirkii oo dhanna waxay
doonayeen markhaati been ah oo Ciise ku marag fura si ay u dilaan. 60 Laakiin way heli
waayeen, in kastoy markhaatiyayaal badan oo been ahu yimaaddeen. ugu dembaystii laba nin
ayaa yimid. 61 Oo waxay yidhaahdeen Ninkanu wuxuu yidhi, Waxaan awoodaa inan macbudka
Eebbe dudumiyo oon saddex maalmood ku dhiso. 62 Markaasuu wadaadkii sare istaagay oo ku
yidhi, Miyaadan wax jawaab ah odhanaynin? Kuwanu waxay kugu markhaatifurayaan waa
maxay? 63 Laakiin Ciise wuu iska aamusay. deedna wadaadkii sare ayaa ku yidhi, Eebbaha
nool baan kugu dhaariyaye haddaad Masiixa Wiilka Eebbe tahay noo sheeg. 64 Ciise ayaa ku
yidhi, Waad tidhi Hase ahaatee waxaan idinku leeyahay, Hadda ka dib waxaad arki doontaan
Wiilka Aadanaha oo midigta xoogga Eebbe fadhiya oo daruuraha cirka ku imanaya.
65 Markaasuu wadaadkii sare dharkiisii jeexjeexay isaga oo leh Gaalnimo ayuu ku hadlay.
Maxaynu markhaatiyayaal dheraad ah uga baahannahay? hadda waad maqasheen
gaalnimadiisee. 66 War Maxay idinla tahay? Waxay ugu jawaabeen oo ku yidhaahdeen in la dilo

ayuu mudanyahay. 67 Deedna wejigay candhuuf kaga tufeen oo way garaaceen. Qaarna intay
dhurbaaxeen. 68 Ayay ku yidhaahdeen Noo sheeg Masiixow yaa kugu dhuftay?

### Butros Oo Ciise Dafiray

69 Marka Butros oo barxadda dibadda ah fadhiya ayay gabadh shaqaale ahu u timid oo
waxay ku tidhi Adiguna Ciisihii reer Galili ayaad la jirtay. 70 Markaasuu dhammaantood ku hor
dafiray oo wuxuu ku yidhi, Anigu waxaad ka hadlaysaan ma garanayo. 71 Markuu dibadda u
baxayna mid kale ayaa aragtay, oo waxay kuwii halkaa joogay ku tidhi Kanna Ciisihii reer
Naasared ayuu la socday. 72 Haddana dhaar ayuu ku dafiray oo wuxuu yidhi, Ninkaa ma
garanayo. 73 Waxoogaa yar dabadeedna kuwii Ag taagnaa ayaa u yimid oo waxay Butros ku
yidhaahdeen Waa run, adiguna iyagaad ka mid tahay, waayo, lahjadaada ayaa ku
caddaynaysa. 74 Marka wuxuu billaabay inuu is habaaro oo ku dhaarto inuuna ninkaa
garanaynin. Isla markiiba diiqii baa ciyay. 75 Deedna Butros wuxuu xusuustay hadalkii Ciise ku
yidhi, Intuuna diiqu ciyin saddex jeer ayaad i dafiri doontaa. Ka dibna intuu baxay ayuu aad u
ooyay.

### Ciise Bilaatos Ayaa Loo Geeyay

**27** Aroor hore ayay wadaaddadii sare iyo odayaashii shacabka oo dhan ka shireen siday
Ciise u dili lahaayeen. 2 Deedna intay xidh xidheen ayay kaxeeyeen oo Bilaatoskii
gudoomiyaha ahaa u dhiibeen.

### Dhimashadii Yuudas

3 Marka Yuudaskii shirqoolay, markuu arkay in la xukumay, ayuu ka qoomameeyay, oo
soddonkii lacagta ahaa ayuu wadaaddadii sare iyo odayaasha u celiyay. 4 Oo wuxuu ku yidhi,
Waan dembaabay markaan qof aan waxba galabsan idiin gacan galiyay. Laakiin waxay ku
yidhaahdeen Maxaa naga galay yeelkaa? 5 Markaasuu intuu lacagtii macbudka gudihiisa ku
daadiyay iska tegay, oo is deldelay. 6 Deedna wadaaddadii sare ayaa lacagtii qaaday oo waxay
yidhaahdeen Xalaal ma aha in khasnadda qudduuska ah lagu rido, waayo, waa qiima dhiig.
7 Markaasay ka wada hadleen oo waxay ku iibiyeen dhulka dheriyo sameeyaha si ajinabiga
loogu aaso. 8 Sidaa darteed ilaa iyo maanta dhulkaas waxaa loogu yeedhaa dhulkii dhiigga.
9 Marka waxyigii Nebi Yeremyaah loo waxyooday ayaa xaqiiqoobay markuu yidhi, Waxay
qaadeen soddonkii lacagta ahaa oo qiimihii ay reer bani Israa'iil isaga ku qiimeeyeen ahaa.
10 Oo waxay ku bixiyeen dhulka dheriyo sameeyaha siduu Rabbigu iigu amray.[49*]

### Bilaatos Wuxuu Su'aalo Waydiiyay Ciise

11 Ciise wuxuu hortagay guddoomiyihii, oo guddoomiyaha ayaa wax waydiiyay oo ku yidhi,
Ma boqorkii Yuhuuddaad tahay? Ciise ayaa ku yidhi, Waa sidaad u tidhi. 12 Deedna markay
wadaaddadii sare iyo odayaashii dacweeyeen, wuu iska aamusay. 13 Marka Bilaatos ayaa ku
yidhi, miyaadan maqlaynin waxan oo markhaati ah oo kugu marag furaya? 14 Oo wax jawaab
ah muuna bixinin, xataa eray kaliya sidaa darteed guddoomiyihii ayaa aad ula yaabay. 15 Marka
waxaa guddoomiyaha caado u ahayd Ciidda inuu maxbuuska ay shacabku doonayaan u sii

49 Sakariye 11:12-13

daayo. 16 Waxayna lahaayeen maxbuus caan ah oo la odhan jiray Baraabbas. 17 Deedna
markay isu yimaaddeen Bilaatos ayaa ku yidhi, keed doonaysaan inaan idiin sii daayo:
Barbaabbas mise Ciisaha Masiixa la yidhaahdo? 18 Waayo, wuxuu ogaa inay hinaase ugu soo
dhiibeen. 19 Markuu kursiga garsoorka ku fadhiistay xaaskiisa ayaa farriin u soo dirtay oo
waxay ku tidhi War ninkaas xaqa ah arrintiisa faraha ha la galin, waayo, maanta aniga oo aad
uga xanuusanaya isaga ayaan ku riyooday. 20 Laakiinse wadaaddadii sare iyo odayaashu
waxay dadka ku qanciyeen inay Baraabbas waydiistaan, Ciisena la dilo. 21 Guddoomiyihii ayaa
waydiiyay Labadooda keed doonaysaan inaan idiin sii daayo? Waxay yidhaahdeen Baraabbas.
22 Marka Bilaatos ayaa ku yidhi, Marka maxaan Ciissaha Masiix la yidhaahdo ku sameeyaa?
Kulligood waxay wada yidhaahdeen, Iskutallaabta ha lagu qodbo. 23 Wuxuu yidhi, Waayo, waa
maxay dembiga uu sameeyay? Markaasay kor u sii qayliyeen oo yidhaahdeen Iskutallaabta ha
lagu qodbo. 24 Bilaatos markuu arkay inuusan waxba ka qaban karin oy rabshado kacayaan,
ayuu intuu biyo qaatay oo dadka hortooda ku fara xashay yidhi, Anigu ninkan xaqa ah
dhiiggiisa bari baan ka ahay idinkuse sidaad doonaysaan yeela. 25 Marka dadkii oo dhan ayaa
ku jawaabay: Dhiiggiisu annaga iyo carruurtayada dushayada ha ahaado. 26 Deedna
Baraabbas ayuu u sii daayay, Ciisena intuu garaacay ayuu amar ku bixiyay in iskutallaabta
lagu qodbo.

## Ciise Waa Lagu Jeesjeesay

27 Marka askartii guddoomiyuhu Ciise waxay geeyeen xaruntii gobolka, oo askartii oo dhan
ayay isugu keeneen isaga. 28 Oo intay dharka ka saareen ayay dhar guduudan u geliyeen.
29 Taaj qodax ahna way u sameeyeen oo madaxay u saareen, ulna gacanta midig bay u
geliyeen, oo intay hortiisa jilba joogsadeen oo ku majaajiloodeen ayay ku yidhaahdeen Nabadu
ha kuu ahaato Boqorka Yuhuuddow. 30 Markaasay candhuuf ku tufeen oo intay ushii ka
qaadeen ayay madaxa kaga dhufteen. 31 Oo markay ku majaajuloodeen dabadeed ayay dharkii
guduudnaa ka bixiyeen oo dharkiisii u geliyeen, deedna way kaxeeyeen si iskutallaabta loogu
qodbo.

## Ciise Isku Tallaabtaa Lagu Qodbay

32 Markay soo baxeen, waxay arkeen nin reer qayrawaan ah oo Simoon la odhan jiray, oo
waxay ku qasbeen inuu iskutallaabtii Ciise qaado. 33 Oo markay meel Golgota la yidhaahdo oo
caan ku ah Meeshii dhakada yimaaddeen. 34 Waxay siiyeen khamri xamayti lagu daray si uu u
cabbo, oo markuu dhadhamiyay wuu diiday inuu cabbo. 35 Deedna markay iskutallaabta ku
qodbeen, dharkiisii ayay qaybsadeen, wayna u qori tuurteen si uu waxyigii nebiga loo
waxyooday u xaqiiqoobo Dharkaygii bay qaybsadeen oo maryahaygii bay u qori tuurteen.[50*]
36 Deedna intay halkaa fadhiisteen ayay waardiye ka qabteen. 37 Oo waxay madixiisa korkiisa
ku dhajiyeen boodh ay ku qoreen dacwaddii lagu eedeeyay oo leh KANU WAA CIISE
BOQORKA YUHUUDDA. 38 Marka waxaa iskutallaabta lagu la qodbay laba tuug, mid midigta,
midna bidixda. 39 Kuwii ag marayayna way caayeen, oo intay madaxooda luleen. 40 Ayay
yidhaahdeen Kaaga macbudka duminaya ee saddex maalmood ku dhisayow isbadbaadi, oo
haddaad Wiilkii Eebbe tahay iskutallaabta ka soo deg. 41 Wadaaddadii sarana sidaas oo kalay
ugu majaajiloodeen, iyaga iyo culimada iyo odayaashuba, oo waxay yidhaahdeen: 42 Kuwa
kalena wuu badbaadiyay naftiisana ma badbaadin karo! Hadduu Boqorka Israa'iil yahay hadda

50 Sabuuradda 22.18

iskutallaabta ha ka soo dego, annaguna waannu rumayne. 43 Eebbe buu isku halleeyay;
hadduu doonayo hadda ha bixiyo, waayo wuxuu yidhi, Wiilkii Eebbe baan ahay. 44 Tuugtii
iskutallaabta lagu la qodbayna sidoo kale ayay u caayeen.

### Ciise Wuu Dhintay

45 Marka lixdii saac[51*] ilaa iyo sagaalkii saac[52*] dhulka oo dhan ayaa madoobaaday. 46 Oo
markay sagaal saac gaadhay ayuu Ciise cod dheer ku dhawaaqay oo yidhi, Eloy, Eloy, lama
sabakhtani, oo macneheedu yahay Eebbeow, Eebbeow, maxaad ii dayrisay? 47 Kuwii halkaas
joogay qaarkood ayaa markay maqleen, yidhi, Ilyaas buu u yeedhayaa. 48 Marka midkood ayaa
orday oo intuu isbuunyo khal ka soo buuxiyay ayuu siiyay si uu u cabbo. 49 Qaar kalena waxay
yidhaahdeen Bal aynnu aragnno inuu Ilyaas u yimaado oo isaga badbaadiyo. 50 Deedna Ciise
intuu mar kale cod dheer ku dhawaaqay ayay naftii ka baxday. 51 Oo bal eeg, daahi macbudka
ayaa kor ilaa iyo hoos laba u kala dillaacay, dhulkiina wuu gariiray, dhagaxyadiina way kala
dildillaaceen. 52 Xabaalihiina way furmeen, oo qudduusiin badan oo dhintay ahaa la sare
kiciyay. 53 Sarakiciddiisa dabadeed ayayna xabaalaha ka soo baxeen, oo waxay galeen
magaalada qudduuska ah, oo dad fara badan ayay u muuqdeen. 54 Sarkaalkii iyo gaadhkii la
joogay ee Ciise ilaalinayayna markay dhul gariirkii iyo wixii dhacay arkeen, aad bay u
cabsadeen oo waxay yidhaahdeen Runtii kanu wiilkii Eebbe ayuu ahaa. 55 Waxaana halkaa
joogay dumar badan, oo meel fog ka eegayay, kuwaas oo Ciise ka soo raacay Galili oo isaga u
adeegi jiray. 56 Oo waxaa ka mid ahaa Maryamadii reer Magdala, iyo Maryama Yacquub iyo
Yoose hooyadood, iyo wiilashii Sebedi hooyadood.

### Ciise Waa La Aasay

57 Galabnimadii waxaa yimid nin reer Arimataya ah oo hodan ah oo Yuusuf la odhan jiray, oo
xerta Ciise ka mid ahaa. 58 Oo intuu Bilaatos u tagay ayuu maydkii Ciise ka codsaday.
Markaasuu Bilaatos amar ku bixiyay in la siiyo. 59 Yuusuf intuu maydkii qaaday ayuu kafan
nadiif ah ku duub duubay, 60 Oo wuxuu galiyay xabaal cusub oo dhagax ka qodan, oo intuu
xabaasha afkeeda dhagax wayn ku soo giraangiriyay ayuu iska tegay. 61 Waxaana halkaa
joogay oo xabaasha horteeda fadhiistay Maryama magdala iyo maryamadii kale. 62 Marka
maalintii dembe oo ku xigtay Maalintii Diyaar garowga wadaaddadii sare iyo Farrisiintii waxay u
wada yimaaddeen Bilaatos. 63 Oo waxay ku yidhaahdeen Sayidow, waxaannu xusuusannay in
khaa'inkaasu markuu noolaa yidhi, Saddex maalmood dabadood ayaan soo sarakacayaa.
64 Marka amar ku bixi in xabaasha ilaa iyo maalinta saddexaad aad loo ilaaliyo, waaba intaasoy
xertiisu intay habaynkii yimaaddaan oy xadaan dadka ku dhahaan: Kuwii dhintay ayuu ka soo
sarakacay, oy khiyaanada dembe ka kasii darriataa tii hore. 65 Bilaatos wuxuu ku yidhi, Gaadh
baad leedihiine taga oo intii awooddiina ah ilaaliya. 66 Deedna way tageen, oo xabaashii
ammaankeeda ayay aad u adkeeyeen, dhagixiina intay shaambadeeyeen ayay gaadh dul
dhigeen.

---

51 12 duhurnimo

52 Saddexdii galabnimo

## Ciise Wuu Ka Soo Sarakacay Kuwii Dhintay

**28** Sabtidii dabadeed markuu waagu beryay maalintii ugu horraysay ee toddobaadka,
Maryama Magdala iyo Maryamadii kale ayaa tegay oo xabaashii ayay yimaaddeen. 2 Oo bal
eeg, waxaa dhacay dhulgariir wayn, waayo, malagii Rabbiga ayaa intuu samada ka soo degay
oo dhagixii giraan giriyay ku dul fadhiisatay.[53*] 3 Midabkiisu wuxuu ahaa sida hillaac oo kale
dharkiisuna wuxuu u caddaa sida barafka. 4 Oo ilaaladii cabsibay la gariireen, oo sidii meydad
oo kale ayay noqdeen. 5 Marka malagii ayaa dumarkii ku yidhi, Ha cabsanina, waayo, waxaan
ogahay inaad Ciisihii iskutallaabta lagu qodbay raadinaysaan. 6 Halkan ma joogo, waayo, wuu
sarakacay siduu yidhi, Bal kaalaya oo meeshuu Rabbigu jiifay arka. 7 Hadda taga, oo waxaad
xertiisii ku tidhaahdaan Kuwii dhintay wuu ka soo sarakacay, oo wuxuu idinka horreeyaa Galili,
oo Halkaasaad ku arki doontaan. Bal eega, waan idiin sheegaye. 8 Isla markiiba iyaga oo
cabsanaya oo faraxsan ayay xabaashii ka tageen, oo way ordeen si ay xertiisa ugu
warramaan. 9 Oo bal eeg, Ciise ayaa ka hor yimid oo ku yidhi, Waa Nabad. Markaasay u
dhawaadeen oo intay cagihiisa isku duubeen ayay u sujuudeen.

10 Deedna Ciise ayaa ku yidhi, Ha cabsanina; taga oo walaalahay u sheega inay Galili
tagaan, oo halkaasay igu arki doonaan. 11 Intay sii socdeen kuwii gaadhka ahaa qaarkood ayaa
magaaladii yimid oo wixii dhacay oo dhan ayay wadaaddadii sare uga warrameen. 12 Iyaguna
odayaashii ayay la shireen oo way wada hadleen, deedna askartii ayay lacag badan siiyeen.
13 Oo waxay ku yidhaahdeen Waxaad tidhaahdaan Xertiisii ayaa habeennimo intii la hurday
yimid oo xaday isaga. 14 Oo hadduu guddoomiyuhu warkan maqlo, waannu ku qancinaynaa oo
waannu idin garab istaagaynaa. 15 Deedna intay lacagtii qaateen ayay sidii lagu yidhi, yeeleen.
Warkaasuna ilaa iyo maanta Yuhuudda ayuu ku dhex fiday.

## AMARKII WAYNAA

16 Marka kow iyo tobankii xerta ahaa waxay tageen Galili, buurtii uu Ciise kula ballamay. 17 Oo
markay arkeen isaga way u sujuudeen, laakiinse qaarkood baa shakiyay. 18 Oo Ciise ayaa u
yimid oo la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, Amar oo dhan samada iyo dhulkaba ayaa la siiyay.
19 Haddaba taga, oo Ummadaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku biyogaliya magaca Aabbaha iyo
Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah. 20 Oo bara inay addeecaan wax walba oo aan idin faray, oo
bal eega had iyo jeerba waan idinla joogaa ilaa iyo dhammaadka dunida. Aamiin.

53 Ishacyaah 40:3

## INJIILKA SIDA MARKOS U QORAY

### Nebi Yaxye Iyo Farriintii Uu Waday

**1** Bilowgii Injiilka Ciise Masiix oo ah Wiilka Eebbe 2 Sida Nebi Ishacyaah qoray,
Bal Eeg, waxaan hortaada soo dirayaa rasuulkayga ka jidkaaga kuu diyaarin doona 3 Waa
codka cidlada kaga dhawaaqaya Jidka Rabbiga hagaajiya Waddooyinkiisana toosiya[a]. 4 Marka
waxaa yimid Nebi Yaxye oo cidlada dadka Biyaha ku biyogaliyay oo ku wacdiyay biyogalinta
toobadkeenka 5 Marka waxaa u soo baxay dadkii Yahuudiya oo dhan iyo kuwii Quddus oo
dhan oo kulligood Webiga Urdun ayuu biyaha ku biyogaliyay iyaga oo dembiyadooda qiranaya
6 Nebi Yaxye wuxuu xidhnaa dhar dhogorta geela laga sameeyay oo suun harag ahna dhexduu
ku xidhnaa oo wuxuu cuni jiray Ayaxa iyo Malabka kaymaha 7 Oo isaga oo wax wacdiyaya
ayuu yidhi,Waxaa iga daba iman doona mid iga awood badan, mid aanan istaahilin intaan
foororsado inaan yeelmaha kabihiisa furo 8 Anigu biyo aaan idin galiyay laakiin isagu wuxuu
idin galin doonaa Ruuxa Qudduuska ah

### Ciise Waa La Biyo Galiyay

9 Maalmahaas Ciise Naasareddii Galili ayuu ka yimid oo Nebi Yaxye ayaa Webiga Urdun ku
biyo galiyay. 10 Markuu biyiha sidaa uga soo baxayna wuxuu arkay samooyinkii oo furmay iyo
Ruuxa oo qaabka qoollayda oo kale leh oo dushiisa ku soo degay 11 Oo waxaa samada ka
dhawaaqay cod leh, Adigu waxaad tahay Wiilkayga aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay

### Shaydaan Ayaa Isku Dayay Inuu Ciise Duufsado

12 Oo isla markiiba Ruuxa ayaa meel cidla ah u kaxeeyay 13 Oo afartan maalmood ayuu
cidlada joogay Shaydaan ayaana jirrabay oo duur joogta ayuu la noolaa malaa'ig ayaana u
adeegaysay.

### Bilowgii Wacdiga Ciise

14 Markii Nebi Yaxye la qabtay ka dib Ciise wuxuu yimid Galili oo wuxuu dadka ku wacdiyay
Injiilka boqortooyada Eebbe 15 Wuxuuna yidhi, Wakhtigii wuu gaadhay oo boqortooyadii Eebbe
ayaa soo dhawaatay ee toobadkeena oo Injiilka rumeeya

### Ciise Wuxuu U Yeedhay Xertiisii U Horraysay

16 Marka Isaga oo badda Galili ag socda ayuu arkay Simoon iyo walaalkii Andaros, iyaga oo
shabag badda ku tuuraya, waayo kalluumaysato ayay ahaayeen. 17 Ciise wuxuu ku yidhi, Isoo
raaca Waxaan idinka dhigayaa kuwo dadka jillaabtee. 18 Isla markiiba shabagyadoodii intay ka
tageen ayay raaceen. 19 Oo markuu in yar halkaas dhaafay wuxuu arkay Yacquub ina Sebedi
iyo walaalkii Yooxanaa iyaga oo doonnida dhexdeeda shabagoodii ku hagaajinaya. 20 Isla
markiiba wuu u yeedhay. markaasay aabbahood Sebedi iyo shaqaalihii kaga yimaaddeen
doonnida, oo isagay raaceen.

## Ciise Kafarna'um Ayuu Nin Waalan Ku Bogsiiyay

21 Markaasay Kafarna'um tageen, maalintii Sabtida ahayd wuxuuna galay sunagogga oo
dadka wax ku baray. 22 Wayna la yaabeen wax bariddiisa waayo wuxuu wax u barayay sida
mid awood leh oo muuna wax u baraynin sida Culimada. 23 Marka waxaa sunagoga ku jiray nin
shaydaan wasakh luhu ku jiro wuuna qayliyay oo wuxuu yidhi, 24 Maxaa inoo dhexaya Ciisihii
reer Naasareedow? Ma waxaad u timid inaad na halaagto? Anigu waan ku garanayaa kaa aad
tahay Ka Qudduuska ah ee Eebbe. 25 Ciise ayaa canaantay oo ku yidhi, Aamus oo ka soo bax.
26 Oo shaydaankii wasakhda lahaa intuu isaga gilgilay oo kor u dhawaaqay ayuu ka soo baxay.
27 Markaasay kulligood la wada yaabeen oo waxay billaabeen inay dhexdooda iswaydiiyaan oy
yidhaahdaan Waa maxay arrintani? Ma wax barid cusub baa? Xataa shayddaamada
wasakhda leh amar buu siiyaa wayna yeelaan. 28 Markiiba warkiisu dhulka Galili ku wareegsan
oo dhan ayuu gaadhay.

## Ciise Wuxuu Bogsiiyay Soddohdii Butros Iyo Dad Kale oo Badan

29 Oo markiiba sunagogga way ka soo baxeen oo waxay yimaaddeen gurigii Simoon iyo
Andaros, iyaga iyo Yacquub iyo Yooxanaa. 30 Soddohdii Simoon ayaa qandho la jiiftay, oo
durba xanuunkeeda ayay isaga u sheegeen. 31 Marka intuu u soo dhawaaday oo gacanta
qabtay ayuu kiciyay. Isla markiiba qandhadii way ka baxday wayna u adeegtay iyaga.
32 Makhribkii markay qorraxdu dhacday, waxay u keeneen kuwii bukay oo dhan iyo kuwii
waallaa ee shaydaanada qabay. 33 Marka dadkii magaalada oo dhanna albaabkay ku soo
uruureen. 34 Oo wuxuu bogsiiyay dad fara badan oo cudurro kala duwan qabay, kuwii waallaa
ee shaydaanada qabayna wuu ka saaray, oo muuna u oggolaanin shaydaanadu inay hadlaan,
waayo, way garanayeen isaga.

## Ciise Meel Cidla Ah Ayuu Kaligii U Baxay Si Uu Ugu Tukado

35 Aroor hore intuuna waagu baryin ayuu kacay oo wuxuu tagay meel cidla ah, oo halkaas
ayuu ku soo tukaday. 36 Markaasay Simoon iyo kuwii la joogay ka daba tageen. 37 Oo markay
heleen waxay ku yidhaahdeen Dadka oo dhan ayaa ku raadinaya. 38 Wuxuu ku yidhi, Ina keena
aynnu magaalooyinka inoo dhaw tagnee si aan halkaas wax ugu wacdiyo waayo, howshaas
aawadeed ayaan u imid. 39 Marka Galili oo dhan ayuu ku wareegay isaga oo sunagogyadooda
dadka ka wacdiyaya, shaydaanadana dadka ka saaray.

## Nin Baras Qaba Ayaa La Bogsiiyay

40 Marka waxaa u yimid nin baras qaba, oo intuu jilba joogsaday oo baryay, ayuu ku yidhi,
Haddaad doonayso waad i daahirin kartaa. 41 Marka Ciise ayaa u naxariistay, oo intuu
gacantiisa usoo fidiyay, ayuu taabtay oo ku yidhi, Waan doonayaa ee daahir. 42 Isla markiiba
baraskii wuu ka baxay, oo wuu daahiray. 43 Ciisena intuu la dardaarmay ayuu diray, 44 Oo
wuxuu ku yidhi, Ninna waxba ha u sheegin, laakiin iska tag oo wadaadka istus oo
bogsashadaada u bixi wixii uu Muuse kugu amray, marag iyaga ha u ahaatee. 45 Laakiinse
intuu baxay ayuu billaabay inuu dadka u sheego oo warka faafiyo, sidaas darteed way ku
adkaatay Ciise inuu magaalada si cad u galo, oo wuxuu joogay dibadda iyo meelaha
baadiyaha ah markaasaa meel kasta looga yimid.

## Curyaankii La Bogsiiyay

**2** Dhawr maalmood dabadeed ayuu haddana Kafarna'um galay, oo waxaa la maqlay inuu
guriga joogo. 2 Marka waxaa ku soo uruuray dad fara badan sidaa daraaddeed meel ay kala
istaagaan ayay waayeen xataa albaabka hortiisii, oo halkaasuu iyaga ku wacdiyay.
3 Markaasay nin curyaan ah oy afar nin waddo u keeneen. 4 Deedna markay dadkii faraha
badnaa meel ay ka soo mariyaan waayeen ayay saqafka dusha meeshuu joogay jabiyeen oo
intay meel ka fureen ayay ninkii curyaanka ahaa oo sariir ku jiifa ka soo dejiyeen. 5 Ciise
markuu rumaysadkooda arkay, ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, dembiyadaadii
waa la cafiyay. 6 Marka halkaa waxaa joogay oo fadhiyay culimada shareecada qaarkood oo
waxay niyadda iska yidhaahdeen 7 Ninkanu muxuu sidan ugu hadlayaa? Gaalnimo ayuu ku
hadlayaa. yaa dembiga cafiyi kara Eebbaha keliya mooyee? 8 Isla markiiba Ciise ruuxiisa ayuu
ku ogaaday inay sidaa niyadda iska yidhaahdeen, oo wuxuu ku yidhi, Maxaad waxan
niyaddiina ugaga fikiraysaan? 9 Tee fudud in curyaanka lagu yidhaahdo, Dembiyadaadii waa la
cafiyay iyo in lagu yidhaahdo, Kac oo sariirtaada qaado oo soco? 10 Laakiin si aad u ogaataan
in Wiilka Aadanuhu dhulka ku leeyahay awood uu dembiyada ku cafiyo ayuu ninkii curyaanka
ahaa ku yidhi, 11 Waxaan ku leeyahay, Kac oo sariirtaada qaado oo gurigaagii tag. 12 Isla
makiiba wuu kacay oo intuu sariirtiisii qaatay; ayuu dadkii oo dhan hortooda iska baxay,
markaasay wada yaabeen, oy Eebbe u mahadnaqeen oo waxay yidhaahdeen Weligeen tan oo
kale maynaan arag.

## Laawi Ayaa Loo Yeedhay

13 Haddana mar kale ayuu Ciise badda xeebteeda u baxay oo dad fara badan ayaa u yimid,
oo waxbuu baray. 14 Oo isaga oo socda ayuu arkay Laawi Ina Alfayos oo xafiiska canshuuraha
fadhiya wuuna u yeedhay oo wuxuu ku yidhi, isaga, Isoo raac. Wuuna kacay oo raacay.
15 Waxaa dhacday markuu Ciise gurigiisa[54*] ka cuntaynayay in ay kuwo fara badan oo
canshuur qaadayaal iyo dembilayaal ah oo Ciise iyo xertiisa la socday la fadhiisteen isaga.
16 Culimadii iyo Farrisiintii markay arkeen isaga oo dembilayaal iyo canshuur qaadayaal wax la
cunaya, waxay xertiisa ku yidhaahdeen Waa sidee Wuxuu wax la cunayaa oo la cabbayaa
canshuur qaadayaasha iyo dembilayaalshee? 17 Ciise markuu maqlay ayuu ku yidhi, Kuwa
caafimaadka qaba dhakhtar uma baahna, laakiinse kuwa buka. uma imanin inaan kuwa xaqa
ah u yeedho laakiinse dembilayaasha.

## Su'aal Soonka ku Saabsan

18 Marka xerta Nebi Yaxye iyo Farrisiintuba way soomi jireen. Markaasay u yimaaddeen oo
waxay ku yidhaahdeen isaga Maxay xerta Nebi Yaxye iyo kuwa Farrisiintuba u soomaan oy
xertaadu u soomi waayaan? 19 Markaasuu Ciise ku yidhi, Dadka aroosku miyay soomi karaan
intuu caruusku la joogo? In alla intuu aroosku la joogo ma soomi karaan.[55*] 20 Laakiin waxaa
iman doonta maalmo arooska laga qaadi doono, oo maalmahaas ayay soomi doonaan.
21 Ninna kariin cusub maro duug ah kuma tolo, haddii kale karintii cusubayd ee marada duugga
ah lagu tolay ayaa go'da oo dillaacii wuu ka sii daraa. 22 Khamri cusubna qarbed duug ah
laguma shubo, haddii kale khamridii cusbayd ayaa qarbedka kala dildillaacisa, deedna

54 Guriga Laawiga
55 Caruusku waa isaga

khamridiina way daadataa qarbedkuna wuu xumaadaa, laakiin khamrida cusub waxaa lagu shubaa qarbed cusub.[56*]

## Ciise Waa Sayidka Sabtida

[23] Marka maalin Sabti ah ayuu beeraha dhex maray, oo xertiisii ayaa intay socdeen billaabay
in ay sabuullada jartaan. [24] Marka Farrisiintii waxay isaga ku yidhaahdeen Bal eeg, maxay
Sabtida wax aan xalaal ahayn u samaynayaan? [25] Wuxuu ku yidhi, Daa'uud wuxuu sameeyay
Miyaydaan weligiin akhriyin markuu gaajooday isaga iyo kuwii la socdayba? [26] Siduu intuu
gurigii Eebbe galay waagii wadaadkii sare ee Aabyaataar wax uga cunay kimistii alla bariga oo
aan wadaaddada mooyee cid kale xalaal u ahayn, waliba kuwii la joogayna waxbuu ka siiyay.
[27] Markaasuu ku yidhi, iyaga Sabtida dadka ayaa loo sameeyay ee dadka Sabtida looma
samaynin. [28] Sidaa darteed Wiilka Aadanuhu waliba waa sayidka Sabtida.

## Nin Gacan Qallalan

**3** Mar kale ayuu sunagogga galay; oo waxaa halkaa joogay nin gacantu qallalantahay.
[2] Marka way eegeen inuu Sabtida wax bogsiiyo iyo in kale, si ay eed iyo ashtako ugu helaan.
[3] Marka ninkii gacanta qallallaa ayuu ku yidhi, Xagga hore soo isaag. [4] Markaasuu iyaga ku
yidhi, Sabtida in wanaag la sameeyo ama shar la sameeyo ma xalaal baa? In naf la
badbaadiyo ama la dilo? Laakiin way iska aamuseen. [5] Markaasuu hareerahooda eegay isaga
oo cadhaysan oo ka xun qalbi adaygooda, deedna ninkii ayuu ku yidhi, Gacanta soo taag!
wuuna soo taagay, oo gacantii way bogsatay sida tii kale. [6] Marka Farrisiintii way baxeen, oo
waxay markiiba wada tashi la galeen Herodosiintii siday u dili lahaayeen isaga.

## Dad Fara Badan Ayaa Ciise Raacay

[7] Marka Ciise xertiisii ayuu badda kula noqday; waxaana raacay dad fara badan oo ka yimid
Galili, iyo Yahuudiya, [8] Iyo Quddus, iyo Idumiya, iyo Urdun inta ka shishaysa, iyo kuwa
agagaaraha Turos iyo Siidoon; oo markay maqleen waxyaabaha waawayn ee uu samaynayo
ayay u yimaaddeen. [9] Deedna xertiisa ayuu la hadlay oo ku yidhi, Doonni yar ii diyaariya dadka
faraha badan aawadiis si ayna ii cidhiidhyin. [10] Maxaa yeelay markuu dad fara badan bogsiiyay
ayaa laysku wada tuuray si qofkii isaga taabtaba u bogsado. [11] Shaydaanadii wasakhda
lahaana markay arkeen, ayay isku hor tuureen iyaga oo qaylinaya oo leh Adigu waxaad tahay
Wiilka Eebbe. [12] markaasuu si adag ugu amaray in ayna sheegin kuu yahay.

## Ciise Laba Iyo Tobankiisii Rasuul Ayuu Doortay

[13] Marka intuu buur fuulay ayuu kuwii uu doonayay u yeedhay wayna u yimaaddeen.
[14] Deedna laba iyo toban ayuu rasuullo ka dhigay oo u doortay in ay isaga la joogaan iyo in ay
wax wacdiyaan, [15] Oy lahaadaan awood ay cudarrida ku bogsiiyaan oy Shaydaanada ku
saaraan. [16] Waxayna kala ahaayeen Simoonkii uu Butros u bixiyay, [17] Iyo Yacquub ina Sebedi,
iyo Yooxanaa Yacquub walaalkii iyagana wuxuu u bixiyay Bo'anerges oo ah wiilashii unkadka,

56 Karinta cusub iyo khamrida cusub wuxuu ka wadaa axdigii hore iyo axdiga cusub.

[18] Iyo Andaros, iyo Filibos, iyo Bartolomayos, iyo Matayos, iyo Toomas, iyo Yacquub ina
Alfayos, iyo Tadayos, iyo Simoonkii reer Qaana, [19] Iyo Yuudas Iskariyodkii khiyaanay.

### Ciise Iyo Be'elsebul

[20] Marka guri ayuu yimid; oo dad fara badan ayaa haddana ku soo uruuray ilaa oy xabad furin
ah cuni kari waayeen. [21] Oo qoyskiisii markay maqleen, ayay soo raadiyeen si ay u qabtaan,
waayo, waxay u maleeyeen inuu waalanyahay.

### Ruuxa Qudduuska Ah Oo La Caayo

[22] Culimadii Quddus ka timidna waxay yidhaahdeen Be'elsebul baa ku jira oo shaydaanka
madaxda ah ayuu shaydaanada ku saaraa. [23] Marka intuu iyaga u yeedhay ayuu si tusaale ah
wax ugu sheegay oo ku yidhi, Siduu Shaydaan u saari karaa Shaydaan? [24] Hadday boqortooyo
kala qaybsanto, boqortooyadaasu way burburtaa. [25] Qoys hadduu kala qaybsamana, ma
taagnaan karo. [26] Hadduu Shaydaanku isku kaco oo kala qaybsamo, ma taagnaan karo.
laakiinse wuu dhammaadaa. [27] Qofna nin xoog leh gurigiisa ma gali karo si uu alaabtiisa u
gurto hadduusan marka hore ninka xoogga leh xidh xidhin markaas ka dib ayuu gurigiisa dhici
karaa. [28] Runtii waxaan idinku leeyahay, dadka waa laga cafiyaa dembi kasta iyo af lagaaddo
kasta oy ku caytamaan; [29] Laakiin qof alla qofkii Ruuxa Qudduuska ah, caaya weligii lama cafin
doono, laakiinse xukun weligii ah ayaa ku dhaca; [30] waayo, waxay yidhaahdeen Shaydaan
wasakh leh ayaa ku jira.

### Walaalnimada Dhabta Ah

[31] Marka waxaa u yimid walaalihii iyo hooyadii oo intay dibadda istaageen ayay farriin u
direen oo u yeedheen. [32] Dad fara badan ayaana la fadhiyay oo waxay ku yidhaahdeen
Hooyadaa iyo walaaladaa ayaa dibadda joogaa oo ku doonayaan. [33] Marka wuu u jawaabay oo
wuxuu ku yidhi, Waa ayo hooyaday iyo walaalahay? [34] Deedna intuu isha mariyay kuwii la
fadhiyay ayuu yidhi, Waa kuwan hooyaday iyo walaalahay! [35] Ku alla kii doonista Eebbe yeela
kaas ayaa walaalkay iyo walaashay iyo hooyadayba ah.

### Tusaale ku Saabsan Beer Qote

**4** Mar kale wuxuu billaabay inuu badda xeebteeda wax ku baro, oo waxaa ku soo uruuray
dad fara badan, sidaa darteed intuu doonni fuulay ayuu fadhiistay, dadkii faraha badnaana
xeebtay tubnaayeen. [2] Marka wax badan ayuu tusaale ku baray, oo markuu wax barayay iyaga
wuxuu ku yidhi, [3] Dhegaysta, waxaa baxay beer qote si uu wax beerto. [4] Oo markuu wax
beerayay Abuurkii badh baa jidka geestiisa ku dhacay, deedna shimbiraha cirka ayaa yimid oo
cunay. [5] Badh kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax ah oo aan carro badan lahayn; isla
markiiba way soo baxeen, waayo, carradu hoos uma qodnayan, [6] Laakiin markay qorraxdu soo
baxday way gubteen, wayna engageen, waayo, xidid mayna lahayn. [7] badh kalena waxay ku
dhex dhaceen qodax dhexdeed, qodaxdiina intay soo baxday ayay cuna qabataysay, oo
mayna midho dhalin. [8] Badh kalena dhul wanaagsan bay ku dhaceen, oo intay baxeen ayay
koreen oo midho dhaleen. Mid wuxuu dhalay soddon, midna lixdan, midna boqol. [9] Oo wuxuu
ku yidhi, Kii dhego wax lagu maqlo leh ha maqlo.

## U Jeeddada Tusaalaha

10 Markuu kaligii noqday kuwii la joogay iyo laba iyo tobankii ayaa tusaalahaas wax ka
waydiiyay. 11 Marka wuxuu ku yidhi, Idinka waxaa laydin siiyay inaad sirta boqortooyada Eebbe
garataan, laakiin kuwa dibadda jooga wax walba waxaa loogu sheegaa tusaale, 12 Si iyaga oo
wax arka ayna wax u garanin, oo iyaga oo wax maqlaya ayna wax u fahmin, oyna u soo
noqonin oo aan loo cafiyin.

## Macnaha Tusaalaha Beer Qotaha

13 Marka wuxuu iyaga ku yidhi, Miyaydaan tusaalahan garanaynin? Marka Sideed
tusaalayaashii oo dhan u garanaysaan? 14 Beer qotuhu wuxuu beeraa hadalka*[e]. 15 Waa kuwan
kuwii jidka ku dhacay meeshii hadalka lagu beeray, oo markay maqlaan, Shaydaan ayaa
marlkiiba yimaadda oo hadalkii lagu beeray iyaga ka qaada. 16 Si kuwaas la mid ahna kuwanu
waa kuwii dhulka dhagaxa leh ku dhacay oo markay hadalka maqlaan isla markiiba farxad ku
aqbalay. 17 Laakiin maadaama oo ayna iyagu ku xididaysanin wakhti yar ayay sii jiraan, oo
markay dhibaato iyo cadaadis la kulmaan hadalka aawadii, markiiba way ka noqdaan. 18 Kuwa
qodaxda ku dhex dhacayna waa kuwa hadalka maqla, 19 Laakiin ka welwelidda dunidan iyo ku
mashquulidda maalka iyo damaca waxyaabo kale ayaa gala oo hadalkii cuna qabateeya oo
wuxuu noqdaa midho la'aan. 20 Kuwa dhulka wanaagsan ku dhacayna waa kuwa hadalka
maqla, oo aqbala, oo midho dhala, mid soddon, midna lixdan, midna boqol.

## Faynuus Sariir La Hoos Galiyay

21 Markaasuu iyaga ku yidhi, Faynuuska ma waxaa loo shidaa in salad lagu daboolo ama
sariir la hoos galiyo? Sow meeshii ilayska lama dhigo? 22 Wax qarsoon ma jiro oo aan soo
muuqan doonin, oo wax daboolan ma jiro oo aan bannaanka u soo bixi doonin. 23 Hadduu qof
dhego wax lagu maqlo leeyahay ha maqlo. 24 Marka wuxuu ku yidhi, U fiirsada waxaad
maqlaysaan; miisaank aad ku miisaantaan ayaa laydiinku miisaami doonaa oo waa laydiin
siyaadin doonaa. 25 Kii wax haysta waa la siin doonaa, kii aan waxba haysanna xataa waxa uu
haysto ayaa laga qaadi doonaa.

## Tusaalaha Iniinta Baxaysa

26 Wuxuuna yidhi, Boqortooyada Eebbe waxay la mid tahay sidii nin abuur dhulka ku
daadiyay
27 Maalin iyo habeenba wuu seexdaa, oo wuu kacaa, abuurkiina wuu baxaa oo koraa, isaga
oon waxba ka ogayn. 28 Dhulka ayaa iskii u soo midhaha bixiya, marka hore xididka ka dibna
sabuulka, sabuulkana midho ayaa ka buuxsama. 29 Ka dibna markay midhuhu bislaadaan,
ayuu mindi la galaa, waayo, wakhtigii beergooyska ayaa la gaadhay. 30 Wuxuuna yidhi,
Maxaynu boqortooyada Eebbe la barbar dhignaa oo tusaalehee ayaynu u ekaysiinnaa?
31 Waxay la mid tahay sida Iniin khardal oo markii dhulka lagu beerayay ugu yarayd Iniinyaha
dhulka ku jira oo dhan. 32 Laakiin markii la beero way baxdaa oo waxay ka waynaataa midhaha
oo dhan, oo waxay soo bixisaa laamo waawayn oy shimbiraha cirku hooskooda ku degaan.
33 Tusaallooyin badan oo kan oo kale ah ayuu kula hadlay intay maqli kareen. 34 Oo tusaale
la'aan muuna kula hadlin laakiinse markay kaligood noqdeen ayuu xertiisa wax walba u fasiray.

## Ciise Ayaa Duufaantii Dejiyay

[35] Isla maalinkaas markii makhribkii la gaadhay, wuxuu iyaga ku yidhi, War dhanka kale inoo
tallaabiya. [36] Oo markay dadkii kala direen, ayay isaga kaxeeyeen oo doonni saareen, doonyo
kalena way raaceen. [37] Marka waxaa kacday duufaan wayn oo dabayl wadata, hirarkiina
doonnida ayay ku dhaceen ilaa oy doonnidii buuxsantay. [38] Isaguna xagga dembe ee doonnida
ayuu barkin ku jiifay. Marka intay toosiyeen ayay ku yidhaahdeen Macallinow, baaba'ayaga
miyaadan danaynayn? [39] Marka intuu kacay ayuu dabayshii canaantay, oo baddii ku yidhi,
Aamus oo xasil. Marka dabayshii way degtay oo xasillooni wayn baa dhacday. [40] Markaasuu
iyaga ku yidhi, Maxaad sidan ugu cabsanaysaan? Away rumaysadkiinnii? [41] Deedna aad bay u
cabsadeen oo wuxuu badhkoodba badhka kale ku yidhi, Waa nin caynkee ah xataa dabaysha
iyo badda ayaa yeelaya!

## Ninkii Shaydaanku Ku Jiray Ee Reer Gadareni Waa La Bogsiiyay

**5** Waxay yimaaddeen dhanka kale ee badda xagga gobolka Gadareni. [2] Oo markuuu doonnida
sidaa uga soo degay isla markiiba waxaa la kulmay nin xabaalaha ka soo baxay oo shaydaan
wasakh luhu ku jiro. [3] Kaasoo xabaalaha ku noolaan jiray, oo ninna ma awoodi karin inuu xidh
xidho xataa silsiladna dhohoo. [4] Maxaa yeelay, marar badan ayaa biro iyo silsilado lagu xidhi
jiray, silsiladahana wuu iska gooyn jiray, biraha cagahana wuu kala jejebin jiray, oo ninna
qaban kari waa. [5] Mar walba habeen iyo maalinba buuraha iyo xabaalaha ayuu joogi jiray isaga
oo qaylinaya oo dhagaxyo isku jar jaraya. [6] Laakiin markuu Ciise meel fog ka arkay, ayuu ku
soo orday oo u sujuuday. [7] Marka intuu kor u dhawaaqay ayuu ku yidhi, Aniga iyo adiga Maxaa
inoo dhexeeya Ciise, Wiilkii Eebbaha sarow? Eebbe baan kugu dhaariyaye ha i cadaabin.
[8] Waayo, wuxuu ku yidhi, Ka bax ninka, shaydaanyahow wasakhda leh. [9] Markaasuu magiciisa
waydiiyay? Oo wuxuu ugu jawaabay, Waxaa lay yidhaahdaa, Liijon, waayo, waanu
badannahay. [10] Aad ayuuna uga baryay isaga inuusan gobolka ka eryin. [11] Marka buurta
sinteeda waxaa daaqayay tiro badan oo doofaarro ah.

[12] Shaydaanadii oo dhan ayaa baryay oo waxay ku yidhaahdeen Doofaarrada noo dir si aannu
u galno. [13] Marka Ciise ayaa u fasaxay. deedna shaydaanadii wasakhda lahaa intay baxeen
ayay doofaarraddii tirooyinka ahaa galeen, markaasay intay jarka hoos uga daateen badda ku
bakhtiyeen, waxayna ahaayeen ilaa iyo laba kun. [14] Deedna kuwii raaci jiray ayaa intay
carareen dadkii magaalada iyo baadiyahaba u warramay. Ka dibna dadkii ayaa soo baxay si ay
waxa dhacay u arkaan. [15] Marka Ciise ayay u yimaaddeen, oo waxay arkeen ninkii waallaa oo
fadhiya oo dhar xidhan oo miyir qaba, wayna cabsadeen. [16] Deedna goob joogayaashii ayaa
uga warramay wixii ku dhacay ninkii waallaa iyo doofaarradii. [17] Marka dadkii ayaa Ciise ka
baryay inuu gobolkooda ka noqdo. [18] Deedna markuu doonnida fuulayay, kii waallaan jiray
ayaa ka baryay inuu raaco. [19] Laakiinse Ciise uma fasaxin, oo wuxuu ku yidhi, Gurigaaga iyo
qoyskaaga u tag oo u sheeg waxa wayn ee Rabbigu kuu sameeyay iyo siduu kuugu
naxariistay. [20] Marka intuu tagay ayuu billaabay inuu Dekabolis ku faafiyo waxa wayn ee Ciise
u sameeyay, oo dhammaan way wada yaabeen.

## Yayros Gabadhiisii Iyo Naagtii Dhiigbaxa Qabtay

21 Markuu Ciise haddana dhanka kale doonnida ugu tallaabay waxaa ku soo uruuray dad fara
badan isaguna badda xeebteeda ayuu joogay. 22 Oo waxaa u yimid maamuleyaasha
Sunagogga midkood oo Yayros la odhan jiray, oo markuu arkay, intuu cagihiisa ku dhacay,
23 Ayuu aad u baryay oo ku yidhi, Gabadhaydii yarayd waa sakaraad. Waan ku baryayaaye
kaalay oo gacmahaaga saar si ay u bogsato oy u noolaato. 24 Marka Ciise wuu raacay, oo dad
fara badan ayaa raacay, wayna cidhiidhyeen. 25 Waxaa jirtay naag laba iyo toban sanadood
dhiigbaxaysay. 26 Oo dhibaatooyin badan dhakhaatiirta kala kulantay, wixii ay lahayd oo dhana
ku bixisay, waxbana kumayna caafimaadin laakiinse way ka sii dartay. 27 Markay Ciise warkiisa
maqashay ayay dadka soo dhex martay oo intay dhabarkiisa timid ayay maradiisa taabatay.
28 Waayo, waxay is tidhi Haddaan maradiisa uun taabto waan bogsan. 29 Isla markiiba dhiig
bixii ayaa joogsaday oo waxay jidhkeedii ka dareentay inay cudurkii ka bogsatay. 30 Ciise
markiiba wuxuu gartay in xoog isaga ka baxay oo intuu dadkii cidhiidhinayay ku soo jeedsaday
ayuu yidhi, War yaa maradayda taabtay? 31 Xertiisii ayaa ku tidhi Waad aragtaa waxan oo dad
ah oo ku cidhiidhyaya. Markaasaad leedahay: Yaa i taabtay? 32 Markaasuu hareerihiisa eegay
si uu u arko qofka waxan samaysay. 33 Naagtiina iyada oo og waxa ku dhacay, ayay timid iyada
oo cabsi la gariiraysa oo intay isku hor tuurtay ayay runtii oo dhan u sheegtay. 34 Markaasuu
iyada ku yidhi, Gabadhay, rumaysadkaagaa ku bogsiiyay. Nabad ku tag, oo cudurkaagii ka
bogso. 35 Oo isaga oon wali hadalkii dhammyn waxaa gurigii maamulaha Sunagogga ka yimid
dad Gabadha geerideeda soo sheegay oo waxay ku yidhaahdeen Gabadhii way dhimataye
Maxaad Macallinka u dhibaysaa? 36 Mar alla markuu Ciise hadalkaa maqlay wuxuu maamulihii
Sunagogga ku yidhi, Ha cabsanin ee rumee. 37 Oo ninnana uma oggolaanin inuu raaco, Butros,
iyo Yacquub, iyo Yooxanaa Yacquub walaalkii mooyee. 38 Deedna gurigii maamulaha
Sunagogga ayuu yimid oo wuxuu arkay buuq iyo kuwo ooyaya oo aad u barooranaya. 39 Marka
intuu u soo galay ayuu ku yidhi, Maxaad sidan ugu buuqaysaan ood u ooyaysaan? Gabadhu
ma dhimanine way huruddaa. 40 Iyaguse way ku qosleen, deedna kulligood dibadduu u wada
saaray, oo wuxuu kaxaystay gabadha labadeedii waalid iyo kuwii isaga la socday, wuxuuna
galay meeshay gabadhu jiiftay. 41 Marka intuu gabadhii gacanta qabtay ayuu ku yidhi, Talita
qumi Taasoo ah Gabadhay waxaan ku leeyahay Sarakac. 42 Isla markiiba gabadhii way kacday
oo way socotay, da'deedu waxay ahayd laba iyo toban sano, dadkiina aad bay ula wada
yaabeen. 43 Deedna aad ayuu ugu adkeeyay inayna cidna u sheegin, wuxuuna faray in
gabadha wax ay cunto la siiya.

## Ciise Magaalada Naasared Waa Laga Diiday

**6** Meeshaas ayuu ka tagay oo magaaladiisii ayuu yimid, xertiisuna way soo raaceen. 2 Markii
Sabtida la gaadhay ayuu billaabay inuu sunagoga wax ku baro; dad fara badan ayaa markay
maqleen la yaabay, oo waxay yidhaahdeen: Ninkanu xagguu waxyaalahan ka helay? Oo
xigmaddan la siiyay iyo mucjisooyinkan xoogga leh ee uu gacmihiisa ku samaynayo maxay
tahay? 3 Kanu miyuuna ahayn nijaarkii, Ina Maryama, ee ay walaalaha ahaayeen Yacquub iyo
Yoosea iyo Yuudas, iyo Simoon; gabdhihii walaalihii ahaana miyayna inala wada joogin?
Wayna diideen. 4 Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, Nebi laguma sharaf iyo xurmo tiro waddankiisa
iyo dadkiisa iyo qoyskiisa dhexdooda mooyee. 5 Meeshaasna mucjisooyin xoog leh muuna ku
samaynin dhawr bukaan ah oo intuu gacmaha saaray bogsiiyay mooyee. 6 Wuuna ka yaabay
rumaysad la'aantooda. deedna tuulooyinka ayuu ku wareegay isaga oo wax baraya.

### Ciise Wuxuu Diray Laba Iyo Tobankii Rasuul

[7] Marka intuu laba iyo tobankii u yeedhay, ayuu laba laba u diro si ay Injiilka u faafiyaan.
Wuxuuna siiyay awood ay shaydaanda wasakhda leh ku saaraan. [8] Wuxuuna ku amray oo ku
yidhi, Sahay safarka ha u qaadanina ul mooyee. cunto iyo boorso ha qaadanina, lacagna
jeebabka ha ku qaadanina. [9] Kabo gashada, laakiin laba labis ha qaadanina. [10] Wuxuuna ku
yidhi, Mar kasta ood guri gashaan, halkaas jooga ilaa iyo intaad ka tegaysaan. [11] Meel kasta oo
laydinka diido iskaga taga oo markaad ka tagaysaan, boodhka cagihiinna ka jafa si ay digniin
ugu noqoto iyaga. [12] Marka way baxeen oo waxay wacdiyeen dadkii si ay u toobadkeenaan.
[13] Shaydaanno fara badanna way saareen, dad badan oo bukayna saliid bay mariyeen, wayna
bogsiiyeen.

### Geeridii Nebi Yaxye

[14] Boqor Herodos ayaa warkii Ciise maqlay waayo magiciisa ayaa caan noqday oo meel
walba laga wada ogaaday; deedna wuxuu yidhi, Nebi Yaxye ayaa kuwii dhintay ka soo
sarakacay, sidaa darteed mucjisooyinkan xoogga leh isagay ka dhex shaqaynayaan. [15] Laakiin
qaar kale waxay yidhaahdeen Waa Ilyaas; qaar kalena waxay yidhaahdeen, Waa Nebi,
Nebiyadii hore oo kale ah. [16] Laakiin Herodos markuu maqlay wuxuu yidhi, Kanu waa Yaxyihii
aan madaxa ka gooyay, oo kuwii dhintay ka soo sarakacay. [17] Maxaa yeelay Herodos qudhiisa
ayaa cid diray oo Nebi Yaxye qabtay oo xabbsiga dhigay, walaalkii Filibos xaaskiisa Herodiya
aawadeed, waayo, wuu guursaday, [18] Nebi Yaxye wuxuu Herodos ku yidhi, Xalaal kuu ma aha
inaad xaaska walaalkaa guursato. [19] Arrintaas darteed ayay Herodiya ka xanaaqday waxayna
doonaysay inay disho, laakiinse mayna awoodi karin, [20] Waayo, Herodos wuxuu ka cabsan
jiray Nebi Yaxye, sababtoo ah Wuxuu ogaa inuu nin xaq ah oo qudduus ah yahay wuuna ilaalin
jiray. Oo wuxuu in badan ku dadaali jiray inuu dhagaysto wuuna ku farxi jiray. [21] Marka waxaa
la gaadhay maalintii dhaladasha Herodos marka xaflad ayuu sameeyay oo wuxuu soo
casuumay dadkii magaca lahaa iyo sarakiishiisii sar sare iyo cuqaashii Galili. [22] Deedna
gabadhii Herodiya ayaa intay soo gashay qoobka cayaartay, oo waxay ka farxisay Herodos iyo
martiiba, marka boqorkii ayaa gabadhii ku yidhi, Wax alla waxaad doonto i waydiiso, waan ku
siine. [23] Oo wuu u dhaartay Wax alla waxaad doonto ayaan ku siinayaa xataa hadday
boqortooyadayda badhkeeda doonto. [24] Markaasay baxday oo hooyadeed ku tidhi Maxaan
waydiistaa? deedna waxay tidhi, Madaxa Nebi Yaxye. [25] Isla markiiba boqorkii ayay deg deg
ugu timid oo waxay tidhi Waxaan hadda doonayaa madaxii Nebi Yaxye oo salad ku jira.
[26] Marka boqorkii aad ayuu u murugooday, laakiin maadaama oo uu marti sharaf hortooda ugu
dhaartay wuu kari waayay inuu diido. [27] Isla markiiba boqorkii wuxuu diray askari oo amar ku
siiyay inuu madaxii Nebi Yaxye keeno. deedna intuu xabsigii tegay ayuu isaga madaxa ka soo
gooyay. [28] Oo intuu madaxiisii salad ku soo qaaday ayuu gabadhii u keenay, gabadhiina
hooyadeed bay siisay. [29] Xertiisii markay arrintan maqleen, ayay yimaaddeen oo meydkiisii
ayay qaadeen oo aaseen.

### Warbixintii Rasuullada

[30] Marka Rasuuladii ayaa Ciise ku soo noqday, oo waxay u sheegeen wixii ay sameeyeen oo
dhan iyo wixii ay bareenba. [31] Markaas waxaa jiray dad badan oo imanaya iyo kuwo tagaya oo
xataa fursad ay wax ku cunaan way waayeen, deedna iyaga ayuu ku yidhi, Kaligiin kaalaya
cidlada, oo waxoogaa ku nasta. [32] Marka kaligood intay doonni raaceen ayay meel cidla’ ah

tageen. 33 Deedna dadkii ayaa iyaga oo tegaya arkay, oo kuwo fara badan ayaa ogaaday
meeshay tagayaan oo intay magaalooyinka oo dhan ka soo baxeen ayay raaceen, wayna ka
hor mareen. 34 Ciise markuu soo degay wuxuu arkay dad fara badan, wuuna u naxariistay,
maxaa yeelay, waxay ahaayeen sida ido aan adhijir lahayn, wuxuuna billaabay inuu wax badan
baro.

### Waxaa Cunto La Siiyay Shan Kun Oo Nin

35 Markii galabnimadii la gaadhay ayay xertiisii u timid oo ku tidhi Meeshu waa cidla, waana
galin dembe. 36 Dadka iska dir, si ay beeraha iyo tuulooyinka ku wareegsan u tagaan oy cunto
u soo iibsadaan. 37 Marka wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Idinku siiya waxay cunaan. Waxay
ku yidhaahdeen Ma intaannu tagno ayaannu laba boqol oo dinaar oo furin ah u soo iibinaa si
ay u cunaan? 38 Marka wuxuu ku yidhi, Immisa xabbo oo furin ah ayaad haysaan? Taga oo
Soo eega. Oo markay ogaadeen, waxay ku yidhaahdeen Shan midh iyo laba kalluun ah.
39 Deedna wuxuu amar ku siiyay inay dadka koox koox cawska ugu fadhiisiyaan. 40 Marka
waxay u fadhiisteen safaf boqol boqol iyo konton konton ah. 41 Isaguna wuxuu qaaday shantii
midh ee furinka iyo labadii kalluun, oo intuu kor cirka u eegay ayuu ku duceeyay, deedna
furinkii intuu kala jejebiyay ayuu xertiisii siiyay si ay u qaybiyaan, labadii kalluunna wuu u
qaybiyay dhammantood. 42 Dhammaantoodna way wada cuneen, oo ka dhergeen. 43 Oo waxay
soo uruuriyeen laba iyo toban saladood oy ka buuxaan jajabkii iyo kalluunka. 44 Kuwii furinka
cunayna waxay ahaayeen shan kun oo rag ah.

### Ciise Biyo Ayuu Ku Dul Socday

45 Isla markiiba wuxuu xertiisii amar ku siiyay inay doonnida fuulaan oy intuu dadka kala
dirayo uga sii horreeyaan dhanka kale ee Beytsayda. 46 Oo markuu kala diray, ayuu buurta
tagay si uu u tukado. 47 Markii makhribkii la gaadhay, doonnidii waxay gaadhay badda
dhexdeeda, isaguna kaligii ayuu barriga joogay. 48 Deedna wuxuu arkay iyaga oo wadidda ku
rafaadsan, waayo, dabaysha ayaa ka hor timid. marka xilliga suxuurta ayuu u yimid isaga oo
badda ku dul socda, wuuna iska dhaafi lahaa. 49 Laakiin markay arkeen isaga oo badda ku dul
socda, waxay moodeen rooxaan, markaasay qayliyeen. 50 Maxaa yeelay, way wada arkeen, oo
way cabsadeen. Isla markiiba intuu la hadlay ayuu ku yidhi, War ha cabsanina waa anigiiye.
51 Deedna doonnida ayuu iyaga ugu tagay, dabayshiina way joogsatay. Aad iyo aad bayna ula
yaabeen. 52 Maxaa yeelay, mucjisadii furinkii macneheeda mayna fahmin qalbi adaygooda
aawadeed.

### Dadkii Gennesared Waa La Bogsiiyay

53 Oo markay barriga u tallaabeen waxay yimaaddeen dhulka Gennesared, oo doonnidii ayay
xeebta ku xidheen. 54 Deedna markay doonnida sidaa uga soo degeenba dadkii ayaa isaga
gartay. 55 Marka gobolka oo dhan ayay ku soo wareegeen oo waxay billaabeen inay kuwii
bukay meeshii ay ku maqleen inuu joogo sariiro ugu soo qaadaan. 56 Oo meel kasta oo uu galo
hadday tuulooyinka ama magaalooyinka ama beeraha tahay waxay suuqyada dhigeen kuwo
buka, oo waxay ka baryeen inay faraqa maradiisa oo kaliya taabtaan, oo kuwii taabtay oo dhan
way bogsadeen.

## Maxaa Qofka Nijaaseeya?

**7** Marka waxaa ku soo uruuray Farrisiin iyo qaar culimada ka tirsan oo Quddus ka yimid. 2 Oo
waxay arkeen xertiisa qaarkood oo iyaga oon fara xalanin cunto cunaya. 3 Waayo, Farrisiinta
iyo Yuhuudda oo dhan waxba mayna cuni jirin haddayna gacmahooda si adag u maydhin, si ay
u ilaaliyaan caadada odayaasha. 4 Oo markay suuqa ka yimaaddaan waxba ma cunaan, ilaa
oy gacmaha maydhaan oo waxaana jiray caadooyin kale oo badan oy ilaaliyaan, sida dhaqidda
koobabka, iyo dusuuda, iyo weelasha nuxaasta ah, iyo miisaska. 5 Marka Farrisiintii iyo
wadaaddada ayaa waydiiyay Xertaadu maxay u ilaalin waayaan caadada iyo dhaqanka
odayaasha? Sababtoo ah waxay wax ku cunaan gacmo aan maydhnayn? 6 Marka wuxuu ku
yidhi, Ishacyaah run buu sheegay markuu labawejiilanimadiina sii sheegay isaga oo yidhi,
Dadkanu dibnahooda ayay igu ammaanaan, Laakiin qalbigoodu wuu iga fogyahay. 7 Si aan
macna lahayn ayay ii caabudaan, Iyaga oo dadka bara amarrada iyo caadooyinka dadka.[57*]
8 Idinku sharciga Eebbe kuma dhaqantaan, laakiinse waxaad ku dhaqantaan caadooyinka
dadka, sida maydhidda dusuuda iyo koobabka, iyo waxyaabo kale oo badan oo kuwaas la mid
ah. 9 Marka wuxuu ku yidhi, Sharciga Eebbe meel baad iska dhigtaan si aad caadooyinkiina u
ilaalisaan. 10 Waayo, Muuse wuxuu yidhi, Waa inaad aabbahaa iyo hooyadaa xurmayso; oo
qofkii aabbihii iyo hooyadii caayaa, waa in la dilo.[58*] 11 Laakiin idinku waxaad aaminsantihiin
Hadduu nin aabbihii iyo hooyadii ku yidhaahdo: Waxaan idiin taro iyo sama falkayguba waa
Sadaqo dar Eebbe ah; 12 Inuu aabbihii iyo hooyadii u sama falo inayna waajib ku ahayn.
13 Caadooyinkiina ayaad erayga Eebbe ku jabisaan, oo wax badan oo kuwan oo kale ah ayaad
samaysaan.

## Waxa Qofka Nijaaseeya

14 Markaasuu dadkii u yeedhay oo wuxuu ku yidhi, I maqla kulligiin oo garta. 15 Ma jiro wax
qofka dibadda ka soo gala oo nijaasayn kara, laakiin waxa isaga ka soo baxa, waxaas ayaa
qofka nijaaseeya. 16 Qofkii dhago wax lagu maqlo leh ha maqlo. 17 Marka intuu dadkii ka tagay
ayuu guri galay, deedna xertiisii ayaa tusaalihii wax ka waydiisay. 18 Markaasuu iyaga ku yidhi,
Idinkuna ma sidaasaad u garasho la'dihiin? Miyaydaan garanaynin in waxa qofka dibadda
kasoo galaa ayna nijaasayn karin? 19 Waayo, qalbigiisa ma galaan, laakiin calooshiisay galaan,
oo waxay ku dhacaan meesha lagu saxaroodo. {Sidaasuu cunta oo dhan ku xalaaleeyay.}
20 Wuxuuna ku yidhi, Waxa qofka ka soo baxa, kuwaas weeye kuwa qofka nijaaseeyaa.
21 Maxaa yeelay, kuwaas weeye kuwa qalbiga qofka gudihiisa ka soo baxa: fikradaha sharka
leh, iyo galmada xaaraanta ah, iyo tuuganimada, iyo dilka, iyo sinada, 22 Iyo damaca sharka
leh, iyo hinaasaha, iyo khiyaanada, iyo camal xumaanta, iyo cawryanimada iyo cayda, iyo
kibirka, iyo nacasnimada. 23 Waxaas sharka leh oo dhan gudaha ayay ka soo baxaan oo qofka
ayay nijaaseeyaan.

## Naag Aan Yuhuud Ahayn Oo La Bogsiiyay

24 Meeshaas ayuu ka kacay oo wuxuu tagey agagaarka Turos iyo Siidoon. Marka guri ayuu
galay oo in la ogaado muusan doonaynin, laakiinse wuu is qarin kari waayay 25 Deedna waxaa
maqashay naag gabadheedii shaydaan wasakh leh ku jiro, oo intay u timid ayay lugihiisa ku
dhacday. 26 Naagtaasu waxay ahayd Giriig qolada fayniqiyiinta ah. Oo waxay ka bariday in uu

---

57 Ishacyaah 29:13

58 Baxniintii 20:12 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:16 iyo Laawiyiintii 20:9

gabadheeda shaydaanka ka saaro. 27 Marka wuxuu ku yidhi, Marka hore carruurtu ha
dhargaan, waayo, ma fiicna in furinka wiilasha la qaado oo Ayda loo tuuro. 28 Laakiin way u
jawaabtay oo ku tidhi: Waa runtaa, Sayidow, laakiinse Ayduba jajabka wiilasha ka dhaca ee
miiska hoostiisa ku dhaca ayay cunaan. 29 Deedna wuxuu iyada ku yidhi, Hadalkaas aawadiis
Iska tag gabadhaadii shaydaankii wuu ka baxaye. 30 Markay gurigeedii timid waxay aragtay
gabadhii oo sariirta jiifta oo shaydaankii ka baxay.

### Nin Dhega La' Oo Carrab La' Oo La Bogsiiyay

31 Mar kale ayuu Turos ka soo tagay oo intuu siidoon soo maray ayuu dhinaca badda galili ku
soo noqday, oo wuxuu yimid gobolka Dekabolis. 32 Deedna waxay u keeneen nin dhega la' oo
carrab la', waxayna ka baryeen inuu gacantiisa saaro. 33 Markaasuu intuu dadkii dhan uga
saaray, dhegaha faraha ka galiyay, oo ku tufay oo carrabkiisa taabtay. 34 Oo intuu samada kor
u eegay, ayuu taahay oo ku yidhi, Efata, oo ah furan.[59*] 35 Markiiba dhegihiisii way furmeen oo
carrabkiisii xidhnaana wuu dabcay, oo si bayaan ah ayuu u hadlay. 36 Wuxuuna amar ku
bixiyay inaan cidna loo sheegin; laakiin mar kasta oo uu la dardaarmaba warkiisay sii faafiyaan.
37 Aad ayayna ula yaabeen oy uga heleen, oo waxay yidhaahdeen Wax walba si wanaagsan
ayuu u sameeyay. Kuwii dhagaha la'aa wax buu maqashiiyay, kuwii carrabka la'aaana wuu ka
hadliyay.

### Waxaa La Quudiyay Afar Kun Oo Nin

**8** Maalmahaas dad fara badan ayaa isu yimid, oo waxay cunaan mayna haysan, marka Ciise
wuxuu u yeedhay xertiisii oo wuxuu ku yidhi, 2 Dadkan faraha badan ayaan u naxariisanayaa,
waayo, durba saddex maalmood ayay ila joogeen, oo waxay cunaanna ma haystaan.
3 Haddaan guryohoodii u diro, iyaga oo soomanna, jidkay ku itaal beeli doonaan, waayo,
qaarkood waxay ka yimaaddeen meel fog. 4 Deedna xertiisii ayaa u jawaabtay, oo waxay ku
yidhaahdeen Meeshan cidlada ah xaggee looga heli karaa furin dadkan oo dhan gaadha?
5 Marka wuxuu waydiiyay Immisa furin ah ayaad haysaan? Waxay ku yidhaahdeen Toddoba.
6 Deedna dadkii ayuu amar ku siiyay inay dhulka fadhiistaan. Markaasuu toddobadii furinka
ahayd soo qaaday, oo intuu mahadnaqay ayuu kala jejebiyay oo xertiisii siiyay si ay u
qaybiyaan. Marka dadkii ayay u qaybiyeen. 7 Haddaba xertu Waxay hayeen in yar oo kalluun
yar yar ah. Oo intuu barakeeyay, ayuu ku amray in ay u qaybiyaan. 8 Deedna way cuneen oo
way dhargeen; dabadeedna toddoba saladood oy ka buuxaan jajabkii ka hadhay ayay soo
uruuriyeen. 9 Kuwii cunayna qiyaastii waxay ahaayeen afar kun, marka wuu kala diray. 10 Isla
markiiba xertiisii ayuu doonni la fuulay, oo wuxuu yimid xagga Dalmanuuta.

### Ciise Markii La Waydiistay Inuu Mucjiso Sameeyo Wuu Diiday

11 Marka Farrisiintii ayaa u yimid, oo waxay billaabeen inay wax waydiiyaan, oo waxay
waydiisteen inuu calaamad cirka ka tuso, si ay u jirrabaan. 12 Intuu qalbiga ka taahay ayuu
yidhi, Qarnigan muxuu calaamad u doonayaa? Runtii waxaan idinku leeyahay, Qarnigan
calaamo lama siin doono. 13 deedna wuu iskaga tagay oo haddana doonnidii intuu fuulay ayuu
dhanka kale u kacay.

---

59 Waa iftax afka Carabiga iyo Aramaayga.

### Ciise Xertiisii Wuxuu Ku Canaantay Fahma Darridooda

[14] Marka Xertii waxay illoobeen inay furin sii qaataan, oo doonta wax furin ah mayna ku
wadanin hal xabbo mooyee. [15] Marka digniin ayuu siiyay oo wuxuu ku yidhi, Iska eegaa
khamiirka Farrisiinta iyo khamiirka Herodos. [16] Deedna way is waydiyeen, oo waxay isku
yidhaahdeen Sababtuu sidaa u leeyahy ma inaynaan furin soo qaadan baa? [17] Ciise oo fahmay
ayaa ku yidhi, Maxaad uga hadlaysaan inaydaan furin haysan? Miyaydaan weli fahmin oo
garanin? Miyaad Qalbi la'dihiin? [18] Indhaad leedihiine waxbana ma aragtaan miyaa? Oo
Dhegaad leedihiine waxbana ma maqashaan miyaa? miyaydaan xusuusnayn? [19] Markii aan
Shantii furinka ahayd shanta kun u kala jejebiyay, immisa salood oo jajab ka buuxo ayaad ka
soo uruuriseen? Waxay ku yidhaahdeen Laba iyo toban. [20] Oo markii aan toddobadii funinka
ahayd afartii kun u kala jejebiyay, immisa saladood oo jajab ka buuxo ayaad ka soo
uruuriseen? Waxay ku yidhaahdeen Toddoba. [21] Markaasuu ku yidhi, Miyaydaan weli fahmin?

### Ciise Nin Indhala' Ayuu Beytsayda Ku Bogsiiyay

[22] Marka Beytsayda ayay yimaaddeen. Oo waxay u keeneen nin indha la' oo waxay ka
baryeen inuu taabto. [23] Markaasuu ninkii indhaha la'aa gacanta qabtay, oo tuulada dibadda uga
saaray, oo intuu indhaha kaga tufay oo gacmihiisii saaray, ayuu waydiiyay Wax ma aragtaa?
[24] Markaasuu intuu kor eegay yidhi, Waxaan arkaa niman geedo socda la moodo. [25] Deedna
mar kale ayuu gacmihiisa indhaha ka saaray. Oo si fiican ayuu wax u arkay, wuuna bogsaday,
oo bayaan ayuu wax u arkay. [26] Deedna gurigiisii ayuu u diray, oo wuxuu ku yidhi, Tuulada ha
gelin oo cidna waxba ha u sheegin.

### Butros Wuxuu Qiray Inuu Ciise Yahay Masiixa

[27] Marka Ciise iyo xertiisuba waxay tageen oo galeen tuulooyinka Kaysariya Filibos. Oo
xertiisa ayuu jidka wax ku waydiiyay, oo wuxuu ku yidhi, Dadku yay igu sheegaan? [28] Waxay
yidhaahdeen Nebi Yaxye, qaarna, Ilyaas, qaar kalena, Nebiyada midkood. [29] Deedna iyagii
ayuu waydiiyay, oo wuxuu ku yidhi, Idinkuse yaad igu sheegtaan? Butros ayaa u jawaabay oo
wuxuu ku yidhi, Waxaad tahay Masiixa. [30] Marka wuxuu amar ku siiyay inayna cidna isaga u
sheegin.

### Ciise Wuxuu Sii Sheegay Dhimashadiisa Iyo Sarakiciddiisaba

[31] Marka wuxuu billaabay inuu baro inay waajib ku tahay Wiilka Aadanaha inuu aad u
xanuunsado, oo ay odayaasha iyo wadaaddada sare iyo culimaduba diidaan, oo la dilo, oo
saddex maalmood dabadeed uu soo sarakaco. [32] Si cad ayuu arrintaas uga hadlay. Marka
Butros ayaa gees ula baxay oo billaabay inuu canaanto. [33] Laakiin Ciise intuu soo jeedsaday
oo xertiisa eegay, ayuu Butros canaantay, oo wuxuu ku yidhi, Dib iigaa joogso,
Shaydaanyahow, waayo, arrimaha Eebbe kama fikirtid laakiinse waxaad ka fikirtaa arrimaha
dadka. [34] Marka dad fara badan iyo xertiisii ayuu u yeedhay oo wuxuu ku yidhi, Qofkii doonaya
inuu iga daba yimaado, waa inuu doonistiisa dafiro oo uu iskutallaabtiisa soo qaato oo i soo
raaco. [35] Qofkii doonaya inuu naftiisa badbaadiyo wuu waayi doonaa, laakiin qofkii naftiisa
aawaday iyo Injiilka aawadii u waaya wuu badbaadin doona. [36] Waayo, maxay qofka ugu
taallaa hadduu dunida oo dhan helo oo uu naftiisa waayo? [37] Oo muxuu qofku naftiisa ku
furtaa? [38] Marka qof alla qofkii qarnigan dembiga iyo sharka leh aniga iyo hadalkayga ku dafira,

Wiilka Aadanuhuna wuu dafiri doona isaga markuu ammaanta Aabbihii ku yimaado isaga oo malaa'igaha qudduusiinta ah wata.

**9** Marka wuxuu ku yidhi, iyaga Runtii waxaan idinku leeyahay, Kuwa halkan taagan qaarkood sinaba dhimasho uma dhadhamin doonaan ilaa oy arkaan boqortooyada Eebbe oo xoog ku imanaysa.

### Ciise Muuqiisu Wuu Isbeddelay

2 Lix maalmood dabadeed Ciise wuxuu kaxaystay Butros iyo Yacquub iyo Yooxanaa; oo
wuxuu keligood geeyay buur dheer, marka hortooda ayuu ku badelmay. 3 Dharkiisu aad buu u
caddaaday si aan cid dhulka wax u caddayn kartaa jirn. 4 Deedna waxaa iyaga u muuqday
Ilyaas iyo Muuse oo Ciise ayay la hadleen. 5 Marka Butros ayaa Ciise ku yidhi, Macallinow,
waxaa fiican inaynu halkan iska joogno. marka aan Saddex Teendho samaynno, mid adiga
midna Muuse midna Ilyaas. 6 Maxaa yeelay, wax uu ku hadlo muusan garanaynin cabsi
darteed. 7 Marka daruur ayaa timid oo iyaga hadhaysay, oo waxaa daruurtii ka dhex
dhawaaqay cod leh Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay ee maqla isaga. 8 Isla markiiba markay
hareerahooda eegeen, cid kale oo iyaga la joogta mayna arag Ciise oo kaliya mooyee.
9 Deedna markay buurta ka soo degayeen, wuxuu amar ku siiyay waxay arkeen inayna cidna u
sheegin ilaa iyo inta Wiilka Aadanuhu kuwii dhintay ka soo sarakicayo. 10 Marka dardaarankiisii
way ilaaliyeen inkastoy iswaydiinayeen Waa maxay ka soo sarakiciddii kuwii dhintay?
11 Deedina waxay waydiiyeen oo ku yidhaahdeen: Culimadu maxay u yidhaahdaan: Waa inuu
Ilyaas marka hore yimaado? 12 Marka wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Waa run waa inuu
Ilyaas marka hore yimaado oo wax walba soo celiyo. Marka maxay u qorantahay in Wiilka
Aadanuhu in badan xanuunsan doono oo la diidi doono? 13 Laakiin waxaan idinku leeyahay,
Ilyaas wuu yimid, oo waxay doonaan bay ku sameeyeen sidii isaga laga qoray.

### Wiilkii Shaydaanku Ku Jiray Waa La Bogsiiyay

14 Deedna markay xertii kale u yimaaddeen, waxay arkeen dad fara badan oo la jooga iyo
Culimadii oo la doodaya. 15 Ka dibna markay dadkii oo dhan isaga sidaa u arkeenba way
yaabeen oo intay ku soo ordeen ayay salaameen. 16 Marka wuxuu waydiiyay Maxaad
iswaydiinaysaan? 17 Deedna mid dadka ka mid ah ayaa ugu jawaabay Macallinow, waxaan kuu
keenay wiilkayga oo shaydaan ayaa carrab tiray. 18 Meel alla meeshuu ku qabto ayuu ku ridaa;
oo afkuu ka xumbeeyaa, wuuna ilka jirriqsadaa oo wuu qallalaa. Waxaan xertaada ka baryay
inay ka saaraan, wayna kari waayeen. 19 Marka wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi,
Qarniyahow rumaysadka daran! Ilaa iyo goormaan idinla joogi doonaa? Oo Ilaa iyo goormaan
idiin dulqaadan doonaa? Ii keena isaga. 20 Deedna way u keeneen. Oo markuu shaydaankii
sidaa u arkay isaga wiilkii ayuu gilgilay, deedna intuu dhulka ku dhacay ayuu galgashay isaga
oo afka ka xumbaynaya. 21 Marka aabbihii ayuu waydiiyay Ilaa iyo goormuu sidan ahaa?
Wuxuu ku yidhi, Tan iyo yaraantiisii. 22 Marar badan wuxuu ku tuuraa dab iyo biyo si uu u dilo,
laakiin haddaad wax ka qaban karto noo naxariiso oo na caawi. 23 Ciise wuxuu ku yidhi,
Haddaad iimaan leedahay, wax walba way u suurta galaan kii rumaysad leh. 24 Isla markiiba
wiilka aabbihii ayaa kor u dhawaaqay oo isagoo ilmaynaya ayuu ku yidhi, Sayidow, waan
rumaysanahay, iga caawi rumaysad la'aantayda. 25 Marka Ciise markuu arkay dadkii oo ku soo
uruuraya, ayuu shaydaankii wasakhda lahaa canaantay oo ku yidhi, Shaydaanyoho carrabka

iyo dhegaha la' waxaan kugu amrayaa inaad Ka soo baxdo oodan mar dembe ku noqonin.
[26] Shayddankii intuu qayliyay oo gilgilay ayuu soo baxay. Deedna wiilkii wuu miyir beelay oo sidii qof dhintay oo kale ayuu noqday, markaasay dad badan yidhaahdeen Waa mayd.
[27] Laakiin Ciise ayaa gacanta qabtay oo kiciyay; wuuna kacay. [28] Ciise markuu guriga galay, xertiisii waxay gooni ahaan u waydiiyeen Annagu maxaanu u saari kari waynay? [29] Wuxuu ku yidhi, Noocanu salaad iyo soon mooye wax kale kuma soo boxo.

### Ciise Mar Labaad Ayuu Dhimashadiisa Sii Sheegay

[30] Marka halkaas way ka tageen oo Galili ayay dhex mareen, in la ogaadana muusan doonayn. [31] Waayo, xertiisii ayuu wax barayay, oo wuxuu ku yidhi, Wiilka Aadanaha dadka ayaa loo gacan gelin doonaa, wayna dili doonaan oo markii la dilo, saddex maalmood dabadeed, ayuu sarakici doonaa. [32] Laakiin hadalkaas way fahmi waayeen, wayna ka xishoodeen inay waydiiyaan.

### Is-hoosaysiinta Iyo Kibir La'aanta

[33] Marka Kafarna'um ayuu yimid oo intuu guriga joogay ayuu waydiiyay Maxaad ka wada hadlayseen intaad jidka ku soo jirteen? [34] Laakiin way iska aamuseen, waayo, intay jidka ku soo jireen waxay ka wada hadlayeen ka ugu sarreeya dhexdooda. [35] Marka intuu fadhiistay ayuu laba iyo tobankii u yeedhay oo ku yidhi, Hadduu qof doonayo inuu dadka ugu sarreeyo, waa inuu ugu wada hooseeyo oo uu adeege noqdo. [36] Deedna intuu ilma yar soo qaaday oo dhexdooda istaajiyay, oo uu laabta ku qaaday ayuu iyaga ku yidhi, [37] Ku alla kii carruurta kan oo kale ah magacayga ku aqbala, wuu i aqbalaa, oo ku alla kii i aqbala aniga ima aqbalee wuxuu aqbalaa kii i soo diray.

### Kii Aan Mucaarad Innagu Ahayn Wuu Innala Jiraa

[38] Marka Yooxanaa ayaa ku yidhi, Macallinow, waxaannu aragnay nin magacaaga shaydaanada ku saaraya oo waannu ka cilinay, waayo, isagu muusan ina soo raacin. [39] Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, Ha u diidina, waayo, ma jiro qof magacayga mucjisooyin ku sameeya oo hadal xun iga sheega. [40] Waayo, kii aan inaga horjeedin wuu inala jiraa. [41] Oo ku alla kii koob biyo ah magacayga idinku siiyaa sababtoo ah waxaad tihiin kuwa Masiixa, runtii waxaan idinku leeyahay, Abaalkiisu kama lumayo.

### Ciise Wuxuu Ka Digay Inaan Dadka Dembi Loo Horseedin

[42] Ku alla kii xumeeya kuwan yar yar ee i rumeeyay midkood, waxaa u roon in dhagax shiid qoorta loo galiyo oo badda lagu tuuro. [43] Hadday gacantaadu xumaan kuu horseeddo, iska jar; maxaa yeelay waxaa kuu wanaagsan inaad gacan la'aan nolosha ku gasho intii adiga oo laba gacmood leh jahannamada dabka aan la demin karin tagi lahayd [44] {Oo ah meesha dixirigoodu uusan dhimanayn, dabkuna uusan ka demaynine.} [45] Hadday lugtaadu xumaan kuu horseeddo, iska jar, waayo, Waxaa kuu wanaagsan inaad naafanimo iyo lug la'aan nolosha ku gasho intii adiga oo laba lugood leh lagugu tuuri lahaa jahannabada. [46] {Oo ah meesha dixirigoodu uusan dhimanayn, dabkuna uusan ka demaynin.} [47] Hadday ishaadu xumaan kuu horseeddo, iska bixi. waayo, Waxaa kuu wanaagsan inaad boqortooyada Eebbe IL keliya ku gasho intii adiga oo laba indhood leh lagugu tuuri lahaa jahannabada. [48] Oo ah meesha dixirigoodu uusan

dhimanayn, dabkuna uusan ka demaynin. [49] Waayo, mid walba dab ayaa lagu milxin doonaa.
[50] Milixdu way wanaagsan tahay, laakiin hadday dhadhaan beesho, maxaa lagu milxiyaa? Milix
isu lahaada, oo nabad ku wada noolaada.

### Furriinka Dumarka

**10** Marka halkaas ayuu ka soo kacay oo wuxuu tegay gobolka Yahuudiya iyo Urdun
shishadeeda. Deedna dad fara badan ayaa ku soo uruuray, oo siday caadadiisu ahayd wax
buu baray. [2] Deedna Farrisiin ayaa u yimid oo si ay eed ugu helaan waxay waydiiyeen Ma
xalaal baa in ninku xaaskiisa furo? [3] Deedna wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Muuse muxuu
idin faray? [4] Waxay yidhaahdeen Muuse wuxuu fasaxay in warqaddii dalaaqa la siiyo oo la
furo. [5] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Qalbi adkaantiina aawadeed ayuu amarkaas idiin siiyay.
[6] Laakiin tan iyo Bilowgii dunida, Eebbe wuxuu sameeyay lab iyo dhadig. [7] Sababtaas
aawadeed ninku wuxuu ka tagayaa aabbihii iyo hooyadii, wuxuuna la midoobayaa xaaskiisa.
[8] Deedna labadoodu waxay noqonayaan isku jidh. markaa ka dib iyagu laba ma aha, laakiinse
waa hal jidh. [9] Hadaba wuxuu Eebbe isku xidhay ninna yuuna kala furin. [10] Markay guriga
galeen, xertiisii ayaa arrintaas wax ka waydiisay. [11] Markaasuu ku yidhi, Ku alla kii xaaskiisa
fura oo naag kale guursada wuu ka sinaystaa. [12] Hadday iyadu ninkeeda furto oy nin kale
guursatana way sinaysataa.

### Ciise Carruur Yar Yar Ayuu U Duceeyay

[13] Marka carruur yar yar ayay u keeneen isaga si uu u taabto, laakiinse xertii ayaa
canaanatay.[60*] [14] Laakiin Ciise markuu arkay, wuu ka xumaaday, oo wuxuu ku yidhi, Daaya
carruurta yar yar, ha ii yimaaddeene, oo ha u diidina, maxaa yeelay kuwan oo kale ayaa
boqortooyada Eebbe leh. [15] Runtii waxaan indku leeyahay: Ku alla kii aan boqortooyada Eebbe
u aqbalin sida ilma yar oo kale, ma gali doono. [16] Markaasuu laabta ku qaaday oo intuu
gacmihiisa saaray, ayuu barakeeyay.

### Ninkii Dhallinyarada Ahaa Ee Hodanka Ahaa

[17] Markuu waddada u soo baxay, nin baa ku soo orday oo intuu u jilba joogsaday ayuu wax
waydiiyay oo ku yidhi, Macallin wanaagsanow, maxaan sameeyaa si aan nolosha weligeed ah
u dhaxlo? [18] Ciise wuxuu ku yidhi, Maxaad Wanaagsanow ii leedahay? Mid wanaagsanu ma
jiro Eebbe mooyee. [19] Amarrada Sharciga waad taqaanaa. Waa inaadan sinaysan, oo aadan
gacan ku dhiigle noqon oo aadan waxba xadin, oo aadan marag been ah furin, oo aadan cidna
dulmin, oo waa inaad Aabbahaa iyo hooyadaa maamuusto.[61*] [20] Wuxuu ugu jawaabay oo ku
yidhi, Macallinow, kuwaas oo dhan tan iyo yaraantaydii ayaan dhawraa. [21] Deedna Ciise ayaa
intuu si jecayl leh u eegay ku yidhi, Qodob keliya ayaa kuu dhiman. Orod tag oo waxaad
leedahay oo dhan, xaraash oo masaakiinta sii, jannada ayaad abaal gud ku lahaan doontaaye;
deedna kaalay oo i soo raac. [22] Haddaba intuu hadalkaas ka xumaaday ayuu iska tagay,
waayo, wuxuu ahaa nin hanti badan leh. [23] Marka Ciise intuu hareeraha eegay ayuu xertiisa ku
yidhi, Kuwa hodanka ah way ku adagtahay inay boqortooyada Eebbe galaan! [24] Xertiisiina

60 Kuwii carruurta u keenay ayay canaanteen
61 Baxniintii 20:14 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:18

hadalkaas ayay la yaabeen. Laakiinse Ciise mar kale ayuu ku celiyay oo wuxuu ku yidhi, Carruuryahay, adagaa in boqortooyada Eebbe la galo! [25] Inuu awr Irbad daloolkeed ka duso aayaa ka fudud in nin hodan ah boqortooyada Eebbe galo. [26] Deedna aad bay u sii yaabeen, oo waxay isku yidhaahdeen Tolo yaa badbaadi doona? [27] Marka Ciise intuu eegay ayuu ku yidhi, Arrintanu suurta gal uma aha dadka, laakiinse Eebbe waxba kuma aha, waayo, Eebbe wax walba wuu awoodaa. [28] Marka Butros ayaa ku yidhi, Annagu wax walba farahaannu ka qaadnay, oo adigaannu ku raacnay. [29] Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Ma jiro qof ka tagay guri, ama walaalo, ama hooyo, ama aabbe, ama carruur, ama beero aawaday iyo Injiilka aawadii, [30] Laakiin wuxuu inta dunida la joogo heli doonaa boqol laab guryo iyo walaalo iyo hooyooyin iyo carruur iyo beero ah, wuxuuna la heli doonaa cadaawad, aakhirana wuxuu heli doonaa nolosha weligeed ah. [31] Laakiin kuwa badan oo hore ayaa dembayn doonaan, kuwo dembena way horrayn doonaan.

### Mar Saddexaadkii Ciise Wuxuu Sii Sheegay Dhimashadiisa

[32] Markay jidka ku jireen oy Quddus ku socdeen, Ciise ayaa hor maray. Wayna la yaabeen oo intay daba socdeen way cabsanayeen. Deedna laba iyo tobankii ayuu haddana kaxaystay oo wuxuu billaabay inuu u sheego waxa isaga ku dhici doona, [33] oo wuxuu ku yidhi, Waxaynu ku soconnaa Quddus. Wiilka Aadanahana waxaa loo dhiibi doonaa wadaaddada sare iyo culimada; oo dil bay ku xukumi doonaan. Waxayna u dhiibi doonaan ajinabiga.[62*] [34] Wayna ku jeesjeesi doonaan, oo candhuuf bay ku tufi doonaan, oo way garaaci doonaan, wayna dili doonaan, saddex maalmood dabadeedna wuu soo sarakici doonaa.

### Codsigii Yacquub iyo Yooxanaa

[35] Waxaa u yimid Yooxanaa iyo walaalkii Yacquub oo ahaa ilma Sebadi oo waxay ku yidhaahdeen Macallinow, waxaannu doonaynaa inaad noo yeesho wixii aannu kaa codsano. [36] Wuxuu ku yidhi, Maxaan idiin sameeyaa? [37] Waxay ku yidhaahdeen Noo ogolow inuu midkaana midigta kaa fadhiisto ka kalena bidixda ammaanta Boqortooyadaada.[63*] [38] Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, Waxaad waydiisanaysaan ma garanaysaan! Ma karaysaan inaad ka cabtaan koobka aan ku dhawahay inaan ka cabbo, iyo in laydinku biyagaliyo biyagalinta laygu biyagalin doono? [39] Waxay ku yidhaahdeen Waannu karaynaa. Marka Ciise wuxuu ku yidhi, Koobka aan ka cabbayo waad ka cabbi doontaan, oo biyo galinta lay biyo galin doonana waa laydin biyo galin doonaa, [40] Laakiinse inaad midigtayda iyo bidixdayda fadhiisataan anigu ma lihi, laakiin waxaa la siin doonaa kuwa loo diyaariyay. [41] Tobankii markay taas maqleen waxay billaabeen inay Yacquub iyo Yooxanaa calool xumo u qaadaan. [42] Laakiin Ciise ayaa u yeedhay oo ku yidhi, Waad ogtihiin in ay umadaha madaxdoodu u taliyaan oy kuwooda awoodda leh dusha ka qabsadaan [43] Laakiin idinka dhexdiinna yayna sidaas noqon, laakiinse ku alla kii doonaya inuu madax idiin noqdo adeegihiina ha ahaado. [44] Oo ku alla kii doonaya inuu idiinku sarreeyo, waa inuu adeege idiin ahaado. [45] Waayo, Wiilka Aadanuhu uma imanin in loo adeego, laakiinse inuu adeego iyo inuu naftiisa kuwo badan ku soo furto.

---

62 Maamulkii Roomanka

63 Ilaa iyo wakhtigaas waxay u haystaan inuu boqortooyadi dunida ee reer Banii Israa'iil soo celin doono sidii Boqor Daa'uud.

### Ciise Bartimayos Ayuu Bogsiiyay

46 Marka Areexoo ayay yimaaddeen oo markuu Areexo ka soo baxay, isaga iyo xertiisa iyo
dad fara badan, nin indha la’a oo Bartimayos Ina Timayos la odhan jiray ayaa jidka ag fadhiyay
oo dawarsanayay. 47 Oo markuu maqlay inuu Ciisihii reer Naasared yahay ayuu billaabay inuu
kor u dhawaaqo oo yidhaahdo Ciise, Ina Daa’uudow, ii naxariiso. 48 Marka kuwo badan ayaa
canaantay si ay u aamusiyaan, laakiinse kor buu u sii dhawaaqay, Ina Daa’uudow, ii naxariiso!
49 Deedna Ciise ayaa intuu istaagay ku yidhi, War bal u yeedha. markaasay ninkii indhaha la’aa
u yeedheen oo ku yidhaahdeen War is daji oo kac wuu kuu yeedhayaaye. 50 Marka Intuu
booday oo go’ii iska tuuray ayuu Ciise u yimid. 51 Deedna Ciise ayaa waydiiyay oo ku yidhi,
Maxaad doonaysaa oon kuu sameeyaa? Indhoolihii ayaa ku yidhi, Sayidow, inaan wax arko.
52 Marka Ciise ayaa ku yidhi, Soco. Rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyaye. Isla markiiba wax buu
arkay, oo waddada ayuu la maray isaga.

### Ciise Guul Ayuu Magaalada Quddus Ku Galay

**11** Markay Quddus ku soo dhawaadeen oy soo gaadheen Beytfaage iyo Beytaniya,
agagaarka Buurta Saytuun, ayuu laba xertiisa ka mid ah diray. 2 Oo wuxuu ku yidhi, Tuulada
idinka horraysa taga, oo markaad gashaan waxaad ka helaysaan qayl xidhan oo aan ninna
weligii fuulin. Soo fura oo keena. 3 Oo hadduu qof wax idinka waydiiyo Maxaad waxan u
samaynaysaan? waxaad ku tidhaahdaan: Sayidkaa u baahan, oo isla markiiba halkanuu u soo
diri doonaa. 4 Marka way tageen oo waxay heleen qayl oo meel kadinka dibaddiisa ah geed ku
xidhan, wayna soo fureen. 5 Deedna kuwii halkaa taagnaa ayaa ku yidhi, War Maxaad qaylka u
furaysaan? 6 Marka waxay ku yidhaahdeen siduu Ciise ku amray, ka dibna way oggolaadeen.
7 Deedna qaylkii Ciise ayay u keeneen, oo intay dharkooda dusha ka saareen, ayuu ku
fadhiistay.

8 Marka dad fara badan ayaa dharkoodii jidka ku goglay, kuwa kalena laamo ayay beeraha ka
soo jareen oo jidkay ku gogleen. 9 Kuwii ka horreeyay iyo kuwii ka dambeeyayba waxay ku
dhawaaqayeen, Hoosanna, waxaa barakaysan ka magaca Rabbiga ku imanaya. 10 Waxaa
barakaysan boqortooyada imanaysa oo aabbeheen Daa’uud. Hoosanna ha ahaato meelaha
ugu sarreeya. 11 Marka Ciise Quddus ayuu yimid oo macbudka ayuu galay. Deedna hareeraha
ayuu eegay, gabbalkiina wuu dhacay, marka xagga Beytaniya ayuu laba iyo tobankii ula baxay.

### Ciise Geedkii Uu Midhaha Ka Waayay Wuu Habaaray

12 Maalintii ku xigtay, markay Beytaniya ka yimaaddeen, wuu gaajaysnaa. 13 Marka geed
berde ah oo caleemo leh ayuu Meel fog ka arkay. Wuuna u yimid isaga oo filaya inuu midho ka
helo. Markuu u yimidna waxba muusan ka helin caleemo kaliya mooyee, waayo, wakhtigii
berdaha ma ahayn. 14 Marka geedkii ayuu ku yidhi, Hadda ka dib weligaa ninna midho kaama
cuno. Xertiisuna way maqlayeen.

### Ciise Macbudka Ayuu Nadiifiyay

15 Waxay yimaaddeen Quddus. Ciisena macbudka ayuu galay oo wuxuu billaabay inuu ka
eryo kuwii macbudka wax ku iibinayay iyo kuwii wax ka iibsanayayba. Oo wuxuu rogay
miisaskii sariflayaasha iyo kuraastii kuwii qoollayda iibinayay. 16 Wuxuuna u diiday in macbudka

badeeco lala soo dhex maro. 17 Deedna wax buu baray isaga oo leh Miyayna qorrayn
Gurigayga Umadaha oo dhan waxay ugu yeedhi doonaa guriga salaadda? Idinkuse waxaad ka
dhigteen godka tuugada.[64*] 18 Marka wadaaddadii sare iyo culimadii ayaa maqlay oo waxay ka
wada hadleen siday u dili lahaayeen, waxayse ka cabsanayeen dadka, maxaa yeelay, dadka
oo dhan waxay ka heleen oy jeclaysteen wax bariddiisa. 19 Deedna markay qorraxdu dhacday
ayay magaalada ka baxeen.

### Xoogga Rumaysadka

20 Subaxnimadii markay soo noqdeen, waxay arkeen geedkii berdaha ahaa oo xididdada ka
engegay. 21 Marka Butros wuxuu soo xusuustay, oo ku yidhi, Macallinow, eeg, geedkii berdaha
ahaa eed habaartay wuu engegaye. 22 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Eebbe rumeeya.
23 Runtii waxaan idinku leeyahay, Ku alla kii buurtan ku yidhaahda Ruq oo badda isku tuur oon
qalbigiisa ka shakiyin laakiin rumaysta in wuxuu yidhi, ay noqonayso, way u ahaan doontaa.
24 Sidaa darteed, waxaan idinku leeyahay, wax kasta ood salaad ku baridaan, rumaysta inaad
hesheen oo waa laydin siin doonaa. 25 Oo markaad tukanaysaan cafiya hadday jirto wax
xumaan ah ood cid qalbiga ugu haysaan, si Aabbihiinna jannada ku jiraa xumaantiinna u
cafiyo. 26 Haddaydaan cafiyin, Aabbihiinna jannada ku jira xumaantiinna ma cafiyo.

### Ciise Amarkiisii Iyo Awooddiisii Ayaa Wax Laga Waydiiyay

27 Mar kale ayay Quddus yimaaddeen. Oo isaga oo macbudka dhex maraya waxaa u yimid
wadaaddadii sare iyo culimadii iyo odayaashii. 28 Oo waxay ku yidhaahdeen Amarkeed waxan
ku samaysaa? Oo yaa amar kuu siiyay inaad waxan samayso? 29 Ciise ayaa u jawaabay oo ku
yidhi, Aniguna hal baan idin waydiinayaaye iiga jawaaba, deedna waan idiin sheegi doona
amarka aan waxan ku sameeyo. 30 Biyo galintii Nebi Yaxye ma xagga jannaday ka timid mise
xagga dadka? Ii jawaaba.[65*] 31 Marka way wada hadleen iyaga oo leh War maxaynu dhahnaa?
Haddaynu nidhaahno: Xagga jannada, wuxuu inagu odhan doonaa, maxaad u rumaysan
waydeen? 32 Laakiin haddaynu nidhaahno: Xagga dadka, dadka ayaynu ka cabsadnaynaa.
Waayo, kulligood waxay rumaysanyihiin inuu Yaxye Nebi ahaa. 33 Markaasay Ciise u
jawaabeen oo ku yidhaahdeen Ma garanayno. Ciisena wuxuu ku yidhi, Aniguna idiin sheegi
maayo amarkaan waxan ku sameeyo.

### Tusaale Ku Saabsan Beerta Canabka Ah

**12** Marka wuxuu billaabay inuu tusaale kula hadlo iyaga Nin baa wuxuu beertay beer canab
ah oo intuu darbi ood ah ku wareejiyay oo god macsareed ka dhex qoday oo minaarad ka
dhisay oo beer qodayaal u kiraystay ayuu dal kale u dhoofay. 2 Markii xilligii beera goosatka la
gaadhay ayuu shaqaale u soo diray beeralaydii si uu beeralayda midhihii beerta ka soo go'ay
uga soo qaado. 3 Marka way qabteen oo intay garaaceen ayay isaga oo fara madhan direen.
4 Haddana shaqaale kale ayuu u soo diray. Deedna sharaftii ayay ka qaadeen oo intay
garaaceen ayay dakhreen. 5 Haddana mid kale ayuu u soo diray, oo isagana way dileen; Oo
kuwo kale oo badan ayuu u diray. markaasay wax ay garaacaan iyo wax ay dilaan ka dhigeen.

64 Ishacyaah 56:7

65 Farriintii Nebi Yaxye ma Eebbe ayay ka timid oo soo diray mise been bay ahayd?

[6] Marka wuxuu lahaa Wiil kaliya oo uu jeclaa. Deedna ugu dambaystii isagii ayuu u soo diray
oo wuxuu is yidhi, Wiilkayga way tixgalin doonaan. [7] Laakiin beeralaydii waxay isku
yidhaahdeen Kanu waa kii dhaxalka lahaa ee kaalaya intaynu dilo, dhaxalka qaadanee.
[8] Deedna intay qabteen, oy dileen ayay beertii canabka ahayd dibaddeeda ku tuureen. [9] Marka
Sayidkii beerta canabka muxuu samayn doonaa? Intuu yimaado oo beeralaydaas laayo ayuu
kuwo kale beerta canabka u dhiibi doonaa. [10] Miyaydaan kitaanka ka akhriyin
Dhagixii ay kuwa wax dhisa diideen ayaa tiir dhexaadka noqday. [11] Rabbiga ayaa tan
sameeyay oo waa ku yaab indhahayagaa?[66*] [12] Marka waxay damceen inay qabtaan, laakiin
dadka ayay ka cabsadeen; wayo, waxay garteen inuu tusaalaha iyaga kaga hadlayo, deedna
way iska daayeen oo way iskaga tageen.

### Canshuurta Kaysar La Siiyo

[13] Marka waxay u soo direen Farrisiinta iyo Herodosiinta qaarkood si ay hadalkiisa ugu
shirqoolaan. [14] Oo intay u yimaaddeen ayay ku yidhaahdeen Macallinow, waannu ognahay
inaad xaq tahay oo aadan ninna u eexanin, waayo, dadka wejigooda kama haybaysatid ee
jidka Eebbe ayaad si xaq ah u bartaa. Marka Ma xalaal baa in Canshuur Kaysar la siiyo mise
ma aha? Ma bixinaa mise ma bixino? [15] Laakiin Ciise labawejiilanimadooda ayuu gartay, oo
wuxuu ku yidhi, Maxaad ii shirqoolaysaan? Dinaar ii keena aan arkee. [16] Deedna way u
keeneen, oo wuxuu ku yidhi, Sawirkan iyo fartan yaa iska leh? Waxay ku yidhaahdeen Kaysar.
[17] Marka Ciise wuxuu ku yidhi, Hadaba Kaysar siiya wuxuu Kaysar leeyahay, Eebbana siiya
wuxuu Eebbe leeyahay. markaasay ka yaabeen.

### Su’aal Guurka Aakhiro Ku Saabsan

[18] Marka waxaa u yimid Sadukiin oo odhan jiray Qiyaamo ma jirto. Oo waxay waydiiyeen oo
ku yidhaahdeen [19] Macallinow, Muuse wuxuu noo qoray, hadduu nin walaalkii dhinto oo uu
xaas ka tago isaga oon ubad lahayn, waa inuu walaalkii xaakiisa dumaalo oo uu walaalkii
farcan u reebo. [20] Marka waxaa jiray toddoba walaalo ah. Kii ugu horreeyay ayaa xaas
guursaday, wuuna dhintay, wax ubad ahna kama tegin. [21] Marka kii labaad ayaa dumaalay
iyada, wuuna dhintay, isaga oon wax ubad ah ka tegin, oo sidaas oo kale ayaa ku dhacday ilaa
iyo kii saddexaad. [22] Toddobaduba way wada guursadeen, ubadna mayna ka tegin.ugu
dembaystiina naagtii ayaa dhimatay. [23] Maalinta qiyaamada kee ayay xaas u noqon doontaa?
Waayo, toddobaduba way wada guursadeen? [24] Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Miyaydaan
khaldanayn? Waayo, kitaabka iyo awoodda Eebbe toona ma garanaysaan. [25] Maxaa yeelay
markay kuwii dhintay soo sarakacaan, ma guursadaan, loomana guuriyo, laakiin waxay ahaan
doonaan sida malaa’igaha jannada ku jira. [26] Oo kuwii dhintay in la sarakiciyo miyaydaan
kitaabkii Muuse ka akhriyin siduu Eebbe geed dhexdii ugala hadlay oo ugu yidhi, Anigu
waxaan ahay Eebbaha Ibraahim iyo Eebbaha Isxaaq iyo Eebbaha Yacquub? [27] Isagu ma aha
Eebbaha kuwii dhintay, laakiinse waa Eebbaha kuwa nool. idinku aad baad u khaldantihiin.

66 Sabuur 118:22-23

### Amarka Ugu Wayn Sharciga

[28] Marka culimada midkood ayaa u yimid, oo wuxuu maqlay iyaga oy wada doodayaan, oo markuu ogaaday inuu si wanaagsan u jawaabay, ayuu wax waydiiyay oo ku yidhi, Amarkee ugu wayn shareecada oo dhan? [29] Marka Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Amarka ugu wayn waa

Maqal, Israa'iilow; Rabbiga Eebbaheenna ahu waa Rabbi kaliya. [30] Marka waa inaad Rabbiga Eebbahaaga ah ka jeclaato qalbigaaga oo dhan, iyo naftaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan. [31] Ka labaadna waa Waa inaad deriskaaga u jeclaato sida naftaada. amar kale oo kuwan ka wayn ma jiro.[67*] [32] Deedna wadaadkii ayaa ku yidhi, Sida runta ah, Macallinow, si wanaagsan ayaad u hadashay markaad tidhi: Eebbe waa mid kaliya, oo mid kalena ma jiro isaga mooyee. [33] Iyo in isaga laga jeclaado qalbiga oo dhan iyo nafta oo dhan, iyo xoogga oo dhan, iyo in deriska loo jeclaado sida naftaada, taas ayaana ka wanaagsan allabaryo la gubo iyo allabaryo kale oo dhanba. [34] Markuu Ciise arkay inuu si fiican u jawaabay, wuxuu ku yidhi, Boqortooyada Eebbe kama fogid. Markaas ka dib ninna kuma dhiiran inuu wax waydiiyo.

### Ciise Ma Ina Daa'uud Baa?

[35] Marka Ciise oo macbudka wax ku baraya ayaa yidhi, Maxay culimadu u yidhaahdaan: Masiixu waa Ina Daa'uud? [36] Daa'uud qudhiisuna, isaga oo Ruuxa Qudduuska ahu ka dhex hadlayo, wuxuu yidhi, Rabbigu wuxuu Sayidkay ku yidhi, Midigtayda fadhiiso, Ilaa iyo intaan cadowgaaga cagahaaga hoostooda gelinayo.[68*] [37] Sidaa darteed Daa'uud laftiisa ayaa Rabbi ugu yeedhay: Marka siduu wiilkiisa ku yahay? Dad waynihiina si farxad leh ayay ku dhagaysteen.

### Ciise Wuxuu Ka Digay Culimada Xun

[38] Marka isaga oo wax baraya ayuu ku yidhi, Iska jira culimada, kuwa jecel inay khamiiso dhaadheer ku labistaan oo suuqyada lagu salaamo. [39] Oo safafka hore ee Sunagogyada iyo meelaha hore oo alla bariyada fadhiista. [40] Kuwa carmallada cuntada ka dhammeeya ee, salaadda istusnimo u dheereeya. Kuwaasu waxay heli doonaan ciqaab aad u daran.

### Sadaqaddii Carmalka

[41] Marka Ciise wuxuu fadhiistay ka soo horjeedka meeshii sadaqada lagu uruurinayay, oo wuxuu eegayay siday dadku lacagta ugu ridayaan khasnada. kuwo badan oo hodan ah ayaa wax badan ku riday. [42] Marka waxaa timid Carmali miskiin ah. Oo waxay ku ridday laba qadaadiic ah oo qiimahoodu rubuc yahay. [43] Deedna Ciise intuu xertiisii u yeedhay ayuu ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Carmalidaas miskiinta ahu waxay khasnadda ku ridday in ka badan intay dadka kale ku rideen. [44] Waayo, kulligood waxay ku rideen wixii baahidooda ka badnaa, laakiinse iyada oo baahan ayay wixii ay lahayd oo dhan, xataa waxay ku noolaan lahayd oo dhan bixisay.

---

67 Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-5 iyo Laawiyiintii 19:18

68 Sabuur 110:1

## Ciise Wuxuu Sii Sheegay In Macbudka Quddus La Burburin Doono

**13** Markuu macbudka ka baxay, mid xertiisa ka mid ah ayaa ku yidhi, Eeg, Macallinow,
dhagaxyada iyo dhismaha siday u qurux badanyihiin! 2 Ciise wuxuu ku yidhi, Dhismahan wayn
ma aragtaa? Dhagax dhagax ka saarraan maayo ee waa la dumin doonin. 3 Oo markuu Buurta
Saytuun meel macbudka ku toosan fadhiistay, Butros iyo Yacquub iyo Yooxanaa iyo Andaros
ayaa si gaar ah u waydiiyay, oo waxay ku yidhaahdeen 4 Noo sheeg goormay waxaasu dhici
doonaan? Oo maxaa Calaamad u ah markay waxaasu soo dhawyihiin? 5 Ciise ayaa ku yidhi,
Iska eega yaan laydin khiyaanayn. 6 Kuwo badan ayaa magacayga ku iman doona, oo waxay
odhan doonaan: Anigu waxaan ahay isaga, oo kuwo badan ayay khiyaani doonaan. 7 Oo
markaad dagaallo iyo dagaallo hadalhayntooda maqashaan ha cabsanina. Waxaasu waa inay
dhacaan, laakiin dhammaadku waa wali. 8 Waayo, ummadba ummad bay ku kici doontaa,
boqortooyana boqortooyo, oo waxaa meelo kala duwan ka dhici doona dhulgariiryo iyo gaajo.
Waxaasu waa billowga foosha. 9 Laakiin is ilaaliya. Waxaa la idiin dhiibi doonaa madax
dhaqameedyada, oo Sungogyada dhexdooda ayaa laydinku garaaci doonaa; oo Madax iyo
Boqorro ayaad daraadday u hor istaagi doontaan si aad ugu marag furtaan. 10 Oo marka hore
waa in Injiilka Umadaha oo dhan loogu marag furaa. 11 Laakiin markii la idin xidho oo
maxkamad la idin taago ha ka welwelina waxaad ku hadli doontaan; laakiin wixii saacaddaas
laydin siiyo ku hadla, waayo, ka hadlya idinka ma aha, laakiin waa Ruuxa Qudduuska ah.
12 Walaalba walaal ayuu shirqooli doona si loo dilo, aabbana wiilkiisa, carruurtuna waalidkood
ayay ku kici doonaan, oy dili doonaan. 13 Dadka oo dhan ayaana magacayga aawadii idin
necbaan doona, laakiin qofkii ilaa ugu dembaysta adkaysta kaas ayaa badbaadi doona.
14 Laakiinse markaad aragtaan balaayadii iyo burburkii oo meel aan loogu tala galin taagan
siduu Nebi Daanyeel sii sheegay (akhristow garo). Markaa kuwa Yahuudiya jooga buuraha ha
u carareen. 15 Oo qofkii gurigiisa dushiisa fuushana yuuna guriga ka soo degin oo gelin si uu
alaabtiisa u qaato. 16 Oo qofkii beer jooga yuuna dib u noqonin si uu dharkiisa u qaato.
17 Maalintaasi u daranaa Dumarka uurka leh iyo kuwa carruurtooda nuujinaya. 18 Ku ducaysta
inayna waxaasu wakhtiga qabowga ah dhicin. 19 Waayo, maalmahaasu waxay ahaan doonaan
kuwo aad u daran oo aan horay loo arag ilaa iyo wakhtigii Eebbe dunida abuuray dibna aan u
dhici doonin. 20 Oo hadduuna Rabbigu wakhtigaas soo gaabinin, ninna ma badbaadeen, laakiin
kuwa uu doortay aawadood ayuu wakhtigaas u gaabiyay. 21 Markaas haddii qof idinku
yidhaahdo, Masiixii Waa kann ama, Wa kaas, ha rumaysanina. 22 Waayo, waxaa iman doona
Masiixiyo been ah iyo nebiyo been ah, oo waxay samayn doonaan calaamooyin iyo
mucjisooyin yaab leh si ay xataa kuwa la doortay u khiyaanaan hadday u suurta gasho.
23 Laakiin idinku is ilaaliya, maxaa yeelay wax walbaba horaybaan idiinku sheegay.

## Imaatinka Wiilka Aadanaha

24 Laakiin wakhtigaas, dhibaatada dabadeed, Qorraxdu way madoobaan doontaa, Dayaxuna
ma iftiimi doono. 25 Xiddiguhuna cirkay ka soo daadan doonaan, awoodda cirkana waa la gilgili
doonaa. 26 Markaasay arki doonaan Wiilka Aadanaha oo daruuraha ku imanaya isaga oo leh
xoog badan iyo ammaan. 27 Deedna wuxuu soo diri doonaa malaa'igihiisa, oo kuwa uu doortay
ayuu ka soo uruurin doonaa afarta jaho iyo meesha dhulka ugu fog ilaa iyo meesha cirka ugu
fog.

## Soo Jeeda

[28] Hadda geedka berdaha ah ku tusaala qaata. markay laamihiisu qoyanyihiin oy caleemo
soo bixiyaan waxaad garanaysaan inuu roobkii dhawyahay. [29] Idinkuna sidaas oo kale markaad
waxaa dhacaya aragtaan, garta inuu dhawyahay oo albaabka taaganyahay. [30] Runtii waxaan
idinku leeyahay, Qarniganu ma dhammaan doono ilaa oy waxaas oo dhan dhacaan. [31] Cirka
iyo dhulku way dhammaan doonaan, laakiinse hadalladaydu ma dhammaan doonaan.
[32] Laakiin maalintaas iyo saacaddaas ninna ma oga, malaa'igaha jannada ku jira iyo Wiilka
toona ma oga, Aabbaha oo kaliya mooyee. [33] Is ilaaliya oo soo jeeda, waayo, ma garanaysaan
markuu wakhtigu imanayo. [34] Waayo wiilka aadanuhu waa sidii nin Dal kale u dhoofay oo
gurigiisii ka tegay. Oo shaqaalihiisii amar siiyay, oo Mid kasta shaqo u xil saaray; oo waardiyihii
amar ku siiyay inuu soo jeedo. [35] Marka soo jeeda, waayo, idinku ma garanaysaan xilliga uu
sayidkii guriga lahaa imanayo, Makhribkii, ama Habeen badhkii, ama markuu Diiqu ciyo, ama
Aroortii. [36] Waayo, waaba intaasoo idinka oo hurda uu kadis ku yimaado. [37] Waxaan idinku
leeyahay ayaan dadka oo dhanna ku leeyahay Soo jeeda.

## Shirqoolkii Ciise Loo Dhigay

**14** Laba maalmood ayaa ka hadhsanaa Ciiddii Kormaridda iyo Kimista aan khamiirka lahayn.
Marka Wadaaddada sare iyo culimaduba waxay doonayeen fursad ay Ciise ku qabtaan oy ku
dilaan. [2] Laakiinse waxay yidhaahdeen Xilliga Ciidda ma aha si ayna dadku rabshad u kicinin.

## Ciise Oo Beytaniya Lagu Subkay

[3] Marka isaga oo Beytaniya jooga oo guriga Simoonkii baraska qabi jiray ku jira, oo cunto u
fadhiya, waxaa u timid naag dhalo alabastar ah oo cadar naaradiin qaali ahu ku jiro wadata. Oo
intay dhaladii jebisay ayay cadarkii madaxiisa ku shubtay. [4] Deedna kuwii halkaas joogay
qaarkood ayaa niyadda ka yidhi, Cadarkan maxaa sidan loogu khasaariyay? [5] Waayo,
cadarkan waxaa lagu iibin lahaa in ka badan saddex boqol oo dinaar oo masaakiintaa la siin
lahaa wayna ka gunuunaceen iyada. [6] Laakiin Ciise ayaa ku yidhi, War Maxaad u dhibaysaan
iyada? Wax wanaagsan bay ii samaysaye.

[7] Waayo, masaakiintu mar walba way idinla joogaan oo markaad doontaan ayaad wax
wanaagsan u samayn kartaan; laakiinse Anigu mar walba idinlama joogo. [8] Intii karaankeeda
ah ayay samaysay, jidhkayga ayay intaan la aasin ka hor cadar sii marisay. [9] Runtii waxaan
idinku leeyahay, Dunida oo dhan meel alla meeshii Injiilkan lagu wacdiyo waxay samaysay
ayaa la sheegi doonaa oo lagu xusuusan doonaa iyada.

## Khiyaanadii Yuudas

[10] Yuudas Iskariyod oo ka mid ahaa laba iyo tobankii ayaa u tegay wadaaddada sare si uu
Ciise ugu soo qabto. [11] Markay taas maqleenna aadbay ugu farxeen oo waxay u
ballanqaadeen inay lacag siinayaan; deedna fursad wanaagsan oo uu ku soo qabto ayuu
raadiyay.

## Cashadii Ugu Dambaysay

[12] Maalintii ugu horraysay ee Ciiddii Kimista aan khamiirka lahayn, markii neefka Kormaridda
la gowracay ayay xertiisu isaga ku yidhaahdeen Xaggeed doonaysaa inaannu tagno oon
Cashada Ciidda Kormaridda kuugu diyaarino? [13] Marka laba xertiisii ah ayuu diray oo ku yidhi,
Magaalada gala, oo waxaa idinla kulmi doona nin jeerigaan biyo ah wata ee isaga raaca.
[14] Deedna guriga uu galo ninka leh waxaad ku dhaahdaan Macallinkii wuxuu yidhi, Away
qolkaygii martidu ee aan xertayda Ciidda kula cuntayn lahaa? [15] Marka wuxuu idin tusi doonaa
qol wayn oo dabaqa sare ah oo goglan oo diyaar ah; halkaa inoogu diyaariya. [16] Xertii ayaa
baxay oo magaaladay galeen, oo waxay heleen iyada oo wax walba siduu u sheegay tahay, oo
cashada Ciidda Kormaridda ayay diyaariyeen. [17] Markii makhribkii la gaadhay ayuu laba iyo
tobankii la yimid. [18] Oo iyaga oo fadhiya oo cunto cunaya ayuu Ciise yidhi, Runtii waxaan idinku
leeyahay, Midkiin oo wax ila cunaya ayaa i khayaani doona. [19] Marka way murugoodeen oo
mid walba wuxuu ku yidhi, Ma anigaa? [20] Wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Waa laba iyo
tobanka midkood oo saxanka gacanta igula jira. [21] Wiilka Aadanuhu wuu tagayaa sida laga
qoray isaga, laakiin waxay balaayo ku dhacday ninka Wiilka Aadanaha khayaana. Waxaa
ninkaas u wanaagsanaan lahayd inuusan dhalanba. [22] Oo intay wax cunayeen, Ciise ayaa furin
qaaday oo barakeeyay oo intuu jejebiyay ayuu iyaga siiyay oo ku yidhi, Qaata, kanu waa
jidhkayge. [23] Oo koobkii ayuu qaaday oo intuu mahadnaqay ayuu iyaga siiyay, oo kulligood way
ka wada cabbeen. [24] Wuxuuna ku yidhi, Kanu waa dhiiggayga axdiga cusub kaasoo kuwo
badan aawgood loo daadinayo. [25] Runtii waxaan idinku leeyahay, Mar dambe midhaha geedka
canabka ah kama cabbi doono ilaa iyo maalinta aan iyaga oo cusub boqortooyada Eebbe ku
cabbi doono.

## Ciise Wuxuu Sii Sheegay Inay Xertu Ka Carari Doonaan

[26] Markaasay intay Qasiido qaadeen xagga Buurta Saytuun u kaceen. [27] Deedna Ciise ayaa ku
yidhi, Kulligiin waad iga wada shaki doontaan, waayo, waxaa qoran Adhijirkaan dili doonaa,
iduhuna way kala firxan doonaan.[69*] [28] Laakiin markii la i sarakiciyo dabadeed ayaan Galili
indiinka horrayn doonaa. [29] Marka Butros ayaa ku yidhi, Hadday kulligood kaa wada shakiyaan
anigu kaa shakiyi maayo. [30] Ciise ayaa ku yidhi, Runtii waxaan kugu leeyahay Maanta, xataa
caawadan, intuuna Diiqu laba goor ciyin, saddex jeer ayaad i dafiri doontaa. [31] Laakiinse aad
buu ugu celceliyay Xataa hadday igu kallifto inaan kula dhinto, kollaba ku dafiri maayo.
dhammaantooddna sidaas oo kale ayay wada yidhaahdeen.

## Ciise Wuxuu ku Ducaystay Beertii Getsemane

[32] Marka waxay yimaaddeen meel Getsemane la odhan jiray, wuxuuna xertiisii ku yidhi,
Halkan fadhiista intaan soo tukanayo. [33] Oo wuxuu kaxaystay Butros iyo Yacquub iyo
Yooxanaa, marka wuxuu billaabay inuu murugoodo oo tiraanyoodo. [34] Deedna wuxuu ku yidhi,
Naftaydu aad bay u murugaysantahay ilaa iyo heer dhimasho; halkan jooga oo soo jeeda.
[35] Deedna intuu in yar durkay ayuu dhulka ku dhacay, oo ku tukaday: In hadday suurta gasho
saacaddu dhaafto. [36] Wuxuuna yidhi, Aabbow, Aabbe, wax walbaba waad kartaa, ee Koobkan i
dhaafi, laakiin yayna doonistayda noqon, laakiinse doonistaada ha noqoto. [37] Deedna markuu u
yimid wuxuu arkay iyaga oo hurda, oo wuxuu Butros ku yidhi, Simoonow, ma huruddaa? Ma

69 Kitaabka Nebi Sakariye 13:7

kari wayday inaad saacad keliya soo jeedo? [38] Soo jeeda oo tukada si aan la idiin jirrabin. Ruuxu waa diyaar, laakiin jidhku wuu itaal daranyahay. [39] Mar kale ayuu tegay oo tukaday isaga oo hadalkii oo kale ku hadlaya. [40] Oo mar kale ayuu haddana u yimid oo wuxuu arkay iyaga oo hurda, waayo, indhahoodu lulmay la cuslaayeen, waxay ugu jawaabaana mayna garanaynin. [41] Markii saddexaad ayuu yimid oo ku yidhi, Hadda seexda oo nasta, waayo saacaddii ayaa la joogaa. Bal eega, Wiilka Aadanaha ayaa dembiilayaasha loo dhiibi doonaa.
[42] Kaca aan tagnee; bal eega kii i khayaanay wuu soo dhawyahay.

## Ciise Waa La Qabtay

[43] Isla markiiba isaga oo hadalkii wada Yuudas oo laba iyo tobanka ka mid ahaa ayaa yimid, isaga iyo dad badan oo seefo iyo ulo wata, oo ka yimid wadaaddada sare iyo culimada iyo odayaasha. [44] Khaa'inka ayaa calaamad[70*] siiyay oo ku yidhi, Ka aan dhunkado weeyee isaga Qabta; oo idinka oo gaadhka ka haya kaxeeya. [45] Markuu sidaa u yimidba wuu u tegay oo wuxuu ku yidhi, Macallinow, wuuna dhunkaday. [46] Deedna gacanta ayay ku dhigeen oo way qabteen. [47] Mid kuwii ag taagnaa ka mid ah ayaa toorri iska jaray, oo wadaadkii sare adeegihiisii ayuu ku dhuftay oo dhegta ka gooyay. [48] Marka Ciise ayaa ku yidhi, War ma budh cad ayaad u soo baxdeen inaad soo qabataan waa idinka si aad ii qabataan seefaha iyo budhadhka watee? [49] Maalin kasta macbudkaan idinla joogay oon wax ku bari jiray mana aydaan i qabanin. laakiin waa inuu kitaabku rumoobo. [50] Deedna xertii ayaa ka wada carartay.

## Nin Dhallinyara Ah Ayaa Cararay

[51] Waxaa daba galay nin dhallinyaro ah oo mara yar guntan; wayna qabteen. [52] Marka intuu maradii yarayd ka tegay ayuu isaga oo qaawan cararay.

## Ciise Waxaa Maxkamad Lagu Taagay Wadaadka Sare Hortiisa

[53] Ciise waxay u geeyeen wadaadkii sare, waxaana ku soo uruuray wadaaddadii sare iyo odayaashii iyo culimadii. [54] Marka Butros ayaa meel fog ka soo daba galay, oo intuu guriga wadaadka sare barxaddiisa soo galay ayuu ilaaladii dabka la kulaalay. [55] Golihii sare ee culimada iyo shir gudoonkoodii oo dhan ayaa isku dayay inay helaan markhaati Ciise ku marag fura si ay u dilaan, balse way waayeen. [56] Waayo, kuwo badan ayaa marag been ah ku furay, laakiin maraggoodu isku mid ma noqonin. [57] Marka kuwo kale ayaa kacay oo marag been ah ku furay oo yidhi, [58] Waxaannu maqalnay isaga oo leh: macbudkan gacmaha lagu sameeyay ayaan dudumin doonaa, oo saddex maalmood gudahood ayaan mid kale oo aan gacmo lagu samaynin dhisi doonaa. [59] Laakiin xataa tan markhaatigoodu isma waafaqin. [60] Deedna wadaadkii sare ayaa intuu dhex istaagay Ciise waydiiyay oo ku yidhi, Miyaadan wax jawaab ah bixinayn? Kuwanu waxay kugu marag furayaanu waa maxay? [61] Laakiinse Isagu wuu iska aamusay oo wax jawaab ah uma celin. Mar kale wadaadkii sare ayaa waydiiyay Ma waxaad tahay Masiixa ah Wiilka Ka ammaanta leh? [62] Ciise ayaa yidhi, Waan ahay, oo waxaad arki doontaan Wiilka Aadanaha oo fadhiya midigta xoogga Eebbe, oo ku imanaya daruuraha cirka.
[63] Marka wadaadkii sare ayaa intuu dharkiisii jeexay yidhi, Maxaannu markhaatiyayaal dembe

70 Af garasho ama af jaaq

ugu baahan nahay? [64] Waad maqasheen cayda.[71*] Maxay idinla tahay? Kulligood waxay isku raaceen inuu istaahilo in la dilo. [65] Deedna Qaarkood ayaa billaabay inay candhuuf ku tufaan oo intay indhaha ka xidheen oy garaaceen ayay ku yidhaahdaan Noo sheeg yaa kugu dhuftay kuwii gaadhka ahaana way dhurbaaxeen.

### Butros Oo Ciise Dafiray

[66] Markuu Butros barxadda hoose joogay waxaa u timid mid ka mid ah gabdhihii wadaadka sare u shaqayn jiray [67] Oo markay aragtay Butros oo dabka kulaalaya, ayay eegtay oo tidhi Adiguna waxaad la jirtay Ciisihii reer Naasared. [68] Laakiin wuu dafiray oo wuxuu ku yidhi, Anigu ma aqaanno, mana garanayo waxaad ka hadlayso. Marka albaabka agtiisa ayuu tegay, diiqiina wuu ciyay. [69] Deedna gabadh shaqaale ah ayaa aragtay oo waxay kuwii agtaagnaa ku tidhi Kanna waa ka mid. [70] Laakiin mar kale ayuu dafiray. Waxoogaa yar dabadeedna kuwii agtaagnaa ayaa mar kale Butros ku yidhi, Waa run, adiguna ka midbaad tahay waayo, waxaad tahay reer Galili. [71] Dabadeedna wuxuu billaabay inuu is habaaro oo dhaarto, oo yidhaahdo Anigu ma aqaano ninkaas aad ka hadlaysaan. [72] Deedna mar labaadkii ayuu Diqii ciyay; Markaasuu Butros xusuustay hadalkii Ciise Diiqu intuuna laba jeer ciyin, saddex jeer ayaad i dafiri doontaa markaasuu aad u murugooday oo ooyay.

### Ciise Oo La Hor Geeyay Bilaatos, Guddoomiyihii Rooma

**15** Markuu waagu baryay wadaaddadii sare ayaa kulan la galay odayaashii iyo culimadii iyo golihihii sare oo dhan. Ciisena intay xidh xidheen ayay kaxeeyeen oo waxay ku wareejiyeen Bilaatos. [2] Marka Bilaatos ayaa waydiiyay Ma Boqorkii Yuhuuddaad tahay? Wuxuu ugu jawaabay Waa sidaad u tidhi. [3] Marka wadaaddadii sare ayaa wax badan ku eedeeyay.
[4] Deedna Bilaatos ayaa mar kale wax waydiiyay isaga oo leh Miyaadan wax jawaab ah bixinaynin? Bal eeg, waxay eed kuu soo jeedinayaan. [5] Laakiin Ciise waxba uma jawaabin, sidaa darteed Bilaatos wuu la yaabay.

### Ciise Dil Baa Lagu Xukumay

[6] Marka waxay caadadiisu ahayd inuu Ciidda maxbuuska ay doonayaan u sii daayo. [7] Oo waxaa jiray nin Baraabbas la odhan jiray oo u xidhnaa fallaagada iyo qaswadayaal la xidhaa oo dilal gaystay xilligii qulqulatooyinka. [8] Dadkii faraha badnaa ayaa Bilaatos ku kacay oo ka codsaday inuu u sameeyo siduu u samayn jiray. [9] Laakiin Bilaatos ayaa ugu jawaabay Ma waxaad doonaysaan inaan idiin sii daayo Boqorka Yuhuudda? [10] Waayo, wuxuu ogaa wadaaddada sare inay hinaase iyo xaasidnimo ugu soo dhiibeen. [11] Laakiin wadaaddadii sare ayaa dadkii kiciyay oo ku qalqaaliyay inay ka codsadaan inuu Baraabbas u sii daayo.
[12] Deedna Bilaatos ayaa mar kale ku yidhi, Haddaba maxaan ku sameeyaa ka aad ugu yeedhaan Boqorka Yuhuudda? [13] Markaasay mar kale ku qaylyeen Iskutallaabta ku qodob.
[14] Marka Bilaatos wuxuu ku yidhi, Sabab, waa maxay sharka uu galabsaday? Laakiin korbay u sii qaylyeen Iskutallaabta ku qodob. [15] Marka Bilaatos wuxuu doonayay inuu dadka raalli galiyo, sidaa darteed Baraabbas ayuu u sii daayay, oo intuu Ciise garaacay ayuu amar ku bixiyay in iskutallaabta lagu qodbo.

---

71 Diinta oo la caayo iyo wax diinta loogs baxo oo lagu hadlo ama la sameeyo. Af Carabiga waxaa la dhahaa kalimat alkufri.

## Askartii ayaa Ciise Ku Majaajilootay

16 Deedna askartii intay isaga barxaddii gurigii gudoomiya (oo ahaa xarunta dawladda)
Geeyeen ayay gaadhkii oo dhan isugu yeedheen. 17 Marka Waxay u galiyeen dhar guduudan,
oo intay taaj qodax uga sameeyeen ayay madaxa u saareen. 18 Markaasay salaameen oo ku
yidhaahdeen Nabadu ha kuu ahaato Boqorka Yuhuuddow. 19 Deedna madaxay ka uleeyeen oo
candhuuf bay ku tufeen oo intay jilba joogsadeen ayay u sujuudeen. 20 Dabadeedna markay ku
majaajiloodeen dabadeed ayay dharkii guduudnaa ka bixiyeen oo dharkiisii ayay u galiyeen, ka
dibna way gaxeeyeen si iskutallaabta loogu qodbo.

## Ciise Iskutallaabta Ayaa Lagu Qodbay

21 Marka Waxaa soo ag maray Simoonkii reer Qayrawaan, Aleksandar iyo Rufus aabbahood
oo baadiyaha ka yimid, marka waxay ku qasbeen inuu iskutallaabta u qaado. 22 Oo waxay u
soo kaxeeyeen meel (Golgota) la yidhaahdo taas oo macneheedu yahay meeshii dhakada.
23 Deedna waxay siiyeen khamri xammayti lagu daray, laakiin wuu diiday. 24 Oo markay
iskutallaabta ku qodbeen, dharkiisii ayay qaybsadeen oy u qori tuurteen mid kasta intuu
qaadan lahaa. 25 Waxayna ahayd saddex saac [72*] markay iskutallaabta ku qodbeen. 26 Oo
waxaa lagu qoray meel ka korraysa isaga dacwaddii lagu eedeeyay oo leh BOQORKA
YUHUUDDA. 27 Marka waxaa iskutallaabta lagula qodbay laba tuug, mid midigtiisa, midna
bidixdiisa. 28 Oo waxaa xaqiiqo noqotay aayaddii tidhi Waxaa isaga lagu tiriyay shar
falayaasha.[73*] 29 Marka kuwii ag marayay ayaa caayay, oo intay madaxa ruxeen ayay
yidhaahdeen Kaaga macbudka duminaya ee saddex maalmood gudahood ku dhisayow
30 isbadbaadi oo iskutallaabta ka soo deg. 31 Sidoo kale wadaaddadii sare iyo culimaduba way
ku majaajilloodeen iyaga oo leh Kuwii kalena wuu badbaadiyay, naftiisana ma badbaadin karo.
32 Masiixa Boqorka Israa'iil hadda iskutallaabta ha ka soo dego, si aannu u aragno oo u
rumayno. Kuwii iskutallaata lagula qodbayna way caayay.

## Ciise Wuu Dhintay

33 Deedna markay lixdii saac tahay dhulka oo dhan ayaa mugdi noqday ilaa iyo sagaalkii
saac.[74*] 34 Markay sagaal saac tahay ayuu Ciise kor u dhawaaqay Eloy, Eloy, lama sabakhtani?
oo ah Eebbeow, Eebbeow, maxaad ii dayrisay? 35

Kuwii ag taagnaa qaarkood ayaa markay maqleen, yidhi, Eega wuxuu u yeedhayaa Ilyaase.
36 Deedna mid ayaa intuu orday, oo isbuunyo khal ka soo buuxiyay, oo ul ku qaaday siiyay oo
yidhi, Suga aan aragno inuu Ilyaas yimaado oo soo dejiyee. 37 Marka Ciise intuu kor u
dhawaaqay ayay naftii ka baxday. 38 Deedna daahii macbudka ayaa kor iyo hoos laba u kala
dillaacay. 39 Marka taliye ururkii oo meel ku toosan taagnaa markuu arkay siday naftu uga
baxday wuxuu yidhi, Runtii, ninkanu wuxuu ahaa Wiilkii Eebbe. 40 Waxaana halkaas joogay
dumar meel fog ka eegayay, oo waxaa ka mid ahaa Maryama Magdala, iyo Maryama Yacquub
Yare iyo Yoosee hooyadood, iyo Saloome 41 Kuwaas oo Galili ka soo raacay oo u adeegi jiray,
waxaana jiray kuwo kale oo badan oo Quddus ka soo raacay.

---

72 Sagaalka saac ee subaxnimo

73 Ishacyaah 53:12

74 Saddexda galabnimo.

## Ciise Waa La Aasay

[42] Deedna markii makhribkii la gaadhay Maalintii diyaargawga oo ah maalinta Sabtida ka
horraysa, [43] Waxaa yimid Yuusufkii reer Arimataya oo ahaa xubin golaha sare ka tirsan oo
sharaf leh, wuxuuna ahaa mid boqortooyada Eebbe sugayay, oo intuu si geesinimo leh
Bilaatos ugu galay ayuu ka codsaday maydkii Ciise. [44] Bilaatos wuxuu ka yaabay siduu durba u
dhintay. Deedna intuu taliye ururkii u yeedhay ayuu waydiiyay inuu durba dhintay. [45] Deedna
Markuu taliye ururkii ka xaqiiqsaday ayuu maydkii Yuusuf siiyay. [46] Marka Yuusuf wuxuu soo
iibsaday kafan, oo intuu soo dejiyay isaga, oo kafankii ku duudduubay ayuu galiyay xabaal
dhagax ka samaysan, oo xabaasha afkeedana wuxuu ku soo giraangiriyay dhagax.
[47] Maryama Magdala iyo Maryama Yoosee hooyadi waxay arkeen meesha la dhigay.

## Ciise Wuu Ka Soo Sarakacay Kuwii Dhintay

**16** Markay Sabtidii dhammaatay Maryama Magdala, iyo Maryama Yacquub hooyadii iyo
Saloome waxay soo iibsadeen dhir udgoon si ay intay u yimaaddaan u mariyaan isaga.
[2] Waaberigii maalintii ugu horraysay ee toddobaadka markay qorraxdu soo baxday ayay
xabaashii yimaaddeen. [3] Iyaga oo is waydiinaya Yaa dhagaxa xabaasha afkeeda inooga
giraaangirin doona? [4] Markay eegeen waxay arkeen dhagixii oo la giraangiriyay; maxaa yeelay
wuxuu ahaa mid aad u wayn. [5] Deedna markay xabaashii galeen waxay arkeen nin dhallinyaro
ah oo dhinaca midig ka fadhiya oo khamiis cad xidhan, markaasay aad u naxeen. [6] Wuxuuna
ku yidhi, Ha naxina. Waxaad doonaysaan Ciisihii reer Naasared ee iskutallaabta lagu qodbay!
Wuu sarakacay, oo halkan ma joogo. Wataas meeshii la dhigay. [7] Laakiin orda, oo waxaad ku
dhahdaan xertiisii iyo Butros, Wuxuu idiinka horreeyaa Galili. Oo halkaas ayaad siduu idiin
sheegay ku arki doontaan. [8] Deedna deg deg bay xabaashii uga soo baxeen oo way soo
ordeen iyaga oo gariiraya oo yaaban, oo cidna waxba mayna u sheegin waayo way
cabsanayeen.

## Ciise Dad Kale Ayuu U Muuqday

[9] Marka Ciise maalintii ugu horraysay ee todddobaadka ayuu aroor hore sarakacay, oo wuxuu
markii ugu horraysay u muuqday Maryama Magdaladii uu toddoba jinni ka saaray. [10] Iyaduna
way tagtay oo waxay u sheegtay kuwii la joogi jiray, isaga oo barooranaya oo ooyaya. [11] Oo
markay maqleen inay aragtay oo uu noolyahay, way rumaysan waayeen. [12] Markaas dabadeed
isaga oo suurad kale leh ayuu laba iyaga ka mid ah u muuqday iyagoo sii socda oo baadiyaha
tegaya. [13] Marka way baxeen oo kuwii kale ayay u sheegeen, iyagana mayna rumaysanin.
[14] Deedna kow iyo tobankii oo cunto u fadhiya ayuu u muuqday. Wuxuuna ku canaantay
rumaysad la'aantooda iyo qalbi adaygooda, waayo, mayna aaminin kuwii isaga arkay markuu
sarakacay dabadeed. [15] Marka wuxuu iyaga ku yidhi, Dunida oo dhan taga, oo uunka oo dhan
Injiilka ku wacdiya. [16] Oo ku alla kii rumeeya oo la biyagaliyo wuu badbaadi doonaa, laakiin kii
aan rumaysanin waa la xukumi doonaa. [17] Kuwa rumeeyana Calaamooyinkan ayaa la socon
doona: Magacayga ayay shaydaanada ku saari doonaan, oo Afaf cusub ayay ku hadli
doonaan, [18] Oo Abeesooyin ayay qaadi doonaan, oo hadday sun lagu dhimanayo cabbaana
waxba kuma noqon doonaan, kuwa bukana gacmahay saari doonaan oo way bogsan
doonaan.

## Ciise Samada Ayuu Aaday

[19] Ka dibna Sayid Ciise markuu la hadlay dabadeed ayaa samada loo qaaday, wuxuuna
fadhiistay midigta Eebbe. [20] Iyaguna way baxeen oo meel kastoy tageen ayay dadka ku
wacdiyeen, Rabbiguna wuu la jiray iyaga, isaga oo Injiilka ku xaqiijinnaya mucjisooyin la socda.
Amen

## INJIILKA SIDA LUUKOS U QORAY

### Bilowgii Kitaabka

**1** Dad badan ayaa ku dadaalay inay soo habeeyaan dhacdadii dhexdayada lagu sameeyay
ee dhabta ahayd [2] Siday noo soo gaadhsiiyeen kuwii tan iyo Bilowgii goob joogayaasha ahaa
oo Erayga u adeegayay. [3] Sidaa darteed anigana waxaa ila qumanaatay maadaama oon tan
iyo Bilowgii wax walba oo dhacay aad u baadhay inaan si habaysan kuugu soo qoro Te'ofiloskii
sharafta lahaayow [4] Si aad u hubsato hadalkii lagu baray.

### Dhalashadii Nebi Yaxye Waa La Sii Sheegay

[5] Waagii uu Herodos boqorka Yahuudiya ka ahaa waxaa jiray wadaad la odhan jiray
Sakariye, oo ka mid ahaa dariiqadii Abiya; xaaskiisuna waxay ka mid ahayd farcankii Haaruun,
magaceedana waxaa la odhan jiray Elisabed. [6] Labadooduba Eebbe hortiisa xaq bay ku
ahaayeen, oo sharciga iyo amarrada Rabbiga ayay si eed la'aan ah ugu dhaqmi jireen.
[7] laakiinse carruur mayna lahayn, maxaa yeelay, Elisabed madhalays bay ahayd, oo
labadooduba way da'waynaayeen. [8] Deedna markay dariiqadiisu hoggaaminta cibaadada
lahaayeen, [9] Siday caadadu ahayd isaga ayaa qori tuur lagu doortay si uu macbudka Rabbiga
foox ugu shido. [10] Dadkuna dibadday ku tukanayeen markii fooxa la shidayay. [11] Deedna
waxaa isaga u muuqday malagii Rabbiga oo meesha fooxa lagu shido midigteeda istaagay.
[12] Sakariye markuu arkay ayuu naxay wuuna cabsaday. [13] Laakiin malagii ayaa ku yidhi, Ha
cabsanin Sakariyow waayo baryadaadii waa la aqbalay oo xaaskaaga Elisabedna wiil bay kuu
dhali doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa Yaxye. [14] Waxaad heli doontaa farxad; dad
badan ayaana dhalashadiisa ku farxi doonaa.[15] Waayo, Rabbiga hortiisa nin wayn buu ku
ahaan doonaa, mana cabbi doono khamri iyo wax lagu sakhraamo. Waxaana ka buuxsami
doona Ruuxa Qudduuska ah isaga oo uurka hooyadii ku jira. [16] Oo kuwo badan oo reer banii
Israa'iil ah ayuu Rabbiga Eebbahooda ah ku soo celin doonaa. [17] Isaguna wuxuu ku adeegi
doonaa ruuxii iyo xooggii Ilyaas si uu qalbiga aabbayaasha ugu soo jeediyo carruurtooda, oo
uu dembiilayaasha ugu soo celiyo xigmadda kuwa xaqa ah oo uu Rabbiga dad ugu diyaariyo.
[18] Sakariye wuxuu malagii ku yidhi, Sideen arrintan ku hubsan doonaa? Waayo, Anigu oday
baan ahay, xaaskayguna way gabowday'. [19] Malagii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Anigu
waxaan ahay Jibriil oo Eebbe hor istaaga. Waxaa la ii soo diray inaan kula hadlo oo aan
warkan wanaagsan kuu keeno. [20] Oo bal eeg, waad aamusnaan doontaa, oo ma hadli kari
doontid, ilaa iyo maalinta ay waxaasu ka dhacaan, waayo, waad rumaysan wayday hadalkayga
wakhtigiisa la fulin doono. [21] Markaas dadku waxay sugayeen Sakariye oo waxay la
yaabanaayeen siduu macbudka ugu daahay. [22] Markuu soo baxayna wuu la hadli kari waayay
iyaga, deedna waxay garteen inuu macbudka dhexdiisa Riyo ku arkay. markaasuu u midaaray
iyaga, isaga oon hadli karin. [23] Markay wakhtigii shaqadiisu dhammaadayna gurigiisii ayuu
tegay. [24] Maalmahaas dabadeedna xaaskiisa Elisabed ayaa uuraysatay, oo shan bilood ayay
isqarisay iyada oo leh. [25] Sidan ayuu Rabbigu ii sameeyay: Maalmahan ayuu naxariistiisa ii
muujiyay oo ceebtaydii dadka dhexdooda ka qaaday.

### Dhalashada Ciise Masiix Waa La Sii Sheegay

26 Bishii lixaadd Eebbe ayaa malaku Jibriil u soo diray magaalada Naasared ee Galili.
27 Wuxuuna usoo diray gabadh bikrad ah oo nin Yuusuf la odhan jiray oo farcankii Daa'uud ah
u doonanayd. Gabadha magaceedana waxaa la odhan jiray Maryama. 28 Malagii ayaa u soo
galay, oo wuxu ku yidhi, Nabadu ha kula jirto tii loo nimceeyay, Rabbigaa kula jira.
29 Markaasay hadalkiisii ka naxday, oo waxay is tidhi: Maxay tahay salaantani? 30 Malagii ayaa
ku yidhi, Ha cabsanin, Maryamay, waayo, nimco ayaad Eebbe ka heshay. 31 Oo bal eeg, waad
uuraysan doontaa, oo wiil baad umuli doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa Ciise.
32 Nin wayn buuna ahaan doonaa, waxaana loogu yeedhi doonaa Wiilka Ka ugu sarreeya,
Rabbiga Eebbaha ahuna wuxuu siin doonaa Carshigii Aabbihii Daa'uud. 33 Oo wuxuu Weligii
boqor u ahaan doonaa dadka reer Yacquub, boqornimadiisuna ma dhammaan doonto.
34 Deedna Maryama waxay malagii ku tidhi Siday tanu ku dhici kartaa Aniga oo bikrad ah?
35 Malagii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ruuxa Qudduuska ah ayaa kugu soo degi doona, oo
xoogga Ka ugu sarreeya ayaa ku hadhayn doona, sidaa darteed ka qudduuska ah ee kaa
dhalan doona waxaa loogu yeedhi doonaa Wiilka Eebbe. 36 Bal eeg, Ina adeertaa Elisabedna
wiil bay uuraysatay iyada oo da'wayn; oo tii madhalaysta loogu yeedhi jiray bisheedii lixaad
ayay ku jirtaa. 37 Waayo, wax Eebbe ku adag ma jiro. 38 Deedna Maryama waxay tidhi, Bal eeg,
waxaan ahay adeegihii Rabbiga, ee Sidaad tidhi ha ahaato. Marka malagii wuu ka tagay.

### Maryama Waxay Booqatay Elisabet

39 Maalmahaas Maryama ayaa kacday, oo waxay tagtay dhulkii buuralayda magaalo ku taalla
oo reer Yahuuda, 40 Oo intay gurigii Sakariye gashay, ayay Elisabet salaantay. 41 Deedna
markay Elisabed salaantii Maryama maqashay ayuu ilmihii uurkeeda ku jiray la boodbooday;
Elisabetna waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qudduuska ah. 42 Markaasay kor u dhawaaqday oo
waxay tidhi Dumarka dhexdooda waad ku barakaysantahay, oo midhaha makaankaagu wuu
barakaysanyahay. 43 Oo maxaan tan ku helay; inay Sayidkayga hooyadii i soo booqato? 44 Bal
eeg, markii codkii salaantaadu sidaa dhegahayga ugu dhacay, ilmihii uurkayga ku jiray ayaa
farxad la booday. 45 Waxaa barakaysan tii rumaysa in wixii Rabbigu u sheegay u ahaan
doonaan. 46 Maryamana waxay tidhi Naftaydu Rabbigay waynaynaysaa, 47 Ruuxdayduna
waxay ku farxi doontaa Eebbaha Badbaadiyahayga ah. 48 Waayo, wuxuu eegay is-hoosaysiinta
adeegayaashiisa, Bal eeg, hadda laga billaabo qarniyada oo dhan waxay iigu yeedhi doonaan:
Tii barakaysnayd. 49 Waayo, ka xoogga leh ayaa waxyaabo waawayn ii sameeyay; Magiciisuna
waa Qudduus, 50 Tan iyo ab ka abna naxariistiisu waxay gaadhaa Kuwa isaga ka cabsada.
51 Xooggiisa ayuu waxyaabo awood leh ku sameeyay, Oo kuwii kibirka iyo isla wayenidu
qalbigooda ku jirtay wuu kala firdhiyay. 52 Kuwii xoogga lahaana carshiyadooda ayuu ka soo
dejiyay, oo kuwii is-hoosaysiiyay ayuu sarraysiiyay. 53 Kuwii gaajaysnaana wax wanaagsan
ayuu ka dhergiyay, Kuwii hodanka ahaana iyaga oo fara madhan buu diray. 54 Adeegihiisa
Israa'iil ayuu caawiyay, si uu naxariistiisa u xusuusiyo siduu Aabbayaasheen ugu sheegay,
55 Ibraahim iyo farcankiisa weligood. 56 Maryamana markay saddex bilood la joogtay iyada ayay
gurigeeda ku noqotay.

## Dhalashadii Nebi Yaxye

57 Markii wakhtigay Elisabet umuli lahayd la gaadhay, way umashay oo wiil bay dhashay.
58 Deedna Deriskeedii iyo qaraabadeedii ayaa maqlay inuu Rabbigu si wayn ugu naxariistay
iyada, wayna la farxeen iyada. 59 Marka maalintii siddeedaad ayay u yimaaddeen si ay wiilka u
gudaan, oo waxay doonayeen inay magicii aabbihii Sakariye u bixiyaan. 60 Laakiin hooyadii
ayaa tidhi Maya ee waxaa loo bixin doonaa Yaxye. 61 Waxay ku yidhaahdeen Qaraabadaada
kuma jiro qof magacaas loo bixiyay. 62 Deedna Aabbihii ayay u midaareen oo waxay
waydiiyeen magaca uu doonayo in loo bixiyo. 63 Marka loox ayuu waydiistay oo wuxuu ku qoray
Magiciisu waa Yaxye Deedna way wada yaabeen. 64 Isla markiiba afkiisaa furmay,
carrabkiisiina wuu dabcay, oo Eebbe buu ammaanay. 65 Marka dariskooda oo dhan way
cabsadeen, oo dhacdadaas hadal haynteeda ayaa buuralayda Yahuudiya oo dhan ku fidday.

## Waxyigii Sakariye

66 Kuwii arrintaas maqlay oo dhanna qalbigay galiyyeen oo waxay yidhaahdeen Tollow
ilmahanu muxuu noqon doonaa? Waayo, gacantii Rabbiga ayaa la jirtay isaga. 67 Deedna
Aabbihii Sakariye waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qudduuska ah, oo waa loo waxyooday isaga
oo leh, 68 Ammaanu ha u ahaato Rabbiga ah Eebbaha Israa'iil, Waayo, dadkiisa ayuu soo
booqday oo furtay. 69 Farcankii adeegihiisa Daa'uud ayuu gees badbaadiye ah inooga soo
bixiyay, 70 Siduu ku yidhi, afkii nebiyadiisii qudduuska ahaa tan iyo Bilowgiiba,
71 Inuu inaga badbaadiyo cadowgeenna iyo gacanta kuwa ina neceb oo dhan,
72 Oo uu u naxariisto awowayaasheen, oo uu ballankiisii qudduuska ahaa xusuusto,
73 Oo ahaa dhaartii uu awowgeen Ibraahim ugu dhaartay, 74 si uu cadowgeenna gacmihiisa
inaga bixiyo si aynu cabsi la'aan ugu adeegno 75 Oynu qudduusiin iyo xaq hortiisa ku ahaanno
cimrigeenna oo dhan. 76 Adiguna, ilmayahow, waxaa laguugu yeedhi doonaa nebigii Ka ugu
sarreeya, Waayo, Rabbiga ayaad u adeegi doontaa si aad jidadkiisa u diyaariso;
77 Ood dadkiisa farriinta badbaadada dembi dhaafka ah u siiso, 78 Maxaa yeelay naxariista
wayn ee Eebbaheenna aawadeed qorrax ayaa xagga sare inooga soo bixi doonta, 79 Si ay u
iftiimiso kuwa gudcurka iyo hooska dhimashada fadhiya, oy cagaheenna jidkii nabadda ugu
hoggaamiso. 80 Marka wiilkii wuu koray oo ruuxa ayuu ku xoogaystay, oo lama dagaanka ayuu
ku noolaa ilaa iyo wakhtigii uu si cad ugu soo baxay reer banii Israa'iil.

## Dhalashadii Ciise Masiix

**2** Wakhtigaas waxaa dhacay in amar ka soo baxay Kaysar Awgustus kaas oo ah in dadka
dunida oo dhan la tira kooboh. 2 Tira koobkaas oo ahaa kii ugu horreeyay ee la sameeyay
waagii uu Kuranayos guddoomiyaha ka ahaa Suuriya. 3 Dhammaan tira koobka ayaa la wada
tagay, qof kasta magaaladiisii. 4 Yuusufna Galili iyo magaaladii Naasared wuu ka tegay oo
Yahuudiya iyo magaaladii Daa'uud ee Beytlaxam ayuu tegay, maxaa yeelay, wuxuu ahaa
farcankii iyo dhashii Daa'uud, 5 Si Maryama oo u doonanayd oo markaas uur lahayd loola tira
koobo. 6 Waxaa dhacday markay halkaas tageen in wakhtigay umuli lahayd la gaadhay, 7 Oo
waxayna umushay wiilkeedii curadka ahaa, marka intay maro ku duudduubtay ayay qabaal ku
seexisay, waayo, meel ay seexdaan ayay albeerkadii ka waayeen. 8 Marka halkaas waxaa
joogay adhijirro bannaanka habeenkii idahooda ku ilaalinayay. 9 Oo Malagii Rabbiga ayaa u
muuqday, oo ammaanta Rabbiga ayaa hareerahooda iftiimisay, deedna aad bay u cabsadeen.
10 Marka malagii ayaa ku yidhi, Ha cabsanina, waayo, war wanaagsan oo farxad wayn dadka

oo dhan u leh ayaa idiin keenay. 11 Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay
Badbaadiye, Masiixa Rabbiga ah. 12 Oo waxaa calaamo idiin ah: waxaad heli doontaan ilmo
maro ku duudduuban oo qabaal ku jiifa. 13 Isla markiiba waxaa malagii ku soo biiray guuto fara
badan oo samada ka timid, oo Eebbe ayay ammaanayeen iyaga oo leh, 14 Ammaanu ha ugu
ahaato Eebbe meelaha sare, dhulkuna nabad ha ahaado, dadkuna farxad ha helaan.
15 Dabadeedna markay malaa'igihii ka tageen oy samada ku noqdeen ayay adhijiryadii isku
yidhaahdeen War inaga kiciya meesha aan Beytlaxam tagnee oon soo aragno waxa dhacay ee
Rabbigu ina ogaysiiyay. 16 Deedna deg deg ayay u yimaaddeen oo waxay heleen Maryama iyo
Yuusuf iyo ilmihii oo qabaal ku jiifa. 17 Oo markay arkeen, waxay sheegeen farriintii ilmahan
looga sheegay iyaga. 18 Dadkii maqlay oo dhanna way ka yaabeen farriintay adhijiryadu u
sheegeen. 19 Maryamana waxaas oo dhan way xusuusnayd oo niyadday ku haysay.
20 Adhijirradiina way iska noqdeen iyaga oo Eebbe ku ammaanaya oo ku waynaynaya waxa ay
maqleen oy arkeen sidii iyaga loogu sheegay. 21 Markay siddeed maalmood dhammaatay, si
wiilka loo gudo, magiciisa waxaa loo baxiyay Ciise, siduu malagu u bixiyay intuuna uurka galin
ka hor.

### Ciise Rabbiga Ayaa La Guddoonsiiyay

22 Markay maalmihii isdaahirintu dhammaadeen siduu sharciga Muuse farayay, waxay isaga
geeyeen magaalada Quddus si ay Rabbiga u guddoonsiiyaan 23 (siduu Sharciga Rabbigu
dhigayay curad walba oo lab ah waxaa loogu yeedhi doonaa qudduus xagga Rabbiga*[x] 24 iyo
inay allabari u bixiyaan siday ugu qorantahay shareecada Rabbiga laba qoollay ama laba
xamaam oo yar yar.)

### Simcoon Iyo Gabaygiisii Ammaanta Ahaa

25 Oo bal eeg, magaalada Quddus waxaa joogay nin magiciisa la odhan jiray Simcoon.
ninkaasu wuxuu ahaa nin Weli ah oo Eebbe u go'ay; wuxuuna sugayay gargaarka reer bani
Israa'iil. Ruuxa Qudduuska ah ayaana ka buuxay. 26 Wuxuuna Ruuxa Qudduuska ahu u
sheegay in uusan dhimanaynin ilaa iyo intuu Rabbiga Masiixiisa ka arkayo. 27 Oo Ruuxa ayaa
macbudka u kexeeyay, oo markay labada waalid Ciise keeneen si loogu sameeyo siduu
sharcigu farayay 28 Ayuu intuu gacmihiisa ku qaaday oo Eebbe ammaanay yidhi,
29 Rabbiyow, hadda adeegahaagu nabad ha ku tago, Siduu eraygaagu ahaa, 30 Waayo,
indhahaygu waxay arkeen badbaadadaada, 31 Aad dadka oo dhan hortooda ku muujisay,
32 Iftiinka Umadaha oo dhan loo muujiyay Iyo ammaanta dadkaaga Israa'iil. 33 Markaasay
aabbihii iyo hooyadiiba la yaabeen waxa isaga laga sheegay. 34 Simcoon iyagana wuu u
duceeyay, wuxuuna hooyadii Maryama ku yidhi, Ogow, Wiilkan waxaa loogu tala galay inay
kuwo badan oo reer banii Israa'iil ahu ku dhacaan, kuwo badanna ku kacaan, iyo inuu
calaamad ay ka hor yimaaddaan noqdo. Adigana seef baa naftaada ka dhex bixi doonta 35 Si
qalbiyo badan fikirkooda loo muujiyo.

### Xanna

36 Waxaa jirtay nebiyad da'wayn oo Xanna ina Fanuu'eel la odhan jiray, oo reer Aasheer
ahayd, iyada oo bikrad ah ayay guursatay oo toddoba sano ayay ninkeedii la noolayd.
37 Waxayna ahayd carmali afar iyo siddeetan sannadood aan macbudka ka bixin, laakiinse

Eebbe ayay soon iyo salaad habeen iyo maalinba ku caabudi jirtay. [38] Saacaddaas ayayna soo gashay oo Eebbe u mahadnaqday, oo kuwii furashada Quddus sugayay oo dhan ayay wax xaggiisa ku saabsan u sheegtay.

### Carruurnimadii Ciise

[39] Markay wax walba dhammeeyeen siduu sharciga Rabbigu ahaa, waxay ku noqdeen
magaaladoodii Naasared ee Galili. [40] Deedna wiilkii wuu koray oo wuu waynaaday, waxaana ka
buuxsantay xigmad; nimcada Eebbena way la jirtay. [41] Oo sannad walba waalidkii waxay
Quddus u tegi jireen Ciiddii Kormaridda. [42] Markuu laba iyo toban sannadood jiray ayay
Quddus tageen siday caadadu ahayd. [43] Deedna markay maalmihii Ciiddu u dhammaatay oy
doonayeen inay noqdaan, Ciise wuxuu ku hadhay Quddus waalidkiisa oon ogayn [44] Oo waxay
moodayeen inuu dadka la socdo, oo maalintii oo dhan ayay sii socdeen. Markaasay
qaraabadooda iyo asxaabtooda ka dhex raadiyeen. [45] Oo markay waayeen ayay Quddus ku
noqdeen oo ka raadiyeen. [46] Marka saddex maalmood dabadeed ayay macbudka ka heleen
isaga oo macallimiinta dhex fadhiya oo dhegaysanaya oo wax waydiinaya. [47] Dadkii maqlay oo
dhanna waxay ka yaabeen jawaabihiisa iyo fahmadiisa. [48] Dabadeedna markay isaga arkeen
way la fajaceen, oo hooyadii ayaa ku tidhi Hooyo, maxaad sidaa nooogu gashay? Aniga iyo
Aabbahaa waannu kugu rafaadnay sidaannu kuu raadinaynay? [49] Marka wuxuu ku yidhi,
Maxaad ii raadinaysaan? Miyaydaan ogayn inay waajib igu tahay inaan guriga Aabbahay
joogo? [50] Laakiin wuxuu u jeedo way fahmi waayeen. [51] Ka dibna wuu raacay oo Naasared buu
yimid, wuuna adeecay iyaga; laakiin Hooyadii hadalkaas oo dhan ayay niyadda ku haysay.
[52] Ciisana xagga itaalka iyo aqoontaba wuu ka koray oo Illaahay iyo dadka hortoodaba nimco
ayuu ka helay.

### Nebi Yaxye Oo Jidka Sii Diyaariyay

**3** Sannaddii shan iyo tobnaad ee Tiberiyas imradhoorka ahaa, Bontiyos Bilaatosna
Yahuudiya guddoomiyaha ka ahaa, Herodosna Galili guddoomiyaha ka ahaa, walkaalkii
Filibosna Ituraya iyo Tarakhonitis guddoomiyaha ka ahaa, Lusaniyas Abilene guddoomiyaha ka
ahaa, [2] Annas iyo Kayafasna wadaaddada sare ahaayeen, ayuu waxyigii Eebbe ku soo degay
Nebi Yaxye Ina Sakariye isaga oo cidlada jooga. [3] Wuxuuna tegay Urdun dhulka ku wareegsan
oo dhan isaga oo dadka ku wacdiyay biyagalinta toobadda dembidhaafka, [4] Siduu Nebi
Ishacyaah ugu qoray kitaabkiisa. Waa codka ka cidlada kaga dhawaaqaya: Jidka Rabbiga
hagaajiya, Waddooyinkiisana toosiya. [5] Doox kasta waa la buuxin doonaa, taag iyo buur
kastana waa la gaabin doonaa, jidadka qalloocana waa la toosin doonaa, Jidadka ad adagna
waa la simi doonaa, [6] Uunka oo dhanna badbaadada Eebbe ayay arki doonaan.[75*] [7] Marka
Nebi Yaxye wuxuu ku yidhi, dadkii u soo baxay inuu biyagaliyo Dhal jilbisay, yaa idiinka digay
inaad cadhada imanaysa ka baxsataan? [8] Haddaba midho toobadda istaahila soo bixiya, hana
ku fikirina inaad isdhahdaan: Waxaannu nahay ilmo Ibraahim. Waayo, waxaan idinku leeyahay,
Eebbe wuu awoodaa inuu dhagaxyadan Ibraahim carruur ka siiyo. [9] Hadda guduntu waxay
saarantahay geedaha guntooda. Sidaa darteed geed kasta oon midho wanaagsan soo bixinin
waa la jarayaa oo dabkaa lagu tuurayaa. [10] Marka dadkii ayaa waydiiyay, oo waxay ku
yidhaahdeen Maxaannu yeelnaa? [11] Deedna wuu u jawaabay oo ku yidhi, Kii laba shaadh leh

75 Ishacyaah 40:3-5

mid feedho qaawan mid ha siiyo, oo kii cunto haysta, sidaas oo kale ha yeelo. [12] Marka waxaa
u yimid canshuur qaadayaal si biyaha loo galiyo, waxayna ku yidhaahdeen, Macallinow,
annaguna maxaannu yeelnaa? [13] Markaasuu ku yidhi, Canshuurtii laydiin faray wax ka badan
ha qaadina. [14] Askartiina waxay ku yidhaahdeen Annaguna maxaannu yeelnaa? markaasuu ku
yidhi, Ninna ha dulmina, oo ninna ha masabidina; mushaharkiinana raalli ku ahaada.
[15] Dadkuna waxay sugayeen Masiixa oo waxay iswaydiinayeen In uu Nebi Yaxye Masiixii
yahay iyo in kale [16] Markaasuu Nebi Yaxye kulligood u jawaabay oo ku yidhi, Anigu biyaan idin
galiyay, laakiinse waxaa imanaya mid iga awood badan, kaasoo aanan istaahilin inaan
yeelmaha kabihiisa furo. Isagu wuxuu idin galin doonaa Ruuxa Qudduuska ah iyo dab.
[17] Masaftiisuu gacanta ku wataa si uu Sarreenkiisa u haadiyo oo bakhaarkiisa ugu kaydiyo,
laakiin Buunshaha dab aan demeynin ayuu ku gubi doonaa. [18] Digniin badan oo kale ayuu
dadka ku wacdiyay. [19] Guddoomiye Herodosna wuxuu ku canaantay walaalkii Filibos xaaskiisa
Herodiya aawadeed iyo waxyaaba kale oo xun xun oo uu Herodos sameeyay, [20] Waxaas oo
dhanna wuxuu ku sii darsaday inuu Nebi Yaxye xabsiga dhigo.

### Ciise Waa La Biyo Galiyay

[21] Markii dadkii oo dhan biyaha la galiyay waxaa dhacday in Ciisena biyaha la galiyo, oo
isaga oo tukanaya ayay samadu furantay [22] Oo Ruuxa Qudduuska ah ayaa dushiisa ku soo
degay isaga oo muuqaalka qoollayda oo kale leh, waxaana samada ka dhawaaqay cod leh
Adigu waxaad tahay Wiilkayga aan jeclahay een ku faraxsanahay.

### Abtirsiinta Ciise

[23] Ciise markuu farriintiisa billaabay qiyaastii wuxuu ahaa soddon jir, wuxuuna ahaa (sidii loo
malaynayay) ina Yuusuf, ina Heli, [24] ina Matad, ina Laawi, ina Malki, ina Yanna, [25] Ina Yuusuf,
Ina Matatiyas, Ina Caamoos, Ina Na'uum, Ina Esli, Ina Naggay, [26] Ina Ma'ad, Ina Matatiyas, Ina
Semey, Ina Yuusuf, Ina Yuuda, [27] Ina Yo'anna, Ina Reesa, Ina Serubaabel, Ina Salaatii'eel, Ina
Neeri, [28] Ina Malki, Ina Addi, Ina Koosam, Ina Elmoodam, Ina Ceer, [29] Ina Yooses, Ina Eliiceser,
Ina Yoorim, Ina Matad, Ina Laawi, [30] Ina Simecoon, Ina Yuuda, Ina Yuusuf, Ina Yoonam, Ina
Eliyaqiim, [31] Ina Mele'as, Ina Menna, Ina Matata, Ina Naataan, Ina Daa'uud, [32] Ina Yesay, Ina
Coobeed, Ina Bocas, Ina Salmoon, Ina Naasoon, [33] Ina Caminadaab, Ina Araam, Ina Esroom,
Ina Feres, Ina Yahuudah, [34] Ina Yacquub, Ina Isxaaq, Ina Ibraahim, Ina Tara, Ina Naakoor,
[35] Ina Seruukh, Ina Ragaw, Ina Faleg, Ina Xeber, Ina Salah, [36] Ina Qaynaan, Ina Arfaksad, Ina
Sheem, ina Nuux, ina Lameg, [37] Ina Metushelax, Ina Enoog, Ina Yaared, Ina Mahalaleel, Ina
Qaynaan, [38] Ina Enoos, Ina Seed, Ina Aadan, Wiilkii Eebbe.

### Shaydaan Ayaa Isku Dayay Inuu Ciise Duufsado

**4** Ciise isaga oo Ruuxa Qudduuska ahu ka buuxo ayuu urdun ka noqday, oo Ruuxii ayaa
meel cidla ah u kaxeeyay. [2] Oo afartan maalmood ayuu Iblaysku jirrabayay. Maalmahaas oo
dhanna waxba muuna cunin. Oo wuu gaajooday. [3] Marka Iblayskii ayaa ku yidhi, Haddaad
Wiilkii Eebbe tahay dhagaxan ku dheh, cunto noqo. [4] Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Way
qorantahay: Dadku cunto oo kaliya kuma noolaado.[76*] [5] Marka intuu meel sare saaray ayuu

76 Sharciga Kunoqoshadiisa 8:3

wakhti yar ku tusay Ummadaha dunida oo dhan. 6 Deedna Iblayskii ayaa ku yidhi, Awooddan
iyo ammaantan oo dhan ayaan ku siinayaa, waayo, anaa leh; oo ciddaan doono ayaan siiyaa.
7 Marka haddaad ii sujuuddo ood i caabuddo, adigaa leh. 8 Deedna Ciise ayaa u jawaabay oo
ku yidhi, Way qorantahay Waa inaad Rabbiga Eebbahaaga ah caabuddo oo waa inaad isaga
kaligii u adeegto.[77*] 9 Markaasuu Quddus geeyay, oo intuu minaaraddii macbudka saaray ayuu
ku yidhi, Haddaad Wiilkii Eebbe tahay, halkan hoos isaga tuur; 10 Waayo, way qorantahay:
Malaa'igtiisa ayuu amar siin doonaa oo way ku ilaalin doonaan, 11 Oo gacmahooda ayay sare
kuugu qaban doodaan si ayna cagtaadu dhagaxa ugu dhicin.[78*] 12 Ciise ayaa u jawaabay oo ku
yidhi, Sidoo kale way qorantahay Waa inaadan Rabbiga Eebbahaaga ah jirrabin.[79*] 13 Iblayskii
markuu si walba u jirrabay ayuu iskaga tegay intii muddo ah.

### Ciise Wuxuu Billaabay Wacdigiisii Iyo Farriintiisii

14 Marka Ciise isaga oo xooggii Ruuxa ka buuxa ayuu Galili ku noqday, warkiisuna dhulkaas oo
dhan ayuu gaadhay. 15 Wuxuuna wax ku baray sunagogyada oo dhammaan waa la wada
ammaanay isaga. 16 Marka wuxuu yimid Naasared oo ahayd meeshuu ku koray, oo maalintii
Sabtida ayuu siday caadadiisu ahayd sunagogga galay, wuuna istaagay si uu kitaabka u
akhriyo. 17 Deedna waxaa loo dhiibay kitaabkii Nebi Ishacyaah, oo markuu kitaabkii kala furay
Aayadahan ayaa u soo baxday, 18 Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay
inaan War wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo, Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan
xorriyad ogeysiiyo, indhoolayaashuna inay wax arkaan, dulmanayaashana aan dulmiga ka
xoreeyo, 19 Oon dadka ogeysiiyo in la joogo wakhtigii Rabbigu dadkiisa aqbali lahaa. 20 Marka
Intuu kitaabkii isku laabay oo adeegaha u dhiibay ayuu fadhiistay; oo dadkii sunagogga ku jiray
oo dhan ayaa indhaha ku taagay. 21 Markaasuu ku yidhi, Maanta ayay ayadahan dhagihiinna
ku xaqiiqoobeen. 22 Dhammaantoodna markhaati bay ka noqdeen, oo way ka yaabeen
hadallada nimcada leh ee afkiisa ka soo baxay, markaasay yidhaahdeen Kanu miyuuna Wiilkii
Yuusuf ahayn? 23 Markaasuu ku yidhi, Shaki la'aan tusaalahan ayaad igu odhan doontaan:
Dhakhtarow, is bogsii. Wax kasta oonu maqalnay ood Kafarna'um ku sameeyasay, halkan ku
samee dhulkaaga ah. 24 Dabadeedna wuxuu ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, nebi
wadankiisa laguma aqbalo. 25 Oo Runtii waxaan idinku leeyahay, Waagii Ilyaas Israa'iil waxaa
ku noolaa carmallo badan, markuu cirku saddex sannadood iyo lix bilood xidhnaa oo dhulka oo
dhan ay gaajo aad u daran ka dhacday. 26 Laakiin midna Ilyaas looma dirin, naag carmal ah oo
magaalada Sarefta ee dalka Siidoon ku noolayd mooyee. 27 Waagii Nebi Eliishaana Israa'iil
waxaa ku noolaa dad badan oo Baras leh, midna lama daahirinin, Nacamaankii reer Suuriya
mooyee. 28 Markay kuwii sunagogga ku jiray oo dhan waxaas maqleen ayay aad u
cadhoodeen. 29 Deedna intay kaceen ayay magaaladii ka saareen, oo waxay u kaxeeyeen
buurtii ay magaaladoodu ka dhisnayd si ay uga tuuraan. 30 Laakiin intuu dhex maray ayuu iska
tegay.

77 Sharciga Kunoqoshadiisa 6.13

78 Sabuur 91:12

79 Sharciga Kunoqoshadiisa 6:16

### Ciise Nin Ayuu Shaydaan Ka Saaray

31 Wuxuu degay Kafarna'umtii Galili. Oo maalmihii Sabtida ayuu dadka wax barayay. 32 Wax
bariddiisiina way la yaabeen, waayo, hadalkiisu awood ayuu lahaa.

### Nin Shaydaan Wasakh Leh Ku Jiro

33 Waxaana sunagogga joogay nin Shaydaan wasakh leh ku jiro, markaasuu intuu kor u
dhawaaqay yidhi, 34 Na daa! Maxaad naga doonaysaa Ciisihii reer Naasaredow? Ma waxaad u
timid inaad na halaagto? Anigu waan garanayaa kaad tahay, Ka Qudduuska ah ee Eebbe!
35 Ciise ayaa canaantay oo ku yidhi, Aamus oo ka soo bax. Shaydaankii intuu ninkii dhexda ku
tuuray ayuu ka soo baxay, waxbana ma uusan yeelin. 36 Dhammaantoodna yaab iyo amakaag
ayaa ku dhacay; oo waxay isku yidhaahdeen, War waa maxay wax baridanu? Shaydaanada
wasakhda leh ayuu awood iyo xoog ku amrayaa wayna baxayaan. 37 Warkiisuna dhulkaas oo
dhan ayuu ku fiday.

### Ciise Wuxuu Bogsiiyay Soddohdii Simoon Iyo Dad Kale oo Badan

38 Marka sunagogga ayuu ka soo baxay, oo wuxuu galay gurigii Simoon. Soddohdii Simoona
aad bay u qandhaysnayd, markaasay aawadeed isaga u baryeen, 39 Oo intuu isa soo dul
taagay ayuu qandhadii canaantay, wayna daysay. Isla markiiba intay kacday ayay u adeegtay
iyaga. 40 Markay qorraxdu sii dhacaysayna dadkii ayaa kuwii cudurrada kala duwan qabay
Ciise u keenay; oo intuu mid kasta gacmihiisa saaray ayuu bogsiiyay. 41 Shaydaanadiina dad
badan ayay ka soo baxeen, iyaga oo ku dhawaaqahaya Adigu waxaad tahay Wiilka Eebbe.
Laakiinse wuu canaantay oo uma oggolaanin inay hadlaan, waayo, inuu Masiixa yahay ayay
garanayeen.

### Ciise Sunagogyada Ayuu Dadka Wax Ku Baray

42 Subaxnimadii ayuu Ciise baxay oo meel cidla ah ayuu tegay; dadkiina way raadiyeen oo
way u yimaaddeen. Oo way qabteen si uuna uga tegin. 43 Laakiin wuxuu iyaga ku yidhi, Waa
inaan magaalooyinka kalena Injiilka boqortooyada Eebbe ku wacdiyo, waayo, sababtaas ayaa
la ii soo diray. 44 Markaasuu sunagogyada Galili dadka ka wacdiyay.

### Ciise Wuxuu U Yeedhay Xertiisii Ugu Horraysay

**5** Marka xeebta badda Gennesared ayuu istaagay oo dad fara badan ayaa isku soo
cidhiidhiyay si ay erayga Eebbe u maqlaan. 2 Oo wuxuu arkay laba doonyood oo badda ag
taalla oy kalluumaysatadii intay shabagyadoodii maydheen ka degeen. 3 Deedna doonnyihii
middoo oo Simoon lahaa ayuu fuulay, wuxuuna ka codsaday inuu in yar dhulka ka durkiyo.
Markaasuu intuu fadhiistay dadkii doonnida dhexdeeda wax ku baray. 4 Dabadeedna Markuu
hadalkii dhammeeyay ayuu Simoon ku yidhi, Meesha biyaha u dheer gee, oo shabagyadiinna
ku rida si aad wax u qabsataan. 5 Simoon ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Macallinow, xalay oo
dhan ayaannu rafaadaynay, oo waxba maanaan qabannin, laakiin maadaama ood sidaa tidhi
shabagyada waan dejinayaa. 6 Markay sidaa yeeleen waxay qabteen kalluun tiro badan,
shabagyadooduna way kala dillaaci gaadheen. 7 Markaasay kuwii doonnida kale ku jiray u
gacan haadiyeen si ay ugu yimaaddaan oy u caawiyaan. Wayna yimaaddeen, oo waxay

buuxiyeen labadii doonnyood, ilaa oy ku dhawaadeen in ay degaan. 8 Simoon Butros markuu
waxaas arkay, ayuu Ciise lugihiisa ku dhacay, oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, iga tag; waxaan
ahay nin dembiile ahe. 9 Maxaa yeelay, isaga iyo kuwii la joogayba, waxay la yaabeen
kalluunkii faraha badnaa oo ay qabteen. 10 Sidoo kale waxaa la yaabay Yacquub iyo Yooxanaa
ilma Sebedi oo Simoon shuraako la ahaa. Marka Ciise ayaa Simoon ku yidhi, Ha cabsanin,
hadda laga billaabo dadka ayaad jillaaban doontaa. 11 Deedna markay doonyohoodii dhulka
geeyeen, intay wax walba faraha ka qaadeen ayay tageen oo isagay raaceen.

### Baraslihii La Bogsiiyay

12 Oo isaga oo magaalooyinka middood ku jira, ayuu la kulmay nin Baras qaba. Isaguna
markuu Ciise arkay, ayuu intuu wejigiisa dhulka dhigay baryay isaga oo leh Sayidow, haddaad
doonayso waad i daahirin kartaa. 13 Deedna intuu gacantiisa soo taagay, ayuu taabtay, oo ku
yidhi, Waan doonayaaye daahirsanow. Isla markiiba baraskii baa ka baxay. 14 Markaasuu ku
amray, inuuna cidna waxba u sheegin; oo wuxuu ku yidhi, iska tag oo wadaadka istus. Oo
bogsashadaada u bixi wixii Muuse amray, marag iyaga ha u ahaatee.[80*] 15 Laakiin warkii Ciise
aad buu u sii fiday; Oo dad fara badan ayaa u yimid si ay u maqlaan, oo uu cudurradooda u
bogsiiyo. 16 Marka intuu meel cidla ah iska tegay ayuu ku tukaday.

### Curyaankii La Bogsiiyay

17 Haddaba Maalin maalmaha ka mid ah ayuu wax barayay, oo halkaas waxaa ag fadhiyay
kuwo Farrisiinta iyo macallimiintii shareecada ah oo ka yimid magaalooyinka Galili iyo
Yahuudiya iyo Quddus; Oo xooggii Rabbiga ayaa la jiray isaga oo uu wax ku bogsiiyo. 18 Oo
bal eeg, niman ayaa nin curyaan ah Sariir ku soo qaaday, oo waxay doonayeen inay gudaha
geliyaan oy hortiisa dhigaan. 19 Laakiin markay meel ay dadkii faraha badnaa ka soo mariyaan
waayeen, ayay guriga dushiisa fuuleen, oo intay saqafka meel ka fureen ayay ka soo
laalaadiyeen isaga oo sariirtiisii ku jiifa oo Ciise ayay soo hor dhigeen. 20 Markuu
rumaysadkooda arkay ayuu ku yidhi, Ninkow, dembiyadaadii waa lagaa cafiyay. 21 Markaasay
culimmadii iyo Farrisiintii billaabeen inay is waydiiyaan Yuu yahay kan gaalnimada ku hadlaya?
Yaa dembiyada cafiyi kara Eebbe kaliya mooyee? 22 Laakiin Ciise markuu fikirkooda gartay
ayuu u jawaabay oo ku yidhi, Maxaad niyaddiina ugaga fikiraysaan? 23 Iyamaa fudud, in la
yidhaahdo: Dembiyadaadii waa lagaa cafiyay iyo in la yidhaahdo, Kac oo soco? 24 Laakiin si
aad u ogaataan in Wiilka Aadanuhu dhulka ku leeyahay awood uu dembiyada ku cafiyo (ayuu
ninkii curyaanka ahaa ku yidhi,) Waxaan kugu leeyahay, Kac oo sariirtaada qaado oo
gurigaaga tag. 25 Isla markiiba hortooda ayuu ka kacay, oo intuu gogoshiisii qaatay, ayuu
gurigiisa tegay, isaga oo Eebbe ammaanaya. 26 Markaasay wada yaabeen oy Eebbe
ammaaneen, oy aad u cabsadeen iyaga oo leh Maanta waxaannu aragnay wax la yaab leh.

### Laawi Ayaa Loo Yeedhay

27 Waxyaalahaas dabadood wuu baxay, oo wuxuu arkay canshuur qaade Laawi la odhan jiray
oo xafiiska canshuuraha fadhiya, oo wuxuu ku yidhi, Isoo raac. 28 Marka intuu wax walba iska
dhigay ayuu kacay oo raacay. 29 Deedna Laawi ayaa gurigiisa casuumad wayn ugu sameeyay.

80 Laawiyiintii 14:1132

Waxaana joogay qaar badan oo canshuur qaadayaal ah iyo kuwo kale oo isagay la fadhiyeen.
30 Markaasay Farrisiintii iyo culimadoodiiba xertiisa ku gunuunaceen, iyaga oo leh Maxaad
canshuur qaadayaasha iyo dembilayaasha wax ula cuntaan ood ula cabtaan? 31 Ciise ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Kuwa caafimaadka qaba dhakhtar uma baahna, laakiinse kuwa buka.
32 Anigu uma imanin inaan kuwa xaqa ah u yeedho, laakiinse dembilayaashu inay
toobadkeenaan.

### Su'aal Soonka Ku Saabsan

33 Marka waxay ku yidhaahdeen, Xerta Nebi Yaxye in badan ayay soomaan oy tukadaan,
kuwa Farrisiintuna sidoo kale ayay yeelaan, Laakiinse kuwaagu wax bay iska cunaan oo way
iska cabbaan? 34 Ciise wuxuu ku yidhi, Dadka Aroos lagu casuumo ma ku qasbi kartaan inay
soomaan caruuskii oo la jooga? 35 Laakiin maalmo ayaa iman doona caruuska laga qaadi
doono oo maalmahaas ay soomi doonaan. 36 Weliba wuxuu kula hadlay tusaale isaga oo leh
Ninna kariin cusub maro duug ah kuma tolo, hadduu sidaa yeelo karintii cusbayd ayaa
dillaacda, oo karriintii marada cusub laga soo gooyay marada dhammaadka ah la heshiin
mayso. 37 Ninna khamri cusub qarbed dhammaad ah kuma shubo, haddii kale khamridii
cusbayd ayaa intay qarbedka qarxiso daadata; qarbedkuna wuu googo'aa. 38 Laakiin khamrida
cusub waa in qarbed cusub lagu shubo. 39 Ma jiro Nin intuu khamri duug ah cabbo haddana
mid cusub doona, waayo, wuxuu leeyahay Ta duugga ah ayaa wanaagsan.

### Sayidka Sabtida

**6** Maalin Sabti ah waxaa dhacay isaga oo beeraha dhex maraya in ay xertiisu jarteen
sabuulladii, oo intay gacmahooda ku xoqeen ayay cuneen. 2 Marka Farrisiintii qaarkood ayaa
ku yidhi, Maxaad wax aan Sabtida xalaal ahayn u samaynaysaan?[81*] 3 Ciise ayaa u jawaabay
oo ku yidhi, Miyaydaan akhriyin wuxuu Daa'uud sameeyay markuu gaajooday, isaga iyo kuwii
la socdayba, 4 Siduu intuu gurigii Eebbe u galay uu kimistii tusniinta oon xalaal ahayn inay
wadaaddadu cunaan mooyee uu u cunay kuwii la socdayna wax uga siiyay? 5 Markaasuu
iyaga ku yidhi, Wiilka Aadanuhu waa sayidka Sabtida.

### Nin Ay Gacantu Qallashay

6 Deedna Sabti kale ayuu sunagogga galay oo wax ku baray; oo waxaa halkaas joogay nin
gacantiisa midig qallalantahay. 7 Marka culimadii iyo Farrisiintii ayaa eegayay inuu Sabtida wax
bogsiinayo iyo in kale, si ay ugu helaan wax ay ku ashtakeeyaan. 8 Laakiinlse fikirkooda wuu
ogaa; markaasuu ninkii gacanta qallalaa ku yidhi, Kac oo xagga hore isa soo dhex taag.
Wuuna kacay oo istaagay. 9 Ciise wuxuu ku yidhi, Waxaan idin waydiiyay: Sabtida ma xalaal
baa in wanaag ama shar la sameeyo, in naf la badbaadiyo ama in la dilo? 10 Markaasuu isha
wada mariyay, wuxuuna ninkii ku yidhi, Gacantaada soo taag. Markaasuu sidii yeelay,
gacantiisuna way bogsatay. 11 Deedna aad bay u xanaaqeen, oo waxay ka wada hadleen
waxay Ciise ka yeeli lahaayeen.

81 Samuu'eel Kowaad 21:1-6

## Ciise Wuxuu Doortay Laba Iyo Tobankii Rasuul

[12] Maalmahaas waxaa dhacay inuu buurta u baxay si uu u tukado. Habeenkii oo dhanna
tukasho ayuu ku jiray oo Eebbe ayuu baryay. [13] Oo markuu waagu baryay ayuu xertiisii u
yeedhay. Markaasuu laba iyo toban ka soo saaray, wuxuuna u bixiyay rasuullo; [14] Oo waxay
ahayeen Simoon oo uu Butros u bixiyay, iyo walaalkii Andaros, iyo Yacquub iyo Yooxanaa, iyo
Filibos iyo Bartolomayos, iyo [15] Matayos iyo Tomas, iyo Yacquub ina Alfayos, iyo Simoon oo
lagu naanayso Qiirole, [16] iyo Yuudas ina Yacquub, iyo Yuudas Iskariyodkii khayaanay.

## Ciise Wuxuu U Adeegay Dad Fara Badan

[17] Markaasuu hoos ula degay, oo bannaan ayuu istaagay, isaga iyo qaar badan oo xertiisa
ah, iyo dad fara badan oo Yahuudiya iyo Quddus iyo xeebaha Turos iyo Sidoon isaga yimid si
ay u maqlaan oo cudurradooda looga bogsiiyo. [18] Oo kuwii ay shaydaanada wasakhda luhu
derdereenna waa la bogsiiyay. [19] Dadkii faraha badnaa oo dhanna waxay doonayeen inay
taabtaan isaga, waayo, xoog baa ka soo baxay oo wada bogsiiyay.

## Barakada Iyo Habaarka

[20] Markaasuu xertiisii kor u eegay oo ku yidhi, Waxaa barakaysan kuwiinna masaakiinta ah,
waayo, boqortooyada Eebbe idinkaa leh. [21] Waxaa barakaysan kuwiinna hadda gaajaysan,
waayo, waad dhergi doontaan. Waxaa barakaysan kuwiinna hadda ooyaya, waayo, waad qosli
doontaan. [22] Waad barakaysantihiin markay dadku idin nacaan, oy dhexdooda idinka saaraan,
oo idin caayaan, oy magacyadiinna sida wax shar leh u tuuraan Wiilkii Aadanaha aawadii.
[23] Maalintaas farxad la boodbooda, waayo, bal eega, abaal wayn baad jannada ku leedihiin,
waayo, awowayaashood sidaasay anbiyada ku samayn jireen. [24] Laakiin halaag baa idinku
dhacay kuwiinna hodanka ahow, waayo, waad raaxaysateen.[82*] [25] Halaag baa idinku dhacay
kuwiinna hadda dharagsanow, waayo, waad gaajoon doontaan. Halaag baa idinku dhacay
kuwiinna hadda qoslayow, waayo, waad ooyi doontaan oo waad barooran doontaan.
[26] Halaag baa idinku dhacay markay dadka oo dhan wanaag idinka sheegaan waayo,
awowayaashood sidaasay nebiyadii beenta ahaa ku samayn jireen.

## Cadowgiinna Jeclaada

[27] Laakiin waxaan idinku leeyahay dhagaystayaashow: Cadowgiina jeclaada, oo kuwa idin
necebna u sama fala. [28] Oo kuwa idin habaara u duceeya, oo kuwa idin caaya Eebbe u barya.
[29] Kii hal dhinac dhabanka kaa dhurbaaxa, dhanka kalena u du; oo kii go’aaga kaa qaata,
macawistaadana ugu dar. [30] Oo qofkii wax kaa barya, sii; oo kii wax kaa qaata, ha kala soo
noqonin. [31] Oo sidaad doonaysaan inay dadku idiin la dhaqmaan, idinkuna sidaas oo kale ula
dhaqma iyaga. [32] Haddaad jeceshihiin kuwa idin jecel, maxaad mahad leedihiin? Waayo, xataa
dembilayaashu way jecelyihiin kuwa iyaga jecel. [33] Haddaad wanaag u samaysaan kuwa
wanaagga idiin sameeya, maxaad abaal ku helaysaan? Waayo, xataa dembilayaashu
sidaasay yeelaan. [34] Haddaad wax amaahisaan kuwaad ka rajaynaysaan inaad ka heshaan,
maxaad abaal ku helaysaan? Waayo, xataa dembilayaashu way amaahiyaan dembilayaasha
si ay dayntooda uga helaan. [35] Laakiin cadowgiinna jeclaada, oo u sama fala, oo amaahiya,

82 Waa hodantinimada xaaraanta iyo laaluushka lagu taajiro.

idinka oon waxba ka rajaynaynin, abaal wayn ayaad heli doontaane, oo waxaad noqon doontaan wiilashii Ka ugu sarreeya, waayo, isagu wuu u naxariistaa kuwa aan u mahad celinin iyo kuwa sharka leh. [36] U Naxariis badnaada sida Aabbihiin u naxariis badanyahay.

### Dadka Kale Xaqdarro Ha ku Eedaynina

[37] Cidna ha eedaynina[83*] si aan laydiin eedaynin, oo cidna ha xukumina si aan laydiin xukumin. cafiya waa laydin cafiyi doonaaye. [38] Oo siiya waa laydin siin doonaaye; miisaan wanaagsan ood hoos u riixriixdeen ood ruxdeen oo buuxdhaafay ayaa faraqa laydiin ku shubi doonaa, waayo, miisaankaad ugu miisaantaan ayaa laydiinku miisaami doonaa. [39] Ka dibna tusaalahan ayuu kula hadlay. Indhoole indhoole kale ma hagi karaa? mayayna Labadooduba god ku dhacaynin? [40] Arday macallinkiisa kama sarreeyo, laakiin arday walba meesha ugu sarraysa ee uu gaadho waa inuu macallinkiisa oo kale noqdo. [41] Saxarka isha walaalkaa ku jira maxaad u aragtaa, Dogobka ishaada ku jirase aad u arki la'dahay? [42] Sideed walaalkaa ugu tidhaahdaa, Walaalow ii ogolow, saxarka ishaada ku jira aan kaa saaree, adiga oon arkin Dogobka ishaada ku jira? Labawejiilayahow, horta Dogobka ishaada ku jira iska saar, markaas bayaan u arki saxarka isha walaalkaa ku jira ood ka saariye.

### Geedka Iyo Midhihiisa

[43] Waayo, ma jiro geed wanaagsan oo midho xun dhala, welibana ma jiro geed xun oo midho wanaagsan dhala. [44] Maxaa yeelay, geed kasta waxaa lagu gartaa midhihiisa. Maxaa yeelay, Berde lagama guro qodax, Canabkana lagama guro geed qodax leh. [45] Ninka wanaagsan wuxuu kansiga wanaagsan ee qalbigiisa ku jira ka soo saaraa wax wanaagsan; ka sharka lehna sharka ku kaydsan ayuu wax shar ah ka soo saaraa; waayo, afku wuxuu ku hadlaa waxa uurka ka soo burqanaya.[84*]

### Labada Aasaas

[46] Maxaad, Rabbiyow, Rabbiyow, ii leedihiin haddaydaan waxaan idin farayo yeelaynin? [47] Ku alla kii ii yimaadda, oo ereyadayda maqla, oo ku dhaqma, waxaan idiinku tusaalaynayaa.
[48] Wuxuu la midyahay nin guri dhisay, oo intuu hoos u qoday aasaaskiisa dhagax ka dul dhisay. Markuu daadku yimid oy duufaantu gurigaas ku dhufatayna ma ayna gilgilin, waayo, si wanaagsan ayaa loo dhisay. [49] Laakiin ku alla kii eraygayga maqla oon ku dhaqmin, wuxuu la mid yahay nin gurigiisa oon asaas lahayn dhisay, deedna markay duufaantu ku dhufatay isla markiiba wuu dumay, dumistiisuna aad bay u waynayd.

### Shaqaalihii Sarkaalka Waa La Bogsiiyay

**7** Markuu hadalladiisa dadkii dhagaysanayay u dhammeeyay ayuu Kafarna'um galay. [2] Marka waxaa jiray sarkaal Adeegihii uu lahaa ka bukay oo uu dhimasho qarka u saarnaa. [3] Deedna markuu Ciise warkiisa maqlay, ayuu odayaashii Yuhuudda u cid diray isaga oo ka baryaya inuu u yimaado oo Adeegihiisa bogsiiyo. [4] Markasay intay Ciise u yimaaddeen, aad u baryeen oo ku

83 Cidna si xaqdarro iyo dulmi ah a ku eedaynina

84 Waxa uurka ku jira ayuu afku xadaa waa maahmaah Soomaaliyeed oo aayadan waafaqsan.

yidhaahdeen Ninku wuu istaahilaa inaad caawiso, [5] Waayo, ummaddeenna wuu jecelyahay, oo Sunagog ayuu noo dhisay. [6] Deedna Ciise wuu raacay, oo markuu gurigii ku dhawyahay, ayuu sarkaalkii saaxiibbo u soo diray oo ku yidhi, Sayidow, ha is dhibin, waayo, Anigu ma istaahilo inaad saqafka gurigayga hoostiisa soo gasho. [7] Inaan kuu imaadana ma istaahilo; Laakiinse hadal dheh, adeegahaygu wuu bogsane. [8] Waayo, Aniguba waxaan ahay nin laga sarreeyo, oo Askar baa iga hoosaysa. Kan waxaan ku idhaahdaa, Tag, wuuna tagaa; mid kalena, Kaalay, wuuna yimaaddaa; adeegahaygana, Waxan samee, wuuna sameeyaa. [9] Ciise markuu taas maqlay, wuu ka yaabay isaga, oo intuu dadkii la socday ku jeedsaday ayuu ku yidhi, Waxaan idinku leeyahay, rumaysad sidan u wayn oo kale reer Banii Israa'iil kama dhex helin. [10] Kuwii la soo dirayna markay gurigii ku noqdeen, waxay heleen adeegihii oo ladan.

### Wiilkii Carmalida Waa La Soo Nooleeyay

[11] Maalintii ku xigtayna wuxuu galay magaalo la odhan jiray Na'in; waxaana raacay xertiisii, iyo dad fara badan. [12] Deedna markuu albaabka magaalada ku soo dhawaaday, bal eeg, waxaa dibadda loo waday nin mayd ah oo ahaa wiilka kaliya oo ay hooyadii lahayd. Oo waxaa iyada la socday dad fara badan oo magaalada ah. [13] Rabbigu markuu iyada arkay, ayuu u naxariistay oo wuxuu ku yidhi, Ha ooyin. [14] dabadeedna intuu ku soo dhawaaday ayuu naxashkii taabtay; kuwii Naxashka wadayna way istaageen. Markaasuu yidhi, Dhallinyarow, waxaan kugu leeyahay Kac. [15] Deedna maydkii ayaa soo fadhiistay oo billaabay inuu hadlo, ka dibna Ciise ayaa isaga hooyadii u dhiibay. [16] Oo Kulligood cabsi ayaa ku habsatay, oo Eebbe ayay ammaaneen iyaga oo leh Nebi wayn ayaa inaga soo dhex baxay, Eebbena wuu soo booqday dadkiisa. [17] Warkaas isaga ku saabsanna Yahuudiya oo dhan iyo dhulka ku wareegsan oo dhan ayuu ku fiday.

### Nimankii Uu Nebi Yaxye Soo Diray

[18] Xertii Nebi Yaxye ayaa waxaas oo dhan uga warramay isaga. [19] Markaasuu laba xertiisa ah u yeedhay oo Ciise u soo diray, si ay u waydiiyaan Ma ka imanayaad tahay mise mid kalaannu sugnaa? [20] Nimankii markay u yimaaddeen, waxay ku yidhaahdeen Nebi Yaxye ayaa noo soo kaa diray isaga oo leh Ma ka imanayaad tahay mise mid kalaannu sugnaa? [21] Isla wakhtigaa Ciise dad fara badan ayuu cudurro iyo Shaydaanno shar leh ka bogsiiyay. Indhoolayaal badanna aragii ayuu u soo celiyay. [22] Markaasuu kuwii la soo diray ku yidhi, Taga oo Nebi Yaxye uga warrama waxaad aragteen iyo waxaad maqasheen. Kuwii indhaha la'aa wax bay arkaan, kuwii lugaha la'aana way socdaan, kuwii baraska qabayna waa la nadiifiyay, kuwii dhegaha la'aana wax bay maqlaan, kuwii dhintayna waa la sarakiciyay, Masaakiintana Injiilka ayaa lagu wacdiyay, [23] Waxaa barakaysan qofkii aan i iga xumaanin. [24] Kuwii uu Nebi Yaxye diray markay tageen, wuxuu billaabay inuu dadkii faraha badnaa uu Nebi Yaxye wax uga sheego. Maxaad cidlada ugu baxdeen? Ma inaad Laan dabayshu ruxayso soo aragtaan? [25] Laakiin maxaad u baxdeen? Ma inaad soo aragtaan nin Dhar xariir ah qaba? Bal eega, Kuwa Dharka qaaliga ah xidhan ee raaxaysta waxay ku noolyihiin guryaha boqorrada. [26] Laakiin maxaad u baxdeen? Ma inaad nebi soo aragtaan? Haah, waxaan idinku leeyahay, waliba mid nebi ka wayn. [27] Kanu waa kii laga qoray, Bal Eeg, waxaan hortaada soo dirayaa wargeeyahayga, Ka hortaada jidka ku sii diyaarin doona. [28] Waxaan idinku leeyahay, Intii dumar ka dhalatay, mid Nebi Yaxye ka wayn ma jiro, laakiin ka boqortooyada Eebbe ugu yar ayaa ka wayn. [29] Dadkii maqlay oo dhan iyo xataa Canshuur qaadayaashii waxay ogaadeen inuu Eebbe xaq yahay, oo Nebi Yaxye ayaa biyogaliyay. [30] Laakiin Farrisiintii iyo culamadii

shareecadu qorshihii Eebbe naftooda la doonayay way diideen oo biyogalintii Nebi Yaxye
mayna aqbalin. [31] Markaasuu Rabbigu yidhi, Haddaba maxaan dadka qarnigan ku matalaa?
Maxay matalaan? [32] Waxay la midyihiin Carruur suuqa fadhida oo isku leh: Turunbaannu idiin
afuufnay, oo waad qoobka ciyaari waydeen, waannu Oynay oo waad ooyi waydeen. [33] Waayo,
Nebi Yaxye ayaa yimid isaga oon cunto cunaynin oon khamri cabbaynin; marka waxaad
tidhaahdeen: Shaydaan baa ku jira. [34] Wiilka Aadanaha ayaa yimid isaga oo wax cunaya oo
cabbaya, oo waxaad tidhaahdeen Bal eega, waa nin cir wayn oo khamriya cab ah oo canshuur
qaadayaasha iyo dembilayaasha saaxiib la ah. [35] Xigmaddu inay xaq tahay midhaheedaa
caddeeya.

### Ciise Oo Gurigii Simoon Loogu Caga Subkay

[36] Farrisiinta midkood ayaa cunto ku casuumay, markaasuu gurigii Farriisiga galay oo cunto u
fadhiistay. [37] Oo bal eeg, waxaa magalada joogtay naag dembi gashay ayaa markay ogaatay
inuu guriga Farrisiga ka cuntaynayo, waxay soo qaadatay dhalo Cadar Alabastar ah.
[38] Markaasay xagga dembe cagihiisa agtooda istaagtay iyadoo ooyaysa, oo waxay billowday
inay ilmo cagihiisa ku qoyso oy timaheeda ku masaxdo oy cagihiisa dhunkato oy cadarkii
mariso. [39] Farrisigii casuumay markuu arkay, ayuu niyadda iska yidhi, Ninkanu hadduu nebi
yahay, wuu ogaan lahaa naagtan taataabanaysa waxay tahay iyo inay dembaabtay. [40] Ciise
ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Simoonow, aan hal ku waydiiyo. Wuxuu yidhi, I waydii Macallin.
[41] Waxaa jiray nin laba nin dayn ku lahaa, mid wuxuu ku lahaa shan boqol oo dinaar, ka kalena
konton. [42] Marka way iska bixin kari waayeen, dabadeedna labadoodiiba wuu ka cafayay.
Marka kee ninkaa aad u jeclaan doona? [43] Simoon ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waxaan
filayaa, ka uu daynta badan ka cafiyay. Wuxuu ku yidhi, Si sax ah baad u xukuntay.
[44] Markaasuu intuu naagtii ku jeedsaday Simoon ku yidhi, Naagtan ma aragtaa? Anigu
gurigaagaan soo galay; oo cagahayga Biyo aan ku caga maydho maadan i siinin, laakiin Iyadu
intay cagahayga ilmadeeda ku qoysay ayay timaheeda ku masaxday. [45] Ima aadan dhunkanin
Iyaduse tan iyo markaan soo galay mayna joojinin inay cagahayga dhunkato. [46] Madaxaygana
saliid ma aad marinin, Iyaduse Cagahayga ayay Cadar marisay. [47] Sidaa darteed waxaan kugu
leeyahay, Dembiyadeedii faraha badnaa waa laga cafiyay, maxaa yeelay, in badan bay
jeclaatay. Kii wax yar laga cafiyaa, in yar buu jeclaadaa. [48] Deedna wuxuu iyada ku yidhi,
Dembiyadaadii waa la cafiyay. [49] Markaasay kuwii wax la cunayay billaabeen inay isku
yidhaahdaan Muxuu yahay kan dembiyada cafiyaya? [50] Naagtiina wuxuu ku yidhi,
Iimaankaagaa ku badbaadiyay ee nabad ku tag.

### Dumar Ayaa Ciise U Adeegay

**8** Markii dambe waxaa dhacay inuu magaalooyinka iyo tuulooyinka dhex maray isaga oo
dadka ku wacdiyaya oo u sheegaya Injiilka boqortooyada Eebbe; waxaana la socday laba iyo
tobankii, [2] Iyo Dumar laga bogsiiyay shaydaanno shar leh iyo cudurro. Waxayna ahaayeen
Maryamadii la odhan jiray reer Magdala, ee ay toddobada shaydaan ka baxeen, [3] Iyo Yo’anna
xaaskii Khusas wakiilkii Herodos, iyo Susanna, iyo qaar kale oo badan oo hantidooda ugu
adeegi jiray isaga.

## Tusaale Ku Saabsan Beer Qodaha

[4] Oo markay dadkii fahara badan isu soo uruureen oy magaalo walba isaga uga yimaaddeen,
ayuu tusaale kula hadlay. [5] Beer qote ayaa baxay si uu abuurka u beero, oo markuu beerayay,
qaar baa jidka geestiisa ku dhacay, oo waa lagu tuntay, oo shimbiraha cirka ayaa cunay.
[6] Qaar kalena waxay ku dhaceen dhagax; oo markay sidaa u soo baxeenba way engegeen,
waayo, rays mayna lahayn. [7] Qaar kalena waxay ku dhex dhaceen qodax, qodaxdiina way la
soo baxday oo way cuna qabataysay. [8] Qaar kalena dhul wanaagsan ayay ku dhaceen oo way
soo baxeen, waxayna midho dhaleen boqol jibbaar. Markuu hadalkaa yidhi, ayuu intuu kor u
dhawaaqay yidhi, Kii dhego wax lagu maqlo leh ha maqlo.

## Macnaha Tusaalaha

[9] Marka xertiisii ayaa waydiisay oo ku tidhi Muxuu yahay tusaalahan macnihiisu? [10] Wuxuu ku
yidhi, Idinka waxaa laydin siiyay sirta garashada boqortooyada Eebbe, kuwa kalese tusaale
ayaa loogu sheegaa, si markay arkaan ayna u arag, oo markay maqlaan ayna u fahmin.
[11] Macana Tusaaluhu waa sidan: Abuurku waa erayga Eebbe. [12] Kuwii jidka ku dhacayna waa
kuwa maqla, markaasuu Iblaysku yimaaddaa, oo hadalka qalbigooda ka qaadaa, si ayna u
rumaynin oo ayna u badbaadin. [13] Kuwa dhagaxa ku dhacayna waa kuwa markay maqlaan,
erayga farxad ku aqbala laakiinse xidid ma laha oo wakhti kooban ayay rumaystaan, laakiin
markii la jirrabo way iska laabtaan. [14] Kuwa qodaxda ku dhex dhacayna waa kuwan maqla oo
waxaa cuna qabateeya ka welwelidda hodantinimada iyo raaxada adduunka, mana midho
dhalaan. [15] Kuwa dhulka wanaagsan ku dhacayna waa kuwa erayga maqla oo qalbi
wanaagsan oo daacad ah ku aqbala, oo dulqaad ayay midho ku dhalaan.

## Tusaale Iftiinka Ku Saabsan

[16] Ma jiro qof, intuu faynuus shido, weel ku daboola, ama sariir hoos geliya, laakiin wuxuu
saaraa meeshii ilayska si ay kuwa soo galaa iftiinka u arkaan. [17] Waayo, wax qarsoon ma jiro
oo aan soo bixi doonin, oo wax daboolan ma jiro oo aan la garan doonin oo aan bannaanka
usoo bixi doonin. [18] Sidaa darteed u fiirsada sidaad u maqashaan, waayo, ku alla kii wax
haysta waa la siin doonaa, oo kii aan waxba haysan waxa u uu malaynayo inuu haysto ayaa
laga qaadii doonaa.

## Walaalnimada Dhabta Ah

[19] Marka waxaa isaga u yimid hooyadii iyo walaalihii, oo way soo gaadhi kari waayeen dadkii
faraha badnaa aawadood. [20] Marka waxaa lagu yidhi, Hooyadaa iyo walaalahaa ayaa dibadda
taagan oo doonaya inay ku arkaan. [21] Laakiin wuxuu ugu jawaabay Hooyaday iyo walaalladay
waa kuwa Erayga Eebbe maqla oo ku dhaqma.

## Ciise Ayaa Duufaan Dejiyay

[22] Maalin ayuu doonni raacay isaga iyo xertiisa, wuxuuna iyaga ku yidhi, Ina keena aynu
Dhanka kale ee Harada u tallownee markaasay dhaqaaqeen. [23] Laakiin intay socdeen ayuu
seexday, oo waxaa Haradii ku dhuftay duufaan dabayl wadata; doonnidiina Biyo ayaa ka
buuxsamay, oo halis bay ku galeen. [24] Markaasay isaga u yimaaddeen oo intay toosiyeen ayay

ku yidhaahdeen Macallinow, Macallimow, waanu qaraqmaynaa. Markaasuu intuu kacay
dabayshii iyo hirarkii biyahaba canaantay. Deedna way degeen oo xasileen. 25 Markaasuu
iyaga ku yidhi, Rumaysadkiinnii aawe? Deedna iyaga oo yaabban oo cabsanaya waxay isku
yidhaahdeen Yuu yahay Ninkanu xataa dabaysha iyo biyaha ayuu amar siiyaa wayna yeelaan?

### Ninkii Shaydaanku Ku Jiray Ee Reer Gadareni Waa La Bogsiiyay

26 Marka waxay gaadheen gobolka Gadareni ee ka soo hor jeeday Galili. 27 Markuu dhulka ku
degayna waxaa la kulmay nin magaalada ka yimid oo ay shaydaanno ku jiraan, kaasoo aan
muddo dheer dhar xidhanin, oon guri joogi jirin, laakiinse xabaalaha ayuu ku dhex noolaan
jiray. 28 Markuu Ciise arkay, ayuu kor u qaylyay oo intuu hortiisa ku dhacay ayuu isaga oo kor u
dhawaaqaya yidhi, Maxaa inoo dhexeeya Ciisow, Wiilka Eebbaha sarow? Waan ku
baryayaaye, Ha i ciqaabin. 29 Waayo, wuxuu shaydaankii wasakhda lahaa amar ku siiyay inuu
ninka ka baxo, maxaa yeelay, marar badan ayuu qaban jiray, oo waxaa lagu xidhi jiray silsilado
iyo bircagood, oo waa la ilaalin jiray; silsiladahana wuu iska gooyn jiray oo shaydaanku meel
cidla ah ayuu u kaxayn jiray. 30 Marka Ciise ayaa waydiiyay oo ku yidhi, Magacaa? Markaasuu
ku yidhi, Liijon; waayo, shaydaanno badan baa galay. 31 Deedna waxay ka baryeen inuuna
cadaabka u dirin.

32 Marka waxaa halkaa daaqayay doofaarro fara badan oo buurta jirjirkeeda daaqayay. ka
dibna shaydaanadii waxay ka baryeen inuu u fasaxo inay doofaarrada galaan. Deedna wuu u
fasaxay. 33 Markaasay shaydaanadii intay ninkii ka baxeen doofaarradii galeen. Doofaarradiina
intay jarka hoos uga daateen ayay badda ku dhaceen oo ku bakhtiyeen. 34 Kuwii daajin jirayna
markay arkeen waxa dhacay, ayay carareen oo dadkii ayay miyi iyo magaalada u warrameen.
35 Markaasay dadkii soo baxeen si ay u arkaan waxa dhacay. Markaasay Ciise u yimaaddeen
oo waxay arkeen ninkii oy shaydaanadii ka baxeen oo Ciise lugihiisa ag fadhiya oo miyir qaba
oo dhar xidhan; wayna cabsadeen. 36 Deedna goob joogayaashii ayaa iyaga u sheegeen sidii
ninkii shaydaanku ku jiray loo bogsiiyay. 37 Ka dibna dadkii gobolka Gadareni iyo agagaarkiisa
oo dhan ayaa ka baryay inuu ka noqdo iyaga, waayo, aad bay u cabsadeen. Markaasuu
doonni raacay, wuuna ka noqday. 38 Laakiinse ninkii shaydaanadu ka baxeen wuxuu ka baryay
isaga inuu raaco, laakiin Ciise wuu iska diray isaga oo wuxuu ku yidhi, 39 Gurigaagii ku noqo oo
dadka u sheeg waxa wayn ee Eebbe kuu sameeyay. Markaasuu tegay oo wuxuu magaalada
oo dhan ku faafiyay waxa wayn ee Ciise u sameeyay.

### Gabadhii Yayros Iyo Naagtii Marada Ciise Taabatay

40 Markuu Ciise noqday dadkii faraha badnaa ayaa farxad ku soo dhaweeyay, waayo, way
wada sugayeen. 41 Marka waxaa yimid nin Yayros la odhan jiray, oo sunagogga hoggaamiye
ka ahaa. Oo intuu Ciise cagihiisa ku dhacay ayuu ka baryay inuu gurigiisa galo. 42 Waayo,
gabadhiisii keliya oo laba iyo toban sano jir ah ayaa sakaraad ahayd. Marka intuu Ciise socday
dadkii faraha badnaa ayaa cidhiidhiyay. 43 Marka waxaa jirtay naag laba iyo toban sannadood
dhiigbax qabtay, oo waxay ku noolaan lahayd oo dhan dhakhaatiirta ku bixisay oo midna ku
caafimaadi wayday, 44 Oo intay dhabarkiisa istaagtay ayay maradiisa darafteeda taabatay. Oo
Isla markiiba dhiig bixii wuu joogsaday. 45 Markaasuu Ciise yidhi, Yaa i taabtay? Markay
kulligood wada dafireen Butros iyo kuwo la joogay ayaa ku yidhi, Macallin, dad fara badan
ayaa ku jiidhaya oo ku cidhiidhinaya oo waxaad leedahay: Yaa i taabtay? 46 Laakiin Ciise ayaa

ku yidhi, Qof baa i taabtay, waayo, waxaan gartay in xoog iga baxay. [47] Naagtii markay aragtay
inayna qarsoomi karin ayay iyada oo gariiraysa timid, oo intay hortiisay ku dhacday ayay dadkii
oo dhan hortooda ka caddaysay sababtay u taabatay iyo siday markiiba u bogsatay. [48] Deedna
wuxuu iyada ku yidhi, Gabadhaay, rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyay ee nabad ku tag.
[49] Isaga oo hadalkii wada, waxaa gurigii hoggaamiyaha sunagogga ka yimid nin ku leh
Gabadhaadii way dhimatay, ee Macallinka ha dhibin. [50] Laakiin Ciise markuu maqlay, wuxuu
ugu jawaabay Ha cabsanin ee rumaysad yeelo wayna bogsan doontaa. [51] Markuu guriga yimid,
cidna uma oggolaanin inuu la galo, Butros, iyo Yooxanaa, iyo Yacquub, iyo gabadha
labadeeda waalid mooyee. [52] Oo kulligood waxay u barooranayeen iyada, laakiin wuxuu ku
yidhi, Ha ooyina, iyadu ma dhimane way huruddaa. [53] Marka way ku qosleen, iyaga oo og inay
dhimatay. [54] Markaasuu dadkii oo dhan dibadda u saaray, oo intuu gacanteeda qabtay ayuu ku
dhawaaqay Yartaay, kac. [55] Oo naftii ayaa ku soo noqotay, oo markiiba way kacday, oo wuxuu
ku amray in cunto la siiyo iyada. [56] Waalidkeediina way yaabeen, wuxuuna ku amray inayna
waxa dhacay cidna u sheegin.

### Laba iyo Tobankii Rasuul Iyo Shaqadoodii

**9** Marka laba iyo tobankii xerta ahaa ayuu isugu yeedhay, oo wuxuuna siiyay awood iyo Amar
ay shaydaanada oo dhan ku saaraan oy cudurrada ku bogsiiyaan. [2] Wuuna diray iyaga si ay
boqortooyada Eebbe dadka ugu wacdiyaan oy kuwa buka u bogsiiyaan. [3] Wuxuuna ku yidhi,
Waxba safarka ha u qaadanina, ul, ama kiish, ama hunto, ama lacag. Laba shaadhna ha
qaadanina. [4] Guri alla gurigaad gashaan halkaas jooga ilaa iyo intaad ka tagaysaan. [5] Magaalo
kasta oy dadkeedu idin diiddaanna, markaad magaaladaas ka baxaysaan boodhka cagihiinna
ka jafa si ay marag iyaga ka dhan ah u ahaato. [6] Markaasay baxeen, oo tuulooyinka ayay dhex
mareen, iyaga oo Injiilka ku wacdiyaya oo meel walbaba kuwa buka ku bogsiinaya.

### Welwelkii Herodos Iyo Dhimashadii Nebi Yaxye

[7] Marka guddoomiye Herodos ayaa maqlay waxa dhacay oo dhan, wuuna shakiyay, waayo,
qaar ayaa yidhi, Nebi Yaxye ayaa kuwii dhintay ka soo sarakacay, [8] qaarna waxay
yidhaahdeen, Ilyaas ayaa soo muuqday, qaar kalena waxay yidhaahdeen, nebi nebiyadii hore
ah ayaa soo sarakacay. [9] Marka Herodos wuxuu yidhi, Nebi Yaxye Anigaa madaxa ka gooyay,
ee waa ayo ka aan waxan ka maqlayo? Marka wuxuu doonayay inuu arko.

### Waxaa La Quudiyay Shan Kun Oo Nin

[10] Rasuulladii markay soo noqdeen waxay isaga u sheegeen oy uga warrameen wax
qabadkoodii. Marka intuu kaxeeyay ayuu keligood meel cidla ah oo magaalada Beytsayda la
odhan jiray u dhaw la tagay. [11] Laakiin dadkii faraha badnaa, markay ogaadeen, ayay soo
raaceen. Wuuna soo dhaweeyay iyaga, oo boqortooyada Eebbe ayuu kala hadlay iyaga, kuwii
u baahnaa in la bogsiiyana wuu bogsiiyay. [12] Marka galabnimadii laba iyo tobankii ayaa u yimid
oo ku yidhi, Dadkan faraha badan kala dir si ay tuulooyinka iyo beeraha ku wareegsan u
tagaan oy halkaas ugu hoydaan oy cunto uga helaan, waayo, meel cidla ah ayaynu joognaa.
[13] Markaasuu ku yidhi, Idinku siiya waxay cunaan. Waxay ku yidhaahdeen Annagu wax ka
badan shan xabbo oo furin ah iyo laba kalluun ah ma hayno, inaannu tagno oo dadkan oo

dhan cunto u soo iibinno mooyee. [14] Maxaa yeelay, waxay ahaayeen qiyaastii shan kun oo nin.
Wuxuu xertiisii ku yidhi, Koox koox konton konton ah u fadhiisiya. [15] Sidaasayna yeeleen oo
way wada fadhiisiyeen. [16] Markaasuu shantii furinka ahayd iyo labadii kalluun qaaday oo intuu
samada eegay, ayuu barakeeyay, oo kala jejebiyay, deedna xertiisii ayuu siiyay si ay dadkii
faraha badnaa u hor dhigaan [17] Markaasay cuneen oo ka wada dhergeen; waxaana la guray
jajabkii ka hadhay oo laba iyo toban salladood ah.

### Butros Wuxuu Qiray Inuu Ciise Yahay Masiixa

[18] Marka isaga oo keligii tukanaya oy xertiisii la joogto, ayuu waydiiyay isaga oo leh Dadku
yay igu sheegaan? [19] Way u jawaabeen oo ku yidhaahdeen Nebi Yaxye, laakiin qaar kale
waxay yidhaahdaan, Ilyaas, qaarna waxay yidhaahdaan, nebi nebiyadii hore ah oo soo
sarakacay. [20] Markaasuu wuxuu ku yidhi, Idinkuse yaad igu sheegtaan? Butros ayaa ugu
jawaabay Masiixa Eebbe.

### Ciise Wuxuu Sii Sheegay Dhimashadiisa Iyo Sarakiciddiisaba

[21] Markaasuu ka waaniyay oo uga digay inayna arrintaas cidna u sheegin, [22] Oo wuxuu yidhi,
Waa waajib in wiilka Aadanuhu in badan xanuunsado, oy odayaasha iyo wadaaddada sare iyo
culimaduba diidaan, oo la dilo, oo maalinta saddexaad la sarakiciyo.

### Waa in Damaca Nafta La Diido

[23] Marka wuxuu kulligood ku yidhi, Qofkii doonaya inuu iga daba yimaado waa inuu
doonistiisa dafiro oo iskutallaabtiisa maalin walbaba soo qaato oo i soo raaco. [24] Waayo, qofkii
doona inuu naftiisa badbaadiyo, wuu waayi doonaa, laakiinse kii naftiisa aawaday u waaya,
wuu badbaadin doona. [25] Waayo, qof maxay u taraysaa hadduu dunida oo dhan helo oo uu
naftiisa waayo ama khasaaro? [26] Maxaa yeelay, ku alla kii ka xishooda aniga iyo eraygaygaba,
Wiilka Aadanaha ayaa ka xishoon doona isaga, markuu ku yimaado ammaantiisa iyo
ammaanta Aabbihii iyo ta malaa'igaha qudduuska ah. [27] Runtii waxaan idinku leeyahay, Kuwa
halkan taagan qaarkood sinaba dhimasho uma dhadhamin doonaan ilaa oy boqortooyada
Eebbe ka arkaan.

### Ciise Muuqiisu Wuu Is bedelay

[28] Maarkuu hadalkaas yidhi, sideed maalmood dabadeed wuxuu kaxaystay Butros, iyo
Yooxanaa, iyo Yacquub, oo buur ayuu la fuulay si uu u tukado, [29] Oo intuu tukanayay,
muuqaalka wejigiisa ayaa isbedelay, dharkiisuna caddaan dhalaalayay ayuu noqday. [30] Oo
laba nin ayaa la hadlay isaga, waxayna ahaayeen Muuse iyo Ilyaas, [31] Oo ammaan ku soo
muuqday, oo waxay kala hadleen dhimashadiisa uu Quddus ku dhammays tiri doono.
[32] Laakiinse Butros iyo kuwii la joogayba way lulmoodeen; oo markay tooseen waxay arkeen
ammaantiisa iyo labadii nin oo la taagan. [33] Markay ka tegayeen Butros ayaa Ciise ku yidhi,
Macallinow, way fiicantahay inaynu halkan joogno, ee saddex Teendho aanu dhisno, mid
adiga, midna Muuse, midna Ilyaas waayo, muuna garanaynin wuxuu leeyahay. [34] Isaga oon
hadalkii dhammynin, waxaa timid daruur oo iyagay hadhaysay, wayna cabsadeen markay
daruurtii dhex galeen. [35] Oo waxaa daruurtii ka dhex dhawaaqay cod leh Kanu waa Wiilkayga

aan jeclahay ee maqla isaga. [36] Markuu codkii dhammaaday Ciise keligii ayaa la arkay; markaasay ka aamuseen, oo maalmahaas cidna mayna u sheegin wixii ay arkeen.

### Wiilkii Shaydaanku Ku Jiray Waa La Bogsiiyay

[37] Maalintii labaad, markay buurta ka soo degeen, waxaa la kulmay isaga dad fara badan.
[38] Oo bal eeg, nin dadkii ka mid ah ayaa kor u dhawaaqay isaga oo leh Macallinow, waxaan kaa baryayaa inaad wiilkayga eegto, waayo, keligii ayaan leeyahay. [39] Oo bal eeg, Shaydaan ayaa qabsada, oo wuu qayliyaa, oo gilgilaa, markaasuu wiilku afka ka xumbeeyaa; oo intuu aad u rafaadiyo ayuu isaga oo burbursan ka tagaa. [40] Xertaada ayaan ka baryay inay ka saaraan, laakiinse way kari waayeen. [41] Marka Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Qarniyahow rumaysadka daran ee madaxa adag, ilaa iyo goormaan idinla joogi doonaa, oon idiin adkaysan doonaa? Wiilkaaga halkan keen. [42] Marka Intuu soo socday, shaydaankii ayaa dhulka ku dhuftay oo gilgilay. Deedna Ciise ayaa shaydaankii wasakhda lahaa canaantay, oo intuu wiilkii bogsiiyay aabbihii ku celiyay, markaasay kulligood awoodda Eebbe ka yaabeen.

### Ciise Mar Labaad Ayuu Dhimashadiisa Sii Sheegay

[43] Laakiin intay kulligood la wada yaabanaayeen wuxuu sameeyay oo dhan, ayuu xertiisii ku yidhi, [44] Si fiican u dhagaysta waxaan idin leeyahay waayo, Wiilka Aadanaha dadka ayaa loo gacan gelin doonaa. [45] Laakiinse hadalkaas mayna fahmin, waana laga daboolay inay fahmaan, inay waydiiyaana way ka cabsadeen.

### Is-hoosaysiinta

[46] Marka waxaa ka dhex kacday dood ku saabsan Ka ugu sarreeya. [47] Laakiin Ciise markuu ogaaday fikirka qalbigooda ayuu ilmo qaaday oo agtiisa joojiyay, [48] Markaasuu ku yidhi, iyaga Ku alla kii magacayga ku aqbala ilmahan, wuu i aqbalaa, oo kii i aqbalana, wuxuu aqbalaa kii i soo diray, waayo, ka idiinku yar ayaa idiinku wayn.

### Ninkii Aan Idinka Soo Horjeedin Wuu Idinla Jiraa

[49] Marka Yooxanaa ayaa ku yidhi, Macallinow, waxaannu aragnay nin magacaaga shaydaanada ku saaraya, oo waannu u diidnay, waayo, isagu inama soo raacin. [50] Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, Ha u diidina, waayo, qofkii aan idinka horjeedin wuu idinla jiraan.

### Ciise Wuxuu Canaantay Yacquub Iyo Yooxanna

[51] Markuu wakhtigii isaga kor loo qaadi lahaa dhawaaday, wuxuu go'aansaday inuu Quddus tago. [52] Wuxuuna diray oo iska hor mariyay, rusul wayna tageen oo tuulo reer Samaariya ah ayay galeen si ay wax ugu diyaariyaan isaga. [53] Laakiinse mayna soo dhawaynin isaga, maxaa yeelay, wuxuu ku socday Quddus. [54] Dabadeedna xertiisii Yacquub iyo Yooxanaa markay arkeen, waxay ku yidhaahdeen Sayidow, ma doonaysaa sidii Ilyaas inaannu dab amarno inuu cirka ka soo dego oo baabbi'iyo? [55] Laakiinse intuu ku jeedsaday ayuu canaantay iyaga, oo ku yidhi, Ma garanaysaan ruuxa idinku jira noocuu yahay, maxaa yeelay wiilka aadanuhu uma imanin inuu dadka naftooda halaago, Laakiinse inuu badbaadiyo iyaga. [56] Markaasay tuulo kale u kaceen.

## Qiimaha Xernima Masiixa

57 Marka intay jidka ku sii jireen nin ayaa isaga ku yidhi, Waan ku raacayaa meel alla
meeshaad tagtaba. 58 Marka Ciise ayaa ku yidhi, Dawacooyinku godad bay leeyihiin,
shimbiraha cirkuna buulal bay leeyihiin, laakiinse Wiilka Aadanuhu malaha meel uu madaxiisa
dhigo. 59 Mid kale ayuu ku yidhi, Isoo raac. Laakiin isagu wuxuu ku yidhi, Sayidow, horta aan
tago oon aabbahay soo aaso. 60 Marka wuxuu ku yidhi, Iska daa, meydku meydadkooda ha
aaseen, laakiin adigu bax oo boqortooyada Eebbe ku wacdi. 61 Mid kale ayaa hadana ku yidhi,
Sayidow, waan ku raacayaa, laakiin horta aan qoyskayga soo sagootiyo. 62 Ciise ayaa ku yidhi,
Ma jiro nin markuu harqoodka gacantiisa saaro dib eega, oo boqortooyada Eebbe u qalma.

## Ciise Wuxuu Diray Toddobaatan Xer Ah

**10** Markaas dabadeed Rabbigu wuxuu doortay toddobaatan kale, oo laba laba ayuu ugu diray
magaalo walba iyo meel walba oo uu tegi lahaa. 2 Wuxuuna ku yidhi, Midhaha soo go'aya way
badanyihiin, laakiinse shaqaaluhu way yaryihiin: Sidaa darteed Sayidka beergooyska barya si
uu shaqaale beertiisa ugu soo diro. 3 Socda, oo bal eega, waxaan idiin dirayaa sidii ido yay ku
dhex jira. 4 Boorso iyo kiish iyo kabo toona ha qaadanina, cidna jidka ha ku salaamina. 5 Guri
alla gurigaad gashaan, horta waxaad ku tidhaahdaan Gurigan nabadu ha u ahaato. 6 Haddu
qof nabdeed halkaas joogo, nabaddiinnu dushiisa ayay ahaan doontaa, haddii kalese way idiin
soo noqon doontaa. 7 Marka gurigaas laftiisa jooga, oo waxay idin siiyaan cuna oo cabba
waayo, shaqaaluhu way mutaystaan abaalkooda. gurina guri ha u dhaafina.

8 Magaalo kasta ood gashaan oo laydinka soo dhaweeyo, cuna waxay idin soo hor dhigaan.
9 Oo bogsiiya kuwa buka ee halkaa jooga, oo ku dhaha: Boqortooyada Eebbe way idinku soo
dhawdahay. 10 Laakiin magaalo kasta ood gashaan, oo laydinka soo dhawayn waayo,
waddooyinkeeda u soo baxa, oo dhaha 11 Xataa boodhka magaaladiinna ee cagahanaga soo
raacay, waannu idiin tir tiraynaa, laakiinse tan ogaada; Boqortooyadii Eebbe way dhawdahay.
12 Waxaan idinku leeyahay, Maalintaas Sodom ayaa ka xisaab fududaan doonta magaaladaas.

## Waxaa Halaagsamay Magaalooyinka Toobadkeeni waayay

13 Halaag baa kugu dhacay Khorasinay. Halaag baa kugu dhacay, Beytsayday, waayo,
mucjisooyinkii xoogga lahaa ee laydinku dhex sameeyay haddii Turos iyo Siidoon lagu samayn
lahaa, goor horay ayay keeni lahaayeen, iyaga oo dhar murugeed xidhan oo dambas ku
fadhiya. 14 Laakiin maalinta xisaabta Turos iyo Siidoon ayaa idinka xisaab fududaan doona.
15 Adiguna Kafarna'umay, ma samada laguu sarraysiiyay? Haadaanta ayaad ku hooban
doontaa. 16 Qofkii idin maqlaa wuu i maqlaa, oo qofkii idin diida, wuu i diidaa, oo kii i diidaa,
wuxuu diidaa kii i soo diray.

## Toddobaatankii Way Soo Laabteen

17 Marka toddobaatankii farxad ayay la soo laabteen, iyaga oo leh Sayidow, xataa
shaydaanadu magacaaga ayay noogu hoggaansameen. 18 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Waxaan
arkay shaydaanka oo sida hillaaca samada ka soo dhacaya. 19 Bal eega, waxaan idin siiyay
amar aad ku burburisaan abeesooyinka iyo dabaqalloocyada iyo xoog kasta oo cadowga;

waxbana idinma dhibi doonaan. [20] Ha ku farxina inay shaydaanadu idiin hoggaansameen, laakiinse ku farxa in magacyadiinna jannada lagu qoray.

### Ciise Wuu Farxay

[21] Isla saacaddaas Ciise Ruuxa ayuu ku farxay oo wuxuu yidhi, Waan kugu mahadnaqayaa, Aabbow, Rabbiga samada iyo dhulkow, waayo, waxyaalahan ayaad kuwa caqliga iyo garashada leh ka qarisay, oo waxaad u muujisay ilmo yar yar. Haah, Aabbow, waayo, taas ayaa aragtidaada ku qumanaatay. [22] Aabbahay wax walbaba wuu i siiyay; oo ninna Wiilku kuu yahay ma garanayo Aabbaha mooyee, oo ninna Aabbahu kuu yahay ma garanayo, Wiilka iyo kii uu Wiilku u muujiyo mooyee.[85*] [23] Markaasuu xertiisa ku jeedsaday oo keli ahaan ugu yidhi, Waxaa barakaysan indhaha waxaad aragtaan arka; [24] Waayo, waxaan idinku leeyahay, nebiyo iyo boqorro badan ayaa doonay inay arkaan oy maqlaan waxaad ood maqashaan mana ayna arag mana ayna maqlin.

### Saamirigii Wanaagsanaa

[25] Oo bal eeg, culimada shareecada midkood ayaa istaagay si uu u jirrabo, oo wuxuu yidhi, Macallinow, maxaan sameeyaa si aan nolosha weligeed ah u dhaxlo? [26] Wuxuu ku yidhi, Maxaa sharciga ku qoran? Sideed u akhridaa? [27] Marka ninkii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waa inaad Rabbiga Eebbahaaga ah ka jeclaato qalbigaaga oo dhan iyo naftaada oo dhan iyo xooggaaga oo dhan iyo caqligaaga oo dhan, deriskaagana waa inaad u jeclaato sida naftaada. [28] Wuxuu ku yidhi, si fiican ayaad u jawaabtay. Sidaas yeel waad noolaane. [29] Laakiin isaga oo doonaya inuu muujiyo xaqnimadiisa ayuu Ciise ku yidhi, Deriskaygu waa ayo? [30] Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Nin ayaa Quddus ka soo tegay oo Areexo u soo kacay; wuxuuna dhexda u galay budhcad, oo intay garaaceen oy dharkii ka furteen ayay isaga oo sakaraad ah ka tageen. [31] Marka wadaad ayaa si lama filaan ah jidkaas u soo maray, oo markuu arkay ayuu dhinaca kale iska maray. [32] Sidoo kale nin reer Laawi ah ayaa halkaas yimid oo markuu arkay, ayuu gees ka maray oo iska tegay. [33] Laakiin nin reer Samaariya ah oo safar ah ayaa meeshii soo maray, oo markuu arkay ayuu u naxariistay. [34] Oo intuu u tegay, oo nabarradiisii duubay oo saliid iyo khamri ku shubay ayuu neefkiisii ku qaaday, dabadeedna intuu albeerko geeyay ayuu ku xanaaneeyay. [35] Maalintii labaad ayuu intuu laba dinaar soo bixiyay ninkii albeerkada lahaa siiyay, oo ku yidhi, Daryeel isaga oo wixii dambe ee kaagaga baxa markaan soo noqdo ayaan ku siin doonaa. [36] Saddexdaas kee ayay kula tahay inuu deris u ahaa ninkii budhcadda dhexda u galay? [37] Wuxuu ku yidhi, 'Kii u naxariistay. Marka Ciise ayaa ku yidhi, Tag oo sidaas oo kale yeel.

### Ciise Ayaa Booqday Maarta Iyo Maryama

[38] Marka Intay socdeen wuxuu galay tuulo. deedna naag Maarta la yidhaahdo ayaa gurigeeda ku qaabishay. [39] Waxayna lahayd walaasheed oo Maryama la yidhaahdo, taasoo intay Sayidka cagihiisa ag fadhiisatay eraygiisa dhagaysatay. [40] Laakiinse Maarta hawl badan ayay ku mashquultay, deedna intay isaga u timid ayay ku tidhi Sayidow miyaadan danaynaynin inay walaashay iga tegtay oon keligay adeego? u sheeg inay i caawiso. [41] Marka Rabbiga ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Maartay, Maartay, wax badan baad ka welweshaa ood isku dhibaysaa.

85 Garasho buuxda oo boqolkiiba boqol ah ayuu u jeedaa.

[42] Laakiinse hal arrin baa loo baahanyahay, Maryamana wixii wanaagsanaa ayay doortay lagamana qaadi doono.

### Salaaddii Uu Ciise Xertiisa Baray

**11** Marka Ciise meel ayuu ku tukanayay, oo markuu dhammeeyay, mid xertiisa ka mid ah
ayaa ku yidhi, Sayidow, na bar sida loo tukado, sida Nebi Yaxye xertiisa u baray. [2] Wuxuu ku
yidhi, Markaad tukanaysaan dhaha:

Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quddus ha ahaado,
Boqortooyadaadu ha timaaddo.
[3] Maalin kasta cunto nagu filan na sii.
[4] Oo naga cafi dembiyadayada,
Waayo, annaguba waannu cafinaa kuwa dembiga naga gala,
Oo jirrabaadda ha innooga tegin,
Laakiinse naga ilaali sharka.

[5] Wuxuuna ku yidhi, Kiinnee saaxiib leh oo intuu saqda dhexe u tago ku odhanaya:
Saaxiibow, saddex midh oo furin ah i amaahi [6] Waayo, saaxiibkay oo safar ah ayaa ii yimid,
waxaan hor dhigana ma hayo? [7] Marka kii gudaha ku jiray ayaa ugu jawaaba oo ku yidhaahdaa
War Ha i dhibin. Albaabka waa la xidhay; carruurtayduna sariirtay ila hurdaan; mana kici karo
oo wax kuma siin karo. [8] Waxaan idinku leeyahay, u kici maayo oo wax u siin maayo
saaxiibtinimo aawadeed, laakiinse baryadiisa badan aawadeed ayuu u kici doonaa oo wax
kasta oo uu u baahanyahay u siin doonaa. [9] Sidaa aawadeed waxaan idinku leeyahay,
Waydiista waa laydin siine; oo doona waad helaysaane; oo garaaca waa laydinka furiye.
[10] Waayo, mid kasta oo waydiista waa la siiyaa; oo kii doonaa wuu helaa; oo kii garaaca waa
laga furaa. [11] Kiinnee aabba ah oo hadduu wiilkiisu furin waydiisto, dhagax siiya? Ama hadduu
kalluun waydiisto abeeso siiya? [12] Ama hadduu ukun waydiisto, dabaqallooc siiya? [13] Marka
idinka oo shar leh haddaad garanaysaan inaad hadiyado wanaagsan carruurtiinna siisaan,
intee ka badan ayuu Aabbihiinna jannada ku jiraa Ruuxa Quduuska ah siin doonaa kuwa
isaga waydiista?

### Reer Kala Qaybsanu Ma Taagnaado

[14] Marka shaydaan carrab la' ayuu saarayay oo markuu shaydaankii baxay kii carrabka la'aa
wuu hadlay, dadkiina way yaabeen. [15] Laakiin qaarkood waxay yidhi, Wuxuu shaydaanada ku
saaraa Be'elsebul oo madaxda shaydaanada ah. [16] Kuwo kalena iyaga oo tijaabinaya waxay
doonayeen inuu mucjiso cirka ka tuso. [17] Laakiinse isaga oo og fikirkooda ayuu ku yidhi,
Boqortooyo kasta oo kala qaybsantaa, way baaba'daa, oo guri giri ayay u kala qaybsantaa
wayna burburtaa. [18] Hadduu shaydaanku kala qaybsamo, boqortooyadiisu siday u taagnaan
doontaa? Waayo, waxaad tidhaahdaan: Waxaad shaydaanada ku saartaa Be'elsebul.

[19] Anigu haddaan shaydaanada Be'elsebul ku saaro wiilashiinuna yay ku saaraan? Sidaa
aawadeed iyagaa idin xukumi doonaa. [20] Laakiinse haddaan farta Eebbe shaydaanada ku
saaro boqortooyadii Eebbe ayaa idiin timid. [21] Hadduu nin xoog leh oo hubaysan qasrigiisa
ilaalinayo, hantidiisu way nabad gashaa. [22] Laakiin markuu mid ka xoog badan isaga soo

weeraro oo ka adkaado intuu hubkiisii uu isku hallaynayay ka furto ayuu bililiqadiisii qaybiyaa.
23 Qofkii aan ila jirin wuu iga soo hor jeedaa, oo kii aan ila uruurin wuu firdhiyaa.

## Shaydaanku Meeshuu Ka Baxay Ayuu Ku Soo Noqdaa

24 Shaydaanka wasakhda leh markuu qofka ka baxo, wuxuu maraa meelo aan biyo lahayn,
isaga oo nasasho doonaya, oo markuu waayo, wuxuu yidhaahdaa Waxaan ku noqonayaa
gurigaygii aan ka baxay.
25 Oo Markuu yimaado wuxuu helaa isaga oo xaaqan oo habaysan.
26 Markaasuu tagaa oo wuxuu kaxaystaa toddoba shaydaan oo kale oo ka xun isaga, wayna
galaan oo halkaas ayay ku noolaadaa. oo qofkaas cidhibtiisa dembena way ka darriataa
wakhtigii hore.
27 Markuu waxyaalahaa yidhi, naag dadka ka mid ahayd ayaa codkeeda kor u
qaadday oo ku tidhi Waxaa barakaysan makaankii ku qaaday iyo naasihii aad nuugtay.
28 Laakiin wuxuu ku yidhi, Laakiin waxaa barakaysan kuwa erayga Eebbe maqla ee ku
dhaqmay.

## Mucjisadii Nebi Yoonis

29 Marka dadkii faraha badnaa ayaa isugu soo uruuray, oo wuxuu billaabay inuu yidhaahdo
Qarniganu waa qarni shar leh oo calaamad ayay doonayaan, lamana siin doono, calaamaddii
Yoonis mooyee.
30 Waayo, siduu Yoonis calaamo ugu noqday reer Naynaweh oo kale ayuu
Wiilka Aadanuhuna calaamad ugu noqon doonaa qarnigan.[86*]
31 Boqorradda koonfurta ayaa
dadka qarnigan maalinta qiyaamada u istaagi doonta oo xukumi doontaa, maxaa yeelay,
waxay ka timid meesha dhulka ugu fog si ay xigmadda Sulaymaan u maqasho,oo bal eeg, mid
Sulaymaan ka wayn ayaa halkan jooga.[87*]
32 Ragga reer Neynaweh ayaa sarakici doona oo
qarnigan xisaabin doona, maxaa yeelay, waxay ku toobadkeeneen wacdigii Yoonis, oo bal
eeg, mid Yoonis ka wayn ayaa halkan jooga.

## Iftiinka Jidhka

33 Ma jiro nin, intuu faynuus shido meel qarsoon dhiga, ama salad ku daboola, laakiin wuxuu
saaraa meeshii faynuuska si ay kuwa soo galaya iftiinka u arkaan.
34 Iftiinka jidhkaagu waa
ishaada, marka hadday ishaadu wanaagsantahay, jidhkaaga oo dhanna wuu iftiimaa, laakiinse
hadday xuntahay, jidhkaaguna waa gudcur.
35 Marka is ilaali si iftiinka kugu jiraa uuna gudcur u
noqonin.
36 Haddaba hadduu jidhkaaga oo dhan iftiimo oo uuna lahayn meel gudcur ah wuxuu
u wada iftiimaa sidii adiga oo faynuus shidan ku iftiiminaya.

## Ciise Wuxuu Canaantay Farrisiintii Iyo Culimadi Shareecada

37 Marka isaga oo hadlaya ayuu nin Farrisi ahu ku casuumay inuu wax la cuno; markaasuu
gurigiisa u raacay, oo intuu gudaha galay ayuu cunto u fadhiistay.
38 Farrisigii markuu arkay
inuusan cuntada ka hor sii fara xalanin wuu yaabay.
39 Marka Rabbiga ayaa ku yidhi, Idinku
Farrisiinay koobka iyo xeedhada ayaad dusha ka maydhaan, laakiin gudihiinna hoose waxaa
ka buuxa dulmi iyo damac.
40 Doqomayoho, kii dusha sameeyay miyuuna gudahana

86 Waa Kandaakadii Itoobiyadii hore.

87 Neynawa waa magaalo ka tirsan gobolka Salaaxudiin ee dalka Ciraaq oo ay boqortooyo xoog leh ka dhisnayd, waxaana loo diray Nebi Yoonis. Akhri Kitaabka Nebi Yoonis.

samaynin? [41] Laakiin waxa gudaha ku jira nadiifiya, markaas wax walba way idiin nadiifoobi
doonaane. [42] Laakiin halaag baa idinku dhacay Farrisiinyahow, waayo, xawaashka iyo kabsarta
iyo khudaarta oo dhan ayaad toban meelood meel ka bixisaan, oo waxaad ka tagteen
caddaaladii iyo jecaylkii Eebbe. Waxay ahayd inaad tanna samaysaan taana aydaan ka tegin.
[43] Halaag baa idin ku dhacay Farrisiinyahow, maxaa yeelay, waxaad jeceshihiin kuraasta hore
ee sunagogyada, iyo salaanta suuqyada. [44] Halaag baa idinku dhacay, waayo, waxaad tihiin
sidii xabaalo aan calaamad lahayn oy dadku dul maraan iyaga oon ogayn. [45] Kuwa sharciga
yaqaana midkood ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Macallinow, markaad sidaa leedahay,
annagaad na caayaysaa. [46] Markaasuu ku yidhi, Idinkana halaag baa idinku dhacay, culimadii
sharcigow, maxaa yeelay, waxaad dadka ku rartaan wax culus oy adagtahay in la qaado,
idinkuse culayskaas farihiinna middood kuma taabataan. [47] Halaag baa idinku dhacay, waayo,
waxaad dhistaan xabaalihii nebiyadii ay awowayaashiin dileen. [48] Sidaas ayaadna ugu marag
furtaan ood ugu raacdaan waxay awowyaashiin sameeyeen, waayo, iyaguna way dileen,
idinkuna xabaashooda ayaad dhisteen. [49] Sidaa darteed xigmadda Eebbe waxay leedahay
Waxaan u diri doonaa nebiyo iyo rasuullo; qaarkood way ciqaabi doonaan, qaarna way layn
doonaa. [50] Marka qarnigan ayaa la waydiin doona dhiiggii nebiyada ee daatay oo dhan, tan iyo
asaaskii dunida, [51] Laga soo billaabo dhiiggii Haabiil ilaa iyo dhiiggii Sakariyihii ku dhintay
meesha alla bariga iyo meesha qudduuska ah dhexdooda. Runtii, waxaan idinku leeyahay,
Qarnigan ayaa la waydiin doonaa. [52] Halaag baa idinku dhacay, culimadii sharcigow, waayo,
furihii aqoonta ayaad qaadateen. Idinkuna ma gashaan, cid kalena uma ogolaataan inay
galaan. [53] Oo markuu waxaas ku hadlay, culimadii iyo Farrisiintii ayaa aad ugu kacay oo waxay
billaabeen inay dood adag la galaan; [54] waxay iyagu doonayeen inay ku qabtaan waxa uu ku
hadlo.

### Ciise Wuxuu Xertiisii Uga Digay Labawejiilanimo

**12** Waxaa dhacay inay dad aad u fara badan oon la tirin karin isu soo uruureen oy is jiidh
jiidheen, markaasuu ugu horrayntii xertiisa ku yidhi, Iska jira khamiirka Farrisiinta ee
labawejiilanimada. [2] Ma jiro wax daboolan oo aan soo muuqan doonin ama wax qarsoon oo
aan la garan doonin. [3] Sidaa darteed wax kasta ood gudcurka ku dhex tidhaahdeen, iftiinka
ayaa laga maqli doonaa, oo wixii aad dhegta isugu sheegtaan qoolalka qarsoon guryaha
dushooda ayaa lagaga dhawaaqi doonaa.

### Cidda Mudan In Laga Cabsado

[4] Waxaan idinku leeyahay, saaxiibbayaal Ha ka cabsanina kuwa jidhka dila ee aan wax kale
samayn karin. [5] Laakiinse waxaan idiinka digayaa ka aad ka cabsan lahaydeen. Ka cabsada ka
markuu dilo dabadeed awoodda u leh inuu jahannabo ku tuuro. Haa, waxaan idinku leeyahay,
Kaa ka cabsada. [6] Shan shimbirood miyaan laba shilin lagu iibinin? Oo midna Eebbe ma
illaawo. [7] Laakiin xataa timaha madaxiinna oo dhan way tirsanyihiin: waad ka qiima badantihiin
shimbiro badan

### Ciise Oo Dadka Hortooda Lagu Qirto

[8] Weliba waxaan idinku leeyahay, qof kasta oo dadka hortooda igu qirta, Wiilka Aadanuhu
wuxuu ku qiran doonaa malaa'igaha Eebbe hortooda. [9] Laakiin qofkii dadka hortooda igu

dafira, malaa'igaha Eebbe hortooda ayaa lagu dafiri doonaa, [10] Oo qof kasta oo Wiilka Aadanaha af lagaaddo u gaysta, waa laga cafiyi doonaa, laakiin qofkii Ruuxa Qudduuska ah caaya lama cafiyi doono. [11] Markay idin hor keenaan sunagogyada iyo madaxda iyo kowa awoodda leh, ha ka welwelina sidaad isu difaaci doontaan ama jawaabtaad odhan doontaan, [12] Waayo, Ruuxa Qudduuska ah ayaa saacaddaas idin bari doonaa waxaad odhan lahaydeen.

### Tusaale Ku Saabsan Taajir Doqon Ah

[13] Oo mid dadka ka mid ah ayaa ku yidhi, Macallinow, walaalkay u sheeg inuu dhaxalka wax iga siiyo. [14] Laakiin wuxuu ku yidhi, Ninyahow, yaa garsoore ama qaybiye iiga kiin dhigay? [15] Wuxuu iyaga ku yidhi, Feejignaada oo iska ilaaliya damac oo dhan, maxaa yeelay, nolosha qofku kuma tiirsana hanti badan oo uu yeesho. [16] Markaasuu tusaale kula hadlay oo ku yidhi, Nin hodan ah dhulkiisii ayaa wax badan soo bixiyay. [17] Markaasuu isla tashaday oo is yidhi, Maxaan sameeyaa? Waayo, bakhaar aan midhaha ku kaydsado ma haysto? [18] Markaasuu yidhi, Sidan ayaan samayn doonaa. Bakhaarkayga ayaan dumin doonaa oo mid ka wayn ayaan dhisan doonaa; markaasaan sarreenkayga iyo alaabtayda oo dhan ku uruursan doonaa. [19] Deedna waxaan naftayda ku odhan doonaa Nafay, kayd badan oo sannado badan kugu filan ayaa kuu yaalla ee raaxayso oo cun oo cab oo farax. [20] Laakiin Eebbe ayaa ku yidhi, Kaaga doqonka ahow, caawa ayaa naftaada lagaa qaadi doonaa, marka waxaad kaydsatay yaa lahaan doona? [21] Sidaas oo kale ayuu ahaan doonaa qofka naftiisa hanti u kaydiya oo aan Eebbe hodan ku noqonin.

### Isku Hallaynta Eebbe

[22] Markaasuu xertiisii ku yidhi, Sidaa darteed waxaan idinku leeyahay, noloshiinna Ha uga welwelina waxaad cuntaan, jidhkiinnana waxaad xidhataan. [23] Waayo, noloshu way ka qiima badantahay cunto, jidhkuna wuu ka qiima badanyahay dhar. [24] Tukaha eega, waayo, waxba ma beertaan, waxna ma gurtaan, mana haystaan bakhaar ay wax ku kaydsadaan, oo Eebbe ayaa cunto siiya. Intee in leg baad shimbiraha ka qiima badantihiin! [25] Kiinee intuu welwelo, dheerarkiisa dhudhun ku dari kara? [26] Marka haddii aydaan samayn karin waxa ugu yar, maxaad wax kale uga welweshaan? [27] Eega siduu ubuxu u baxo, ma shaqeeyaan, waxbana ma tushaan. Weliba waxaan idinku leeyahay, Xataa Sulaymaan waagii ammaantiisa oo dhan muuna u labisanin sida kuwan midkood.[88*] [28] Marka hadduu Eebbe sidaa u huwiyay cawska maanta duurka ku yaalla barrina foornada lagu tuurayo, intee in ka badan ayuu idin huwinayaa rumaysad yarayaalyahow? [29] Ha raadinina waxaad cuntaan iyo waxaad cabtaan oo ha shakiyina [30] Waayo, ummadaha dunidu waxaas oo dhan ayay raadiyaan, oo Aabbihiin wuu ogyahay inaad waxaas u baahantihiin. [31] Laakiinse taa ka sakow marka hore doona boqortooyada Eebbe oo waxaas oo dhanna waa laydiinku dari doonaa. [32] Ha cabsanina, Idayahow yar, waayo, Aabbihiin waxaa ka farxiyay inuu boqortooyada idin siiyo. [33] Iibiya waxaad leedihiin oo sadaqo u bixiya. Samaysta qasnad aan duugoobaynin, oo maal aan dhammaanaynin ku kaysada jannada, meel uusan tuug ku soo dhawaanaynin oo aan aboor ku baabbi'inayn. [34] Waayo, meesha maalkiinnu jiro ayuu maankiinnuna jiraa.

88 Boqor Sulaymaan

## Adeegaha Feejigan

[35] Dhexda dhuujista oo laydhku ha idiin shidnaado. [36] Idinka oo ah sidii niman sugaya, markuu sayidkoodu arooska ka soo noqdo, si markuu yimaado oo uu albaabka garaaco ay isla markiiba uga furaan.
[37] Waxaa barakaysan adeegayaashaas, markuu sayidku yimaado, uu u yimaado iyagoo soo jeeda. Runtii waxaan idinku leeyahay, intuu guntiga dhuujisto ayuu cunto u fadhiisin doonaa oo u adeegi doonaa iyaga. [38] Hadduu habeen badhkii ama suxuurta yimaado oo uu helo iyagoo sidaas ah kuwaas ayaa barakaysan. [39] Laakiin tan ogaada, odayga reerku hadduu ogaan lahaa saacadda tuuggu imanayo, wuu soo jeedi lahaa, oo ma ogolaadeen in gurigiisa la jabsado.
[40] Idinkuna diyaar ahaada, waayo, saacad aydaan filaynin ayuu Wiilka Aadanuhu imanayaa.

## Adeegaha Aan Aaminka Ahayn

[41] Butros ayaa ku yidhi, Sayidow, tusaalahan ma annagaad nagula hadlaysaa mise dadka oo dhan? [42] Sayidkuna wuxuu yidhi, Haddaba waa kee maareeyaha aaminka ah ee caqliga badan ee sayidkiisu madax uga dhigi doono dadka gurigiisa, si uu cuntada qaybtooda wakhtigeeda u siiyo? [43] Waxaa barakaysan adeegahaas markuu sayidkiisu yimaado uu helayo isaga oo sidaas samaynaya. [44] Runtii waxaan idinku leeyahay. Wuxuu leeyahay oo dhan ayuu isaga madax uga dhigi doonaa. [45] Laakiin hadduu adeegahaas niyadda iska yidhaahdo Sayidkayga imaanshihiisu wuu raagayaa, oo uu billaabo inuu adeegayaasha rag iyo dumarkaba garaaco oo uu wax iska cuno oo wax iska cabbo oo iska sakhraamo, [46] Adeegahaas sayidkiisu wuxuu iman doonaa maalin iyo saacad uusan filaynin, oo intuu laba u kala gooyo ayuu khaa'imiinta ku dari doonaa. [47] Adeegaha doonista sayidkiisa og, oo aan isu diyaarinin ama aan samaynin siday doonista sayidkiisu tahay, aad baa loo garaaci doonaa. [48] Laakiin kii aan ogayn oo wax lays ku ciqaabo samaeeya in yar baa la garaaci doonaa. kii wax badan la siiyo, wax badan baa laga doonayaa, oo kii wax badan lagu aamino, wax ka sii badan ayaa la waydiin doonaa.

## Dunidu Ciise Way Ku Kala Qaybsantay

[49] Waxaan u imid inaan dab dhulka ku tuuro, oo maxaan doonayaa hadday durba oloshay?
[50] Waxaa lay biyogalin doonaa biyogalinta xanuunka oo maxaa xanuun iga haysta ilaa oy dhammaato! [51] Ma waxaad u malaynaysaan inaan u imid inaan nabad dhulka siiyo? Waxaan idinku leeyahay, Maya, ee kala qaybsanaan.[89*] [52] Waayo, hadda laga billaabo guri ay qoys shan qof ah ku noolyihiin, ayaa saddex iyo laba u kala qaybsami doona. [53] Aabbe ayaa wiilkiisa ku kici doona, wiilkuna Aabbihii ayuu ku kici doonaa, hooyo ayaa gabadheeda ku kic doonta, gabadhuna hooyadeed ayay ku kici doontaa, soddohda ayaa xaaska wiilkeeda ku kici doonta, wiilka xaakiisuna soddohdeed ayay ku kici doontaa.

89 Aayadda ku xigta ayaa macnaynaysa wuxuu ula jeedo dabka iyo colaadda uu ka hadlayo ee seef iyo Jihaad ma aha!

## Calaamadaha Wakhtiga

54 Weliba wuxuu dadkii badnaa ku yidhi, Markaad aragtaan daruur bari ka soo baxaysa waxaad
tidhaahdaan: Roob baa soo socda, oo sidaasay noqotaa.[90*] 55 Oo markaad aragtaan dabayl
koonfureed oo dhacaysa waxaad tidhaahdaan, Kulayl baa iman doona, sidaasayna noqotaa.
56 Labawejiilayaalyahow, waxaad kala garataan muuqaalka dhulka iyo saadaasha hawada,
laakiin sideed wakhtigan u garan waydaan? 57 Maxaad idinka qudhiinnu xaqa u xukumi
waydaan? 58 Markaad qofka ku soo eedeeyay garsoorka u raacdo, intaad jidka ku sii jirtaan ku
dadaal sidaad ula heshiin lahayd intuuna garsooruhu booliska kuu dhiibin, booliskuna xabsiga
kugu tuurin. 59 Waxaan kugu leeyahay, Halkaas ka soo bixi maysid ilaa iyo intaad shilinka ugu
dembeeya iska bixinaysid.

## Toobadkeena Ama Waad Halaagmaysaan

**13** Markaas dadka qaarkood ayaa Ciise u sheegay kuwo reer Galili ah oo intuu Bilaatos
laayay dhiiggooda ku daray dhiigii xoolahay ku alla baryayeen. 2 Markaasuu Ciise u jawaabay
oo wuxuu ku yidhi, Ma waxay idinla tahay inay kuwaasu reer Galili oo dhan ka dembi
badnaayeen oo sidaas loo ciqaabay? 3 Waxaan idinku leeyahay, Maya, laakiin haddaydaan
toobadkeenin, kulligiin sidaas oo kale ayaad u halaagmi doontaan. 4 Ama siddeed iyo tobankii
ay minaaradda Siloo'am ku dhacday oy dishay, ma waxay idinla tahay, inay ka gef
badnaayeen dadka Quddus degan oo dhan? 5 Waxaan idinku leeyahay, Maya, laakiin
haddaydaan toobadkeenin, kulligiin sidaas oo kale ayaad u halaagmi doontaan.

## Tusaale Ku Saabsan Geedkii Berdaha Ahaa

6 Markaasuu tusaale ku hadlay Nin baa wuxuu lahaa geed berde ah oo beertiisii canabka ah
lagu beeray, markaasuu u yimid isaga oo midho ka doonaya, waxbana muuna ka helin.
7 Wuxuuna shaqaalihii beerta ku yidhi, War Saddex sannadood ayaan ku soo noq
noqnoqonayay berdahan aniga oo midho ka doonayay, kamana helin. Jar, muxuu dhulka u
khasaarinayaa? 8 Markaasuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, sannadkan daa
hareerihiisa ayaan qodayaa oo digo ayaan ku shubayaa. 9 Markaas hadduu midho dhalo,
wanaag; haddii kalese waad jari doontaa.

## Naagtii Maalinta Sabtida Ah La Bogsiiyay

10 Maalin Sabti ah ayuu sunagogyada midkood wax ku barayay. 11 Oo waxaa halkaa joogtay
naag shaydaan ku jiro oo siddeed iyo toban sannadood uu cudur ku riday oo tuur u yeelay, oo
inay toos isu taagto aan awoodin. 12 Ciise markuu arkay, ayuu u yeedhay oo ku yidhi,
Naagyahay, cudurkaagii waa lagaa bogsiiyay. 13 Deedna gacmihiisa ayuu saaray, oo isla
markiiba way toostay, oo Eebbe ayay ammaantay. 14 Marka hoggaamiyihii sunagogga ayaa si
cadho leh ugu jawaabay, waayo, Ciise maalintii Sabtida ahayd ayuu wax bogsiiyay, wuxuuna
dadkii ku yidhi, Lix maalmood ayaa dadka u banaan inay shaqeeyaan. marka maalmahaas
kaalaya, ha laydin bogsiiye, oo ha imanina maalinta Sabtida ah. 15 Laakiin Sayidka ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Labawejiilayhow, mid kasta oo idinka mid ah miyuuna dibigiisa ama
dameerkiisa Sabtida ka soo furin xerada oo uusan kaxaynin oo soo waraabinin? 16 Marka

90 Dhool bari ka soo baxay baa dhaan loo nageeyaa!

naagtan Oo Ina Ibraahim ah oo shaydaanku siddeed iyo toban sannadood xidh xidhay,
miyayna xaq u lahayn in maalinta Sabtida ah laga fura xidh xidhkaas? 17 Markuu sidaas yidhi,
kuwii ku kacsanaa oo dhan way yaxyaxeen, dadkii oo dhanna waxay ku farxeen waxyaabihii
ammaanta lahaa ee uu sameeyay.

### Tusaalihii Iniinta Kherdalka

18 Deedna wuxuu yidhi, Boqortooyada Eebbe maxay u egtahay oo maxaan u ekaysiiyaa?
19 Waxay u egtahay Iniin kherdal, oo intuu nin qaaday beertiisii ku riday oo baxday oo geed
dheer oy shimbiraha cirku laamahiisa ku degaan noqotay.

### Tusaalihii Khamiirka

20 Haddana wuxuu yidhi, Maxaan boqortooyada Eebbe u ekaysiiyaa? 21 Waxay u egtahay
khamiir intay naagu qaadday ay saddex kiiloo oo daqiiq ah ku dhex qooshtay ilaa oy wada
khamiireen.

### Albaabka Cidhiidhiga Ah Ee Nolosha Laga Galo

22 Markuu Quddus ku socday wuxuu sii dhex maray magaalooyinka iyo tuulooyinka isaga oo
wax baraya. 23 Marka mid ayaa ku yidhi, Sayidow, ma in yar baa dadka badbaadi doonaa?
24 Wuxuuna ku yidhi, Aad u dadaala si aad albaabka cidhiidhiga ah uga gashaan, waayo,
waxaan idinku leeyahay, kuwo badan ayaa dooni doona inay galaan, mana kari doonaan.
25 Markuu ninka guriga leh kaco oo uu albaabka xidho ood billowdaan inaad dibadda istaagtaan
ood albaabka garaacdaan, idinka oo leh Sayidow, naga fur; isaguna wuxuu idiinku jawaabi
doonaa oo idinku odhan doonaa Ma garanayo meeshaad ka timaaddeen. 26 Markaasaad
odhan doontaanHortaada ayaannu wax ku cuni jirnay oo ku cabbi jirnay, oo jidadkayaga ayaad
wax ku bari jirtay. 27 Markaasuu odhan doonaa, Waxaan idinku leeyahay Ma garanayo
meeshaad ka timaaddeen; iga taga kulligiin xuma falayaalyahow.

28 Halkaa waxaa jiri doonna oohin iyo ilka jirriqsi, markaad boqortooyada Eebbe ku aragtaan
Ibraahiim iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo nebiyada oo dhan, idinkana dibadda laydiin ku tuuro.
29 Dadku waxay ka iman doonaan bari iyo galbeed iyo woqooyi iyo koonfur, oo waxay dhex
fadhiisan doonaan boqortooyada Eebbe. 30 Ogaada, kuwa ugu dambeeya ayaa ugu horrayn
doona, oo kuwa ugu horreeya ayaa ugu dambayn doonaan.

### Ciise Wuxuu U Murugooday Magaalada Quddus

31 Isla markaas waxaa u yimid kuwo Farrisiin ah iyaga oo ku leh Bax oo meeshan iskaga tag,
waayo Herodos ayaa doonaya inuu ku dilo. 32 Wuxuu iyaga ku yidhi, Idinku u taga oo
dawacaas u sheega, maanta iyo barriba shaydaanno ayaan saarayaa oo dadka ayaan
bogsiinayaa, maalinta saddexaadna waan dhammayn doonaa. 33 Waa inaan socdo maanta iyo
barri iyo saaddembe, waayo, ma dhici karto in meel Quddus ka baxsan nebi lagu dilo.
34 Qudduseey, Qudduseey, nebiyada dishoy, oo kuwa loo soo diro dhagaxaysoy! imisaaan
jeclaa inaan carruurtaada u soo uruuriyo siday digaagaddu carruurteeda baalasheeda

hoostooda ugu uruuriso, laakiinse waad diiddeen. 35 Oo bal eega, gurigiinii waa laydiin daayay,
isaga oo cidla ah. Waxaan idinku leeyahay, Ima arki doontaan ilaa ood tidhaahdaan Waxaa
barakaysan ka magaca Rabbiga ku imanaya.

### Nin ay Calooshu Barartay Oo Sabti La Bogsiiyay

**14** Marka maalin Sabti ah ayuu madaxda Farrisiinta midkood gurigiisa galay si uu cunto u
cuno, wayna eegayeen. 2 Oo bal eeg, waxaa hortiisa joogay nin calooshu baratay. 3 Marka
Ciise wuxuu culimadii shareecada iyo Farrisiintii ku yidhi, Ma xalaal baa in Sabtida wax la
bogsiiyo mise ma ah? 4 Laakiinse way iska aamuseen. Isaguna intuu ninkii qabtay oo bogsiiyay
ayuu sii daayay. 5 Markaasuu wuxuu iyaga ku yidhi, Kiinnee dameer ama dibi leh oo hadduu
maalin Sabti ah ceel ku dhaco aan ka soo bixiyeen? 6 Wayna u jawaabi kari waayeen.

### Is-hoosaysiinta Iyo Marti Soorka

7 Markuu arkay martidii loo yeedhay siday kuraasta hore u doorteen, ayuu tusaalahan u soo
qaatay oo ku yidhi, 8 Markuu qof aroos kugu casuumo, kuraasta hore ha fadhiisanin, waaba
intaasoo nin kaa sharaf badan la soo casuumaa, 9 Oo kii adiga iyo isaga idiin yeedhay intuu
yimaado kugu yidhaahdo Ninka meesha u banee, ood markaas adiga oo yaxyaxsan xagga
dembe fadhiisatid. 10 Laakiin marka laguu yeedho, meesha u dembaysa fadhiiso, si kii kuu
yeedhay markuu yimaado kuu yidhaahdo Saaxiib, xagga sare tag. Markaasaad marti sharafka
kula fadhiya oo dhan hortooda maasuus ku lahaan doontaa. 11 Waayo, mid kasta oo isa
sarraysiiya waa la hoosaysiin doonaa; oo kii is-hoosaysiiya waa la sarraysiin doonaa.
12 Deedna kii soo casuumay ayuu ku yidhi, Markaad qado ama casho samayso, ha u yeedhin
saaxiibadaa ama walaalahaa ama qaraabadaada ama deriskaaga hodanka ah, waaba intaas
oy iyaguna markooda kuu yeedhaane, oy kuu abaal gudaane. 13 Laakiin markaad casuumad
samayso waxaad ugu yeedhaa masaakiinta iyo kuwa laxaadka la' iyo curyaamiinta iyo
indhoolayaasha, 14 Oo waad barakoobi doontaa, waayo, iyagu malah waxay kuugu abaal
gudaan, laakiin waxaa laguu abaal gudi doonaa maalinta ay kuwa xaq ah sarakacaan.

### Tusaale Ku Saabsan Casuumad Wayn

15 Marka kuwii cuntada la fadhiyay midkood markuu hadalkaas maqlay, wuxuu ku yidhi,
Waxaa barakaysan qof kasta oo boqortooyada Eebbe cunto ku cuna. 16 Markaasuu ku yidhi,
Nin ayaa casuumad wayn sameeyay, oo dad badan ugu yeedhay, 17 Marka saacaddii
cacasuumadda ayuu adeegihiisii diray si uu kuwii lagu casuumay ugu yidhaahdo Kaalaya,
hadda wax waluba waa diyaare. 18 Markaasay kulligood ka cudur daarteen oy marmarsoodeen.
Kii ugu horreeyay wuxuu ku yidhi, Beer baan iibsaday, oo waa inaan tago oon soo arko. fadlan
iga raalli ahow. 19 Mid kalena wuxuu yidhi, Waxaan iibsaday shan harqoodka dibida ah, oo
waxaan u socdaa inaan soo tijaabiyo, fadlan iga raalli ahow. 20 Mid kale wuxuu yidhi, War
aroosbaan ahay oo kuma raaci karo. 21 Marka adeegihii ayaa intuu sayidkiisii u tagay waxaas
oo dhan u sheegay. Markaasuu sayidkii gurigu cadhooday, oo wuxuu adeegihiisii ku yidhi, Deg
deg waddooyinka iyo luuqluuqyada magaalada ugu bax oo soo kaxee masaakiinta iyo kuwa
laxaadka la' iyo indhoolayaasha iyo curyaamiinta. 22 Markaasuu adeegihii ku yidhi, Sayidow,
sidaad amartay weeye, oo weli meel baa bannaan. 23 Markaasuu sayidkii adeegihiisii ku yidhi,

Waddooyinka iyo wadiiqayaasha u bax, oo dadka qasab ku soo gali, si uu gurigaygu u
buuxsamo. 24 Waayo, waxaan idinku leeyahay, nimankaas loo yeedhay midkoodna
cashadayda dhadhamin maayo.

### Qiimaha Xernimada

25 Marka Waxaa isaga la socday dad fara badan. dabadeedna intuu ku jeedsaday, ayuu ku
yidhi, 26 Hadduu qof ii yimaado oo uusan aabbihii iyo hooyadii iyo xaaskiisa iyo carruurtiisa iyo
walaalihii iyo xataa naftiisa nicin xer iima noqon karo*[o]. 27 Qof alla qofkii aan iskutallaabtiisa soo
qaadanin oo aan iga daba imaninna, xer iima noqon karo. 28 Waayo, kiinnee doonaya inuu
dabaq dhiso oon marka hore intuu fadhiisto xisaabinaynin qiimaha ku baxaya, si uu u ogaado
inuu kharash uu ku dhammeeyo haysto? 29 Haddii kale markuu aasaaska dhigo oo uu
dhammayn kari waayo, qof kasta oo arka wuu ku qosli doonaa, 30 Iyaga oo leh Ninkanu dhisme
ayuu billaabay oo wuuna dhammaystiri waayay. 31 Ama boqorkee go'aansada inuu boqor kale
dagaal ku qaado, isaga oon marka hore fadhiisanin oon ka tashanin inuu toban kun kala hor
tegi karo mid labaatan kun ku soo weeraray? 32 Haddii kale intuu ka kale ka fogyahay ayuu
ergo nabadeed u soo diraa oo heshiis la galaa. 33 Sidaas oo kale mid kasta oo idinka mid ah
oon ka tegin wuxuu leeyahay oo dhan, xer iima noqon karo. 34 Haddaba milixdu way
fiicantahay, laakiin hadday dhanaan beesho, maxaa lagu dhanaaniyaa? 35 Ciidda iyo digada
toona uma suubato in la tuuro mooyee. qofkii dhego wax lagu maqlo leh, ha maqlo.

### Tusaale Ku Saabsan Laxdii Luntay

**15** Marka waxaa isaga ku soo dhawaaday canshuur qaadayaashii iyo dembilayaashii oo dhan
si ay u maqlaan. 2 Marka Farrisiintii iyo culimadii ayaa gunuunacay, iyaga oo leh Ninkanu
dembilayaasha ayuu soo dhaweeya oo uu wax la cunaa. 3 Markaasuu tusaalahan kula hadlay,
oo ku yidhi, 4 Kiinnee tiro ido ah leh, oo markuu midkood ka lumo, aan sagaal iyo sagaashanka
cidlada kaga tegaynin, oon tii luntay raadinaynin, ilaa uu soo helo? 5 Oo markuu soo helo, aan
tunka ku soo qaadaynin isaga oo faraxsan. 6 Oo markuu guriga yimaado, aan isugu
yeedhaynin saaxiibbadii iyo deriskiisaba, isaga oo ku leh Ila farxa, waayo, laxdaydii iga luntay
ayaan soo halooday? 7 Waxaan idinku leeyahay, Sidaas oo kale, dembiile toobadkeena ayaa
jannada lagaga farxad badanyahay sagaal iyo sagaashan xaq ah oo aan toobadkeen u
baahnayn.

### Tusaale Ku Saabsan Lacag Luntay

8 Ama naagtee toban diinaar oo lacag ah leh, oo hadduu hal diinnaar ka lumo, intay laydhka
shiddo, aan guriga xaaqaynin oon aad u raadinaynin ilaa oy hesho? 9 Oo markay hesho, aan
saaxiibbadeed iyo deriskeedaba isugu yeedhaynin iyada oo ku leh Ila farxa, waayo, diinnaarkii
iga lumay ayaan soo helay. 10 Waxaan idinku leeyahay, Sidaas oo kale ayay malaa'igaha
Eebbe ugu farxaan dembiile toobadkeenay.

### Tusaalihii Wiilkii Caasiga Ahaa

11 Wuxuuna yidhi, Nin ayaa laba wiil lahaa. 12 Marka kii yaraa ayaa aabbihii ku yidhi, Aabbow,
hantida qaybtii aan ku lahaa i sii. Markaasuu hantidii u kala qaybiyay iyaga. 13 Maalmo yar

dabadood wiilkii yaraa wuxuu lahaa oo dhan ayuu uruursaday, oo dal fog ayuu u dhoofay, oo
halkaas ayuu hantidiisii ku khasaariyay, isaga oo si taxadar la'aan ah u khasaariyay. 14 Markuu
wax walba bixiyay abaar xun ayaa dhulkaas ka dhacday, wuxuu billaabay inuu gaajoodo.
15 Markaasuu ku biiray nin dadka dhulkaas ah oo shaqaale ayuu u noqday oo isna wuxuu u
diray beerihiisa si uu doofaarrada u raaco. 16 Deedna wuxuu ku hamiyay inuu buunshaha ay
doofaarradu cunayeen ka dhargo, cid siisana ma jirin. 17 Markuu isgartay ayuu yidhi, Intee in
leg ayay shaqaalaha aabbahay kiraystay cunto ku filan haystaan, aniguna halkanaan gaajo
ugu bakhtiyayaa! 18 Waa inaan kaco oon aabbahay u tego, oon ku idhaahdo Aabbow Jannada
iyo adigaba waan ku dembaabay[*p]. 19 Mana istaahilo mar dembe in wiilkaaga la iigu yeedho,
ee kuwa aad kiraysatay midkood oo kale iga dhig. 20 Oo intuu kacay ayuu aabbihii ku noqday,
laakiinse intuu soo socday aabbihii ayaa meel fog ka arkay, wuuna u naxariistay, oo intuu ku
soo orday ayuu laabta ku qaatay oo dhunkaday. 21 Marka wiilkii ayaa ku yidhi, Aabbow,
Jannada iyo adigaba waan ku dembaabay; mana istaahilo in mar dembe wiilkaaga laygu
yeedho. 22 Laakiin aabbihii ayaa adeegayaashiisii ku yidhi, Dhakhso u soo bixiya dharka ugu
fiican oo u xidha, fargashina gacanta u geliya, kabana cagaha u geliya. 23 Oo soo qabta dibi
shilis oo gowraca, waa inaynu cunno oo dabaal degnno, 24 Maxaa yeelay, wiilkayganu wuu
dhintay oo wuu soo noolaaday; oo wuu lumay, waana la helay. Markaasay billaabeen inay
dabaal dagaan. 25 Laakiinse wiilkiisii waynaa oo beerta jiray ayaa soo noqday oo markuu guriga
ku soo dhawaaday, wuxuu maqlay muusiq iyo ciyaar. 26 Markaasuu shaqaalaha midkood u
yeedhay oo waydiiyay War waa maxay waxaasi? 27 Markaasuu ku yidhi, Walaalkaa baa yimid,
aabbahaana dibi yar oo shilis ayuu u gowracay, waayo, nabad qab ayuu ku yimid. 28 Marka
wuu xanaaqay, oo inuu galo wuu diiday, markaasuu aabbihii u soo baxay oo baryay. 29 Oo
wuxuu aabbihii ugu jawaabay Intaas oo sannadood ayaan kuu shaqaynayay, oo weligay
amarkaaga ma jabinin, weligaana orgi yar oon saaxiibbaday kula farxo maadan i siinin,
30 Laakiin markuu wiilkaagan hantidaadii kuwa jidhkooda ka ganacsada ku baabi'iyay yimid,
dibi shilis ayaad u qashay! 31 Markaasuu ku yidhi, Wiilkaygiiyow, weligaa waad ila joogtaa oo
waxayga oo dhanna adigaa leh, 32 Marka waa inaynnu faraxno oo dabbaal degnno, waayo,
waalaalkaagani wuu dhintay oo wuu soo noolaaday; wuuna lumay, oo waa la helay.

### Tusaale Ku Saabsan Wakiil Aan Aamin Ahayn

**16** Haddana wuxuu xertiisii ku yidhi, Waxaa jiri jiray nin hodan ah oo wakiilkiisa lagu soo
dacweeyay inuu hantidiisa ku takrifalo. 2 Markaasuu u yeedhay oo ku yidhi, War waa maxay
waxan lagaa sheegayo? Iska soo xisaabi wakiilnimadaada, oo soo wareeji maxaa yeelay,
hadda ka dib wakiil ma ahaanaysid. 3 Marka wakiilkii ayaa is yidhi, Maxaan sameeyaa, waayo,
sayidkaygu wakaaladda wuu iga qaadaya? Awood aan wax ku qotana ma lihi, inaan
dawarsadana waan ka xishoonayaa. 4 Waxaan samayn lahaa waan gartay waana in marka
wakaaladda layga qaado dadku guryahooda iigu soo dhaweeyaan. 5 Markaasuu kuwii uu
sayidkiisu daynta ku lahaa oo dhan isugu yeedhay. Kii ugu horreeyay ayuu ku yidhi,
Sayidkaygu immisuu kugu leeyahay? 6 Wuxuu yidhi, Boqol littir oo saliid ah. Markaasuu ku
yidhi, Warqaddii lagu qoray soo qaad, oo deg deg u soo fadhiiso oo, Konton qor. 7 Mid kalena
wuxuu ku yidhi, Immisuu kugu leeyahay? Isaguna wuxuu yidhi, Boqol kiilo oo sarreen ah.
Markaasuu ku yidhi, Warqaddii lagugu qoray soo qaad, oo, Siddeetan qor. 8 Sayidkiisii ayaa
wakiilkii khaa'inka ahaa ku ammaanay caqli badnidiisa, waayo, wiilasha dunida ayaa
qarnigooda ka caqli badan wiilasha iftiinkaa. 9 Oo waxaan idinku leeyahay, Saaxiibbo ku
samaysta maalka xaqdarrida si markuu dhammaado ay idiinku soo dhaweeyaan deegaannada

daa'imka ah. [10] Qofkii wax yar aamin ku ahaada, wax badan ayuu aamin ku ahaadaa oo qofkii wax yar khayaana waxa badan buu khayaanaa. [11] Haddaydaan maalka xaqdarrida aamin ku ahaanin, yaa mid xaq ah idinku aaminaya? [12] Haddaydaan waxa qofka kale leeyahay aamin ku ahayn, yaa wixiinna idin siinaya? [13] Adeege laba sayid uma wada adeegi karo, waayo, mid buu nacaa, ka kalena wuu jeclaadaa, ama mid buu daacad u noqdaa, ka kalena wuu quudhsadaa. uma wada adeegi kartaan Eebbe iyo maal. [14] Farrisiintii lacagta jeclaa ayaa waxaas oo dhan maqlay, wayna ku qosleen. [15] Markaasuu wuxuu ku yidhi, Idinku waxaad tihiin kuwa dadka hortooda isku muujiya inaad xaq tihiin, laakiinse Eebbe wuu ogyahay qalbiyadiinna, waayo, wixii dadka dhexdooda lagu sarraysiiyo, Eebbe hortiisa waa ku karaahiyo.

### Shareecada Iyo Boqortooyada Eebbe

[16] Sharciga iyo nebiyada ayaa jiray ilaa iyo xilligii Nebi Yaxye; wakhtigaas laga soo billaabo Injiilka boqortooyada Eebbe ayaa lagu wacdiyay, oo mid walbaba wuxuu isku dayay inuu xoog ku galo. [17] Laakiin inay cirka iyo dhulkuba dhammaadaan ayaa ka fudud inay shareecada dhibic keliya ka lunto.

### Furriinka Iyo Dib U Guursashada

[18] Mid kasta oo xaaskiisa fura oo mid kale guursadaa wuu sinaystaa, oo kii garoob ninkeedii soo furay guursadaa wuu sinaystaa.

### Ninkii Hodanka Ahaa Iyo Laasaros

[19] Waxaa jiri jiray nin hodan ah oo dhar xariir jilicsan ah xidhan jiray, marka maalin walba casuumad ayuu dhigi jiray. [20] Marka nin miskiin ah oo Laasaros la odhan jiray oo jidhkiisa dheecaanku ka da'yo ayaa albaabkiisa la hor dhigi jiray, [21] Kaasoo ku hammiyi jiray inuu jajabka miiska ninka hodanka ah ka dhaca la siiyo. Ayduna intay yimaaddaan ayay boogihiisa leefleefi jireen. [22] Waxaa dhacay inuu miskiinkii dhintay, oy malaa'iguhu laabtii Ibraahim u qaadeen. Ninkii hodanka ahaana sidoo kale wuu dhintay, waana la aasay. [23] Marka isaga oo cadaabka ku jira oo aad u chiban ayuu indhihiisa kor u qaaday; oo wuxuu meel fog ka arkay Ibraahim, iyo Laasaros oo garab jooga. [24] Markaasuu qayliyay oo yidhi, Aabbe Ibraahimow, ii naxariiso, oo Laasaros ii soo dir si intuu fartiisa caaraddeeda biyo ugu soo qooyo uu carrabkayga ugu qabowjiyo, waayo, anigu ololkan ayaan ku cadaabanahay. [25] Laakiin Ibraahim wuxuu ku yidhi, Wiilyahow, xusuuso inaad intaad noolayd soo raaxaysatay, si taas la mid ahna Laasaros noloshuu ku soo silcay, laakiin hadda isaga ayaa halkan ku raaxaysanaya, adiguna waad cadaabantahay. [26] Taa ka sakow annaga iyo idinka waxaa inoo dhexeeya bohol aad u wayn, si aynaan annaguna idiinku soo tallaabin, idinkuna aydaan noogu soo tallaabin. [27] Markaasuu wuxuu ku yidhi, Haddaba aabbow, waxaan kaa baryayaa inaad gurigii aabbahay isaga u dirto, [28] Waayo, shan walaalo ah ayaan leeyahay, oo waa inuu u sheego si ayna iyaguna meeshan cadaabka leh u imanin. [29] Laakiin Ibraahim wuxuu ku yidhi, Muuse iyo nebiyada ayaa la joogee ha maqleen. [30] Markaasuu wuxuu ku yidhi, Maya, Aabbe Ibraahimow, laakiin hadduu qof kuwii dhintay ah u tago, way toobadkeenayaan. [31] Deedna wuxuu ku yidhi, Hadday Muuse iyo nebiyada maqli wayaan, kuma qancayaan hadduu qof kuwii dhintay ka soo sarakaco.

## Dadka Oo La Dambaajiyo

**17** Marka wuxuu xertiisii ku yidhi, Waa la hubaa inay wax dadka dembaajiya imanayaan,
laakiin balaayaa ku dhacday qofkii sabab u noqda. 2 Qofkii kuwan yar yar midkood dembi ku
rida, waxaa u roon in dhagax shiid qoorta loo galiyo oo badda lagu tuuro. 3 Is ilaaliya! Hadduu
walaalkaa dembaabo canaano; hadduu toobadkeeno, cafi. 4 Hadduu maalintii toddoba jeer
kugu gafo oo toddoba jeer kuu yimaado isaga oo leh Waan toobadkeenay ee i cafi waa inaad
cafido.

## Iimaanka Noo Siyaadi

5 Markaasay rasuulladii waxay Rabbiga ku yidhaahdeen Iimaanka noo siyaadi. 6 Rabbiguna
wuxuu ku yidhi, Haddaad rumaysad Iniin kherdal le'eg leedihiin, waxaad geedkan mulberryga
ah ku odhan lahaydeen Ruq, oo badda ku beeran, wuuna idin addeeci lahaa. 7 Laakiin kiinnee
leh adeege beerta fala ama adhijire ah, oo markuu beerta ka yimaado ku odhan doona
Fadhiiso oo cuntee? 8 Miyuuna ku odhanaynin, Guntiga dhuujiso oo casho ii diyaari oo intaan
wax cunayo oon cabbayo ii adeeg ka dibna wax cun oo cab? 9 Marka miyuu adeegahaas ugu
mahadnaqayaa inuu waajibkii lagu amray sameeyo? 10 Sidaas oo kale idinkuna markaad
waajibkii laydinku amray oo dhan samaysaan waxaad tidhaahdaan Adeegayaal aan faa'iido
lahayn ayaannu nahay; wixii waajibka nagu ahaa inaannu samayno unbaannu samaynay.

## Ciise Toban Nin Oo Baras Qaba Ayuu Bogsiiyay

11 Waxaa dhacay markay Quddus ku sii socdeen inay Samaariya iyo Galili kala dhex maraan.
12 Marka tuulo ayuu galay, oo waxaa la kulmay toban nin oo baras leh oo meel fog ka istaagay.
13 Markaasay codka kor u qaadeen iyaga oo leh Ciisow, Macallinow, noo naxariiso. 14 Markuu
arkay, wuxuu ku yidhi, Taga oo wadaaddada istusa; marka intay sii socdeen ayay daahireen.
15 Deedna mid ka mid ah ayaa markuu arkay inuu bogsaday, soo noqday isaga oo cod dheer
Eebbe ku ammaanaya. 16 Oo intuu wajiga u dhacay oo Ciise lugihiisa ku dhacay ayuu u
mahadnaqay. Wuxuuna ahaa reer Samaariya. 17 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Tobankii
miyaan la daahirinin? awaye sagaalkii kale? 18 Wax soo noqda oo Eebbe ammaana ma jiro,
ajinabigan mooyee? 19 Markaasuu ku yidhi, Rumaysadkaaga ku bogsiiyay ee kac oo iska tag.

## Imaatinka Boqortooyada

20 Markay farrisiintu waydiiyeen oo ku yidhaahdeen Goormay boqortooyada Eebbe
imanaysaa? Wuxuu ugu jawaabay Boqortooyada Eebbe filasho kuma imanayso. 21 Lamana
odhan doono, Waa tan! ama, Wataas! waayo, bal eega, boqortooyada Eebbe way idinku dhex
jirtaa. 22 Markaasuu xertiisa ku yidhi, Maalmo ayaa iman doona aad jeclaan lahaydeen inaad
aragtaan maalmaha Wiilka Aadanaha middood, mana arki doontaan. 23 Waxaana laydinku
odhan doonaa, halkan eega! halkaas eegga! Haw bixina, hana raacina. 24 Waayo, sida hillaacu
markuu jahada cirka ka hillaaco uu jahada kale ee cirka u ifiyo, oo kale ayay maalinta Wiilka
Aadanuhu ahaan doontaa. 25 Laakiin waa inuu marka hore aad u xanuunsado oo qarniganu
isaga diido. 26 Oo sidii wakhtigii Nuux oo kale ayay maalmaha Wiilka Aadanuhu noqon
doonaan. 27 Iyagu waxbay iska cunnayeen oo iska cabbayeen, wayna guursanayeen oy isu
guurinayeen, ilaa iyo maalintii uu Nuux doonnida galay, markaasuu daadkii yimid oo wada
baabbi'iyay. 28 Sidaas oo kale ayay weliba ahayd maalmihii Luud. iyagu waxbay iska cunayeen
oy iska cabbayeen, oo waxbay iibsanayeen oy iibinayeen, oo waxbay beeranayeen, oo waxbay

dhisanayeen. 29 Laakiin maalintii uu Luud Sodom ka baxay dab iyo baaruud ayaa cirka kaga
soo da’ay oo wada baabbi’iyay. 30 Sidaas oo kale ayay noqon doontaa maalinta Wiilka
Aadanuhu soo muuqan doono. 31 Maalintaas qofkii guriga dushiisa fuushan, oo alaabtiisu
guriga ka taallo yuusan u soo degin si uu u qaato; qofkii beerta joogaana sidaas oo kale yuuna
dib u noqonin. 32 Xusuusta xaaskii Luud! 33 Qofkii doona inuu naftiisa badbaadiyo wuu waayi
doonaa, laakiin kii waaya wuu badbaadin doona. 34 Waxaan idinku leeyahay, Habeenkaas laba
qof oo sariir wada jooga ayaa midna la qaadi doonaa, ka kalena laga tegi doonaa. 35 Oo laba
naagood oo wax isla shiidaya, ayaa mid la qaadi doonaa, ta kalena waa laga tegi doonaa.
36 Oo laba nin oo beerta ku jira ayaa, midna la qaadi doonaa, ka kalena laga tegi doonaa.
37 Markaasay ku yidhaahdeen Xaggee, Sayidow? Wuxuuna ku yidhi, Meeshuu bakhtigu yaallo,
halkaas ayay gorgorradu isugu uruuraan.

### Tusaale Carmali Iyo Garsoore Ku Saabsan

**18** Marka tusaale ayuu iyaga kula hadlay si uu ugu muujiyo iyaga inay lagama maarmaan
tahay inay mar walba tukadaan oyna marna ka daalin, isaga oo leh, 2 Waxaa magaalo joogay
garsoore aan Eebbe ka cabsanaynin, oon ninnna ka haybaysanaynin. 3 Waxaana
magaaladaas joogtay carmali, taas oo marar badan u iman jirtay iyada oo ku leh ‘Kuwii i
dulmiyay iiga garsoor.’ 4 Muddo ayuu ka meermeerayay, ugu dembaystii wuxuu isku yidhi, ‘In
kastoo aanan Eebbe ka cabsanaynin oo aanan ninna ka haybaysanaynin, 5 Haddana dhibka
carmalidani igu hayso aawadeed, waan inaan u garsooro, si ayna mar kasta iigu soo
noqnoqonin oyna ii rabshin.’ 6 Marka Rabbiga ayaa yidhi, Maqla Garsoorihii xaqdarrida ahaa
wuxuu yidhi. 7 Haddaba miyuuna Eebbe kuwa uu doortay ee habeen iyo maalinba u qaylyaya u
xaq sooraynin? miyuu u xaq sooriddooda la daahayaa? 8 Waxaan idinku leeyahay, Deg deg
ayuu ugu xaq soori doonaa; hasa yeeshee markuu Wiilka Aadanuhu yimaado, dhulka
rumaysad ma ka heli doonaa?

### Tusaale Ku Saabsan Farriisigii Iyo Canshuur Qaadihii

9 Marka tusaalahan ayuu kula hadlay kuwo isbiday inay xaq yihiin dadka kale quudhsada.
10 Laba nin ayaa tegay si ay macbudka ugu tukadaan; midkood Farriisi ayuu ahaa, ka kalena
canshuur qaade. 11 Farriisigii intuu istaagay ayuu sidan u tukaday Eebbeow, waxaan kuugu
mahadnaqayaa inaanan sida kuwa dulmiga gala iyo kuwa xaqdarrida ah iyo kuwa jidhkooda ka
ganacsada iyo xataa sida canshuur qaadahan oo kale ahayn. 12 Toddobaadkiiba laba jeer
ayaan soomaa, hantidayda oo dhanna toban meelood meel ayaan ka bixiyaa. 13 Laakiin
canshuur qaadihii meel fog ayuu ka istaagay, mana uusan awoodin inuu indhihiisa kor u
qaado, laakiinse intuu laabtiisa garaacay ayuu yidhi, Eebbeow dembiilaan ahaye ii naxariiso!
14 Waxaan idinku leeyahay, kan ayaa labadooda gurigiisii tegay isaga oo loo dembi dhaafay;
waayo, mid kasta oo isa sarraysiiya waa la hoosaysiiyaa, kii is-hoosaysiiyana waa la
sarraysiiyaa.

### Ciise Carruur Yar Yar Ayuu U Duceeyay

15 Marka carruur yar yar ayay u keeneen si uu u taabto, laakiin markay xertu arkeen, way
canaanteenn. 16 Balse Ciise ayaa u yeedhay oo ku yidhi, War daaya carruurtu ha ii yimaaddeen

oo ha u diidina, waayo, boqortooyada Eebbe kuwan oo kale ayaa leh. [17] Runtii waxaan idinku
leeyahay, Ku alla kii aan boqortooyada Eebbe u aqbalin sida ilma yar oo kale, ma geli doono.

### Hoggaamiye Hodan Ah

[18] Marka nin Madax ah ayaa waydiiyay isaga Macallinkii wanaagsanaayow, maxaan
sameeyaa si aan nolosha weligeed ah u dhaxlo? [19] Markaasuu Ciise ku yidhi, Maxaad
wanaagsanow ii leedahay? Mid wanaagsanu ma jiro Eebbe mooyee. [20] Sharciga waad
taqaanaa; Waa inaadan sinaysanin, oo Waa inaadan dhagar galin, oo Waa inaadan waxba
xadin, oo Waa inaadan marag been ah furin, oo waa inaad Aabbahaa iyo hooyadaa
maamuusto. [21] Markaasuu yidhi, Ilaa iyo yaraantaydii ayaan sharciyadan ilaalin jiray. [22] Ciise
markuu hadalkiisa maqlay wuxuu ku yidhi, Hal qodob ayaa kuu dhiman: Hantidaada oo dhan
xaraash, oo masaakiinta u qaybi, markaas abaalgud wayn ayaad jannada ku lahaan doontaa
oo deedna kaalay oo i soo raac. [23] Laakiinse markuu hadalkaas maqlay aad buu u
murugooday, waayo, hodan buu ahaa. [24] Ciise markuu arkay, wuxuu yidhi, Kuwa hodanka ah
way ku adag tahay inay boqortooyada Eebbe galaan, [25] Waayo, nin hodan ah inuu
boqortooyada Eebbe galo waxaa ka fudud inuu awr irbad daloolkeeda ka duso. [26] Marka kuwii
maqlay waxay ku yidhaahdeen Haddaba yaa badbaadi kara? [27] Deedna wuxuu ku yidhi,
Waxaan dadka suurta gal u ahayn, Eebbe way u suurta galaa. [28] Marka Butros ayaa ku yidhi,
Eeg, wax wal waannu ka tagnay oo waanu ku raacnay. [29] Wuxuuna ku yidhi, Runtii waxaan
idinku leeyahay. Ma jiro qof boqortooyada Eebbe aawadeed uga tegay guri, ama xaas, ama
walaalo, ama waalid, ama carruur, [30] Oo aan hadda laban laab helaynin, aakhirana nolosha
weligeed ah.

### Ciise Mar Saddexaad Ayuu Dhimashadiisa Sii Sheegay

[31] Marka laba iyo tobankii ayuu kaxaystay oo wuxuu ku yidhi, Quddus ayaynu ku soconnaa, oo
wax walba oy nebiyadu Wiilka Aadanaha ka qoreen waa inay dhacaan. [32] Waayo, isaga waxaa
loo dhiibi doonaa ajinabiga waana lagu jeesjeesi doonaa, oo la caayi doonaa, oo candhuuf
ayaa lagu tufi doonaa, [33] Oo intay jidh dilaan ayay qudha ka jari doonaan, maalinta
saddexaadna wuu soo sarakici doonaa. [34] Laakiin waxaas oo dhan mayna fahmin, hadalkaas
fahankiisana waa laga daboolay, oo macnihiisa mayna fahmin.

### Indhoolihii Dawarsan Jiray Waa La Bogsiiyay

[35] Marka waxaa dhacday markuu Areerxo ku soo dhawaaday nin indha la’ oo dawarsanaya
ayaa jidka ag fadhiyay, [36] Oo markuu maqlay dad faraha baban oo ag maraya ayuu waydiiyay
waxa jira. [37] Waxayna u sheegeen in Ciisihii reer Naasared ag marayo. [38] Markaasuu kor u
dhawaaqay isaga oo leh Ciise, ina Daa’uudow, ii naxariiso. [39] Marka kuwii xagga hore socday
ayaa canaantay si uu u aamuso, laakiinse aad buu u sii qayliyay, Ina Daa’uudow, ii naxariiso.
[40] Deedna Ciise intuu istaagay ayuu amray in loo keeno, oo markuu u soo dhawaaday ayuu
waydiiyay, oo ku yidhi, [41] Maxaad doonaysaa inaan kuu sameeyo? Wuxuu ku yidhi, Sayidow,
inaan aragaygii helo. [42] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Rumaysadkaaga ku bogsiiyay ee Wax arag.
[43] Isla markiiba wax buu arkay, wuuna raacay isaga oo Eebbe ammaanaya. Dadkii oo dhanna
markay arkeen, Eebbe ayay ammaaneen.

## Ciise Iyo Sakhayos

**19** Marka Ciise wuxuu galay oo dhex maray Areexo. [2] Oo bal eeg, waxaa halkaa joogay nin la
odhan jiray Sakhayos oo madaxda canshuur qaadayaasha ka mid ahaa oo hodan ahaa.
[3] Wuxuuna doonayay inuu Ciise kuu yahay arko, laakiinse way u suurta gali wayday dadkii
badnaa aawadood, waayo, nin gaaban buu ahaa. [4] Markaasuu intuu Horay u orday wuxuu
fuulay geed sukumoor ah si uu isaga u arko, maadaama oo uu jidkaas ku soo fool lahaa.
[5] Ciise markuu meeshii yimid, ayuu kor u eegay, oo wuxuu ku yidhi, Sakhayosow, deg deg u
soo dego, waayo, maanta waa inaan gurigaaga joogo. [6] Markaasuu deg deg u soo degay, oo
farxad ayuu ku soo dhaweeyay. [7] Deedna markay arkeen, kulligood way wada gunuunaceen,
iyaga oo leh Nin dembiile ah ayuu martiyayaa. [8] Sakhayos intuu istaagay ayuu Rabbiga ku
yidhi, Bal eeg, Sayidow, maalkayga kala badh ayaan masaakiinta siinayaa, oo haddaan qof
wax ka dhacay afar laab, ayaan u celinayaa. [9] Ciise ayaa ku yidhi, Maanta ayay badbaadadu
gurigan timid, waayo, isaguba waa Ina Ibraahim. [10] Maxaa yeelay, Wiilka Aadanuhu wuxuu u
yimid inuu kii lumay doono oo badbaadiyo.

## Tusaalihii Wakaalladda Ganacsiga

[11] Markay hadalkaas dhagaysanayeen, tusaale ayuu ku daray, waayo, Quddus ayuu ku soo
dhawaa, waxayna u malaynayeen inay boqortooyada Eebbe isla markiiba soo muuqanayso.
[12] Sidaa darteed wuxuu yidhi, Amiir sharaf leh ayaa wadan fog u safray si uu xukun u helo, ka
dibna u soo noqdo. [13] Markaasuu tobankiisii adeege isugu yeedhay, oo wuxuu u dhiibay toban
mina[91*] oo wuxuu ku yidhi, Ku ganacsada ilaa oon ka soo noqdo. [14] Laakiin dadka wadankiisa
ayaa necbaaa, oo ergo ayay ka daba direen iyaga oo leh Ma doonayno ninkaasu inuu boqor
noo ahaado. [15] Marka wuu soo noqday isaga oo boqortooyadii helay, wuxuuna amar ku bixiyay
in adeegayaashii uu lacagtiisa u dhiibay loogu yeedho si uu u ogaado mid kasta intuu ka
faa'iiday ganacsigiisii. [16] Kii ugu horreeyay ayaa u yimid oo ku yidhi, Sayidow, tobankaagii
minaas toban kale ayay faa'iideen. [17] Markaasuu ku yidhi, Shaqo wanaagsan, adeegayahow
fiican! Wax yar baad aamin ku ahayde toban magaalo madax ka noqo. [18] Marka kii labaad ayaa
yimid isaga oo leh Sayidow, minaaskaagii shan kale ayay faa'iideen. [19] Kaana wuxuu ku yidhi,
Adiguna shan magaalo madax ka noqo. [20] Kii kalena wuu yimid isaga oo leh Sayidow, waakan
minaaskaagii, oo intaan maro ku guntay ayaan meel dhigay. [21] Waayo, waan kaa cabsaday,
maxaa yeelay, nin qallafsan baad tahay; oo wax aadan kaydsan ayaad qaadataa wax aadan
beeranna waad goosataa. [22] Wuxuu ku yidhi, Afkaaga ayaan kugu xukumayaa, adeegayahow
sharka leh. Waad ogayd inaan nin qallafsan ahay oo wax aanan kaydsan qaato, wax aanan
beeranna goosto. [23] Marka maxaad lacagtayda baanka u dhigi wayday, si, markaan imaaddo,
aan lacagtaydii iyo faa'iidadeeda u qaato? [24] Markaasuu kuwii ag taagnaa ku yidhi, minaga ka
qaada oo kii tobanka minas haystay u dhiiba. [25] Waxay ku yidhaahdeen Sayidow, toban minas
buu hayaa. [26] Waxaan idinku leeyahay, mid kasta oo wax haysta waa la siin doonaa, kii aan
waxba haysanse xataa wuxuu haysto ayaa laga qaadi doonaa. [27] Laakiin cadowgayga aan
doonaynin inaan boqor u noqdo halkan keena oo hortayda ku laaya.

91 Toban mina oo lacagtii Laatiiniga ee wagaas ah.

## Ciise Guul Ayuu Quddus Ku Galay

28 Markuu sidaa yidhi, ayuu horay u socday oo Quddus ayuu tegay. 29 Deedna markuu
Beytfaage iyo Beytaniya ku dhawaaday agagaarka buurtii Saytuun la odhan jiray ayuu laba xer
ah diray, 30 Isaga oo leh Tuulada idinka horraysa taga oo markaad gashaan waxaad ka heli
doontaan qayl xidhan oo aan ninna weligii fuulin; soo fura oo keena. 31 Haddii laydin waydiiyo
oo laydinku yidhaahdo Maxaad u furaysaan? Waxaad ku tidhaahdaan, Sayidkaa u baahan.
32 Marka kuwii la diray way tageen oo waxay heleen siduu u sheegay.
33 Markay qaylka furayeen ayay kuwii lahaa ku yidhaahdeen Maxaad qaylka u furaysaan?
34 Waxay ku yidhaahdeen Sayidkaa u baahan. 35 Marka Ciise ayay u keeneen, oo dharkoodii
ayay qaylkii dusha ka saareen, Ciisana wuu fuulay. 36 Marka intuu socday, dharkoodii ayay
waddada ku gogleen. 37 Deedna markuu ku soo dhawaaday Buurta Saytuun, xertii oo dhan
ayaa billaabay inay farxaan, oy cod dheer Eebbe ku ammaanaan mucjisooyinka xoogga leh oy
arkeen aawadood, 38 Iyaga oo leh, Waxaa barakaysan Boqorka Rabbiga magiciisa ku imanaya.
samada Nabadi ha ka jirto, meelaha ugu sarreeyana ammaani ha ka jirto. 39 Farrisiinta
qaarkood oo dadkii faraha badnaa ku dhex jiray ayaa ku yidhi, Macallinow, xertaada canaano.
40 Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Waxaan idinku leeyahay, Kuwani hadday aamusaan,
dhagaxyada ayaa qaylin doona.

## Ciise Quddus Ayuu U Ooyay

41 Dabadeedna markuu soo dhawaaday, oo uu magaaladii arkay wuu ooyay, 42 Isaga oo leh
Haddaad maalmahan garan lahayd waxa nabad kuu keenaya! laakiinse hadda waa lagaa
indha saabay. 43 Waayo, waxaa kuu iman doona maalmo ay cadowgaagu isku kaa qadaami
doonaan oy hareerahaaga dhufaysyo ka qodan doonaan, oy dhan walba gaadhka kaa qaban
doonaan. 44 Dhulka ayana kula simi doonaan, adiga iyo carruurtaada kugu jirtaba, oo dhagax
dhagax saaran kuguma dayn doonaan, waayo, waad garan wayday wakhtigii furashadaada.

## Ciise Macbudka Ayuu Nadiifiyay

45 Marka macbudkii ayuu galay oo wuxuu ka eryay kuwii wax ku ganacsanayay, 46 Isaga oo
ku leh Way qorantahay: Gurigaygu waa guri salaadeed, laakiinse idinku waxaad ka dhigteen
godkii tuugada.[92]* 47 Marka maalin kasta macbudka ayuu wax ku bari jiray; balse wadaaddada
sare iyo culimada iyo madaxda dhaqankuba waxay doonayeen inay dilaan, 48 Laakiin way u
suurto gali wayday, waayo, dadka oo dhan ayaa aad u dhegaysanayay.

## Ciise Amarkiisa Ayaa Wax Laga Waydiiyay

**20** Marka maalmahaas midood Ciise macbudka dhexdiisa ayuu dadka wax ku barayay oo
Injiilka ku wacdiyayay, oo waxaa u yimid wadaaddada sare iyo culimada iyo odayaasha
dhaqanka 2 Oo waxay ku yidhaahdeen Noo sheeg Amarkeed waxan ku samaysaa? Oo waa
ayo cidda amarkan ku siisay? 3 Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Aniguna hal baan idin
waydiinayaaye ii sheega. 4 Biyagalintii Nebi Yaxye ma xagga jannaday ka timid mise xagga
dadkaa[93]*? 5 Markaasay isla hadleen iyaga oo leh Haddaynu nidhaahno, Xagga jannada,
wuxuu odhan doonaa, Maxaad u rumayn waydeen? 6 Laakiinse haddaynu nidhaahno, Xagga

92 Ishacyaah 56:7 iyo Yeremyaah 7:11

93 Farriintii Nebi Yaxye ma Eebbe ayay ka timid mise been abuur uu jeebkiisa ka keenay bay ahayd?

dadka, dadka oo dhan ayaa markaas ina dhagaxyayn, waayo, waxay aaminsanyihiin Yaxye
inuu nebi yahay. 7 Marka waxay ugu jawaabeen inayna garanaynin meeshuu ka yimid.
8 Ciisena wuxuu ku yidhi, Aniguna idiin sheegi maayo amarka aan waxan ku sameeyo.

## Tusaale Ku Saabsan Beerta Canabka Ah

9 Marka wuxuu billaabay inuu tusaalahan dadka kula hadlo. Nin ayaa beer canab ah beertay,
oo intuu niman beeralay ah u kiraystay ayuu wadan kale u dhoofay oo in badan ku maqnaa.
10 Markii xilligii la gaadhay ayuu adeege beeralaydii u soo diray si ay isaga midhihii beerta u
siiyaan, laakiin beeralaydii ayaa intay garaaceen isaga oo fara madhan diray. 11 Haddana
adeege kale ayuu diray, isna way garaaceen oo intay si xun ula dhaqmeen ayay isaga oo fara
madhan direen. 12 Haddana mid saddexaad ayuu diray, isna intay dhaawaceen ayay dibadda u
eryeen. 13 Marka mulkiilihii beerta ayaa yidhi, Maxaan sameeyaa? Waxaan dirayaa wiilkayga
aan jeclahay, mindhaa way xurmayn doonaan. 14 Laakiinse beeralaydii markay arkeen, waxay
isku yidhaahdeen Kanu waa kii dhaxalka lahaa; kaalaya aynu intaynu dilno dhaxalka
qaadanee. 15 Markaasay intay beertii canabka dibadda uga saareen dileen. Marka mulkiilaha
beerta canabka ahu muxuu iyaga ku samayn doonaa? 16 Intuu yimaado ayuu beeralaydaas
layn doonaa oo kuwo kale ayuu beerta canabka ah u dhiibi doonaa. Markay taas maqleen
waxay yidhaahdeen Eebbe sidaas kama dhigo. 17 Markaasuu intuu eegay ku yidhi, Haddaba
maxay tahay aayaddan Dhagaxii ay kuwa wax dhisa diideen ayaa tiir dhexaadka noqday?
18 Mid kasta oo dhagaxaas ku dhaca wuu jejebi doonaa oo kii uu ku dhoco, wuu burburin
doonaa.[94*]

## In Canshuurta Kaysar La Siiyo

19 Culimadii iyo wadaaddadii sare ayaa inay isla saacaddaas isaga qabtaan damcay, laakiinse
dadka ayay ka cabsadeen; waayo, waxay fahmeen inuu tusaalahaas iyaga ula jeeday.
20 Marka si ay ugu shirqoolaaan hadalkiisa oy maamulka iyo maxakamada ugu dhiibaan waxay
u soo direen jaajuusiin isaga dhigaya inay dad xaq ah yihiin. 21 Markaasay waydiiyeen oo ku
yidhaahdeen Macallinow, waannu ognahay inaad si xaq ah u hadasho ood wax u barto, oodan
ninna u eexanin, balse aad si xaq ah jidka Eebbe wax ugu barto. 22 Marka ma xalaalbaa
inaannu canshuur Kaysar siinno mise ma aha? 23 Laakiin khiyaanadooda ayuu gartay oo
wuxuu ku yidhi, 24 Maxaad ii jirrabaysaan? Dinaar i tusa. Yaa leh sawirkan iyo fartan? Waxay
yidhaahdeen, Kaysar baa leh. 25 Markaasuu ku yidhi, Haddaba Kaysar siiya wuxuu Kaysar
leeyahay, Eebbena siiya wuxuu Eebbe leeyahay. 26 Marka way ku qaban kari waayeen dadka
hortiisa, wayna ka yaabeen jawaabtiisa, oo way iska aamuseen.

## Su'aal Qiyaamada Ku Saabasan

27 Marka waxaa u yimid kuwo Sadukiin ah, kuwaasoo jiritaanka qiyaamada dafirsanaa. 28 Oo
waxay waydiiyeen oo ku yidhaahdeen Macallinow, Muuse wuxuu noo qoray, hadduu nin
walaalkii dhinto oo uu xaas aan carruur lahayn, ka tego waa inuu walaalkii xaaskiisa dumaalo
oo uu walaalkii farcan u reebo. 29 Marka waxaa jiray toddoba walaalo ah. Kii ugu horreeyay
ayaa xaas guursaday, oo isaga oon ubad ka tegin ayuu dhintay. 30 Kii labaad ayaa xaaskii

94 Sabuur 118:22

dumaalay, wuuna geeriyooday isaga oon carruur ka tegin, 31 Kii saddexaad ayaa sidoo kale
dumaalay. ilaa iyo toddobadiiba oo iyaga oon wax ubad ah ka tegin ayay wada dhinteen.
32 Ugu dembaystii naagtiina way dhimatay. 33 Sidaa darteed qiyaamada kee ayay xaas u noqon
doontaa? Waayo, toddobaduba way wada guursadeen iyada. 34 Ciise wuxuu ku yidhi, Wiilasha
dunidanu way guursadaan oo waa loo guuriyaa, 35 Laakiinse kuwa nolosha waligeed ah iyo
sarakicidda istaahilaa ma guursadaan, loomana guuriyo, 36 Waayo, mar dembe ma dhiman
doonaan, maxaa yeelay, waxay noqon doonaan sida malaa'igaha, waana wiilashii Eebbe ee
ahaa wiilashii sarakicidda. 37 Laakiin in qiyaamada la isa soo sarakicinayo Muuse ayaa sii
tilmaamay markuu geedka agtiisa Rabbiga ugu yeedhay Eebbaha Ibraahim iyo Eebbaha
Isxaaq iyo Eebbaha Yacquub. 38 Maxaa yeelay isagu ma aha Eebbaha kuwa dhintay, laakiin
waa Eebbaha kuwa nool, waayo, dhammaan isagay u nool yihiin. 39 Culimada qaarkood ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Macallinow, si wanaagsan baad u hadashay. 40 Mar dembena mayna ku
dhicin inay wax waydiiyaan.

## Ciise Iyo Daa'uud

41 Wuxuu iyaga ku yidhi, Maxaa loo yidhaahdaan: Masiixu waa ina Daa'uud? 42 Daa'uud laftiisa
ayaa kitaabka Sabuurrada ku leh Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda fadhiiso,
43 Ilaa oon cadaawayaashaa cagahaaga hoostooda gelinayo. 44 Marka hadduu Daa'uud Rabbi
ugu yeedhay, siduu wiilkiisa ku yahay?

## Ciise Wuxuu Canbaareeyay Culimada

45 Markaasuu dadka oo dhan oo maqlahaya, xertiisii ku yidhi, 46 Iska ilaaliya culimada, kuwa
jecel inay soo xidhaan khamiisyada dhaadheer iyo salaanta suuqyada iyo kuraasida hore ee
sunagogyada iyo safafka hore ee casuumadaha, 47 Kuwa guryaha carmallada aan ka
dhammaanin, ee salaadda dheereeya. Kuwaasi xisaab aad u daran ayay heli doonaan.

## Sadaqaddii Carmalka

**21** Marka Ciise wuxuu eegay oo arkay kuwii hodanka ah oo sadaqadoodii khasnadda ku
ridaya. 2 Sidoo kale Wuxuu arkay carmali miskiin ah oo laba qadaaddiic oo lacag ah halkaas ku
ridaysa. 3 Markaasuu yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Carmalidaas miskiinta ahu waxay
ku ridday in ka badan waxay dhammaan ku rideen. 4 Waayo, kuwaasu dhammaantood
hantidoodii badnayd ayay sadaqada ka bixiyeen, laakiinse iyada oo miskiin ah ayay biilkeedii
oo dhan ku ridday.

## Ciise Wuxuu Sii Sheegay Burburka Macbudka

5 Marka qaar ayaa macbudka sida loo dhisay oo dhagaxaan qaali ah iyo waxyaabo qurux
badan loogu dhisay ka sheekeeyay, markaasuu ku yidhi, 6 Waxaa iman doonta maalmo
dhagax dhagax loo kala tuuri doono oo la burburin doono. 7 Markaasay waydiiyeen oo ku
yidhaahdeen Macallinow, goormay waxaasu dhici doonaan oo maxaa calaamad u ah markay
waxaasu soo dhawyihiin? 8 Deedna wuxuu yidhi, Iska ilaaliya yaan laydin khiyaanin waayo,
kuwo badan ayaa magacayga ku iman doona oo odhan doona Anaa Masiixii ah; Wakhtigiina

wuu soo dhawaaday. Ha raacina kuwaas. 9 Oo markaad dagaallo iyo qulqulatooyin maqashaan
ha cabsanina, waayo, marka hore waa inay waxaasu dhacaan, laakiin dhammaadku waa wali.
10 Markaasuu ku yidhi, Umadba ummad bay ku kici doontaa, boqortooyana boqortooyo. 11 Oo
waxaa meelo kala duwan ka dhici doona dhulgariiryo iyo abaaro iyo cudurro, oo waxaa cirka
laga arki doonaa waxyaalo cabsi leh iyo calaamooyin waawayn. 12 Laakiin intayna waxaasu
dhicin ka hor gacantay idinku dhigi doonaan oo way idin ciqaabi doonaan oo waxay idiin dhiibi
doonaan sunagogyada iyo jeelasha oo waxaa magacayga aawadii laydiin hor gayn doonaa
boqorro iyo hoggaamiyayaal. 13 Waxayna idiin noqon doonta fursad aad ku marag furtaan.
14 Sidaa darteed niyadda ku haya inaydaan horay uga sii fikirin waxaad ku jawaabi doontaan.
15 Waayo, waxaan idin siin doonaa af tahanimo iyo xigmad ayna kuwa idinka soo horjeeda oo
dhan ka adkaan karin ama burin karin. 16 Oo waxaa idin shorqooli doona waalidkiinna iyo
walaalahiinna iyo qaraabadiinna iyo saaxiibbadiinna oo qaarkiin waa la dili doonaa. 17 Dadka oo
dhanna magacayga aawadii way idin necbaan doona. 18 Laakiinse tin kaliya madaxiinna kama
lumi doono. 19 Dulqaad ayaad nolol ku helaysaan. 20 Laakiin markaad aragtaan Quddus oy
ciidamo ku wareegsanyihiin, ogaada markaas inuu burburkeedu dhawyahay. 21 Markaas kuwa
Yahuudiya joogaa buuraha ha u carareen, oo kuwa gudaheeda ku jiraana ha ka baxeen, kuwa
baadiyaha joogaana yayna gelin. 22 Waayo, kuwanu waa maalmihii aargudashada oo wixii
horay loo sii qoray oo dhan waa inay dhacaan. 23 Balse halaag bay u tahay maalmahaasu
kuwa uurka leh iyo kuwa ubadka nuujinayaba, waayo, balaayo wayn ayaa dhulka ka dhici
doonta, dadkana cadho ayaa ku dhici doonta. 24 Waxayna ku dhammaan doonaan seefta
afkeeda oo waa la qabsan doonaa oo ummadaha oo dhan ayaa qafaalan doonaa; Quddusna
ajinabiga ayaa qabsan toona ilaa uu wakhtiga ajinabigu dhammanayo.

### Imaanshaha Wiilka Aadanaha

25 Deedna calaamooyin ayaa qorraxda iyo dayaxa iyo xiddigahaba laga arki doonaa;
dhulkana dhibaatooyin ayaa ka dhici doona, umadahana guuxa badda iyo hirarkeeda ayay la
welweli doonaan. 26 Dadkana cabsi iyo ka welwelidda waxa dunida ka dhici doona ayay la
suuxi doonaan, waayo, awoodda cirka waa la gilgili doonaa. 27 Markaas ayay arki doonaan
Wiilka Aadanaha oo daruur ku imanaya, isaga oo xoog iyo ammaan wayn leh. 28 Laakiin
markay waxaas dhicidoodu billaabato, kor eega, oo madixiinna kor u qaada, waayo, samata
bixiddiinnu way dhawdahay. 29 Markaasuu tusaale kula hadlay U fiirsada berdaha iyo dhirta oo
dhan; 30 Markay caleemo bixiyaan waad arkaysaan oo waxaad garataan inuu gugii dhawyahay.
31 Sidaas oo kale idinkuna markaad aragtaan waxaas oo dhacaya, garta inay boqortooyadii
Eebbe dhawdahay. 32 Runtii waxaan idinku leeyahay, Qarniganu ma dhammaanayo ilaa oy
waxaas oo dhan dhacaan. 33 Cirka iyo dhulku way dhammaadaan laakiin ereyadaydu ma
dhammaan doonaan. 34 Laakiine feejignaada, oo yuuna qalbigiinu dharag siyaado ah iyo
sakhraamid iyo ka welwelidda aduunyada la cuslaanin, oo yayna maalintaasu sida dabinka oo
kale idin ku soo kedinin. 35 Maxaa yeelay sidaas oo kale ayay dadka dunida jooga oo dhan ugu
kadin doontaa. 36 Laakiinse soo jeeda, oo mar walba ku ducaysta inaad xoog yeelataan si aad
uga baxsataan waxaas dhici doonaa oo dhan, oo aad Wiilka Aadanaha isu hor taagtaan.
37 Marka Ciise maalin walb macbudka ayuu wax ku bari jiray, habeenkiina dibadda ayuu u bixi
jiray, oo wuxuu u hoyan jiray buurtii Saytuun la odhan jiray. 38 Dadka oo dhanna aroortii ayay
macbudka ugu iman jireen si ay u dhegaystaan.

## Khiyaanadii Yuudas

**22** Waxaa soo dhawaatay Ciiddii Kimista aan khamiirka lahayn ee la yidhaahdo Kormaridda.
[2] Marka wadaaddadii sare iyo culimaduba waxay raadinayeen hab ay ku dilaan isaga, maxaa
yeelay dadka ayay ka cabsanayeen. [3] Deedna Shaydaan ayaa galay Yuudaskii Iskariyod la
odhan jiray ee laba iyo tobanka ka mid ahaa. [4] Markaasuu tegay, oo wuxuu la gorgortamay
wadaaddada sare iyo saraakiishii siduu ugu soo shirqooli lahaa. [5] Marka way farxeen oo waxay
kula heshiiyeen inay lacag siiyaan, [6] Ka dibna wuu oggolaaday oo wuxuu raadiyay fursad
wanaagsan oo uu dadka oon ogayn ugu soo dhiibo.

## Diyaarintii Cashadii Ugu Dembaysay

[7] Waxaa timid maalintii Ciidda Kimista aan khamiirka lahayn, oo neefka Kormaridda la gowroco.
[8] Markaasuu Ciise wuxuu diray Butros iyo Yooxanaa isaga oo ku leh Taga oo Kormaridda inoo
sii diyaariya aynnu cunnee. [9] Waxay ku yidhaahdeen Xaggeed doonaysaa inaannu ku
diyaarinno? [10] Wuxuu ku yidhi, Markaad magaalada gashaan waxaa idinla kulmi doona nin
haan dhari biyo ah wata. Isaga raaca oo guriga uu galo ka daba gala. [11] Oo waxaad ninka
guriga leh ku tidhaahdaan Macallinkii wuxuu kugu yidhi, Aaway qolkii martidu xertayda ayaan
Ciidda Kormaridda kula cashaynayaaye? [12] Deedna wuxuu idin tusi doonaa qol wayn oo
dabaqa sare ah, halkaa ku diyaariya. [13] Markaasay tageen, oo waxay heleen siduu u sheegay,
oo cashada Ciidda Kormaridda ayay diyaariyeen. [14] Markii saacaddii la gaadhay ayay isaga iyo
rasuulladiiba fadhiisteen. [15] Markaasuu wuxuu ku yidhi, Aad baan u doonayay inaan cashadan
Ciidda Kormaridda idinla cuno intaanan xanuunsanin. [16] Waayo, waxaan idinku leeyahay, Mar
dembe tan ma cuni doono ilaa oy boqortooyada Eebbe dhexdeeda ku dhammaystiranto.
[17] Markaasuu koob qaaday, oo intuu mahadnaqay ayuu yidhi, Hooya oo qaata oo dhexdiinna
qaybsada, [18] Waayo, waxaan idinku leeyahay, Hadda ka dib anigu midhaha geedka canabka
ah kama cabbi doono ilaa oy boqortooyada Eebbe timaaddo. [19] Markaasuu furin qaaday, oo
intuu mahadnaqay, oo kala jejebiyay ayuu iyaga siiyay, isaga oo leh Kanu waa jidhkaygii oo
laydiin bixiyay ee xusuustayda tan u sameeya. [20] Sidaas oo kale cashada dabadeeda koobkii
ayuu qaaday isaga oo leh Koobkanu waa axdiga cusub oo dhiiggayga aawadiin loo daadiyay,
[21] Laakiise eega, gacantii kii i shirqooli lahaa miiskay xeedhada ayay igula jirtaa, [22] Waayo,
Wiilka Aadanuhu wuu baxayaa sidii loogu tala galay, laakiin halaag baa ku dhacay ninka
shirqoola. [23] Markaasay billaabeen inay dhexdooda iswaydiiyaan ka waxan samayn doona.

## Doodddii Ku Saabsanayd Ka Ugu Sarreeya

[24] Marka dood ku saabsan ka ugu wayn[95*] iyaga ayaa dhexdooda ka billaabatay. [25] Markaasuu
ku yidhi, Ummadaha boqorro ayaa u taliya, oo kuwa xukumana waxay ugu yeedhaan,
samafalayaal. [26] Laakiinse idinka sidaas ma aha, balse ka dhexdiinna ugu wayn, waa inuu
noqdo sida ka ugu yar; oo ka madaxda ahu, ha noqdo sida adeege. [27] Waayo, kee wayn, ma
ka cuntada u fadhiya mise ka adeega? Miyuuna ka cuntada u fadhiya ahayn? Anigu
dhexdiinna waxaan ku ahay sida adeege. [28] Idinkuna waad ila joogteen markii lay jirrabayay.
[29] Waxaan idin siinayaa boqortooyo sida aabbahay ii siiyay, [30] Markaasaad miiska
boqortooyada wax ku cuni doontaan ood ku cabbi doontaan, oo waxaad ku fadhiisan doontaan
carshiyo idinka oo xukumaya laba iyo tobanka qabiilo ee reer banii Israa'iil.

---

95 Ka madaxda u ah

## Dafiraaddii Butros Horaybaa Loo Sii Sheegay

31 Markaasuu Rabbigu yidhi, Simoonow, Simoonow, ogow, Shaydaanka ayaa doonaya inuu
ku helo oo kuu haadiyo sida sarreenka, 32 Laakiinse waan kuu duceeyay inuuna
rumaysadkaagu baabbi'in, adiguna markaad soo laabato walaalaha xooji. 33 Deedna wuxuu ku
yidhi, Sayidow, waxaan diyaar u ahay inaan xabsi iyo geeriba kuu raaco. 34 Isaguna wuxuu ku
yidhi, Waxaan kuu sheegayaa, Butrosow, maanta intuuna diiqu ciyin saddex jeer ayaad i dafiri
doontaa. 35 Wuxuuna ku yidhi, Markaan indinka oon kiishad iyo sahay toona wadanin oo kaba
la' idin diray, miyaad wax u baahateen? Waxay yidhaahdeen Maya. 36 Markaasuu ku yidhi,
Laakiin hadda kii lacag heli kara ha qaato, sidoo kale booro. Kii aan seef lahayna, intuu
dharkiisa iibiyo, seef ha ku soo gato. 37 Waayo, waxaan idinku leeyahay, Waa inay igu
dhaboobaan aayadahanu Isaga Waxaa lagu tiriyay kuwa xadgudbay. Waayo, waxa igu
saabsan dhammaad bay leeyihiin. 38 Markaasay waxay yidhaahdeen Sayidow, waa kuwan laba
seefood. Wuxuu ku yidhi, Way idinku filanyihiin.

## Ciise Wuxuu Ku Tukaday Beertii Getsemane

39 Markaasuu baxay oo Buurtii Saytuun ayuu tegay sidii caadada u ahayd, oo xertiisuna way
raaceen. 40 Deedna markuu meeshaas tegay wuxuu ku yidhi, Tukada si aydaan jirrabaad u
gelin. 41 Marka intuu in dhagax la tuuro ka durkay ayuu jilba joogsaday oo tukaday, 42 Isaga oo
leh Aabbow, haddaad doonayso, koobkan i dhaafi, hasa ahaatee, yayna doonista noqonin,
balse taada ha ahaato. 43 Deedna waxaa cirka uga muuqday malag isaga xoojiya. 44 Marka
isaga oo aad u murugaysan ayuu si adag u tukaday, dhididkiisuna wuxuu noqday sida dhibco
dhiig ah oo dhulka ku dhacaya. 45 Deedna intuu salaaddii ka soo kacay, ayuu xertii u yimid oo
wuxuu arkay iyaga oo murugo la hurda. 46 Markaasuu ku yidhi, Maxaad u huruddaan? Kaca oo
tukada si aydaan jirrabaad u gelin.

## Shirqoolkii Ciise Lagu Qabtay

47 Isaga oo hadalkii wada, waxaa u yimid dad fara badan oo kii Yuudas la odhan jiray ee laba
iyo tobanka ka mid ahaa uu hor kacayo. Markaasuu Ciise u soo dhawaaday si uu u dhunkado.
48 Laakiinse Ciise ayaa ku yidhi, Yuudasow, ma dhunkasho ayaad Wiilka Aadanaha ku
shirqoolaysaa? 49 Marka kuwii la joogay markay arkeen siday wax u dhacayaan, waxay
yidhaahdeen Sayidow, aannu seef isticmaallo? 50 Marka midkood ayaa wadaadka sare
adeegihiisii dhegta midig ka gooyay. 51 Laakiin Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waxan oo
dembe ha samaynin. Markaasuu dhegtiisiih taabtay oo bogsiiyay. 52 Deedna Ciise ayaa ku
yidhi, wadaaddadii sare iyo saraakiisha macbudka iyo odayaashii isaga soo raadiyay Ma
budhcad baad seefo iyo ulo ula soo baxdeen? 53 Maalin walba macbudkaan idinla joogay, oo
maydaan gacan i saarin, laakiinse tanu waa saacaddiinii iyo xoogga gudcurka.

## Butros Oo Ciise Dafiray

54 Markaasay isaga qabteen oo kaxeeyeen, oo wadaadkii sare gurigiisa ayay geliyeen.
Butrosna sheedda ayuu kala socday 55 Markaasay barxadda dhexdeeda dab ku shiteen, oy
wada kulaaleen, Butrosna wuu la fadhiistay oo la kulaalay. 56 Deedna gabadh shaqaale ah
ayaa isaga oo dabka kulaalaya intay aad u eegtay tidhi Kanna isaguu la jiray. 57 Isna wuu
dafiray oo wuxuu ku yidhi, Naagyahay, anigu ma garanayo isaga. 58 In yar dabadeedna qof
kale ayaa arkay oo yidhi, Adiguna midkood baad tahay. Butrosna wuxuu ku yidhi, War

ninyahow aniga ma aha. [59] Hal saac dabadeedna mid kale ayaa xaqiijiyay isaga oo leh Runtii
kanuna wuu la jiray waayo waa reer Galili. [60] Deedna Butros wuxuu yidhi, Ninyow, anigu
waxaad ka hadlayso ma garanayo. Isla markiiba isaga oon hadalkii dhammynin diiqii ayaa
ciyay. [61] Markaasuu Rabbigu jeedsaday oo Butros eegay, Butrosna wuxuu xusuustay hadalkii
Rabbiga Intuuna diiqu ciyin saddex jeer ayaad i dafiri doontaa. [62] Markaasuu intuu dibadda u
baxay aad u ooyay.

### Ciise Waa Lagu Jeesjeesay Oo La Garaacay

[63] Marka nimankii Ciise qabtay way ku jeesjeesseen. [64] Oo intay indhaha ka xidheen oo
garaaceen ayay ku yidhaahdeen Noo sheeg kii kugu dhuftay? [65] Oo waxyaabo badan oo cay
ah ayay ku yidhaahdeen.

### Ciise Golihii Sare Ayaa La Hor Geeyay

[66] Kolkuu waagu beryay golihii odoyaasha shacabka iyo wadaaddada sare iyo culimada ayaa
isu yimid, isagana kulankoodii ayay geeyeen oo waxay ku dheheen [67] Haddaad Masiixa tahay
noo sheeg. markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Haddaan idiin sheego ma rumysanaysaan.
[68] Haddaan wax idin waydiiyana iima jawaabaysaan. [69] Laakiinse hadda laga billaabo wiilka
aadanuhu midigta xoogga Eebbe ayuu fadhiisan doonaa. [70] Markaasay kulligood yidhaahdeen
Marka ma wiilkii Eebbe baad tahay? Wuxuu ku yidhi, Idinkaa yidhi, Inaan anigu Isaga ahay.
[71] Deedna waxay yidhaahdeen Maxaynu markhaati kale uga baahanahay? Innaga qudheenna
ayaaba afkiisa ka maqalnay

### Ciise Oo Bilaatos Hor Tegay

**23** Markaasay kulligood wada kaceen oo waxay isaga hor geeyeen Bilaatos. [2] Deedna waxay
billaabeen inay isaga eedeeyaan iyaga oo leh Waxaannu aragnay ninkan oo ummaddeenna
baadiyaynaya, oo diidan in canshuurta Kaysar la siiyo, oo sheeganaya inuu qudhiisu Masiixa
boqorka ah yahay. [3] Marka Bilaatos ayaa waydiiyay, isaga oo leh Ma Boqorka Yuhuuddaad
tahay? Wuu u jawaabay oo ku yidhi, Waa sidaad u tidhi. [4] Deedna Bilaatos wuxuu wadaaddadii
sare iyo dadkiiba ku yidhi, Anigu ninkan wax lagu eedeeyo ma helin. [5] Laakiinse way ku sii
adkaysteen moqifkoodii iyaga oo leh Dadka ayuu kicinayaa, oo dalka Yahuudiya oo dhan ayuu
wax baraa; laga soo billaabo Galili ilaa iyo halkan.

### Ciise Herodos Ayuu Hor Tegay

[6] Bilaatos markuu galili maqlay, wuxuu waydiiyay inuu ninku reer Galili yahay. [7] Markuu
ogaaday inay maxakamaddiisu Herodos khusayso, ayuu Herodos oo markaas Quddus joogay
u diray. [8] Herodosna markuu Ciise arkay, aad buu u farxay, maxaa yeelay, aad buu u doonayay
inuu arko, waayo, wax badan ayuu ka maqlay oo wuxuu rajaynayay inuu mucjiso ka arko.
[9] Markaasuu su’aalo badan waydiiyay, laakiinse wax jawaab ah ma siinin. [10] Marka
Wadaaddadii sare iyo culimadii ayaa intay istaageen, aad u eedeeyay. [11] Deedna Herodos iyo
askartiisa ayaa ku majaajilooday isaga oo intuu dhar dhalaalaya u galiyay ayuu Bilaatos ku
celiyay. [12] Maalintaas laga billaabo Herodos iyo Bilaatos saaxiibbo ayay noqdeen, wakhtigaa ka
horse col bay ahaayeen.

## Ciise Dil Baa Lagu Xukumay

[13] Marka Bilaatos wuxuu isugu yeedhay wadaaddadii sare iyo madaxdii iyo dadkii. [14] Oo wuxuu
ku yidhi, Ninkan waxaad iigu keenteen sidii mid dadka kicinaya. Laakiinse ogaada, hortiinna
ayaan ku baadhay, oo ninkan waxaad ku eedayseen kama helin. [15] Herodosna waxba kuma
helin, wuuna nagu soo celiyay, oo wax uu dhimasho ku mutaysto muuna sameeynin. [16] Sidaas
daraadeed intaan yara garaaco ayaan iska sii dayn. [17] {Marka Waxaa, waajib isaga ku ahayd
inuu Ciidda qof u sii daayo iyaga.} [18] Markaasay wada qayliyeen, iyaga oo leh Na dhaafi ninkan
oo Baraabbas noo soo daa, [19] Kaasoo xabsiga loogu tuuray dil iyo fallaaganimo iyo
qulqulatooyin uu magaalada ka riday. [20] Bilaatos mar kale ayuu iyaga la hadlay waayo, wuxuu
doonayay inuu Ciise iska sii daayo. [21] Laakiinse way sii qaylyeen, iyaga oo leh Iskutallaabta ku
qodob, iskutallaabta ku qodob. [22] Markaasuu mar saddexaadkii ku yidhi, Waayo, Waa maxay
dembiga ninku sameeyay? Sabab uu dil ku mutaysto Kama helin, sidaas aawadeed intaan
yara ciqaabo ayaan iska sii dayn. [23] Laakiinse kor bay u sii qaylyeen iyaga oo codsanaya in
iskutallaabta lagu qodbo, deedna codsigoodii iyo codsigii wadaaddada sare ayaa xoog batay.
[24] Markaasuu Bilaatos xukumay in codsigooga loo yeelo. [25] Wuxuuna u sii daayay kii
fallaaganimada iyo dilalka u xidhnaa oy doonayeen, balse Ciise rabitaankooda ayuu u dhiibay.

## Ciise Iskutallaabtaa Lagu Qodbay

[26] Marka intay Ciise sii wadeen, waxay qabteen Simoonkii reer Qayrawaan oo baadiyaha ka
soo dhaadhacay, oo waxay u xammaaleen iskutallaabtii si uu Ciise uga daba qaaday.
[27] Waxaana raacay dad fara badan iyo dumar laabta garaacaya oo barooranaya. [28] Laakiin
Ciise intuu ku soo jeedsaday, ayuu ku yidhi, Gabdhaha reer Quddusow, ha ii barooranina,
balse naftiinna iyo carruurtiinna u baroorta, [29] Waayo, waxaa iman doona maalmo la odhan
doono Waxaa barakaysan madhalaysta iyo uurka aan weligii wax dhalin iyo naasaha aan
weligood la nuugin. [30] Markaasay buuraha baryi doonaa, oy odhan doonaan, nagu soo dhaca,
kurahana, na qariya. [31] Waayo, hadday geed qoyan sidan u galaan, maxaa ka engegan ku
dhici doona? [32] Marka waxaa lala kaxeeyay laba kale oo dembiileyaal ah si loola dilo.
[33] Deedna intay meesha dhakada la yidhaahdo yimaaddeen, ayay iskutallaabta ku qodbeen
isaga iyo dembiileyaashiiba, mid xagga midig, ka kalena xagga bidix. [34] Markaasuu Ciise yidhi,
Aabbow, iska cafi iyaga, waayo, ma garanayaan waxay samaynayaan. Deedna dharkiisii ayay
qaybsadeen, oy u qori tuurteen. [35] Marka dadku halkaasay tubnaayeen iyaga oo daawanaya.
madaxduna way ku jeesjeeseen iyaga oo leh Kuwa kale ayuu badbaadiyaye ha is badbaadiyo,
hadduu Masiixii Eebbe ee la doortay yahay. [36] Askartuna way ku majaajiloodeen, oo intay u
yimaaddeen, ayay khal siiyeen, [37] Oo waxay ku yidhaahdeen Haddaad boqorka Yuhuudda
tahay, isbadbaadi. [38] Korkiisana waxay ku xidheen boodh afka Giriigga iyo Laatiini iyo Cibraani
ah oo leh KANU WAA BOQORKA YUHUUDDA. [39] Dembiilayaashii del delnaa mid baa caayay
isaga oo leh Haddaad Masiixa tahay Annaga iyo qudhaadaba badbaadi. [40] Laakiinse kii kale
ayaa u jawaabay oo canaantay isagoo leh War Miyaadan Eebbe ka cabsanaynin, waayo, isku
xukun baad tihiin? [41] Maxaa yeelay, innaga xukunkeenu waa xaq, waayo, wixii aynnu
galabsannay abaalkiisa ayaynu helnay, ninkanuse waxba muuna samaynin. [42] Markaasuu
yidhi, Ciisow, markaad boqortooyadaada ku timaaddo i xusuuso. [43] Ciise ayaa ku yidhi, Runtii
waxaan kugu leeyahay, Maanta fardowsa ayaad ila joogi doontaa.

## Ciise Wuu Dhintay

[44] Haddaba markay ahayd abbaaraha lix saac[96*] dhulka oo dhan gudcur buu noqday ilaa
sagaakii saac.[97*] [45] Qorraxduna way madoobaatay, daahii macbudkuna dhexduu ka kala
dillaacay. [46] Markaasuu Ciise kor u dhawaaqay oo yidhi, Aabbow, gacmahaaga ayaan
ruuxayga u dhiibayaa. Markuu sidaas yidhi, ayay naftu ka baxday. [47] Sarkaalkii gaadhku
markuu arkay waxa dhacay, ayuu Eebbe ammaanay oo yidhi, Hubaal ninkanu xaq buu ahaa.
[48] Dadkii dhacdadaas ku soo uruurayna, markay arkeen waxa dhacay, iyaga oo laabta
garaacaya ayay noqdeen. [49] Kuwii Ciise yaqaannay oo dhan iyo dumarkii Galili ka soo
raacayna sheedda ayay waxa dhacaya kala socdeen iyaga oo arka.

## Ciise Waa La Aasay

[50] Marka, waxaa jiray nin madax ah oo Yuusuf la odhan jiray, wuxuuna ahaa nin wanaagsan oo
xaq ah, [51] Isagu raalli kama ahayn go'aanka golaha iyo falkoodaba oo wuxuuna ahaa reer
Arimataya oo magaalo Yahuudda ku taallo ah, wuxuuna sugayay boqortooyada Eebbe.
[52] Ninkanu intuu Bilaatos u tegay ayuu ka codsaday maydkii Ciise. [53] Deedna intuu soo dejiyay
oo kafan ku duuduubay, ayuu xabaal dhagax ka qodan, oon weligeed qof kale lagu aasin
galiyay. [54] Waxay ahayd Maalintii diyaargarowga, Sabtidiina way soo dhawayd. [55] Marka
dumarkii Galili ka soo raacay ayaa daba socday oo waxay arkeen xabaashii iyo sida meydkiisa
loo aasay. [56] Deedna way iska noqdeen, oo dhir udgoon iyo cadar ayay soo diyaariyeen.
Sabtidiina way iska nasteen siduu sharcigu ahaa

## Sarakiciddii

**24** Marka maalintii ugu horraysay ee toddobaadka, markuu waagu beryay, xabaashii ayay
yimaaddeen, iyaga oo dhirtii udgoonayd oy diyaariyeen wata. [2] Oo waxay arkeen dhagixii oo
xabaashii laga giraangiriyay. [3] Deedna way galeen, balse meydkii sayid Ciise kama ayna helin.
[4] Marka, iyaga oo taas ka walaacsan laba nin oo dhar dhalaalaya xidhan ayaa soo ag is
taagay. [5] Marka way cabsadeen oo wajigooda ayay dhulka u foororiyeen. Deedna nimankii
ayaa ku yidhi, Maxaad ka nool kuwii dhintay uga dhex raadinaysaan? [6] Isagu halkan ma joogo,
balse wuu sarakacay. Xusuusta siduu idiinla hadlay markuu Galili joogay, [7] Wiilka Aadanaha
waa in dembilayaasha loo gacan geliyo oo iskutallaabta lagu qodbo oo maalinta saddexaad uu
soo sarakaco. [8] Markaasay hadalladiisii xusuusteen. [9] Oo intay xabaashii ka soo noqdeen,
ayay waxaas oo dhan kow iyo tobankii iyo kuwii kale oo dhanba u sheegeen. [10] Waxayna
ahaayeen Maryama Magdala iyo Yo'anna iyo Maryama Yacquub hooyadii iyo dumar kale oo la
socday oo arrintaas rasuullada u sheegay. [11] Laakiinse Hadalladaasu waxay la noqdeen wax
aan macnee lahayn iyo ku tidhi ku teen, mana ayna rumaysanin. [12] Marka Butros ayaa kacay
oo xabaashii ku orday, markaasuu foororsaday oo wuxuu arkay kafankii keligii oo meel yaalla;
markaasuu iska tegay oo gurigiis ku laabtay isaga oo ka yaabban waxa dhacay.

---

96 Laba iyo tobankii duhurnimo

97 Saddexdii saacee galabnimo

## Ciise Wuxuu U Muuqday Xertii Emma'us Ku Socotay

13 Marka laba iyaga ka mid ah ayaa maalintaas qudheeda waxay ku socdeen tuulo la odhan
jiray Emma'us, oo Quddus u jirtay ilaa toddoba mayl. 14 Marka Waxay ka wada hadlayeen wixii
dhacay oo dhan, 15 Oo intay wada hadlayeen, Ciise laftigiisa ayaa u soo dhawaaday oo raacay.
16 Laakiinse inay gartaan waa laga indha saabay. 17 Markaasuu ku yidhi, War waa maxay
arrinta aad intaad socoteen ka hadlayseen? Deedna way istaageen iyaga oy murugo ka
muuqato. 18 Marka mid Kale'obas la odhan jiray, ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ma adiga keligaa
ayaa Quddus qariib ku ah oon ogayn waxa maalmahan ka dhacay? 19 Wuxuu ku yidhi, Wax
maxay ah? Waxay ku yidhaahdeen Arrintii ku saabsanayd Ciisihii neer Naasared ee Eebbe iyo
dadka hortoodaba nebi xoog badan oo hadal iyo ficilba awood leh ku ahaa, 20 Iyo siday
wadaaddada sare iyo madaxdeennuba ugu dhiibeen in dil lagu xukumo oo iskutallaabta lagu
qodbo. 21 Laakiinse waxaannu rajaynaynay inuu kii Israa'iil soo furan lahaa yahay, waxaa intaa
dheer, maanta waa maalintii saddexaad markii ay waxaas oo dhan dhaceen. 22 Weliba dumar
annaga naga mid ah ayaa naga yaabiyay, kuwaas oo aroor hore xabaashii tegay. 23 Oo markay
meydkiisii waayeen ayay yimaaddeen iyaga oo leh, Waxaannu aragnay muuqaal malaa'igo oo
nagu yidhi, Wuu noolyahay. 24 Marka kuwo naga mid ah oo nala joogay ayaa xabaashii tegay,
oo waxay arkeen siday dumarku yidhaahdeen, balse isagii mayna arag. 25 Markaasuu ku yidhi,
Doqomayahow fahmada daran saw ma ahayn inaad rumaysaan waxay nebiyada oo dhan sii
sheegeen! 26 Miyayna ahayn inuu Masiixu waxaas oo dhan ku silco oo uu ammaantiisa galo?
27 Deedna intuu ka soo billaabay Muuse iyo nebiyada oo dhan ayuu kitaabka wixii isaga ku
saabsanaa oo dhan u macneeyay. 28 Markay tuuladay ku socdeen ku soo dhawaadeen ayuu
iska dhigay sidii isaga oo meel fog ku socda, 29 Laakiin waxay ka codsadeen inuu la joogo,
waayo, makhribkiibaa soo dhawaaday, gabalkiina wuu dhacay. Markaasuu gudaha la galay oo
la joogay. 30 Waxaa dhacay markay cuntaynayeen ayuu furinkii qaaday oo intuu barakeeyay oo
kala jejebiyay ayuu siiyay. 31 Markaasay indhahoodu furmeen oo way garteen isaga, deedna
wuu ka qarsoomay iyaga. 32 Markaasay isku yidhaahdeen Miyuuna laabtu ina hurin intuu jidka
inagula hadlayay oo uu Kitaabka inoo fasirayay? 33 Isla saacaddiiba way kaceen oo Quddus
ayay ku noqdeen, oo kow iyo tobankii iyo kuwii kale ee la joogay oo isla jooga ayay u
yimaadden, 34 Iyaga oo leh Hubaal Sayidkii wuu sarakacay, oo wuxuu u muuqday Simoon.
35 Iyaguna waxay ka warrameen wixii jidka ka dhacay iyo siday isaga u garteen markuu furinka
jejebiyay.

## Ciise Wuxuu U Muuqday Rasuulladii

36 Marka iyaga oo hadalkii wada Ciise laftiisa ayaa isa soo dhex taagay, oo wuxuu ku yidhi,
Nabadu ha idinla jirto! 37 Laakiinse way argaggexeen oo cabsadeen oo waxay u maleeyeen
inay ruuxaan arkeen. 38 Markaasuu ku yidhi, War Maxaad la argagaxdeen oo qalbiyadiinnu la
shakiyeen? 39 Gacmahayga iyo lugahaygaba eega waa Anigii qudhaydii, i taabta oo arka,
waayo, ruuxaantu jiidh iyo laf toona ma laha sidaad igu aragtaan. 40 Markuu hadalkaa ku yidhi,
ayuu gacmihiisa iyo cagihiisa tusay. 41 Marka iyaga oo wali yaabban oo farxad darteed
rumaysan la' ayuu ku yidhi, Wax la cuno halkan ma ku haysaan? 42 Markaasay in kalluun ah oo
duban siiyeen. 43 Deedna intuu qaatay ayuu hortooda ku cunay. 44 Oo wuxuu ku yidhi, Sidan
ayaan idin ku idhi markaan idinla joogay Wax kasta oo sharcigii Muuse iyo nebiyadii iyo
sabuurba iga qoreen waa inay dhacaan. 45 Markaasuu fahmadooda furay si ay kitaabka u
gartaan. 46 Wuxuuna ku yidhi, Waxaa qoran inuu Masiixu xanuunsado, oo uu maalinta
saddexaad kuwa dhintay ka soo sarakaco, 47 Waana in magiciisa toobadda iyo dembidhaafka

ummadaha oo dhan lagu wacdiyo laga billaabo Quddus. [48] Idinkuna waxaaas oo dhan ayaad markhaati ka tihiin. [49] Oo, bal eega, waxaan idiin soo dirayaa ballankii Aabbahay, laakiin magaalada jooga ilaa ood xoog xagga sare laydinka huwiyo.

### Ciise Samada Ayuu Aaday

[50] Markaasuu iyaga meel Beytaniya ku dhaw u kaxeeyay, oo intuu gacmihii kor u qaaday
ayuu barakeeyay. [51] Deedna intuu iyaga ka tagay ayaa samada kor loogu qaaday.
[52] Markaasay u sujuudeen isaga oo iyaga oo aad u faraxsan ayay Quddus ku noqdeen; [53] Oo
mar kasta macbudka ayay joogeen iyaga oo Eebbe ammaanaya. Aamiin.

# INJIILKA SIDA YOOXANAA U QORAY

### Erayguna Jidh Buu Qaatay

**1** Bilowgii waxaa jiray Erayga, Erayguna wuxuu la jiray Eebbe, Erayguna wuxuu ahaa Eebbe.
2 Isagu Bilowgii Eebbe buu la jiray. 3 Wax walba waxaa laga sameeyay xaggiisa, oo wixii la
sameeyay lama samaynin isaga la'aantii. 4 Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd
nuurka dadka. 5 Nuurkuna wuxuu iftiimiyaa gudcurka, gudcurkuna kama badinin. 6 Waxaa jiray
Rasuul Eebbe soo diray, oo magiciisa la yidhaahdo Nebi Yaxye[b]. 7 Isagu wuxuu u yimid inuu
nuurka u marag furo, si dadka oo dhan ay u wada rumeeyaan. 8 Isagu nuurka ma ahayn, balse
wuxuuu u yimid inuu nuurka u marag furo. 9 Kaasu wuxuu ahaa nuurka runta ah ee qof walba
oo dunida yimaada iftiimiya. 10 Isagu dunida ayuu ku jiray, dunidana lsagaa lagu abuuray, balse
dunidu mayna garanin isaga. 11 Kuwiisa ayuu u yimid, kuwiisuna mayna aqbalin isaga.
12 Laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyay amar ay carruurtii Eebbe ku noqdaan, kuwaasoo
ah kuwii magiciisa rumaystay, 13 Oon ka dhalanin dhiigga, ama doonistiisa jidhka, ama doonista
ragga, balse Eebbe ka dhashay. 14 Erayguna jidh buu noqday, oo wuu ina dhex degay, oo
ammaantiisa ayaannu aragnay, taasoo ahayd sida ammaantii Wiilka kaliya ee Aabbaha, oo ay
nimco iyo runba ka buuxaan. 15 Nebi Yaxye ayaa isaga u marag furay, wuxuuna ku dhawaaqay
oo yidhi, Kanu waa kii aan idhi: Ka iga daba imanaya wuu iga horreeyay, waayo, hortay ayuu
jiray. 16 Dhammaanteen buuxnaantiisa ayaynu nimco nimco lagu daray ka hellay. 17 Waayo,
shareecada Muuse ayaa lagu soo dajiyay, balse nimcada iyo runtu waxay ku yimaaddeen Ciise
Masiix. 18 Ninna waligii Eebbe ma arkin, wiilka kaliya ee laabta Aabbaha ku jira ayaa inoo
muujiyay.

### Maraggii Nebi Yaxye Uu Ciise U Marag Furay

19 Kanu waa markhaatifurkii Nebi Yaxye, markay Yuhuuddu Quddus wadaaddo iyo kuwo reer
Laawi ah u soo direen oy waydiiyeen Kumaad tahay? 20 Isagu ma dafirin ee wuu qirtay Anigu
ma ihi Masiixa. 21 Markaasay waydiiyeen, Haddaba kumaad tahay? Ma llyaas baad tahay?
Wuxuu yidhi, Maya. Ma nebigii baad tahay? Wuxuu ku jawaabay Maya. 22 Markaasay ku
yidhaahdeen kumaad tahay? Si aannu jawaab ugu celinno kuwii nasoo diray. Yaad isku
sheegaysaa? 23 Wuxuu yidhi, Waxaan ahay codka cidlada kaga dhawaaqahaya Jidka Rabbiga
toosiya, siduu Nebi Ishacyaah u sheegay[c]. 24 Kuwa la soo diray waxay ka yimaaddeen
Farrisiinta. 25 Markaasay waydiiyeen Haddaadan Masiix ama Ilyaas ama nebigii ahayn marka
maxaad dadka u biyagalinaysaa? 26 Nebi Yaxye wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Anigu dadka
biyo ayaan galiyaa, balse waxaa dhexdiinna jooga mid aydaan garanaynin 27 Waana kan iga
daba imanaya, ee aanan istaahilin inaan yeelmaha kabtiisa furo. 28 Waxaas oo dhan waxay ka
dhaceen Beytaniyadii ku taallay Urdun shishadeeda, oo ahayd meeshuu Nebi Yaxye dadka ku
biyagaliyay.

### Bal Eega, Wanka Eebbe

29 Maalintii labaad Nebi Yaxye wuxuu arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, Bal eega
Wanka Eebbe ee dembiga dunida qaadaya! 30 Kanu waa kii aan idhi, Waxaa iga daba imanaya
nin iga horreeyay, waayo, hortay buu jiray. 31 Anigu ma garanaynin isaga, balse inuu Israa'iil isu
muujiyo darteed ayaan u imid anigoo dadka biyo galinaya. 32 Nebi Yaxye wuu marag furay

isaga oo leh Waxaan arkay Ruuxa oo samada uga soo degaya sidii qoollay oo kale oo ku dul
joogsaday isaga. 33 Anigu maanan aqoonin isaga, laakiin kii ii soo diray inaan dadka biyaha
galiyo, wuxuu igu yidhi, Kaad aragtid Ruuxa oo ku soo degaya oo ku dul joogsanaya, kaasu
waa kan dadka Ruuxa Qudduuska ah dadka ku biyo galiya. 34 Anigu waan arkay, oo waan u
marag furay inuu kanu Wiilka Eebbe yahay.

### Xertii Ugu Horraysay

35 Haddana maalintii ku xigtay Nebi Yaxye iyo laba xertiisa ah ayaa meel taagnaa. 36 Oo wuxuu
arkay Ciise oo socda, markaasuu yidhi, Bal eega Wanka Eebbe! 37 Labadii xerta ahayd ee
hadalkaas maqlay, Ciise ayay raaceen. 38 Markaasuu Ciise soo jeedsaday, oo wuxuu arkay
iyaga oo daba socda, deedna wuxuu ku yidhi, Maxaad doonaysaan? Waxay ku yidhaahdeen
Rabbi (oo macneheedo yahay Macallin,) Xaggeed degantahay? 39 Wuxuu ku yidhi, Kaalaya oo
arka, markaasay yimaaddeen oo waxay arkeen meeshuu deganaa, maalintaasna way la
joogeen. markaas waxay ahayd qiyaastii tobankii saac.[98*] 40 Mid ka mid ah labadii Nebi Yaxye
maqashay ee raacday, wuxuu ahaa Andaros, Simoon Butros walaalkii. 41 Isagu wuxuu markii
ugu horraysayba raadiyay walaalkii Simoon oo wuxuu ku yidhi, Waannu helnay Masiixa (oo
lagu macneeyo Kiristoos.) 42 Deedna Ciise ayuu u geeyay. Ciisena intuu eegay ayuu ku yidhi,
Adigu waxaad tahay Simoon ina Yoonis. Waxaa laguugu yeedhi doonaa Keeyfas (oo
macneheedu yahay Butros)

### U Yeedhiddii Filibos iyo Nataana'el

43 Maalintii ku xigtay Ciise wuxuu go'aansaday inuu Galili tago, oo wuxuu helay Filibos oo
wuxuu ku yidhi, Isoo raac. 44 Filibos wuxuu ahaa reer Beytsayda oo ah magaaladii Andaros iyo
Butros. 45 Filibos wuxuu raadiyay Nataana'el oo wuxuu ku yidhi, Waxaannu helnay kii uu
Muuse towreed ku sheegay oy nebiyadu wax ka sii qoreen, Ciisihii reer Naasared oo ah Ina
Yuusuf. 46 Nataana'el wuxuu ku yidhi, Oo ma wax wanaagsan baa Naasared ka yimaada?
Marka Filibos ayaa ku yidhi, Kaalay oo arag. 47 Marka Ciise ayaa arkay Nataana'el oo ku soo
socda, oo wuxuu ku yidhi, Bal eega, shaki la'aan kanu waa reer Israa'iil aan badhax lahayn.
48 Nataana'el ayaa ku yidhi, Sideed ii garatay? Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Intuuna
Filibos kuu yeedhin, markaad geedka berdaha hoostiisa joogtay ayaan ku arkay. 49 Nataana'el
ayaa u jawaabay Macallinow, waxaad tahay Wiilka Eebbe oo waxaad tahay boqorkii Israa'iil.
50 Ciise ayaa u jawaabay Ma inaan kugu idhi: Geedka berdaha hoostiisa ayaan kugu arkay
ayaad igu rumaysay? Waxyaabo taas ka wayn ayaad arki doontaa. 51 Markaasuu ku yidhi,
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Waxaad arki doontaan samada oo furan iyo malaa'igaha
Eebbe oo kor u kacaya oo ku soo degaya Wiilka Aadanaha.

### Arooskii Magaalada Qaana Lagu Sameeyay

**2** Maalintii saddexaad waxaa Qaanadii Galili ka jiray aroos, Ciise hooyadiina halkaasay
joogtay. 2 Ciise iyo xertiisiina arooskii ayaa lagu casuumay. 3 Deedna markay khamridii ka
dhammaatay Ciise hooyadii ayaa isaga ku tidhi Khamridii ayaa ka dhammaatay. 4 Markaasuu
Ciise iyada ku yidhi, Hooyo, maxaa taas iga khuseeya? Saacaddaydii lama gaadhine.
5 Hooyadii waxay shaqaalihii ku tidhi Wax kasta oo uu idinku yidhaahdo, yeela. 6 Marka

---

98 Afartii saac ee galabnimo

meeshaas waxaa yaallay lix haamood oo dhagax ah, oy Yuhuuddu isku daahiriyaan siday caadadoodu ahayd, mid kastana qaadi karo qiyaastii labaatan ilaa soddon littir. [7] Ciise ayaa ku yidhi, Haamaha biyo ka buuxiya markaasay ilaa girgirka buuxiyeen. [8] Deedna wuxuu ku yidhi, Ka soo dhura oo ka xafladda ugu sarreeya siiya, sidii bay yeeleen. [9] Kii madaxda ahaa markuu dhadhamiyay biyihii khamriga noqday muuna ogayn meel ay ka yimaadeen, balse shaqaalaha u soo dhuray way ogaayeen; markaasuu caruuskii u yeedhay, [10] Oo ku yidhi, Nin kasta marka hore wuxuu soo saaraa khamriga wanaagsan, oo markay sakhraamaan dabadeed ayuu tan liidata keenaa; adiguse khamrigii wanaagsanaa ayaad ilaa hadda dib u dhigtay. [11] Tanu waxay ahayd mucjisooyinkii Ciise tii ugu horraysay ee uu Qaanadii Galili ku sameeyay oo uu ku muujiyay ammaantiisa, xertiisuna way rumeeyeen. [12] Markaas dabadeed wuxuu tegay Kafarna'um, waxaana la socday hooyadii iyo walaalihii iyo xertiisiiba, oo maalmo aan badnayn ayay halkaas joogeen.

## Ciise Macbudka Ayuu Nadiifiyay

[13] Marka Ciiddii Kormaridda ee Yuhuudda ayaa soo dhawaatay, Ciisena wuxuu u kacay Quddus. [14] Wuxuu macbudka ku arkay kuwo ku iibinaya dibi iyo ido iyo qoollay iyo lacag sarriflayaal fadhiya. [15] Markaasuu intuu xadhko shaabuug ka sameeyay, dhammaantood macbudka ka wada eryay iyaga iyo dibidii iyo idihiiba, sarriflayaashiina lacagtiibuu ka daadiyay, miisaskoodiina wuu rogay. [16] Kuwii qoollayda iibinayayna wuxuu ku yidhi, Waxan ka qaada halkan. Guriga Aabbahay ha ka dhigina guri ganacsi. [17] Markaasay Xertiisu aayaddan xusuusteen. Qiirada aan gurigaaga u qabo ayaa i gubaysa.[99*] [18] Sidaa aawadeed Yuhuuddu waxay ku yidhaahdeen Calaamadda aad waxan ku samaynayso na tus? [19] Ciise ayaa u jawaabay Macbudkan dumiya, oo saddex maalmood gudohood ayaan ku so kicinayaa. [20] Marka Yuhuuddu waxay yidhaahdeen Lix iyo afartan sano ayaa macbudkan la dhisayay, adiguna ma saddex maalmood gudohood baad ku kicinaysaa? [21] Laakiin isagu wuxuu ka hadlayay macbudka jidhkiisa ah. [22] Sidaa aawadeed markuu kuwii dhintay ka soo sarakacay, ayay xertiisu hadalkaas soo xusuusteen oo way rumaysteen Kitaabka iyo hadalkii uu Ciise yidhi,ba. [23] Markuu Quddus joogay wakhtigii Ciiddii Kormaridda dad fara badan ayaa magiciisa rumaystay markay arkeen mucjisooyinkii uu sameeyay. [24] Laakiin Ciise qudhiisu iskuma hallaynin iyaga, waayo dadka oo dhan ayuu garannayay, [25] Oo uma u baahnayn in looga marag furo dadka, waayo, isaga laftiisa ayaa ogaa waxa dadka ku jira.

## Ciise iyo Nikodemos

**3** Waxaa jiray nin Farrisiinta ka mid ahaa oo la odhan jiray Nikodemos oo madaxda Yuhuudda ka mid ahaa. [2] Ninkanu intuu habeenimo Ciise u yimid ayuu ku yidhi, Macallinow, waannu ognahay inaad tahay macallin Eebbe ka yimid, waayo, ninna ma samayn karo mucjisooyinka aad samayso hadduusan Eebbe la jirin. [3] Ciise ayaa u jawaabay Runtii, runtii waxaan kugu leeyahay, hadduusan qofku mar kale dhalanin, boqortooyada Eebbe arki maayo. [4] Nikodemos wuxuu ku yidhi, Siduu nin mar kale u dhalan karaa isaga oo da' ah? Ma mar kale ayuu uurkii hooyadii geli karaa oo ka dhalan karaa? [5] Ciise ayaa ugu jawaabay Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, hadduuna qofku ka dhalanin biyo iyo Ruuxa boqortooyada Eebbe geli kari maayo. [6] Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa ruux. [7] Ha la yaabin

99 Sabuur 69:9

haddaan ku idhi, Waa inaad mar kale dhalataan. [8] Dabayshu waxay u babbataa meeshay doonto, oo xiinkeeda ayaad maqashaa, laakiin ma ogidiin meeshay ka timaaddo iyo meeshay u kacdo; waa sidaas oo kale qof kasta oo Ruuxa ka dhasha.
[9] Nikodemos ayaa ku yidhi, Siday waxaasu u dhici karaan? [10] Ciise ayaa u jawaabay Ma adiga oo macallinka Israa'iil ah ayaadan waxaas garanaynin? [11] Runtii, runtii, waxaan ku leeyahay Waxaannu naqaano ayaannu ka hadalnaa, oo waxaannu aragnay ayaannu ka marag furnaa, idinkuse markhaatigayga ma aqbashaan. [12] Haddaan waxa dunida idiin sheegay ood rumayn waydeen, sideed ku rumaynaysaan haddaan waxa jannada idiin sheego? [13] Ninna jannada kor uma tegin, kii jannada ka soo degay mooyee, waana Wiilka Aadanaha ee jannada jooga.
[14] Siduu Muuse abeesadii saxaraha kor ugu qaaday oo kale Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado.[100*] [15] Si mid kasta oo isaga rumayeeya uusan u halaagmin balse uu helo nolosha weligeed ah. [16] Eebbe jacaylkii uu dunida u qabay aawadeed wuxuu siiyay Wiilkiisa keliya si mid kasta oo isaga rumeeya uusan u halaagmin balse uu lahaado nolosha weligeed ah.
[17] Eebbe Wiilkiisa dunida uguma soo dirin inuu dunida xukumo, balse inay dunidu isaga ku badbaaddo. [18] Kii isaga rumayeeya lama xukumayo, laakiin kii isaga rumayn waaya, hore ayaa loo xukumay, maxaa yeelay, wuxuu rumayn waayay magaca Wiilka Eebbe ee keliya.
[19] Xukunku waa sidan: Nuurka ayaa dunida yimid, dadkuna gudcurka ayay nuurka ka jeclaadeen, maxaa yeelay, shar ayay sameeyaan. [20] Qof kasta oo shar sameeya nuurka wuu nacaa, umana yimaado nuurka, si aan sharkiisa loogu canaananin. [21] Laakiinse kii xaq sameeya, nuurka ayuu u yimaaddaa si camalkiisu ugu muuqdo in dar Eebbe loo sameeyay.

### Nebi Yaxye Mar Labaad Ayuu Ciise U Marag Furay

[22] Waxaas dabadeed Ciise iyo xertiisu waxay tageen dhulka Yahuudiya, oo halkaas ayuu iyaga la joogay oo ku biyo galiyay. [23] Nebi Yaxyena wuxuu ku biyo galiyay Caynoon oo Saalim ku dhaw, waayo, meeshaasu biyo badan ayay lahayd, dadkuna way imanayeen oo waa la biya galinayay. [24] Waayo, Nebi Yaxye weli xabsiga laguma tuurin. [25] Marka dood is daahirinta ku saabsan ayaa ka dhex aloosantay xertii Nebi Yaxye iyo nin Yuhuudi ah. [26] Markaasay Nebi Yaxye u yimaaddeen oo ku yidhaahdeen Macallinow, kii Urdun shishadeeda kula joogay eed u marag furtay ayaa wax biya galinaya, oo dadkii oo dhanna isagay u tageen. [27] Nebi Yaxye wuxuu ugu jawaabay Ninna waxba ma heli karo haddaan jannada laga siinin. [28] Idinka qudhiinna ayaa markhaati ka ahaa inaan idhi: Anigu ma ihi Masiixa, laakiin hortiisa ayaa lay soo diray. [29] Caruusku waa kan caruusadda guursaday, balse caruuska saaxiibkiisa la jooga ee maqlaya isaga, aad buu ugu farxaa codka caruuska daraaddiis. Sidaa aawadeed farxaddaydu way dhammays tirantay. [30] Isagu waa inuu koro, aniguse waa inaan yaraado.

### Markhaatiga Jannada Ka Yimid

[31] Kii xagga sare ka yimaada, dhammaan wuu ka wada sarreeyaa; kii dhulka ka yimaadase waa kii dhulka oo wuxuu ka hadlaa waxa dhulka. Kii jannada ka yimaada, dhammaan ayuu ka sarreeyaa. [32] Wuxuu arkay oo maqlay ayuu ka marag furaa, ninnana maraggiisa ma aqbalo.
[33] Kii maraggiisa aqbalay wuxuu xaqiijiyay inuu Eebbe run yahay. [34] Waayo, rasuulka Eebbe ayaa erayga Eebbe ku hadla, maxaa yeelay, isagu Ruuxa qiyaas kuma siiyo. [35] Aabbuhu Wiilka ayuu jecelyahay, oo wax walba gacantiisa ayuu galiyay. [36] Kii Wiilka rumeeya nolosha weligeed

100 Tirintii 21:9

ah ayuu leeyahay, kii aan Wiilka rumaynina, nolosha ma arki doono, balse cadhadii Eebbe
ayaa ku dhacda isaga.

### Ciise Iyo Islaantii Reer Samaariya

**4** Haddaba markuu Ciise ogaaday inay Farrisiintii maqleen waxa uu samaynayo iyo inuu biya
galinayo xer ka badan xerta Nebi Yaxye, 2 (in kastoo Ciise qudhiisu uusan cidna biya galinin
balse xertiisa,) 3 ayuu Yahuudiya ka tegay, wuxuuna mar kale u kacay Galili. 4 Oo waxay ahayd
inuu Samaariya sii dhex maro. 5 Marka wuxuu yimid magaalo Samaariya ah oo Sukhar la
odhan jiray, oo ku dhawayd dhulkii Yacquub wiilkiisa Yuusuf siiyay. 6 Waxaana meeshaas ku
yaallay ceelkii Yacquub. Marka Ciise oo socodka ku soo daalay, ayaa ceelka agtiisa fadhiistay.
Saacaduna abbaaraha lixdii ayay ahayd. 7 Marka waxaa timid naag biyo dhaamis ah oo reer
Samaariya ah. deedna Ciise ayaa ku yidhi, iyada, I waraabi. 8 (Maxaa yeelay, xertiisu
magaaladay ku maqnaayeen si ay cunto uga soo iibsadaan.) 9 Naagtii reer Samaariya waxay
ku tidhi isaga Sideed adiga oo Yuhuudi ah biyo ii waydiisataa, aniga oo naag reer Samaariya
ah? (Waayo, Yuhuudda iyo Samaariyiintu islama dhaqmaan.) 10 Ciise ayaa u jawaabay
Haddaad garan lahayd hadiyadda Eebbe iyo ka uu yahay ka kugu leh, I waraabi, adiga ayaa
isaga waydiisan lahaa oo wuxuu ku siin lahaa biyaha nool. 11 Naagtii waxay ku tidhi Sayidow,
waxaad biyo ku dhaansato ma haysatid, ceelkuna wuu dheeryahay. Marka xaggeed ka
helaysaa biyahaas nool? 12 Ma awowgayagii Yacquub oo ceelka na siiyay oo isaga qudhiisa iyo
wiilashiisa iyo xoolihiisuba ay ka cabbeen baad ka wayntahay? 13 Ciise ayaa ku yidhi, Ku alla kii
biyahan ka cabba, mar kale ayuu harraadi doonaa, 14 Laakiin ku alla kii biyaha aan siin doono
ka cabba weligii ma harraadi doono. Balse biyaha aan siin doono waxay qudhiisa ku noqon
doonaan durdur biyuhu ka butaacaan oy ku butaacaan nolosha weligeed ah. 15 Naagtii waxay
ku tidhi Sayidow, biyahaas i sii, si aanan u harraadin oo aanan halkan aniga oo biyo dhaamis
ah ugu soo noqonin. 16 Ciise wuxuu ku yidhi, Orod oo ninkaagii u yeedh, oo halkan kaalaya.
17 Naagtii ayaa u jawaabtay Ninba ma lihi. Ciise wuxuu ku yidhi, Waa runtaa, oo nin ma lihid.
18 Waayo, shan nin ayaad lahayd oo kan aad hadda haysatana ninkaagii ma aha; taas run
baad ku sheegtay. 19 Naagtii waxay ku tidhi Sayidow, waxaan filayaa inaad nebi tahay.
20 Awowayaashayo buurtan ayay ku caabudi jireen, idinkuse waxaad tidhaahdaan, Quddus
ayaa ah meesha lagu caabudo.[101*] 21 Ciise ayaa ku yidhi, naagyahay, i rumayso, saacad ayaa
iman doonta aydaan Aabbaha buurtan iyo Quddus toona ku caabudi doonin. 22 Idinku waxaad
caabuddaan wax aydaan oqoonin, annaguse waxaannu caabudnaa wax aannu naqaanno,
waayo, badbaadadu waxay ka timaaddaa Yuhuudda. 23 Laakiin saacad baa iman doontaa,
wayna joogtaa hadda, marka ay caabudayaasha runta ahu Aabbaha ku caabudi doonaan
ruuxa iyo runta, waayo, Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas oo kale. 24 Eebbe waa
Ruux, kuwa caabuda isagana waa inay ruuxa iyo runta ku caabudaan. 25 Naagtii waxay ku tidhi
Waan ogahay Masiixu inuu imanayo (ka Kiristoos la yidhaahdo) Oo markuu yimaado, ayuu wax
kasta noo sheegi doonaa. 26 Ciise ayaa ku yidhi, Anigan kula hadlaya ayaa isaga ah. 27 Deedna
waxaa yimid xertiisii, wayna la yaabeen markay arkeen isaga oo naag la hadlaya. oo ninna ma
odhanin, Maxaad ka doonaysaa? ama, Maxaad ula hadlaysaa iyada? 28 Dabadeena naagtii
intay haanteedii dhariga ahayd ka tagtay ayay magaaladii u kacday oo waxay dadkii ku tidhi
29 Kaalaya oo arka ninka ii sheegay wax walba oon sameeyay. Tolow ma Masiixiibaa?
30 Markaasay intay magaaladii ka soo baxeen u yimaaddeen isaga. 31 Marka xertiisii ayaa
bariday iyaga oo leh Macallin, wax cun. 32 Laakiin wuxuu iyaga ku yidhi, Anigu cunto aydaan

101 Qibladu waa Quddus ayaad tidhaahdeen

ogayn oo la cuno ayaan haystaa. [33] Haddaba xertiisii waxay isku yidhaahdeen War ma cid baa cunto u keentay? [34] Ciise ayaa ku yidhi, Cuntadaydu waa inaan doonista kii i soo diray sameeyo oon shaqadiisa dhammeeyo. [35] Miyaydaan odhanin, Afar bilood ayaa hadhay ka dibna waa beergoyskii? Bal eega, waxaan idin leeyahay, Indhihiina kor u qaada oo beeraha eega siday u cadyihiin oy in la gooyo diyaar ugu yihiin. [36] Kii gooya abaal marin buu helaa, wuxuuna midho u uruuriyaa nolosha weligeed ah, si ay kii beeray iyo kii gooyayba isula farxaan. [37] Odhaahdu waa dhab Mid baa beera, mid kalena wuu gooyaa. [38] Waxaan idiin diray inaad goosataan wax aydaan ku hawshoonin. Kuwa kale ayaa ku hawshooday, hawshoodiina waad goosateen. [39] Waxaana magaaladaas ka rumeeyay isaga dad fara badan oo reer Samaariya ah, hadalkii naagta aawadii, markay marag furtay oy tidhi Wuxuu ii sheegay wax walba oon sameeyay. [40] Sidaa darteed markay dadka reer Samaariya u yimaaddeen isaga, waxay ka baryeen inuu la joogo, laba maalmood ayuuna halkaas joogay. [41] Marka kuwo kale oo badan ayaa rumeeyay hadalkiisa aawadii. [42] Oo waxay naagtii ku yidhaahdeen Hadda waxaanu ku rumaysannay hadalkaaga aawadii ma aha, maxaa yeelay, annaga qudhayadu waannu maqalnay oo waannu ogaannay inuu kanu runtii yahay Badbaadiyaha dunida. [43] Laba maalmood ka dib ayuu halkaas ka tegay oo Galili u kacay. [44] (Ciise qudhiisa ayaa ka marag kacay inuuna nebi waddankiisa sharaf ku lahayn.) [45] Haddaba markuu Galili yimid, reer Galili ayaa soo dhaweeyay, maxaa yeelay waxay arkeen wixii uu ciidda Quddus ku sameeyay oo dhan, sababtoo ah ciidda ayay tageen.

### Ciise Wuxuu Bogsiiyay Wiilkii Sarkaalka

[46] Haddana mar kale ayuu Qaanadii Galili oo ahayd meeshuu biyaha khamriga kaga dhigay yimid. Halkaasna waxaa joogay sarkaal wiilkiisu Kafarna'um ku bukay. [47] Oo markuu maqlay inuu Ciise Yahuudiya ka yimid oo Galili gaadhay, ayuu u tegay oo ka baryay inuu u yimaado oo wiilkiisa bogsiiyo, waayo, dhimasho ayuu qarka u saarnaa. [48] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Haddaydnaan mucjisooyin iyo waxyaabo la yaab leh arkin, marnaba ma rumaysanaysaan.
[49] Sarkaalkii ayaa ku yidhi, Sayidow, kaalay intuusan wiilkayga dhimanin. [50] Ciise ayaa ku yidhi, Iska tag, wiilkaagii wuu noolyahaye. Marka ninkii hadalkuu Ciise ku yidhi, ayuu rumeeyay oo wuu iska tegay. [51] Marka isaga oo dhexda sii socda adeegayaashiisii ayaa ka hor yimid, oo waxay ku yidhaahdeen Wiilkaagii wuu noolyahay. [52] Marka saacaddu bogsaday ayuu iyaga waydiiyay. Markaasay ku yidhaahdeen, Shalay toddobadii saac ayay qandhadii ka tegtay.
[53] Marka aabbihii wuxuu ogaaday inay saacaddaasu ahayd markuu Ciise ku yidhi, Wiilkaagii wuu noolyahay. Markaasay isaga iyo qoyskiisii oo dhan rumeeyeen. [54] Tanu waxay ahayd mucjisadii labaad ee Ciise sameeyay markuu Yahuudiya ka tegay ee uu Galili yimid.

### Curyaankii La Bogsiiyay

**5** Waxaas dabadood waxaa jirtay ciidda Yuhuudda, Ciisena Quddus ayuu u kacay. [2] Waxaa Quddus, Albaabka Idaha agtiisa ku taallay, war biyo ah oo afka Cibraaniga lagu yidhaahda Beytesda oo shan balbalood leh. [3] Waxaana halkaas jiifay dad fara badan oo bukaan ah, oo indha la' ama laxaad la' ama curyaan ah. Waxayna sugayeen in biyaha la walaaqo. [4] Maxaa yeelay, malaa'igaha Rabbiga ayaa marmar warta ku soo degi jiray oo biyaha walaaqi jiray; oo qofka markii biyaha la walaaqo ugu hor gala cudur kasta oo uu qabo wuu ka bogsan jiray.
[5] Marka halkaas waxaa joogay nin siddeed iyo soddon sannadood bukay. [6] Oo Markuu Ciise arkay isaga oo jiifa oo uu ogaaday inuu wakhti dheer bukay, wuxuu ku yidhi, Ma doonaysaa inaad bogsato? [7] Ninkii bukay ayaa u jawaabay Sayidow, ma heli karo qof warta igu rida markii

biyaha la ruxo oo markaan isku dayaba mid kale ayaa iga hor gala. [8] Marka Ciise ayaa ku yidhi,
Kac oo sariirtaada qaado oo soco. [9] Isla markiiba ninkii wuu bogsaday oo intuu sariirtiisii qaatay
ayuu socday. Maalintaasuna waxay ahayd Sabti. [10] Sidaa darteed Yuhuuddu waxay kii la
bogsiiyay ku yidhaahdeen War waa Sabti, oo xalaal kuuma aha inaad sariirtaada qaadato.
[11] Laakiin wuxuu ugu jawaabay Kii i bogsiiyay ayaa igu yidhi, Sariirtaada qaado oo soco.
[12] Markaasay waydiiyeen Waa ayo ninka kugu yidhi, Sariirtaada qaado oo soco? [13] Kii la
bogsiiyayse muusan ogayn kuu yahay, waayo, Ciise intuu iskaga tagay ayuu dadkii meeshaas
joogay iska dhex galay. [14] Markaas dabadeed Ciise ayaa isagii macbudka ka helay oo wuxuu
ku yidhi, Waadigaa bogsadaye, mar dambe ha dembaabin si ayna wax ka sii xumi kuugu
dhicin. [15] Marka ninkii ayaa intuu tegay Yuhuuddii u sheegay inuu ninka bogsiiyay Ciise ahaa.
[16] Sidaa aawadeed Yuhuuddu Ciise ayay dhibaato u gaysteen, maxaa yeelay, Sabtidii ayuu
waxaas sameeyay. [17] Laakiin Ciise wuxuu ugu jawaabay Aabbahay ilaa hadda wuu
shaqaynayaa, aniguna sidoo kale waan shaqaynayaa. [18] Sidaa aawadeed ayay Yuhuuddu aad
u sii dooneen inay dilaan, sababtuna ma ahayn Sabtida uu jebiyay oo keliya, balse inuu Eebbe
ugu yeedhay Aabbihii iyo inuu isagu Eebbe iskala mid dhigay.

**Amarka Iyo Awoodda Wiilka**

[19] Marka Ciise ayaa ku yidhi, iyaga Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Wiilku keli ahaantii
waxba ma qaban karo, wuxuu arko Aabbaha oo samaynaya mooyee. Wax kasta oo isagu
sameeyo ayuu Wiilkuna sidoo kale sameeyaa. [20] Waayo, Aabbuhu Wiilka ayuu jecelyahay, oo
wuxuu sameeyo oo dhan ayuu tusaa, oo wuxuu tusi doonaa wax kuwan ka waawayn si aad u
yaabtaan. [21] Sida Aabbuhu kuwa dhintay u kiciyo oo u nooleeyo ayuu Wiilkuna sidoo kale u
nooleeyaa kuwa uu doonayo. [22] Aabbuhu ninna ma xukumo, balse xukunka oo dhan wiilka
ayuu siiyay, [23] Si ay dadka oo dhan Wiilka u ammaanaan siday Aabbaha u ammaanaan. Kii
aan Wiilka ammaanin, ma ammaano Aabbaha soo diray. [24] Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, Kii eraygayga maqla oo rumeeya kii i soo diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed
ah, lamana xukumi doono, balse dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha ayuu u soo
gudbay. [25] Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, saacad ayaa imanaysa, wayna joogtaa,
markay kuwii dhintay codka Wiilka Eebbe maqli doonaan, oo kuwa maqlaana way noolaan
doonaan. [26] Siduu Aabbuhu nolol iskiisa u leeyahay, ayuu Wiilkana siiyay inuu nolol iskiisa
lahaado. [27] Wuxuuna siiyay amar uu wax ku xukumo, maxaa yeelay, waa Wiilka Aadanaha.
[28] Ha la yaabina taas, waayo, saacad baa imanaysa marka ay kuwa xabaalaha ku jiraa
dhammaantood codkiisa maqli doonaan, [29] Wayna u soo bixi doonaan, kuwii wanaagga falay
waxay u sarakacayaan nolosha, kuwa sharka falayna waxay u sarakacayaan xukunka.

**Maraggii Ciise Loo Furo**

[30] Keli ahaantay waxba ma samayn karo. Sidaan wax u maqlo ayaan u xukumaa,
xukunkayguna waa xaq, waayo, doonistayda ma raaco, balse doonista Aabbaha i soo diray.
[31] Haddaan isu marag furo, maraggaygu run ma aha. [32] Balse waxaa jira mid kale oo ii marag
fura, waanan ogahay maragguu ii furo inuu run yahay. [33] Nebi Yaxye ayaad u soo cid dirteen,
runta ayuuna u marag furay. [34] Anigu dadka marag ugama baahni, balse waxaan sidaa u
leeyahay si aad u badbaaddaan. [35] Isagu wuxuu ahaa faynuus baxaya oo iftiimaya, idinkuse
waxaad doonteen inaad nuurkiisa wakhti kooban ku faraxdaan. [36] Laakiin waxaan leeyahay
markhaati kii Nebi Yaxye ka wayn, waana, shaqada uu Aabbuhu i siiyay inaan dhammeeyo
oon hadda samaynayo, taas ayaana ii marag furaysa inuu Aabbuhu i soo diray. [37] Aabbihii i

soo dirayna wuu ii marag furay. Idinku marnaba codkiisa maydnaan maqal, muuqaalkiisana
maydnaan arag. [38] Eraygiisuna idinkuma jiro, waayo, kii uu soo diray maydaan rumaynin.
[39] Kutubta ayaad baadhaan, waayo, waxaad u malaysaan inaad nolosha weligeed ah ku
helaysaan, iyagaana ii marag fura. [40] Idinku ma doonaysaan inaad ii timaaddaan si aad nolol u
heshaan. [41] Anigu dadka ammaan kama doono. [42] Balse waan ogahay inuusan jacaylka Eebbe
idinku jirin. [43] Magaca Aabbahay ayaan ku imid idinkuna waad i aqbali waydeen. Hadduu mid
kale magiciisa ku yimaado kaas ayaad aqbashaan. [44] Sideed u rumaysan kartaan, idinka oo
dhexdiinna ammaan iska aqbalaya, oo ammaanta Eebbaha keliya ka timaadda aan
aqbalaynin? [45] Ha u malaynina inaan Aabbaha idiinku ashkataynayo; mid ayaa idinku
ashkataynaya, Muusaha aad isku hallaysaan. [46] Waayo, haddaad Muuse rumayn lahaydeen,
anigana waad i rumayn lahaydeen, waayo, aniga ayuu wax iga qoray.[102*] [47] Balse haddaydaan
wuxuu qoray rumaysnayn, sideed erayadayda ku rumaysan doontaan?

### Waxaa Cunto La Siiyay Shan Kun Oo Nin

**6** Waxaas dabadeed Ciise wuxuu u tallaabay dhinaca kale ee badda Galili oo baddii Tiberiyas
ahayd. [2] Dad fara badan ayaana raacay, waayo, waxay arkeen mucjisooyinkii uu kuwii bukay
ku sameeyay. [3] Deedna Ciise buurta ayuu u baxay oo halkaas ayuu xertiisa la fadhiistay.
[4] Marka waxaa soo dhawayd ciiddii Kormaridda ee Yuhuudda. [5] Haddaba Ciise markuu kor
eegay, wuxuu arkay dad fara badan oo ku soo socda, wuxuuna Filibos ku yidhi, Xaggaynu furin
ay kuwanu cunaan ka soo iibinnaa? [6] Wuxuuna sidaas ugu yidhi, si uu u itixaamo isaga,
waayo, Ciise qudhiisu wuu ogaa wuxuu samayn doono. [7] Filibos wuxuu ugu jawaabay Laba
boqol oo dinaar oo furin ah kuma filla in nin walba wax yar qaato. [8] Marka mid xertiisa ka mid
ah, Andaros, Simoon Butros walaalkii ayaa ku yidhi, [9] Halkan waxaa jooga wiil shan midh oo
furin ah oo qabandi ah iyo laba kalluun ah haya, balse maxay u qaban karaan dad sidan u fara
badan? [10] Markaasuu Ciise yidhi, Dadka fadhiisiya. Meeshuna waxay lahayd cagaar badan.
deedna nimankii way fadhiisteen, tiradooduna qiyaastii waxay ahayd shan kun. [11] Markaasuu
Ciise furinkii qaaday oo uu mahadnaqay ayuu u qaybiyay kuwii fadhiyay, kalluunkii sidaas oo
kale intay doonayeen. [12] Markay wada dhergeen, wuxuu xertiisii ku yidhi, Uruuriya jajabkii
hadhay, oo yayna waxba ka lumin. [13] Sidaa aawadeed way uruuriyeen, oo laba iyo toban
saladood[103*] ayay ka buuxiyeen jajabkii ka hadhay shantii furinka qabandida ee ka hadhay wixii
la cunay. [14] Haddaba dadkii markay arkeen mucjisada uu sameeyay, waxay yidhaahdeen
Runtii, kanu waa nebigii dunida iman lahaa. [15] Ka dibna markuu Ciise ogaaday inay doonayaan
intay yimaddaan inay qafaashaan oy boqor u caleema saaraan, ayuu mar kale keligii buurta u
baxay. [16] Markii makhribkii la gaadhay xertiisii ayaa badda u baxay. [17] Oo intay doonni fuuleen
ayay xagga Kafarna'um badda u tallaabayeen. Habaynkiina wuu madoobaaday Ciisana u
imanin. [18] Deedna dabayl wayn ayaa baddii ka kacday. [19] Haddaba markay saddex ilaa saddex
iyo badh mayl gooyeen, waxay arkeen Ciise oo badda ku soo dul socda oo doonnida u soo
dhaw, wayna cabsadeen. [20] Laakiin wuxuu ku yidhi, War waa anigii ee ha cabsanina. [21] Marka
waxay damceen inay doonnida ku qaadaan, oo isla markiiba doonnidii dhulkii ay ku socdeen
ayay soo gaadhay.

102 Sharciga Kunoqoshadiisa 18:18
103 Dambiilood

## Dadku Waxay Doonayeen Ciise

[22] Maalintii ku xigtay dadkii faraha badnaa ee badda dhankeeda kale ku hadhay, waxay
ogaadeen inayna doonni kale joogin mid mooyee, Ciisena uusan taas xertiisa la fuulin, balse
xertiisu ay keligood tageen. [23] (Laakiin waxaa Tiberiyas ka yimid doonyo, oo waxay u soo
dhawaadeen meeshii furinka lagu cunay markuu Rabbigu mahadnaqay dabadeed.) [24] Haddaba
dadkii badnaa markay arkeen inuusan Ciise iyo xertiisa toona halkaas joogin, ayay intay
doonnyo fuuleen Kafarna'um yimaaddeen iyaga oo Ciise raadinaya. [25] Oo markay isaga badda
dhinaceeda kale ka heleen, waxay ku yidhaahdeen Macallinow, goormaad halkan timid?

## Cuntada Nolosha

[26] Ciise ayaa u jawaabay Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Iima raadinaysaan
mucjisooyinkii aad aragteen aawadood balse cuntadii aad cunteen eed ka dheregteen
aawadiis. [27] Cuntada baaba'aysa ha u shaqaynina, balse cuntada waaraysa ilaa iyo nolosha
weligeed ah ee Wiilka Aadanuhu idin siin doono, maxaa yaalay, Eebbaha Aabbaha ah ayaa
isaga shaambaddiisa ku dhuftay.

[28] Sidaas aawadeed waxay ku yidhaahdeen Maxaannu yeelnaa si aannu shaqada Eebbe u
samayno? [29] Ciise ayaa u jawaabay Tan ayaa ah shaqada Eebbe: Waa inaad kii uu soo diray
rumaysaan. [30] Sidaa darteed waxay ku yidhaahdeen Mucjisadeed samaynaysaa si aannu kuu
aammino! Maxaad, samaynaysaa? [31] Awowayaashayo waxay cidlada ku cuneen maannada
sida qoran Cunto ay cunaan ayuu samada ka siiyay.[104*] [32] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, Muuse samada idinkama siinin cunto, balse Aabbahay ayaa
samada idinka siiyay cuntada runta ah. [33] Waayo, cuntada Eebbe waa kii samada ka soo
degay oo dunida nolosha siiya. [34] Markaasay ku yidhaahdeen Sayidow, mar walba cuntadaas
na sii. [35] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Anigu waxaan ahay cuntada nolosha. Kii ii yimaadda ma
gaajoon doono, kii i rumeeyana waligii ma harraadi doono. [36] Balse waxaan idiin sheegay waad
i aragteen, i mana aydaan rumaynin. [37] Kuwii uu Aabbuhu i siiyay oo dhan way ii iman
doonaan, oo kii ii yimaadda ma eryi doono. [38] Waayo, samada ugaba soo degin inaan
doonistayda yeelo, balse iaan doonista kii i soo diray yeelo. [39] Tanuna waa doonista kii i soo
diray, inaanan kuwii uu i siiyay midna ka luminin, balse aan maalinta aakhiro soo sarakiciyo.
[40] Waayo, tanu waa doonistii Aabbahay in mid kasta oo Wiilka arka oo rumeeya uu nolosha
weligeed ah lahaado, aniguna maalinta aakhiro ayaan soo sarakicin doonaa. [41] Sidaas
aawadeed Yuhuuddii way gunuunuceen, maxaa yeelay, wuxuu yidhi, Anigu waxaan ahay
cuntada samada ka soo degtay. [42] Waxayna yidhaahdeen Kanu miyuuna Ciise ahayn, wiilkii
Yuusuf ee aanu aabbihii iyo hooyadiiba naqaanay? Marka siduu u leeyahay, Samadaan ka soo
degay? [43] Marka Ciise ayaa u jawaabay Gunuunuca iska daaya. [44] Ninna iima iman karo
hadduusan Aabbihii i soo diray soo jiidin, aniguna maalinta aakhiro ayaan soo sarakicin
doonaa. [45] Waxaa ku qoran kutubtii nebiyada Kulligood Eebbe bay wax ka baran doonaan.[105*]
Mid kasta oo Aabbaha wax ka maqlay oo wax ka bartay wuu ii yimaaddaa. [46] Ninna Aabbaha
ma arag kii Eebbe ka yimid mooyee. Isagaa Aabbaha arkay. [47] Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, Kii i rumeeya, nolosha weligeed ah ayuu leeyahay. [48] Anigu waxaan ahay cuntada

104 Baxniintii 16:4-15

105 Ishacyaah 54:13

nolosha. [49] Awowayaashiin waxay cidlada ku cuneen maanniga, oo way dhinteen. [50] Kanu waa
cuntada samada ka soo degtay, oo qofkii cuna ma dhiman doono. [51] Anigu waxaan ahay
furinkina nool ee samada ka soo degay. Hadduu qof uun cuntadan cuno, weligii wuu noolaan
doonaa. Oo cuntada aan siin doono waa jidhkayga, aan nolosha dunida aawadeed u bixinayo.
[52] Sidaa darteed Yuhuudda muran ayaa ka dhex kacay iyaga oo leh Siduu kanu jidhkiisa inoo
siin karaa si aynnu u cunno? [53] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, Haddaydaan jidhka Wiilka Aadanaha cunin oo aydaan dhiiggiisa cabbin nolol ma
helaysaan.[106*] [54] Oo kii jidhkayga cuna oo dhiiggayga cabba wuxuu leeyahay nolosha weligeed
ah, oo maalinta aakhiro waan soo sarakicin doonaa.
[55] Waayo, jidhkaygu waa cuntada runta ah, dhiiggayguna waa cabbitaanka runta ah. [56] Kii
jidhkayga cuna oo dhiiggayga cabba wuu igu jiraa, anna isagaan ku jiraa. [57] Sida Aabbaha nool
ii soo diray ee aan Aabbaha dartiisa ugu noolahay kii i quutana dartay ayuu u nolaan doonaa.
[58] Kanu waa cuntada samada ka soo degtay, mana aha kii ay awowayaashiin cuneen oy
dhinteen. Kii furikan cuna, weligii wuu noolaan doonaa. [59] Waxyaalahaas ayuu sunagogga
dhexdiisa ku hadlay intuu Kafarna'um wax ku barayay.

## Erayga Nolosha Waligeed ah

[60] Markay in badan oo xertiisa ah taas maqleen, waxay yidhaahdeen Waa hadal aad u adag.
Yaa dhagaysan karaa? [61] Markuu Ciise qudhiisu ogaaday inay xertiisu taas ka gunuunacayaan,
ayuu ku yidhi, Miyaad ka xumaateen taas? [62] Ka warrama haddaad aragtaan Wiilka Aadanaha
oo kor ugu baxaya meeshuu markii hore joogay? [63] Ruuxa ayaa wax nooleeyaa, jidhku waxba
ma taro. Erayada aan idinkula hadlayo waa ruux iyo nolol. [64] Laakiin waxaa idinku jira kuwo
aan rumaysnayn. (Maxaa yeelay ilaa iyo Bilowgiiba Ciise wuu ogaa kuway yihiin kuwa aan
rumaysnayn iyo ka khiyaani doonaba.) [65] Marka wuxuu yidhi, Sidaas aawadeed ayaan idinku
idhi, Qofna iima iman karo hadduuna Aabbuhu karsiinin. [66] Markaas laga billaabo xertiisa qaar
badan oo ka mid ahu way iskaga hadheen, oo mar dambe mayna raacin. [67] Haddaba Ciise
ayaa laba iyo tobankii ku yidhi, Idinkuna ma inaad tagtaan baad doonaysaan? [68] Simoon Butros
ayaa ugu jawaabay Sayidow, yaannu u tagnaa? Adigaa haya erayadii nolosha weligeed ah.
[69] Annaguna waannu rumaynay, oo waannu ognahay inaad tahay Ka Qudduuska ah ee Eebbe.
[70] Ciise wuxuu ugu jawaabay Miyaanan labo iyo tobankiina dooranin? balse mid shaydaan ah
ayaa idinku jira. [71] (Wuxuu ka hadlayay Yuudas Ina Simoon Iskariyod, waayo inkasta oo uu
laba iyo tobanka ka mid ahaa hadana isaga ayuu ahaa ka khayaani doona.)

## Rumaysad La'aantii Ciise Walaalihii

**7** Markaas dabadeed Ciise Galili ayuu ku dhex wareegay, waayo, ma uusan doonaynin inuu
Yahuudiya ku wareego, maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay doonayeen inay dilaan. [2] Ciiddii
Yuhuudda ee teendhaduna way dhawayd. [3] Marka walaalihii ayaa ku yidhi, Halkan iskaga tag
oo Yahuudiya aad si ay xertaadu shaqada aad samaynayso u arkaan. [4] Ma jiro nin doonaya in
la ogaado oo si qarsoodi ah wax u sameeya. maadaama ood waxan samaynayso, dunida isu
muuji. [5] Xataa walaalihii mayna rumaynin isaga. [6] Marka Ciise wuxuu ku yidhi, iyaga
Wakhtigaygii wali lama gaadhin, balse wakhtigiinnu xilli kasta wuu joogaa. [7] Dunidu idinma
nebcaan karto, anigase way i necebtahay, waayo, waxaan ka marag kacaa in camalkeedu

106 Ishacyaah 54:13

shar yahay. [8] Idinku Ciidda taga, aniguse Ciiddan tagimaayo, waayo, wakhtigaygii wali ma
imanin. [9] Intuu erayadaas iyaga ku yidhi, ayuu Galili iska sii joogay.

### Ciise Wuxuu Tagay Ciiddii Teendhada

[10] Laakiin markay walaalihii Ciidda u kaceen, ayuu isaga oo is qarinaya ka daba tagay. [11] Marka
Yuhuuddii ayaa Ciidda ka dhex raadiyay, iyaga oo leh Xagguu jiraa? [12] Dadkuna aad bay u
hadal hayeen isaga, qaarkood waxay lahaayeen Waa nin wanaagsan; qaar kalena waxay
lahaayeen, maya, balse dadka ayuu luminayaa. [13] Mana jirin nin si cad isaga uga hadla cabsi
ay Yuhuudda ka qabaan aawadeed. [14] Deedna markay Ciiddii kala badh marayso Ciise ayaa
macbudka ka istaagay oo wax ku baray. [15] Marka Yuhuuddii ayaa la yaabay iyaga oo leh Siduu
kanu wax u bartay isaga oon waligii waxba dhiganin? [16] Marka Ciise ayaa u jawaabay oo yidhi,
Wax bariddayda anigu iskama lihi, balse waxaa leh kii i soo diray. [17] Qof alla qofkii doonaya
inuu doonista Eebbe yeelo, wuxuu kala garan doonaa inay wax bariddaydu tii Eebbe tahay iyo
inaan anigu iska hadlayo. [18] Kii isagu iska hadla, isagaa is ammaana, balse kii doonaya
ammaanta kii soo diray, kaasu waa run oo xaqdarro kuma jirto. [19] Miyuuna Muuse sharciga idin
siinin? Midkiinana sharciga kuma dhaqmo. Maxaad u doonaysaan inaad i dishaan? [20] Dadkii
faraha badnaa waxay ugu jawaabeen Shaydaan baa kugu jira. Yaa doonaya inuu ku dilo?
[21] Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Mucjiso keliya ayaan sameeyay, kulligiinna waad la
yaabteen. [22] Muuse gudniinka ayuu idin siiyay (inkastoo uusan Muuse ka imanin balse
awowayaashiin), idinku Sabtidaad dadka guddaan. [23] Haddii Sabtida qof la gudo, si aan
sharciga Muuse loo jabinin, maxaad iigu xanaaqaysaan haddaan nin dhammaantii Sabtida
bogsiiyay? [24] Siday wax u muuqdaan wax ha ku xukumina ee sida xaqa ah wax ku xukuma.

### Kanu Ma Masiix Baa?

[25] Marka qaar reer Quddus ah ayaa yidhi, War Kanu kii ay doonayeen inay dilaan miyuuna
ahayn? [26] Si cad ayuu u hadlayaa, oo waxbana ma odhanayaan! Madaxdu miyay ogaadeen
inuu kanu run ahaantii Masiixa yahay? [27] Laakiin kanu meeshuu ka yimid waannu ognahay,
balse markuu Masiixu yimaado, ninna meeshuu ka imanayo ma garanayo. [28] Marka Ciise ayaa
macbudka ka dhex dhawaaqay isaga oo wax baraya oo leh Waad i taqaannaan, waanad
ogtihiin meeshaan ka imid; anigu iskama imanin, balse kii i soo diray waa run, ka aydaan
garanaynin. [29] Aniguse waan aqaannaa, waayo, isagaan ka imid, oo i soo diray. [30] Markaasay
damceen inay qabtaan, laakiin ninna gacan kuma dhigin, waayo, saacaddiisii wali ma imanin.
[31] Balse dad badan ayaa rumeeyay, iyaga oo leh Markuu Masiixu yimaado ma mucjisooyin ka
badan kuwa uu kanu sameeyay ayuu samayn doonaa?

### Saraakiil Ayaa Loo Diray Inay Ciise Soo Xidhaan

[32] Farrisiintii ayaa maqlay inay dadku arrintiisa ka hadlayaan, marka wadaaddadii sare iyo
Farrisiintii ayaa si ay isaga u soo qabtaan saraakiil u diray. [33] Marka Ciise wuxuu ku yidhi, In
yar ayaan idinla joogayaa, deedna waxaan u tagayaa kii i soo diray. [34] Waad i raadin doontaan,
imana heli doontaan, meeshaan joogona ma iman kartaan. [35] Marka Yuhuuddii waxay isku
yidhaahdeen Kanu xagguu tagi doonaa oo aanaan ka heli karin? Ma kuwa dadka Giriigga ku
kala firidhay ayuu u tagi doonaa oo Giriigta ayuu wax bari doonaa? [36] Muxuu ka wadaa markuu
leeyahay Waad i raadin doontaan, imana heli doontaan, meeshaan joogona ma iman kartaan?

### Biyaha Nool

[37] Maalintii Ciidda u dambaysay ee Ciidda ugu waynayd Ciise ayaa intuu istaagay kor u
dhawaaqay isaga oo leh Hadduu qof harraado, aniga ha ii yimaado, oo ha cabbo. [38] Siduu
kitaabku yidhi, Kii i rumeeya, calooshiisa waxaa ka soo burqan doona webiyo biyaha nool ah.
[39] (Wuuxu ka hadlayay Ruuxa ay kuwa isaga rumeeya heli doonaan, waayo, Ruuxa ilaa iyo
wakhtigaa lama bixinin, maxaa yeelay, Ciise wali lama ammaanin.)

### Dadkii Ayaa Kala Qaybsamay

[40] Sidaa darteed dadka qaarkood, markay hadalladaas maqleen, waxay yidhaahdeen Runtii
kanu waa nebigii. [41] Qaar kalena waxay yidhaahdeen Kanu waa Masiixii. balse Qaarbaa yidhi,
Masiixiiu ma Galili buu ka imanayaa? [42] Miyuuna kitaabku odhanin Masiixu wuxuu ka iman
doonaa farcanka Daa'uud iyo tuulada Beytlaxam ee Daa'uud joogi jiraye? [43] Sidaa daraaddeed
dadku way ku kala qaybsameen isaga. [44] Qaarkood waxay damceen inay xidhaan, balse ninna
gan kuma dhigin. [45] Marka saraakiishii waxay u yimaaddeen wadaaddadii sare iyo Farrisiintii,
iyaguna waxay ku yidhaahdeen War Maxaad u keeni waydeen? [46] Saraakiishii waxay ugu
jawaabeen Siduu u hadlay walgii ninna uma hadlin. [47] Farrisiintiina waxay iyaga ku
yidhaahdeen Idinkana miyuu idin duufsaday? [48] Wax hoggaamiye ah ama Farriiisi ah oo isaga
rumeeyay miyaa jira? [49] Balse nacallaa ku yaalla caamada aan Sharciga garanaynin.
[50] Nikodemoskii mar hore Ciise xilli habeen ah u yimid oo iyaga ka mid ahaa ayaa ku yidhi,
[51] Sharcigeennu nin aan marka hore la dhagaysanin oon la ogaanin wuxuu sameeyay miyuu
xukumayaa? [52] Markaasay ku yidhaahdeen Adiguna ma reer Galili baad tahay? bal raadi oo
nebi Galili ka soo baxay arag. [53] Markaasuu nin kasta gurigiisii u kacay.

### Naagtii Sinaysatay

**8** Ciise wuxuu u baxay Buurtii Saytuun. [2] Marka aroor hore ayuu haddana macbudka yimid oo
dadkii oo dhan ayaa u yimid, markaasuu intuu fadhiistay wax baray. [3] Dabadeedna Culimadii
iyo Farrisiintii waxay u keeneen naag sino lagu qabtay. Markaasay intay dhexda soo
istaajiyeen, [4] Ku yidhaahdeen Macallinow, naagtan sinaa lagu soo qabtay. [5] Sharciga Muusena
wuxuu na faray in tan oo kale dhagax lagu dilo, adiguse maxaad ka leedahay? [6] Waxay
su'aashaas u waydiiyeen, inay jirrabaan, si ay u helaan wax ay ku eedeeyaan. Balse Ciise
intuu foororsaday ayuu fartiisa dhulka wax ku qoray. [7] Laakiinse markay su'aashii ku
celceliyeen, ayuu intuu istaagay ku yidhi, Kiinii aan dembi lahaynu dhagaxa ugu horreeya ha
ku tuuro. [8] Deedna haddana wuu foororsaday, oo haddana dhulka ayuu wax ku qoray.
[9] Iyaguna markay hadalkaas maqleen damiirkooda ayaa canaantay markaasay mid mid isaga
daba baxeen, laga billabo odayaashii ilaa iyo kii ugu dambeeyay. marka Ciise oo kaliya oy
naagtii hor taagantahay ayaa soo hadhay. [10] Deedna Ciise intuu istaagay ayuu naagtii ku yidhi,
naagyahay, away kuwii ku soo dacweeyay? Miyuuna ninna ku xukumin? [11] Waxay ku tidhi
Maya Ninna, Sayidow. Ciisena wuxuu ku yidhi, Aniguna ku xukumimaayee; iska tag, oo mar
dambe ha dembaabin.

## Ciise Waa Nuurka Dunida

12 Marka Ciise ayaa mar kale la hadlay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay nuurka
dunida. Kii i soo raaca, gudcurka kuma socon doono, balse wuxuu lahaan doonaa nuurka
nolosha. 13 Sidaa darteed Farrisiintu waxay ku yidhaahdeen Adigaa isu Marag furaya,
maraggaagguna run ma aha. 14 Ciise ayaa ku jawaabay oo ku yidhi, In kasta oon isu marag
furo, maraggaygu waa run, waayo, meeshaan ka imid iyo meeshaan tegayo ayaan garanayaa,
idinkuse ma garanaysaan meeshaan ka imid iyo meeshaan tegayo. 15 Idinku xagga jidhka
ayaad wax ka xukuntaan, aniguse ninna ma xukumo. 16 Balse haddaan xukumo, xukunkaygu
waa run, waayo, anigu keligay ma ihi, balse waa aniga iyo Aabbihii i soo diray. 17 Sharcigiina
waxaa ku qoran, Laba nin markhaatigoodu waa run. 18 Anigu waan isu marag furaa, Aabbihii i
soo dirayna wuu ii marag furaa. 19 Sidaa darteed waxay ku yidhaahdeen Aabbahaa xagguu
joogaa? Ciise ayaa ku jawaabay Aniga iyo Aabbahay midna ma garanaysaan. Haddaad i
garataan, Aabbahayna waad garan lahaydeen. 20 Hadalladaas ayuu ku hadlay markuu
meeshay khasnaddu taallay ee macbudka dhexdiisa agteeda wax ku barayay. Oo ninna ma
qabanin isaga, waayo, saacaddiisu weli ma imanin.

## Ciise Yuhuudda Ayuu U Digay

21 Markaasuu mar kale iyaga ku yidhi, Waan tegayaa, waanad i raadin doontaan oo
dambiyadiinna ayaad ku dhiman doontaan. Meeshaan tegayana ma iman kartaan. 22 Sidaas
daraaddeed Yuhuuddu waxay yidhaahdeen War Miyuu is dilayaa? Waayo, wuxuu yidhi,
Meeshaan tegayo ma iman kartaan. 23 Markaasuu ku yidhi, Idinku waxaad tihiin kuwa hoose,
aniguse waxaan ahay xagga sare. Idinku kuwa dunidaad tihiin, aniguse dunidan kama mid ihi.
24 Sidaa darteed waxaan idinku idhi, Dembiyadiina ayaad ku dhiman doontaan haddaydaan
rumaynin inaan anigu isagii ahay. 25 Markaasay ku yidhaahdeen Kumaad tahay? Ciise wuxuu
yidhi, Kii aan tan iyo Bilowgii idiin sheegayay. 26 Wax badan oo aan idiin sheego oon idinku
eedeeyo ayaa jira, balse kii i soo diray waa run, aniguna waxaan isaga ka maqlay ayaan
dunida kula hadlayaa. 27 Ma ayna fahmin inuu iyaga Aabbaha kala hadlayo. 28 Deedna Ciise
ayaa ku yidhi, Markaad Wiilka Aadanaha kor u qaaddaan[l], ayaad garan doontaan inaan anigu
isagii ahay oo aanan keligay waxba qaban karin, balse wuxuu Aabbuhu i baray ayaan ku
hadlaa. 29 Oo kii i soo diray wuu ila joogaa, oo keligay muuna iga tegin, waayo, mar kasta waxa
isaga ka farxiya ayaan sameeyaa. 30 Intuu hadalkaa waday, kuwo badan ayaa isaga rumeeyay.

## Runtu Way Idin Xorayn Doontaa

31 Markaasuu Ciise Yuhuuddii isaga rumaysay ku yidhi, Haddaad eraygayga xajisaan, runtii
waxaad tihiin xertayda. 32 Oo runtaad garan doontaan; runtuna way idin xorayn doontaa.
33 Waxay ugu jawaabeen Farcankii Ibraahim ayaannu nahay oo weligayo ninna nama
addoonsan. Sideed u tidhaahdaa, xor baad noqon doontaan? 34 Ciise ayaa ugu jawaabay
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, mid kasta oo dembi falaa waa addoonkii dembiga.
35 Addoonkuna waligii guriga kuma nagaado, balse wiilku waligii wuu ku nagaadaa. 36 Sidaa
darteed hadduu Wiilku idin xoreeyo, runtii xorbaad ahaan doontaan. 37 Inaad farcankii Ibraahim
tihiin waan ogahay, balse inaad i dishaan ayaad doonaysaan, waayo, hadalkaygu meel
idinkuma laha. 38 Waxaan xagga Aabbahay ku soo arkay ayaan ka hadlaa, idinkuna waxaad
aabbihiin ka maqasheen ayaad samaysaan.

### Aabbihiin Waa Iblayska

[39] Markaasay ugu jawaabeen Aabbahayo waa Ibraahim. Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad carruurtii
Ibraahim tihiin, shaqadii Ibraahim ayaad samayn lahaydeen. [40] Balse hadda waxaad
doonaysaan inaad i dishaan, aniga oo ah nin runtii aan xagga Eebbe ka maqlay idiin sheegay.
Ibraahim Waxaa ma samaynin. [41] Waxaad samaysaan shaqadii aabbihiin. Markaasay ku
yidhaahdeen Anagu garacyo ma nihin. Aabbe keliya ayaannu leennahay oo waa Eebbe.
[42] Ciise ayaa ku yidhi, Hadduu Eebbe Aabbihiin yahay, waad i jeclaan lahaydeen, maxaa
yeelay, Eebbe baan ka imid, oo iskama imanin, ee isagaa i soo diray. [43] Maxaad waxaan
leeyahay u fahmi la'dihiin? Waayo, hadalkayga maba maqli kartaan. [44] Waxaad tihiin ilmo
Iblays, oo waxaad doonaysaan inaad damacyadii aabbihiin samaysaan. Tan iyo Bilowgiiba
dhagar qabe ayuu ahaa, runna muusan shaqo ku lahayn, waayo, runba kuma jirto isaga.
Markuu been ku hadlahayo, dabeecad bay u tahay, waayo, waa beenaale, waana aabbaha
beenta. [45] Sababtoo ah runtaan ku hadlayo aawadeed waad i rumayn waydeen. [46] Kiinnee
dembi igu caddayn kara? Marka Haddaan runta sheego, maxaad ii rumayn waydeen? [47] Kii
kuwa Eebbe ka mid ah, erayada Eebbe ayuu maqlaa, sababta aad u maqli la'dihiin, waayo,
kuwii Eebbe ma tihidin.

### Ibraahim Ka Hor Baan Jiray

[48] Marka Yuhuuddii waxay ugu jawaabeen Miyaannan ku saxsanayn markaannu leenahay
Saamiri shaydaan ku jiro ayaad tahay? [49] Ciise ayaa ku jawaabay Shaydaan iguma jiron balse
Aabbahay ayaan ammaanaa, idinkuna waad i sharaf tirtaan. [50] Anigu ammaan raadis ma ihi,
balse waxaa jira mid ammaantayda raadin doona isaga ayaana xukumi doona. [51] Runtii, runtii,
waxaan idinku leeyahay, Hadduu qof uun ereygayga xajiyoo, weligii dhimasho ma arki doono.
[52] Yuhuuddu waxay ku yidhaahdeen isaga Hadda ayaannu ogaanay inuu shaydaan kugu jiro.
Ibraahim wuu dhintay nebiyadiina sidoo kale, adiguna waxaad leedahay, Hadduu qof uun
hadalkayga xajiyo weligii dhimasho ma dhadhamin doono. [53] Ma aabbaheen Ibraahim oo
dhintay iyo nebiyadii dhintay ayaad ka wayntahay? Yaad is moodday? [54] Ciise ayaa ugu
jawaabay Haddaan is ammaano, ammaantayda waxba kama jiraan. Aabbahayga aad
aabbihiin ku sheegtaan ayaa i ammaanaa. [55] Laakiin adinku isaga ma garanaysaan, balse
anigu waan garanayaa, oo haddaan idhaahdo, ma garanayo isaga, sidiinna oo kale ayaan
beenaale noqonayaa, laakiinse waan aqaannaa isaga, eraygiisana waan xajiyaa. [56] Aabbihiin
Ibraahim wuxuu ku farxi lahaa inuu maalintayda arko, wuuna arkay oo wuu ku farxay. [57] Marka
Yuhuuddii waxay ku yidhaahdeen Ma adigoon wali konton jir gaadhin ayaad Ibraahim aragtay?
[58] Ciise ayaa ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Ibraahim oon jirin ayaan jiray.
[59] Markaasay dhagax u gurteen si ay u dhagaxyeeyaan, balse Ciise intuu dhuuntay ayuu
macbudka ka baxay.

### Ciise Wuxuu Bogsiiyay Nin Indha La'aan Ku Dhashay

**9** Marka Ciise isaga oo socda wuxuu arkay nin indha la'aan ku dhashay. [2] Deedna xertiisii ayaa
waydiiyay Macallinow, yaa dembaabay, ma ninkan mise waalidkii oo sidaas ayuuna indha
la'aan ugu dhashay? [3] Ciise ayaa ugu jawaabay Ninkan iyo waalidkii toona midna ma
dembaabin, balse in shaqada Eebbe lagu muujiyo isaga ayay u dhacday. [4] Waa inaynu intay
maalin tahay shaqadii kii i soo diray qabano; habeen baa iman doona mar aan ninna shaqayn

karin. 5 Waxaan ahay nuurkii dunida Intaan dunida joogo. 6 Markuu sidaa yidhi, ayuu candhuuf
dhulka ku tufay oo candhuuftii ayuu dhoobo ka sameeyay dhoobadiina ninkii ayuu indhaha ka
mariyay 7 Deedna wuxuu ku yidhi, Bax oo ku soo maydho balliga Siloo'am la yidhaahdo (oo
fasirkiisii yahay, waa la diray.) Markaasuu intuu tegay ku soo maydhay, oo isaga oo wax arka
ayuu yimid. 8 Marka dariskii iyo kuwii markii hore arki jiray inuu dawarsade yahay, waxay
yidhaahdeen Kanu miyuuna ahayn kii intuu fadhiisto dawarsan jiray? 9 Qaar waxay
yidhaahdeen Waa isagii, qaarna waxay yidhaahdeen Ma ahee wuu u egyahay. Isaguna wuxuu
lahaa War waa Anigii. 10 Markaasay ku yidhaahdeen Oo siday Haddaba indhahaagu ku
furmeen? 11 Wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Ninka Ciise la yidhaahdo ayaa intuu dhoobo
sameeyay indhaha iga mariyay, oo igu yidhi, Orod oo harada Siloo'am ku soo qabayso,
deedna intaan tegay, ayaan ku soo qabaystay oo waxbaan arkaa. 12 Markaasay ku
yidhaahdeen Xagguu jiraa? Isaguna wuxuu ku yidhi, Maxaan ka ogahay. 13 Markaasaa ninkii
markii hore indhaha la'aa Farrisiintii u geeyeen. 14 Marka maalintuu Ciise intuu dhoobada
sameeyay ninka indhaha u furay Sabti bay ahayd. 15 Sidaa darteed Farrisiintii mar kale ayay
isaga waydiiyeen siduu wax ku arkay. Markaasuu ku yidhi, Dhoobo ayuu indhahayga mariyay,
deedna waan maydhay, oo wax baan arkay. 16 Sidaa darteed Farrisiinta qaarkood waxay
yidhaahdeen Ninkanu Eebbe kama imanin, waayo, Sabtida ma ilaalinayo. Qaar kalena waxay
yidhaahdeen Siduu nin dembiile ahu mucjisooyinkan oo kale u samayn karaa? Markaasay kala
qaybsameen. 17 Ka dibna ninkii indhaha la'aa ayay ku yidhaahdeen War adigu maxaad ka
leedahy isaga illeen adiguu idhaha kuu furaye? Wuxuu ku yidhi, Waa nebi. 18 Balse Yuhuuddu
mayna rumaysanin inuu indha la'aa, oo uu araggiisa helay, ilaa oy ninkii aragga helay
waalidkiisa u yeedhaan, 19 Oy waydiiyaan, iyaga oo leh Kanu ma wiilkiinnii aad tidhaahdeen
indhala'aan buu ku dhashaybaa? Siduu hadda wax ku arkaa? 20 Waalidkii waxay ugu
jawaabeen Kani inuu wiilkayagii indhala'aanta ku dhashay yahay waannu garanaynaa, 21 Balse
siduu hadda wax ku arko iyo cidda indhaha u furtay ma garanayno. Isaga waydiiya. Waa nin
wayn oo isagaa isu hadli karee. 22 (Waalidkiisu Waxay sidaas u yidhaahdeen, Yuhuudda ayay
ka cabsadeen. Maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay mar hore ku heshiiyeen inay qofkii qirta inuu
Ciise yahay Masiixa, sunagoggga ka eryaan.) 23 Sidaa darteed ayay waalidkiisu u yidhaahdeen
Waa nin wayne isaga waydiiya. 24 Markaasay haddana ninkii indhaha la'aan jiray u yeedheen
oo ku yidhaahdeen War Eebbe ammaan. Waxaannu ognahay inuu ninkanu dembiile yahay.
25 Markaasuu ku jawaabay Inuu dembiile yahay iyo in kale ma garanayo, balse waxa keliyeen
ogahay, waa inaan indha la'aa, oo aan hadda wax arkayo. 26 Markaasay ku yidhaahdeen
Muxuu kugu sameeyay? Siduu indhahaaga u furay? 27 Wuxuu ugu jawaabay Horaybaan idiinku
sheegay oo ma aydaan maqlin. Maxaad u doonaysaan inaad mar kale maqashaan? Idinkuna
ma inaad xertiisa noqotaan baad doonaysaan? 28 Markaasay caayeen oo ku yidhaahdeen
Adigaa xertiisa ah, annagu xertii Muuse ayaannu nahay. 29 Inuu Eebbe Muuse la hadlay
waannu ognahay, balse ninkanu meeshuu ka yimid ma garanayno. 30 Marka ninkii ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Waa yaab indhaha ayuu ii furay idinkuna meeshuu ka yimid, ma
garanaysaan. 31 Waannu ognahay inuuna Eebbe dembiileyaasha aqbalin, laakiin qof kasta oo
doonistiisa yeela oo caabuda Eebbe wuu aqbalaa. 32 Ilaa iyo Bilowgii dunida lama maqal nin
indhaha la'aan ku dhashay cid indhaha u furtay. 33 Ninkanu hadduuna Eebbe ka imanin, waxba
muusan samayn kareen. 34 Markaasay ugu jawaabeen War ma adigoo gabi ahaantaaba dembi
ku dhashay ayaad anaga wax na baraysaa? Deedna dibadday u eryeen.

## Indha La'aanta Xagga Ruuxa Ah

35 Ciise ayaa maqlay inay dibadda u eryeen, markaasuu la kulmay oo wuxuu ku yidhi, Wiilka
aadanaha ma rumaysantahay? 36 Markaasuu ku jawaabay Waa ayo Sayidow, aan rumeeyee?
37 Ciise ayaa ku yidhi, Waad aragtaa isaga oo waa kan kula hadlayaa. 38 Markaasuu yidhi,
Waan rumeeyay Sayidow. Wuuna u sujuuday. 39 Deenna Ciise ayaa yidhi, Dunidan xukun
ayaan ula imid, si ay kuwa aan wax arkina wax u arkaan, kuwa wax arkana u idho beelaan.
40 Farrisiinta qaarkood oo la joogay ayaa markay taas maqleen ku yidhi, Annaguna miyaannu
indha la' nahay? 41 Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad indha la'aan lahaydeen, dembi maydaan
lahaateen, balse hadda waxaad tidhaahdaan, Wax baanu aragnaa, sidaa darteed dembigiinu
wuu sii jiri doonaa.

## Waxaan Ahay Adhijiraha Wanaagsan

**10** Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii aan xerada idaha illinka ka soo gelin ee meel kale
ka soo fuulaa, kaasi waa tuug iyo budhcad. 2 Balse kii illinka ka soo galaa waa adhijirka idaha.
3 Waardiyuhuna isaga albaabkuu ka furaa, iduhuna codkiisay maqlaan, idihiisa ayuu
magacyadooda ugu yeedhaa, oo dibadduu u kaxeeyaa. 4 Markuu kuwiisa wada saarana, wuu
hor kacaa, iduhuna way raacaan, waayo, codkiisay garanayaan. 5 Nin qalaadna ma raacaan,
balse way ka cararaan, waayo, codka kuwa qalaad ma garanayaan. 6 Tusaalahaas ayuu Ciise
kula hadlay iyaga, balse mayna fahmin waxa uu ka hadlayo.

## Ciise Waa Adhijirka Wanaagsan

7 Deedna Ciise ayaa mar kale ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Waxaan ahay
illinka idaha. 8 Kuwii iga horreeyay oo dhan tuug iyo budhcad bay ahaayeen, balse iduhu
mayna maqlin[107*] 9 Waxaan ahay albaabka oo qofkii iga soo gala, wuu badbaadi doonaa, oo
wuu soo geli doonaa oo wuu bixi doonaa, daaqna wuu heli doonaa. 10 Tuuggu wax kale uma
yimaado inuu wax xado oo dilo oo baabi'yo mooyee, aniguse waxaan u imid inay nolosha
helaan oy hodantinimo ku helaan. 11 Anigu waxaan ahay adhijiraha wanaagsan. Adhijiraha
wanaagsana idaha dartood ayuu naftiisa u bixiyaa. 12 Xoogsadaha ayna iduhu kuwiisa ahayna
markuu arko yeeyda oo soo socota ayuu idaha ka tagaa oo ka cararaa. Markaasay yeeydu
weerartaa iyaga oo kala firdhisaa. 13 Xoogsaduhu wuu cararaa, waayo, waa xoogsade, oo
idaha waxba kama gelin. 14 Anigu waxaan ahay adhijirka wanaagsan; oo waan aqaanaa
kuwayga, kuwayguna way i yaqaanaan, 15 Sida Aabbuhu ii yaqaano, anna aan Aabbaha u
aqaano; oon naftayda idaha dartood ugu bixiyo. 16 Ido kale ayaan leeyahay oon kuwa xeradan
ahayn, kuwaasna waa inaan keeno oo codkaygay maqli doonaan oo waxaa jiri doona adhi
keliya iyo adhijire keliya. 17 Sidaa darteed Aabbuhu wuu i jecelyahay, waayo, naftayda ayaan
bixiyaa si aan mar kale u qaato. 18 Ninna igama qaado, balse anigaa iska qaada. Waxaan
leeyahay awood aan iskaga qaado iyo awood aan haddana kula soo noqdo. Aabbahay ayaa
sidaa igu amray. 19 Yuhuuddii ayaa haddana hadalkaa ku kala qaybsamay. 20 Marka in badan
oo iyaga ka mid ah waxay yidhaahdeen Shaydaan baa ku jira oo wuu waalanyahaye ee
maxaad ka dhagaysanaysaan? 21 Qaar kalena waxay dheheen Hadalladaasu ma aha hadallo
nin shaydaan ku jiro. Shaydaanku miyuu nin indha la' indhaha u furi karaa?

---

107 Kitaabka Wax Qabadkii Xawaariyiinta 5:33-39

## Yuhuuddu Ciise Way Beeniyeen

22 Ciidda daahirinta ayaa Quddus u soo gashay, waxayna ahayd wakhtiga qaboobaha.
23 Ciisena wuxuu dhex socday Balbalada Sulaymaan ee macbudka. 24 Markaa Yuhuuddii ayaa
hareerihiisa ku soo uruuray oo waxay ku yidhaahdeen Ilaa goormaad shaki nagu sii wadi
doontaa? Haddaad Masiixa tahay si cad noogu sheeg. 25 Ciise ayaa ugu jawaabay Waan idiin
sheegay, balse ma rumaynaysaan. Shaqada aan magaca Aabbahay ku sameenayo ayaa ii
marag furaysa, 26 Laakiin ma rumaynaysaan, waayo, idahayga kamid ma tihidin. 27 Idahaygu
codkaygay maqlaan oo waan garanayaa iyaga, wayna i raacaan. 28 Oo waxaan siiyaa iyaga
nolosha weligeed ah oo weligood ma halaagmi doonaan, oo ninna gacantayda kama dhufsan
doono. 29 Aabbahaygii iyaga i siiyay ayaa cid walba ka wayn, oo ninna gacanta Aabbahay
kama dhufsan karo. 30 Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay. 31 Markaasay Yuhuuddu dhagax
u gurteen si ay u dhagaxeeyaan. 32 Ciise ayaa ugu jawaabay Shaqooyin badan oo wanaagsan
ayaan xagga Aabbahay idinka tusay. Ee teed kuwaas igu dhagaxaynaysaan? 33 Yuhuuddu
waxay ugu jawaabeen Shaqo wanaagsan aawadeed kuguma dhagaxyaynayno, balse AF
lagaadadaada aawadeed, maxaa yeelay adiga oo banii Aadan ah ayaad Eebbe iska
dhigaysaa. 34 Ciise wuxuu ugu jawaabay Miyayna sharcigiina ku qornayn Waxaan idhi, Idinku
ilaahyaad tihiin[108*]? 35 Hadduu Eebbe kuwii eraygiisu u yimid ilaahyo ku sheegay oo aan
kitaabka la jabin karin, 36 Maxaad kii Aabbuhu qudduus ka dhigay ee uu dunida u soo diray ugu
leedihiin Waad caytamaysaa, waayo, waxaan idhi: Wiilkii Eebbe baan ahay? 37 Haddaanan
shaqada Aabbahay samaynaynin, ha i rumaynina. 38 Balse haddaan sameeyo, in kastoo
aydaan aniga i rumaysanayn, balse ogaada oo fahma in Aabbuhu igu jiro, anna aan Aabbaha
ku jiro. 39 Sidaa darteed mar kale ayay isku dayeen inay qabtaan, wuuna ka baxsaday
gacantooda. 40 Marka Ciise wuxuu u kacay Urdun shishadeeda meeshuu Nebi Yaxye markii
hore ku biyo galiyay, oo meeshaas ayuu iska joogay, 41 Oo kuwo badan ayaa isaga u yimid, oo
waxay yidhaahdeen Runtii Nebi Yaxye mucjiso ma samaynin, balse wax kasta oo uu ninkan ka
sheegay runbay ahaayeen. 42 Deedna kuwo badan ayaa halkaas isaga ku rumeeyay.

## Ciise Wuxuu Sarakiciyay Laasaros

**11** Waxaa jiray nin la odhan jiray Laasaros oo ku bukay tuulada Betaniya ee Maryama iyo
walaasheed Maarta. 2 (Maryama waa Laasaroska buka walaashii waana tii Rabbiga cadarka u
marisay ee cagihiisa timaheeda ku masaxday.) 3 Sidaa darteed walaalihii farriin bay isaga u
direen iyaga oo leh Sayidow, kii aad jeclayd wuu bukaa. 4 Laakiin Ciise markuu taas maqlay
wuxuu yidhi, Bukaankanu kii dhimashada ma aha, balse waa ammaanta Eebbe oo waa in
Wiilka Eebbe lagu ammaano. 5 Ciise wuu jeclaa Maarta iyo walaasheed iyo Laasarosba.
6 Sidaa darteed markuu maqlay inuu buko, laba maalmood oo kale ayuu meeshuu joogay sii
joogay. 7 Ka dibna wuxuu xertii ku yidhi, Ina wadiya aynu haddana Yahuudiya tagnee. 8 Xertii
waxay ku yidhaahdeen Macallinow, mar dhaw Yuhuuddu waxay doonayeen inay ku dhagax
tuuran, imikana waxaad doonaysaa inaad mar kale meeshaas tagto? 9 Ciise ayaa ugu
jawaabay Miyayna Maalintu laba iyo toban saacadood ahayn? Qof hadduu maalintii socdo ma
turunturroodo, waayo, wuxuu arkaa iftiinka dunidan. 10 Balse hadduu qofku habeenkii socdo,
wuu turunturroodaa, waayo, isagu iftiin ma haysto. 11 Markuu sidaa yidhi, dabadeed wuxuu ku
yidhi, iyaga Saaxiibkeen Laasaros wuu hurdaa, balse waa inaan u tego oon soo toosiyo.
12 Marka xertii ayaa ku yidhi, Sayidow, hadduu hurdo wuu bogsanayaa. 13 Ciise wuxuu ka

108 Baxniintii 4:10-17

hadlayay dhimashada, iyaguse waxay u maleeyeen inuu ka hadlayo nasashada hurdada.
[14] Deedna Ciise ayaa si cad ugu yidhi, Laasaros wuu dhintay. [15] Aniguna waan ku
faraxsanahay idinka aawadiin inaanan halkaas joogin si aad u rumaysaan, ina kiciya aynu u
tagnee. [16] Marka Toomaskii Didumos la odhan jiray, ayaa xertii la socotay ku yidhi, Innaguna
aynu tagno oon la dhimano isaga.

## Anigu Waxaan Ahay Sarakicidda Iyo Nolosha

[17] Deedna markuu Ciise yimid wuxuu ogaaday inuu afar maalmood xabaasha ku jiray.
[18] Beytaniya Quddus ayay u dhawayd, oo waxay u jirtay qiyaastii laba mayl. [19] Yuhuud badan
ayaana u yimid Maarta iyo Maryama si ay walaalkood uga tacsiyeeyaan. [20] Maarta markay
maqashay inuu Ciise imanayo, ayay ka hor tagtay, Maryamana gurigay iska joogtay. [21] Marka
Maarta waxay Ciise ku tidhi Sayidow, haddaad halkan joogto, walaalkay ma dhinteen. [22] Balse
Waxaan ogahay in wax alla waxaad Eebbe wayddiisato uu ku siinayo. [23] Ciise wuxuu ku yidhi,
Walaalkaa wuu sarakici doonaa. [24] Maarta waxay ku tidhi Waan ogahay inuu aakhiro maalinta
qiyaamada mar kale sarakici doono. [25] Ciise ayaa ku yidhi, iyada Anigu waxaan ahay
sarakicidda iyo nolosha. qof alla qofkii i rumeeya, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa.
[26] Qof kasta oo nool oo i rumeeyana weligii ma dhiman doono. Ma rumaysantahay taas?
[27] Waxay ku tidhi Haah, Sayidow, waan rumaysanahay inaad Masiixa Wiilka Eebbe ee dunida
imanaya tahay.

## Ciise Wuu Ooyay

[28] Markay sidaa tidhi ayay tagtay oo walaasheed ayay u yeedhay oo si qarsoodi ah ayay ugu
tidhi Macallinkii halkanuu joogaa, wuuna kuu yeedhayaa. [29] Iyaduna markay sidaa u
maqashayba, deg deg bay u kacday oo way u timid. [30] Ciise weli tuulada ma uuna soo galin, ee
wuxuu weli joogay meeshii Maarta kaga hor tagtay. [31] Marka Yuhuuddii iyada guriga la joogtay
ee u tacsiyaynaysay, markay arkeen Maryama inay deg deg u kacday oo baxday, way
raaceen, iyaga oo u malaynaya inay xabaashii tegayso oy halkaas ku soo barooranayso.
[32] Deedna Maryama markay timid meeshuu Ciise joogay oy isaga aragtay, cagihiisay ku
dhacday iyada oo ku leh Sayidow, haddaad halkan joogi lahayd, walaalkay ma dhinteen.
[33] Ciise markuu arkay iyada iyo Yuhuuddii la socotay oo la barooranayay, ayuu ka qalbi
xumaaday, wuuna murugooday. [34] Markaasuu yidhi, Xaggeed dhigteen isaga? Waxay ku
yidhaahdeen Sayidow, kaalay oo arag. [35] Ciise wuu ooyay [36] Markaasay Yuhuuddii
yidhaahdeen Bal eega, siduu u jeclaa. [37] Qaarkoodna waxay yidhaahdeen Ninkan kii indhaha
la'aa indhaha u furay, miyuusan ninkan dhimashada ka badbaadin karin?

## Laasaros Waa la Soo Nooleeyay

[38] Marka Ciise oo mar kale murugaysan ayaa xabaashii yimid. Waxayna ahayd god, dhagax
afka laga saaray. [39] Ciise ayaa yidhi, Dhagaxa ka qaada. Maarta maydka walaashii ayaa ku
tidhi Sayidow, hadda wuu urayaa, waayo, afar maalmood ayuu mootanaa. [40] Ciise wuxuu ku
yidhi, miyaanan kugu odhanin, Haddaad rumayso, ammaanta Eebbe ayaad arki doontaa?
[41] Markaasay xabaashii maydku yaallay dhagaxii ka qaadeen. Ciisena intuu kor eegay ayuu
yidhi, Aabbow, waan kaaga mahad celinayaa inaad i maqashay. [42] Waanan ogaa inaad mar
kasta i maqasho, balse dadkan igu hareeraysan aawadood ayaan sidaas u idhi si ay u

rumeeyaan inaad adigu i soo dirtay. 43 Markuu sidaa yidhi, dabadeed ayuu kor u dhawaaqay
Laasarosow, soo bax. 44 Markaasuu maydkii soo baxay, isaga oo gacmaha iyo lugahaba
kafankii kaga xidhan, wejigana maro kaga duubantahay. Ciise wuxuu ku yidhi, iyaga War ka
fura oo daaya, ha socdee.

### Shirqoolkii La Doonayay In Ciise Lagu Dilo

45 Marka kuwo badan oo Yuhuuddii Maryama u yimid ah markay arkeen wuxuu sameeyay way
rumeeyeen. 46 Qaarkoodna intay Farrisiintii, u tageen ayay Ciise wuxuu sameeyay u sheegeen.
47 Deedna wadaaddadii sare iyo Farrisiintii ayaa shir isugu yimid oo waxay yidhaahdeen War
Maxaynu yeelnaa? Waayo, ninkanu mucjisooyin badan ayuu samaynayaa. 48 Oo Haddaynu
sidan ku dayno, dadka oo dhan isagay rumaynayaan, ka dibna Roomanka ayaa imanaya, oo
dhulkeena iyo ummaddeennaba qaadan doona.

49 Marka mid ka mid ah oo Kayafas la odhan jiray, oo wadaadka sare sannadkaas ahaa, ayaa
ku yidhi, War Waxba ma garanaysaan, 50 Oo ma ogidin inay idiin fiicantahay in nin keliya uu
dhinto intay ummadda oo dhan baabi'i lahayd. 51 Muuna iska hadal, balse maadaama oo uu
wadaadka sare ee sannadkaas ahaa, wuxuu sii sheegay inuu Ciise ummadda u dhiman
doono, 52 Ummadda oo keliya ma aha, balse inuu mideeyo carruurta Eebbe ee kala firidhsan
oo uu mid ka dhigo. 53 Marka maalintaa laga billaabo waxay ku tashadeen inay Ciise dilaan.
54 Sidaa darteed mar dambe Ciise Yuhuudda si cad uma dhex marin, balse intuu meeshaas ka
tegay ayuu magaalo baadiyaha u dhaw oo Efrayim la odhan jiray tegay, oo halkaas ayuu xerta
la joogay. 55 Marka Ciiddii Yuhuudda ee Kormaridda ayaa soo dhawaatay, oo kuwo fara badan
ayaa tuulooyinka ka tegay oo Quddus u kacay si ay Ciidda ka hor isu sii daahiriyaan.
56 Markaasay Ciise raadiyeen, oo waxay isku yidhaahdeen, iyaga oo macbudka dhex taagan
Maxay idinla tahay? tolow ciidda ma iman doonaa? 57 Wadaaddadii sare iyo Farrisiintuna
waxay amar ku bixiyeen hadduu qof ogyahay meesha uu joogo inuu soo sheego, si loo qabto.

### Ciise Oo Magaalada Beytaniya Lagu Subkay

**12** Markay Ciidda kormaridda lix maalmood ka hadhsantahay, Ciise wuxuu yimid Beytaniya,
meeshuu Laasaroskii Ciise kuwii dhintay ka soo sarakiciyay ku noolaa. 2 Marka Casho ayay
halkaa ugu sameeyeen, Maartana way adeegaysay, Laasarosna wuxuu ka mid ahaa kuwa
miiska cuntada la fadhiyay. 3 Marka Maryama waxay qaadday cadar naaradiin qaali ah, oo
waxay marisay cagaha Ciise, deedna timaheedii ayay cagihiisa ku masaxday. marka Gurigii
waxaa ka buuxsamay udgoonkii cadarka. 4 Laakiin Yuudas Iskariyod oo xertiisa ka mid ahaa,
oo marka dembe khayaani doona, ayaa yidhi, 5 Maxaa cadarkan intii saddex boqol oo dinaar
loogu iibiyo masaakiinta loo siin waayay? 6 Hadalkaa uma odhanin inuu masaakiinta
danaynayo, balse tuug buu ahaa, sanduuqa sadaqadana isagaa hayn jiray oo wixii lagu ridaba
kala bixi jiray. 7 Marka Ciise ayaa yidhi, War Daaya. Waxay cadarkan u kaydisay maalinta
aaskayga. 8 Waayo, masaakiintu mar walba way idinla joogaan, balse anigu mar walba
idinlama joogo. 9 Deedna dad fara badan oo Yuhuud ah waxay ogaadeen inuu halkaa joogo,
wayna u yimaaddeen, Ciise kaliya darteed mayna u imanin, balse inay sidoo kale Laasaroskii
uu kuwii dhintay ka soo sarakiciyay soo arkaan. 10 Marka Wadaaddadii sare ayaa ka wada

hadlay siday Laasaros ku dili lahaayeen. [11] Waayo, sababtiisa ayay Yuhuud badani Ciise ugu
tageen oy u rumeeyeen.

### Ciise Quddus Buu Guul Ku Galay

[12] Maalin labaaddii dad fara badan ayaa Ciidda yimid markay maqleen inuu Ciise Quddus
imanayo, [13] Markaasay iyaga oo laamo timir ah wata, ka hor tageen si ay u soo dhaweeyaan,
iyaga oo ku qaylyaya Hoosanna! Waxaa barakaysan ka magaca Rabbiga ku imanaya oo
boqorka Israa'iil ah. [14] Ciisena dameer yar ayuu helay oo uu fuulay, sida qoran, [15] Ha cabsanin,
gabadhii Siyoonay; Bal eeg, Boqorkaagii wuu imanayaa isaga oo qayl dameer fuushan.[109*]
[16] Markii hore xertiisu arrintaas maysan fahmin, bale markii Ciise la ammaanay dabadeed ayay
xusuusteen in aayaddaas isaga iyo waxa isaga lagu sameeyay laga qoray. [17] Marka dadkii fara
badnaa ee la joogay markuu Laasaros xabaasha uga yeedhay ee uu kuwii dhintay ka soo
sarakiciyay ayaa warkiisa faafiyay. [18] Sababtaas aawadeed dad fara badan ayaa la kulmay,
waayo, waxay maqleen inuu mucjiso sameeyay. [19] Deedna Farrisiintii waxay isku yidhaahdeen
Waad aragtaan sida aydaan waxba uga qaban karin. bal eega, dunidii oo dhan way raacday.

### Ciise Dhimashadiisii Ayuu Sii Sheegay

[20] Kuwa Ciidda u kacay si ay usoo cibaadaystaan, waxaa ku jiray kuwo Giriig ah. [21] Marka
waxay u yimaaddeen Filiboskii reer Beytsaydaydii Galili, oo waxay ku yidhaahdeen Sayidow,
waxaannu doonaynaa inaannu Ciise aragno. [22] Marka Filibos intuu Andaros u yimid ayuu u
sheegay deedna Andaros iyo Filibos ayaa Ciise u wada tegay oo way u sheegeen. [23] Marka
Ciise wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Saacaddii uu Wiilka Aadanuhu ammaanmi lahaa waa la
gaadhay. [24] Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, xabbadda sarreenka ahu haddayna dhulka
ku dhicin oyna dhimanin, keligeed bay ahaataa, balse hadday dhimato, midho badan ayay
dhashaa. [25] Qof alla qofkii naftiisa jeclaada, wuu waayi doonaa, qofkii naftiisa dunidan ku
dayriyana, wuxuu ku badbaadin doonaa nolosha weligeed ah. [26] Qofkii ii adeega waa inuu i soo
raaco oo meeshaan joogo ayuu adeegahayguna joogi doonaa. Qofkii ii adeega, Aabbahay baa
maamuusi doonaa. [27] Hadda naftaydu way murugaysantahay, marka maxaan idhaahdaa?
Aabbow, saacaddan iga badbaadi; Laakiinse sababtaas darteed ayaan saacaddan u imid.
[28] Aabbow, magacaaga ammaan. Deedna cod baa samada ka yidhi, Waan ammaanay,
waanan ammaani doonaa. [29] Marka dadkii la joogay way maqleen, oo waxay yidhaahdeen
Waa unkad. Qaarna waxay yidhaahdeen Malag baa isaga la hadlay. [30] Ciise ayaa u
jabawaabay oo ku yidhi, Codkaasu aawaday uma imanin, laakiin aawadiin ayuu u yimid.
[31] Hadda waa wakhtigii dunidan la xukumi lahaa, Hadda ayaa amiirka dunidan dibadda loo
saari doonaa. [32] Anigana markii dhulka kor la iiga qaado dadka oo dhan xaggaygaan u soo jiidi
doonaa. [33] Wuxuu sidaas u yidhi, si uu u muujiyo qaabka uu ku dhiman doono.

[34] Deedna dadkii ayaa yidhi, Sharciga waxaanu ka maqalnay in Masiixu weligii joogi doono, ee
maxaad u leedahay Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado? Waa ayo Wiilka Aadanuhu?
[35] Marka Ciise ayaa ku yidhi, Nuurku in yar buu idinla joogaa ee intaad nuurka haysataan
socda yuuna gudcurku idin soo gaadhine. qofkii gudcurka ku socda ma oga meeshuu u socdo.

---

109 Sakariye 9:9

[36] rumaysta nuurka Intaad nuurka haysataan, si aad wiilasha nuurka u noqotaan. Ciise markuu
hadalkii dhammeeyay ayuu tegay oo ka dhuuntay iyaga.

### Yuhuuddu Beenintoodii Ayay Ku Sii Socdeen

[37] Laakiin inkastoo uu mucjisooyin badan hortooda ku sameeyay hadana mayna rumaynin
isaga; [38] Si uu hadalkii Nebi Ishacyaah u xaqiiqoobo Rabbiyow, yaa warkayaga rumeeyay Oo
yaa xooggii Rabbiga loo muujiyay[110*]? [39] Sababtaa ayay u rumaysan waayeen, waayo,
Ishacaah wuxuu haddana yidhi, [40] Wuu indha tiray iyaga, qalbigoodana wuu adkeeyay, si ayna
indhahooda wax ugu arag, oyna qalbigooda wax ugu fahmin, oyna u toobadkeenin, oona u
bogsiininn. [41] Ishacyaah ayaa sidaas yidhi, markuu ammaantiisa arkay, wuuna ka hadlay isaga.
[42] Hase yeeshee qaar badan oo madaxda ka mid ahaa ayaa rumeeyay, balse cabsi ay
Farrisiinta ka qabaan aawadeed mayna si cad u qiranin si aan sunagogga looga saarin,
[43] Waayo, ammaanta Eebbe waxay ka jeclaadeen ammaanta dadka. [44] Ciise ayaa ku
dhawaaqay oo yidhi, Kii i rumeeya kaligay ma rumeeyo balse wuxuu rumeeyaa kii i soo diray.
[45] Kii i arkaana, wuxuu arkaa kii i soo diray. [46] Waxaan dunida u imid inaan nuur u ahaado, si
qof kasta oo i rumeeya uusan gudcurka ugu sii jirin. [47] Ninkii erayadayda maqla oon ku
dhaqmin, xukumi maayo, waayo, uma imanin inaan dunida xukumo, balse inaan badbaadiyo.
[48] Kii i diida oon erayadayda aqbalin, waxaa jira mid xukumi doona; erayga aan ku hadlayo
ayaa maalinta aakhiro isaga xukumi doona. [49] Waayo, anigu doonistayda kuma hadlo, balse
Aabbihii i soo diray ayaa i faray waxaan odhanayo iyo waxaan ku hadlayaba. [50] Oo waan
ogahay inay farriintiisu nolosha weligeed ah tahay. Sidaa darteed waxaan odhanayo siduu
Aabbuhu i faray ayaan u idhaahdaa.

### Ciise Xertiisuu Cagaha U Maydhay

**13** Haddaba Ciidda Kormaridda ka hor, Ciise wuxuu ogaaday inay saacaddiisii uu dunidan ka
tegi lahaa ee uu Aabbaha u tegi lahaa timid, kuwiisa dunida joogana aad buu u jeclaa, jecayl
ilaa iyo heerka ugu dambeeya. [2] Marka Iblayska ayaa mar horeba qalbiga Yuudas Iskariyod ina
Simoon galiyay inuu Ciise khayaano. [3] Ciise isaga oo og in Aabbuhu wax walba siiyay oo uu
Eebbe ka yimid Eebbena ku noqonayo, [4] Ayuu cashadii ka kacay oo intuu dharkii iska dhigay,
ayuu tuwaal qaatay oo guntaday. [5] Markaasuu biyo weel ku shubay oo billaabay inuu xertiisa
cagaha u maydho oo uu tuwaalkuu guntanaa ku tirtiro. [6] Markuu Simoon Butros soo gaadhay
wuxuu ku yidhi, Sayidow, ma adigaa cagaha ii maydhaya? [7] Ciise ayaa ugu jawaabay oo ku
yidhi, Waxaan samaynayo hadda ma garanaysid, balse mar dembe ayaad garan doontaa.
[8] Butros ayaa ku yidhi, Weligaa cagahayga maydhi maysid. Ciise ayaa ugu jawaabay oo ku
yidhi, Haddaana kuu maydhin, nasiib iguma lihid. [9] Marka Simoon Butros wuxuu yidhi,
Sayidow, cagaha oo keliya ma ahee gacmaha iyo madaxaba ii maydh. [10] Ciise ayaa ku yidhi,
Kii maydhan uma baahna inuu maydho cagihiisa mooyee, balse waa wada nadiif, idinkuna
nadiif baad tihiin, laakiin kuligiin maya. [11] Waayo, wuu ogaa ka khayaani doona. Sidaas ayuu u
yidhi, Dhammaantiin nadiif ma wada tihin. [12] Deedna markuu iyaga cagaha u maydhay ayuu
intuu dharkiisii qaatay, iska fadhiistay, markaasuu ku yidhi, Ma fahanteen waxaan idinku
sameeyay? [13] Waxaad iigu yeedhaan, Macallin iyo Sayid, waadna ku saxantihiin, waayo, waan
ahay. [14] Marka haddaan cagaha idiin maydhay aniga oo Sayid iyo Macallin ah, idinkuna waa

110 Ishacyaah 53:1

inaad cagaha isu maydhaan. [15] Tusaale ayaan idin siiyay marka sidaan idinku sameeyay waa
inaad isku samaysaan. [16] Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay: Addoon kama wayna
sayidkiisa, mid la soo dirayna kama wayna kii soo diray. [17] Haddaad taas garateen, waad
barakaysantihiin haddaad ku dhaqantaan. [18] Dhammaantiin kama hadlayo; oo waan ogahay
kuwaan doortay. Balse wuxuu Kitaabku sheegay waa inay dhacaan Kii cuntadayda cunay ayaa
igu fallaagoobay. [19] Hadda ayaan idiin sii sheegayaa intayna dhicin ka hor, si markay dhacaan
aad u rumaysaan inaan Anigu isagii ahay. [20] Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii aqbala
kii aan soo diro aniguu i aqbalaa, oo kii i aqbalana wuxuu aqbalaa kii i soo diray.

### Ciise Wuxuu Muujiyay Ka Khayaani Doona

[21] Ciise markuu sidaas yidhi, dabadeed wuu qalbi xumaaday, oo si cad ayuu u yidhi, Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, Midkiin ayaa i khayaani doona. [22] Marka xertii ayaa is eegtay
iyaga oon ogayn kuu ka hadlayay. [23] Marka mid xertiisa ka mid ah, oo ah kii uu Ciise jeclaa
ayaa laabta Ciise ku tiirsanaa. [24] Deedna Simoon Butros ayaa u iljabiyay oo ku yidhi, Noo
sheeg dheh Waa kuma ka uu ka hadlahayo. [25] Marka xerowgas ayaa intuu laabta Ciise ku
tiirsaday ku yidhi, Sayidow, waa kuma? [26] Ciise ayaa ugu jawaabay Waa kan aan cantuugada
aan suugada galinayo siinayo. Deedna intuu furinkii suugada daray ayuu Yuudas Iskariyod ina
Simoon siiyay. [27] Ka dibna markuu sidaa furinkii u cunay Shaydaan ayaa isaga galay. Ciisena
wuxuu ku yidhi, Waxaad samaynayso deg deg u samee. [28] Kuwii la fadhiyay midkoodna ma
fahmin sababta uu sidaas ugu yidhi, isaga. [29] Maxaa yeelay Yuudas kaasheer ayuu ahaa oo
waxay u maleeyeen inuu Ciise ku yidhi, Waxaynu Ciidda u baahannahay soo iibi, ama,
Masaakiinta wax sii. [30] Yuudas markuu sidaa furinkii u cunay ayuu baxay habeen bayna ahayd.

### Amar Cusub

[31] Markuu sidaa u baxay, Ciise wuxuu yidhi, Hadda ayuu wiilka Aadanuhu ammaanmay,
Eebbena wuu ku ammaanmay isaga. [32] Hadduu Eebbe ku ammaanmay isaga, Eebbe qudhiisa
ayuu ammaani doona, mar dhaw ayuuna ammaani doonaa. [33] Carruuryahay in yar ayaan idinla
joogaa. Waanad i raadin doontaan, oo sidaan Yuhuuddii ku idhi, ayaan idinkana idinku
leeyahay, Meeshaan tegayo ma iman kartaan. [34] Amar cusub ayaan idin siinayaa: Midkiinba
midka kale ha jeclaado, oo sidaan idiin jeclaaday, idinkuna isu jeclaada. [35] Hadduu midkiinba
midka kale jecelaado, Sidaas ayay dadku ku garan doonaan inaad xertayda tihiin.

### Ciise Wuxuu Sii Sheegay Butros Inuu Dafiri Doono

[36] Simoon Butros ayaa ku yidhi, Sayidow, xaggeed tegaysaa? Ciise ayaa ugu jawaabay
Meeshaan tegayo hadda iima raaci kartid, balse mar dambe ayaad i soo raaci doontaa.
[37] Butros ayaa ku yidhi, Sayidow, maxaan hadda kuu raaci kari waayay? Naftayda ayaan
aawadaa u bixin doonaaye. [38] Ciise ayaa ugu jawaabay Ma naftaadaad aawaday u bixin
doontaa? Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, intuuna Diiqu ciyin saddex jeer ayaad i dafiri
doontaa.

## Ciise Waa Jidka Aabbaha Loo Maro

**14** Ha qalbi jabina. Eebbe aamina, anigana i aamina. 2 Guriga Aabbahay qolal badan ayuu
leeyahay. Haddayna sidaa ahayn waxaan idiin sheegi lahaa inaan u tegayo si aan meel idiinku
sii diyaariyo. 3 Oo haddaan tago oon meel idiin diyaariyo, waan soo noqon doonaa, oo
xaggayga ayaan idiin qaadi doonaa, si aad meesha aan joogo idinkuna u joogtaan. 4 Meesha
aan tegayana jidka loo maro waad taqaanaan. 5 Toomas ayaa ku yidhi, Sayidow, meel aad
tegaysaba ma garanaynee sideennu jidka ku garanaynaa? 6 Ciise ayaa isaga ku yidhi, Anigu
waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, inuu aniga isoo maro
mooyee. 7 Haddaad i garataan, Aabbahayna waad garan lahaydeen. Hadda laga billaabo waad
garanaysaan, waanad aragtaan. 8 Filibos ayaa ku yidhi, Sayidow, Aabbaha na tus, taasaa nagu
filane. 9 Ciise ayaa ku yidhi, Ma anigoo intaas oo dhan idinla joogay ayaadan i garanaynin
Filibosow? Kii i arkaa Aabbuhuu arkay. Sideed u tidhaahdaa Aabbaha na tus? 10 Miyaadan
rumaysnayn inaan Aabbaha ku jiro, Aabbuhuna igu jiro? Erayadaan idinku leeyahay kuwayga
ma aha, balse Aabbaha igu jira ayaa iga dhex shaqaynaya. 11 I rumeeya markaan idinku
leeyahay: Anigu Aabbahaan ku jiraa, Aabbuhuna aniguu igu jiraa, ama haddii kale
mucjisooyinka aawadood igu rumeeya. 12 Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii i rumeeya,
shaqadaan sameeyo iyo wax ka sii waynba wuu samayn doonaa, maxaa yeelay, Aabbahaan u
tegayaa. 13 Oo wax alla waxaad magacayga ku waydiisataan, waan samayn doonaa si
Aabbuhu Wiilka ugu ammaanmo. 14 Haddaad magacayga wax igu waydiisataan, waan samayn
doonaa.

## Ciise Wuxuu Ballanqaaday Ruuxa Qudduuska ah

15 Haddaad i jeceshihiin, amarradaydaad adeeci doontaan. 16 Aniguna Aabbahaan baryi
doonaa, oo wuxuu idin siin doonaa Gargaare kale oo walligiin idinla jooga, 17 Waana, Ruuxa
runta ah oyna dunidu aqbali karin, waayo, ma aragto, mana garanayso, idinkuse waad
garanaysaan, maxaa yeelay wuu idinla jiraa, wuuna idinku jiri doonaa. 18 Idinka oo agoon oo
kale ah idinkama tegayo ee waan idiin iman doonaa. 19 In yar ka dib dunidu mar dambe ima
arki doonto, balse idinku waad i arki doontaan. Maxaa yeelay Anigu waan noolahay, idinkuna
waad noolaan doontaan. 20 Maalintaas ayaad garan doontaan inaan Aabbahay ku jiro, idinkuna
aad igu jirtaan, anna aan idinku jiro. 21 Kii amarradayda haysta oo ku dhaqma, kaasu waa kan i
jecel, kii i jecelna Aabbahay baa jecel, anna waan jecelahay, waanan isu muujin doonaa isaga.
22 Yuudas (ma ah Yuudas Iskariyod) ayaa ku yidhi, isaga Sayidow, maxaad annaga isugu
kaaya muujinaysaa, oodan dunida isugu muujinayn? 23 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Hadduu qof i jecelyahay, eraygayga ayuu adeeci doonaa, oo Aabbahay ayaa jeclaan doonaa,
oo waannu u iman doonaa, oo waannu la joogi doonnaa. 24 Kii aan i jeclaynse, eraygayga ma
adeeco; erayadaad maqlaysaanna kuwayga ma aha, balse waa kuwa Aabbihii i soo diray.
25 Waxaas ayaan idinkula hadlay intaan idinla joogay, 26 Laakiinse Gargaaraha, Ruuxa
Qudduuska ah oo Aabbuhu ku soo diri doono magacayga, ayaa wax kasta idin bari doonaa, oo
wax walba oon idinku idhi idin xusuusin doonaa. 27 Nabad ayaan idiinka tegayaa, oo
nabaddayda ayaan idin siinayaa, sida dunida idiin siin maayo. Ha qalbi jabina oo ha cabsanina.
28 Waad maqasheen inaan idinku idhi: Waan tegayaa, waanan idiin imanayaa. Haddaad i
jeceshihiin, waad ku farxi lahaydeen, inaan Aabbaha u tegayo, maxaa yeelay, Aabbaha ayaa
iga wayn. 29 Hadda ayaan idiin sheegay intayna dhicin ka hor, si markay dhacaan aad u
rumaysaan. 30 Hadda ka dib in badan idinlama hadlayo, maxaa yeelay, Amiirkii dunidan ayaa

imanaya, waxbase iguma laha isagu. [31] Laakiin waa inay dunidu ogaato inaan Aabbaha
jeclahay iyo inaan siduu Aabbuhu i faray sameeyo. Kaca, oo inaga wadiya meesha.

## Geedka Canabka Ah Iyo Laamaha

**15** Anigu waxaan ahay geedka canabka ah ee runta ah; Aabbahayna waa beerfalaha. [2] Laan
walba oo igu taalla oon midho dhalin, wuu gooyaa, oo mid kasta oo midho dhashana wuu
nadiifiyaa si ay midho ka badan u dhasho. [3] Hadda nadiif baa tihiin hadalkaan idinkula hadlay
daraaddiis. [4] Igu jira, anna aan idinku jiree. Sida laantu keligeed ayna midho u dhali karin
haddayna geedka canabka ah ku oollin, idinkuna ma dhali kartaan haddaydaan igu jirin.
[5] Anigu waxaan ahay geedka canabka ah, idinkuna waxaad tihiin laamihii. Kii igu jira anna aan
ku jiro, midho badan ayuu dhalaa, maxaa yeelay, la'aantay waxba ma qaban kartaan. [6] Qofkii
aan igu jirin sida laan oo kale ayaa loo tuuraa, wuuna ingagaa, laamaha engagana waa la
uruuriyaa, oo dabkaa lagu tuuraa, oo waa la gubaa. [7] Haddaad igu jirtaan, oy erayadayduna
idinku jiraan, waydiista waxaad doontaan, waa laydiin yeeli doonaaye. [8] Markaad midho badan
dhashaan ayuu aabbahay ammaanmayaa, ood xertayda tihiin. [9] Siduu Aabbuhu ii jeclaaday,
ayaan anna idiin jeclaaday. Jacaylkayga ku jira. [10] Haddaad amarradayda adeecdaan,
jacaylkayga ayaad ku jiri doontaan, sidaan amarrada Aabbahay u addeeco, oon jacaylkiisa ugu
jiro. [11] Waxaan sidaa idiinku idhi inay farxaddaydu idinku jirto iyo inay farxaddiinu dhammays
tiranto. [12] Kanu waa amarkayga Waa inaad sidaan idiin jeclaaday isu jeclaataan. [13] Jacayl ka
wayn ma jiro, inuu qof naftiisa u bixiyo saaxiibbadiisa. [14] Waxaan idinku amro haddaad ku
dhaqantaan saaxiibbaday baad tihiin. [15] Mar dambe addoomo idiinku yeedhi maayo, maxaa
yeelay, addoonku wuxuu sayidkiisu sameeyo ma oga, balse saaxiibbo ayaan idiinku
yeedhayaa, maxaa yeelay, waxaan Aabbahay ka soo maqlay oo dhan ayaan idin ogeysiiyay.
[16] Idinku imaydaan dooranin, balse anigaa idin doortay, oo idin diray si aad u tagtaan ood
midho u dhashaan, oy midhihiinnu u waaraan, deedna wax alla waxaad magacayga ku
waydiisataan ayuu Aabbuhu idin siinayaa. [17] Kanu waa amarkayga Waa inaad is jeclaataan.

## Dunidu Way Idin Nici Doontaa

[18] Hadday dunidu idin nacdo, ogaada inay idinka ka hor i nacday. [19] Haddaad kuwa dunida
ahaan lahaydeen, dunidu kuweeda way jeclaan lahayd, laakiin kuwa dunida ma tihidin, balse
Anigaa dunida idinka doortay, sidaa darteed dunidu way idin necebtahay. [20] Xusuusta
hadalkaan idinku idhi: Addoon sayidkiisa kama wayna. Hadday i ciqaabeen, idinkana way idin
ciqaabi doonaan. oo Hadday hadalkayga addeecaan, kiinnana way addeeci doonaan.
[21] Magacayga aawadii ayay sidaa idiinku galayaan, maxaa yeelay, kii i soo diray ma
garanayaan. [22] Haddaanan imanin oo aanan la hadal, dembi mayna lahaadeen, laakiin hadda
dembigoodu cudurdaar ma laha. [23] Kii i neceb, Aabbahayna wuu necebyahay sidoo kale.
[24] Haddaanan ku dhex samaynin shaqo uusan qof kale ku dhex samaynin, dembi mayna
lahaadeen, balse hadda way arkeen oo aniga iyo Aabbahayba way na neceen. [25] Laakiin waa
inay aayadda sharcigooda ku qoran Sababla'aan ayay i necceen[111*] dhaqan gasho. [26] Laakiin
markuu yimaado Gargaaraha aan xagga Aabbaha ka soo dirayo, kaas oo ah Ruuxa runta oo
Aabbaha ka soo baxaya, wuu ii marag furi doonaa. [27] Idinkuna waad marag furi doontaan,
waayo, ilaa iyo Bilowgii waad ila joogteen.

111 Sabuur 35:19 iyo 69:4

**16** Waxaan hadalkaa idiinku idhi si aydaan u fashilmin. 2 Sunagogyada ayay idinka saari
doonaan, weliba saacad ayaa iman doonta uu qof alla qofkii idin dilaa u malaynayo inuu Eebbe
u adeego. 3 Oo waxay waxaas idiinku samayn doonaan, waayo, Aabbaha iyo Aniga toona ma
garanayaan. 4 Laakiin waxaan waxaas idiinku sheegay si markuu wakhtigu yimaado aad u
xusuusataan inaan idiin sii sheegay.

### Shaqada Ruuxa Qudduuska ah

Tan iyo Bilowgii waxaas idiinma sheegin, maxaa yeelay, waan idinla joogay. 5 Laakiin hadda
kii i soo diray ayaan u tegayaa, midkiina ima waydiinayo, Xaggeed tegaysaa? 6 Waxaas aan
idiin sheegay aawadood, qalbigiina murugo ayaa buuxisay. 7 Laakiin runbaan idiin
sheegayaaye, inaan tago ayaa idiin wanaagsan. Haddaanan tegin, Gargaaruhu idiinma iman
doono, balse haddaan tago waan idiin soo diri doonaa. 8 Oo isagu markuu yimaado wuxuu
dunida ku caddayn doonaa arrimaha khuseeya dembiga iyo xaqa iyo xukunka; 9 Dembiga,
waayo, way i rumayn waayeen; 10 Xaqa, waayo, Aabbahaan u tegayaa, mar dambana ima arki
doontaan; 11 Xukunka, waayo, amiirka dunida waa la xukumay.

12 Wax badan oon idiin sheegi lahaa ayaa jira, balse hadda ma awoodi kartaan. 13 Laakiin
markuu Ruuxa runtu yimaado, wuxuu idinku hoggaamin doonaa runta oo dhan, waayo, isagu
iskama hadlo ee wuxuu ku hadlaa wuxuu maqlo, wuxuuna idiin sheegi doonaa waxa iman
doona. 14 Wuuna i ammaani doonaa, waayo, intuu waxayga qaado, ayuu idiin sheegi doonaa.
15 Wax kasta oo Aabbuhu leeyahay anigaa leh. Sidaasaan idiinku idhi: intuu Waxayga qaado
ayuu idiin sheegi doonaa.

### Murugada Xertu Farxad Bay Isu Baddali Doontaa

16 In yar dabadeed ima arki doontaan, wax yar ka dibna waad i arki doontaan. 17 Marka xertiisa
qaarkood waxay isku yidhaahdeen Muxuu uga jeedaa markuu leeyahay In yar dabadeed ima
arkaysaan, oo in yar dabadeedna waad i arki doontaan, Maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa?
18 Muxuu ula jeedaa markuu leeyahay, in yar dabadeed? Ma fahmayno wuxuu leeyahay.
19 Ciise wuxuu ogaaday inay doonayaan inay wax waydiiyaan, oo wuxuu ku yidhi, Ma waxaad
iswaydiinaysaan, hadalkaan idinku idhi: In yar dabadeed ima arkaysaan, oo in yar dabadeedna
waad i arki doontaan? 20 Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, dunida oo faraxsan ayaad ooyi
doontaan ood barooran doontaan. Waad murugoon doontaan, balse murugaddiinnu farxad bay
isu baddali doontaa. 21 Naagtu markay umulayso, way murugootaa, waayo, saacaddeedii ayaa
timid, balse markay ilmaha umusho, dhibaatadii dib uma xusuusato farxad aawadeed, waayo,
ilmo ayaa dunida ku dhashay. 22 Hadda waad murugsantihiin, laakiin mar dambe ayaan idin
arki doonaa, qalbigiinuna wuu farxi doonaa, farxaddiinana ninna idinkama qaadi doono. 23 Oo
maalintaas waxba ima waydiin doontaan. Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddaad
Aabbaha magacayga wax ku waydiisataan wuu idin siin doonaa. 24 Ilaa iyo hadda magacayga
waxba kumaydaan waydiisan. Waydiista, waad heli doontaane, si farxaddiinnu u dhammays
tiranto.

## Dunida Anigaa Ka Adkaaday

[25] Waxaas ayaan tusaale idiinku sheegay. Balse waxaa iman doona wakhti aanan mar dambe
tusaale idinkula hadllaynin, laakiin aan si cad Aabbaha idiinku sheegi doono. [26] Maalintaas
magacaygaad wax ku waydiisan doontaan. Idin ma lihi: Anigaa Aabbaha daraaddiin u baryi
doona. [27] Waayo, Aabbaha qudhiisu wuu idin jecelyahay, maxaa yeelay, waad i jeclaateen, oo
inaan xagga Eebbe ka imid waad rumayseen. [28] Aabbaha ayaan ka imid oo dunidaan imid.
Haddana dunida waan ka tegayaa oo Aabbahaan u tegayaa. [29] Xertiisa ayaa ku yidhi, Hadda si
cad ayaad u hadlaysaa, oo tusaale kuma hadlaysid. [30] Oo waannu ognahay inaad hadda wax
walba ogtahay oodan in qof wax ku waydiiyo u baahnayn. Sidaa darteed inaad Eebbe ka timid
waannu rumaynay. [31] Ciise ayaa ugu jawaabay Hadda ma rumayseen?

[32] Bal eega saacad ayaa iman doonta, wayna timid aad kala firxan doontaan oo mid kasta iska
tegi doono ood keligay iga tegi doontaan, balse keli ma ahaan doono ee Aabbaha ayaa ila jira.
[33] Waxaan Waxaas idiinku sheegay si aad nabad iigu heshaan. Dunida dhibaataad kala kulmi
doontaan, balse kalsoonaada, dunida anigaa ka adkaaday.

## Ducadii Ciise

**17** Ciise markuu hadalkaa yidhi, ayuu samada kor u eegay oo wuxuu yidhi, Aabbow, saacaddii
way timid. Ammaan Wiilkaaga si uu Wiilku kuu ammaano, [2] Maxaa yeelay waxaad amar u
siisay dadka oo dhan, si uu kuwaad isaga siisay nolosha waligeed ah u siiyo. [3] Nolosha
waligeed ahna waa inay gartaan, inaad adigu tahay Eebbaha runta ah ee keliya iyo Ciise
Masiixii aad soo dirtay.[112*] [4] Dhulka waan kugu ammaanay, oo waan dhammeeyay shaqadii
aad ii dhiibtay inaan qabto. [5] Aabbow, hadda xaadirnimadaada igu ammaan ammaantaan
agtaada ku lahaa dunida ka hor. [6] Magacaagaan u muujiyay dadkii aad dunida iga siisay.
Kuwaagay ahaayeen oo anigaad i siisay, iyaguna eraygaaga way addeceen. [7] Hadda in wax
kasta ood i siisay ay xaggaaga ka yimaaddeen way ogaadeen. [8] Waayo, erayadaad i siisay[113*]
waan siiyay iyaga, wayna aqbaleen, dhab ahaan bayna u ogaadeen inaan kaa imid oo inaad i
soo dirtay way rumeeyeen. [9] Iyaga ayaan kuu baryayaa oo dunida kuu baryi maayo, balse
waxaan kuu baryayaa kuwaad i siisay, waayo, waa kuwaagii. [10] Waxayga oo dhan adigaa leh,
waxaagana anigaa leh, iyagana waan ku ammaanmay. [11] Anigu dunida ma sii joogayo;
kuwanuse duniday sii joogi doonaan, anigu waan kuu imanayaa. Aabbe Qudduusow,
magacaagii aad i siisay iyaga ku ilaali, si ay mid u ahaadaan sidaynu mid u nahay. [12] Intaan
iyaga la joogay, waxaan iyaga ku ilaaliyay magacaaga aad i siisay, waanan ilaaliyay oo midna
ma lumin, wiilka halaagga mooyeee, siduu Kitaabku sheegay. [13] Waan kuu imanayaa hadda oo
intaan dunida joogay ayaan sidaa idhi si ay farxaddaydu ugu dhammays tiranto iyaga.
[14] Eraygaagii ayaan siiyay, oo dunidu way nacday, waayo, iyagu kuwa dunida ma aha, sida
aanan ka dunida u ahayn. [15] Inaad iyaga dunida ka qaaddo Kaa baryi maayo, balse inaad ka
sharka leh ka ilaaliso ayaan kaa baryayaa. [16] Iyagu kuwa dunida ma aha, sida aanan ka dunida
u ahayn. [17] Qudduus iyaga kaga dhig runta, eraygaagu waa run. [18] Sidaad dunida iigu soo
dirtay ayaan aniguna iyaga dunida ugu diray. [19] Oo dartood ayaan qudduus iskaga dhigay, si
iyagana xaqa qudduusiin loogaga dhigo. [20] Kuwan oo keliya kuu baryi maayo, balse kuwa

112 Eebbe mooyee ilaah kale ma jiro waxaa uuna soo diray Ciise Masiix

113 Farriintaad i siisay waan siiyay waana farriinta badbaadada Injiilka

hadalkooda aawadii igu rumayn doona ayaan kuu baryayaa, 21 Si ay dhammaantood mid u
ahaadaan, Aabbow, sidaad iigu jirto, aniguna aan kuugu jiro, iyaguna ha innagu jiraan, si ay
dunidu u rumayso inaad i soo dirtay. 22 Oo ammaantaad i siisay iyagaan siiyay, si ay mid u
ahaadaan sideena. 23 Anigu iyagaan ku jiraa, adiguna anigaad igu jirtaa, waa inay
midnimadoodu dhammays tiranto, si ay dunidu u ogaato inaad i soo dirtay oo sidaad ii
jeclaatay ayaan iyagana u jecelahay. 24 Aabbow, kuwaad i siisay meeshaan joogo inay ila
joogaan ayaan doonayaa, si ay u arkaan ammaantaad i siisay, waayo, dunida oon la aasaasin
ayaad i jeclayd. 25 Aabbaha xaqa ahow, dunidu kuma garanaynayso, balse waan ku
garanayaa; kuwanna inaad i soo dirtay ayay ogaadeen. 26 Oo magacaaga ayaan u muujiyay
iyaga, waanan u muujin doonaa, jacaylkaad i jeceshay ha ku jiro iyaga, aniguna aan iyaga ku
jiro.

## Ciise Waa La Qabtay

**18** Ciise markuu hadalkaas yidhi, ayuu xertiisa la baxay oo intuu Dooxada Qidroon kala gudbay
ayay beer halkaas ku taallay isaga iyo xertiisuba galeen. 2 Yuudaskii khayaanayna meeshaas
wuu yaqaanay, waayo, Ciise marar badan ayuu meeshaas xertiisa la tegi jiray. 3 Marka Yuudas
oo askar iyo saraakiil wadaaddada sare iyo Farrisiinta ka socda wata ayaa yimid, iyagoo
faynuusyo iyo tooshash iyo hub wata. 4 Marka Ciise isaga oo og waxa ku dhici doona oo dhan
ayuu u baxay oo ku yidhi, iyaga Kumaad doonaysaan? 5 Waxay ugu jawaabeen Ciisihii reer
Naasared. Deedna Ciise wuxuu ku yidhi, Anigu isagii baan ahay. Waxaana iyaga la taagnaa
Yuudaskii khayaanay. 6 Markuu Ciise ku yidhi, Anigaa isagii baan ahay intay dib u gurteen ayay
dhulka ku dheceen. 7 Mar kale ayuu waydiiyay oo ku yidhi, Kumaad doonaysaan? Oo waxay ku
yidhaahdeen Ciisihii reer Naasared. 8 Ciise ayaa ugu jawaabay Waan idiin sheegay inaan
anigu isagii ahay. Marka haddaad i doonaysaan, kuwan iska daaya, ha tageene. 9 Wuxuu saa
u yidhi, si uu u xaqiiqoobo hadalkii uu ku hadlay oo ahaa Kuwii aad i siisay, midna ma lumin.
10 Marka Simoon Butros toorri ayuu haystay oo intuu la baxay ayuu wadaadka sare adeegihiisii
ku dhuftay oo dhegta midig ka gooyay. Adeegaha magiciisu wuxuu ahaa Malkos. 11 Marka
Ciise ayaa Butros ku yidhi, Toorridaada galkeeda ku celi. Miyaanan koobka Aabbuhu i siiyay
cabbaynin? 12 Deedna askartii iyo taliyahoodii iyo saraakiishii Yuhuudda ayaa Ciise qabtay oo
way xidhxidheen, 13 Oo markii hore waxay u geeyeen Annas, waayo, wuxuu ahaa soddoggii
Kayafas oo sanadkaas ahaa imaamka guud. 14 Kayafas wuxuu ahaa kii Yuhuudda kula taliyay
inay u wanaagsantahy inuu nin keliyahu dadka u dhinto.

## Butros Ayaa Ciise Dafiray

15 Marka Simoon Butros iyo mid kale oo xerta ah ayaa Ciise daba galay. Ninka kale ee xerta ah
wadaadka sare ayaa yaqaanay, marka Ciise ayuu barxadda imaamka guud la galay. 16 Laakiin
Butros albaabka dibadiisa ayuu istaagay. deedna kii kalee xerta ahaa ee imaamka guud
garanayay ayaa intuu dibadda u soo baxay la hadlay gabadhii albaabka ilaalinaysay, oo Butros
ayuu soo galiyay. 17 Gabadhii albaabka ilaalinaysay ayaa Butros ku tidhi Adiguna xerta ninkan
midkood miyaadan ahayn? Wuxuu ku yidhi, Mayee ma ihi. 18 Marka adeegayaashii iyo
saraakiishii intay dab shiteen ayay kulaalayeen, sababtoo ah qabow baa jiray, Butrosna
dabkiibuu la kulaalay..

### Wadaadka Sare ayaa Ciise Su'aalo Waydiiyay

[19] Marka imaamka guud ayaa Ciise wax ka wayddiiyay xertiisii iyo waxbariddiisa. [20] Ciise ayaa
ugu jawaabay Si cad ayaan dunida ula hadlay, oo mar kasta sunagogyada iyo macbudka
ayaan wax ku bari jiray, meesha ay Yuhuudda oo dhan isugu timaaddo oo si qarsoodi ah wax
uma odhan jirin. [21] Marka maxaad ii waydiinaysaa? Wayddii kuwii maqlay waxaan kula hadlay.
Kuwaasaa og waxaan idhiye. [22] Markuu sidaas yidhi, saraakiishii midkood oo ag taagnaa ayaa
Ciise dhurbaaxay isaga oo leh Ma sidaasaad imaamka guud ugu jawaabaysaa? [23] Ciise ayaa
ugu jawaabay Haddaan si xun u hadlay ii sheeg balse haddaan si wanaagsan u hadlay
maxaad ii dhurbaaxaysaa? [24] Haddaba Annas ayaa isaga oo xidhxidhan Kayafas imaamka
guud u diray.

### Butros Mar Labaad Ayuu Ciise Dafiray

[25] Marka Simoon Butros oo taagan oo dabka kulaalayay. ayay ku yidhaahdeen Adiguna
miyaadan xertiisa midkood ahayn? Deedna wuu inkiray oo yidhi, Mayee ma ihi. [26] Adeegihii
imaamka guud midkood oy kii uu Butros dhegta ka gooyay qaraabo ayaayeen ayaa ku yidhi,
Adigoo beerta isaga la jooga Miyaanan ku arag? [27] Markaasuu Butros mar kale inkiray oo isla
markiiba diiqii ayaa ciyay.

### Ciise Wuxuu Hor Tagay Bilaatos

[28] Marka Ciise guriga Kayafas way ka kaxeeyeen oo xagga xaruntii Guddoomiyaha ayay u
kaxeyeen; marka aroor hore ayay ahayd oo iyagu xaruntii guddoomiyaha mayna galin si ayna
u nijaasoobin, waayo waa inay cashadii Ciidda Kormaridda wax ka cunaan. [29] Deedna Bilaatos
ayaa u soo baxay iyaga oo ku yidhi, Maxaad ku eedaynaysaan ninkan? [30] Waxay ugu
jawaabeen oy ku yidhaahdeen Hadduuna dambiile ahayn maannaan kuu keenneen. [31] Marka
Bilaatos wuxuu ku yidhi, Idinku kaxeeya, oo shareecadiina ku xukuma. deedna Yuhuuddii
waxay ku yidhaahdeen Inaannu qof dilno nooma banaana [32] Si hadalkii Ciise ku hadlay ee ku
saabsanaa siduu u dhiman doono uu u xaqiiqoobo.

[33] Marka Bilaatos intuu haddana qolkii maxakamadda galay ayuu Ciise u yeedhay oo ku yidhi,
Adigu ma Boqorka Yuhuuddaad tahay? [34] Ciise ayaa ugu jawaabay Ma Adigaa sidaa leh, mise
dad kale ayaa iiga kaa sheegay? [35] Bilaatos ayaa ugu jawaabay Ma Yuhuudi baan ahay?
Ummaddaada iyo wadaaddada sare ayaa ii kaa keenaye. Maxaad samaysay? [36] Ciise ayaa
ugu jawaabay Boqortooyadaydu ta dunidan ma aha. Hadday boqortooyadaydu ta dunidan
ahaan lahayd, adeegayaashaydu in Yuhuudda la ii dhiibibo way ka dagaallami lahaayeen.
Balse boqortooyadaydu ta dunida ma aha. [37] Marka Bilaatos ayaa ku yidhi, Oo marka ma boqor
baad tahay? Ciise ayaa ugu jawaabay Adigaad yidhi, inaan boqor ahay. Taas darteed ayaan u
dhashay, oo taas darteed ayaan dunida u imid, si aan runta ugu marag furo. Mid kasta oo
kuwa xaqa ah codkayguu maqlaa. [38] Bilaatos ayaa ku yidhi, Waa maxay runtu? Oo markuu
sidaa ku yidhi, mar kale ayuu intuu dibadda u baxay Yuhuuddii ku yidhi, Wax lagu eedeeyo
kuma hayo.

## Ciise Dil Ayaa Lagu Xukumay

39 Laakiinse caadadiinnu waxay tahay inaan Ciidda Kormaridda maxbuus idiin sii daayo. Marka
Boqorka Yuhuuddaan inaan idiin sii daayo ma doonaysaan? 40 Markaasay dhammaantood mar
kale qayliyeen iyaga oo leh Kan ma ahee, Baraabbas. Baraabbasna budhcad buu ahaa.

## Ciise Iskuallaabta Ayaa Loo Kaxeeyay

**19** Markaasuu Bilaatos Ciise kaxeeyay oo garaacay, 2 Askartiina intay taaj qodax ah u
sameeyeen ayay madaxa u saareen oo waxay u geliyeen dhar guduudan. 3 Markaasay intay
dhurbaaxeen ku yidhaahdeen Nabadu ha kuu ahaato Boqorka Yuhuuddow. 4 Bilaatos ayaa
haddana dibadda u soo baxay oo ku yidhi, iyaga, Bal Eega, waan idiin soo bixinayaa isaga si
aad u ogaataan inaanan wax eed ah ku helin isaga. 5 Marka Ciise oo taajkii qodaxda ahaa iyo
dharkii guduudnaa xidhan ayaa dibadda u soo baxay, deedna Bilaatos ayaa ku yidhi, iyaga Bal
eega ninkan! 6 Dabadeed markay imaamka guud iyo saraakiishii arkeen waxay ku qayliyeen
Iskutallaabta ku qodob, iskutallaabta ku qodob! Bilaatos ayaa ku yidhi, Idinku la taga oo
iskutallaabta ku qodba, waayo, anigu wax eed ah kuma heline. 7 Yuhuuddii ayaa ugu
jawaabtay Sharci ayaannu leennahay, sida shareecadayada ku cadna waa inuu dhinto, waayo,
wuxuu iska dhigayay Wiilka Eebbe. 8 Dabadeed Bilaatos markuu hadalkaas maqlay, aad buu u
sii cabsaday, 9 Markaasuu haddana maxakamaddii galay oo Ciise ku yidhi, Xaggeed ka timid?
Laakiin Ciise wax jawaab ah uma celinin.

10 Marka Bilaatos ayaa ku yidhi, Ilama hadlaysid? Miyaadan ogayn inaan leeyahay awood aan
kugu sii daayo iyo awood aan iskutallaabta kugu qodbo? 11 Ciise ayaa ugu jawaabay Awood
maadan ii lahaateen haddaan xagga sare lagaa siinin.
Sidaa daraaddeed kii ii soo kaa dhiibay ayaa kaa dembi wayn. 12 Wakhtigaas laga billaabo
Bilaatos wuxuu damcay inuu iska sii daayo, laakiin Yuhuuddii ayaa qaylyay iyaga oo leh
Haddaad ninkan sii dayso, Kaysar saaxiibkii ma tihid. Nin kasta oo boqornimo sheegta, Kaysar
buu ka hor yimaaddaa. 13 Deedna Bilaatos markuu hadalladaas maqlay, intuu Ciise dibadda u
soo saaray, ayuu kursigii maxakamadda ku fadhiisiyay, meesha la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa
oo af Cibraaniga lagu yidhaahdo Gabbata. 14 Waxayna ahayd Maalintii Kormaridda laysu
diyaarinayay qiyaastii lix saac. Oo wuxuu Yuhuudda ku yidhi, Bal eega boqorkiinna.
15 Markaasay ku qaylyeen Na dhaafi, na dhaafi, oo iskutallaabta ku qodob. Bilaatos wuxuu ku
yidhi, Ma Boqorkiinaan iskutallaabta ku qodbaa? Wadaaddadii sare ayaa ugu jawaabay Boqor
aan Kaysar ahayn ma lihin. 16 Markaasuu u soo dhiibay si iskutallaabta loogu qodbo.

## Ciise Iskutallaabta Lagu Qodbay

Ka dibna Ciise Way kaxeeyeen 17 Markaasuu isaga oo iskutallaabtiisa wata meeshii Dhakada la
odhan jiray oo af Cibraaniga lagu odhan jiray Golgota u kacay, 18 Oo meeshaasay isaga iyo
laba kale iskutallaabta ku qodbeen, mid midigta midna bidixda, Ciisena dhexda. 19 Bilaatosna
intuu cinwaan qoray ayuu iskutallaabta dusheeda ku dhejiyay, waxaana ku qornaa, CIISIHII
REER NAASARED IYO BOQORKA YUHUUDDA. 20 Marka Yuhuud badan ayaa cinwaankaas
akhriyay, waayo, meesha Ciise lagu salbiyay magaaladay u dhawayd, cinwaankuna wuxuu ku
qornaa afafka Cibraaniga iyo Roomanka iyo Giriigga. 21 Marka wadaaddadii sare ee Yuhuudda
ayaa Bilaatos ku yidhi, Ha ku qorin: Boqorka Yuhuudda, ee ku qor Kii sheegtay inuu Boqorka
Yuhuudda yahay. 22 Bilaatos ayaa ugu jawaabay Waxaan qoray waan qoray. 23 Deedna askartii

markay Ciise iskutallaabta ku qodbeen, dharkiisii ayay qaateen oo afar meelood ayay u
qaybiyeen si askari walba qayb u qaato, khamiiskiina way qaateen. Khamiisku dusha iyo
hoosta meella kama tolnayn. 24 Markaasay isku yidhaahdeen Yaynaan kala jeexine aynnu u
qori tuuranno, oynu aragno kii hela, marka waxaa dhab noqtay Aayadaha kitaabka ee leh
Dharkayga ayay qaybsan doonaan oo Khamiiskayga ayay u qori tuuran doonaan.[114*] Marka
askartii ayaa sidaa samayay. 25 Oo waxaa iskutallaabta Ciise ag taagnaa hooyadii iyo
habaryartii Maryama xaaskii Kaloobaas iyo Maryamadii reer Magdala. 26 Deedna Ciise markuu
hooyadii iyo xerowgii uu jeclaa oo is ag taagan arkay, ayuu hooyadii ku yidhi, Hooyo wiilkaaga
eeg. 27 Xerowgiina wuxuu ku yidhi, Bal eeg, hooyadaa. Oo saacaddaa laga billaabo xerowgii
ayaa gurigiisa u kaxeeyay.

## Ciise Wuu Dhintay

28 Dabadeed Ciise markuu ogaaday inay wax kasta siduu kitaabku sheegay u dhammays
tirmeen, ayuu yidhi, Waan oomanahay. 29 Marka meeshaas waxaa yaallay weel khal ka buuxo.
Markaasay intay khalkii isbuunyo ka buuxiyeen, laan husob ah sudheen oy afka u saareen.
30 Deedna markuu Ciise khalkii kabaday ayuu yidhi, Way dhammaatay markaasuu madaxa
fooroорiyay oo naftiibaa ka baxday.

## Ciise Waran Baa Kallida Lagaga Dhuftay

31 Marka Yuhuuddii, si ayna meydadku Sabtida iskutallaabta u sii saarraanin, waxay Bilaatos ka
codsadeen intii meydadka lugaha laga jebiyo in la qaado, waayo, Maalintii is diyaarinta oo
maalin wayn ah ayay ahayd. 32 Deedna askartii ayaa timid oo labadii iskutallaabta lagula
qodbay isaga ayay marka hore lugaha ka jebiyeen. 33 Laakiinse markay Ciise u yimaaddeen oy
arkeen inuu mar horeba dhintay mayna lugaha ka jebinin. 34 Laakiin mid askartii ka mid ah
ayaa Ciise dhinaca waran kaga dhuftay, oo isla markiiba dhiig iyo biyo ayaa ka soo daatay.
35 Oo kii waxaas arkay ayaa ka marag furay, maraggiisuna waa run, wuxuna ogyahay inuu run
sheegayo, si aad idinkuna u rumaysaan. 36 Waayo, waxaasu waxay u dhaceen si ay u
xaqiiqowdo Aayadda Kitaabka ee leh Lafihiisa midna lama jebin doono.[115*] 37 Aayad kalena
waxay leedahay Kii ay dureen ayay arki doonaan.[116*]

## Ciise Waa La Aasay

38 Markaas dabadeed, Yuusufkii reer Arimataya oo xerta Ciise ka mid ahaa, laakiin cabsi uu
Yuhuudda ka qabo darteed is qarin jiray, ayaa Bilaatos ka codsaday inuu meydka Ciise qaado.
Bilaatosna wuu u fasaxay. marka intuu yimid ayuu meydkii Ciise qaaday. 39 Sidoo kale
Nikodemoskii markii hore habeennimada u yimid oo malmal iyo cuud laysku daray oo qiyaastii
boqol rodol ah wada ayaa yimid.[117*] 40 Deedna meydkii Ciise ayay qaadeen oo siday caadada
aaska Yuhuuddu ahayd dhir udkoon ayay ku duudduubeen. 41 Meesha Ciise lagu salbiyayna
waxay ahayd beer, beerta dhexdeedana waxaa ku taallay xabaal cusub oon cidna weli lagu

114 Sabuur 22:18
115 Baxniintii 12:46 iyo Tirintii 9:12
116 Sakariye 12:10 iyo Muujintii 1:7
117 Eeg, Injiilka Yooxanaa 3:1-10

aasin. 42 Marka maadaama oy Maalintii Diyaar garawga Yuhuudda ahayd halkaasay Ciise
dhigeen, waayo, xabaashu way u dhawayd.

### Ciise Wuu Ka Soo Sarakacay Kuwii Dhintay

**20** Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka Maryama Magdala ayaa aroor hore iyadoy wali
mugdi tahay xabaashii timid oo waxay aragtay xabaashii oo dhagixii laga qaaday. 2 Markaasay
intay orodday Simoon Butros iyo xerowgii kale ee Ciise jeclaa, u tagtay oo ku tidhi Sayidkii
xabaashii bay kala baxeen, mana ogin meel ay dhigeen. 3 Saa darteed Butros iyo xerowgii kale
way baxeen oo xabaashii ayay tageen. 4 Marka labadooduba way ordeen oo xerowgii kale
ayaa Butros ka badiyay oo xabaasha uga hor maray. 5 Markuu eegayna, wuxuu arkay kafankii
oo yaalla, balse muusan gelin. 6 Deedna Simoon Butros oo daba socday ayaa yimid, oo
markuu xabaashii galay wuxuu arkay kafankii oo yaalla 7 Iyo maradii madaxiisa saarrayd oon
maryihii la oollin, balse keligeed meel ku duudduuban. 8 Marka xerowgii kale ee horay
xabaasha u yimid ayaa galay wuuna arkay oo rumeeyay. 9 Waayo, weli Kitaabka mayna fahmin
inay tahay inuu kuwii dhintay ka soo sarakaco. 10 Ka dibna xertii mar kale ayay guryahoodii ku
noqdeen.

### Ciise Maryama Magdala Ayuu U Muuqday

11 Laakiin Maryama xabaasha dibaddeeda ayay istaagtay iyada oo ooyaysa, oo xabaashii ayay
eegtay. 12 Oo waxay aragtay laba malag oo dhar cad cad qaba oo meeshuu meydka Ciise
yaallay, midna madaxa, midna cagaha fadhiyo. 13 Oo waxay ku yidhaahdeen Naagyahay,
maxaad la ooyaysaa? Waxay ku tidhi Sababtoo ah, Sayidkaygii bay qaateen oo meel ay
dhigeenna ma garanayo. 14 Markay sidaa tidhi ayay dib u jeedsatay oo waxay aragtay Ciise oo
taagan, mana ayna garanaynin inuu Ciise yahay. 15 Ciise wuxuu ku yidhi, Naagyahay, Maxaad
la ooyaysaa? Kumaad raadinaysaa? Iyada oo u malaynaysa inuu ninkii beerta ka shaqaynayay
yahay ayay ku tidhi Mudane, haddaad isaga halkan ka qaadday ii sheeg meeshaad dhigtay,
anigaa ka soo qaadane. 16 Ciise wuxuu ku yidhi, Maryamaay. Markaasay jeedsatay oy afka
cibraaniga ku tidhi Rabboni oo ah Macallinow. 17 Ciise ayaa ku yidhi, Ha i taabanin, waayo, wali
Aabbahay kor uguma tagine, laakiin walaalahay u tag oo ku dheh, Wuxuu yidhi, Aabbahay iyo
Aabbihiin iyo Eebbe iyo Eebbihiiinna ayaan kor ugu tagayaa. 18 Maryama Magdala intay timid
ayay xertii ku tidhi Sayidkii ayaan arkay oo farriintaas ayuu ii sheegay.

### Ciise Rasuulladii Ayuu U Muuqday

19 Deedna isla maalintaas galabnimadeedii, oo ahayd maalintii toddobaadka ugu horraysay,
xerta oo meel ku uruursan oy albaabbadu u xidhanyihiin cabsi ay Yuhuudda ka qabaan
aawadeed, ayuu Ciise u yimid oo isdhex taagay, oo wuxuu ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto.
20 Markuu sidaa yidhi, gacmihiisa iyo dhiniciisii ayuu tusay. Xertiina markay Sayidkii arkeen aad
bay u farxeen.

21 Marka Ciise ayaa mar kale ku yidhi, Nabad ha idinla jirto. Siduu Aabbuhu ii diray ayaan
aniguna idiin dirayaa. 22 Oo markuu sidaas yidhi, intuu neeftiisa ku afuufay ayuu ku yidhi,
Aqbala Ruuxa Qudduuska ah. 23 Nin alla ninkaad dembiyadiisa cafidaan way cafiyanyihiiny, nin
alla ninkaad dembiyadiisa ku celisaanna way ceshanyihiin.

## Ciise Toomas Buu U Muuqday

[24] Laakiin Toomas oo laba iyo tobanka ka mid ahaa oo Didumos la odhan jiray lama uuna
joogin markuu Ciise yimid. [25] Marka xertii kale ayaa ku yidhi, Sayidkii ayaannu aragnay. Laakiin
wuxuu ku yidhi, Haddaanan gacmihiisa ku arag calaamaddii musbaarrada oo aanan fartayda
gelinin nabarkii musbaarrada oo aanan gacantayda dhinaciisa gelinin ma rumaysanayo.
[26] Marka siddeed maalmood dabadeed xertiisii oo Toomas ku jiro ayaa mar labaad guri wada
joogay. Marka albaabbada oo u xidhan ayuu Ciise yimid, oo intuu isa soo dhex taagay ayuu ku
yidhi, Nabad ha idinla jirto. [27] Markaasuu Toomas ku yidhi, Fartaada keen oo arag gacmahayga
oo gacantaada keen oo gali dhinacayga oo ha shakiyine rumee. [28] Toomas ayaa u jawaabay
oo ku yidhi, Rabbigay iyo Eebbegow. [29] Markaasuu Ciise ku yidhi, Ma markaad i aragtay
sababteed ayaad igu rumaynaysaa Toomasow? Waxaa barakaysan kuwa iyagoon i arag i
rumeeya.

## U Jeeddada Buuggan

[30] Haddaba Ciise aayado kale oo badan oon kitaabkan ku qornayn ayuu xerta hortooda ku
sameeyay. [31] Laakiinse kuwan waxaa loo qoray si aad u rumaysaan inuu Ciise yahay Masiixa
iyo Wiilka Eebbe oo aad rumaysadka magiciisa nolol ku heshaan.

## Ciise Toddoba Xerta Ah Ayuu U Muuqday

**21** Markaa ka dib Ciise mar kale ayuu xertiisa ugu muuqday Badda Tiberiyas agteeda. Oo
sidan ayuu u isu tusay. [2] Simoon Butros iyo Toomaskii Didumos la odhan jiray iyo Nataana’elkii
Qaanadii Galili iyo wiilashii Sebedi iyo laba kale oo xertiisa ah ayaa wada joogay. [3] Simoon
Butros ayaa iyaga ku yidhi, Anigu Waan soo kalluumaysanayaa. Markaasay ku yidhaahdeen
Annaguna waanu ku raacaynaa. Deedna way tageen oo doonnida ayay fuuleen; balse
habeenkaas waxba mayna qabanin. [4] Laakiin markuu waagu baryay Ciise ayaa xeebta
istaagay, xertuna mayna garanaynin inuu Ciise yahay. [5] Marka Ciise ayaa ku yidhi,
Carruurtaay, wax kalluun ah ma haysaan? Waxay ugu jawaabeen Maya. [6] Markaasuu ku yidhi,
Shabaga doonta midigteeda ku tuura, waad heli doontaane. Deedna way tuureen oo inay soo
jiidaan way kari waayeen kalluunka fara badnidiisa aawadeed. [7] Marka Xerowgii uu Ciise jeclaa
ayaa Butros ku yidhi, Waa Sayidkii. Deedna Simoon Butros markuu maqlay inuu Sayidkii
yahay, ayuu intuu dharkiisa xidhay (waayo, wuu qaawanaa) badda isku tuuray. [8] Balse xerta
kale doon yar ayay ku yimaaddeen iyaga oo shabag kalluun ka buuxo jiidaya.) [9] Markay sidaa
dhulka u soo dageen waxay arkeen dab dhuxul ah oo kalluun saaranyahay iyo furin.
[10] Markaasuu Ciise ku yidhi, iyaga Wax ka Keena kalluunkaad hadda soo qabateen. [11] Deedna
Simoon Butros ayaa doontii fuulay oo shabaggii oy boqol iyo saddex iyo konton kalluun
waawayn ahu ka buuxaan xagga dhulka u soo jiiday, inkastoy fara badnaayeen shabaggu ma
kala go’in. [12] Ciise ayaa ku yidhi, iyaga Kaalaya oo qureecda. Xerta midkoodna kuma dhicin
inuu yidhaahdo, Kumaad tahay? waayo, inuu Sayidkii yahay way garanayeen. [13] Marka Ciise
ayaa yimid oo intuu furinkii qaaday ayuu iyaga siiyay, kalluunkiina sidoo kale. [14] Tanuna waa
markii saddexaad ee Ciise u muuqdo intuu kuwii dhintay ka soo sarakacay dabadeed.

**Ciise Butros Ayuu Itixaamay**

[15] Deedna markay qureecdeen Ciise wuxuu Simoon Butros ku yidhi, Simoon Ina Yoonisow,
miyaad waxan iga jeceshahay? Wuxuu ku yidhi, Haah, Sayidow, waad ogtahay inaan ku
jeclahay. Markaasuu ku yidhi, Baraarkayga daaji. [16] Mar labaad ayuu haddana ku yidhi, isaga
Simoon Ina Yoonisow, ma i jeceshahay? Wuxuu ku yidhi, Haah, Sayidow, waad ogtahay inaan
ku jeclahay. Markaasuu ku yidhi, Idahayga daaji. [17] Markii saddexaad ayuu ku yidhi, Simoon
Ina Yoonisow, Ma i jeceshahay? Butros wuu murugooday, waayo, markii saddexaad ayuu, Ma i
jeceshahay ku yidhi,? Markaasuu ku yidhi, Sayidow, wax walba waad ogtahay, inaan ku
jeclahayna waad ogtahay. Ciise ayaa ku yidhi, Idahayga daaji. [18] Runtii, runtii, waxaan kugu
leeyahay, Markaad yarayd adigaa guntan jirtay oo meeshaad doonto ayaad tagi jirtay, laakiin
markaad odayowdo, gacmahaad hoorsan doontaa, oo mid kale ayaa kuu guntin doona oo
meel aadan doonaynin ayuu kuu kaxayn doonaa. [19] (Wuxuu sidaas u yidhi, si uu u tilmaamo
dhimashada uu Eebbe ku ammaani doono.) Markuu sidaa yidhi, dabadeed, wuxuu ku yidhi,
Isoo raac. [20] Butros markuu dib eegay wuxuu arkay xerowgii Ciise jeclaa oo daba socda;
waana kii laabta Ciise ku tiirsanaa xilligii cashada ee ku yidhi, Sayidow, kumaa ku khayaani
doonaa? [21] Butros markuu arkay, wuxuu Ciise ku yidhi, Sayidow, kanna ka warran? [22] Ciise
ayaa ku yidhi, Haddaan doono inuu joogo ilaa iyo intaan ka imanayo, maxaa kaa khuseeya?
Adigu i soo raac! [23] Sababtaas darteed waxaa walaalaha ku dhex faaftay inuusan xerowgaasu
dhimanaynin. laakiinse Ciise, Ma odhanin ma dhiman doono, ee wuxuu yidhi, Haddaan doono
inuu joogo ilaa oon ka imanayo, maxaa kaa galay? [24] kanu waa Xerowgii ka marag furay
waxyaabahan oo qoray waxyaabahan oo waan ognahay inuu markhaatigiisu run yahay.
[25] Oo waxaana jira waxyaabo badan oo kale oo Ciise sameeyay oo haddii lawada qori lahaa
waxaan filayaa inayna dunidu buuggaagga laga qoro wada qaaddeen. Aamiin

# WAX QABADKII XAWAARIYIINTA

### Ballanqaadkii Ruuxa Qudduuska Ah

**1** Te'ofilosow, Buuggii hore waxaan ka qoray wax kasta oo Ciise billaabay inuu sameeyo oo
baro 2 Ilaa iyo maalintii sare loo qaaday isaga, ka dib markuu Ruuxa Qudduuska ah amarro ku
siiyay rasuulladii uu doortay. 3 Kuwii uu markuu xanuunsaday ka dib isagoo nool uu siyaabo
badan oo la hubo ugu muuqday iyaga oo muddo afartan maalmood ah ayuu iyaga u muuqday
oo boqortooyada Eebbe wax uga sheegay. 4 Oo markuu iyaga la joogay wuxuu ku amray
inayna Quddus ka tegin, balse ay sugaan ballankii Aabbaha ood iga maqasheen ayuu yidhi,
5 Waayo, Nebi Yaxye dadka biyo ayuu galiyay, laakiinse maalmo aan sidaa u fogayn Ruuxa
Qudduuska ah ayaa laydin galin doonaa.

### Ciise Kor Buu U Baxay

6 Sidaas daraaddeed markay isu yimaaddeen, waxay waydiiyeen isaga oo ku yidhaahdeen
Rabbiyow, ma hadda aad boqortooyada u soo celinaysaa Israa'iil? 7 Markaasuu iyaga ku yidhi,
Shaqadiinna ma aha inaad ogaataan wakhtiyada iyo xilliyada uu Aabbuhu amarkiisa ku
cayimay. 8 Laakiinse xoog ayaad heli doontaan markuu Ruuxa Qudduuska ahu idinku soo dego
oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Quddus iyo Yahuudiya oo dhan iyo Samaariya
iyo meesha dunida ugu fog. 9 Oo markuu waxyaabahaas yidhi, ayaa iyagoo eegaya sare loo
qaaday isaga oo daruur ayaa indhahoodii ka qarisay. 10 Oo intay samada aad u eegayeen
markuu sii socday, bal eeg, waxaa isa soo ag taagay laba nin oo dhar cad cad qaba, 11 Deedna
waxay ku yidhaahdeen Nimankiinan reer Galiliyow, maxaad la taagantihiin ood samada u
eegaysaan? Ciisahan samada laydinkaga sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada
aadaya oo kale ayuu u iman doonaa.

### Qofkii Yuudas Badali Lahaa Ayaa Loo Doortay

12 Markaasay Quddus ku noqdeen iyagoo ka tegay buurtii Saytuun la odhan jiray ee Quddus u
dhawayd oo maalin Sabti ah in loo socdo u jirtay. 13 Oo markay galeen, waxay tageen qolkii
dabaqa sare ee ay daganaayeen, waxayna ahaayeen Butros iyo Yooxanaa iyo Yacquub iyo
Andaros iyo Filibos iyo Toomas, iyo Bartolomayos, iyo Matayos, iyo Yacquub ina Alfayos, iyo
Simoon Qiirole iyo Yuudas ina Yacquub. 14 Kuwaas oo dhan, iyagoo isku qalbi ah ayay ku sii
adkaysteen salaad iyaga iyo dumarka iyo Maryama Ciise hooyadii iyo walaalihii. 15 Marka
maalmahaas Butros ayaa xerta ka dhex istaagay (oo waxaa wada joogay dad badan oo
qiyaastii boqol iyo labaatan ah) Markaasuu yidhi, 16 Walaalayaal, waxaa waajib ahaa inay siduu
kitaabku sii sheegay oo Ruuxa Qudduuska ahu waa hore afka Daa'uud kaga hadlay ee ku
saabsanaa Yuudaskii kuwii Ciise qabtay waday dhacaan. 17 Maxaa yeelay, isaga waa laynagu
tiriyay, oo shaqadan ayuu qayb ku lahaa. 18 Hadda ninkaasu meel ayuu ku iibsaday abaal
gudkii xaqdarrida; oo intuu madax madax u dhacay ayuu dhexda ka kala go'ay oo
mindhicirkiisii oo dhan ayaa ka soo daatay. 19 Marka reer Quddus oo dhan ayaa wada
ogaaday; sidaas daraaddeed meeshaas waxaa afkooda loo bixiyay Akeldama, taasoo
macneheedu yahay, meeshii dhiigga. 20 Waayo, waxaa kitaabkii Sabuur lagu qoray Gurigiisu

cidla' ha noqdo, oo yuuna ninna meeshaas degin, shaqadiisana mid kale ha qabto[118*].
[21] Haddaba raggii waligood inala joogay laga soo billaabo markuu Sayid Ciise ina dhex yimid
oo inaga dhex baxay, [22] Laga billaabo biya galintii Nebi Yaxye ilaa iyo maalintii sare laynooga
qaaday isaga, waa inuu midkood inagala marag furaa sarakiciddiisa. [23] Markaasay laba iska
soo saareen, kuwaasoo ahaa Yuusufkii la odhan jiray Barsabaas oo lagu naanaysi jiray
Yuustos iyo Matiyas. [24] Markaasay tukadeen oy yidhaahdeen Rabbiyow, adigaa dadka
qalbigooda oo dhan garanaya ee na tus labadan kaad dooratay, [25] Si uu shaqadan iyo
rasuulnimadan uu Yuudaskii dhacay ee halaagmay ka tagay u qabto. [26] Markaasay u qori
tuureen; qori tuurkiina wuxuu ku dhacay Matiyas; oo isagaa lagu daray kow iyo tobankii rasuul.

## Soo Dagiddii Ruuxa Qudduska Ah

**2** Deedna markii maalintii Bentekoste la gaadhay, meel bay kulligood wada joogeen. [2] Oo
waxaa si lama fillaan ah samada uga yimid dhawaaq sida dabayl xoog leh oo kale ah oo waxay
buuxisay gurigii ay fadhiyeen oo dhan. [3] Oo intay carrabyo dab la moodo u kala qaybsantay
ayuu carrab kasta mid ku dul dagay. [4] Marka waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa
Qudduuska ah oo waxay billaabeen inay afaf kale ku hadlaan siduu Ruuxu iyaga u siiyay
hadalka. [5] Marka waxaa Quddus joogay rag Yuhuud ah oo cibaado u go'ay oo umadaha
samada ka hooseeya oo dhan isaga yimid. [6] Oo markii dhawaaqii la maqlay, dadkii oo yaaban
ayaa isu yimid, maxaa yeelay, nin kasta wuxuu maqlay iyagoo afkiisa ku hadlaya. [7] Deedna
dhammaantood way wada naxeen oo way yaabeen oo waxay yidhaahdeen War Bal eega,
kuwan hadlaya oo dhan miyayna reer Galili ahayn? [8] Siday ku dhici kartaa inuu midkeen walba
maqlo iyagoo afkiisii uu u dhashay ku hadlaya? [9] Annagoo ah reer Bartiya iyo Mediya iyo
Ceelaam iyo kuwa deggan Mesobotamiya iyo Yahuudiya iyo Kabbadokiya iyo Bontos iyo
Aasiya [10] Iyo Farangiya iyo Bamfuliya iyo Masar iyo qaybo Liibiya ka tirsan oo qayrawaan ku
wareegsan iyo ajinabi Rooma ka yimid oo Yuhuud ah iyo kuwo raacsan labadaba, [11] Reer
Kereetee iyo Caraba, waxaynnu maqlaynaa iyagoo ku hadlaya afafkeenna oo ka hadlaya
waxyaabaha xoogga leh ee Eebbe. [12] Markaasay wada yaabeen oo shakiyeen, oo waxay isku
yidhaahdeen War arrintani macneheedu waa maxay? [13] Laakiinse qaar kale ayaa ku
jeesjeesay oo waxay yidhaahdeen Nimankanu khamri cusub bay ka soo dhargeen.

## Wacdigii Butros Wakhtiga Iidda Bentekoste

[14] Laakiin Butros oo kow iyo tobankii la taagan, ayaa intuu codkiisa kor u qaaday ku yidhi, iyaga
Nimanka Yahuudiya iyo dhammaan Quddus degganow, tan ogaada oo hadalkayga dhagaysta.
[15] Waayo, kuwanu ma sakhraansana sidaad u malaynaysaan; maxaa yeelay, waa saddex saac
oo maalinimo.[119*] [16] Laakiin tanu waa wixii uu nebi Yoo'eel sii sheegay [17] Eebbe wuxuu yidhi,
Maalmaha ugu dambaysta ah waxyaabahan ayaa dhici doonaa, oo Ruuxayga ayaan ku shubi
doonaa dadka oo dhan Oo wiilashiinna iyo hablihiinnuba wax bay sii sheegi doonaan,
Raggiinna dhallinyarada ahna wax bay arki doonaan, Odayaashiinnuna riyooyin ayay ku riyoon
doonaan; [18] Haah, oo maalmahaas addoommadayda rag iyo dumarba Ruuxaygaan ku shubi
doonaa, iyaguna wax bay sii sheegi doonaan. [19] Oo waxaan samada sare ka muujin doonaa
waxyaabo yaab leh, Dhulka hoosena waxaan ka muujin doonaa calaamooyin, Kuwaas oo ah

118 Sabuur 69:25 iyo 109:8
119 Sagaalka subaxnimo

dhiig iyo dab iyo qiiq. [20] Qorraxdu waxay isu beddali doontaa gudcur, Dayaxuna wuxuu isu
beddali doonaa dhiig, Intayna maalinta Rabbigu imanin ka hor, taas oo ah maalin wayn oo
caan ah. [21] Oo waxay noqon doontaa in ku alla kii magaca Rabbiga ku dhawaaqa uu
badbaado.[120*] [22] Ragyahow reer banii Israa'iil, hadalladan maqla; Ciisihii reer Naasared oo
ahaa nin Eebbe idiinku caddeeyay wax qabad xoog leh iyo mucjisooyin iyo calaamooyin oo
Eebbe ku sameeyay isaga idinka dhexdiinna, sidaad idinka qudhiinnuba u ogtihiin, [23] Markii
isaga lagu gacan galiyay taladii Eebbe qorsheeyay ee uu horay u goaamiyay waxaad ku
qabateen isaga gacanta kuwa aan sharciga lahayn oo iskutallaabta ayaad ku qodobteen ood
ku disheen. [24] Eebbe ayaa isaga sarakiciyay oo xanuunkii dhimashada ka furtay, maxaa
yeelay, dhimasho ma xajin karin. [25] Waayo, Daa'uud oo isaga ka hadlaya ayaa yidhi, Had iyo
jeerba Rabbiga ayaan hortayda ku arki jiray, Maxaa yeelay, midigtayduu joogaa si aan la ii gil
gilin. [26] Sidaas aawadeed qalbigaygu wuu farxay, carrabkayguna wuu riyaaqay; Weliba
jidhkayguna rajo ayuu ku nasan doonaa. [27] Maxaa yeelay, naftayda cadaab kuma dayn
doontid, Kaaga Quddduuska ahna uma dayn doontid inuu qudhmid arko.[121*] [28] Waxaad i tustay
jidadka nolosha, xaadirnimadaadana farxad ayaad iga buuxin doontaa.[122*] [29] Walaallayaal,
waxaan si cad idiinku sheegi karaa inuu awowgeen Daa'uud dhintay, lana aasay,
xabaashiisuna ilaa maanta inagu dhex taallo.

[30] Haddaba isagu nebi ayuu ahaa oo wuxuu ogaa inuu Eebbe dhaar ugu dhaartay isaga inuu
farcankiisa midkood carshigiisa ku fadhiisin doono, [31] Wuxuu hore u arkay oo ka hadlay
Masiixa sarakiciddiisa inaan isaga cadaab lagu daynaynin, jidhkiisuna qudhmid arkaynin.
[32] Ciisahan Eebbe ayaa sarakiciyay, annaga oo dhanna markhaatiyayaal baanu ka wada
nahay. [33] Haddaba isaga oo Eebbe midigtiisa sare loogu qaaday ayuu ballanqaadkii uu
Aabbaha ka helay oo ah Ruuxa Qudduuska ah, soo shubay waana waxan aad arkaysaan eed
maqlaysaan. [34] Maxaa yeelay, Daa'uud samooyinka kor uma aadin; laakiin isaga qudhiisaa
ayaa leh Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda fadhiiso [35] Ilaa oon cadaawayaashaa
cagahaaga hoostooda geliyo.[123*] [36] Reer banii Israa'iil oo dhan aad ha u ogaadeen inuu Eebbe
Ciisahan aad iskutallaabta ku qodobteen Rabbi iyo Masiixba ka dhigay. [37] Markay taas
maqleen ayaa qalbiga laga wada wareemay, markaasay ku yidhaahdeen Butros iyo rasuulladii
kale Walaallayaal, maxaannu yeellaa? [38] Markaasuu Butros iyaga ku yidhi, Toobadkeena, oo
mid kastoo idin ka mid ahba ha lagu biyagaliyo magaca Ciise Masiix si loogu dembi dhaafo, oo
waxaad heli doontaan hadiyadda Ruuxa Qudduuska ah. [39] Maxaa yeelay, ballanka waxaa leh
idinka iyo carruurtiinna iyo kuwa fog oo dhan iyo in alla intii Rabbiga Eebbaheenna ahu u
yeedho. [40] Oo Hadallo kale oo badan ayuu markhaati ahaan ugu waaniyay isagoo leh Naftiinna
ka badbaadiya qarnigan baadida ah. [41] Marka kuwii hadalkiisii aqbalay waa la biyo galiyay oo
qiyaastii saddex kun oo qof ayaa maalintaas iyaga ku soo biiray.

---

120 Yoo'eel 2:18-32
121 Inuu jidhkiisu xabaal ku uro ama ku qudhmo
122 Sabuur 16:11
123 Sabuur 110:1

## Noloshii Masiixiyiinta Waagaas

42 Marka waxay ku sii adkaysteen wax bariddii rasuullada iyo kulankoodii iyo kimista jebinteeda
iyo tukasho. 43 Oo qof kasta cabsi baa gashay; rasuulladuna waxay sameeyeen waxyaabo la
yaab leh iyo calaamooyin badan. 44 Oo muminiinta oo dhan way wada joogeen, wax walbana
wuu ka dhexeeyay, 45 Oo intay hantidooda iyo alaabtooda iibiyeen ayay dhammaan u wada
qaybiyeen siday qof walba baahidiisu ahayd. 46 Oo maalin walba iyagoo isku qalbi ah ayay
macbudka ku kulmi jireen oo kimistana guryahooday ku jejebin jireen, cuntadoodana farxad iyo
qalbi daacad ah ayay ku cuni jireen. 47 Eebbena way ammaani jireen oo dadka oo dhanna way
u bogeen iyaga. Eebbena maalin walba kuwo badbaaday ayuu ku dari jiray.

## Waxaa La Bogsiiyay Miskiin Curyaan Ah

**3** Haddaba Butros iyo Yooxanaa ayaa sagaalkii saac[124*] macbudka galay si ay u tukadaan.
2 Marka waxaa la soo qaaday nin curyaannimo ku dhashay oo maalin walba la ag dhigi jiray
albaabka macbudka ee Qurux Badane si uu kuwa macbudka galaya uga dawarsado. 3 Deedna
markuu Butros iyo Yooxanaa oo macbudka galaya arkay ayuu wax waydiistay iyaga. 4 Marka
Butros oo Yooxanaana la socdo ayaa intuu aad eegay ku yidhi, Na soo eeg. 5 Deedna wuu
eega iyaga, isagoo filaya inuu iyaga wax ka heli doono. 6 Laakiin Butros baa ku yidhi, Lacag iyo
dahab midna ma haysto, laakiin waxaan haysto ayaan ku siinayaaye, Magaca Ciise Masiixii
reer Naasared, kac oo soco! 7 Markaasuu intuu gacanta midigta ah qabtay sarakiciyay oo
markiiba cagihiisii iyo kubabkiisii ayaa xoogaystay. 8 Deedna intuu kor u booday ayuu istaagay
oo socod billaabay; markaasuu iyaga macbudka la galay isaga oo socda oo bood boodaya oo
Eebbe ammaanaya. 9 Markaasay dadkii oo dhan wada arkeen isagoo socda oo Eebbe ayay
ammaaneen; 10 Oo markay garteen inuu kii Albaabka Quruxda Badne agtiisa dawarsiga u
fadhiyi jiray yahay way ka yaabeen arrintiisa.

## Wacdigii Butros Xaramka Ka Jeediyay

11 Oo intuu Butros iyo Yooxanaa ku dhegay ayay dadkii oo dhan ku soo wada ordeen balbaladii
la odhan jiray Balbaladii Sulaymaan iyaga oo aad u yaabban. 12 Dabadeedna markuu Butros
dadkii arkay ayuu khudbad u jeediyay oo ku yidhi, Nimanyahow reer banii Israa'iil, Maxaad
arrintan ula yaabbantihiin, ama maxaad sidaas noogu eegaysaan sidii annagoo xooggayaga
ama alle ka cabsigayaga ku socodsiinnay isaga? 13 Eebbaha Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub
oo ah Eebbaha awowayaasheen, wuxuu ammaanay Adeegihiisa Ciise, kii aad gacan geliseen
eed Bilaatos hortiisa ku dafirteen markuu go'aansaday inuu sii daayo. 14 Laakiin idinku waxaad
diideen Ka Qudduuska iyo Xaqa ah oo waxaad waydiisateen nin gacan ku dhiigle ah in laydiin
sii daayon, 15 Oo waxaad disheen Amiirkii nolosha, kii Eebbe ka sare kiciyay kuwii dhintay,
annaguna markhaatiyayaal ayaannu ka nahay. 16 Oo magiciisa ayaa kan aad aragtaan eed
garanaysaan xoog siiyay, rumaysadka uu magiciisa rumeeyay aawadiis. Rumaysadka uu isaga
rumeeyay ayaana ninkan dhammaantiin idin hor taagan caafimaadkan siiyay. 17 Waanu
ogahay, walaallayaal, inaad tan idinka iyo madaxdiinuna aqoon la'aan u samayseen. 18 Laakiin
Eebbe sidaasuu u dhammeeyay waxyaabihii uu horay ugu sheegay afafkii nebiyada oo dhan
ee ahaa in Masiixu silci doono. 19 Haddaba toobadkeena oo soo noqda, si dembiyadiinna loo

124 Saddexdii galabnimo

cafiyo oy xilliyo barwaaqo leh xagga Rabbiga uga yimaaddaan, [20] Oo uu Ciise Masiixii uu horay idiinku doortay idiinku soo diro,
[21] ka ay waajibka tahay inay samadu aqbasho tan iyo wakhtiga wax walba oo Eebbe afkii nebiyadiisii qudduuska ahaa tan iyo Bilowgii kaga hadlay la dhisayo. [22] Muuse wuxuu yidhi, Rabbiga Eebbaha ahu wuxuu walaalihiinna dhexdooda idiinka soo bixin doonaa nebi aniga oo kale ah. Waana inaad isaga ka dhegaysataan wax kasta oo uu idinku yidhaahdo. [23] Oo Waxay noqon doontaa in qof alla qofkii nebigaas dhegaysan waaya dadka laga dhex saaro oo la baabbi'iyo.[125*] [24] Nebiyadii oo dhan, Samuu'eel iyo kuwii ka dambeeyayba waxay wada sheegeen maalmahan. [25] Waxaad tihiin wiilashii nebiyada iyo wiilashii axdigii Eebbe la dhigtay awowayaashiin, markuu Ibraahim ku yidhi, Qabiilooyinka dunida oo dhan farcankaagay ku barakoobi doonaan. [26] Eebbe markuu Adeegihiisa kiciyay, idinka ayuu marka hore idiin soo diray si uu idiin barakeeyo markuu mid kastoo idinka mid ahuba dembiyadiisa ka soo jeedsado.

### Butros Iyo Yooxanaa Waxaa La Hor Keenay Shirka

**4** Marka iyaga oo dadkii la hadlaya ayay wadaaddadii iyo hoggaamiyihii macbudka iyo Sadukiintii u yimaaddeen, [2] Iyaga oo ka cadhaysan, maxaa yeelay, waxay dadka barayeen oy ogaysiinayeen inuu Ciise kuwii dhintay ka sarakacay. [3] Markaasay qabteen oo xabsiga ku tuureen ilaa iyo maalintii ku xigtay, maxaa yeelay, durba makhrib baa la gaadhay. [4] Laakiin kuwo badan oo hadalkii[126*] maqlay way rumeeyeen; oo tirada raggu waxay noqotay qiyaastii shan kun. [5] Marka maalintii ku xigtay taliyayaashoodii iyo odayaashii iyo culimmadii ayaa Quddus isugu wada yimid; [6] Waxaana ka mid ahaa Annas oo ahaa imaamka guud iyo Kayafas iyo Yooxanaa iyo Aleksanderos iyo kuwii imaamka guud qaraabada la'ahaa. [7] Oo intay iyaga dhexda soo istaagiyeen ayay waydiiyeen oo ku yidhaahdeen Xooggeed ama magaceed waxan ku samayseen? [8] Markaasuu Butros oo Ruuxa Qudduuska ahu ka buuxo iyaga ku yidhi, hoggaamiyayaasha shacabka iyo duqaydow, [9] haddii maanta naloo haysto wanaag loo sameeyay nin itaal daran iyo sidii ninkan loo bogsiiyay, [10] dhammaantiin waxaad ogaataan, idinka iyo dadka reer banii Israa'iil oo dhan, in magaca Ciise Masiixa reer Naasaredkii aad iskutallaabta ku qodobteen oo Eebbe kuwii dhintay ka sarakiciyay daraaddiis ninkanu isaga oo bogsaday idin hor taaganyahay. [11] Isagu waa dhagaxa ay kuwiinna wax dhisa diiddeen oo wuxuu noqday tiir dhexaadka. [12] Mid kale oo badbaado laga helayana ma jiro, maxaa yeelay, ma jiro magac kale oo samada hoosteeda dadka dhexdooda loo bixiyay oy waajib tahay inaan ku badbaadno.

[13] Markay arkeen Butros iyo Yooxanaa dhiirranaantooda, oy ogaadeen inay yihiin niman caamo ah oon wax baranin, way la yaabeen; markaasay garteen inay Ciise la joogi jireen.[127*] [14] Laakiin markay arkeen ninkii la bogsiiyay oo iyaga garab taagan, wax ay ku hadlaan way waayeen.
[15] Balse waxay ku amreen inay shirka dibadda uga baxaan oo way ka wada hadleen iyagaoo leh, [16] Maxaynu nimankan ka yeelnaa? Waayo, inay mucjiso la yaab leh sameeyeen reer Quddus oo dhan ayaa arka; mana dafiri karno. [17] Laakiin si ayna dadka ugu sii faafin aynu uga digno inayna hadda ka dib magacan cidna kala hadlin. [18] Markaasay u yeedheen oo ku amreen inayna aslanba Ciise magiciisa ku hadlin waxna ku barin. [19] Laakiin Butros iyo Yooxanaa ayaa

125 Sharciga Kunoqoshadiisa 18:18-19
126 Wacdigii Butros
127 In ay xertii Ciise yihiin

u jawaabay iyaga oo ku leh Idinkuba xukuma inay Eebbe agtiisa xaq ku tahay intaannu Eebbe
adeeci lahayn inaannu idinka idin adeecno; [20] Waayo, waxaannu aragnay eennu maqalnay ka
hadalkiisa iskama dayn karno. [21] Markaasay intay u hanjabeen, iska sii daayeen, waayo, waxay
ku ciqaabaan way waayeen dadka aawadiis; maxaa yeelay, dadka oo dhan waxay Eebbe ku
ammaaneen wixii la sameeyay. [22] Waayo, ninkii mucjisada lagu bogsiiyay afartan jir wuu ka
waynaa.

### Muminiintii Waxay Ku Ducaysteen Geesinimo

[23] Dabadeedna markii la sii daayay saaxiibbadood ayay ku noqdeen oy uga warrameen waxay
wadaaddada sare iyo odayaashu ku yidhaahdeen oo dhan. [24] Deedna markay taas maqleen,
iyagoo isku wada qalbi ah, ayay codkooda baryada Eebbe sare ugu qaadeen iyagoo leh
Rabbiyow, adigu waxaad tahay ka samada iyo dhulka iyo badda iyo waxa ku jira oo dhan
abuuray; [25] Kii Ruuxa Qudduuska ah kaga hadlay afkii awowgayo Daa'uud adeegihiisii ee yidhi,
Umaaduhu maxay u cadhoodeen oo Dadkuna maxay ugu fikireen wax aan waxba ahayn?
[26] Boqorrada dhulku way istaagyeen. Madaxduna waxay isu bahaysteen Rabbiga iyo
Masiixiisa.[128*] [27] Waayo, runtii magaaladan gudaheeda waxaa Ciise, Adeegahaaga qudduuska
ah eed subagtay ka hortagiisa isu bahaystay Herodos iyo Bontiyos Bilaatos oy la jiraan dadka
aan Yuhuudda ahayn iyo reer banii Israa'iil, [28] Inay sameeyaan wax alla waxay gacantaada iyo
taladaadu horay u qorshaysay inay dhacaan. [29] Rabbiyow, hadda eeg, hanjabaaddooda oo
addoommadaada sii geesinimo ay eraygaaga ku sheegaan, [30] Oo gacantaada u soo fidi si aad
wax u bogsiiso ood calaamooyin iyo waxyaabo la yaab leh ugu dhacaan magaca
Adeegahaaga qudduuska ah ee Ciise. [31] Oo markay tukadeen dabadeed meeshay ku
shirsanaayeen ayaa gariirtay oo dhammaantood waxaa ka wada buuxsamay Ruuxa
Qudduuska ah oo eraygii Eebbe ayay si geesinimo leh ugu hadleen.

### Wax Walba Xerta Way Ka Dhexeeyeen

[32] Marka muminiintu isku qalbi iyo naf ayay ahaayeen; oo midna ma odhan jirin, Waxaan
leeyahay waa waxaygii, laakiin wax waluba way ka dhexeeyeen. [33] Oo rasuulladuna si xoog
badan ayay sarakicidda Sayid Ciise uga marag furayeen oo nimco badan ayaa dhammaantood
dul joogtay. [34] Qof baahanna iyaga kuma jirin, waayo, qof kasta oo dhul ama guri lahaa intuu
iibiyay ayuu qiimihii wixii la siiyay keenay, [35] Oo rasuullada hor dhigay oo mid kasta siday
baahidiisu ahay ayaa wax loo siiyay. [36] Marka Yuusuf oy rasuulladu ku naanisi jireen Barnabas
oo lagu macneeyo (Wiilkii dhiiri gelinta) oo Laawi Qubrus u dhashay ahaa [37] ayaa intuu beer uu
lahaa iibiyay lacagteedii keenay oo rasuullada hor dhigay.

### Ananiyas Iyo Safira

**5** Laakiin nin Ananiyas la odhan jiray iyo xaaskiisa Safira, ayaa hanti ay lahaayeen iibiyay,
[2] Markaasuu qiimihii xaaskiisa oo la og, intuu qayb la hadhay, badh keenay oo rasuullada hor
dhigay. [3] Laakiin Butros ayaa ku yidhi, Ananiyasow, muxuu Shaydaanku qalbigaaga u galiyay
inaad Ruuxa Qudduuska ah been u sheegto ood qiimihii dhulka badh la hadho? [4] Intaan la
iibinin, saw waxaagii ma ahayn? Oo markii la iibiyay dabadeed, maad adigu qiimihii la siiyay

128 Sabuur 2:1-2

iska haysatid? Maxaad waxan qalbigaaga u gelisay? Dad been uma aadan sheegin balse
Eebbe. 5 Markuu Ananiyas hadalladaas maqlay dhulka ayuu ku dhacay oo naftii ayaa ka
baxday; deedna cabsi wayn ayaa gashay kuwii arrintaas maqlay oo dhan. 6 Marka nimankii
dhallinyarada ahaa, intay kaceen oy duudduubeen isaga ayay qaadeen oy soo aaseen.
7 Abbaaraha saddex saacadood dabadeed ayay xaaskiisii soo gashay iyadoon ogayn wixii
dhacay. 8 Marka Butros baa ku yidhi, Ii sheeg inaad dhulkii intaa ku iibiseen. Markaasay tidhi
Haah, intaasaannu ku iibinnay. 9 Deedna Butros baa ku yidhi, Sideed ugu heshiiseen inaad
Ruuxa Rabbiga jirrabtaan? Bal eeg, kuwii ninkaaga soo aasay jaan qaadkooda albaabka
agtiisuu ka soo shanqadhayaa. Adigana way ku qaadi doonaan. 10 Isla markiiba intay cagihiisa
ku dhacday ayay naftii ka baxday; markaasay nimankii dhallinyarada ahaa soo galeen, oo
waxay arkeen iyadoo meyd ah, deedna intay qaadeen ayay ninkeedii ku ag aaseen. 11 Marka
kiniisaddii iyo kuwii waxyaabahaas maqlay oo dhan cabsi wayn ayaa gashay.

### Mucjisooyin Badan Iyo Aayado Ayaa Dhacay

12 Marka rasuulladii waxay dadka dhexdiisa gacmahooda ku sameeyeen calaamooyin iyo
waxyaabo badan oo yaab leh oo iyagoo isku wada qalbi ah ayay Balbaladii Sulaymaan wada
joogeen. 13 Oo qof dadka kale ah oo ku dhiirraday inuu iyaga ku biiro ma jirin, hase ahaatee
dadku way maamuuseen iyaga; 14 Oo waxaa ku soo kordhay iyaga kuwo badan oo Rabbiga
rumaystay, oo rag iyo dumarba leh; 15 Waliba kuwii bukay ayay jidadka u soo saaraan iyagoo
sariiro iyo dermooyin ku jiifa si markuu Butros soo maro uu qaarkood hooskiisu ugu dhoco.
16 Oo waxaa kaloo ku soo uruuray dad badan oo ka yimid magaalooyinkii Quddus ku
wareegsan, iyagoo wada dad buka iyo kuwo shaydaanno wasakh lahu derdereen oo kulligood
waa la wada bogsiiyay.

### Butros Iyo Yooxanaa Ayaa Mar Labaad La Xidhay Oo Golaha Sare La Hor Geeyay

17 Marka imaamkii guud iyo taageereyaashiisii oo dhan oo ah dariiqada Sadukiinta ayaa kacay;
markaasay iyagoo aad u cadhaysan, 18 Intay rasuulladii qab qabteen xabsi ku tuureen.
19 Laakiin malagii Rabbiga ayaa habeennimo xabsigii albaabbada ka furay oo intuu dibadda u
soo saaray ku yidhi, 20 Taga oo macbudka isdhex taaga oo dadka ku wacdiya erayada
Noloshan oo dhan. 21 Deedna markay taas maqleen, intay aroor hore macbudka galeen ayay
dadkii wax bareen. Laakiin imaamkii guud iyo taageereyaashiisii ayaa yimid oo waxay isugu
yeedheen golihii iyo cuqaashii reer banii Israa'iil oo dhan, markaasay xabsigii u cid direen si
kuwii xidhnaa loo keeno. 22 Laakiin saraakiishii markay xabsigii tageen way ka waayeen iyaga,
markaasay shirkii ku noqdeen oo u warrameen, 23 Oo waxay ku yidhaahdeen Waxaannu
aragnay xabsigii oy albaabadu u xidhanyihiin oy ilaaladii gaadhka ahayd albaabbada ka
taaganyihiin; laakiin markaannu furnay cidna kuma jirin. 24 Deedna taliyihii macbudka iyo
wadaaddadii sare markay hadalladaas maqleen way la yaabeen waxay arrintaasu noqon
doonto. 25 Marka mid ayaa intuu u yimid ku yidhi, Eega, nimankii aad xabsiga ku riddeen,
macbudkay dhex taaganyihiin oy dadka wax ku barayaan. 26 Markaasuu taliyihii isagoo
saraakiil kale wata intuu tegay, rabshad la'aan soo kaxeeyay; waayo, waxay ka cabsadeen
inay dadku dhagax tuuraan. 27 Dabadeena markay keeneen, shirkii ayay soo hor istaajiyeen.
Marka imaamkii guud ayaa wax waydiiyay, 28 Oo yidhi, Waxaannu idinku amarnay inaydaan
magacan wax ku barin; laakiin bal eega, wax bariddiinna ayaad Quddus ka buuxiseen, oo
weliba waxaad damacsantihiin inaad ninkan dhiiggiisa dusha naga saartaan. 29 Laakiin Butros
iyo rasuulladii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waa inaannu Eebbe addeecno intaannu dad

addeeci lahayn. 30 Eebbihii awowayaashayo ayaa soo sarakiciyay Ciisihii aad geedka ku
deldesheen ood disheen. 31 Oo Eebbe ayaa isaga gacantiisa midig saray ugu qaaday si uu
Amiir iyo Badbaadiye u ahaado oo uu Israa'iil toobad iyo dembidhaaf u siiyo. 32 Arrintaasna
annagaa marag ka ah, waxaa kale oo marag ka ah Ruuxa Qudduuska ah oo uu Eebbe siiyay
kuwa addeeca isaga. 33 Deedna markay taas maqleen, way xanaaqeen, oo waxay ku
tashadeen inay laayaan. 34 Laakiin waxaa shirkii ka dhex istaagay mid Farrisiinta ka mid ahaa
oo la odhan jiray Gamalii'eel, oo macallinka shareecada ahaa, oy dadku aad u xushmeeyaan,
oo wuxuu amar ku bixiyay in nimanka cabbaar dibadda loo saaro. 35 Markaasuu iyaga ku yidhi,
Nimanyahow reer banii Israa'iil, iska ilaaliya waxaad la damacsantihiin inaad nimankan ku
samaysaan. 36 Maxaa yeelay, hadda ka hor waxaa kacay Tudas, isagoo inuu nin wayn yahay
sheegtay, oo niman badan oo qiyaastii afar boqol gaadhayaa ayaa raacay. Waana la dilay
isaga, taageereyaashiisii dhammaantooda way kala firxeen, oo waxay noqdeen wax aan jirin.
37 Isaga ka dibna waagii tira koobka waxaa kacay Yuudaskii reer Galili oo dad duufsaday;
isaguna wuu dhintay, taageerayaashiisii oo dhanna way kala firxeen. 38 Haddaba waxaan
idinku leeyahay, nimankan faraha ka qaada oo iska daaya; waayo, waxanu ama mabda'anu
hadday xagga dad ka yimaaddeen, way iska baabbi'i doonaan; 39 laakiin hadday Eebbe ka
yimaaddeen, ma baabbi'in kartaan oo waxaad u muuqan doontaan kuwo Eebbe dagaal kula
jira. 40 Markaasay ku waafaqeen taladiisa oo intay rasuulladii u yeedheen, ayay garaaceen, oo
waxay ku amreen inayna magaca Ciise ku hadlin, markaasay sii daayeen. 41 Dabadeedna
waxay golaha hortiisa ka tageen iyagoo ku faraxsan in lagu tiriyay inay istaahilaan in Magaca
Ciise aawadiis loo sharaf tiro. 42 Marka maalin walba macbudka dhexdiisa iyo guri guriba
mayna joojinin inay dadka wax ku baraan oy wax Ciise Masiix ku saabsan ku wacdiyaan.

## Toddobadii Adeegga Loo Doortay

**6** Maalmaas waxaa dhacday maray xertu badatay, inay Yuhuuddii Giriigta ahayd ka
gunuunaceen Cibraaniyiintii, maxaa yeelay, carmalladoodii wixii maalin walba la siin jiray
looguma hagar bixin. 2 Markaasay laba iyo tobankii xer fara badan isugu yeedheen oo ku
yidhaahdeen Ma wanaagsana inaannu ereyga Eebbe iska dayno oo aannu miisas ka adeegno.
3 Sidaa darteed walaallayaal, iska soo dhex xula toddoba nin oo sharaf leh, oy ka buuxaan
Ruuxa iyo xigmaddu oo aannu u dooranno adeeggan. 4 Balse annagu waxaannu u go'aynaa
salaadda iyo adeegga erayga. 5 Marka taladoodii kulankoodii oo dhan ayaa ku farxay oo waxay
doorteen Istefanos oo ahaa nin uu ka buuxo rumaysad iyo Ruuxa Qudduuska ah iyo Filibos iyo
Barokhoros iyo Nikanoor iyo Timoon iyo Barmenaas iyo Nikolaskii reer Antiyokh oo diinta soo
galay.[129*] 6 Kuwaas ayay rasuulladii hor keeneen oo intay tukadeen ayay gacmahooda
saareen. 7 Markaasuu eraygii Eebbe faafay, tiradii xerta Quddusna aad bay u badatay oo in
badan oo wadaaddo ah ayaa iimaanka ku hanuunay.

## Ashtakadii Lagu Ashtakeeyay Istefanos

8 Marka Istefanos oy nimco iyo xoog ka buuxaan ayaa dadka dhexdiisa ku sameeyay
waxyaabo la yaab leh iyo mucjisooyin waawayn. 9 Dabadeedna waxaa kacay oo Istefanos
muran iyo mucaaradnimo kala hortagay kuwii sunagogga oo la odhan jiray sunagogga
lebertiita[130*] iyo ka reer qayrawaan iyo reer Iskanderiya iyo kuwa Kilikiya iyo Aasiya.

129 Yuhuudiyadda qaatay.

130 Sunagogga xorta ah

[10] Markaasay xigmaddii iyo Ruuxii uu ku hadlay is hor taagi kari waayeen. [11] Deedna niman
ayay laaluush siiyeen oo nimankii ayaa yidhi, Waxaannu maqalnay isagoo Muuse iyo Eebbeba
caayaya. [12] Markaasay dadkii iyo odayaashii iyo culimmadiiba kiciyeen oo intay si kedis ah ku
soo qabteen, ayay golaha geeyeen.[131*] [13] Marka waxay soo taageen markhaatiyayaal been ah
oo leh Ninkanu marna afka kama qaado inuu wax ka sheego meeshan qudduuska ah iyo
shareecadaba, [14] Maxaa yeelay, waxaannu maqalnay isagoo leh: Ciisahan reer Naasared ayaa
meeshan dumin doona, oo wuxuu wax ka beddeli doonaa sunnihii uu Muuse noo keenay.
[15] Markaasuu golihii oo dhan aad u eegay isaga oo waxay arkeen wejigiisa oo weji malag la
moodo.

## Wacdigii Istefanos

**7** Marka imaamkii guud ayaa ku yidhi, Arrintanu ma sidaasaa? [2] Deedna wuxuu yidhi,
Walaallayaal iyo aabbayaal, i dhegaysta, Eebbaha Ammaanta leh wuxuu u muuqday
awowgeen Ibraahim markuu Mesobotamiya[132*] joogay intuusan Xaaraan degin, [3] Oo wuxuu ku
yidhi, Ka tag waddankaaga iyo dadkaaga oo u kac dhulka aan ku tusi doono. [4] Markaasuu ka
tagay dalka Kaldaniya oo wuxuu degay Xaaraan; oo markuu aabbihii dhintay ayuu Eebbe
isaga meeshaas ka soo wareejiyay oo dalkan aad hadda deggantihiin keenay, [5] Oo wax dhaxal
ah kama uusan siinin xataa meel lug la dhigo; laakiin wuxuu isaga u ballanqaaday inuu dalka
isaga iyo farcankiisa ka dambeeyaba mulki u siin doono in kastoo uusan wax ubad ah lahayn.
[6] Marka Eebbe sidan ayuu yidhi, Farcankaagu dal shisheeye ayay degi doonaan oo waa la
addoonsan doonaa iyaga oo afar boqol oo sano ayaa la dhibi doonaa. [7] Oo ummadda iyaga
addoonsata waan xukumi doonaa ayuu yidhi, Eebbey; markaas ka dibna way soo bixi doonaan
oo meeshan ayay igu caabu doonaan.[133*] [8] Oo wuxuu isaga siiyay axdiga gudniinka; haddaba
Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, oo maalintii siddeedaad ayuu guday isaga; Isxaaqna wuxuu
dhalay Yacquub; Yacquubna wuxuu dhalay laba iyo tobankii aynu ka soo farcannay.
[9] Kuwii aynu ka soo farcannayna intay Yuusuf ka hinaaseen ayay Masar ka iibiyeen; [10] Laakiin
Eebbe ayaa isaga la jiray oo dhibaatooyinkiisii oo dhan ka samata bixiyay, oo wanaag iyo
xigmad ka siiyay Fircoon boqorkii Masar; markaasuu isaguna wuxuu isagaa ka dhigay taliyaha
guud ee Masar iyo reerkiisa oo dhanba. [11] Haddaba waxaa Masar iyo Kancaan oo dhan ka
dhacday abaar iyo gaajo daran; awowayaasheenna cuntadiibaa ka dhammaatay. [12] Laakiin
markuu Yacquub maqlay in Masar sarreen laga helayo, ayuu markii ugu horraysay
awowayaasheen u diray. [13] Oo mar labaadkii ayuu Yuusuf walaalihii is baray; markaasuu
Fircoon qoyska Yuusuf gartay. [14] Deedna Yuusuf wuxuu u cid diray oo u yeedhay aabbihii
Yacquub iyo dadkiisii oo dhan oo ahaa shan iyo toddobaatan qof. [15] Marka Yacquub Masar
ayuu tegay oo Isaga qudhiisa iyo awowayaasheenba way dhinteen; [16] Deedna waa la qaaday
oo Shekem ayaa la geeyay oo xabaashii Ibraahim qiimaha lacagta ah kaga iibsaday wiilashii
Xamoor oo Shekem deganaa ayaa lagu aasay. [17] Laakiin markuu wakhtigii Eebbe Ibraahim
kula ballamay soo dhawaaday, dadkii way kordheen oo Masar ayay ku bateen, [18] Ilaa uu boqor
kale oon Yuusuf garanaynin Masar ka kacay. [19] Isaguna dadkeenna wuu khayaanay oo
awowayaasheen wuu dulleeyay oo wuxuu ku qasbay inay ubadkooda yar yar iska tuuraan, si
ayna u sii noolaanin. [20] Muusena wakhtigaas ayuu dhashay, oo wuxuu ahaa wax qurux badan;

131 Golaha sare ee arrimaha Yuhuudda.
132 Dalka maanta Ciraaq loo yaqaanno.
133 Bilowgii 15:13-14

oo saddex bilood ayaa gurigii aabbihii lagu hayay; 21 Markii la tuurayna, Fircoon gabadhiisii
ayaa qaadatay oo sidii wiilkeeda oo kale u korsatay. 22 Muusena xigmaddii Masriyiinta oo dhan
ayaa la baray, oo hadalkiisa iyo falkiisaba xoog buu ku lahaa. 23 Laakiin markuu afartan
sannadood gaadhay waxaa qalbigiisa gashay inuu walaalihiisa reer banii Israa'iil soo booqdo.
24 Oo markuu midkood oo la gardarriysano arkay wuu difaacay oo intuu kii la dulmayay uu
aarguday ayuu Masrigii dilay; 25 Deeedna wuxuu u maleeyay in walaalihiis garteen sida Eebbe
gacantiisa iyaga ugu samata bixinayo, laakiin mayna fahmin. 26 Marka maalintii ku xigtay ayuu
iyagoo diriraya ku so baxay, oo wuxuu damcay inuu heshiisiiyo oo wuxuu yidhi, Nimanyahow,
walaalaad tihiine; maxaad isu dulmaysaan? 27 Laakiin kii dariskiisa dulmayay, ayaa intuu isaga
iska riixay ku yidhi, Waryaa Yaa hoggaamiye iyo garsoore nooga kaa dhigay? 28 Ma waxaad
doonaysaa inaad i disho sidaad Masrigii shalay u dishay? 29 Marka Muuse hadalkaas aawadiis
wuu cararay oo dalka Midyaan ayuu isagoo ajinabi ah degay oo halkaas ayuu laba wiil ku
dhalay. 30 Deedna markay afartan sannadood dhammaatay malag ayaa Buurta Siinay
baadiyaheeda uga muuqday isagoo geed ululaya oon gubanayn ku dhex jira. 31 Oo markuu
Muuse arkay wuxuu arkay wax lala yaabo, deedna wuu ku soo dhawaaday si uu eego, waxaa
u yimid[134*] codkii Rabbiga oo leh 32 Anigu waxaan ahay Eebbaha awowayaashaa, Eebbaha
Ibraahim iyo Eebbaha Isxaaq iyo Eebbaha Yacquub. Markaasuu Muuse gariiray oo ku dhici
waayay inuu eego.

33 Deedna Rabbigu wuxuu isaga ku yidhi, Kabaha cagahaaga ka bixi; maxaa yeelay,
meeshaad ku taagantahay waa dhul qudduus ah. 34 Anigu dadkayga Masar jooga rafaadkooda
waan arkay, taahoodana waan maqlay, oo waxaan u imid inaan samata bixiyo; marka kaalay,
Masar ayaan kuu dirayaaye. 35 Muusahan ay diideen oy ku yidhaahdeen Yaa taliye iyo
garsoore nooqa kaa dhigay? Isaguu Eebbe u soo diray gacanta malagii geedka uga muuqday
si uu taliye iyo samata bixiye u ahaado. 36 Isaga ayaa Masar ka soo saaray, oo waxyaabo la
yaab leh iyo calaamooyin Masar iyo Badda Cas, iyo lama dagaanka afartan sannadood ku
sameeyay. 37 Kaasu waa Muusihii reer banii Israa'iil ku yidhi, Eebbe wuxuu walaalihiin idiinka
soo dhex kicin doonaa nebi aniga oo kale ah. 38 Kaasu waa kii ku dhex jiray kiniisaddii lama
dagaanka ee la joogay malagii isaga kala hadaay Buurta Siinay iyo awowayaasheen, kii la
siiyay hadallada nool si uu inoo siiyo. 39 Awowayaasheenna mayna doonaynin inay isaga
addeecaan, laakiin intay iska riixeen ayay qalbigooda geliyeen inay Masar dib ugu noqdaan,
40 Oo waxay Haaruun ku yidhaahdeen Inoo samee ilaahyo ina hor socda; maxaa yeelay,
Muusihii inaga soo kaxeeyay dalka Masar wax ku dhacay garanmayno. 41 Oo waxay
maalmahaas sameeyeen dibi[135*] oo qurbaan ayay sanamkii u bixiyeen, oo waxay gacmahooda
ku sameeyeen ayay ku farxeen. 42 Laakiin Eebbe wuu ka jeedsaday oo wuxuu faraha uga
qaaday inay meerayaasha samada caabudaan; sida ay ugu qorantahay kitaabka nebiyada:
Reer banii Israa'iilow, afartankii sannadood eed lama dagaanka joogteen, Ma anigaad xoolo
qalan iyo allabaryo i siiseen? 43 Weliba waxaad qaadateen taanbuuggii Molokh Iyo xiddigtii
Eebbaha Remfan oo ah sanamyadii aad inaad caabuddaan u samaysateen. Haddaba waxaan
idiin kaxayn doonaa Baabuloon shishadeeda. 44 Awowayaasheen waxay lama dagaanka ku
hayeen taambuuggii maragga, sidii kii Muuse la hadlay ugu amray isaga inuu u sameeyo
qaabkii uu u arkay oo kale. 45 Taas ayay awowayaasheen Yashuuca la soo qaadeen markay
qabsadeen oy qaateen dhulkii ummadihii Eebbe awowayaasheen hortooda ka eryay, ilaa
waagii Daa'uud. 46 Kii Eebbe hortiis wanaagga ka helay ee waydiistay inuu Eebbaha Yacquub

134 Wuxuu maqlay
135 Sanam dibi loo ekaysiiyay.

meel uu dego u heloh. [47] Laakiin Sulaymaan ayaa guri u dhisay. [48] Hase ahaatee Ka ugu
sarreeya ma dego guryo gacmo lagu sameeyo; sida nebigu leeyahay [49] Rabbigu wuxuu
leeyahay Samadu waa carshigayga, Dhulkuna waa meeshaan cagaha saaro, Guri caynkee ah
ayaad ii dhisi doontaan? Ama maxay tahay meesha aan ku nastaa? [50] Miyayna gacantaydu
samaynin waxyaabahan oo dhan? [51] Kuwiinan madaxa adag oon qalbiga iyo dhegahaba laga
gudin, weligiinba Ruuxa Quddduuska ah waad hor joogsataan. Siday awowayaashiin yeeli jireen
oo kale ayaad idinkuna yeeshaan. [52] Bal nebiyada kee ayayna awowayaashiin ciqaabin? Xataa
waxay dileen kuwii horay u sii sheegay imaatinka Ka xaqa ah; kaad idinku hadda
gacangeliseen ood disheen. [53] Waxaad shareecada u hesheen sidii wax malaa'igahu dhiibeen,
balse maydaan ku dhaqmin.

### Rajmintii Istefanos

[54] Haddaba markay waxyaabahaas maqleen way xanaaqeen oo ilkaha ayay u qaniineen isaga.
[55] Laakiin isagoo Ruuxa Quddduuska ahu ka buuxo ayuu samada aad u eegay, oo wuxuu arkay
ammaanta Eebbe iyo Ciise oo midigta Eebbe taagan, [56] Deedna wuxuu yidhi, Bal eega,
waxaan arkaa samooyinkii oo la furay iyo Wiilka Aadanaha oo midigta Eebbe taagan.
[57] Markaasay kor u qayliyeen oy dhegaha ka furaysteen oo iyagoo isku duuban ayay ku soo
boodeen isaga. [58] Markaasay intay magaalada ka soo saareen rajmiyeen; kuwii markhaatiga
ahaana dharkoodii waxay ag dhigteen nin dhalin yaro ah oo Sawlos la odhan jirayi.
[59] Markaasay Istefanos oo Rabbiga baryaya oo ku leh Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado
dhagaxeeyeen. [60] Deedna intuu jilba joogsaday ayuu cod dheer ku qayliyay oo ku yidhi,
Rabbiyow, dembigan dushooda ha ka dhigin. Oo markuu sidaa yidhi, ayuu dhintay.

### Sawlos Ayaa Kiniisaddii Ciqaabay Oo Way Kala Firxatay

**8** Marka Sawlos raalli buu ka ahaa dilkiisa. Oo maalintaas kiniisaddii Quddus aad baa loo
dhibay oo dhammaantood rasuulladii mooyee waxay u kala firxadeen gobollada Yahuudiya iyo
Samaariya. [2] Marka niman alla ka cabsi leh ayaa Istefanos aasay oo aad ugu baroortay.
[3] Laakiin Sawlos aad buu kiniisadda u rafaadiyay oo intuu guri walba galay ayuu rag iyo
dumarba ka soo jiiday oo xabsi ku tuuray.

### Samaariya Injiilka Ayaa Lagu Wacdiyay

[4] Haddaba kuwii kala firxaday, meel walba oo ay mareenba eraygii ayay ku wacdiyeen. [5] Marka
Filibos wuxuu tegay magaalada Samaariya oo wuxuu dadka ku wacdiyay Masiixa. [6] Deedna
dadkii faraha badnaa, iyagoo isku qalbi ah ayay wuxuu Filibos ku hadlay dhagaysteen markay
maqleen oy arkeen mucjisoonka uu sameeyay. [7] Waayo, kuwo badan oo shaydaanno wasakh
leh qabay, ayuu jinniyadii oo cod dheer ku dhawaaqaya ka saaray, oo kuwo badan oo
curyaamiin iyo naafo ahaana waa la bogsiiyay. [8] Magaaladaasna aad baa looga farxay.

### Simoonkii Sixiroolaha Ahaa

[9] Laakiin waxaa jiray nin Simoon la odhan jiray oo markii hore magaalada wax ku sixri jiray oo
dadka reer Samaariya ka yaabin jiray, isagoo isugu sheegaya inuu yahay nin wayn.
[10] Dhammaantoodna yar iyo waynba isagay wada dhegaysan jireen oo waxay odhan jireen

Ninkanu waa xooggii Eebbe oo la odhan jiray Wayne. 11 Sababtay u dhegaysan jireenna waxay
ahayd muddo dheer ayuu iyaga sixirkiisa kaga yaabin jiray.

12 Laakiin markay Injiilka boqortooyada Eebbe iyo magaca Ciise Masiix ee Filibos ku wacdiyay
rumeeyeen rag iyo dumarba iyaga waa la biyo galiyay. 13 Simoon laftiisana wuu rumeeyay oo
markii la biyo galiyay dabadeed, had iyo jeerba wuxuu la socon jiray Filibos, wuuna la yaabay
markuu arkay calaamooyinkii yaabka lahaa iyo mucjisooyinkii waawaynaa ee dhacay.

### Butros Iyo Yooxanaa Oo Samaariya Tegay

14 Haddaba markay rasuulladii Quddus joogay maqleen inay Samaariya eraygii Eebbe
aqbashay, ayay waxay u soo direen Butros iyo Yooxanaa, 15 Kuwaasoo markay yimaaddeen,
ugu duceeyay iyaga inay Ruuxa Qudduuska ah helaan; 16 Maxaa yeelay, midkoodna weli kuma
uu soo degin; laakiinse magaca Sayid Ciise oo keliya ayaa lagu biyo galiyay. 17 Markaasay
gacmahooda saareen oo waxay heleen Ruuxa Qudduuska ah. 18 Haddaba Simoon markuu
arkay in gacmo saarkii rasuullada Ruuxa Qudduuska ah la lagu helay, ayuu lacag u soo
bixiyay, 19 Isagoo leh Anigana xooggan i siiya si nin kastoo aan gacmahayga saaraba, uu helo
Ruuxa Qudduuska ah. 20 Laakiin Butros ayaa ku yidhi, Lacagtaadu ha kula halaagsanto, maxaa
yeelay, waxaad u malaysay in hadiyadda Eebbe lacag lagu helo. 21 Arrintan qayb iyo waxba
toona kuma lihid; maxaa yeelay, qalbigaagu Eebbe hortiisa kuma hagaagsana. 22 Sidaas
aawadeed xumaantaadan ka toobadkeen, oo Rabbiga ka bari in waxa qalbigaaga ku jira lagaa
cafiyo. 23 Waayo, waxaan arkaa adigoo ku jira khadhaadhka xiqdiga oo u xaniman xaqdarrida.
24 Marka Simoon ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga ii barya in waxyaabahaas aad
ku hadasheen midkoodna igu dhicin. 25 Haddaba iyagu markay marag fureen oo Rabbiga
eraygiisa ku hadleen, ayay Quddus ku noqdeen, waxayna tuulooyin badan oo reer Samaariya
ah ku wacdiyeen Injiilka.

### Filibos Iyo Bohonkii Itoobiyaanka Ahaa

26 Marka malagii Rabbiga ayaa Filibos la hadlay, isagoo ku leh Kac oo xagga koonfureed u kac
oo qaad jidka Quddus ka taga ee lama dagaanka qasa u kaca. 27 Dabadeedna wuu kacay oo
tegay oo waxaa ku soo baxay nin itoobiyaan ah oo bohon ah oo madax sare ka ahaa Kandake
boqorraddii Itoobiya, wuxuuna u ahaa khasnad hayaha guud, wuxuuna Quddus u yimid inuu
soo cibaadaysto. 28 Deedna markuu noqday gaadhi faraskiisa ayuu ku fadhiyay oo wuxuu
akhriyayay kitaabka Nebi Ishacyaah. 29 Marka Ruuxa ayaa Filibos ku yidhi, Ku dhawow oo
gaadhigan la raac. 30 Deedna Filibos ayaa ku orday oo wuxuu maqlay isagoo akhriyaya
kitaabka Nebi Ishacyaah, wuxuuna ku yidhi, Ma garanaysaa waxaad akhriyayso? 31 Markaasuu
yidhi, Sideen ku garan karaa in lay toosiyo mooyee? Markaasuu Filibos ka codsaday inuu la
soo fuulo oo la fadhiisto.

32 Haddaba meeshuu Kitaabka ka akhriyayay sidanay ahayd Isaga sidii wan la qalayo ayaa loo
kaxeeyay Oo sidii lax ku aamusan ninka dhogorta ka xiira hortiisa, Isagu afkiisa muusan furin;
33 Intuu is-hoosaysiiyay ayaa gartiisii laga helay; Bal yaa qarnigiisii ahaa oo macnayn kara?
Maxaa yeelay, noloshiisa dhulkaa laga jaray*[q]. 34 Dabadeedna Bohonkii ayaa Filibos ku yidhi,
Fadlan, Nebigu yuu ka hadlayaa? Ma isagaa qudhiisaa mise waa qof kale? 35 Markaasuu
Filibos intuu afkiisa furay oo aayaddaas ka billaabay Ciise ku wacdiyay isaga. 36 Deedna intay
jidka socdeen waxay yimaaddeen meel biyo ku jiraan oo bohonkii ayaa yidhi, Bal eeg, waa

biyo. Maxaa ii diidaya in lay biya galiyo? 37 Deedna Filibos ayaa ku yidhi, Haddaad qalbigaaga
oo dhan ka rumayso, waa suurta gal. Markaasuu ku yidhi, Waxaan rumaysanahay in Ciise
Masiix Wiilka Eebbe yahay. 38 Markaasuu amray in gaadhiga la joogiyo; oo labadooduba
biyahay galeen, Filibos iyo bohonkiiba, oo wuu biya galisay isaga. 39 Dabadeedna markay
biyiha ka soo baxeen, Ruuxii Rabbiga ayaa Filibos dafay, bohonkiina mar dambe ma arag
isaga oo waddadiisii ayuu iska qaaday isagoo faraxsan. 40 Laakiin Filibos waxaa laga helay
Asootos, oo magaalooyinkii uu dhex marayay oo dhan wuxuu ku wacdiyay Injiilka ilaa uu
Kaysariya ka gaadhay.

## Sawlos Oo Soo Hanuunay

**9** Laakiin Sawlos oo weli u dhaaranaya inuu cabsiiyo oo laayo xerta Rabbiga, ayaa imaamkii
guud u tegay, 2 Oo waydiistay inuu warqad uu sunagogyada Dimishiq la tego siiyo, si hadduu
helo dadkii Jidka[136*] uu rag iyo dumarba iyagoo xidh xidhan Quddus u keeno. 3 Deedna safar
ayuu galay oo markuu Dimishiq u soo dhawaaday; waxaa si lama filaan ah hareerihiisa ka
iftiimay iftiin samada ka yimid. 4 Markaasuu dhulka ku dhacay, oo wuxuu maqlay cod isaga ku
leh, Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii ciqaabaysaa? 5 Marka Sawlos ayaa ku yidhi, Yaad tahay
Sayidow? Wuxuu ku yidhi, Waxaan ahay Ciisaha aad dhibayso; 6 Laakiin kac oo magaalada
gal, oo waxaa laguu sheegi doonaa waxaad samayn lahayd. 7 Marka nimankii la sodcday iyaga
oo afkoodii juuqda gabay ayay istaageen, iyagoo codka maqlaya laakiin aan cidna arkin.
8 Markaasuu Sawlos dhulka ka kacay; oo markuu indhaha kala furay, waxba wuu arki waayay;
markaasay gacanta qabteen oo hageen oy Dimishiq geeyeen. 9 Deedna saddex maalmood
ayuu wax arki la'aa, waxna muusan cunin, waxna muusan cabbin.

10 Haddaba waxaa Dimishaq joogay nin xerta ah oo la odhan jiray Xanaaniya; oo Rabbiga ayaa
riyo kula hadlay, isagoo ku leh Xanaaniyaow. Isna wuxuu ku yidhi, Waa i kan, Rabbiyow.
11 Markaasuu Rabbigu wuxuu ku yidhi, Kac oo jidka Toosane la yidhaahdo qaad oo waxaad
guriga Yuudas ka raadisaa nin Sawlos la yidhaahdo oo reer Tarsos ah; oo bal eeg, salaad buu
ku jiraa; 12 Oo wuxuu arkay nin Xanaaniya la yidhaahdo oo u soo gelaya oo gacmihiisa dul
saaraya si uu araggiisii u helo. 13 Laakiin Xanaaniya ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbiyow,
waxaan dad badan ka maqlay ninkanu intuu dhibaato u gaystay qudduusiintaada Quddus
jooga; 14 Oo halkanna wuxuu u joogaa amar uu wadaaddada sare ka haysto si uu kuwa
magacaaga loogu yeedho oo dhan u soo xidh xidho. 15 Laakiin Rabbigu wuxuu ku yidhi, Soco,
maxaa yeelay, wuxuu ii yahay qalab aan doortay si uu magacayga dadka aan Yuhuudda
ahayn iyo boqorrada iyo reer banii Israa'iilba u hor geeyo; 16 Maxaa yeelay, waxaan tusi
doonaa inta uu magacayga aawadii u xanuunsan doono. 17 Marka Xanaaniya wuu tegay oo
gurigii ayuu galay oo intuu gacmihiisa isaga dul saaray, ayuu ku yidhi, Walaal Sawlosow, Rabbi
Ciisihii jidkii aad ku timid kuugu muuqday ayaa ii soo kaa diray inaad araggaaga hesho iyo in
Ruuxa Qudduuska ahu kaa buuxsamo. 18 Oo markiiba wax xuub la moodo ayaa indhihiisa ka
soo dhacay oo aragiisii ayuu helay; 19 Oo wax buu cunay oo awood ayuu yeeshay. marka
dhawr maalmood ayuu Sawlos xertii Dimishiq la sii joogay.

136 Xerta Ciise Masiix

## Sawlos Ayaa Dimishiq Ka Wacdiyay

[20] Dabadeedna markiiba sunagogyada dhexdooda ayuu dadka ka wacdiyay inuu Ciise yahay
Wiilka Eebbe. [21] Dadkii maqlay oo dhanna way yaabeen oo waxay yidhaahdeen Kanu sow ma
aha kii Quddus kuwa magacaas loogu yeedho ku layn jiray? Oo sababtaas aawadeed halkan u
yimid si uu iyagoo xidh xidhan wadaaddada sare u hor geeyo? [22] Laakiin Sawlos wuu sii
xooggaystay oo wuxuu, ku wareeriyay Yuhuuddii Dimishiq joogtay isagoo caddaynaya inuu
Ciise yahay Masiixa. [23] Oo markay maalmo badan ka soo wareegtay, Yuhuuddii ayaa ku
tashaday inay dilaan; [24] Laakiin Sawlos shirqoolkooda wuu ogaaday. Haddaba habeen iyo
maalinba albaabka magaalada ayay ka eegi jireen si ay u dilaan; [25] Laakiin xertiisii ayaa
habeenimo qaadday oo isagoo sallad ku jira ayay darbiga ka tuureen.

## Sawlos Oo Quddus Jooga

[26] Dabadeedna markuu Quddus yimid, wuxuu isku dayay inuu xertii ku biiro; markaasay
dhammaantood ka wada cabsadeen, maxaa yeelay, inuu xer yahay mayna rumaysanin.
[27] Laakiin Barnabas ayaa kaxeeyay oo wuxuu u geeyay rasuulladii oo wuxuu u sheegay siduu
Rabbiga jidka ugu arkay iyo siduu ula hadlay iyo siduu Dimishiq si geesinimo leh magaca Ciise
ugu wacdiyay. [28] Marka iyaga ayuu la joogay, isagoo Quddus la gelaya oo kala baxaya oo si
geesinimo leh dadka ugu wacdiyaya magaca Rabbiga;

[29] Wuxuuna la hadlay oo la dooday Yuhuuddii Giriigta ahayd oo iyaguna waxay dooneen inay
dilaan. [30] Deedna markay walaaluhu ogaadeen, Kaysariya ayay geeyeen oo Tarsos ayay u sii
direen. [31] Sidaas darteed kiniisaddii Quddus iyo Galili iyo Samaariya oo dhan nabad bay
heshay, wayna dhisantay oo badatay iyadoo ku socota cabsida Rabbiga iyo gargaarka Ruuxa
Qudduuska ah.

## Butros Dad Ayuu Ludda Ku Bogsiiyay

[32] Marka Butros oo meelo badan maraya ayaa qudduusiinta Ludda deggan u yimid.
[33] Halkaasna wuxuu ka helay nin la odhan jiray Ayne'as, kaas oo siddeed sannadood sariir
jiifay, maxaa yeelay, curyaan ayuu ahaa. [34] Marka Butros ayaa ku yidhi, Ayne'asow, Ciise
Masiix baa ku bogsiinayee kac oo sariirtaada goglo. Oo markiiba wuu kacay. [35] Deedna kuwii
Ludda iyo Sharoon degganaa ayaa arkay oo Rabbiga ayay u jeedsadeen.

## Dorkas Waa La Soo Nooleeyay

[36] Haddaba waxaa Yaafaa joogi jirtay naag xer ah oo la odhan jiray Tabita oo macneheedu
yahay Dorkas. Naagtaasu way sama fali jirtay oo sadaqo ayay bixin jirtay. [37] Marka
maalmahaas ayay bukootay oo way dhimatay, deedna intay maydheen ayay qolka sare
dhigeen. [38] Marka maadaama oy Ludda iyo Yaafaa isku dhawaayeen, xertii ayaa maqlay inuu
Butros halkaa joogo oo laba nin ayay u direen iyagoo baryaya oo leh ha ka daahin inaad durba
noo timaaddo. [39] Markaasuu Butros kacay oo iyagii raacay. Oo markuu yimidna qolkii sare ayay
geeyeen; carmalladii oo dhanna way ag tubnaayeen iyagoo ooyaya oo tusaya garamadii iyo
dharkii ay Dorkas markay noolayd ee ay igaya la joogtay samayn jirtay. [40] Laakiin Butros ayaa
dhammaantood dibadda u saaray, markaasuu intuu jilba joogsaday duceeyay oo intuu xagga
meydka u jeedsaday ayuu ku yidhi, Tabitay, kac. Markaasay indhaha kala qaadday oo markay
Butros aragtay way fadhiisatay. [41] Deedna intuu gacantiisa siiyay ayuu kiciyay; marka intuu

qudduusiintii iyo carmalladiiba isugu yeedhay ayuu iyadoo nool hor taagay. [42] Taasna yaafa oo
dhan ayaa laga wada ogaaday; kuwa badanna Rabbiga ayay rumeeyeen. [43] Marka maalmo
badan ayuu nin Simoon la yidhaahdo oo megdiye ah Yaafa la sii joogay.

### Butros Iyo Korneeliyos

**10** Haddaba waxaa Kaysariya joogay nin la odhan jiray Korneeliyos oo taliye u ahaa boqol
askari oo la odhan jiray guutada Talyaaniga. [2] Ninkaasu nin cibaado badan oo Eebbe ka
cabsada ayuu ahaa, isaga iyo reerkiisuba, dadkana sadaqo badan ayuu siin jiray oo had iyo
goorna Eebbe ayuu baryi jiray. [3] Qiyaastii sagaalka saac ee maalinimo wuxuu riyo bayaan ugu
arkay malagii Eebbe oo u soo gelaya oo ku leh isaga Korneeliyosow. [4] Markaasuu aad u eegay
isagoo cabsanaya oo wuxuu ku yidhi, Waa maxay, Rabbiyow? Markaasuu ku yidhi,
Salaadahaagii iyo sadaqooyinkaagii Eebbe hortiisa ayay xusuus ahaan ugu baxeen. [5] Marka
hadda niman Yaafaa u dir oo ha u yeedheen Simoonka Butros la yidhaahdo. [6] Wuxuu marti u
yahay nin Simoon la yidhaahdo oo megdiya ah oo gurigiisu ku yaallo badda xeebteeda. [7] Oo
markuu malagii isaga la hadlay ka tegay, wuxuu u yeedhay laba adeegayaal ah iyo askari taqi
ah oo ka mid ah kuwa had iyo jeerba u adeega; [8] Deedna intuu wax walba u sheegay, ayuu
Yaafaa u diray. [9] Haddaba maalintii dambe markay safarka ku jireen oy magaalada ku soo
dhawaadeen, Butros wuxuu tegay gurigii dushiisa si uu u tukado lixdii saac[137*] [10] Wuuna
gaajooday oo wuxuu doonayay inuu wax cuno; laakiin intay wax u diyaarinayeen ayuu
riyooday, [11] Oo wuxuu arkay samada oo furantay, oo waxaa soo degayay wax sida teendho
wayn oo kale ah oo afarta gees ka xidhan oo dhulka ku soo degaya; [12] Oo waxaa ku jiray nooc
kasta oo xayawaan afar lugoode ah iyo waxa dhulka gurguurta iyo haadda cirka. [13] Oo waxaa
isaga u yimid cod leh Butrosow, kac oo gowrac oo cun. [14] Laakiin Butros wuxuu yidhi, Ma dhici
karto, Rabbiyow, maxaa yeelay, weligay wax xaaraan ah oon daahir ahayn ma cunin. [15] Codkii
ayaa haddana mar labaad u yimid isagoo leh Wax Eebbe daahiriyay xaaraan ha ka dhigin.
[16] Taasuna waxay dhacday saddex jeer; marka wixii samada ayaa loo qaaday. [17] Haddaba
intuu Butros riyadii uu arkay macneheeda ku wareersanaa, bal eega, nimankii uu Korneeliyos
soo diray oo gurigii Simoon waydiinaya ayaa albaabka hortiisa soo istaagay, [18] Waxayna u
yeedheen oy waydiiyeen inuu Simoonka Butros lagu naanayso meeshaas marti ku yahay iyo in
kale? [19] Oo Butros intuu riyadii ka fikirayay Ruuxa ayaa ku yidhi, Bal eeg, saddex nin ayaa ku
raadinaya. [20] Haddaba kac oo hoosta tag oo raac, adigoon waxba ka shakisanayn, maxaa
yeelay, anigaa soo diray. [21] Markaasuu Butros nimankii hoos ugu tegay, oo wuxuu ku yidhi,
War waa aniga ninka aad raadinaysaane waa maxay sababta aad u timaaddeen?

[22] Marka waxay ku yidhaahdeen Korneeliyos oo Sarjen boqol askari u taliya ah oo nin xaqa ah
oo Eebbe ka cabsada ah oo ummadda Yuhuudda oo dhanna ay wanaaggiisa ka marag furtay,
waxaa isaga u digay malag qudduus ah oo inuu gurigiisa kuugu yeedho oo wax kaa dhagaysto
u sheegay. [23] Sidaas aawadeed gudaha ayuu ku qaabilay oo wuu marti galiyay. Maalintii
dambena intuu kacay ayuu iyaga raacay, walaalihii Yaafaa joogayna qaarkood ayaa isaga
raacay. [24] Maalintii ku xigtay waxay soo galeen Kaysariya. Korneeliyosna iyaga ayuu sugayay
isagoo isugu yeedhay qaraabadiisii iyo asxaabtiisii u dhawaa. [25] Deedna markuu Butros soo
galay, Korneeliyos ayaa ka hor tegay oo intuu lugihiisana ku dhacay, u sujuuday. [26] Laakiin
Butros ayaa kiciyay oo ku yidhi, Istaag; aniga qudhayduba banii aadan ayaan ahay. [27] Oo intuu

137 Lixda saac ee duhurnimo

isaga la hadlayay, ayuu soo galay oo wuxuu arkay kuwo badan oo isu yimid; 28 Oo wuxuu ku
yidhi, iyaga Idinka qudhiinnu waad ogtihiin inay xaaraan tahay inuu nin Yuhuudi ahu ku
darsamo ama u dhawaado cid ummado kale ah; hase ahaatee Eebbe ayaa i tusay inaanan
ninna ku sheegin nijaas ama qudhun; 29 sidaas aawadeed, markii la ii yeedhay, aniga oon diidin
ayaan imid. Marka waxaan idin waydiinayaa sababta aad iigu yeedheen? 30 Haddaba
Korneeliyos ayaa ku yidhi, Afar maalmood ka hor, waan soomanaa ilaa iyo saacaddan oo kale,
marka sagaalka saac[138*] gurigayga ayaan ku tukanayay oo bal eeg, waxaa i hor istaagay nin
dhar dhalaalaya xidhan, 31 Oo wuxuu yidhi, Korneeliyosow, ducadaadii waa la aqbalay,
sadaqooyinkaagiina Eebbe hortiisa ayaa lugu xusuustay. 32 Sidaas darteed Yaafaa cid u dir oo
u yeedh Simoonka Butros la yidhaahdo, Wuxuu marti ku yahay guriga Simoon megdiye ee
xeebta badda ku yaalla. 33 Sidaas darteed isla markiiba cid baan kuu soo diray; oo si
wanaagsan baad yeeshay markaad timid. Haddaba sidaa darteed dhammaantayo halkan
ayaanu Eebbe xaadirnimadiisa hor joognaa, si aannu waxyaabihii Rabbigu kugu amray oo
dhan u dhagaysanno.

### Wacdigiis Butros

34 Markaasuu Butros afkiisa furay oo wuxuu yidhi, Runtii waxaan ogaaday Eebbe inuusan
dadka u kala eexanin, 35 laakiin ummad kasta qof alla qofkii Eebbe ka cabsada ee xaqnimo
sameeya inuu Eebbe aqbalayo. 36 Erayga[139*] ayuu u soo diray reer banii Israa'iil isagoo ku
wacdiyaya nabadda Ciise Masiix. (Isagu waa Rabbiga cid kasta.) 37 Idinka qudhiinnu waad
ogtihiin eraygaas lagu faafiyay Yahuudiya oo dhan, laga soo billaabo Galili biya galintii Nebi
Yaxye ku wacdiyay ka dib, 38 Iyo siduu Eebbe Ciisihii reer Naasared ugu subkay Ruuxa
Qudduuska ah iyo xoogga. Isagu wuu wareegi jiray oo wax wanaagsan ayuu samayn jiray oo
kuwii Iblaysku caddibay oo dhan ayuu bogsiin jiray; maxaa yeelay, Eebbe ayaa la jiray isaga.
39 Annaguna markhaatiyayaal baannu ka nahay waxyaabihii uu waddanka Yuhuudda iyo
Quddus labadaba ku sameeyay oo dhan. Isaga way dileen oo geed ayay ku deldeleen.
40 Laakiinse Eebbe ayaa isaga maalintii saddexaad sarakiciyay oo bayaan u muujiyay, 41 Dadka
oo dhan muusan u muujinin, laakiin annagoo markhaatiyayaashii Eebbe hore u doortay ah
ayuu noo muujiyay oo isagaannu wax la cunnay oo la cabnay markuu kuwii dhintay ka soo
sarakacay ka dib. 42 Oo wuxuu nagu amray inaannu dadka wacdino oo aannu ka marag furno
inuu kanu yahay kii Eebbe ka dhigay xaakimka kuwa nool iyo kuwa dhintayba. 43 Isaga
nebiyada oo dhan ayaa u markhaatifuray in mid kastoo isaga rumaysta uu magiciisa ku helayo
dembidhaafka.

### Ajinabigii Ruuxa Qudduuska Ah Ayay Heleen Oo Waa La Biyo galiyay

44 Marka Butros oo hadalkii wali afka ku haya Ruuxa Qudduuska ah ayaa ku soo dagay
dhammaan kuwii erayga dhagaysanayay oo dhan. 45 Deedna muminiintii kuwa gudan[140*] ka
mid ahaa ee Butros la socday way yaabeen, maxaa yeelay, dadka aan Yuhuudda ahayn ayaa
lagu shubay hadiyadda Ruuxa Qudduuska ah. 46 Waayo, waxay maqleen iyagoo afaf ku
hadlaya oo Eebbe ammaanaya. 47 Marka Butros ayaa ku yidhi, Ma nin baa biyaha u diidi kara
si aan loogu biya galinin kuwan Ruuxa Qudduuska ah helay sidaannu annaguba u helnay?

138 Saddexda galabnimo.
139 Farriinta
140 Yuhuudda ahaa.

48 Markaasuu ku amray in lagu biya galiyo magaca Ciise Masiix. Dabadeedna waxay ka
codsadeen inuu dhawr maalmood la joogo.

### Butros Kiniisaddii Quddus Ayuu Warbixin Siiyay

**11** Haddaba rasuulladii iyo walaalihii Yahuudiya joogay waxay maqleen in dadka aan
Yuhuudda ahayn ay eraygii Eebbe aqbaleen. 2 Oo markuu Butros Quddus yimid, kuwii gudnaa
ayaa la murmay isaga, 3 Oo waxay ku yidhaahdeen Waxaad u tagtay ood wax la cuntay niman
aan gudayn. 4 Laakiin Butros wuxuu billaabay inuu siday wax u dhaceen uga sheekeeyo, oo
wuxuu yidhi, 5 Anigu waxaan joogay magaalada Yaafaa oo waan tukanayay oo waxaan riyo ku
arkay wax sida teendho wayn oo kale ah oo afarta gees ka xidhan oo samada ka soo degaya
oo wuu ii soo dhawaaday, 6 Oo markaan aad u eegay waxaan arkay xayawaankii afarta lugood
lahaa ee dhulka iyo dugaagga iyo waxa gurguurta iyo haadda cirka. 7 Oo waxaan maqlay cod
igu leh: Butrosow, kac oo gowrac oo cun. 8 Laakiin waxaan idhi, taasu ma chacayso, Rabbiyow,
maxaa yeelay, wax xaaraan ah oon daahir ahayn weligay afkayga ma gelinin. 9 Laakiin markii
labaad codkii ayaa samada ka soo jawaabay oo yidhi, Wixii Eebbe daahiriyay, xaaraan ha ka
dhigin. 10 Taasun saddex jeer ayay dhacday; marka dhammaantood mar labaad ayaa samada
kor loogu qaaday. 11 Oo bal eega, markiiba saddex nin ayaa gurigaannu joognay hortiisa soo
istaagay, kuwaasoo Kaysariya la iiga soo diray. 12 Ruuxuna wuxuu ii sheegay inaan iyaga
raaco, anoon waxba ka shakiyin. Oo waliba waxaa intaa dheer, walaalahan lixda ahna way i
raaceen oo waxaannu gallay ninkii gurigiisa, 13 Marka wuxuu noo sheegay siduu gurigiisa ugu
arkay malag taagan oo ku leh, Yaafaa cid u dir oo uga soo yeedh Simoonka la yidhaahdo
Butros; 14 Kaasoo kuu sheegi doona farriin aad, adiga iyo dadka gurigaaga oo dhanba ku
badbaadi doontaan. 15 Dabadeedna markaan hadalka billaabay Ruuxa Qudduuska ah ayaa ku
soo degay iyaga siduu Bilowgii inoogu soo degay innagaba. 16 Marka waxaan xusuustay ereygii
Rabbiga, siduu yidhi, Runtii Nebi Yaxye dadka biyo ayuu galin doonaa; laakiin idinka waxaa
laydin galin doonaa Ruuxa Qudduuska ah. 17 Haddaba hadduu Eebbe iyaga siiyay hadiyadduu
ina siiyay markaynu Sayid Ciise Masiix rumaynay, anigu kumaan ahay markaan Eebbe diidi
karo? 18 Dabadeedna markay waxyaabahaas maqleen way aamuseen oo Eebbe ayay
ammaaneen oo waxay yidhaahdeen Haddaba ajinabigiina Eebbe toobadkeenka nolosha ayuu
siiyay.

### Kiniisaddii Antiyokh

19 Haddaba kuwii u kala firxay, dhibaatadii Istefanos aawadiis, waxay u kaceen tan iyo Foynike
iyo Qubrus iyo Antiyokh, iyagoon erayga cid aan Yuhuud ahayn ku wacdiyaynin. 20 Laakiin
waxaa ka mid ahaa iyaga niman reer Qubrus iyo reer qayrawaan ah, kuwaasoo, markay
Antiyokh yimaaddeen, xataa Giriigtii la hadlay, iyagoo ku wacdiyaya Sayid Ciise. 21 Gacanta
Rabbiguna way la jirtay iyaga oo tiro badan oo muminiin ah ayaa Rabbiga u soo jeedsatay.
22 Oo warkoodii ayaa kiniisaddii Quddus ku taallay soo gaadhay; markaasay Barnabas tan iyo
Antiyokh u direen; 23 kaasoo markuu yimid ee uu arkay nimcada Eebbe farxay oo kulligood ku
waaniyay inay Rabbiga ku xajistaan niyad daacad ah, 24 Maxaa yeelay, nin wanaagsan buu
ahaa oo waxaa ka buuxay Ruuxa Qudduuska ah iyo rumaysad; dad badan ayaana Rabbiga u
kordhay. 25 Marka Tarsos ayuu tegay isagoo Sawlos raadinaya; 26 Oo markuu soo helay,
Antiyokh ayuu keenay. Deedna sannad dhan ayay kiniisadda la joogeen oo dad fara badan
ayay wax bareen oo Antiyokh ayay ahayd meeshii ugu horraysay ee xerta Masiixiyiin loogu

yeedhay. [27] Maalmahaaas nebiyo ayaa Quddus ka tegay oo Antiyokh yimid. [28] Marka mid iyaga
ka mid ahaa oo Agabos la odhan jiray ayaa intuu istaagay Ruuxa ku sheegay[141*] inay abaar
wayn dunida ka dhici doonto, taaso waagii Kalaudiyos dhacday. [29] Deedna xertii waxay
go'aansadeen inuu mid kasta intii karaankiisa ah walaalihiisa Quddus jooga caawimaad u diro,
[30] Marka sidaasay yeeleen oo gacanta Barnabas iyo Sawlos ayay odayaashii ugu sii dhiibeen.

### Yacquubna Waa la Dilay Butrosna Xabsiguu Ka Baxsaday

**12** Haddaba wakhtigaas boqorkii Herodos ayaa gacmihiisa u qaaday si uu qaar kiniisadda ka
tirsan u dhibo. [2] Oo wuxuu seef ku dilay Yacquub oy Yooxanaa walaalo ahaayeen. [3] Oo
markuu arkay inay taasu Yuhuuddii ka farxisay ayuu ku daray inuu waliba Butros soo qabto.
waxayna ahayd maalmihii Ciidda Kimista aan khamiirka lahayn. [4] Deedna markuu soo qabtay,
xabsi ayuu ku tuuray oo wuxuu ku wareejiyay afar gaadh oo askar ilaalo ah si ay u
waardiyeeyaan, isagoo doonaya markay Ciidda Kormariddu dhammaato inuu dadka u soo
saaro. [5] Sidaas darteed Butros xabsiga ayaa lagu hayay; laakiin kiniisadda ayaa Eebbe aad iyo
aad ugu bariday isaga.

### Butros Xabsi Ayaa Laga Sii Daayay

[6] Oo markuu Herodos damcay inuu soo saaro, isla habeenkaas Butros wuxuu kala dhex hurday
laba askari isagoo ku xidhan laba silsiladood; waardiyayaalna albaabka hortiisa ayay xabsiga
ka ilaalinayeen. [7] Oo bal eeg, malagii Rabbiga ayaa is ag taagay, oo iftiin ayaa xabsiga
iftiimiyay. Marka Butros ayuu dhinaca ku dhuftay oo toosisay, oo wuxuu ku yidhi, Dhakhso u
kac. markaasay silsiladihii gacmihiisa ka dhaceen. [8] Deedna malagii wuxuu ku yidhi, Gunto oo
kabahaaga xidho. Sidaas ayuuna yeelay. Markaasuu ku yidhi, isaga Dharkaaga xidho oo i soo
raac. [9] Marka intuu soo baxay ayuu raacay, mana uusan garanaynin in waxa malagu samaysay
ay run tahay, laakiin wuxuu u maleeyay inuu riyo arkay. [10] Oo markay gaadhkii kowaad iyo kii
labaadba dhaafeen waxay yimaaddeen albaabkii birta ahaa ee magaalada loo mari jiray;
kaasoo iyaga iskii uga furmay; marka way ka baxeen oo waxay sii dhex mareen jid yar; oo
markiiba malagii wuu ka tagay isaga. [11] Oo markuu Butros isgartay wuxuu yidhi, Hadda ayaan
ogaaday in Rabbigu malagiisa ii soo diray oo iga bixiyay gacanta Herodos iyo waxay dadka
Yuhuudda ahu ila doonayeen oo dhanba. [12] Deedna markuu arrintaas ogaaday, wuxuu yimid
gurigii Maryama oo hooyo u ahayd Yooxanaanii Markos la odhan jiray; meeshaasoy dad fara
badan ku kulansanaayeen oy ku tukanayeen. [13] Oo markuu albaabka garaacay, waxaa timid
gabadh shaqaala ah oo Roda la odhan jiray si ay ugu jawaabto. [14] Deedna markay codkii
Butros garatay, farxad aawadeed albaabkii mayna furine gudaha ayay ku orodday oo inuu
Butros albaabka hor taaganyahay ayay u sheegtay. [15] Marka waxay ku yidhaahdeen iyada Naa
waad waalantahay. Laakiin way ku sii adkaysatay inay sidaa tahay. Iyaguna waxay
yidhaahdeen Waa malagiisii. [16] Laakiin Butros wuu sii garaacay oo markay albaabka fureenna,
isagii ayay arkeen oo way yaabeen. [17] Laakiin inay aamusaan ayuu u gacan haadiyay oo
wuxuu uga warramay siduu Rabbigu xabsiga uga soo saaray. Wuxuuna ku yidhi, U sheega
Yacquub iyo walaalahaba dhacdadan. Markaasuu ka tegay oo meel kale ayuu tagay.

141 Isagoo Ruuxa Qudduska ahu adeegsanayo sheegay.

[18] Deedna markuu waagu beryay, qas aan yarayn ayaa askartii ka dhex kacay arrinta Butros
aawadeed. [19] Oo Herodos markuu isaga raadiyay oo waayay askartii ayuu baadhitaan ku
billaabay, oo wuxuu amar ku bixiyay in iyaga la laayo. deedna intuu Yahuudiya ka tagay ayuu
Kaysariya yimid oo meeshaas joogay.

### Dhimashadii Herodos

[20] Marka dadka Turos iyo Siidoon ayuu aad ugu cadhaysnaa; marka iyagoo isku duuban ayay
isaga u yimaaddeen iyagoo Balaastoskii gurigii boqorka maamulaha ka ahaa wata, oo nabad
ayay ka baryeen, maxaa yeelay, gobolkoodu wuxuu xagga cuntada ku tiirsanaa wadanka
boqorka. [21] Maalintay ballantu ahayd Herodos wuxuu soo xidhay labiskii boqornimada oo
carshiga ayuu ku fadhiistay, markaasuu iyaga khudbad u jeediyay. [22] Markaasay Dadkii
qaylyeen oo waxay yidhaahdeen Kanu waa codkii Eebbe ee cod banii aadan ma aha. [23] Isla
markiiba malagii Rabbiga ayaa garaacay, maxaa yeelay, Eebbe muusan ammaanin; deedna
dixiri ayaa cunay isaga oo wuu dhintay. [24] Laakiin eraygii Rabbigu wuu sii kordhay oo batay.
[25] Marka Barnabas iyo Sawlosna Quddus ayay ka soo laabteen markay shaqadoodii soo
dhammaysteen oo waxaa la socday Yooxanaanii Markos la odhan jiray[142*].

### Barnabas iyo Sawlos Kiniisaddii Antiyokh Ayaa Dirtay

**13** Haddaba kiniisaddii Antiyokh waxaa joogay nebiyo iyo macallimiin, kuwaas oo ahaa
Barnabas iyo Simcoon oo la odhan jiray madoobe iyo Lukiyos oo reer qayrawaan ah iyo
Mana'een oo la koray taliye Herodos iyo Sawlos. [2] Oo iyagoo Rabbiga caabudaya oo sooman
ayuu Ruuxa Qudduuska ahu ku yidhi, Barnabas iyo Sawlos iigu sooca shaqada aan ugu
yeedhay. [3] Deedna intay soomeen oo duceeyeen oo gacmahooda saareen iyaga ayay direen.

### Barnabas Iyo Sawlos Oo Qubrus Wacdiyay

[4] Haddaba iyagoo Ruuxa Qudduuska ahu soo diray waxay tageen Selukiya; meeshaasna intay
badda ku safreen ayay Qubrus u kaceen. [5] Oo markay Salamis yimaaddeen, erayga Eebbe
ayay ku wacdiyeen sunagogyada Yuhuudda; waxaana caawinayay Yooxanaa.[143*]

[6] Oo markay jasiiraddii oo dhan dhex mareen waxay yimaaddeen Bafos, taasoo ay kula
kulmeen nin saaxir ah oo nebi beenaale ah oo Yuhuudi ah oo magiciisa la odhan jiray Bar-
ciise; [7] Oo waxaa kaas la joogay ku xigeenkii jasiiradda Sergiyos Bawlos oo nin caqli badan
ahaa. Kaasoo doonayay inuu Barnabas iyo Sawlos u yeedho oo erayga Eebbe ka dhagaysto.
[8] Laakiin waxaa iyaga ka hor istaagay saaxirka Elumas (oo sidaas magiciisa loo fasiri jiray) oo
wuxuu isku dayayay inuu xaakimkii iimaanka ka leexiyo. [9] Laakiin Sawlos, oo Bawlosna la
odhan jiray oo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ka buuxsamay oo intuu aad u eegay, [10] Ayuu ku
yidhi, Kaagan wiilka shaydaanka ah oy khiyaanada iyo xumaantu ka buuxaan oo cadowga
xaqnimada oo dhan ah, miyaadan jooginaynin qalloocinta jidadka toosan ee Rabbiga?
[11] Haddaba, bal eeg, gacanta Rabbiga ayaa ku dul saaran oo waad indha beeli doontaa,
adigoon muddo qorraxda arki doonin. Deedna markiiba waxaa ku soo dhacday isagii

142 Waa Markoska Injiillada midkood qoray

143 Yooxanaa Markoska injiilja qoray oo dhallinyaro ah

ceeryaamo iyo gudcur oo wuu hagabsaday isagoo doonaya cid hagta oo gacanta qabata.
12 Marka xaakimkii markuu wixii dhacay arkay wuu rumeeyay, isagoo wax baridda Rabbiga ka
yaaban.

### Bawlos Magaalada Antiyokh Ayuu Yuhuudda Ku Dhex Wacdiyay

13 Haddaba Bawlos iyo kuwii la socday ayaa ka dhoofay Bafos, oo waxay yimaaddeen Berga
oo Bamfuliya ka mid ahayd; marka Yooxanaa ayaa iyaga ka tegay oo Quddus ku noqday.
14 Laakiin iyagu markay ka tageen Berga waxay yimaaddeen Antiyokh oo Bisidiya ka mid
ahayd oo maalintii Sabtida sunagogga ayay galeen oy fadhiisteen. 15 Deedna markii sharciga
iyo nebiyada la akhriyay dabadeed madaxdii sunagogga ayaa cid u soo dirtay iyagoo leh
Walaallayaal, haddaad dadka wax waano ah u haysaan dhaha. 16 Marka Bawlos ayaa istaagay
oo intuu gacan haadiyay yidhi, Nimanka reer banii Israa'iilow iyo kuwiinna Eebbe ka cabsadow,
dhegaysta. 17 Eebbaha dadkan reer banii Israa'iil wuxuu doortay awowayaasheen oo aad buu u
sarraysiiyay shacabka markay dhulka Masar joogeen, oo gacan xoog leh ayuuna kaga soo
saaray iyaga. 18 Oo muddo qiyaastii afartan sannadood ah ayuu dabeecaddooda lama
dagaanka ugu dulqaatay. 19 Deedna intuu toddoba ummadood ka baabbi'iyay dhulka Kancaan
ayuu dhulkoodii iyaga dhaxal u siiyay taasoo afar boqol iyo konton sannadood qaadatay; 20 Ka
dibna wuxuu siiyay garsooreyaal ilaa iyo xilligii Nebi Samuu'eel. 21 Dabadeedna waxay
waydiisteen boqor, markaasuu Eebbe siiyay iyaga Saa'uul ina Qiish oo ahaa nin reer
Benyaamiin ah, ilaa iyo afartan sannadood. 22 Markuu isaga boqortooyadii ka wareejiyayna
wuxuu iyaga u kiciyay Daa'uud inuu boqorkooda noqdo; kaasoo uu u markhaatifuray isagoo
leh, Waxaan ogaaday Daa'uud ina Yesay inuu yahay nin sida qalbigaygu doonayo ah oo
doonistada oo dhan samayn doona[144*]. 23 Ninkan farcankiis ayuu Eebbe siduu ballanqaaday
Israa'iil Badbaadiye uga kiciyay, kaasoo ah Ciise; 24 Oo intuusan imanin, Yaye[145*] ayaa dadka
Israa'iil oo dhan horay ugu wacdiyay biya galinta toobadda. 25 Oo markuu Nebi Yaxye
adeegiisa dhammaynayay, wuxuu yidhi, Yaad u malaynaysaan inaan ahay? Anigu isaga ma
ihi. Laakiin, bal eega, waxaa iga daba imanaya mid aanan istaahilin inaan kabaha cagihiisa ka
furo.

26 Walaallayaal, idinkoo ah farcankii Ibraahim iyo kuwa idinku dhex jira oo Eebbe ka cabsadow,
innagaa laynoo soo diray erayga badbaadada. 27 Waayo, kuwii Quddus joogay iyo
taliyayaashooduba way garan waayeen isaga iyo hadalkii nebiyada oo Sabti walba la akhriyi
jiray, taasoy ku dhammays tireen markay isaga xukumeen. 28 Oo in kastoo ayna ka helin sabab
lagu dilo, Bilaatos waxay waydiisteen in la dilo. 29 Deedna markay dhammeeyeen wixii laga
qoray oo dhan, ayay geedkii ka soo dejiyeen oo xabaal ku aaseen. 30 Laakiin Eebbe ayaa ka
sarakiciyay kuwii dhintay, 31 Oo maalmo badan waxaa isaga arkay kuwii Galili ka soo raacay ee
Quddus la yimid, kuwaasoo hadda ah markhaatigiisa dadka u marag furayay. 32 Oo waxaannu
idiin wadnaa war wanaagsan oo ku saabsan ballankii awowayaasheen loo ballanqaaday,
33 Kaasoo uu Eebbe u oofiyay innaga oo carruurtoodii ah markuu Ciise sarakiciyay, sida
Sabuurka labaad ku qoran, Waxaad tahay Wiilkayga, oo maantaan ku dhalay[146*]. 34 Isaga
ayuuna ka sarakiciyay kuwii dhintay si uusan mar dambe u qudhmin, sidaas daraaddeed ayuu
sidan ku hadlay, isagoo leh Waxaan idin siin doonaa barakooyinka runta ah ee Daa'uud loo

144 Kitaabkii Kowaad ee Samuu'eel 13:14 iyo 16:12 iyo Sabuur 89:20
145 Nebi Yaxye ina Sakariye
146 Sabuur 2:7

ballanqaaday. 35 Sidaas aawadeed wuxuu Sabuur kale ku yidhi, Kaaga qudduuska ah uma
oggolaan doontid inuu qudhmo. 36 Maxaa yeelay, Daa'uud markuu qarnigiisii ugu adeegay
qorshaha Eebbe ka dib wuu dhintay oo waxaana lala xabaalay awowayaashiis, wuuna
qudhmay.[147*] 37 Iaakiin kii Eebbe sarakiciyay ma qudhmin. 38 Sidaa darteed, walaallayaal, garta
in ninkan xaggiisa dembi dhaafka laydinkaga wacdiyay; 39 Marka nin kasta oo isaga rumaysta
xaq baa lagaga dhigay wax walba oo shareecad Muuse ayna xaq idinkaga dhigi karin.
40 Sidaas darteed iska jira inayna idinku dhicin waxay nebiyadu sheegeen iyagoo leh, 41 Bal
eega, kuwiinnan wax quudhsadow, yaaba oo halaagma; Waayo, maalmihiinna waxaan
samaynayaa dhacdo Oo xataa haddii laydiin sheego aydaan rumaysan doonin.[148*] 42 Deedna
markay baxayeen, dadku waxay ka codsadeen inay mowduucaas Sabtida dambe ka hadlaan.
43 Haddaba markii sunagogga laga dareeray, kuwa badan oo Yuhuud ah iyo kuwa cibaadaysta
oo Yuhuudda raacsan ayaa waxay raaceen Bawlos iyo Barnabas, kuwaasoo la hadlay iyaga
oo ku adkeeyay inay nimcada Eebbe ku dhaganaadaa. 44 Haddaba Sabtidii dambe magaaladii
oo dhan ayaa isugu timid si ay erayga Eebbe u dhagaystaan. 45 Laakiin Yuhuuddii markay
dadkii faraha badnaa arkeen hinaase ayaa iyaga ka buuxsamay, oo hadalkii Bawlos af
lagaaddo iyo beenin ayay kala hortageen.

46 Marka Bawlos iyo Barnabas si geesinimo leh ayay u hadleen iyagoo leh
Lagama maarmaan ayay ahayd in erayga Eebbe marka hore idinka laydinku wacdiyo. Laakiin
markaad diiddeen ood isku xukunteen in aydaan istaahilin nolosha weligeed ah, bal eega,
waxaannu u jeedsanaynaa dadka aan Yuhuudda ahayn. 47 Maxaa yeelay, sidaasuu Rabbigu
nagu amray isagoo leh, Waxaan kaa dhigi doonaa iftiinka ummadaha, si aad badbaadiye ugu
noqoto ilaa iyo meesha dunida ugu fog.[149*], 48 Deedna markay dadkii aan Yuhuudda ahayn
taas maqleen, way ku farxeen oo eraygii Eebbe ayay rumeeyeen oo waxaa rumeeyay kuwii
nolosha weligeed ah loogu tala galay. 49 Erayga Rabbigana waxaa lagu faafiyay waddanka oo
dhan. 50 Laakiin Yuhuuddii waxay soo kiciyeen dumarkii cibaadada iyo sharafta lahaa iyo
cuqaashii magaalada oo dhibaato ayay Bawlos iyo Barnabas u gaysteen oo dagmadoodii ayay
iyaga ka eryeen. 51 Laakiin markay siigadii cagahooda ka jafeen, ka dib waxay yimaaddeen
Ikoniyon. 52 Xertiina waxaa ka buuxsamay farxad iyo Ruuxa Qudduuska ah.

### Bawlos Iyo Barnabas Ikoniyon Ayay Tageen

**14** Markay Ikoniyon joogeen sunagogga Yuhuudda ayay wada galeen oo siday u hadleen
aawadeed dad badan oo Yuhuud iyo Giriigba ah ayaa rumeeyay. 2 Laakiin Yuhuuddii aan
rumaynin ayaa dadkii aan Yuhuudda ahayn ku kiciyeen oo si xun ugu diray walaalihii.
3 Haddaba in badan ayay halkaa joogeen iyagoo si geesinimo leh Rabbiga uga hadlaya,
kaasoo ugu markhaatifuray erayga nimcadiisa uu siiyay oo calaamooyin iyo waxyaabo la yaab
leh gacmahooda ku sameeyaan. 4 Laakiin dadkiiii magaaladu way kala qaybsameen, qaar
waxay raaceen Yuhuudda, qaarna rasuullada. 5 Deedna markay dadkii aan Yuhuudda ahayn
iyo Yuhuuddii iyo madaxdoodiiba isku dayeen inay caayaan oy dhagxiyaan, 6 Way ogaadeen
oo waxay u carareen magaalooyinkii la odhan jiray Luka'oniya iyo Lustara iyo Derbe iyo dhulka
ku wareegsan; 7 Oo halkaas ayay Injiilka ku wacdiyeen.

147 Jidkiisu wuu qudhmay oo ciiddaa cuntay
148 Xabaquuq 1:5
149 Ishacyaah 42:6 iyo 49:6

## Bawlos Iyo Barnabas Oo Lustara Tegay

8 Marka Lustara waxaa fadhiyay nin cago mayd ah leh oo curyaanimo ku dhashay oon walkgii
soconin. 9 Isagu wuxuu dhagaystay Bawlos oo hadlaya; Bawlosna aad ayuu u eegay oo wuxuu
ogaaday inuu rumaysad uu ku bogsan karo leeyahay, 10 Wuxuuna cod dheer ku yidhi,
Cagahaaga ku sarakac. Markaasuu booday oo socday. 11 Deedna markay dadkii arkeen wuxuu
Bawlos sameeyay ayay kor u dhawaaqeen, iyagoo afka Luka'oniya ku leh ilaahyadii oo niman
iska soo dhigay ayaa inoo yimid.

12 Marka Barnabasna waxay u bixiyeen Yubiter; Bawlosna waxay u bixiyeen Merkuriyos,
maxaa yeelay, wuxuu ahaa af hayeenka. 13 Haddaba wadaadkii Yubiter oo macbudkiisu ku
yaallay magaalada horteeda, wuxuu irdaha keenay dibiyo iyo ubaxyo isku taxan, wuxuuna
doonayay inuu isagoy dadku la jiraan sadaqo u bixiyo. 14 Laakiin rasuulladii Barnabas iyo
Bawlos markay maqleen, ayay dharkoodii jeexjeexeen oo dadkii ku soo dhex ordeen, iyagoo
dhawaaqaya 15 Oo leh Nimanyahow, maxaad waxan u samaynaysaan? Annagu waxaannu
nahay banii aadan idinla dabeecad ah, oo waxaannu idiin keenay war wanaagsan si aad uga
soo jeedsataan wax aan macinaha lahayn ood ugu jeedsataan Eebbaha nool, kaasoo samada
iyo dhulka iyo badda iyo waxa ku jira oo dhanba sameeyay, 16 Kaasoo qarniyadii tagay
umadaha oo dhan u oggolaaday inay jidadkooda ku socdaan. 17 Hase yeeshee isu marag furid
la'aan iskama sii daynin, laakiin wanaag ayuu sameeyay oo wuxuu samada idinka siiyay roob
iyo xilliyo barwaaqo ah, isagoo ina quudiya oo qalbiyadiinna ka buuxiya farxad. 18 Marka in
kastoy hadallaas jeediyeen haddana dadkii way ku qancin kari waayeen inay ka joojiyaan inay
u sadaqeeyaan iyaga. 19 Deedna waxaa Antiyokh iyo Ikoniyon ka yimid Yuhuud, oo dadkii ayay
kasbadeen oo Bawlos ayay dhagax kala daaleen oy magaaladii dibadda uga jiideen, iyagoo u
malaynaya inuu dhintay. 20 Laakiin markay xertu isku gadaameen ayuu kacay oo magaaladii
galay; maalintii dambena wuu ka baxay oo Barnabas ayuu Derbe u raacay. 21 Oo markay
magaaladaas Injiilka ku wacdiyeen oy kuwo badan xer ka dhigeen, ayay Lustara iyo Ikoniyon
iyo Antiyokh ku noqdeen, 22 Iyagoo xerta naftooda dhisaya oo xoogaynaya, kuna waaninaya
inay iimaanka ku adkaystaan, iyagoo ku leh Waa inaynu boqortooyada Eebbe dhibaatooyin
badan ku galnaa. 23 Oo markay kiniisad walba odayaal u doorteen intay soomeen oy tukadeen,
ayay Rabbiga ay rumeeyeen iyaga ku aamineen.

## Bawlos Iyo Barnabas Waxay Ku Noqdeen Antiyokh

24 Marka intay Bisidiya sii dhex mareen ayay Bamfuliya yimaaddeen. 25 Oo intay Berga erayga
ku wacdiyeen ayay Ataliya tageen; 26 Meeshaasna waxay uga gudbeen Antiyokhdii iyaga loogu
xilsaaray fadliga Eebbe shaqada ay guteen. 27 Oo markay yimaaddeen intay kiniisaddii isugu
yeedheen ayay uga warbixiyeen wuxuu Eebbe adeegooda ku sameeyay oo dhan iyo siduu
albaabka iimaanka ugu furay dadka aan Yuhuudda ahayn. 28 Deedna muddo aan yarayn ayay
xerta la joogeen.

## Golihii Quddus

**15** Haddaba niman Yahuudiya ka yimid ayaa walaalihii wax baray iyagoo leh Haddaan
caadada Muuse laydinku gudin, ma badbaadaysaan. 2 Oo markay Bawlos iyo Barnabas dood
aan yarayn la galeen iyaga, walaalihii waxay doorteen Bawlos iyo Barnabas iyo kuwo kale oo
iyaga ka mid ah inay Quddus u kacaan oy rasuulladii iyo odayaashii arrintaas kula noqdaan.
3 Sidaas daraaddeed iyagoo kiniisaddu soo sagootiday, waxay sii dhex mareen Foynike iyo
Samaariya, iyagoo uga warbixinaya siday dadka aan Yuhuudda ahayn u soo jeedsadeen;
waxayna aad uga farxiyeen walaalihii oo dhan. 4 Oo markay Quddus yimaaddeen, kiniisaddii
iyo rasuulladii iyo odayaashii ayaa soo dhaweeyay, marka waxay uga warbixiyeen wax
qabadkii Eebbe iyaga ku qabtay oo dhan. 5 Laakiin waxaa kacay kuwo dariiqada Farrisiinta ah
oo muminiin ah oo waxay yidhaahdeen, Waa in iyagag la gudo, oo lagu amro inay shareecada
Muuse ku dhaqmaan.

## Shirkii Quddus

6 Marka rasuulladii iyo odayaashii ayaa wixii arrintaas laga yeeli lahaa ka shiray. 7 Oo markay in
badan doodeen ka dib, Butros ayaa istaagay oo ku yidhi, iyaga Walaallayaal, waad ogtihiin
muddo hore inuu Eebbe dhexdiinna ka doortay in dadka aan Yuhuudda ahayn ay afkayga
erayga Injiilka ka maqlaan oy rumeeyaan. 8 Oo Eebbaha waxa quluubta ku jira og ayaa u
markhaatifuray iyaga, wuxuuna iyaga siiyay Ruuxa Qudduuska ah siduu innagaba inoo siiyay;
9 Oo ma uusan ina kala soocin innaga iyo iyaga, laakiin qalbiyadooda rumaysad ayuu ku
nadiifiyay. 10 Haddaba maxaad Eebbe u jirrabaysaan ood harqood aynaan innaga iyo
awowayaasheen toona qaadi karin xerta luquntooda u galinaysaan? 11 Laakiin waxaan
rumaysannahay inaynu ku badbaadi doonno nimcadii Sayid Ciise siday ugu badbaadi
doonaan. 12 Deedna shir waynihii oo dhan wuu wada aamusay oo waxay dhegaysteen
Barnabas iyo Bawlos markay uga warbixiyeen calaamooyinkii iyo waxyaabihii la yaabka lahaa
ee Eebbe gacmahooda ku sameeyay dadka aan Yuhuudda ahayn dhexdooda. 13 Deedna
markay aamuseen ka dib Yacquub ayaa u jawaabay, isagoo leh 14 Walaallayaal, i dhegaysta:
Simecoon wuxuu ka warbixiyay siduu Eebbe mar hore u booqday dadka aan Yuhuudda ahayn
si uu dad uga doorto iyaga magiciisa aawadii. 15 Taasuna waxay waafaqsantahay erayadii
nebiyada; siday u qorantahay, 16 Markaas dabadeed waan soo noqon doonaa, Oo mar labaad
ayaan dhisi doonaa taambuuggii Daa'uud ee dhacay; Oo mar labaad ayaan dhisi doonaa
jajabkiisa, Waanan taagi doonaa; 17 Si ay dadka inta hadhay Rabbiga u doondoonaan, oo
ummadaha oo dhan magacayga loogu yeedho, 18 Sidaas waxaa yidhi, Rabbiga tan iyo Bilowgii
dunida wax walba muujiyay.[150*] 19 Sidaas daraaddeed waxaan ku talinayaa inaynaan dhibin
kuwa dadka aan Yuhuudda ahayn ka soo jeeda ee Eebbe u jeedsaday; 20 Laakiin waa inaynu
iyaga u qorno inay ka fogaadaan qudhunka sanamyada iyo sinada iyo wixii la xuurteeyo iyo
dhiigga. 21 Maxaa yeelay, tan iyo qarniyo hore magaalo walba Muuse wuxuu ku leeyahay kuwa
dadka farriintiisa ku wacdiya oo Sabti walba sunagogyada ayaa laga akhriyaa.

## Warqaddii Golaha Ee Masiixiyiintii Aan Yuhuudda Ahayn Loo Diray

22 Haddaba rasuulladii iyo odayaashii iyo kiniisaddii oo dhan waxaa la qumanaatay inay iska
dhex doortaan niman ay Antiyokh u diraan oo Bawlos iyo Barnabas raaca. Oo waxay direen

150 Caamoos 9:11-12

Yuudas oo la odhan jiray Barsabaas iyo Silas oo niman madax ah walaalaha dhexdooda ka
ahaa. [23] Markaasay warqaddan la direen Annagoo ah rasuulladii iyo odayaashii walaalaha
waxaannu salaamaynaa walaalaha dadka aan Yuhuudda ahayn ka soo jeeda ee Antiyokh iyo
Suuriya iyo Kilikiya jooga. [24] Waxaannu maqalnay inay kuwo annaga naga tagay oon fasax
naga haysanin hadallo idinku dhibeen oy quluubtiinna qaseen, Iyagoo leh: waxaa waajib idinku
ah in laydin gudo ood shareecada ku dhaqantaan, inkastoo aanaan annagu amarradaas amrin,
[25] Sidaas daraaddeed waxaa nala qummanaatay oonnu ku heshiinnay, inaannu dooranno
niman aannu idiin soo dirno oo saaxiibbadayo Barnabas iyo Bawlos soo raaca, [26] kuwaasoo ah
niman naftooda u huraya magaca Rabbigeenna Ciise Masiix aawadiis. [27] Sidaas aawadeed
waxaannu soo dirnay Yuudas iyo Silas kuwaasoo intaas oo kaliya afka idiinka sheegi doona.
[28] Waxaa nala wanaagsanaatay Ruuxa Qudduuska ah iyo annagaba inaannan idin saarin
culays ka wayn waxyaabahan waajibka ah. [29] Waa inaad ka fogaataan waxa sanamyada loo
sadaqeeyo iyo dhiig iyo waxa la ceejiyo iyo sinada. Kuwaas haddaad iska dhawrtaan wax
fiican baad samayn doontaan. Nabadgelyo. [30] Dabadeedna markay direen waxay yimaaddeen
Antiyokh oo intay dadkii shiriyeen ayay warqaddii u dhiibeen. [31] Deedna markay akhriyeen
waanadii ayay ku farxeen. [32] Yuudas iyo Silas, oo iyaga qudhoodu nebiyo ahaana erayo badan
ayay walaalaha ku waaniyeen oy ku xoojiyeen. [33] Oo markay muddo joogeen dabadeed
walaalihii ayaa si nabad ah ugu diray kuwii iyaga soo diray. [34] Waxaase Silas la qummanaatay
inuu halkaas sii joogo. [35] Laakiinse Bawlos iyo Barnabas waxay sii joogeen Antiyokh oo kuwo
badan ayay erayga Rabbiga bareen oy ku wacdiyeen.

## Bawlos Iyo Barnabas Way Kala Tageen

[36] Marka Maalmo dabadood Bawlos ayaa Barnabas ku yidhi, Ina wadi aynnu ku noqonno oo
aynnu booqanno walaalaha magaalo kasta oynu erayga Rabbiga ku wacdinay joogay oo oynu
soo eegno siday yihiin. [37] Marka Barnabas wuxuu doonayay inay Yooxanaa oo lagu
magacaabo Markos kaxaystaan. [38] Laakiin Bawlos waxaa la qummanaatay inayna kaxaysanin
ka iyaga Bamfuliya kaga tagay oo aan adeegga iyaga u raacin. [39] Marka khilaaf wayn ayaa
iyaga dhex maray; sidaas daraaddeed way kala tageen, oo Barnabas intuu Markos kaxaystay
ayuu Qubrus u kacay; [40] laakiin Bawlos wuxuu doortay Silas oo wuu baxay isaga oy walaalihii
nimcada Eebbe ku aamineen. [41] Oo wuxuu dhex maray Suuriya iyo Kilikiya isagoo kiniisadihii
xoogaynaya.

## Timoteyos Ayaa Bawlos Raacay

**16** Marka Bawlos wuxuu kaloo yimid Derbe iyo Lustara; oo bal eeg, halkaas waxaa joogay nin
xer ah oo la odhan jiray Timoteyos oo ahaa naag Yuhuud ah oo muminad ah wiilkeeda, balse
aabbihii wuxuu ahaa Giriig. [2] Isagana walaalihii Lustara iyo Ikoniyon joogay ayaa u marag
furay.[151*] [3] Bawlos wuxuu doonayay inuu Timoeyos isaga raaco; marka intuu kaxeeyay ayuu
guday Yuhuudda meelahaas joogtay darteed; maxaa yeelay, kulligood way ogaayeen inuu
aabbihii Giriig yahay. [4] Oo intay magaalooyinka dhex marayeen, waxay u dhiibeen amarradii
rususha iyo odayaasha Quddus jooga ka soo baxay inay dhawraan. [5] Haddaba kiniisadihii
iimaankay ku xoogaysteen oo maalin kasta tiradoodu way kordhaysay.

151 Wanaaggiisa iyo rumaysadkiisa ayay ka marag kaceen

## Riyadii Bawlos

[6] Marka waxay dhex mareen dhulka Farugiya iyo Galatiya iyagoo Ruuxa Qudduuska ahu u
diiday inay Aasia erayga ku wacdiyaa. [7] Oo markay Musiya u dhawaadeen waxay isku dayeen
inay Bituniya galaan; laakiin Ruuxa Ciise ayaa u diiday; [8] Marka way soo dhaafeen Musiya oo
waxay yimaaddeen Taroo'as. [9] Oo habeenkii ayuu Bawlos riyo arkay nin reer Makedoniya ah
ayaa halkaas taagnaa isagoo baryaya oo leh Makedoniya kaalay oo na caawi. [10] Oo markuu
riyadii arkay dabadeed markiiba waxaannu doonnay inaannu Makedoniya tagno, taasoo nala
noqotay inuu Eebbe noogu yeedhay inaanu iyaga Injiilka ku wacdinno.

## Bawlos Wuxuu U Gudbay Makedoniya

[11] Marka Taroo'as ayaannu ka baxnay oo waxaannu toos u aadnay Samotraki, maalintii ku
xigtayna waxaannu nimid Ne'abolis; [12] Halkaasna waxaannu uga sii gudubnay Filiboy, taasoo
ahayd magaala madaxda gobolka Makedoniya ee ay Roomaku gumaystaan, magaaladaas
waxaannu joognay dhawr maalmood. [13] Maalintii Sabtida ahaydna magaalada ayaannu
dibadda uga baxnay, oo waxaannu tagnay webi dhinaciis, meeshaasoo aannu u malaynay
meel lagu tukan karo; oo markaannu fadhiisannay waxaannu la hadallay dumar halkaas ku
uruursan. [14] Oo middood ayaa na dhagaysatay taasoo ahayd naag reer Tu'ateyra ah oo Lydia
la odhan jiray oo dhar guduudan ka ganacsan jirtay, oo Eebbe caabudi jiray, oo Rabbiga ayaa
qalbigeeda u furay inay wacdigii Bawlos dhagaysato. [15] Deedna markii iyada iyo dadkii
gurigeeda la biyo galiyay, way na bariday iyadoo leh. Haddaad inaan Rabbiga aaminay
rumayseen, gurigayga kaalaya oo jooga. Wayna nagu cadaadisay inaannu yeello. [16] Oo waxaa
dhacday markaannu meeshii lagu tukan jiray ku sii soconnay waxaa naga hor timid gabadh
addoon ah oo shaydaan wax u sheega ku jiro, taasoo wax sii sheegiddeeda faa'iido badan uga
keeni jirtay sayiddadeeda. [17] Taasoo Bawlos iyo annaga na soo raacday, iyadoo kor u
dhawaaqaysa oo leh Nimankanu waa adeegayaashii Eebbaha ugu sarreeya, kuwaasoo idinku
wacdiyaya jidka badbaadada. [18] Sidaasna maalmo badan ayay samaysay. Laakiin Bawlos oo
ka xanaaqay ayaa ku jeedsaday oo shaydaankiil ku yidhi, Magaca Ciise Masiix ayaan kugu
amrayaaye ka bax iyada. Markaasuu saacaddiiba ka soo baxay.

## Bawlos Iyo Silas Waa La Xidhay

[19] Laakiin markay sayiddadeedii arkeen in rajadii faa'iidadoodu dhammaatay, ayay Bawlos iyo
Silas qabteen, oo intay suuqa u jiideen ayay garsoorayaasha hor geeyeen, [20] Deedna markay
garsoorayaasha u keeneen, waxay yidhaahdeen Nimankanu Yuhuudda ah ayaa si wayn
magaaladayada u qasaya, [21] Oo waxay na barayaan caadooyin aan xalaal noo ahayn inaannu
aqbalno oo yeelno haddaannu reer Rooma nahay. [22] Deedna dadkii ayaa ku kacay iyaga;
garsoorayaashiina intay iyaga dharka ka jeex jeexeen ayay amar ku bixiyeen in la garaaco.
[23] Oo markay ula badan ku dhufteen, ayay xabsiga ku tuureen iyagoo ku maray taliyihii xabsiga
inuu aad u ilaaliyo; [24] Isaguna markuu amarkaas helay wuxuu iyaga ku xidhay xabsiga
gudihiisa, lugahana qabato qori ah ayuu u galiyay. [25] Marka habeen badhkii Bawlos iyo Silas
way tukanayeen oo Eebbe ayay qasiidooyin ku ammaanaya, maxaabiistuna way
dhegaysanayeen; [26] Haddaba waxaa si lama filaan ah u dhacay dhul gariir wayn, sidaas
darteed aasaaskii xabsigu wuu gilgishay oo isla markiiba albaabbadii oo dhan way wada
furmeen; mid kastana silsiladihiisii way ka furmeen. [27] Deedna taliyihii xabsigu markuu hurdada
ka toosay ee uu arkay albaabbadii xabsiga oo wada furan, ayuu seeftiisii la baxay oo ku

dhawaaday inuu isdilo, maxaa yeelay, wuxuu u malaynayay inay maxaabiistii baxsadeen.
[28] Laakiin Bawlos ayaa kor u dhawaaqay isagoo leh War waxba ha is yeelin, waayo, kulligayo
halkanaannu wada joognaaye. [29] Marka in faynuus loo keeno ayuu codsaday, oo gudaha ayuu
ku laxaadsaday isagoo cabsi la gariiraya, oo Bawlos iyo Silas ayuu ku hor dhacay,
[30] Markaasuu intuu iyaga dibadda u soo saaray ku yidhi, Mudanayaal, maxaa igu waajib ah
inaan yeelo si aan u badbaado? [31] Deedna waxay ku yidhaahdeen Sayid Ciise rumee, adiga
iyo reerkaaguba waad badbaadaysaane. [32] Oo erayga Rabbiga ayay ku wacdiyeen isaga iyo
kuwii gurigiisa joogay oo dhan. [33] Markaasuu isla saacaddiiba iyaga kaxeeyay oo nabarrahoodii
maydhay; oo markiiba isaga iyo qoyskiisii oo dhanba waa la biyo galiyay. [34] Haddaba intuu
iyaga gurigiisii geeyay ayuu cunto hor dhigay. Isagoo Eebbe rumaysan oo aad u farxasan
isaga iyo qoyskiisa oo dhanba. [35] Deedna markuu waagu baryay garsoorayaashii waxa direen
boolis iyago ku leh Nimankaas iska sii daaya.

[36] Marka taliyihii xabsiga ayaa hadalkaas Bawlos u sheegay oo wuxuu ku yidhi,
Garsoorayaashii waxay amar ku bixiyeen in laydin sii daayo; marka soo baxa oo nabad ku
taga. [37] Laakiin Bawlos ayaa iyaga ku yidhi, Dadka hortooda ayay nagu garaaceen annagoon
waxba galabsanin oo niman muwaadiniin reer Rooma ah oo xabsi ayay nagu tuureen;
haddana ma si qarsoodi ah ayay nagu sii daynayaan? Taasu ma dhacayso; laakiin iyaga
qudhoodu ha yimaaddaan oo ha na sii dayaan. [38] Deedna booliskii ayaa hadalladaas
garsoorayaashii u sheegay; oo markay maqleen inay muwaadiniin Rooma yihiin ayay
cabsadeen. [39] Marka intay yimaaddeen ayay raalli galiyeen oo markay sii daayeen waxay ka
codsadeen inay magaalada ka tagaan. [40] Deedna markay xabsiga ka soo baxeen gurigii Lydiya
ayay tageen, oo walaalihii ay halkaas ku arkeen intay dhiiri geliyeen ayay iska tageen.

### Bawlos Tesaloniika Ayuu Tegay

**17** Haddaba intay Amfibolis iyo Abollooniya sii dhex mareen ayay waxay yimaaddeen
Tesaloniika meeshaas oy Yuhuuddu sunagoog ku lahaayeen; [2] Marka Bawlos ayaa sidii
caadada u ahayd u galay oo saddex Sabtiyood ayuu Kitaabka kala doodayay, [3] Isagoo
caddaynaya oo muujinaya inay waajib ahayd in Masiixu xanuunsado oo ka soo sarakaco kuwii
dhintay, wuxuuna yidhi, Ciisahan aan idinku wacdiyayo waa Masiixa. [4] Marka qaarkood ayaa
rumeeyay oo Bawlos iyo Silas ku biiray waxaa sidaas oo kale yeelay Giriig fara badan oo
cibaadaysta iyo tiro aan yarayn oo ah dumar hormuud ah. [5] Laakiin Yuhuud masayrsan ayaa
intay dib jiriin shar leh suuqa ka soo kaxaysateen magaaladii rabshad ka dhigay; oo gurigii
Yasoon ayay soo weerareen iyagoo doonaya inay iyaga dadka u soo saaraan. [6] Oo markay
waayeen, ayay Yasoon iyo walaalo kale soo jiideen oy maamulkii magaalada u keeneen
iyagoo ku qaylinaya Kuwii dunida rogay ayaa halkanna yimid [7] Oo Yasoon ayaa marti galiyay;
kuwaasoo dhanna wax amarrada Kaysar ka soo hor jeeda ayay sameeyaan, iyagoo leh Waxaa
jira boqor kale oo Ciise ah. [8] Marka dadkii iyo maamulkii magaaladuba markay taas maqleen
way ka xumaadeen. [9] Oo intay Yasoon iyo kuwii kale dammiin ka qaadeen, ayay sii daayeen.

### Bawlos Iyo Silas Waxay Tageen Beroya

[10] Marka walaalihii ayaa isla markiiba habeennimo Bawlos iyo Silas Beroya u diray, oo markay
meeshaas yimaaddeen sunagogga Yuhuudda ayay galeen. [11] Haddaba kuwaasu way ka
sharaf badnaayeen kuwii Tesaloniika joogay, maxaa yeelay, erayga ayay aqbaleen iyagoo

xamaasad wayn u qaba oo maalin kasta Kitaabka baadhaya si ay u hubiyaan inay
waxyaabahaasu sidaas yihiin iyo in kale. [12] Sidaa darteed kuwa badan oo iyaga ka mid ah iyo
dumar Giriig ah oo sharaf leh iyo niman aan yarayn ayaa rumeeyay. [13] Laakiin markay
Yuhuuddii Tesaloniika joogay ogaadeen in Bawlos erayga Eebbe Beroya ku wacdiyay, ayay
meeshaas yimaaddeen oy qas iyo rabshad dadkii ka dhex sameeyeen. [14] Markaasay walaalihii
markiiba Bawlos xagga badda u direen; Silas iyo Timoteyosna halkaasay muddo sii joogeen.
[15] Marka kuwii Bawlos sii sagootiyay waxay isaga gaadhsiiyeen ilaa iyo Athens.[152*] deedna way
ka yimaaddeen iyagoo Silas iyo Timoteyos farriin inay deg deg ugu yimaaddaan ah uga wada.

## Bawlos Oo Ateenay Tegay

[16] Haddaba Bawlos intuu iyaga Athens ku sugayay, ruuxiisu wuu kacay, markuu arkay
magaalada oy sanamyo ka buuxaan. [17] Sidaa daraaddeed Yuhuuddii iyo kuwii ehlu diinka ahaa
ayuu sunagogga iyo suuqa dhexdiisa maalin walba kula dooday. [18] Waxaana la kulmay isaga
kuwo faylosoofiinta Ebikuriyiin iyo Istoo'ikiin ka tirsan. Oo Qaarkood waxay yidhaahdeen
Muxuu kan afmiinshaarka ahu sheegi doonaa? Qaar kalena waxay yidhaahdeen Wuxuu u
egyahay nin ilaahyo qalaad wax ku wacdiyaya; maxaa yeelay, wuxuu dadka ku wacdiyay Ciise
iyo sarakicidda. [19] Markaasay isaga qabteen, oo waxay u kaxeeyeen Are'obagos iyagoo ku leh
Ma ogaan karnaa wax bariddan cusub eed ka hadlayso waxay tahay? [20] Waayo, waxyaabo
qalaad ayaad dhegahayaga maqashiisaa. Sidaa darteed waxaannu doonaynaa inaannu
waxyaabahanu waxay yihiin ogaanno. [21] (Haddaba reer Athens oo dhan iyo ajinabiga halkaas
la deggamba wakhtigooda wax kale kuma geliyaan inay wax cusub sheegaan ama maqlaan
mooyee.)

## Wacdigii Bawlos Are'obagos Ka Dhex Jeediyay

[22] Markaasuu Bawlos oo Are'obagos is dhex taagay oo wuxuu yidhi, Nimankiinan reer Athens,
waxaa si walba iigu muuqda inaad dad ehlu diin ah tihiin. [23] Waayo, markaan soo socday een
macbudyadiinna arkay waxaan arkay oo kale meel lagu allabaryo oo lagu qoray ILAAH AAN
LA GARANAYNIN. Haddaba kaa aydaan garanaynin eed caabudaysaan ayaan wax idiinka
sheegayaa. [24] Eebbaha dunida iyo waxyaabaha ku jira oo dhanba sameeyay oo ah Rabbiga
samada iyo dhulka, ma deggana macbudyo gacmo lagu sameeyay, [25] Gacmo banii aadanna
looguma adeego sidii isagoo wax u baahan, maxaa yeelay, banii aadanka dhammaantood
isagaa nolosha iyo neefta iyo wax walboy u baahanyihiinba siiya ; [26] Oo hal nin ayuu
ummadaha dunida oo dhan ka abuuray isagoo wakhti hore u qorsheeyay inay dhulka oo dhan
degaan isagoo wakhtigooda iyo xuduudda degaankoodaba horay u goaamiyay; [27] Si ay Eebbe
u doonaan oy hadday suurto gasho isaga u helaan, in kastoo uusan ka fogayn midkeen kasta;

[28] Maxaa yeelay, isagaynu ku noolnahay oo ku soconnaa oo ku jirnaa; siduu gabayaashiinna
midkood yidhi, Maxaa yeelay innagu waxaynu nahay farcankiisa.[153*] [29] Haddaba maa daama
aynnu nahay farcankii Eebbe waa inaynaan ka fikirin inay Eebbenimadu la mid tahay dahab
ama lacag ama dhagax lagu xardhay farshaxanka iyo farsamada dadka. [30] Marka wakhtiyadii
hore hadduu Eebbe jahliga iska dhaafay, hadda wuxuu dadka ku amrayaa inay

152 Athens magaala madaxda dalka Giriigga.

153 Waa Ebimeydes kii reer Kereet ama Aaratuus.

dhammaantood meel kastaba ha joogeene toobadkeenaan; [31] Maxaa yeelay, wuxuu xadeeyay
maalin uu dunida ninkii uu doortay si xaq ah ugu xukumi doono, taasoo uu dhammaan ugu
caddeeyay sarakicidda uu isaga ka soo sarakiciyay kuwii dhintay. [32] Deedna markay maqleen
ka soo sarakicidda kuwii dhintay, qaarkood ayaa ku jeesjeesay, balse qaar kale waxay
yidhaahdeen Mar kale ayaannu arrintan kaa dhagaysan doonnaa. [33] Marka Bawlos wuu ka
tagay dhexdooda. [34] Laakiin qaarkood isagay raaceen oo rumeeyeen; waxaana ka mid ahaa
Diyonusiyoskii Are'obagos iyo haweenay la odhan jiray Damaris iyo kuwo kale oo la joogay.

### Bawlos Oo Korintos Jooga

**18** Waxyaabahaas dabadood Bawlos Athens ayuu ka tagay oo wuxuu yimid Korintos.
[2] Meeshaasna wuxuu ka helay Yuhuudi Akula la odhan jiray oo reer Bontos ah oo muddo dhaw
xaaskiisa Bariskilla Itaaliya kala yimid, maxaa yeelay, Kalawdiyos ayaa Yuhuudda oo dhan
amar ku siiyay inay Rooma ka tagaan; marka wuu u yimid iyaga. [3] Marka maadaama oy isku
xirfad ahaayeen iyaga ayuu la joogay oo la shaqeeyay; waayo, waxay ahaayeen kowo
Teendhooyinka Sameeya. [4] Oo Sabti walba sunagogga ayuu Yuhuudda iyo Giriigga kula doodi
jiray. [5] Deedna markay Silas iyo Timoteyos Makedoniya ka yimaaddeen, Bawlos erayga ayuu
xoogga saaray isagoo Yuhuudda hortooda ka sheegaya in Ciise yahay Masiixa. [6] Oo markay
ka hor yimaaddeen oy caayeen, intuu dharkiisa hurgufay ayuu ku yidhi, iyaga Dhiiggiinnu
madaxiinna dushiisa ahaado, anigu bari baan ka ahay, hadda ka dibna waxaan u kacayaa
dadka aan Yuhuudda ahayn. [7] Marka intuu meeshaas ka tagay, ayuu guri nin Tiitos Yuustos la
odhan jiray oo Eebbe caabuda oo gurigiisu uu sunagogga ku dhaganaa galay. [8] Marka Kirisbos
oo sunagogga madax u ahaa ayaa Rabbiga rumeeyay isaga iyo qoyskiisa oo dhanba; deedna
kuwo badan oo reer Korintos ah ayaa markay dhagaysteen rumeeyay oo waa la biyo galiyay.
[9] Haddaba Rabbiga ayaa wuxuu Bawlos habeennimo riyo ku yidhi, Ha cabsanin, laakiin hadal,
oo ha aamusin; [10] Maxaa yeelay, anigaa kula jira oo nin wax ku yeeli kara ma jiro, waayo, dad
badan ayaan magaaladan ku leeyahay. [11] Meeshaasna sannad iyo lix bilood ayuu joogay, oo
erayga Eebbe dhexdooda ku barayay.

[12] Laakiin markuu Galliyo Akhaya guddoomiye ka noqday ayay Yuhuuddii oo isku duuban
Bawlos weerareen oo maxakamadda ayay hor geeyeen iyagoo leh [13] Ninkanu wuxuu dadka ku
qalqaaliyaa inay Eebbe u caabudaan si shareecada ka baxsan. [14] Laakiin markuu Bawlos
damcay inuu afka furto[154*] Galliyo ayaa Yuhuuddii ku yidhi, Hadday arrintu tahay xad gub ama
fal dembiyeed waan aqbali lahaa cabashadiinna; [15] Laakiin hadday tahay su'aalo ku saabsan
erayo iyo magacyo iyo shareecadiinna, idinka qudhiinnu eega, maxaa yeelay, ma doonayo
inaan waxyaabahaas garsoore ka noqdo. [16] Ka dibna iyaga maxakamadda ayuu ka eryay.
[17] Markaasay kulligood Sostenees oo sunagogga madax ka ahaa qabteen oy maxakamadda
horteeda ku garaaceen. Galliyona arrintaas dan kama uusan gelin.
[18] Deedna Markuu Bawlos muddo joogay, ayuu walaalihii sagootiyay oo wuxuu u dhoofay
Suuriya, isagoo ay la socdaan Bariskilla iyo Akula oo Kenekhreya ayuu madaxa ku xiirtay,
maxaa yeelay, nidar ayuu galay. [19] Marka waxay yimaaddeen Efesos oo intuu iyaga halkaas
kaga tagay ayuu sunagogga galay oo Yuhuuddii la dooday. [20] Oo markay ka codsadeen inuu
muddo la sii joogo, wuu ka diiday; [21] Laakiin markuu ka tagayay ayuu ku yidhi, Mar kalaan idiin
soo noqon doonaa hadduu Eebbe yidhaahdo markaasuu Efesos ka dhoofay.

---

154 Hadlo oo is difaaco.

### Bawlos Antiyokh Ayuu Ku Noqday

22 Haddaba markuu Kaysariya ku soo dagay, wuxuu u tagay kiniisadda oo wuu salaamay,
deedna Antiyokh ayuu u kacay. 23 Oo markuu muddo meeshaas joogay ayuu ka tagay, isagoo
meel meel u sii dhex maray gobolka Galatiya iyo Farugiya isagoo xerta dhiiri galinaya.

### Abolloos Ayaa Efesos Wacdiyay

24 Haddaba waxaa Efesos yimid Yuhuudi Abolloos la odhan jiray oo reer Iskanderiya ah, oo
wuxuu ahaa nin af tahan ah oo Kitaabka xoog u ayaqaanna. 25 Wuxuuna ahaa nin jidka
Rabbiga horay loo baray; oo isagoy xamaasad xagga ruuxa ahu ku jirto ayuu hadlay oo si
fiican oo sax ah wax Ciise ku saaban u baray, in kastoo uu biya galintii Nebi Yaxye[155*] oo keliya
garanayay; 26 Oo wuxuu billaabay inuu si geesinimo leh sunagogga dhexdiisa uga hadlo.
Deedna Bariskilla iyo Akula markay maqleen isaga, way kaxayeen oo si fiican oo sax ah ayay
jidka Eebbe u bareen. 27 Deedna markuu damcay inuu Akhaya u koco, walaalihii ayaa dhiiri
galiyay oo xertii ayay u qoreen inay isaga soo dhaweeyaan; markuu yimidna aad buu u
caawiyay kuwii nimcada aawadeed ku rumeeyay, 28 Maxaa yeelay, si xoog leh oo cad ayuu
Yuhuuddii u qanciyay oo Kitaabka uga tusay inuu Ciise ahaa Masiixa.

### Bawlos Oo Efesos Jooga

**19** Haddaba waxaa dhacay, markuu Abolloos Korintos joogay, inuu Bawlos soo dhex maray
dhulka sare oo uu Efesos yimid, oo wuxuu halkaas kula kulmay kuwo xer ah. 2 Oo wuxuu iyaga
ku yidhi, Ruuxa Qudduuska ah ma hesheen markaad rumaysateen? Marka waxay ku
yidhaahdeen Maya, maba aannaan maqal in Ruuxa Qudduuska ahi jiro. 3 Markaasuu ku yidhi,
Oo Haddaba maxaa laydinku biyo galiyay? Waxay ku yidhaahdeen Biya galintii Nebi Yaxye.
4 Deedna Bawlos wuxuu ku yidhi, Nebi Yaxye wuxuu dadka ku biya galiiyay biya galinta
toobadkeenka, isagoo dadka ku leh: Waa inaad ka iga daba iman doona rumayaan, isagoo ula
jeeda Ciise Masiix. 5 Oo markay taas maqleen, waxaa iyaga lagu biyo galiyay magaca Sayid
Ciise. 6 Deedna markuu Bawlos gacmaha dul saarayna ayuu Ruuxa Qudduuska ahu iyaga ku
soo degay; markaasay afaf kale ku hadleen oo ay wax sii sheegeen.[156*] 7 Waxayna ahaayeen
nimankaasu qiyaastii laba iyo toban. 8 Haddaba sunagogga ayuu galay[157*] oo meeshaas ayuu
saddex bilood si geesinimo leh kaga hadlay, isagoo la doodaya oo ku qancinaya waxyaabaha
boqortooyada Eebbe ku saabsan. 9 Laakiin markay qaarkood madax adaygeen oy beeniyeen
oy Jidka[158*] dadka hortooda ku caayeen, ayuu ka tagay iyagoo xerta la gaar noqday oo maalin
walba iskoolkii Turannos ayuu dood ka wadi jiray. 10 Taasuna laba sannadood ayay socotay,
marka dadkii Aasiya degganaa Yuhuud iyo Griigba erayga Rabbiga way wada maqleen. 11 Oo
Eebbena wuxuu gacmaha Bawlos ku sameeyay mucjisooyin la yaab leh, 12 Sidaa aawadeed
waxaa kuwa buka loo keeni jiray afmariska ama marada uu guntado ee jidhkiisa taabata,
markaasay cudurradu iyaga ka tagi jireen, shaydaanaduna way ka bixi jireen. 13 Deedna kuwo
Yuhuuddii wareegi jirtay ka mid ah oo shaydaanada saara ayaa waxay damceen inay kuway
shaydaanadu ku jireen magaca Sayid Ciise ka dul akhriyaan iyagoo leh Waxaannu idinku

---

155 Nebi Yaxye

156 Wax qaybka iyo mustaqbalka ku saabsan ayuu Ruuxa Qudduuska ahu u muujiyay oy sheegeen.

157 Waa Bawlos

158 Waa jidka badbaadada yo Injiilka.

dhaarinayaa Ciisaha Bawlos dadka ku wacdiyo. 14 Waxaana sidaa sameeyay toddobadii wiil ee
Iskeba dhalay, kaasoo ahaa wadaad sare oo Yuhuudi ah. 15 Markaasuu shaydaankii u
jawaabay oo ku yidhi, iyaga Ciise waan aqaanaa, Bawlosna waan aqaanaa ee idinku yaad
tihiin? 16 Deedna ninkii shaydaanku ku jiray ayaa iyaga ku booday oo kulligood ka xoog batay
oo ka adkaaday, markaasay ka carareen gurigaas, iyagoo qaawan oo dhaawac ah. 17 Oo
waxaa taas wada ogaaday reer Efesos oo dhan Yuhuuddii iyo Giriigba oo dhammaantood
cabsi baa gashay, magaca Sayid Ciisena waa la wayneeyay. 18 Markaasay kuwo badan oo
rumaystay yimaaddeen iyagoo qiranaya oo caddaysanaya falalkooda.[159*] 19 Kuwo badan oo
sixirroolayaal ahaan jirayna intay kutubtoodii soo ururiyeen ayay dadka hortooda ku wada
gubeen; oo markay qiimeeyeen waxay noqdeen konton kun oo lacag ah. 20 Sidaa darteed
eraygii Rabbigu wuu sii xoogaystay oo sii adkaaday.

### Rabshadihii Efesos Ka Dhacay

21 Haddaba markay waxyaabahaasu dhammaadeen Bawlos wuxuu xagga ruuxa ka
go'aansaday inuu Quddus tago isagoo Makedoniya iyo Akhaya sii dhex maraya oo wuxuu
yidhi, Markaan meeshaas tago dabadeed, waa inaan Roomana arko. 22 Marka wuxuu
Makedoniya u diray laba ka kaaliyayaashiisa ah oo ahaa Timoteyos iyo Erastos, isaguna
Aasiya ayuu muddo sii joogay. 23 Haddaba waxaa wakhtigaas kacday rabshad aan yarayn oo
ku saabsan Jidka.[160*] 24 Maxaa yeelay nin Deemeetriyos la odhan jiray, oo lacagta tumi jiray oo
sanamyada aatimis ka samayn jiray oo faa'iido aan yarayn farsama yaqaannada u keeni jiray;
25 Ayaa raggii xirfaddaas ku shaqaysan jiray isugu yeedhay isagoo ku leh Nimanyahow, waad
ogtihiin inaynu shaqadan faa'iido ka helo. 26 Marka waad aragtaan oo waad maqashaan siduu
kan Bawlos ahu dad fara badan oo reer Efesos ah iyo Aasiya oo dhanba u qanciyay oo u
duufsaday, isagoo leh ilaahyo gacma lagu sameeyo, Eebbe ma aha. 27 Taasuna halis kuma
aha oo keliya shaqadeenna oo sumcad beesha, balse waxay khatar ku tahay oo kale in
macbudka ilaahadda wayn ee aartemiso la fududaysto oo waynaanteeda la fududayso taasoo
Aasiya oo dhan iyo dunidaba laga wada caabudo. 28 Deedna markay taas maqleen aad ayay u
cadhoodeen, iyagoo ku dhawaaqaya Waxaa wayn aartemista reer Efesos! 29 Magaaladii oo
dhanna way isla kacday, markaasay Gayos iyo Aristarkhos oo reer Makedoniya ah oo Bawlos
la socon jiray qabteen oo iyagoo isku duuban ayay durba tiyaatarka ula baxeen. 30 Deedna
markuu Bawlos damcay inuu dadkii u soo boxo, xertii ayaa isaga ka hor istaagtay. 31 Oo
ogaasyo reer Aasiya ah oy isaga saaxiibbo ahaayeen ayaa u soo cid diray isaga oo waxay ka
codsadeen inuusan isku biimaynin tiyaatarka. 32 Haddaba qaar wax bay ku qayliyayeen, kuwo
kalena wax kalay ku qayliyayeen, maxaa yeelay isu soo baxa wareer ayaa ka jiray oo dadka
badidoodo mayna garanaynin sababtay isugu yimaaddeen. 33 Markaasay Aleksanderos isu soo
bixii ka soo dhex saareen isagoy Yuhuuddii xagga hore soo mariyeen. Marka Aleksanderos
ayaa gacanta taagay, oo wuxuu damcay inuu dadkii u doodo. 34 Laakiin markay garteen inuu
Yuhuudi yahay ayay dhammaantood laba saacadood qaylinayeen iyagoo leh Waxaa wayn
aartemista reer Efesos. 35 Deedna markuu duqii magaaladu dad waynihii aamusiiyay wuxuu ku
yidhi, Nimankiinan reer Efesosow, yaan ogayn in magaalada Efesos ay tahay ta ilaalisa
macbudka aartemis ee wayn iyo sanamka barakaysan ee samada ka soo dhacay? 36 Taasu
waa wax aan la dafiri karin, sidaa daraaddeed waxaa idinku waajib ah inaad is dejisaan oy
aydaan waxba ku deg degin.

---

159 Dembiyadooda iyo sanam caabudiddooda.

160 Masiixiyadda

[37] Waayo, waxaad halkan keenteen nimankan iyagoon macbudyada dhicin ama ilaahaddeenna
caayin. [38] Sidaa daraaddeed hadday Deemeetriyos iyo xirfadlayaashu cid wax ku haystaan,
maxkamadahu way u furanyihiin, oo garsooreyaal baa jiree ha is-dacweeyeen. [39] Laakiin
hadday arrimo kale jiraan, waxaa lagu xallinayaa kulan sharci ah. [40] Waayo waa khatar in
laynagu eedeeyo rabshadihii maanta, taasoo aynaan sabab u haynin. [41] Oo markuu sidaa
yidhi, ayuu isa soo bixii kala diray.

### Bawlos Oo Makedoniyada Giriigta Tegay

**20** Markay rabshaddii dhammaatay dabadeed Bawlos ayaa xertii u yeedhay oo intuu dhiirri
galiyay oo nabad gelyeeyay ayuu Makedoniya u amba baxay. [2] Deedna markuu gobolladaas sii
dhex maray oo waanooyin badan ku dhiirri galiyay iyaga, ayuu dalka Giriigga yimid. [3] Oo
markuu saddex bilood meeshaa joogay oo uu damcay inuu intuu xagga badda maro Suuriya u
dhoofo Yuhuuddii ayaa shirqool u dhigtay, deedna wuxuu go'aansaday inuu xagga
Makedoniya u soo noqdo. [4] Waxaana isaga sii raacay Soobater ina Burhuskii reer Beroya iyo
Aristarkhos iyo Sekundoskii reer Tesaloniika iyo Gayoskii reer Derbe iyo Timoteyos iyo
Tukhikos iyo Torofimos oo reer Aasiya ah. [5] Laakiin kuwaasu way naga hor tageen oo Taroo'as
ayay nagu sugeen. [6] Annaguna Ciiddii Kimista aan khamiirka lahayn dabadeed ayaannu Filiboy
ka shiraacannay oo shan maalmood gudohood ayaannu iyaga Taroo'as ugu nimid, taasoo
aannu toddoba maalmood joognay.

### Nin Dhallinyaro Ah Oo Yutukhos La Odhan Jiray Ayaa La Soo Nooleeyay

[7] Marka maalintii ugu horraysay ee toddobaadka markaannu isugu nimid inaannu kimis
jejebinno, ayuu Bawlos iyaga la hadlay, isagoo ku tala jira inuu maalinta dambe tago, oo
hadalkii ayuu ku dheeraaday oo ilaa iyo habeen badhkii ayuu sii waday. [8] Marka dabaqa sare
oo aannu joognay faynuusyo badan ayaa ka iftiimayay. [9] Waxaana daaqadda ag fadhiyay nin
dhallin yara ah oo Yutukhos la odhan jiray, kaasoo aad u lulmooday; oo intuu Bawlos hadalkii
sii waday ayuu isagoo aad u lulmaysan dabaqa saddexaad ka soo dhacay, oo isagoo meyd ah
ayaa la qaaday. [10] Markaasuu Bawlos intuu hoos u soo dagay ku dul dhacay isaga, wuuna isku
duubay, isagoo leh Ha welwelina, maxaa yeelay wuu noolyahay. [11] Deedna intuu dusha u
baxay oo kimis jejebiyay oo wax cunay ayuu wakhti dheer iyaga la hadlay, ilaa iyo waa bargii,
deedna wuu tagay. [12] Wiilkiina isagoo nool ayay qaadeen oo dhiirri gelin aan yarayn ayay u
ahayd iyaga.

### Safarkii Ay Mileetos Ku Tageen

[13] Marka annagoo horay u soconna intaannu doonnida u kacnay ayaannu Asos u dhoofnay,
meeshaasoo aannu doonaynay inaannu Bawlos ka qaadno, waayo wuxuu doonayay inuu u
lugeeyo. [14] Oo markuu Asos nagula kulmay, waannu soo qaadnay oo waxaannu nimid
Mituleenee. [15] Oo intaannu halkaas ka dhoofnay ayaannu maalintii dambe meel Khiyos ku
toosan nimid; maalintii kalena waxaannu gaadhnay Samos; maalintii ku xigtayna waxaannu
nimid Mileetos. [16] Maxaa yeelay, Bawlos wuxuu goostay inuu Efesos dhaafo, oo uusan Aasisa
wakhti kaga lumin; waayo, wuxuu ku deg degayay hadday u suurta gasho inuu maalinta
Bentekostka Quddus yimaado.

## Bawlos Wuxuu U Khudbeeyay Odayaashii Efesos

17 Deedna Bawlos intuu Mileetos cid ka diray oo Efesos u diray ayuu odayaashii kiniisadda u
yeedhay. 18 Oo markay u yimaaddeen wuxuu iyaga ku yidhi, Idinka qudhiinnu waad ogtihiin
sidaan muddadan oo dhan idiin la noolaa tan iyo maalintii ugu horraysay een Aasiya cagta soo
dhigay, 19 Anigoo Rabbiga ugu adeegaya is is-hoosaysiin oo dhan anigoy ilmadu iga da'ayso
iyo jirrabaado igu dhacay markay Yuhuuddu i shirqooleen; 20 Iyo sidaanan waxba idiin kala
hadhin wixii faa'iido idiin leh inaan idiin sheego oon si aan qarsoodi ahayn iyo guri guriba idiin
baro 21 Anigoo Yuhuudda iyo Giriig labadaba ogaysiinaya inay Eebbe u toobadkeenaan oy
rumeeyaan Rabbigeenna Ciise Masiix. 22 Hadda bal eega, Quddus ayaan tagayaa anigoo
Ruuxu i wado oon ogayn waxa igu dhici doona halkaas; 23 Inuu Ruuxa Qudduuska ahu
magaalo kasta iigu markhaatifuro mooyee, isagoo leh Waxaa ku sugaya xanuun iyo
dhibaatooyin. 24 Laakiin naftayda kuma tiriyo wax qiima leh, si aan u dhammeeyo tartankayga
iyo shaqada aan Sayid Ciise ka helay oo ah inaan u markhaatifuro Injiilka nimcada Eebbe.
25 Haddaba, bal eega, waxaan ogahay inaan dhammaantiin idin ku dhex wareegi jiray oon
boqortooyada idinku wacdiyi jiray idinkoon mar dambe wejigayga arki doonin. 26 Sidaa
daraaddeed waxaan maanta markhaati idiinka ahay inaan dadka oo dhan dhiiggooda bari ka
ahay. 27 Maxaa yeelay, kama gaabinin inaan doonista Eebbe oo dhan idiin sheego.
28 Qudhiinnu is ilaaliya, idahana ilaaliya, kuwaasoo Ruuxa Qudduuska ahu ilaaliyayaal idiinka
dhigay si aad u daajisaan kiniisadda Eebbe ee uu dhiiggiisa ku iibsaday. 29 Maxaa yeelay
waxaan ogahay markaan tago dabadeed inay Yay aan idaha waxba ka reebaynin idinku dhex
dhici doonto; 30 Oo waxaa idinka dhex kici doona niman waxyaabo qalloocan[161*] ku hadlaya si
ay xerta xaggooda ugu jiitaan. 31 Sidaa darteed, soo jeeda, idinkoo xusuusanaya inaanan
saddex sannadood ka joogsanin inaan mid kasta habeen iyo maalinba waaniyo anigoo
ilmaynaya. 32 Haddana waxaan idinku ammaanaysanaya Eebbe iyo erayga nimcadiisa, kaasoo
kara inuu idin dhiso oo dhaxal idinka dhex siiyo kuwa qudduusiinta laga dhigay oo dhan.
33 Ninna lacagtiisa ama dahabkiisa ama dharkiis ma damcin. 34 Idinka qudhiinna ayaa og inay
gacmahanu u adeegeen baahidayda iyo kuwii ila joogayba. 35 Wax walba waan idin tusay,
siday waajibka idiinku tahay inaad shaqaysataan si aad kuwa itaalka daran u caawisaan ood u
xusuusataan erayadii Sayid Ciise, siduu isaga qudhiisu u yidhi, In wax la qaato, waxaa ka
barako badan in wax la bixiyo. 36 Deedna markuu waxaas ku hadlay ka dib ayuu jilba
joogsaday oo dhammaantood la tukaday. 37 Markaasay kulligood aad u wada ooyeen, oo intay
Bawlos laabta ku qaadeen ayay dhunkadeen, 38 Iyagoo aad uga naxay markuu u sheegay
inayna mar dambe wejigiisa arki doonin. Deedna ilaa iyo doonnidii ayay u sii amba bixiyeen.

## Bawlos Intuu Mileetos Ka Tagay Ayuu U Turos Dhoofay

**21** Oo, markaannu iyaga ka tagnay, waxaannu toos u nimid Koos, maalintii dambena
waxaannu nimid Rodos, meeshaasna waxaannu uga sii baxnay Batara; 2 Deedna markaannu
doonni Foynike sii maraysa helay waannu raacnay oo waannu ku safarnay. 3 Deedna markay
Qubrus noo muuqatay, ayaannu dhinaca bidix ka marnay oonnu Suuriya u kacnay oo
waxaannu ku dagnay Turos, maxaa yeelay, meeshaasay doonnidu shixnaddeeda ku dejin
lahayd. 4 Oo markaannu meeshaas xer ka helnay toddoba maalmood ayaannu joognay; oo
iyagu waxay xagga Ruuxa Bawlos ugu sheegeen inuusan Quddus u kicin.[162*] 5 Deedna markay

161 Bidco wax baridda rasuullada iyo Injiilkaba ka baxsan.

162 Wuxuu Ruuxa Qudduuska ahu u sheegay iyaga inay Bawlos uga digaan inuu Quddus u dhoofo.

maalmahaasu noo dhammaadeen ayaannu ka tagnay oo safarkayagii ayaannu sii wadannay;
oo dhammaantood iyaga iyo xaasaskoodii iyo carruurtoodii ayaa ilaa iyo magaalada
dibaddeeda noo sii sagootiyay; markaasaannu xeebta ku jilba joogsannay oo tukannay, [6] Oo
isnabad galyaynay; deedna doonnidii ayaannu fuulnay, iyaguna guryahoodii ayay ku noqdeen
[7] Haddaba markuu safarkii aannu Turos ka soo safarnay noo dhammaaday, waxaannu nimid
Botolemays; oo walaalihii ayaannu salaannay oo maalin ayaannu iyaga la joognay. [8] Maalintii
dambena waannu ka tagnay, oo waxaannu nimid Kaysariya, oo waxaannu galnay gurigii
Filibos oo toddobadii ka mid ahaa oo wacdiye ahaa oo isaga ayaannu la joognay.[163*] [9] Ninkanu
wuxuu lahaa afar gabdhood oo bikrado ah oo nebiyo ah. [10] Deedna markaannu maalmo badan
meeshaas joognay, waxaa Yahuudiya ka yimid nebi la odhan jiray Agabos.

[11] Oo markuu noo yimd intuu suunkii Bawlos qaatay ayuu gacmihiisa iyo lugihiisa ku xidh
xidhay isagoo leh Ruuxa Qudduuska ahu sidan ayuu leeyahay Yuhuudda reer Quddus ayaa
ninka suunkan leh sidan oo kale u xidh xidhi doona, oo waxay isaga u dhiibi doonaan dadka
aan Yuhuudda ahayn. [12] Deedna markaannu Annaga iyo kuwii halkaas joogayba taas
maqalnay, waxaannu isaga ka barinay inuusan Quddus tagin. [13] Marka Bawlos wuxuu ku
jawaabay oo yidhi, Maxaad samaynaysaan ood la ooyaysaan ood ii qalbi jebinaysaan? Waayo,
in lay xidh xidho oo keliya diyaar uma ihi, balse inaan Quddus ku dhinto magaca Sayid Ciise
aawadiis. [14] Oo markii la qancin waayay, waannu iska daynay, oo waxaannu nidhi Rabbiga
doonistiisu ha noqoto. [15] Maalmahaas dabadeedna, alaabtayadii ayaannu diyaarsannay oo
Quddus ayaannu tegnay. [16] Oo xerta Kaysariya qaarkood ayaa na raacay oo waxay na
geeyeen gurigii Manasoonkii reer Qubrus oo mar hore xer noqday, kaasoo aannu u hoyan
lahayn.

## Bawlos Macbudka Ayaa Lagu Xidhay

[17] Deedna markaannu Quddus nimid walaalihii ayaa farxad nagu soo dhaweeyeen. [18] Maalintii
ku xigtayna Bawlos oo nala socda waxaannu u tagnay Yacquub; odayaashii oo dhanna way
joogeen. [19] Deedna markuu salaamay ka dib, mid mid ayuu ugu warramay waxyaabihii Eebbe
dadka aan Yuhuudda ahayn ka dhex qabtay. [20] Iyaguna, markay taas maqleen, Eebbe ayay
ammaaneen; oo waxay ku yidhaahdeen isaga Walaal, waad aragtaa inay kumanaan Yuhuud
muminiin ahu Quddus joogaan; kulligoodna waa xag jiriin shareecada ku dhaqama. [21] Iyagana
waxaa loo sheegay inaad Yuhuudda umadaha ku dhex nool ku amartay inay Muuse ka tagaan
adigoo u sheegay inayna carruurtooda gudin oo ayna caadooyinkii ku dhaqmin. [22] Haddaba
maxaa la sameeyaa? Way wada maqli doonaan inaad timid. [23] Sidaas darteed waxaannu kuu
sheegayno yeel. Waxaa nala jooga afar nin oo nidar galay; [24] kuwaas kaxee oo isla daahiri
iyaga oo kharashka ay madaxa ku xiiranayaan ka bixi; deedna dhammaan waxay wada ogaan
doonaan inayna wixii lagaa sheegay waxba ka jirin, balse aad adiga qudhaadu si wanaagsan
shareecada ugu dhaqanto. [25] Laakiin kuwa aan Yuhuudda ahayn ee muminiinta ah waxaannu
u qornay sida nala quman, inay iska ilaaliyaan waxa sanamyada loo sadaqeeyo iyo dhiigga iyo
waxa la ceejiyo iyo sinada. [26] Marka Bawlos nimankii ayuu kaxeeyay oo maalintii dambe intuu
iyaga isla daahiriyay ayuu macbudka galay, isagoo ogaysiinaya marka ay maalmaha
isdaahirintu dhammaanayaan ee uu mid kastoo iyaga ka mid ahu sadaqo ka bixiyo. [27] Oo
markay toddobadii maalmood sii dhammaanayeen Yuhuud Aasiya ka timid ayaa isaga

163 Wax Qabadkii Xawaariyiinta 6:1, 5:8

macbudka ku arkay, markaasay dadkii oo dhan kiciyeen, isagana way qabteen, [28] Iyagoo ku
qaylinaya Ragga reer banii Israa'iilow, na caawiya! ninkanu waa kan dadka oo dhan meel
kastoy joogaanba bara inay ka hor yimaaddaan shacabka iyo shareecada iyo meeshanba.[164*]
waxaa intaa dheer wuxuu macbudka keenay dad Giriig ah oo meeshan qudduuska ahna wuu
nijaaseeyay. [29] Maxaa yeelay, mar hore waxay magaalada ku arkeen Torofimoskii reer Efesos,
kaasoo ay u maleeyeen inuu Bawlos macbudka keenay. [30] Markaasay magaaladii oo dhan isla
kacday, dadkiina way isu soo baxeen; oo intay Bawlos qabteen ayay macbudka dibadda uga
jiideen; deedna markiiba albaabbadii ayaa la xidhay. [31] Haddaba markay damceen inay isaga
dilaan taliyihii ciidanka ayaa ka war helay inay Quddus oo dhan kacsantahay. [32] Markaasuu
saraakiil iyo askar kaxaystay oo hoos u soo orday; iyaguna, markay sarkaalkii sare iyo askartii
arkeen ayay Bawlos garaacidda ka daayeen. [33] Deedna sarkaalkii sare ayaa intuu isaga ku soo
dhawaaday qabtay oo wuxuu amar ku bixiyay in laba silsiladood lagu xidho; wuxuuna
waydiiyay cidda uu yahay iyo wuxuu sameeyay. [34] Marka dadka Qaarkood wax bay ku
qaylinayeen, qaarna wax kale oo markuu rabshadihii aawadood xaqiiqada garan waayay
wuxuu amar ku bixiyay in xerada la geeyo.[165*] [35] Oo markuu Bawlos sallaanka fuulay askartii
ayaa kor u qaadday isaga dadkii gadoodsanaa aawadood, [36] Waayo, dad fara badan ayaa ka
daba qaylinayay iyagoo leh Na dhaafii.

## Bawlos Wuu Is Difaacay

[37] Deedna markuu Bawlos xeradii ku soo dhawaaday sarkaalkii sare ayuu ku yidhi, Ma kula
hadli karaa? Markaasuu ku yidhi, Afka Giriigga ma taqaannaa? [38] Oo miyaadan Masrigii muddo
ka hor rabshadda kiciyay ee afar kun oo dhagar qabayaal ah howdka u kaxeeyay ahayn?
[39] Laakiin Bawlos wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo reer Tarsostii Kilikiya
ku taallay ah, waana magaalo caan ah. marka ii ogolow inaan dadka la hadlo. [40] Deedna
markuu u fasaxay, Bawlos isagoo sallaankii taagan, ayuu dadka u gacan haadiyay; oo markii la
aamusay, ayuu afka Cibraaniga kula hadlay iyaga, isagoo leh,

## Hadalkii Bawlos Kula Hadlay Yuhuudda

**22** Walaallayaal iyo aabbayaal, dhagaysta difaacayga aan hadda hortiinna ka jeedinayo.
[2] Deedna markay maqleen inuu afka Cibraaniga kula hadlay, ayay aad u sii aamuseen.
Markaasuu ku yidhi, [3] Anigu waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo ku dhashay magaalada Tarsos ee
Kilikiya,[166*] laakiin magaaladan ayaa la i keenay oo Gamalii'eel ayaan sharcigii
awowayaasheen si fiican uga aflaxay, anigoo Eebbe qiiro u leh sidaad maanta wada tihiin.
[4] Dariiqadanna[167*] ilaa iyo heer dhimasho ayaa ciqaabi jiray, anigoo rag iyo dumarba xidh
xidhay oo xabsi ku guray. [5] Siday markhaati iiga yihiin imaamka guud iyo odayaasha oo
dhanba, kuwaasoo aan warqado uga helay walaalahan, oon Dimishiq u kacay si aan kuwii
halkaas joogay iyagoo xidh xidhan Quddus u keeno si loo ciqaabo.

---

164 Macbudka
165 Xeradii Ciidanka
166 Ee gobolka ama dagmada Kilikiya
167 Masiixiyaddana

### Bawlos Wuu Ka Sheekeeyay Markhaatifurkiisii Iyo Siduu Masiixi Ku Noqday

[6] Oo waxaa dhacday, markaan sii socday een Dimishiq ku dhawaaday qiyaastii duhurkii waxaa
si lama filaan ah samada uga yimid iftiin wayn oo hareerahayga ka iftiimay. [7] Deedna dhulka
ayaan ku dhacay oo waxaan maqlay cod igu leh Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii
ciqaabaysaa? [8] Markaasaan u jawaabay oo ku idhi Yaad tahay, Mudane? Wuxuu igu yidhi,
Waxaan ahay Ciisaha reer Naasared eed ciqaabayso. [9] Oo kuwii ila joogay runtii waxay arkeen
iftiinka, laakiin kii ila hadlay codkiisa mayna maqal. [10] Markaasaan ku idhi, Maxaan sameeyaa,
Rabbiyow? marka Rabbigu wuxuu igu yidhi, Kac oo Dimishiq gal; halkaas ayaa waxaad
samayn lahayd oo dhan laguugu sheegi doonaa. [11] Oo markaan waxba arki waayay iftiinka
xooggiisa aawadii, kuwii ila joogay ayaa gacanta igu hagay oo Dimishiq ayaan imid. [12] Deedna
mid Xanaaniyas la odhan jiray, oo sida shareecada waafaqsan aad ugu cibaadaysta oo nin ay
Yuhuuddii halkaas joogtay oo dhan wanaagiisa u marag fureen ah[13] Ayaa ii yimid oo intuu
agtayda istaagay ayuu igu yidh Walaal Sawlosow, araggaaga hel. Oo saacaddiiba araggaygii
ayaan helay oo waan arkay isaga. [14] Markaasuu igu yidhi, Eebbaha awowayaasheen ayaa kuu
doortay inaad doonistiisa ogaato ood Ka Xaqa ah aragto ood afkiisa cod ka maqasho. [15] Maxaa
yeelay, dadka oo dhan hortooda ayaad isaga uga markhaatifuri doontaa waxaad aragtay eed
maqashay. [16] Marka hadda maxaad sugaysaa? Kac ha lagu biya galiyo, oo dembiyadaada ka
maydho, adigoo magiciisa ku baryaya.

### Bawlos Dadka Ajinabiga Ah Ayaa Loogu Yeedhay

[17] Deedna Quddus ayaan ku soo noqday oo anigoo macbudka ku tukanaya, ayaan riyooday,
[18] Oo waxaan arkay isagoo igu leh: dhakhso oo Deg deg Quddus uga bax; maxaa yeelay,
markhaatifurkaad ii marag furayso kaama qaadanayaan. [19] Deedna waxaan idhi, Rabbiyow,
iyaga qudhoodu way ogyihiin inaan xidh xidhay oon sunagog walba kuwa ku rumeeyay ku
garaacay; [20] Oo markii dhiiggii Istefanos oo markhaatigaaga ahaa la daadinayay, waan ag
taagnaa anigoo oggol oo kuwii isaga dilayay ayaan dharkooda u ilaalinayay. [21] Markaasuu igu
yidhi, Tag, maxaa yeelay, waxaan kuu dirayaa meel fog si aad dadka aan Yuhuudda ahayn
ugu tagtid.

### Bawlos Inuu Muwaadin Reer Rooma Ah Yahay Ayuu Is Sheegay

[22] Marka way dhegaysteen ilaa iyo erayadaas; markaasay codkoodii kor u qaadeen iyagoo leh
Ninka noocan ah dhulka dushiisa ka laga tir tiro! maxaa yeelay, ma habboona inuu noolaado.
[23] Deedna markay qaylyeen oy dharka iska tuureen oy boodh hawada u firdhiyeen,
[24] Ayuu sarkaalkii sare wuxuu amar ku bixiyay in isaga xerada la soo geliyo, oo wuxuu u
sheegay in garaac wax lagu waydiiyo si uu u ogaado sababtay sidaas ugu qaylinayeen isaga.
[25] Deedna markay xidh xidheen si ay u garaacaan Bawlos ayaa sarkaalkii oo ag taagan ku
yidhi, Ma sharci baa inaad nin muwaadin reer Rooma ah oon la xukumin garaacdaan? [26] Oo
marku sarkaalkii taas maqlay wuxuu u tagay taliyihii sare oo u sheegay, isagoo leh Maxaad
samaynaysaa? Waayo, ninkanu waa nin muwaadin reer Rooma ah. [27] Marka taliyihii sare ayaa
u yimid oo isaga ku yidhi, Ii sheeg ma nin muwaadin reer Rooma ah ayaad tahay? Markaasuu
yidhi, Haah. [28] Deedna taliyihii sare ayaa ugu jawaabay Anigu jinsiyadda lacag badan ayaan
siistay. Laakiin Bawlos wuxuu ku yidhi, Anigu waan u dhashay. [29] Markay kuwii doonayay inay
isaga itixaamaan isla markiiba way ka tageen, xataa taliyihii sare wuu cabsaday markuu
ogaaday inuu muwaadin reer Rooma ah yahay, maxaa yeelay, wuu xidhay.

## Bawlos Oo Golahan Isku Hor Difaacay

30 Laakiin maalintii dambe, isagoo doonaya inuu hubsado waxay Yuhuuddu ku eedeeyeen,
ayuu isaga furayo oo wuxuu wadaaddadii sare iyo golihii oo dhan ku amray inay isu
yimaaddaan, markaasuu Bawlos xagga hoose ugu keenay oo soo hor istaajiyay iyaga.

**23** Markaasuu Bawlos intuu golihii aad u eegay ku yidhi, Walaalayaal, ilaa iyo maanta damiir
wanaagsan ayaan Eebbe hortiisa ugu noolaa. 2 Deedna imaamkii guud oo Xanaaniyas la
odhan jiray ayaa kuwii ag taagnaa amar ku siiyay inay afka ku dhuftaan. 3 Marka Bawlos ayaa
ku yidhi, Eebbe ha ku garaaco, derbiyahow la caddeeyay; ma adigoo u fadhiya inaad sida
sharciga ah igu xukunto ayaad amraysaa in lay garaaco si sharci darro ah? 4 Marka kuwii ag
taagnaa ayaa ku yidhi, Ma imaamka sare ee Eebbe ayaad caayaysaa? 5 Deedna Bawlos ayaa
yidhi, Walaallayaal, anigu ma garanaynin inuu imaamkii sare yahay; maxaa yeelay, waxaa
qoran Waa inaadan madaxda shacabkaaga af lagaadaynin*[x]. 6 Dabadeedna markuu Bawlos
ogaaday inay qaarkood Sadukiin yihiin, qaarna Farrisiin, ayuu golihii ka dhex qayliyay oo yidhi,
Walaallayaal, anigu waxaan ahay Farrisi, ina Farrisii, oo rajada ka sarakicidda kuwii dhintay
ayaa laygu maxakamadaynayaa. 7 Oo markuu sidaas yidhi,na, waxaa Farrisiintii iyo Sadukiintii
ka dhex dhacay muran, golihiina wuu kala qaybsamay. 8 Maxaa yeelay, Sadukiintu waxay
yidhaahdaan, qiyaamo iyo malaa'ig iyo ruux toona ma jiraan; laakiin Farrisiintu intaba way
wada aaminsanyihiin.

9 Marka buuq wayn ayaa dhacay, oo qaar ka mid ah culimmadii mad-habta Farrisiinta ayaa
istaagay iyagoo si adag u doodaya oo leh Ninkanu wax dembi ah kamaanaan helin; laakiin
haddu ruux ama malag la hadlay yaynaan Eebbe la dagaallamin. 10 Deedna markuu murankii si
wayn u sii kordhay, ayuu taliyihii sare wuxuu ka cabsaday inay Bawlos cad cad u kala
gooyaan, oo wuuxu askartii ku amray inay hoos tagaan oo xoog isaga dhexdooda uga soo
qaadaan oy xeradii keenaan. 11 Haddaba habeenkii ku xigay Rabbiga ayaa isa soo ag taagay
isaga oo ku yidhi, Kalsooni yeelo, maxaa yeelay, sidaad Quddus iigu marag furtay ayaad
Roomana iigu marag furi doontaa.

## Shirqoolkii Bawlos Loo Dhigay

12 Deedna markuu waagu baryay koox Yuhuud ah ayaa nidar wada galay inayna waxna cunin
waxna cabbin ilaa oy Bawlos ka dilaan. 13 Kuwa shirqoolkan isku dhaarsadayna afartan way ka
badnaayeen. 14 Markaasay wadaaddadii sare iyo odayaashii u yimaaddeen oo waxay ku
yidhaahdeen Nidar ayaannu wada galnay inaannan waxba dhadhamin ilaa aannu Bawlos ka
dilno. 15 Haddaba idinka iyo goluhuba taliyaha sare ku qanciya inuu isaga idiin keeno sidii
idinkoo doonaya inaad arrintiisa wax ka sii ogaataan; annaguna waxaannu isu diyaarinaynaa
intuusan soo dhawaanin inaannu isaga dilno. 16 Laakiin Bawlos wiil uu abti u yahay ayaa
maqlay inay jidka u galeen, markaasuu yimid oo intuu xeraddii galay ayuu Bawlos u warramay.
17 Marka Bawlos wuxuu u yeedhay saraakiisha midkood oo wuxuu ku yidhi, Wiilkan taliyaha
sare u gee, maxaa yeelay, farriin buu u sheegayaa. 18 Deedna wuu kaxeeyay oo intuu taliyihii
sare u geeyay ayuu ku yidhi, Maxbuuskii Bawlos ahaa ayaa ii yeedhay oo wuxuu i waydiistay
inaan wiilkan oo farriin kuu wada kuu keeno. 19 Marka taliyihii sare ayaa intuu isaga gacanta
qabtay gees ula baxay oo waydiiyay Waa maxay warkaad doonayso inaad ii sheegto?
20 Markaasuu ku yidhi, Yuhuuddu waxay ku heshiiyeen inay ku waydiistaan inaad barri Bawlos
golaha hor keento sidii iyagoo doonaya inay arrintiisa wax siyaada ah ka sii ogaadaan.

21 Haddaba ha aaminin; maxaa yeelay, waxaa isaga jidka u galay in ka badan afartan nin oo
iyaga ah, kuwaasoo nidar galay in ayna waxna cunin, waxna cabbin ilaa oy isaga dilaan;
haddana waa diyaar, iyagoo ogolaansho kaa sugaya. 22 Deedna taliyihii sare wiilkii ayuu iska
diray isagoo ku amray Ninna ha u sheegin inaad aarintan ii muujisay.

### Bawlos Waxaa Loo Diray Kaysariya

23 Markaasuu wuxuu u yeedhay laba sarkaal oo wuxuu ku yidhi, Waxaad diyaarisaan laba
boqol oo askari iyo toddobaatan fardoolay ah iyo laba boqol oo warmoolay ah si ay saddex
saac oo habeennimo Kaysariya u tagaan. 24 Wuxuu kaloo ku yidhi, Keena neef uu Bawlos fuulo
oo isagoo nabad qaba guddoomiye Feelikos u geeya. 25 Markaasuu warqad qoray isagoo
leh:26 Ka socota Kalawdiyos Lusiyas, waxaan salaamayaa guddoomiyaha sharafta wayn leh ee
Feelikos. 27 Ninkan markay Yuhuuddu qabteen oy ku dhawaadeen inay dilaan, ayaan intaan
askar kaxaystay ka badbaadiyay, markaan ogaaday inuu muwaadin reer Rooma ah yahay.
28 Marka Anigoo doonaya sababta ay ku eedaynayaan inaan ogaado ayaan isaga golahooda
hor geeyay; 29 Deedna waxaan ogaaday inay isaga su'aalo shareecadooda ku saabsan ku
eedeeyeen oon lagu eedaynin wax istaahila in la dilo ama in la xidho. 30 Haddaba markii la ii
sheegay in shirqool lagu dilayo loo diyaariyay, ayaan deg deg isaga kuugu soo diray, anigoo
amar ku siiyay kuwa soo dacweeyay inay hortaada ka dacweeyaan isaga. 31 Marka askartii,
ayaa sidii lagu amray Bawlos kaxeeyay, oo habeennimo Antibatris keenay. 32 Deedna maalintii
ku xigtay ayay fardoolaydii u daayeen inay isaga sii kexeeyaan, iyaguna xeradii ayay ku
noqdeen; 33 kuwaasuna markay Kaysariya yimaaddeen warqaddii ayay guddoomiyaha u
dhiibeen, Bawlosna isagay hor geeyeen. 34 Deedna markuu akhriyay, wuxuu waydiiyay
gobolkuu ka yimid; oo markuu ogaaday inuu Kilikiya ka yimid, 35 Wuxuu ku yidhi, Waxaan
dacwaddaada dhagaysan doonaa markay kuwii ku soo eedeeyay yimaaddaan; markaasuu ku
amray in gurigii taliyaha lagu hayo.

### Bawlos Oo Guddoomiyaha Feelikos Hortiisa Isku Difaacay

**24** Marka shan maalmood ka dib waxaa yimid Xanaaniyas imaamkii guud oo odayaal iyo nin
aftahan ah oo Tertullos la odhan jiray wata oo dacwaddii ay Bawlos u haysteen ayay
guddoomiyaha u sheegeen. 2 Deedna markii loo yeedhay Tertullos ayaa billaabay inuu isaga
dacweeyo oo wuxuu yidhi, Maadaama oo aannu adiga dartaa nabad badan ku raaxaysanno oy
ummadanu aragtidaada dheer aawadeed horumar loo sameeyay. 3 Annaguna mar walba iyo
meel walba waannu aqbalynaa oo waannu ka mahad celinaynaa Feelikoskii sharafka wayn
lahaayow. 4 Laakiin si aanan taas kuugu daalinin, waxaan kaa baryayaa inaad dulqaadkaaga
nagu dhagaysato. 5 Maxaa yeelay, waxaannu aragnay in ninkanu yahay nin baas oo fitno ka
dhex kiciya Yuhuudda dunida joogta oo dhan, waana hoggaamiye ka tirsan dariiqada
nasaaarada; 6 Wuxuuna aad ugu dadaalay inuu macbudka nijaaseeyo; laakiin waannu soo
qabannay isaga oo markaannu damacnay inaannu shareecadaya ku xukunno. 7 Waxaa yimid
taliyaha sare ee Lusiyas oo gacantayada xoog kagala baxay isaga, 8 Oo wuxuu kuwii soo
dacweeyay ku amray inay hortaada yimaaddaan. Isaga oo adiga qudhaadu haddaad
imtixaanto aad ogaan karto inay waxa isaga lagu eedaynayo oo dhan ay run yihiin. 9 Marka
Yuhuuddiina dacwaddii ayay ku biireen iyagoo ku adkaysanaya inay arrintu sidaas tahay.

[10] Deedna markuu guddoomiyihii Bawlos u ishaaray wuxuu ku jawaabay. Anigoo og inaad sannado fara badan ummadan xukumaysay ayaan si farxad leh isu daafacayaa. [11] Adiguba waad ogaan kartaa in ayna laba iyo toban maalmood ka badnayn markaan inaan Quddus ku soo cibaadaysto u tagay. [12] Marka mayna igu helin aniga oo qof kula doodaya macbudka dhexdiisa, ama aniga oo hadday tahay sunagogyada ama magaaladaba dad waynaha kicinaya. [13] Kuumana caddayn karaan waxay hadda igu eedaynayaan. [14] Laakiin tan ayaan kuu qirayaa, inaan jidka ay bidcada ku sheegaan Eebbaha awowayaashayo ugu adeego, anigoo rumaysan wax kasta oo shareecada iyo kutubtii nebiyaddaba ku qoran. [15] Oo waxaan xagga Eebbe ka rajaynayaa waxyaabaha ay kuwan qudhooduba rajaynayaan, taasoo ah inay jiri doonto sarakicidda kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn ay soo sarakici doonaan. [16] Sidaa darteed waxaan mar walba ku dadaalayaa inaan damiir nadiif ah ku lahaado Eebbe agtiisa iyo dadba agtoodaba. [17] Haddaba dhawr sannadood dabadeed waxaan u imid inaan ummadayda sadaqooyin u bixiyo oo aan kafaaragud bixiyo. [18] Marka koox Yuhuudda Aasiya ah ayaa aniga oo daahirsamay macbudka dhexdiisa iga helay, aniga oon dad badan la joogin, oon buuq ku jirin, [19] kuwaasoy waajib ahayd inay halkan hortaada ah yimaaddan oy i dacweeyaan hadday wax igu haystaan. [20] Haddii kalese nimankan qudhoodu ha sheegeen xadgudubkii ay igu heleen markaan golaha hor istaagay, [21] Waxaan ka ahayn markaan ka dhex qaylyay oon ka hadlay Wax sarakicidda kuwii dhintay ku saabsan taas oo maanta maxkamad igu saaraysaan.

### Feelikos Ayaa Dacwaddii Dib U Dhigay

[22] Deedna Feelikos oo Jidka[168*] aad u yaqaanna ayaa dacwaddii dib u dhigay oo yidhi, Markuu taliyaha saree Lusiyas yimaado ayaan dacwaddiinna go'aanka ka gaadhi doonaa.
[23] Markaasuu sarkaalkii amar ku siiyay in Bawlos la sii hayo, oo waxoogaa xorriyad ah la siiyo, oo saaxiibbadii inay u adeegaan laga joojinin. [24] Deedna dhawr maalmood dabadeed Feelikos ayaa yimid isagoy xaaskiisa Darusilla oo Yuhuudiyad ah la socoto oo wuxuu u cid dirsaday Bawlos, oo wuxuu ka dhagaystay rumaysadkiisa Ciise Masiix. [25] Oo markuu xaqnimada iyo iscelinta iyo xukunka imanaya kala hadlay Feelikos wuu cabsaday oo wuxuu ku yidhi, Hadda iska tag; oo markaan wakhti wanaagsan helo ayaan kuu yeedhi doonaa. [26] Wuxuuna rajaynayay inuu Bawlos isaga lacag siiyo, sidaas daraaddeed ayuu marar badan u soo cid diray oo isaga la hadlay. [27] Laakiin markay laba sannadood dhammaatay waxaa jagadii Feelikos qabtay Borkiyos Feestos; Feelikosna isagoo doonaya inuu Yuhuudda ka farxiyo ayuu Bawlos xabsiga ku daayay.

### Bawlos Oo Xukun Loo Hor Keenay Feestos

**25** Haddaba Feestos markuu soo galay gobolka, ayuu saddex maalmood dabadeed Kaysariya ka tagay oo wuxuu u kacay Quddus. [2] Deedna wadaaddadii sare iyo cuqaashii Yuhuudda ayaa eeddo Bawlos ka dhan u sheegay, waxayna ka codsadeen inuu u sama falo [3] Oo isaga Quddus u soo diro; iyagoo shirqool u diyaariyay siday jidka ugu dili lahaayen. [4] Habase ahaatee Feestos wuxuu ugu jawaabay inuu Bawlos Kaysariya ku xidhnaanayo oo isaga qudhiisu deg deg halkaas ugu noqonayo. [5] Oo wuxuu ku yidhi, kuwa miisaanka leh ee idinku jira aniga ha i raaceen, oo hadduu ninkaasu wax dembi ah galay iyagu ha dacweeyeen isaga.
[6] Oo markuu iyaga siddeed ama toban maalmood muddo aan ka badnayn la joogay, wuxuu

168 Masiixiyadda

tagay Kaysariya, deedna maalintii ku xigtay ayuu intuu kursigii guddoomiyaha ku fadhiistay
amar ku bixiyay in Bawlos la keeno. [7] Haddaba markuu yimid, Yuhuuddii Quddus ka timid ayaa
isku hareereeyay oo waxay keeneen eedo badan oo khatar ah oyna caddayn karin. [8] Bawlosna
markuu isdifaacayay wuxuu yidhi, Anigu innanaba shareecada Yuhuudda ama macbudka ama
Kaysar toona wax dembi ah kama galin. [9] Laakiin Feestos oo doonaya inuu Yuhuudda ka
farxiyo, ayaa Bawlos u jawaabay oo ku yidhi, Ma doonaysaa inaad Quddus tagto oon
dacwaddaada anigu halkaas ku qaado? [10] Deedna Bawlos wuxuu yidhi, Anigu waxaan hor
taaganahay maxakamddii Kaysar; waana in halkan laygu maxakamadeeyo. Sidaad ogtahayba
anigu Yuhuudda wax xumaan ah kuma samaynin. [11] Marka haddii aan xumaan falay oon wax
dhimasho lagu mutaysto galay geerida ma diidayo; laakiin waxyaabaha ay kuwanu igu
eedaynayaan haddayna run ahayn, ninna iyaga iima dhiibi karo. Waxaan racfaan u
qaadanayaa Kaysar. [12] Deedna Feestos, markuu golihii la tashaday, wuxuu ku jawaabay
Kaysar ayaad racfaan u qaadanaysaa; Kaysar ayaad u tagaysaa.

### Bawlos Oo Agribba Iyo Bernikee Hor Tagay

[13] Haddaba markay dhawr maalmood ka soo wareegtay waxaa Kaysariya yimid oo Feestos soo
salaamay boqor Agribba iyo Bernikee. [14] Oo markay maalmo badan halkaas joogeen ayuu
Feestos dacwaddii Bawlos boqorka hor dhigay, oo wuxuu ku yidhi, Waxaa jira nin uu Feelikos
jeelka kaga tagay; [15] Kaasoo markaan Quddus joogay ay wadaaddadii sare iyo odayaasha
Yuhuuddu dacwaddiisa ii keeneen iyagoo doonaya in isaga xukun dil ah lagu rido. [16] Oo
waxaan ugu jawaabay iyaga oon ku idhi Ma aha caadada reer Rooma in nin la xukumo intaan
eedaysanaha iyo kuwa soo eedeeyay layska hor keenin oon fursad uu eedda iskaga daafaco
isaga la siinin. [17] Haddaba markay halkan wada yimaaddeen, anigoon innaba sii daahin ayaan
maalintii ku xigtay intaan garsoorka fadhiistay amar ku bixiyay in ninka la keeno. [18] Laakiin
markay kuwii soo eedeeyay istaageen, wax eed ah oo eedahaan filayay ah oy keeneen ma
jirto; [19] laakiin waxaa jiray arrimo ay ka doodayeen oy isaga ku diidanayeen oo ku saabsanaa
diintooda iyo mid Ciise la odhan jiray oo dhintay, laakiin Bawlos leeyahay wuu noolyahay.
[20] Haddaba anigoo ka shakisan sidaan arrinta u hubin lahaa, waxaan isaga waydiiyay bal inuu
Quddus tago oo dacwaddiisa halkaas lagu qaado. [21] Laakiin markuu Bawlos racfaan qaatay in
xabsiga lagu sii hayo intuu imardhoorku go’aan ka gaadho, waxaan amar ku bixiyay in la sii
hayo ilaa iyo intaan isaga Kaysar u dirayo. [22] Marka Agribba wuxuu Feestos ku yidhi, Aniga
qudhaydu waxaan jeclaan lahaa inaan ninka maqlo. Markaasuu ku yidhi, Barri ayaad maqli
doontaa. [23] Marka maalintii ku xigtay Agribba iyo Bernikee waxay soo bandhigeen bandhig
wayn, oo hoolkii dhagaysiga ayay soo galeen, iyaga iyo saraakiil sare iyo wax garadkii
magaalada ugu miisanka cuslaa. Markaasaa Bawlos aramkii Feestos lagu keenay. [24] Deedna
Feestos wuxuu yidhi, Boqor Agribba iyo ragga kale oo halkan nala jooga oo dhanow, ninkan
aad aragtaan dad waynaha Yuhuudda oo dhan ee Quddus iyo halkanba ayaa iiga soo
dacwooday, iyagoo ku qaylinaya Inuu mar dambe sii noolaado ma aha. [25] Laakiin waxaan
ogaaday inuusan innaba wax dhimasho istaahila samaynin; oo isaga qudhiisu imbradoorka
ayuu racfaan u qaatay, sidaas daraaddeed waxaan go’aansaday inaan isaga diro. [26] Haddaba
anigu ma hayo wax xaqiiqa ah oo ninkan ku saabsan oon sayidkayga u qoro. Sidaas
daraaddeed ayaan isaga idiin hor keenay, gaar ahaan adiga hortaada, boqor Agribbow, si
markii la baadho ka dib aan u helo wax aan qoro. [27] Waayo, macquul ilama aha maxbuus aan
wixii lagu eedeeyay la caddaynin in la diro.

### Bawlos Oo Agribba Hortiisa Isku Difaacay

**26** Marka Agribba wuxuu Bawlos ku yidhi, Waa laguu fasaxay inaad naftaddaada u hadasho.
marka Bawlos ayaa gacantiisa taagay oo Ku jawaabay:
[2] Waxaa farxad ii ah maanta Boqor Agribbow, inaan hortaada eedaha Yuhuudda oo dhan
iskaga difaaco; [3] Gaar ahaan sababtoo ah adigu khibrad baad u leedahay caadooyinka iyo
doodaha Yuhuudda dhex yaalla oo dhan; sidaa darteed waxaan kaa baryayaa inaad si dulqaad
leh ii dhagaysto. [4] Hab nololeedkay aan ilaa iyo yaraantaydii ummaddayda Quddus kula soo
barbaaray way wada yaqaanaan. [5] Iyaga qudhoodu muddo dheer ayay i yaqaaneen oo hadday
doonaan way ka marag furi karaan sidaan ugu dhaqmi jiray dariiqada diintayada ugu xag jirsan
ee Farrisiga ah. [6] Haddaba waxaan hadda halkan u taaganahay oo laygu maxakamadaynayaa
rajada ballankii Eebbe u qaaday awowayaashayo. [7] Kaasoo ay laba iyo tobankayaga qabiilba
maalin iyo habeen Eebbe aad ugu adeegaan iyagoo rajaynaya in ay ballankaas helaan.
Haddaba boqorow, Yuhuuddu rajadaas ayay igu haystaan! [8] Maxaad wax aan dhici karin uga
dhigaysaan hadduu Eebbe kuwii dhintay soo sarakiciyo? [9] Runtii aniga qudhayduba waxaan u
malayn jiray inay waajib igu tahay inaan waxyaabo badan sameeyo si aan magaca Ciisaha
reer Naasared uga hor tago. [10] Oo taas ayaanan Quddus ka sameeyay; weliba waxaan xabsi u
taxaabay kuwo badan oo qudduusiin ah, anigoo wadaaddada sare amar ka haysta, oo markii
la dilayo waan ku raacsanaa. [11] Oo marar badan ayaan iyaga sunagogyada ku ciqaabay oon
ku qasbay inay gaalnimo ku hadlaan oo anigoo aad iyo aad ugu cadhaysan iyaga waxaan ku
ciqaabi jiray oon kaga daba tagi jiray xataa magaalooyinka ajanabiga.

### Bawlos Markhaatifurkiisa Ayuu Ka Sheekeeyay

[12] Oo markaan Dimishiq u kacay aniga oo amarkii wadaaddada sare wata boqorow,
[13] waxaan duhurnimadii intaan jidka marayay arkay iftiin samada ka baxaya oo qorraxda ka
iftiin badan oo aniga hareerahayga iyo kuwii ila socdayba ka iftiimaya. [14] Oo markannu
dhammaantayo dhulka ku wada dhacnay, ayaan maqlay cod afka Cibraaniga ku hadlaya oo
igu leh Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii ciqaabaysaa? Way kugu adagtahay inaad wax ku
mudaya haraatidid. [15] Markaasaan idhi, Yaad tahay Sayidow? Rabbigu wuxuu igu yidhi,
Waxaan ahay Ciisaha aad ciqaabayso. [16] Laakiin sarakac oo lugahaaga ku istaag; waayo,
sababtan aawadeed ayaan kuugu muuqday, si aad adeege iyo markhaatifure uga noqotid
waxyaabaha aad aragtay iyo waxyaabaha aan kuugu muuqan doono; [17] Aniga oo kaa
badbaadin doona dadkaaga iyo shisheeyahaba, [18] Si aad indhahooda u furtid ood uga jeedisid
gudcurka ood iftiinka ugu jeedisid iyo si aad uga jeedisid xoogga Shaydaanka ood Eebbe ugu
soo jeedisid, oo deedna loogu dembi dhaafo oy kuwa qudduusiinta lagaga dhigay rumaysadka
magacayga wax ula dhaxlaan.

### Bawlos Wuxuu U Marag Furay Yuhuudda Iyo Ajinabigaba

[19] Sidaas daraaddeed, boqor Agribbow, kumaanan caasiyin riyadii samada ka timid; [20] Laakiin
waxaan markiiba u sheegay reer Dimishiq iyo reer Quddus iyo dalka Yahuudiya oo dhan iyo
weliba dadka aan Yuhuudda ahayn, si ay u toobadkeenaan oy Eebbe ugu soo noqdaan oy
camal toobadda istaahila u sameeyaan. [21] Sababtaas aawadeed ayay Yuhuuddu macbudka
gudihiisa iigu qabteen oo waxay isku dayeen inay i dilaan. [22] Haddaba Eebbe ayaan ilaa iyo
maanta i caawiyay oo waxaan halkan u taaganahay inaan u marag furo oon yar iyo waynba u
sheego, anigoon innaba wax kale sheegaynin waxay nebiyadii iyo Muuse sii sheegeen inay

dhici doonaan mooyee; 23 Taasoo ah inuu Masiixu xanuunsan doono, isagoo ah ka ugu
horreeya ee kuwii dhintay ka soo sarakacaya ee iftiinka ugu yeedhi doona dadkayaga iyo
ajinabigaba. 24 Haddaba markuu isagoo is difaacayay sidaa u hadlay, Feestos ayaa kor u
dhawaaqay oo yidhi, Bawlosow, waad waalan tahay! Aqoontaada badan ayaa ku waashay.
25 Laakiin Bawlos wuxuu yidhi, Feestoskii sharafta lahaayow, anigu ma waalli, laakiin waxaan
ku hadlayaa erayo run iyo caqli gal ah. 26 Waayo, boqorku waxan wuu ogyahay, waxaanan
rumaysanahay inayna waxyaabahan midkoodna isaga ka qarsoonayn; waayo, waxyaabahan
koone qarsoodi ah laguma samaynin. 27 Boqor Agribbow, nebiyadii ma rumaysantahay? Waan
ogahay inaad rumaysantahay. 28 Deedna Agribba wuxuu Bawlos ku yidhi, Ma muddo yar baad
igu qancinaysaa inaan Masiixi noqdo. 29 Marka Bawlos wuxuu yidhi, Muddo yar iyo muddo
dheerba waxaan Eebbe ka rajaynayaa adigoo keliya ma ahee dhammaan inta maanta i
maqlaysa oo dhan inay sidayda oo kale wada noqdaan silsiladahan mooyee. 30 Marka boqorkii
iyo taliyihii iyo Bernikee iyo kuwii la fadhiyay oo dhan way kaceen; 31 Oo markay sii baxayeen
waxay isku yidhaahdeen Ninkanu innaba wax dhimasho iyo silsilad toona istaahila ma
samaynin. 32 Deedna Agribba wuxuu Feestos ku yidhi, Ninkanu hadduusan Kaysar racfaan u
qaadanin waa la sii dayn kari lahaa.

### Bawlos Wuxuu U Dhoofay Rooma

**27** Haddaba markii la go'aansaday inaannu Talyaaniga u dhoofo Bawlos iyo dhawr maxbuus
oo kale waxaa loo dhiibay sarkaal magiciisa Yulyos la odhan jiray oo ciidanka boqorka ka
tirsan. 2 Marka waxaannu fuulnay markab Adramuteyon ka yimid oo u xeebta Aasiya ku
socday, oo markannu baxnay waxaa na sii raacay nin Aristarkhos la odhan jiray oo reer
Makedoniya ah oo Tesaloniika ka yimid. 3 Haddaba maalintii ku xigtay waxaannu nimid Siidoon;
markaasuu Yulyos si fiican Bawlos ula dhaqmay oo wuxuu u fasaxay inuu saaxiibbadiis u tago
oo uu kaalmo ka helo. 4 Deedna halkaasaannu ka sii baxnay, oo Qubrus ayaannu hoosta ka
marnay, maxaa yeelay, dabaysha ayaa naga hor timid. 5 Oo markaannu bad waynta sii marnay
oonnu Kilikiya iyo Bamfuliya dhinac ka marnay, waxaannu nimid Mura oo Lukiya ku taallay.
6 Oo sarkaalkii wuxuu halkaas ka helay markab Iskanderiya ka yimid oo Talyaaniga ku socda,
oo wuu na saaray. 7 Deedna markaannu dhawr maalmood aayar soconay, waxaannu si dhib
leh ugu soo dhawaannay Kinidos, oo dabaysha ayaa noo diiday inaannu horay ugu sii
soconno, marka waxasaannu xagga hoose ka marnay Kereetee oo Salmoonee ku toosan. 8 Oo
markaannu si dhib leh ku dhaafnay, waxaannu nimid meel magaceeda la yidhaahdo dekadaha
Wanaagsan oo Lasaya u dhaw. 9 Oo markuu wakhti badan tagay safarkii halis ayuu noqday,
waayo xataa xilligii Soonka waa la dhaafay, marka Bawlos ayaa iyaga waaniyay, 10 Oo wuxuu
ku yidhi, Nimanyahow, waxay ila tahay inuu safarku halis iyo khasaaro badan keenayo oo
markabka shixnadda saaran iska daaye lafeheenna khatar ku yahay. 11 Laakiin taliyihii taladii
kabtanka iyo ninkii markabka lahaa ayuu ka door biday hadalkii Bawlos. 12 Dekadduna ma
ahayn mid ku wanaagsan in wakhtiga qabowga la joogo, sidaas daraaddeed ayay dadkii
intooda badan waxay ku taliyeen in halkaas laga boxo oo Foynikis la tago, taasoo ahay dakad
Kereetee ku taalla oo woqooyi bari iyo koonfur bari u jeedda, oo wakhtiga qabowga halkaas
lagu dhammaysto.

## Duufaan Ayaa Badda Kacay

[13] Oo markay dabayshii koonfureed si dabaxsan u dhacday waxay u maleeyeen inay u
jeedadoodii gaadheen, oo intay barroosinkii qaateen, waxay ag mareen Kereetee. [14] Laakiin
muddo yar ka dib waxaa kacday duufaan wayn oo magaceeda la yidhaahdo Yurokludoon;
[15] Oo markay markabkii qabsatay oo uu dabaysha, wejiga siin waayay waannu is dhiibnay, oo
way na kaxaysatay. [16] Oo waxaannu ku orodnay jasiirad yar oo Kalawda la yidhaahdo oonnu
gabaad ka dhigannay, oo si dhib leh ayaannu ku awoodnay inaannu huurigii ku badbaadino;
[17] Haddaba intay xagga sare ee markabka kor u soo qaadeen ayay xadhko ku xidh xidheen oy
ku adkeeyeen, oo markay ka cabsadeen inay Surtis oo bacaad ah ku dagaan, waxay dejiyeen
shiraacii oo sidaasaa loo kaxaystay. [18] Oo markay duufaantii aad u sii xoogaysatay, maalintii ku
xigtay shixnaddii ayay badda ku tuureen. [19] Maalintii saddexaadna waxay gacmahooda ku
tuureen alaabtii markabka. [20] Deedna markaannu maalmo badan qorraxdii iyo xiddigihiiba arki
waynay oy duufaantii nagu dhacaysay badbaado waannu ka rajo beelnay. [21] Haddaba markay
in badan cunto la’aan ku jireen Bawlos ayaa is-dhex taagay, oo wuxuu ku yidhi, Nimanyahow,
waxay ahayd inaad i maqashaan oo aydaan Kereetee ka soo bixin oo waxyeelladan iyo
khasaarahan toona uusan idin ku dhicin. [22] Marka hadda waxaan idinku waaninayaa inaad
kalsooni yeelataan; waayo, midkiinna naftiisa ma waayayo, laakiin markabka oo kaliya ayaa
burburaya. [23] Waayo, xalay Eebbaha aan u adeego malagiisa ayaa isoo ag istaagay oo igu
yidhi, [24] Bawlosow, ha cabsanin; waayo, waa inaad Kaysar hor istaagto; oo weliba bal eeg,
Eebbe wuxuu adiga ku wada siiyay kuwa kula socda oo dhan. [25] Haddaba, nimanyahow,
kalsoonaada, waayo, anigu Eebbe ayaan rumaysanahay oo sidii la ii sheegay ayay wax u dhici
doonaan. [26] Hasa yeeshee waa inaynu jasiirad helno. [27] Laakiin markii habeenkii afar iyo
tobnaad la gaadhay sidaannu badda Adriyaatiga kor iyo hoos isaga daalaa dhacaynnay, ayay
naakhuudayaashii waxay u maleeyeen inay dhul ku soo dhawaadeen; [28] Oo markay moolkii
badda qiyaaseen waxay ogaadeen inuu labaatan baac yahay, oo haddana markay in yar
socdeen ayay qiyaas kale ka qaadeen, oo waxay ogaadeen inuu shan iyo toban baac yahay.
[29] Oo markay ka cabsadeen inaannu meelo dhagaxaan leh ku dhacno, ayay markabka xaggiisa
dambe ka tuureen afar barroosin, oo waxay aad u jeclaysteen inuu waagu baryo. [30] Deedna
bad maaxyadii waxay damceen inay markabka ka baxsadaan, oo sidii iyagoo barroosin xagga
dambe ka tooraya ayay huudhigii xagga dambe ka dejiyeen.

[31] Marka Bawlos ayaa taliyihii iyo askartii ku yidhi, Haddayna kuwanu markabka sii joogin ma
badbaadi doontaan. [32] Markaasay askartii intay huuriga xadhkaha u jareen iska daayeen si uu
u dhaco. [33] Oo markuu waa barigii soo dhawaaday Bawlos ayaa dadkii oo dhan ku waaniyay
inay wax cunaan, oo wuxuu yidhi, Maanta waa maalintii afar iyo tobnaad intaad sugayseen ood
soomanaydeen, oydaan waxba cunin. [34] Haddaba waxaan idinku waaninayaa inaad wax
cuntaan, caafimaadkiinna aawadeed; maxaa yeelay, midkiinna hal tin ahu madaxiisa kama
dhacayo. [35] Oo markuu saas yidhi, ayuu intuu furin soo qaatay oo uu dadkoo dhan hortooda
Eebbe ugu mahadnaqay kala jebiyay oo billaabay inuu wax cuno. [36] Markaasay
dhammaantood kalsooni heleen oo wax cuneen. [37] Oo dhammaantayo inta markabka ku jirtay
waxaannu ahayn laba boqol iyo lix iyo toddobaatan qof. [38] Deedna markay cunto ka dhergeen,
ayay markabkii fududeeyeen oy sarreenkii badda ku tuureen.

## Burburkii Markabka

[39] Haddaba markuu waagu baryay dhulkii ayay garan waayeen; laakiin waxay arkeen dhul yar
oo xeeb leh, oo waxay damceen hadday suurta gasho inay markabka halkaas u kaxeeyaan.
[40] Markaasay barroosinnadii badda ku tuureen oo badda ku sii daayeen, oo isla markaasba
waxay fureen xadhkihii shukaanka ku xidhnaa, oo intay shiraaca dabaysha u sii daayeen, ayay
xeebta ku toosiyeen. [41] Laakiin wuxuu ku dhacay meel bacaad ah oy laba biyood iskaga
darmadaan, deedna markabkii dhulka ayuu ku dhacay; oo xagga horay ayuu meel afka la
galay oo wuu dhaqdhaqi kari waayay, dhankii dambana xooggii mawjadaha ayaa burburiyay.
[42] Marka askartii waxay ku taliyeen inay maxaabiista laayaan, si uusan midkoodna intuu
dabaasho u baxsanin. [43] Laakiin taliyihii oo inuu Bawlos badbaadiyo doonayay ayaa ka
joogsaday; oo wuxuu amar ku bixiyay inay kuwa dabaalan kara markabka ka boodaan oy
marka hore dhulka tagaan; [44] Deedna kuwa soo hadhay qaarna ay looxaanta ku dabaashaan,
qaarna alwaaxda jejebka markabka. Oo sidaasay dhammaantood dhulka u wada tageen
iyagoo nabad qaba.

## Bawlos Oo Maalta Jooga

**28** Haddaba markaannu wada badbaadnay ka dib waxaannu ogaannay in jasiiraddaas Maalta
la dhoho. [2] Marka Dadkeedii asalka ahaa waxay noo muujiyeen naxariis gaar ah; waayo, intay
dab shideen ayay dhammaantayo si wanaagsan noo soo dhaweeyeen, sababtoo ah roob ayaa
da'ayay oo qabow ayaa jiray. [3] Deedna Bawlos ayaa intuu xaabo badan soo guray dabka ku
shiday, oo waxaa kulaylkii soo baxay jilbis oo gacantiisa ayuu iskaga doobay.

[4] Haddaba dadkii jaziiraddu markay arkeen maska gacantiisa ka laalaada waxay isku
yidhaahdeen Shakila'aan ninkanu waa nin dhagar qabe ah, waayo, in kastoo uu isagoo bad
qaba baddii ka soo baxay, haddana caddaaladdu uma oggolaanin inuu sii noolaado. [5] Marka
isagoo ayna waxyeello gaadhin ayuu maskii dabka iskaga tuuray. [6] Hase ahaatee iyagu waxay
filayeen inuu markiiba bararo ama uu markiiba isagoo meyd ah dhoco; laakiin markay in badan
sugeen oy arkeen inaysan wax dhib ah gaadhin ayay fikirkdoodii beddeleen oo waxay isku
yidhaahdeen, Isagu waaba Eebbe. [7] Haddaba waxaa meeshaas ku dhawaa dhul uu leeyahay
hoggaamiyaha jaziiradda madaxda u ahaa oo magiciisa la odhan jiray Bobliyos. Kaasuna wuu
na soo dhaweeyay oo saddex maalmood ayuu si sharaf leh noo marti qaaday. [8] Marka
Bobliyos aabbihii ayaa qandho iyo shuban la jiifay. Marka Bawlos ayaa isaga u galay oo intuu
gacmihiisa saaray u duceeyay oo bogsiiyay isaga. [9] Deedna markay taasu dhacday ayay kuwii
kale ee bukay ee jaziiraddda joogay oo dhan wada yimaaddeen oo iyagana waa la bogsiiyay;
[10] Markaasay aad noo sharfeen oo markaannu tagaynay wax alla wixii aannu u baahnayn ayay
dusha noo saareen.

## Bawlos Oo Rooma Gaadhay

[11] Marka Saddex bilood dabadeed waxaannu fuulnay markab Iskanderiya ka yimid oo xilliga
qabowga jaziiradda joogay kaasoo sumaddiisu ahayd ilaahyada Mataanaha aha. [12] Oo
Surakus ayaannu nimid oo saddex maalmood ayaannu halkaas joognay. [13] Deedna markaannu
halkaas ka wareegnay waxaannu gaadhnay Regiyon; oo maalin dabadeed waxaa kacday
dabayl koonfureed, oo maalintii labaadna waxaannu nimid Botiyolos. [14] Halkaasna waxaannu
ka helnay walaalo oo waxay naga baryeen inaannu toddoba maalmood iyaga la joogno oo

sidaas ayaannu Rooma ku nimid. [15] Deedna walaalihii halkaa joogay markay warkayaga maqleen, ayay soo baxeen oy naga hor yimaaddaan oo waxay soo gaadheen tan iyo Suuqa Abbiyus iyo Saddexdii Makhaayadood. Bawlosna markuu iyaga arkay Eebbe ayuu ku mahadnaqay oo kalsooni ayuu yeeshay. [16] Oo markaannu Rooma galnay Bawlos waxaa loo oggolaaday inuu keligii ahaado isaga iyo askarigii ilaaladiisa ahaa.

### Bawlos Oo Rooma Jooga

[17] Haddaba saddex maalmood ka dib Bawlos wuxuu isugu wada yeedhay madax
dhaqameedkii Yuhuudda; oo markay u yimaaddeen, wuxuu ku yidhi, iyaga Walaallayaal, in
kastoona anigu wax xumaan ah ku samaynin dadka ama dhaqankii awowayaasheen toona,
haddana anigoo maxbuus ah ayaa Quddus layga keenay oo Rooma ayaa gacanta la ii galiyay.
[18] Iyaguna, markay i baadheen, waxay damceen inay iska kay sii daayaan, maxaa yeelay,
sabab aan dhimasho ku mutaysto ma jirin. [19] Laakiin markay Yuhuuddu taas diideen waxaa
qasab igu noqtay inaan Kaysar racfaan u qaato; taasuna ma aha inaan ummaddayda ka
dacwoonayo. [20] Sababtaas daraaddeed ayaanan idiinku yeedhay si aan idiin arko oon idiinla
hadlo; maxaa yeelay, rajaday reer banii Israa'iil sugayaan aawadeed ayaan silsiladdan ugu
xidhnahay. [21] Marka iyaguna waxay isaga ku yidhaahdeen Annagu wax warqad ah oo adiga
kugu saabsan Yahuudiya kama haynno, mana jiro walaal xaggaa ka yimid oo wax xun kaa soo
sheegay ama ka hadlay. [22] Laakiin waxaannu jecelnahay inaannu waxay kula tahay kaa
maqallo; maxaa yeelay, waxaannu ognahay in dariiqadan diidmadeeda meel kasta lagu hadal
hayo. [23] Deedna intay maalin la ballameen, ayay iyagoo fara badan hoygiisa ugu yimaaddeen,
isaguna subaxnimadii ilaa iyo galabnimadii ayuu iyaga la hadlayay isagoo u marag furaya
boqortooyada Eebbe oo ku qancinaya iyaga Ciise isagoo adeegsanaya shareecada Muuse iyo
nebiyadiiba.[169*] [24] Marka qaarkood ayaa waxyaabuhuu ku hadlay rumeeyay, qaarna way
diideen. [25] Deedna Markay iyagoo kala qaybsan ka tageen, Bawlos ayaa hal eray yidhi, Ruuxa
Qudduuska ahu si fiican ayuu uga dhex hadlay Nebi Ishaacyah markuu awowayaashiin la
hadlay, [26] Oo ku yidhi, Adigu dadkan u tag, oo waxaad ku tidhaahdaa, Maqal ahaan waad
maqli doontaan, mana fahmi doontaan; oo aragti ahaan waad arki doontaan mana garan
doontaan; [27] Waayo dadkan qalbigoodu wuu qallafay, Oo si dhib leh ayay dhegaha wax ugaga
maqlaan, Indhahoodana way isku qabteen; Si ayna indhaha wax ugu arkin, Oyna dhegaha wax
ugu maqlin, oyna qalbiga wax uga fahmin, oo ayna u soo noqonin, oo aanan u bogsiinin.
[28] Haddaba waxaad ogaataan idinku in badbaadadan Eebbe dadka aan Yuhuudda ahayn loo
soo diray: wayna dhagaysan doonaan iyagu. [29] Oo markuu erayadaas yidhi, Yuhuuddii way
iskaga tageen iyagoo isla murmaya. [30] Haddaba laba sanno ayuu guri uu kiraystay iska
degganaa, oo qof kasta oo soo booqday uu ku soo dhawayn jiray. [31] Oo isagoo aad isugu
kalsoon ayuu boqortooyada Eebbe ku wacdiyi jiray, oo wax Sayid Ciise Masiix ku saabsan si
geesinimo leh u bari jiray.

169 Waxyigii nebiyada ama kutubtii nebiyada.

# WARQADDII RASUUL BAWLOS U QeORAY DADKII REER ROOMA

## Salaan

**1** Ka Socota Bawlos oo ah adeegihii Ciise Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo
gooni looga dhigay Injiilka Eebbe. [2] Kaasoo uu Eebbe mar hore nebiyadiisa ku ballanqaaday
sida kutubtiisa qudduuska ah ku xusan, [3] Oo ku saabsan Wiilkiisa, kaasoo ka soo jeeda
farcankii Daa'uud xagga jidhka, [4] Oo la caddeeyay inuu xagga ruuxa qudduusnaanta ka yahay
Wiilkii Eebbe oo xoog leh, ka sarakiciddii uu dhimashada ka sarakacay, kaasoo ah
Rabbigeenna Ciise Masiix, [5] kaasoo aannu ka helnay nimco iyo rasuulnimo, si aannu
addeecidda rumaysadka magiciisa ummadaha oo dhan u gaadhsiino. [6] Idinkuna kuwaas ayaad
ka mid tihiin loogu yeedhay inay kuwii Ciise Masiix yihiin. [7] Waxaan warqaddan u qorayaa
dhammaan kuwa Rooma jooga ee Eebbe jeclaaday ee awliyada loogu yeedhay. Nimco ha
idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbeheen ah iyo Sayid Ciise Masiix.

## Bawlos Wuxuu Ku Taamayay Inuu Rooma Tago

[8] Marka hore dhammaantiin ayaan xagga Ciise Masiix Eebbe ugu mahadnaqayaa, maxaa
yeelay, rumaysadkiinna dunida oo dhan ayaa laga hadal hayaa. [9] Waayo, Eebbaha aan
ruuxayga ugu adeego Injiilka Wiilkiisa, ayaa markhaati iiga ah sidaan maalin walbaba si aan
kala joogsi lahayn ducadayda idiinku xusuusto, [10] Anigoo ku ducaysanayaa inaan hadda ugu
dambaysta si kastaba Eebbe idankiisa idiin imaaddo. [11] Waayo, aad baan u doonayaa inaan
idin arko, oon hadiyad Ruuxa ka timaada idin siiyo si aad u xoogaysataan; [12] Taasoo ah inaan
idinku dhiirri galino rumaysadkiinna iyo kaygaba. [13] Ma doonayo Walaallayaal, inaad garan
waydaan inaan marar badan damcay inaan idiin imaaddo, (laakiinse ma dhicin) si aan idinkana
dhexdiinna midho ugu lahaado sida ummadaha kale. [14] Waxaa waajib igu ah inaan wacdiyo
Giriigga iyo Barbariyiinta iyo kuwa caqliga leh iyo kuwaan garaadka lahaynba. [15] Sidaa
daraaddeed anigu diyaar baan u ahay inaan kuwiinna Rooma joogana Injiilka ku wacdiyo.

## Xoogga Injiilka

[16] Waayo, anigu Injiilka kama xishoodo, maxaa yeelay, waa xooggii Eebbe ee badbaadada ku
alla kii rumaysta, marka hore Yuhuudda ka dibna Giriigga. [17] Waayo, waxaa lagu dhex
muujiyay[170*] xaqnimada Eebbe ee rumaysad ka timaadda rumaysadna ku socota, sida qoran.
Kii xaq ahu rumaysad buu ku noolaan doonaa.

## Sharka Banii Aadanka

[18] Cadhadii Eebbe ee xaqdarrida dadka oo dhan iyo kuwa aan Alle ka cabsanin ayaa samada
laga muujiyay, kuwaasoo xadgudubkooda runta ku hor istaaga; [19] Maxaa yeelay, wax Eebbe
lagu garto way u muuqataa iyaga, sababtoo ah, Eebbe wuu u muujiyay iyaga. [20] Maxaa yeelay,
sifooyinkiisa qarsoon ee muujinaya awooddiis daa'imka ah iyo dabeecaddiisa Eebbenimo tan
iyo markii dunida la uumay si cad ayaa loo ogaan karaa, sidaa darteed iyagu wax ay ku
marmarsoodaan ma jiro. [21] Maxaa yeelay, in kastoo ay Eebbe garanayaan haddana isaga

170 Waa Injiilkee

Eebbenimadiisa kuma ammaanaan, oo uma mahad celiyaa, laakiin garaadkoodii ayaa
kharibmay, quluubtoodii garashada la'aydna way madoobaatay. [22] Iyagoo kuwo caqli leh isku
sheegaya ayay nacasoobeen. [23] Ammaantii Eebbaha aan dhimanin waxay u badaleen sanam
banii aadan dhimanaya iyo haad iyo xayawaan iyo waxa bogga ku gurguurta u eg. [24] Sidaas
aawadeed damaca xun ee quluubtooda ayuu Eebbe u daayay, si ay jidhkooda faasiqnimo iyo
wasakhnimo dhexdooda ugu sharaf tiraan, [25] Maxaa yeelay, runtii Eebbe bay been ku
bedesheen, makhluuqa ayayna caabudeen oy u adeegeen halkay khaaliqa uga adeegi
lahaayeen, kaasoo ammaanta leh waligii! aamiin. [26] Saas daraaddeed Eebbe wuxuu u daayay
damacyo ceeb ah; waayo, dumarkoodu isticmaalkii loo abuuray waxay ku beddeleen mid ka
hor jeeda kii loo abuuray. [27] Sidoo kale raggii intay iska daayeen isticmaalkii dumarka ayay
iyagoo damacoodu gubayo isu hammoodeen, rag waxay rag kale ku sameeyeen ceeb, oo
waxay dhexdooda ka heleen abaal gudkii xadgudubkooda waajibka ku ahaa.[171*] [28] Oo markay
diideen inay aqoonta Eebbe ku dhaganaadaan, Eebbe wuxuu u daayay garaad khariban, si ay
waxyaabo aan hagaagsanayn u sameeyaan, [29] Iyagoo ay ka buuxdo xaqdarro iyo shar iyo
damac iyo xumaan oo dhan, waxaa kaloo ay ka buuxaan hinaase iyo shar iyo af xumo iyo
khiyaano iyo edab xumaan, oo waa kuwo wax xanta, [30] Oo cay badan oo Eebbe neceb oo af
lagaaddo badan oo kibir badan oo faan badan oo shar ku fikira oo waalidkood caasiya, [31] Oo
nacasiin ah oo ballanta ka baxa oon jecayl lahayn oo naxariis daran. [32] Iyagoo og sharciga
Eebbe in kuwa waxyaabahaa sameeyaa ay dhimasho istaahilaan, ayay waxyaabahaa
samayntooda oo keliya iska daaye, weliba u bogaan kuwa sameeya.

## Xukunka Ebbe Ee Caaddilka Ah

**2** Sidaas daraaddeed, ninyahow, marmarsiinyo ma lihid, mid kasta ood tahayba kaaga wax
xukumaya. maxaa yeelay markaad mid kale xukunto adigaa is xukumaya, waayo, kaaga wax
eedaynayow waxaad samaysaa isla wixii. [2] Laakiin waxaannu ognahay in xukunka Eebbe ku
dhacayo kuwa waxyaabaha caynkaas ah sameeya, sida runta ah. [3] Ninyahow, ma waxay kula
tahay, markaad kuwa waxyaabaha caynkaas ah sameeya aad eedayso ood isla wixii
sameeyso, inaad xukunka Eebbe ka baxsan doonto? [4] Mise waxaad quudhsanaysaa
wanaaggiisa hodanka ah iyo samirkiisa iyo dulqaadkiisa? Miyaadan ogayn in wanaagga Eebbe
kuu kaxeeyo xagga toobadda? [5] Laakiin madax adayggaa iyo toobadkeenid la'aanta
qalbigaaga aawadeed waxaad cadho u kaydsataa maalinta cadhada ee xukunke Eebbe ee
xaqa ah la muujin doono, [6] kaasoo qof kasta siduu camalkiisu ahaa ku abaal marin doona,
[7] kuwa si dulqaad leh camal wanaagsan ku raadiya ammaan iyo sharaf iyo waaritaan, wuxuu
siin doonaa nolosha weligeed ah, [8] Laakiin kuwa danaystayaasha ah oo aan runta addeecin,
laakiinse xaqdarrida addeeca, waxaa u dambaysa cadho iyo ciil, [9] Oo dhibaato iyo cidhiidhi
ayaa u dambeeya qof kasta oo dadka sharka sameeya ah, marka hore Yuhuudda, ka dibna
Giriigga. [10] Laakiin ammaan iyo sharaf iyo nabad baa u dambeeya mid kasta oo wanaag
sameeya, marka hore Yuhuudda, ka dibna Giriigga; [11] Maxaa yeelay, Eebbe dadka uma kala
eexdo. [12] Maxaa yeelay In alla intii sharci la'aan dembaabtay, sharci la'aan bay halaagmi
doonaan, oo in alla intii sharciga hoostiisa ku dembaabtay, sharcigaa lagu xukumi doonaa;
[13] Waayo, kuwa sharciga maqlaa ma aha kuwa Eebbe hortiis xaq ku ah, laakiinse kuwa
sharciga adeeca xaq ayaa laga dhigi doonaa. [14] Marka dadka aan Yuhuudda ahayn ee aan

171 Waa waxa maanta caanka ka noqday dunida, gaar ahaan reer Galbeedka ee afka Ingiriisiga lagu yidhaaho Homosexuality and lesbianism oo ah nimanka nimanka u galmooda iyo dumarka dumarka u galmooda

shareeco lahayn ay si dabiici ah wuxuu sharcigu farayo u sameeyaan, iyaga ayaa sharci isu
ah. 15 Taasoo muujinaysa inay ujeeddada shareecadu quluubtooda ku qorantahay, iyagoo uu
damiirkoodu u markhaatifurayo, oo fikirkoodu ashtakaynayo ama cudur daar u samaynayo,
16 Maalinta uu Eebbe siraha dadka u qarsoon ku xukumi doono Ciise Masiix sida Injiilkaygu
leeyahay. 17 Laakiin haddaad adigu Yuhuudi isku sheegto ood sharciga isku hallayso ood
Eebbe ku faanto, 18 Oo aad doonistiisa ogtahay ood u bogto waxyaabaha aadka u fiican,
adigoo sharciga lagugu tarbiyeeyay, 19 Oo aad aaminsantahay inaad tahay ka kuwa indhaha la'
haga ee nuurka u ah kuwa gudcurka ku jira, 20 Oo aad tahay ka nacasyada toosiya iyo
macallinka carruurta, adigoo shareecada ku leh muuqaalka aqoonta iyo xaqa, 21 haddaba
kaaga ka kale wax barayow, sow wax isma bartid? Kaaga dadka ku wacdiya inayna Wax
xadin, ma adigaa wax xadaya? 22 Kaaga odhanaya, Yaan la sinaysan, ma adigaa
sinaysanaya? Kaaga sanamyada necebow, ma adigaa macbudka dhacaya? 23 Kaaga
shareecada ku faanow, ma adigaa Eebbe ku sharaf tiraya shareecada jabinteeda?
24 Waayo, magaca Eebbe ayaa ummadaha dhexdooda lau caayaa idinka daraaddiin, sida
qoran. 25 Waayo, hubaal gudniinku faa'iiduu leeyahay, haddaad shareecada ku dhaqanto,
laakiin haddaad shareecada iska baal marto gudniinkaagu waa buurya qabnimo. 26 Marka
hadduu mid buurya qab ahu sharciga ku camalfalo, buurya qabnimadiisa miyaan gudniin lagu
tirinaynin? 27 Oo ka jinsiyaddiisu buurya qab tahay, hadduu sharciga ku dhaqmo, miyuusan ku
xukumaynin kaaga sharciga ku xadgudbayow in kastood kitaabka haysato ood gudantahay?
28 Waayo, ka dadka sida Yuhuudda ugu muuqdaa, Yuhuudi ma aha; gudniinka jidhka ka
muuqdana, gudniin ma aha, 29 Laakiin waxaa Yuhuudi ah ka gudaha Yuhuudi ka ah;
gudniinkuna waa kan qalbiga ee ku jira ruuxa ee aan ku qornayn kitaabka, kaas ammaantiisu
kama timaado dadka, balse waxay ka timaaddaa Eebbe.

### Murammadii Laga Jawaabay

3 Haddaba maxay Yuhuuddu faa'iido leeyihiin? Ama faa'iidada gudniinku leeyahay maxay
tahay? 2 Si walba way u badanyihiin.[172*] marka hore Yuhuudda waxaa lagu aaminay waxyiga
Eebbe. 3 Haddaba, maxaa jira, haddayna qaar rumaysad lahayn? Rumaysad la'aantoodu
miyay aaminimada Eebbe wax u dhimaysaa? 4 Ma dhici karto! Eebbe runlow ha ahaado banii
aadankuna beenlow ha ahaado, sida qoran Xaq ku noqo hadalladaada, Oo badbaad marka
lagu xukumo. 5 Laakiin haddii xaqdarrideennu muujiso xaqnimada Eebbe, maxaynu odhan
doonnaa? Miyuu xaqdarrinyahay Eebbaha cadhada soo dejiyaa? (Sida dadkaan u hadlayaa.)
6 Ma dhici karto! Hadduu xaqdarrinyahay, siduu Eebbe dunida u xukumi doonaa? 7 Marka
Hadday beentayda aawadeed runta Eebbe ammaantiisa badiso, marka maxaa aniga haddana
weli la iigu xukumaa sida dembiilaha? 8 Haddaba maynu shar samayno si wanaagu u
yimaado? sida nalagu been abuurtay ee ay qaar naga sheegaan inaannu nidhaahno. Xukunka
ay kuwaasu helaan waa caaddil.

### Dadku Way Wada Dembaabeen

9 Waa sidee haddaba? Miyaynu ka fadli badan nahay dadka kale? Maya, sinaba. Waayo,
horaannu u dacwaynay Yuhuudda iyo Giriigtaba inay kulligood wada dambaabeen. 10 Sida
qoran, Mid xaq ahu ma jiro, midnaba;

172 Waa Yuhuudnimada iyo gudniinkee

[11] Mid wax garanayana ma jiro;
Mid Eebbe doonayana ma jiro;
[12] Dhammaantood gees bay u wada leexdeen oo waxay wada noqdeen wax aan faa'iido lahayn;
Mid wanaag falaa ma jiro, midnaba

[13] Dhuuntoodu waa xabaal furan; Carrabkoodana wax bay ku khiyaanaan; dibnahoodana
waxaa ku hoos jira sun jilbis; [14] Afkoodana waxaa ka buuxa habaar iyo khadhaadh,
[15] Cagahoodu waxay u deg degaan inay dhiig daadiyaan, [16] Jidadkoodana waxaa yaalla hoog
iyo ba', [17] Jidka nabadda ma yaqaanaan, [18] Cabsida Eebbena indhahooda ma hor taallo.
[19] Waxaannu ognahay in wax alla wixii uu sharcigu yidhaahdo uu khuseeyo kuwa sharciga ku
hoos jira, si af kasta loo xidho oo dunida oo dhan ay Eebbe hortiisa mas'uul ugu noqoto.
[20] Maxaa yeelay, sharciga ku dhaqankiisa ninna Eebbe hortiisa xaq kuma noqdo, waayo,
sharciga ayaa lagu gartaa dembiga. Xaqnimadana Waxaa Lagu Helaa Rumaysadka Ciise
Masiix [21] Laakiin hadda sharciga la'aantiisa ayaa xaqnimadii Eebbe la muujiyay, waxaana u
marag furay sharciga iyo nebiyadii, [22] Waaana xaqnimada Eebbe ee lagu helo rumaysadka
Ciise Masiix in alla inta rumaysata oo dhan, waayo, wax farqi ah ma laha. [23] Maxaa yeelay,
dhammaan way wada dembaabeen oo way gaadhi waayeen ammaanta Eebbe, [24] Iyagoo
hadiyad ahaan xaq lagaga dhigay nimcadiisa madaxa furashada ah oo Ciise Masiix lagu furtay,
[25] kaasoo Eebbe u soo bixiyay inuu dhiiggiisu kafaaragud u noqdo rumaysadka la rumaystay
dhiiggiisa aawadeed, si uu xaqnimadiisa ugu muujiyo dembi dhaafka uu dembiyadii hore loo
sameeyay ku dhaafay dulqaadkii Eebbe, [26] Waana muujinta xaqnimadiisa ee hadda joogta si
uu isaga qudhiisu xaq u ahaado oo uu xaq uga dhigo kii Ciise rumaya. [27] Haddaba maxaa lagu
faanaa? Ma jiro. Sharci caynkee ah ayuu ku hadhay? Ma cibaadaysibaa? Maya; laakiinse
wuxuu ku hadhay sharciga rumaysadka. [28] Sidaas daraaddeed waxaannu aaminsannahay inuu
qofku xaq ku noqdo rumaysadka oo uusan xaq ku noqonin ku dhaqanka sharciga. [29] Ama
Eebbe ma Eebbaha Yuhuudda oo keliyaa? Miyuusan ahayn Eebbaha kuwa aan Yuhuudda
ahayna? Haah, wuu yahay ka ummadaha kalena, [30] haddaba maadaa oo uu Eebbe mid keliya
yahay, kuwa gudan wuxuu xaq kaga dhigi doono rumaysadka, kuwa buurya qabka ahna
rumaysadka. [31] Marka sharciga ma rumaysad baynu ku burinaynaa? Ma dhici karto! Laakiin
sharciga waannu haysanaa.

### Ibraahim Rumaysad Buu Ku Badbaaday

**4** Haddaba Ibraahim awowgeennii hore ee xagga jidhka muxuu helay baynu dhahnaa?
[2] Waayo, hadduu Ibraahim cibaadaysi xaq ku noqday wax uu ku faanu ayuu lahaa, laakiinse
Eebbe hortiisa ma aha. [3] Muxuu Kitaabku leeyahay? Ibraahimna Eebbe ayuu rumeeyay oo
waxaa isaga lagu tiriyay mid xaq ah.[173*] [4] Marka qofkii shaqeeya abaal mushaharkiisa laguma
tiriyo sidii wax nimco oo kale ah, laakiinse sidii waa waajib uu mutaystay oo kale. [5] Laakiin
qofkii aan camalfalin balse rumaysta ka xaq ka dhiga kuwa aan xaqqa ahayn, rumaysadkiisa
waxaa lagu tiriyaa xaqnimo. [6] Siduu Daa'uudba u sheegay barakada qofkii uu Eebbe xaq ku
tiriyo cibaada la'aan, isagoo leh, [7] Waxaa barakaysan kuwa xadgudubyadooda la cafiyo Oo
dembiyadooda la daboolay. [8] Waxaa barakaysan ninkii uusan Rabbigu dembi u qabsanin.[174*]

---

173 Bilowgii 15.6
174 Sabuur 32.1,2

[9] Haddaba barakadanu ma kuwa gudan oo keliya ayay ka hadlaysaa, mise kuwa buurya qabka
ahna way ku jiraan? Waayo, waxaannu nidhaahnaa, Ibraahim rumaysadkiisa aaawadeed
waxaa lagu tiriyay mid xaq ah. [10] Sidee haddaba isaga loogu tiriyay? Ma markuu gudnaa, mise
markuu buurya qabka ahaa? Ma ahayn markuu gudnaa, laakiinse waxay ayad markuu buurya
qabka ahaa, [11] Haddaba wuxuu helay calaamadda gudniinka, taasoo ahayd shaambaddii
xaqnimada ee rumaysadkiisii markuu buurya qabka ahaa, si uu u noqdo aabbihii muminiinta oo
dhan in kastoo ay buurya qab yihiin, si inay xaq yihiin loogu tiriyo iyaga, [12] Iyo inuu noqdo
aabbaha gudniinka, kuwaasoon oo ahayn kuwa gudan oo keliya laakiinse ah kuwa ku socda
tallaabada rumaysadka ee Aabbeheen Ibraahim uu lahaa markuu buurya qabka ahaa.

### Ballanqaadku Wuxuu Ku Xaqiiqoobaa Rumaysadka

[13] Waayo, ballankii Ibraahim iyo farcankiisa ee ahaa inuu dunida dhaxli doono kuma uusan
helin sharciga, laakiinse wuxuu ku helay xaqnimada rumaysadka. [14] Waayo, hadday kuwa
sharciga leh ay noqdaan kuwa dhaxalka leh, markaas rumaysadkii waxaa laga dhigay wax aan
faa'iido lahayn, axdigiina waa la buriyay, [15] Maxaa yeelay, sharcigu wuxuu keenaa cadho,
laakiinse meeshii uusan sharci ka jirin xadgudub kama jiro.[175*] [16] Sidaas daraaddeed rumaysad
ayaa loo baahanyahay,si uu axdigu nimco u ahaado,taasoo ay ka faa'iidaystaan farcanka oo
dhan oo aan ku koobnayn kuwa sharciga leh oo keliya, laakiinse koobaysa qofkii rumaysadkii
Ibraahim leh, kaasoo aabbe inoo wada ah kulligeen, [17] Sida qoran Ummado badan ayaan
aabbe kaaga dhigay Eebbaha uu rumeeyay hortiisa, kaasoo soo nooleeya kuwii dhintay ee u
yeedha waxyaabo aan jirin sidii iyagoo jira.[176*] [18] Ibraahim rajo ayuu wax ku rumayeeyay iyadoo
ayna rajo jirin si uu aabbe ugu noqdo ummado badan, sida ay farriintii lagula hadlay leedahay
Farcankaagu sidaasuu noqon doonaa.[177*] [19] Haddaba Isagoo uusan rumaysadkiisu tabar
yaraanin ayuu jidhkiisii sida meyd oo kale ahaa (waayo, boqol jir buu ku dhawaa) iyo
meydnimadii maxalkii Saarah.

[20] Ballanqaadkii Eebbe rumaysad darro kagama uusan shakiyin, laakiinse rumaysad ayuu ku
xoogaystay, isagoo Eebbe ammaanaya [21] Oo aad u yaqiinsan in wixii uu u ballanqaaday uu
samayn karo. [22] Sidaas daraaddeed waxaa loogu tiriyay inuu xaq yahay. [23] Taasna isagoo
kaliya looma qorin, [24] laakiin waxaa loo qoray innaga aawadeenn, kuweenna rumaysan kii kuwii
dhintay ka soo sarakiciyay Rabbigeenna Ciise, [25] Kaasoo loo bixiyay xadgudubkeenna
aawadood oo loo sarakiciyay si uu xaq inooga dhigo.

### Natiijada Iimaanka

**5** Sidaas daraaddeed, maadaama oo rumaysad xaq laynagaga dhigay, waxaynu Eebbe nabad
kula nahay Rabbigeenna Ciise Masiix, [2] Kaasoo aynu sidoo kale rumaysad ku galnay
nimcadan aynu dhex taagannahay oo waxaynu ku faraxsannahay rajada ammaanta Eebbe.
[3] Oo waliba taas oo keliya ma aha, laakiinse waxaynu ku faraxsannahay dhibaatadeenna,
innagoo og inuu dhibkaasu dulqaad keeno, [4] Dulqaadkuna wuxuu keenaa waayo aragnimo,

---

175 Wuxuu ka wadaa Sharciga ayaa qeexa wixii xaaran iyo xad gudub ah ee la iska reebo oo hadduusan sharci jirin xalaal iyo xaaraantuba markaas waa isku mid oo ma kala xadaysna

176 Bilowgii 17.5

177 Bilowgii 17:17

waayo aragnimaduna rajo, [5] Rajaduna ceeb inama baddo, maxaa yeelay, jacaylka Eebbe ayaa quluubteenna ku dhex shubmay, Ruuxa Qudduuska ah aawadii, kaasoo layna siiyay. [6] Waayo, innagoo weli itaal daran ayuu Masiixu wakhti ku habboon u dhintay kuwa aan alle ka cabsi lahayn. [7] Maxaa yeelay waa wax dhif ah inuu qof xaq ahu u dhinto qof kale, balse waa wax dhici karta inuu qof wanaagsan qof kale u dhinto. [8] Laakiinse innagoo wali dembiga ku jirna ayuu Masiixu inoo dhintay, oo sidaas ayuu Eebbe jacaylkiisa inoogu muujiyay. [9] Haddaba waxaa taa ka sii badan, Haddaynu hadda dhiiggiisa xaq ku noqonnay, intee in ka badan ayaynu kaga badbaadi doonnaa cadhada Eebbe. [10] Waayo, haddii innagoo cadow ah uu Eebbe inagula heshiiyay dhimashadii Wiilkiisa, si taa ka badan markaynu heshiis la nahayna waxaynu ku badbaadi doonnaa noloshiisa, [11] Oo taas oo keliyana ma ahee, weliba waxaynu ku faraxsannahay Eebbe xagga Rabbigeenna Ciise Masiix, kaasoo aynu hadda heshiiska ku helnay.

## Aadan, Iyo Ciise Masiix

[12] Haddaba siduu dembigu nin keliya aawadii dunida ugu soo galay, ayay dhimashaduna dembiga uga timid oo sidaasay dadka oo dhan dhimashadu ugu faaftay, waayo, way wada dembaabeen, [13] Maxaa yeelay, dembigu dunida ayuu ku jiray intuusan sharcigu imanin, laakiinse dembi looma aqoonsado hadduusan sharci jirin. [14] Habase yeeshee waagii Aadan ilaa iyo Muuse dhimashada ayaa u talinaysay xataa kuwii aan u dembaabin sidii xadgudubkii Aadan, kaaasoo ah tusaalaha midka iman lahaa. [15] Laakiinse hadiyaddu ma aha sida dembiga, waayo, hadday nin keliya dembigiisa kuwo badanu u dhinteen, in ka sii badan ayay kuwa badan u sii badan doontaa nimcada Eebbe iyo hadiyadda nimcada ah ee ku timimaadda nin kaliya, kaasoo ah Ciise Masiix. [16] Hadiyadduna ma aha wax ka dhashay qof dembaabay, waayo, mid keliya xukunkiisu wuxuu keenay ciqaab, laakiin hadiyadda dembiyo badan aawadood ku timid waxay xaq ka dhigtaa kuwo badan. [17] Marka hadday qof dembigiisa aawadii dhimashadu u hanatay, haddaba in ka sii badan ayay kuwo nimco badan iyo hadiyadda xaqnimada ugu heli doonaan xaqnimada mid keliya aawadii, kaasoo ah Ciise Masiix. [18] Sidaa daraaddeed, dembiga nin keliya aawadii waxaa dadka oo dhan ugu yimid xukun, sidaasoo kalena xaqnimo uu nin keliya sameeyay aawadeed waxaa dadka oo dhan ugu timid hadiyad ah in xaq laga dhigo oo ay noolaadaan. [19] Waayo, sida ay nin keliya caasinimadiisa kuwo badan ugu dembaabeen, sidaas oo kale ayay addeecidda nin keliya kuwo badan xaq uga dhigi doontaa. [20] Sharciguna wuxuu u yimid dembiga badan aawadii, laakiinse meeshuu dembigu ku bato nimcada ayaa aad iyo aad uga sii badata, [21] Marka siduu dembigu dhimashada ugu hantiyay, ayay nimcaduna ugu hantiyi doontaa xaqnimada ilaa iyo nolosha weligeed ah ee xagga Rabbigeenna Ciise Masiix.

## Ka Dhimashada Dembiga Iyo La Midoobidda Masiixa

**6** Haddaba maxaynu nidhaahnaa? Miyaynu ku sii soconnaa dembiga si ay nimcadu u badato? [2] Ma dhici karto! Sidee innagoo dembi kala dhimannay aynu mar dambe ugu dhex noolaannaa? [3] Mise miyaydaan ogayn in dhammaanteen kuweenna laynala biyo galiyay Ciise Masiix dhexdiisa, in laynala biyo galiyay dhimashadiisa? [4] Haddaba waxaynu isaga kula aasannahay biya galinta dhimashada dhexdeeda, si, sidii Masiixa kuwii dhintay loogaga sarakiciyay ammaanta Aabbaha, aynu innaguna sidaas oo kale nolosha cusub ugu dhex soconno. [5] Maxaa yeelay haddaynu isaga kula midownay dhimasho tiisa u eg, waxaynu sidoo

kale kula midoobi doonnaa sarakicid tiisa oo kale ah. 6 Waxaynu ognahay in dabeecaddeennii
hore iskutallaabta lagula qodbay isaga, si jidhka dembigu u baabba'o, oo aynaan mar dambe
addoommo ugu ahaanin dembiga. 7 Waayo, kii dhintay dembi wuu ka xoroobay oo xaq baa
laga dhigay.[178*] 8 Marka haddaynu Masiixa la dhimannay, waxaynu aaminsasannahay inaynu
haddana isaga la noolaan doonno. 9 Innagoo ogsoon in Masiixa oo kuwii dhintay ka sarakacay
uusan mar dambe dhimanaynin oo ayna dhimasho mar dambe u talin doonin. 10 Waayo,
dhimashaduu dhintay mar keliya ayuu dembiga u dhintay* laakiin nolosha uu ku noolyahay,
Eebbe ayuu u noolyahay.[179*] 11 Sidaas oo kale idinkuna isku tiriya inaad dembiga u tihiin kuwo
dhintay oo aad Eebbe u tihiin kuwo nool xagga Ciise Masiix.
12 Sidaa daraaddeed dembigu yuusan jidhkiinna dhimanaya maamulin si aad damacyadiisa xun
xun u addeecdaan. 13 Xubnihiinnana dembiga ha u siinnina sida qalabka xaqdarrida, laakiin
Eebbe isa siiya sidii idinkoo ah kuwo ka soo noolaaday kuwii dhintay oo xubnihiinnana Eebbe u
siiya sida qalabka xaqnimada. 14 Waayo, dembigu idiinma talin doono, maxaa yeelay,
shareecada kuma hoos jirtaan, laakiinse waxaad ku hoos jirtaan nimcada.[180*]

### Addoomadii iyo Adeegayaashii Xaqnimada

15 Waa sidee haddaba? Miyaynu ku sii soconnaa dembiga sababtoo ah sharci kuma hoos
jirnee nimco ayaynu hoos jirraa? Ma dhici karto! 16 Miyadaan ogayn in markii aad adeecayaal
noqotaan inaad kii aad adeecdaan addoommo u tihiin, ama dembi dhimasho idiin horseeda ha
noqdo ama addeecid xaqnimada idiin horseeda ha noqoto? 17 Laakiinse mahad Eebbe baa leh,
waayo, waxaad ahaan jirteen addoommadii dembiga, haddase qalbigiina ayaad ka
addeecdeen wax bariddii laydin siiyay, 18 Oo idinka oo dembi laydinka xoreeyay ayaad
xaqnimada addoommo u noqoteen. 19 Sida banii aadankaan u hadlayaa jidhkiinna awoodda
daran aawadii. Waayo, sidii aad xubnihiinna uga dhigi jirteen addoommadii faasiqnimada
gaadhsiinaysay dembi xad dhaaf ah, sidoo kale hadda xubnihiinna ka dhiga addoommadii
xaqnimada gaadhsiinaysa qudduusnimo. 20 Waayo, markaad addoommadii dembiga ahaan
jirteen xaqnimo xor baad ka ahaydeen. 21 Haddaba wakhtigaas maxaad midho ka hesheen
waxyaabaha aad hadda ka xishoonaysaan? Waayo, waxyaabahaas cidhibtoodu waa
dhimasho. 22 Laakiin hadda idinkoo dembi laydinka xoreeyay oo adeegayaashii Eebbe ah
waxaad midho ka hesheen qudduusnimo, taas oy cidhibteedu tahay nolosha weligeed ah.
23 Waayo, musharka dembigu waa dhimasho, laakiinse hadiyadda Eebbe waa nolosha
weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix

### Arrinta Ku Saabsan Guurka

**7** Ama miyaydaan ogayn, walaallayaal, (Waxaan la hadlayaa kuwa sharciga yaqaanee) Inay
shareecadu ku dabaqanto qofka intuu noolyahay oo keliya? 2 Naagtii nin luhu si sharci ah ayay
ugu mehersantahay ninkeeda intuu noolyahay, laakiinse mar hadduu ninku dhinto way ka
furantahay sharcigii guurka. 3 Sidaas daraaddeed inta uu ninkeedu noolyahay, hadday nin kale
guursato, waxaa loogu yeedhi doonaa saaniyad, laakiinse ninkeedu hadduu dhinto, sharcigaas
xor bay ka tahay, sidaas daraaddeed saaniyad ma noqonayso hadday nin kale guursato.
4 Sidaas oo kale, walaallayaal, jidhka Masiixa ayaad kaga dhimateen shareecada, si mid kale

178 Waayo, qofkii ay dembiga kala dhintaan xor buu ka noqdaa damaca iyo duufsashada dembigaba.
179 Waayo, mar keliya ayuu Masiixu dembiga aawadii u dhintay.
180 Yooxanaa 1:17

idiin lahaado, kaasoo ah kii kuwii dhintay laga sarakiciyay si aynu Eebbe midho ugu soo
bixinno. 5 Waayo, markii aynu jidhka ku dhex jirnay, damacyadii dembiga ee ay shareecadu
kicisay ayaa xubnaheenna ka dhex shaqaynayay si ay midho ugu soo bixiyaan
dhimashada.[181*] 6 Laakiinse hadda shareecada waa laynaga furay, inagoo ka dhimannay wixii
aynu ku hoos xidhnayn, si aynaan ugu adeegin axdigii duugga ahaa ee qoraalka ahaa, balse
aynu ugu adeegno nolosha cusub ee ruuxa.

### Sharciga Iyo Dhibaatada Dembiga

7 Haddaba maxaynu nidhaahnaa? Shareecadu ma dembi baa? Ma dhici karto! Hase ahaatee,
dembi ma garteen hadduusan sharci jirin, oo damaca xun inuu xunyahay ma garteen
hadduusan sharcigu i odhan, Waa inaadan wax damcin.[182*] 8 Laakiinse dembigu, isagoo fursad
amarka ku helay ayuu damac xun oo walba dhexdayda ka sameeyay, waayo, sharciga
la'aantiisa dembigu waa meyd.[183*] 9 Maxaa yeelay mar ban noolaa sharciga la'aantii, laakiinse
markuu amarku yimid ayuu dembigu soo noolaaday aniguna waan dhintay. 10 Amarkii nolosha
ballanqaaday, waxaa caddaatay inuu agtayda mayd ka yahay. 11 Waayo, dembigu, isagoo
fursad ku helay amarka ayuu i khiyaanay oo i dilay. 12 Haddaba shareecadu waa qudduus,
amarkuna waa qudduus, waana xaq oo wuu wanaagsanyahay. 13 Haddaba wixii wanaagsanaa
miyaa dhimasho ii keenay? Ma dhici karto! Laakiinse dembiga ayaa wixii wanaagsanaa ka
dhex shaqayay oo dhimasho ii keenay, si dembigu amaraka ugu noqdo dembi miidhan.
14 Waayo, waxaynu ognahay inay shareecadu wax ruuxi ah ku saabsantahay, laakiinse anigu
waxaan ahay mid jidhka raaca oo lagu iibiyay dembiga hoostiisa. 15 Waayo, waxaan
samaynayo garan maayo, maxaa yeelay, ma sameeyo waxaan doonayo, laakiin waxaan
sameeyaa waxaan necbahay. 16 Marka haddaan sameeyo wax aanan doonaynin, markaas
waxaan ogaaday inuu sharcigu wanaagsanyahay. 17 Haddaba aniga ma aha hadda ka waxaas
samaynaya, laakiinse waa dembiga igu dhex jira. 18 Waayo, waan ogahay inuusan wax
wanaagsanu igu dhex jirin, taas waxaan ula jeedaa, jidhkayga, waayo, waxaan doonaa inaan
wax wanaagsan sameeyo, laakiin ma sameeyo. 19 Maxaa yeelay waxa wanaagsan ee aan
doono inaan falo, ma sameeyo, laakiinse waxa sharka ah ee aanan doonaynin inaan falo
ayaan sameeyaa. 20 Marka haddaan sameeyo waxaanan doonaynin inaan falo, markaas aniga
ma aha ka sameeyaa, laakiinse waa dembiga igu dhex jira. 21 Haddaba waxaan arkayaa inay
sharci ii noqotay markaan doonayo inaan wanaag sameeyo, shar ayaan falaa. 22 Waayo,
sharciga Eebbe ayaan kaga farxaa uurkayga hoose. 23 Laakiinse waxaan xubnahayga ka
arkayaa sharci kale, kaasoo la dagaallamaya sharciga maankayga oo maxbuus iiga dhigay
sharciga dembiga ee xubnahayga ku jira. 24 Nin balaayo ku dhacday baan ahay! Ee yaa iga
badbaadiya jidhkan dhimanaya? 25 Eebbe mahad ha ka gaadho Rabbigeenna Ciise Masiix.
Sidaas daraaddeed aniga qudhaydu Eebbe ayaan ugu adeegaa xagga maankayga Eebbe,
laakiinse xagga jidhka waxaan ugu adeegaa sharciga dembiga.

---

181 Wixii la mamnuuco naftaa jecel; Carabtuna waxay dhahaan kulla mamnuuc marquub oo isla macnahaas ah.
182 Si xun wax u damcin.
183 Sharica ayaa qeexa oo caddeeya oo xadeeya wixii dembi ah, oo hadduusan sharci jirin dembiga lama garteen.

## Nolosha Ruuxiga Ah

**8** Sidaas daraaddeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haatan lama xukumayo. 2 Waayo,
sharciga Ruuxa nolosha ee ku dhex jira Ciise Masiix ayaa iga xoreeyay sharciga dembiga iyo
dhimashadaba. 3 Waayo, wax uusan sharciga uu jidhku awood tiray samayn karin ayuu Eebbe
sameeyay isaga oo Wiilkiisa oo jidhka dembiga oo kale leh u soo diray dembiga aawadii,
wuxuuna xukumay dembigii jidhka ku jiray, 4 Si sharcigu inoogu fulo kuweenna aan sida jidhka
u dhaqmin, laakiinse u dhaqma sida Ruuxa.[184*] 5 Waayo, kuwa sida jidhka u dhaqma waxay ka
fikiraan waxyaabaha jidhka, laakiinse kuwa sida Ruuxa u dhaqma, waxay ka fikiraan
waxyaabaha Ruuxa. 6 Jidhka ka fikiriddiisu waa dhimasho, laakiinse Ruuxa ka fikiriddiisu waa
nolol iyo nabad, 7 Maxaa yeelay, jidhka ka fikiriddiisu waa la col Eebbe, waayo, sharciga Eebbe
uma hoggaansamo, umana hoggaansami karo. 8 Kuwa jidhka ku dhex jirana kama farxin
karaan Eebbe. 9 Laakiin idinku kuma dhex jirtaan jidhka, balse waxaad ku dhex jirtaan Ruuxa,
hadduu Ruuxa Eebbe idinku dhex jiro. Marka qofkii aan Ruuxa Masiixa lahayn, kaasu kiisii ma
aha. 10 Oo hadduu Masiixu idinku dhex jiro, jidhku waa meyd dembiga aawadii, laakiinse ruuxu
wuu noolyahay xaqnimada aawadeed. 11 Laakiin hadduu Ruuxii Ciise kuwii dhintay ka soo
sarakiciyay idinku dhex jiro, kii Ciise Masiix kuwii dhintay ka soo sarakiciyay, jidhkiinna
dhimanayana wuxuu ku noolayn doonaa Ruuxiisa idinku dhex jira. 12 Sidaas daraaddeed,
walaallayaal, jidhku waajib innaguma laha, inaan sida jidhka u noolaano, 13 Waayo, haddaad
sida jidhka u noolaataan, hubaal waad dhiman doontaan, laakiin haddaad ficillada jidhka
Ruuxa ku dishaan, waad noolaan doontaan.

## Carruurta Eebbe

14 In alla intuu Ruuxa Eebbe hoggaamiyo, waa carruurtii Eebbe. 15 Waayo, maydaan helin
ruuxa addoonnimada si aad mar kale u cabsataan, laakiinse waxaad hesheen Ruuxa carruur
idinka dhigay, kaasoo aynu ku qaylino Aabbow. 16 Ruuxa qudhiisu wuu u marag furaa
ruuxeenna inaynu innagu carruurtii Eebbe nahay. 17 Oo haddaynu carruur nahay, haddaba
waxaynu nahay kuwo wax dhaxla, kuwo Eebbe dhaxla oo Masiixa wax la dhaxla, waa haddii
aynu isaga la xanuunsanno, si isaga laynoola ammaano.

## Ammaanta Iman Doonta

18 Waxaan ku tiriyaa waxyaabaha wakhtigan xaadirka ah lagu xanuunsanayo in ayna istaahilin
in la barbar dhigo ammaanta iman doonta ee laynoo muujin doono. 19 Uunku wuxuu filayaa oo
uu si wayn u sugaa in carruurta Eebbe la muujiyo. 20 Maxaa yeelay, Uunka waxaa gacanta loo
galiyay wax aan waxtar lahayn, doonistiisana looma galinin, laakiinse waa kii hoos galiyay
aawadii, 21 Taasoo la rajaynayo in uunka qudhiisana laga xorayn doono addoonnimada
qudhunka ah oo la gelin doono xorriyadda ammaanta carruurta Eebbe. 22 Waayo, waxaynu
ognahay in uunka oo dhan wada taahayo oo wada foolanayo ilaa iyo hadda. 23 Uunka oo
keliyana ma aha, laakiinse innaga qudheennu waynu la qabnaa, kuweenna haysta midhihii ugu
horreeyay ee Ruuxa, xataa innaga qudheennu dhexdeenna ayaynu ka taahnaa, innagoo
sugayna carruur noqoshadeenna, taasoo ah samata bixinta jidhkeenna. 24 Waayo, waxaynu ku
badbaadnay rajo, laakiin rajadii la arko rajo ma aha, maxaa yeelay, waa ayo ka rajeeyaa wax
uu arko? 25 Laakiin haddaynu rajayno wax aynaan arkin haddaba dulqaad ayaynu ku sugnaa.

184 Kuweenna aan siduu jidhku doonayo u dhaqmin ee siduu Ruuxa Eebbe doonayo u dhaqma.

[26] Sidoo kale Ruuxu wuxuu inaga caawiyaa awood darrideenna, waayo, ma garanayno waxa
inoo habboon oo aynu ka ducayno, laakiin Ruuxa qudhiisa ayaa inoo shafeeca qaada isagoo
ku taahaya taah aan sanqadh lahayn. [27] Oo ka qalbiyada baadha wuu yaqaanaa fikirka Ruuxa,
maxaa yeelay, wuxuu qudduusiinta ugu shafeeca qaadaa sida Eebbe doonayo. [28] Haddaba
waynu ognahay inay wax kasta wanaag u wada noqdaan kuwa Eebbe jecel, kuwaasoo
qorshihiisa loogu yeedhay. [29] Waayo, kuwii uu horay u yaqaannay wuxuu haddana horay ugu
doortay inay u ekaadaan suurada Wiilkiisa, si uu isagu curad ugu noqdo walaalo badan
dhexdood. [30] Oo kuwuu horay u doortay, haddana wuu u yeedhay, kuwuu u yeedhayna,
haddana xaq buu ka dhigay, kuwuu xaq ka dhigayna, haddana wuu ammaanay.

### Jacaylka Eebbe

[31] Haddaba maxaan waxyaabahan ka nidhaahnaa? Hadduu Eebbe inala jiro yaa inaga gees
ah? [32] Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyay, sidee
buusan wax walba isaga inoola siin doonin? [33] Yaa ashtakayn doona kuwa uu Eebbe doortay?
Waa Eebbe ka wax xaq ka dhiga. [34] Waa ayo ka wax xukumi doonaa? Waa Ciise Masiix kii
dhintay, oo haddana kuwii dhintay ka sarakacay, oo Eebbe midigtiisa jooga, oo haddana inoo
shafeeca qaada innaga. [35] Yaa jacaylka Masiixa inaga sooci doona? Ma dhibaato, mise
cidhiidhi, mise ciqaab, mise baahi, mise arrad, mise khatar, mise seef? [36] Sida qoran
Adiga daraaddaa ayaa maalin walba naloo laayaa oo Waxaa lagu tiriyaa sida ido la
qalayo.[185*] [37] Maya! waxaas oo dhan oo jira waxaynu nahay kuwa aadka u guulaysta kii ina
jeclaaday aawadii. [38] Waayo, waxaan hubaa inayna dhimasho, ama nolol, ama malaa'igaha,
ama kuwa madaxda ah, ama waxyaabaha wakhtigan xaadirka ah joogaa, ama waxyaabaha
mustaqbalka iman doona, ama kuwa xoogga leh, [39] Ama kor, ama hoos, ama uun kale inaga
sooci karin jacaylka Eebbe ee ku jira Rabbigeenna Ciise Masiix.

### Bawlos Oo U Murugooday Reer Banii Israa'iil Rumaysad Darridooda

**9** Runta ayaan sheegayaa Masiixa dartiisa, oo been ma sheegayo, damiirkayguna marag buu
iig yahay Ruuxa Qudduuska ah [2] Inay calool xumo wayn iyo murugo aan kala go' laynin ku
jiraan qalbigayga. [3] Waayo, waxaan jeclaan lahaa inaan aniga qudhaydu ahaado mid Masiixa
laga habaaray oo laga gooyay walaalahay aawadood, kuwaasoo ah qowmiyaddayda aannu
isku jinsiyadda nahay, [4] kuwaasoo ah reer banii Israa'iil oo lahaa carruur-ka-dhigashada iyo
ammaanta iyo axdiyada iyo sharci siinta iyo Eebbe u-adeegiddiisa iyo ballanqaadyada,
[5] kuwaasoo oy ka soo jeedaan awowayaashu, oo uu xagga jidhka Masiixu iyaga ka dhashay,
ka wax walba ka sarreeya oo ah Eebbaha ammaanta leh weligiis. Aamiin.

### Eebbe Ballanqadyadiisii Kama Bixin

[6] Laakiin ma aha sidii iyadoo eraygii Eebbe fashilmay. Waayo, kuwa reer banii Israa'iil ka
dhashay kulligood reer banii Israa'iil ma wada aha. [7] Farcankii Ibraahim oy ka soo wada
jeedaan kulligoodna carruur kama wada dhigayso, laakiin waxaa la yidhi, Kuwa Isxaaq ka
farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi doonaa.[186*] [8] Taas macneheedu waxaa weeye, inayna

185 Sabuur 44:22
186 Bilowgii 21:12

carruurta jidhku ahayn carruurtii Eebbe, laakiin carruurtii ballanqaadka ayaa farcan lagu tiriyaa.
9 Waayo, kanu waa hadalkii ballanqaadka Wakhtigan oo kale ayaan kuu iman doonaa, oo
Saarah waxay dhali doontaa wiil.[187*] 10 Oo taas oo keliyana ma aha, laakiin Rebeqahna mid
bay u uuraysatay, kaasoo ahaa aabbeheen Isxaaq. 11 Waayo, carruurta oo aan weli dhalanin
oo aan weli wanaag iyo xumaan toona samaynin, si qorshaha Eebbe ee doorashadu u
taagnaado oo uusan u ahaanin mid ku xidhan camalfal, laakiinse uu u ahaado mid ku xidhan
ka dadka u yeedha, 12 Sidaasaa iyada lagu yidhi, Ka waynu wuxuu u adeegi doonaa midka ka
yar.[188*] 13 Sida qoran,

Yacquub waan jeclaaday, Ceesawna waan necbaaday. Eebbe xaqdarro ma laha.[189*]

14 Maxaan nidhaahnaa marka? Ma caddaalad darro ayaa xagga Eebbe ka jirta? Ma dhici karto!
15 Waayo, wuxuu Muuse ku yidhi, Waan u naxariisan doonaa kii aan u naxariisto, oo waan u
nixi doonaa, kii aan u naxayo.[190*] 16 Sidaas daraaddeed arrintu kuma xidhna doonista banii
aadaka ama qofka dadaalkiisa, laakiinse waxay ku xidhantahay Eebbe oo ah ka naxariista.
17 Waayo, Kitaabku wuxuu Fircoon ku leeyahay Sababtan daraaddeed ayaan kuu sarakiciyay si
aan xooggayga adiga kaaga dhex muujiyo oo magacayga dhulka oo dhan loogu faafiyo.
18 Haddaba kuu doonana wuu u naxariistaa, kuu doonana qalbigiisa ayuu adkeeyaa.

### Eebbe Ayaa Xukunka Iska Leh

19 Waxaad igu odhan doontaa Muxuu weli ii eedaynayaa? Waayo, yaa doonistiisa hor istaagi
kara? 20 Laakiinse, ninyahow, kumaad tahay kaaga Eebbe u jawaabayow? Wixii la abuuro
miyay kii abuuray ku odhan doonaan, Maaxad sidan noogu abuurtay? 21 Ninka Dheriga
sameeya miyuusan lahayn amar uu ku maamulo dhoobada, si uu fud keliya uga sameeyo weel
sharaf leh, inta kalena weel aan sharaf lahayn? 22 Bal ka warran hadduu Eebbe, isagoo
doonaya inuu cadhadiisa muujiyo oo uu xooggiisa dadka ogeysiiyo, isagoo in badan u
dulqaatay weelasha cadhada ee loo diyaariyay halaagga, 23 Oo uu hodantinimada ammaantiisa
ogeysiiyo weelasha naxariista ee uu horay ugu diyaariyay ammaanta, 24 Xataa kuweenna uu u
yeedhay ee uusan uga yeedhin Yuhuudda oo keliya laakiinse uu uga yeedhay ummadaha
kale? 25 Sida uu Hooseeca ka dhex yidhi, Kuwo aan dadkaygii ahayn ayaan dadkayga ugu
yeedhi doonaa, oo mid aan ahayn gacaladayda waxaan ugu yeedhi doonaa Gacaliso. 26 Oo
waxay noqon doontaa, meeshii laga yidhi, iyaga, Dadkayga ma tihidin, Meeshaas waxaa looga
bixin doonaa, Carruurtii Eebbaha nool.[191*] 27 Oo Ishacyaah wuxuu ku dhawaaqay wax Israa'iil
ku saabsan isagoo leh In kasta oy tirada reer banii Israa'iil noqoto sida cammuudda badda, in
yar ayaa badbaadi doonta, 28 waayo, Rabbigu hadalkiisa ayuu gabi ahaamba dhulka ka fulin
doonaa,si aan habsaan lahayn, 29 Oo siduu Ishacyaah horay u yidhi, Hadduusan Rabbigii
ciidamadu farcan inoo reebin, Sidii Sodom oo kale ayaan noqon lahayn, oo sidii Gomora ayaa
laynaga dhigi lahaa.[192*]

---

187 Bilowgii 18:10
188 Bilowgii 5:23 (iyada waxaa loo jeedaa Saarah, Isxaaq iyo Ciisow hooyadood.)
189 Malaakii 1:2-3
190 Baxniintii 33:19
191 Hooseeca 2:23
192 Ishacyaah 10:22-23

## Rumaysad La'aanta Reer Banii Israa'iil

30 Maxaan nidhaahnaa haddaba? Dadkii aan Yuhuudda ahayn ee aan xaqnimada raadinin,
xaqnimadii ayay heleen, taasoo ah xaqnimada rumaysadka lagu helo, 31 Laakiinse reer banii
Israa'iilkii raadinayay xaqnimada shareecada lagu helo way gaadhi waayeen. 32 Tan
sababteedu waa maxay? Maxaa yeelay, rumaysad kuma ayna doonin, camalkooda mooyee.
Waxay ku turunturoodeen dhagaxii turunturada, 33 Sida qoran, Bal eega, waxaan Siyoon dhex
dhigayaa dhagax lagu turunturroodo oo ah sallax lagu kufo; Oo kii rumaysta isaga ma
ceeboobi doono.[193*]

**10** Walaallayaal, waxaa qalbiga ka doonayaa oon Eebbe ka baryaa inay iyagu badbaadaan.
2 Waayo, waxaan ka markhaati kacayaa inay iyagu Eebbe qiiro wayn u hayaan, laakiinse
aqoon kuma dhisna. 3 Waayo, iyagoo aan ogayn xaqnimada Eebbe waxay doonayaan inay
xaqnimaooda taagaan, iyagoon u hoggaasamaynin xaqnimada Eebbe. 4 Maxaa yeelay,
Masiixu wuxuu mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga dhammaadkiisa xagga xaqnimada.

## Jidka Cusub Oo Xaqnimada Cid Kasta Wuu U Furanyahay

5 Waayo, Muuse wuxuu qoray in qofkii xaqnimada sharciga ku dhaqma uu ku noolaan doono
iyada. 6 Laakiin xaqnimada rumaysadka ku salaysan sidanay leedahay Qalbigaaga ha iska
dhihin, Yaa samada kori doona (si uu Masiixa uga soo dejiyo)? 7 Ama, Yaa Haawiya ku hooban
doona (si uu Masiixa kuwii dhintay uga soo sarakiciyo)? 8 Laakiin maxay leedahay? Eraygu
wuu kuu dhawyahay, oo afkaaga iyo qalbigaagu ku jiraa, waaana erayga rumaysadka ee
aannu kugu wacdino. 9 Maxaa yeelay, haddaad afka ka qirato inuu Ciise yahay Rabbiga, ood
qalbiga ka rumaysato inuu Eebbe isaga ka sarakiciyay kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa,
10 Waayo, qalbiga ayaa xaqnimada laga rumeeyaa, afkana waxaa laga qirtaa badbaadada.
11 Waayo, Kitaabku wuxuu leeyahay Ku alla kii rumeeya isaga ma ceeboobi doono.[194*]
12 Maxaa yeelay, Yuhuudda iyo Giriigtu waxba kuma kala duwana, waayo, isku Rabbi ayaa
Rabbi u wada ah, cid kasta oo isaga baridana hodan buu u yahay. 13 Waayo, ku alla kii magaca
Rabbiga ku barya wuu badbaadi doonaa. 14 Haddaba siday ugu baryi doonaan mid ayna
rumaynin? Oo siday u rumayn doonaan mid ayna maqlin? Oo siday u maqli doonaan haddaan
la wacdiyin? 15 Oo siday u wacdiyi doonaan haddaan la dirin? sida qoran Qurux badanaa
cagaha kuwa wax ku wacdiya warka wanaagsan.[195*] 16 Laakiin kulligood ma ayna wada
adeecin Injiilka. Waayo, Ishacyaah wuxuu leeyahay Rabbiyow, yaa rumeeyay warkayaga[196*]?
17 Haddaba rumaysadku wuxuu ka yimaaddaa maqalka, maqakuna erayga Masiixa.[197*]
18 Laakiin waxaan leeyahay, Miyayna maqlin? Haah, runtii. Codkoodu wuxuu gaadhay dhulka
oo dhan, Hadalkooduna wuxuu gaadhay dunida dacalladeeda. 19 Laakiin waxaan leeyahay,
Miyayna reer banii Israa'iil ogayn? Ugu horraystii Muuse wuxuu yidhi, Waxaan idinkaga
hinaasin doonaa kuwo aan ummad ahayn, Oo ummad jaahil ah ayaan idinkaga cadhaysiin
doonaa.[198*] 20 Ishacyaahna geesi buu ahaa oo wuxuu yidhi, Waxaa i helay kuwo aan i
doonaynin oo Waxaan u muuqday kuwo aan wax i wayddiinaynin. 21 Laakiin reer banii Israa'iil

193 Ishacyaah 28:16
194 Ishacyaah 28:16
195 Ishacyaah 52:7
196 Ishacyaah 53:1
197 Wacdiga Injiilka
198 Sharciga Kunoqoshadiisa 32:21

wuxuu ku yidhi, Maalintii oo dhan waxaan gacmahayga u fidinayaa dad caasi ah oo muran badan[e].

## Baaqiga Reer Banii Israa'iil

**11** Marka waxaan leeyahay, Eebbe miyuu xooray dadkiisa? Ma dhici karto! Waayo, aniguba
waxaan ahay reer banii Israa'iil oo waxaan ka soo jeedaa farcankii Ibraahim oo waxaan ka mid
ahay qabiilka reer Benyaamiin. 2 Eebbe dadkiisa uu horay u yaqaannay ma tuurin. Mise
miyaydaan ogayn waxa uu Kitaabku ka sheegayo Eliyaas? siduu Eebbe ugu cawday isagoo
reer banii Israa'iil ka cabanaya oo leh 3 Rabbiyow, nebiyadaadii ayay dileen, meelahaagii
allabarigana way dumiyeen, oo keligay ayaa hadhay, oo inay anigana i dilaan ayay
doonnayaan.[199*] 4 Laakiinse jawaabtuu Eebbe isaga ugu jawaabay maxay ahayd? Waxaan
naftayda u reebay toddoba kun oo nin oo aan Bacal u jilba joogsanin.[200*] 5 Sidaas oo kale
wakhtigan xaadirka ahna waxaa jira baaqi hadhay oo nimco lagu doortay. 6 Marka haddii nimco
lagu doortay, haddaba ma aha mar dambe wax camalfal ku xidhan, haddii kalese nimcadu mar
dambe nimco ma noqonayso. 7 Haddaba waa sidee xaalku? Waxay reer banii Israa'iil
doonayeen mayna helin, laakiinse kuwii la doortay way heleen, intii kalena waa la qalbi
adkeeyay, 8 Sida qoran, Eebbe wuxuu iyaga siiyay maskax hurudda iyo indho ayna waxba ku
arkin iyo dhego ayna waxba ku maqlin, ilaa iyo maantadan. 9 Daa'uudna wuxuu yidhi,
Miiskoodu ha u noqdo dabin iyo wax qabsada iyaga Iyo wax ay ku turunturroodaan iyo wax
ka aarguta iyaga 10 Indhahoodu ha madoobaadeen si ayna waxba u arkin, Dhabarkoodana
foorari weligiis.[201*]

## Badbaadada Dadka Aan Yuhuudda Ahayn

11 Haddaba waxaan leeyahay, Miyay turunturroodeen si ay u dhacaan? Maya, ma dhici karto!
Laakiinse dhicitaankooda aawadii ummadihii kale ayaa ku badbaaday, si ay uga hinaasaan.
12 Marka hadduu dhicitaankoodu noqday hodantinimada dunida, tabardarridooduna noqotay
hodantinimada ummadaha kale, markaas kaamilnimadoodu intee ka sii badan ayay hodan
noqon doontaa? 13 Laakiin waxaan la hadlayaa kuwiinnan ka midka ah dadka aan Yuhuudda
ahayn. Haddaba anigoo ah rasuulkii dadka aan Yuhuudda ahayn, hawshayda waan qiimeeyaa,
14 Si aan uga hinaasiyo kuwa aan isku jinsiyadda nahay oo aan qaarkood u badbaadiyo.
15 Waayo, hadday tuuriddoodu tahay la heshiinta dunida, aqbalaaddooduna maxay noqon
doontaa, soo noolaanshaha kuwii dhintay mooyee? 16 Inta ugu horraysa oo qooshku hadday
qudduus tahay, marka qooshka oo dhanna wuu wada yahay, hadduu xididku qudduus yahay,
markaas laamahuna way yihiin. 17 Laakiinse haddii laamaha qaarkood la jebiyo oo adiga oo
saytuunka ka baxsan lagugu beero meeshoodii oo aad wanaagga xididka geedka saytuunka
ah ka qayb qaadato, 18 Ha ka faanin laamaha, laakiinse haddaad faanto, bal ogow inaadan
ahayn ka xididka sida, laakiinse xididka ayaa adiga ku sida. 19 Haddaba waxaad odhan
doontaa Laamaha waxaa loo jebiyay in aniga meeshoodii laygu tallaalo. 20 Waa run. Rumaysad
darridooda ayaa loo jebiyay, adiguna waxaad ku taagantahay rumaysad kaaga. Marka Ha
kibrin, laakiinse cabso, 21 Waayo, hadduusan Eebbe u tudhin laamihii asalka ahaa, markaas

199 Boqorradii Kowaad 19:10-14
200 Boqorradii Kowaad 19:18
201 Sabuur 69:22-23

adigana kuuma tudhayo. [22] Bal hadda eeg, turidda iyo adkaysiga uu Eebbe kuwii dhacay u
adkaysigiisa, laakiinse siduu adiga kuugu roonyahay Eebbe, waa haddaad turitaankiisa ku sii
socoto, haddii kale adigana waa lagu gooyn doonaa. [23] Iyaguna haddayan rumaysad
la'aantooda joojiyaan, meeshoodii ayaa lagu tallaali doonaa, waayo, Eebbe wuu awoodaa inuu
iyaga mar kale meeshoodii ku tallaalo. [24] Waayo, haddii adiga lagaa soo gooyay saytuun
dibadda ku yaalla oo si aburka dabiiciga ah ka baxsan laguugu tallaalay geed saytuun
wanaagsan ah, intee in ka sii badan kuwan oo ah laamihii asalka ahaa loogu tallaali doonaa
geedkoodii saytuunka ahaa?

### Eebbe Qorshihiisu Waa Inuu Dhammaan U Wada Naxariisto

[25] Walaallayaal, anigu ma doonayo, inaad jaahil ka ahaataan sirahan, waaba intaasood
kibirtaan. qayb ahaan ayaa la indha tiray reer banii Israa'iil ilaa iyo inta ay ummahada oo dhan
imanayaan, [26] Oo sidaas ayay reer banii Israa'iil oo dhan u wada badbaadi doonaan, sida
qoran, Waxaa Siyoon ka soo bixi doona Bixiyaha. Wuxuu Yacquub ka sii jeedin doonaa
cibaadola'aanta. [27] Oo kanu waa axdigayga aan la dhigan doono iyaga, Markaan dembigooda
ka qaado.[202*], [28] Xagga Injiilka iyagu waa cadawga Eebbe aawadiin. laakiinse xagga
doorashada waa kuwo la jecelyahay awowayaasha aawadood. [29] Waayo, hadiyadaha iyo
yeedhidda Eebbe ka soo noqosho ma leh. [30] Waayo, idinkuba mar baad Eebbe caasi ku
ahaydeen, laakiinse hadda waxaa laydiinku naxariistay kuwaas caasinimadooda, [31] Sidaas oo
kale iyaguna hadda waa caasiyiin, si naxariista laydin tuso, iyagana hadda loogu naxariisto.
[32] Waayo, Eebbe dhammaan wuxuu ku wada qufulay caasinimo si uu ugu wada naxariisto
dhammaantood. [33] Qoto dheeraa hodantinimada iyo xigmadda iyo aqoonta Eebbe! Axkaantiisa
lama baadhi karo, jidadkiisana lama raadin karo! [34] Waayo, bal yaa soo ogaaday maanka
Rabbiga? Bal yaase la taliyihiisa noqday? [35] Oo yaa isaga wax siiyaya oo loo abaalgudi
doonaa[203*]? [36] Waayo, wax walba isaga ayay ka yimaaddeen oo ay ku yimaaddeen oo ay u
yimaaddeen. Ammaanta isaga ayaa leh weligii. Aamiin.

### Nolosha Cusub

**12** Haddaba, walaallayaal, waxaan idinku baryayaa Eebbe naxariistiisa inaad jidhkiinna Eebbe
u siisaan sida allabari nool oo qudduus ah oo Eebbe ku farxo, taasoo ah cibaadadiinna caqli
galka ah. [2] Hana u ekaanina dadka dunidan, laakiinse kuwo is bedel sameeyay oo maan cusub
leh noqda, si aad u garataan waxa ay tahay doonista Eebbe ee wanaagsan ee kaamilka ah ee
la aqbali karo.

### Sida Habboon Ee Loogu Shaqeeyo Hadiyadaha Ruuxiga Ah

[3] Waayo, nimcada lay siiyay aawadeed ayaan ku hadlayaa oo waxaan ku leeyahay, Mid kasta
oo idinka mid ah, yuusan kor isu qaadin intii loogu tala galay wax ka badan, laakiinse si caqli
gal ah ha isu qiimeeyo, sida uu Eebbe mid kasta u siiyay qayb rumaysad ah. [4] Waayo, sida
aynu jidh kaliya xubno badan ugu leennahay, oo ayna xubnaha oo dhan isku shaqo u qabanin,
[5] Sidaas oo kale ayaynu inkastoo aynu badannahay, Masiixa jidh keliya ugu nahay, oo midba

202 Ishacyaah 59:20
203 Ayuub 41:11

midka kale waa xubnihiisa. [6] Innagoo leh hadiyado kala duwan sida waafaqsan nimcada layna siiyay, hadday tahay wax sii sheegid, aan wax ku sii sheegno sida qaybta rumaysadkeenna.
[7] Ama hadday tahay adeegid, aan aad u adeegno; kii wax baraana, si fiican wax ha u baro, [8] kii wax waaniyana, si fiican wax ha u waaniyo, kii wax bixiyaana, deeqsinimo wax ha u bixiyo, kii wax hoggaamiyana, dadaal wax ha ku hoggaamiyo, kii wax u naxariistaana, si farxad leh wax ha ugu naxariisto.

### Sifooyinka Masiixiyiinta Runta Ah

[9] Jacaylku ha noqdo mid daacad ah, sharka karha oo wanaagga xajista. [10] Si walaaltinimo ah isku wada jeclaada, midkiinba midka kale ha iska hor mariyo. [11] Dadaalka ha ka caajisina, kuwo xagga ruuxa ka kulul ahaada oo Rabbiga u adeega. [12] Rajada ku farxa, dhibaatadana u dulqaata, ducadana ha kala joojinin, [13] Oo baahida qudduusiinta ka qayb qaata oo shisheeyaha marti qaada. [14] U duceeya kuwa idin dhiba, u duceeya oo ha habaarina. [15] La farxa kuwa farxsan oo la ooya kuwa ooyaya. [16] Midba midka kale ha la fikir ahaado, ha kibrina, laakiin kuwa hoose la socda. Kuwo isla caqli badan ha noqonina. [17] Ninna shar ha uga celinina shar. Ka fikira inaad wax wanaagsan samaysaan dadka oo dhan hortiisa. [18] Hadday suurta gasho ood kartaan, nabad kula noolaada dadka oo dhan. [19] Walaalaha qaaliga ahow, ha aarsanina, laakiin meel u banneeya cadhada Eebbe, waayo, waxaa qoran Aarsasho anigaa leh oo anigaa ka abaal marin doona, ayaa Rabbigu leeyahay.[204*] [20] Laakiin hadduu cadowgaagu gaajaysanyahay, cunto sii oo hadduu harraadsanyahayna waraabi, waayo, haddaad sidaas samayso waxaad madaxiisa ku kor uruurin doontaa dhinbilo dab ah. [21] Sharku yuusan kaa adkaanin, laakiinse sharka wanaag kaga adkow.

### Maamulka iyo Madaxda Oo Loo Hoggaansamo

**13** Qof waluba ha ka dambeeyo kuwa amarka sare leh, waayo, amar ma jiro ka Eebbe ka yimaadda mooyaane. Kuwa jirana Eebbe ayaa ka dhigay kuwa amar leh. [2] Sidaas daraaddeed qofkii diida ka amarka leh wuxuu ka hor yimiddaa amarka Eebbe, kuwa ka hor yimaaddana waxay heli doonaan xukun. [3] Madaxdu cabsi kuma abuuraan kuwa wanaagga sameeya, laakiinse kuwa xumaanta sameeya ayay cabsi galiyaan. Ma doonaysaa inaadan ka cabsanin ka amarka leh? Wax wanaagsan samee way ku ammaanayaane. [4] Waayo, isagu waa adeegihii Eebbe wanaaggaaga aawadii. Laakiinse haddaad xumaan samayso, cabso, waayo, isagu seefta uma sito sabab la'aan. Maxaa yeelay, isagu waa adeegihii Eebbe, oo qofkii xumaan sameeya si cadho leh ayuu u ciqaabaa. [5] Sidaas daraaddeed waa in laga dambeeyo ka amarka leh, mana aha cadhada aawadeed oo keliya, laakiinse damiirka aawadii.
[6] Waayo, sababtaas aawadeed waxaad u bixisaan cashuur, maxaa yeelay, iyagu waa adeegayaashii Eebbe oo had iyo jeer shaqadaas ayay u taaganyihiin. [7] Mid walba wuxuu idinku leeyahay siiya, kii dekhli idinku leh, dekhli siiya, kii cashuur idinku lehna, cashuur siiya, kii laga cabsadana, ka cabsada, kii sharaf lehna maamuusa.

204 Sharciga Kunoqoshadiisa 32:35

## Jacayl Walaalnimo

[8] Ninna yuusan wax idinku lahaanin, inuu midkiinba midka kale jeclaado mooyee. Waayo, kii
deriskiisa jeclaadaa sharciguu oofiyay. [9] Maxaa yeelay, amarradan ayaa la yidhi, Waa inaadan
sinaysanin oo Waa inaanad qudh goyn oo Waa inaadan waxba xadin oo Waa inaadan wax
damcin[205*] Oo hadduu amar kale jiro, waxaa lagu soo koobay hadalkan Waa inaad deriskaaga
u jeclaato sida naftaada. [10] Jacaylku xumaan kuma sameeyo deriskiisa, jacaylku sidaa darteed
waa ku dhaqanka shareecada. [11] Oo weliba waad ogtihiin wakhtigu inuu hadda yahay
saacaddii aad hurdada ka toosi lahaydeen, waayo, hadda ayay badbaadu inooga dhawdahay
markii hore ee aan rumaynay. [12] Habeenkii horay ayuu u batay, maalintiina way soo
dhawaatay, sidaas daraaddeed aan iska dhigno falalka gudcurka oo aan qaadanno hubka
iftiinka. [13] Sidii iyadoo maalin ah aynu si habboon u soconno, oo yaynaan ku soconin rabshad
iyo sakhraannimo, yaynan ku socon sinada iyo fisqiga, yaynaan ku soconin caytan iyo hinaase.
[14] Laakiin Sayid Ciise Masiix huwada, oo jidhka ha ka fikirina si aad damacyadiisa u
samaysaan.

## Waa In La Waaniyo Kuwa Xagga Rumaysadka Ka Liita

**14** Kii rumaysadka ka liita soo dhaweeya, hana kula doodina ra'ayadiisa. [2] Mid baa aaminsan
inuu wax walba cuni karo, qofkii itaal yarse wuxuu cunaa khodaarta. [3] Qofkii wax walba cunaa
yuusan quudhsanin qofkii aan waxba cunin, qofkii aan waxba cuninna yuusan xukumin qofkii
wax cuna, waayo, Eebbe wuu aqbalay isaga. [4] Kumaad tahay kaaga xukumaya adeegga mid
kale? Waayo, sayidkiisa ayuu u taaganyahay ama u dhacaa. Waana la taagi doonaa, waayo,
Rabbigu wuu awoodaa inuu taago. [5] Qof baa aaminsan in maalinu maalin kale ka fadli
badantahay, mid kalena wuxuu aaminsanyahay inay maalmaha oo dhan isku mid yihiin. Mid
kastana maankiisa aad ha u hubsado. [6] Kii maalin wayneeya, Rabbiga dartiisa ayuu u
wayneeyaa, kii wax cunaa, Rabbiga dartiisa ayuu wax u cunaa, waayo, Eebbe ayuu ugu
mahadnaqaa, qofkii aan wax cuninna, Rabbiga dartiisa ayuu cuntada isaga daayaa oo Eebbe
ayuu ku mahadnaqaa. [7] Midkeenna naftiisa uma noola oo midkeenna naftiisa uma dhinto.
[8] Waayo, haddaynu noolnahay, Rabbigaynu u noolnahay, haddaynu dhimanana, Rabbigaynu u
dhimannaa, sidaas daraaddeed haddaynu noolnahay iyo haddaynu dhimannaba, Rabbigaa ina
leh. [9] Waayo, sababtaas ayuu Masiixu u dhintay, una soo noolaaday si uu Rabbi ugu noqdo
kuwii dhintay iyo kuwa noolba. [10] Adigu maxaad walaalkaa u xukuntaa? amase adigu maxaad
walaalkaa u quudhsataa? Waayo, kulligeen waxaynu hor istaagi doonnaa kursiga
maxakamadda Eebbe. [11] Maxaa yeelay, waxaa qoran, Noloshaydaan ku dhaartaye, ayuu
Rabbigu leeyahay in jilib walba uu ii sujuudi doono, Carrab walbana Eebbe qiri doono.[206*]
[12] Marka midkeen walba Eebbe ayaa la xisaabtami doonaa.

205 Baxniintii 20:13-15 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:17-21 iyo Laawiyiintii 9:18

206 Ishacyaah 54:23

## Waxaad Cunayso Awgeed Walaalkaa Turunturro Ha Ku Noqonin

13 Sidaas daraaddeed mar dambe yaynaan is xukumin, laakiinse tan ka fikira inuusan ninna
walaalkii u dhigin dhagax uu ku turunturroodo ama wax kalee oo hor istaaga.[207*] 14 Waan
ogahay, waanan ka yaqiinsanahay xagga Sayid Ciise, inayna waxba iskood xaaraan u ahayn,
laakiinse qofkii go'aansada in wax cayiman ay xaaraan ka yihiin, qofkaas waxaasu xaaraan
bay ka noqdaan. 15 Waayo, hadduu walaalkaa cuntadaada ka xumaado, jacaylka kuma
dhaqantid. 16 Haddaba wanaaggiinna yaan wax laga sheegin. 17 Waayo, boqortooyada Eebbe
ma aha wax lo cuno iyo wax la cabbo, laakiinse waa xaqnimo iyo nabad iyo farxad ku jira
Ruuxa Qudduuska ah. 18 Haddaba qofkii Masiixa sidaa ugu adeega, Eebbe ayuu ka farxiyaa
xagga dadkana ammaan buu ka helaa. 19 Sidaas daraaddeed haddaba aynu ku dadaalno wixii
nabad keenaya iyo wixii uu midkeenba midka kale ku dhisayo. 20 Shaqada Eebbena ha u
burburina cunto aawadeed. Hubaal wax walba waa daahir, laakiinse ma habboona in qof kale
wax la cuno lagu turunturreeyo. 21 Way wanaagsan tahay inaadan hilib cunin ama khamri
cabbin ama aadan samaynin wax kale oo walaalkaa ku turunturroodo. 22 Waxaad aaminsan
tahay adiga iyo Eebbe ayay idiin dhaxaysaa. Waxaa barakaysan qofkii aan isku xukumin wixii
isaga la qummanaada. 23 Laakiinse qofkii shakiya hadduu wax cuno, wuu xukuman yahay,
maxaa yeelay, muusan rumaysad wax ku cunin, oo wax kasta oo aan rumaysad ku salaysnayn
waa dembi.

## Tusaalaha Ciise Masiix

**15** Kuweenna xoogga leh waxaa waajib inagu ah inaynu qaadno awood darrida kuwa tabarta
daran, oo aynaan nafteenna ka farxinin. 2 Midkeen walba deriskiisa ha daryeelo oo wax
wanaagsan oo uu ku dhismo ha u sameeyo. 3 Waayo, Masiixuba naftiisa kama farxinin,
laakiinse sida qoran Caydii kuwii adiga ku caayay ayaa igu dul dhacday.[208*] 4 Waayo, wax alla
wixii horay loo qoray waxaa loo qoray wax barashadeenna, si aynu dulqaadka iyo dhiirri galinta
Kittabka rajo ugu lahaanno. 5 Eebbaha dulqaadka iyo dhiirri galintu ha ka dhigo in midkiinba
midka kale la fikir ahaado sida Ciise Masiix, 6 Si aad isku qalbi iyo isku af ugu ammaantaan
Eebbaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix.

## Injiilka Loogu Bishaareeyay Dadka Aan Yuhuudda Ahayn

7 Sidaas daraaddeed isa soo dhaweeya sida Masiixuba idiin soo dhaweeyay, si Eebbe loo
ammaano. 8 Waayo, waxaan idinku leeyahay, Masiixu wuxuu noqday kuwa gudan
adeegahooda, runta Eebbe aawadeed, si uu u xaqiijiyo ballanqaadyadii awowayaashii horay la
siiyay, 9 Iyo si ay ummaduhu Eebbe u ammaanaan naxariistiisa aawadeed, sida qoran
Sidaas daraaddeed waxaan kugu ammaani doonaa ummadaha dhexdooda, Oo magacaaga
ayaan qasiido u qaadi doonaa.[209*] 10 Oo haddana wuxuu leeyahay
Ummadahow, la riyaaqa dadkiisa.[210*] 11 Oo haddana Rabbiga ammaana ummadaha oo
dhano, Dadka oo dhammaantood ha ammaanaan isaga.[211*] 12 Oo haddana Ishacyaah wuxuu

207 Ama wax kale oo korintaankiis/keeda hor istaaga oo caqabad ku noqday hadday tahay wax la cuno ama la cabbo ama la xidho ama hab nololeedkaaga.

208 Sabuur 69:9

209 Samuu'eel Labaad 22:50 iyo Sabuur 18:49

210 Sharciga Kunoqoshadiisa 32:43

leeyahay Waxaa iman doona xididka Yesay iyo ka u soo baxaya inuu u taliyo ummadaha,
Isaga ayayna ummaduhu wax ku rajayn doonaan.[212*] [13] Eebbaha rajadu ha idinka buuxiyo
farxad iyo nabad oo dhan, idinkoo rumaysad leh, si rajadiinnu ugu siyaaddo xoogga Ruuxa
Qudduuska ah.

### Bawlos Adeegihii Dadka Aan Yahuudda Ahayn

[14] Oo aniga qudhaydu waxaan hubaa, walaallayaal, inuu wanaag idinka buuxo oo laydinka
buuxiyay aqoon oo dhan oo aad awooddaan inaad iswaanisaan. [15] Laakiinse waxyaabaha
qaarkood si geesinimo leh ayaan idiinku soo qoray si aan idiin xusuusiyo, nimcadii xagga
Eebbe layga siiyay aawadeed; [16] Si aan dadka aan Yuhuudda ahayn ugu noqdo adeegihii Ciise
Masiix, anigoo shaqada wadaadnimada u qabanaya Injiilka Eebbe, si sadaqada dadka aan
Yuhuudda ahayn loo aqbalo iyadoo qudduus lagaga dhigay Ruuxa Qudduuska ah. [17] Haddaba
xagga Ciise Masiix waxaan leeyahay sabab aan u faano, waana adeegga aan Eebbe u hayo.
[18] Waayo, wax inaan ka hadlo kuma dhiiran doono, wixii uu Masiixu iga dhex qabtay mooyee,
taasoo ah inuu dadka aan Yuhuudda ahayn ku soo hanuuniyo addeecidda oo uu igaga dhex
shaqeeyo hadal iyo ficilba, [19] Iyo calaamooyin xoog leh iyo waxyaabo la yaab leh iyo xoogga
Ruuxa Qudduuska ah, oo sidaas ayaan Injiilka Masiixa ugu wada wacdiyay Quddus iyo
hareeraheeda iyo ilaa iyo Illurikon. [20] Oo tan ayaa ah ujeeddadayda, waa inaan Injiilka ku
wacdiyo meel aan magaca Masiixa horay looga aqoonin, si aanan wax uga dul dhisin
aasaaska nin kale dhigay. [21] Laakiinse, sida qoran

Waxaa arki doona kuwo uusan warkiisu gaadhin oo Kuwo aan maqlinna way garan doonaan.

### Bawlos Wuxuu Qorshaystay Inuu Rooma Booqdo

[22] Sidaas daraaddeed marar badan oon idiin iman lahaa ayaa layga hor istaagay, [23] laakiinse
hadda maadaama oo ayna gobolkan meelu iiga banaanayn oon u boholyoobay inaan sannado
badan idiin imaaddo, [24] Waxaan rajaynayaa markaan Isbaaniya tago inaan safarkayga idinku
arko oo aad idinkuna halkaas iga ambaba bixisaan, markaan cabbaar la joogiinna ku raaxaysto
ka dib, [25] Laakiinse hadda waxaan aadayaa Quddus si aan qudduusiinta ugu adeego.
[26] Waayo, reer Makedoniya iyo Akhaya waxay jeclaysteen inay wax u uruuriyaan masaakiinta
ka midka ah qudduusiinta Quddus joogta. [27] Way jeclaysteen, waana ku waajib inay sidaa
yeelaan. Waayo, hadday dadka aan Yuhuudda ahayn wax ka helaan barakadooda ruuxiga ah,
markaas waxaa waajib ku ah iyagana inay waxyaabaha maadiga ah ugu adeegaan. [28] Sidaas
daraaddeed markaan tan dhammeeyo oo aan iyaga ku hubsado midhahan, idinka ayaan idin
soo mari doonaa, anigoo Isbaaniya u socda. [29] Oo waxaan hubaa markaan idiin imaaddo inaan
idiin iman doono anigoo barakada Injiilka Masiixa ka buuxa. [30] Waxaan idinka codsanayaa
walaallayaal, Rabbigeenna Ciise Masiix iyo jacaylka Ruuxa, inaad igula dadaashaan
ducadiinna ood Eebbe ii baridaan, [31] in layga samata bixiyo kuwa caasiyiinta ah ee Yahuudiya
jooga iyo in adeegga aan Quddus u qabanayo uu noqdo mid ay qudduusiintu aqbalaan, [32] Si
aan anigoo faraxsan idiinku imaaddo hadduu Eebbe yidhaahdo oo aan dhiiri galin uga helo la
jooggiinna. [33] Eebbaha nabaddu ha idinla jiro dhammaantiin. Aamiin.

---

211 Sabuur 117

212 Ishacyaah 11:10

**Salaan**

**16** Waxaan idin kala dar daarmayaa walaasheen Foybi oo ah mid u adeegta kiniisadda ku
taalla Kenekhreya, 2 Si aad iyada ugu soo dhawaysaan Rabbiga dartii, si qudduusiinta u
qalanta oo aad ka caawinsaan wax kasta oo ay idiinka baahan tahay, waayo, iyaduba kuwa
badan ayay caawisay iyo xataa aniga qudhaydaba. 3 Igu salaama Bariska iyo Akula, kuwaasoo
igala adeega Ciise Masiix, 4 Kuwaasoo noloshayda aawadeed qoortooda u dhibay. Keligayna
uma mahadnaqayo, laakiinse kiniisadaha dadka aan Yuhuudda ahayn oo dhan ayaa u mahad
celinaya. 5 Sidoo kale igu salaama kiniisadda gurigooda ku kulanta. Igu salaama ka aan aadka
u jecelay Ebaynetos, kaasoo ah midhihii ugu horreeyay ee Masiixa ee Aasiya. 6 Maryamana igu
salaama, taasoo aad idiinku adeegtay. 7 Igu salaama Andaronikos iyo Yuniyas oo
qaraabadayda ah oo layla xidhay, kuwaasoo caan ka ah rasuullada dhexdooda, kuwaasoo
aniga hortay Masiixa ku jiray. 8 Ambaliyas, ka aan xagga Rabbiga dartii u jecelahayna igu
salaama. 9 Urbanos oo Masiixa nagala adeegay iyo saaxiibkay Istakhusna igu salaama.
10 Abellees oo Masiixu u bogayna igu salaama. reer Aristobulosna igu salaama. 11 Herodiyosna
oonnu qaraabo nahayna igu salaama. Igu salaama reer Narkisos oo Rabbiga ku jira.
12 Tarufayna iyo Tarufoosa oo Rabbiga u adeegana igu salaama. Gacaliso Bersis oo Rabbiga
aad ugu adeegtana igu salaama. 13 Igu salaama Rufus oo uu Rabbigu doortay iyo hooyadiis oo
hooyaday oo kale ah. 14 Igu salaama Asunkiritos iyo Filegoon iyo Hermees iyo Batrobas iyo
Hermaas iyo walaalaha iyaga la jooga. 15 Igu salaama Filologos iyo Yulya iyo Neere'us iyo
walaashii iyo Olumbas iyo qudduusiinta iyaga la jooga oo dhan. 16 Midkiinba midka kale ha ku
salaamo dhunkasho qudduus ah. Kiniisadaha Masiixa oo dhanna way idin soo salaamayaan.
17 Haddaba walaallayaal, waxaan idinka codsanayaa inaad ka feejignaataan kuwa kicinaya
kala qaybsanaanta iyo caqabado ka soo hor jeeda wax baridda saxda ah ee laydin baray, kana
leexda iyaga. 18 Kuwa noocaas ahu Rabbigeenna Masiixa uma adeegaan, laakiinse waxay u
adeegaan calooshooda; hadalkooda macaan oo wanaagsan ayay ku duufsadaan quluubta wax
ma garatada. 19 Warka ku saabsan addeeciddiinna wuxuu gaadhay dadka oo dhan. Sidaas
daraaddeed aad baan idiinku faraxsanahay, laakiin waxaan jeclaan lahaa inaad xigmad u
lahaataan waxa wanaagsan, oo aad ka eed la'aataan wixii shar ah. 20 Oo Eebbaha nabaddu
Shaydaanka mar dhaw ayuu cagihiinna hoostooda ku burburin doonaa. Nimcada Rabbigeenna
Ciise Masiix ha idinla jirto. 21 Waxaa idin soo salaamaya Timoteyos oo ila adeega iyo Lukiyos
iyo Yasoon iyo Soosibater kuwaasoo ah qaraabadayda. 22 Anigoo Tertiyos ah oo warqaddan
qorayna, Rabbigaan idinku salaamayaa. 23 Gayos, oo aniga iyo kiniisadda oo dhan aannu marti
u nahayna wuu idin soo salaamayaa. Erastos oo ah qasnajiga magaalada iyo walaalkeen
Kowartosna way idin soo salaamayaan. 24 Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla jirto
kulligiin. Aamiin. Ammaan 25 Haddaba ammaanu ha u ahaato ka kara inuu idinku xoogiyo
Injiilkayga iyo wacdiga ku saabsan Ciise Masiix iyo muujinta sirta ah tan iyo weligeed,
26 laakiinse hadda lagu muujiyay Kitaabka nebiyada sida amarka Eebbaha daa'imka ah oo
ummadaha oo dhan la ogeysiiyay si ay u addeecaan rumaysadka. 27 Eebbaha kaligii ah ee
xigmadda leh Ciise Masiix ammaanu ha ugu ahaato waligeed. Aamiin

## WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER KORINTOS

### Salaan Iyo Mahadnaq

**1** Bawlos oo loogu yeedhay inuu doonista Eebbe rasuulkii Ciise Masiix ku ahaado, iyo
walaalkeen Soostenees, 2 Waxaannu warqaddan u qoraynaa kiniisadda Eebbe ee Korintos,
kuwaasoo qudduus lagaga dhigay Ciise Masiix oo loogu yeedhay inay qudduusiin ahaadaan
iyo kuwa meel kasta jooga ee loogu yeedho magaca Rabbigeenna Ciise Masiix oo ah
Rabbigooda iyo keennaba. 3 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbeheen
ah iyo Sayid Ciise Masiix.

### Mahadnaq Ku Saabsan Hadiyadaha Ruuxiga Ah

4 Mar kasta Eebbe ayaan idiinku mahadnaqaa, nimcada Eebbe ee Ciise Masiix laydinku siiyay
aawadeed. 5 Maxaa yeelay, wax walba hodan buu idinkaga dhigay, ha ahaato hadal walba iyo
aqoon walbaba, 6 Xataa sida markhaatifurka Masiixa dhexdiinna loogu xaqiijiyay, 7 Si ayna
hadiyad kaliya idiinka dhinmanaanin markaad sugaysaan muujinta Rabbigeenna Ciise Masiix,
8 kaasoo idin xoojin doona ilaa iyo dhammaadka, si aad u eed la'aataan maalinta Rabbigeenna
Ciise Masiix. 9 Eebbe waa aamin, kaasoo idiinku yeedhay inaad xidhiidh la yeelataan Wiilkiisa
Ciise Masiix oo Rabbigeenna ah.

### Dadka Kiniisaddu Way Kala Qaybsameen

10 Waxaan walaallayaal, magaca Rabbigeenna Ciise Masiix idinkaga codsanayaa, inaad
dhammaantiin isku cod ku wada hadashaan oo aydaan kala qaybsamin, laakiinse aad ku
midowdaan xagga fikirka iyo talada. 11 Waayo, dadka reer Khalo'ee waxay iiga kiin warrameen
inay dood iyo khilaaf inka dhex jiraan. 12 Taas waxaan ula jeedaa mid walba wuxuu leeyahay
Anigu waxaan raacsanahay Bawlos mid kalena Anigu waxaan raacasanahay Abolloos mid
kalena Anna Keeyfas mid kalena Aniguna Masiixa. 13 Masiixu miyuu kala qaybsamaa? Ma
Bawlos baa iskutallaabta laydiinku qodbay? Ama ma waxaa laydinku biyo galiyay magaca
Bawlos? 14 Waxaan Eebbe ugu mahadnaqayaa inaanan midkiinna biya galinin, Kirisbos iyo
Gayus mooyee, 15 Si uusan ninna u odhanin, Waxaa laydinku biyo galiyay magaca Bawlos.
16 Waxaa kale oon biyo galiyay qoyska reer Istefanas. Weliba ma garayo inaan cid kale biyo
galiyay iyo in kale. 17 Waayo, Masiixu iima soo dirin inaan cid biya galiyo, laakiinse wuxuu ii soo
diray inaan dadka Injiilka ku wacdiyo oo aanan adeegsanin afmiinshaarnimo, waaba intaasoy
iskutallaabta Masiixa xoog beeshaaye.

### Ciise Masiix Waa Xoogga Iyo Xigmadda Eebbe

18 Waayo, erayga iskutallaabtu waa u nacasnimo kuwa halaagmaya, laakiinse kuweenna
badbaadaya waa xooggii Eebbe. 19 Maxaa yeelay, waxaa qoran Xigmadda kuwa xigmadda leh
waan baabbi'in doonaa Oo garashada kuwa garashada leh ayaan diidi doonaa.[213*] 20 Aaway ka
xigmadda leh? Aaway ka cilmiga leh? Aaway ka xilligan ugu doodda badan? Miyuusan Eebbe

213 Ishacyaah 29:14

nacasnimo ka dhigin xigmadda dunida? 21 Maadaama oo Eebbe xigmaddiis ayna Dunidu
Eebbe ku garanin xigmaddeeda wuxuu Eebbe xigmaddiisa awadeed ku farxay inuu muminiinta
ku badbaadiyo nacasnimada wacdiga. 22 In kasta oo ay Yuhuuddu calaamooyin doonaan oo
Giriigtuna ay xigmad doonaan, 23 Laakiinse annaguse waxaannu dadka ku wacdinnaa Masiixa
oo iskutallaabta lagu qodbay, taas oo Yuhuudda u ah wax lagu turunturoodo, Giriigtana u ah
nacasnimo. 24 Laakiin kuweenna loo yeedhayse, ha ahaadeen Yuhuudda ama Giriigta, Masiixu
waa xooggii Eebbe iyo xigmadda Eebbe. 25 Waayo, (waxa u muuqda) Nacasnimada Eebbe
way ka xigmad badantahay xigmadda dadka, oo (waxa u muuqda) Awood darrida Eebbana
wuu ka xoog badanyahay xoogga dadka. 26 U fiirsada waxa laydiinku yeedhay, walaallayaal,
waayo kuwo badan oo markii loo yeedhay dunida meel sare ka joogay ama kuwo badan oo
dunida aqoon ku lahaa markii loo yeedhay, ama qaar badan oo xoog lahaa ama qaar badan oo
gob ah ma jirin, 27 laakiinse Eebbe wuxuu doortay waxyaaaha dunida nacasnimo ku ah si uu u
ceebeeyo kuwa xigmadda leh, oo Eebbe wuxuu doortay waxyaabaha aan awoodda lahayn si
uu u ceebeeyo waxyaabaha awoodda leh. 28 Oo Eebbe wuxuu doortay waxyaabaha hoose iyo
waxyaabaha la quudhsado, xataa waxyaabaha aan jirin, si uu waxyaabaha jira wax aan jirin
uga dhigo, 29 Si uusan qofna ugu faanin Eebbe hortiisa. 30 Laakiin fadligiisa aawadeed waxaad
ku jirtaan Ciise Masiix kaasoo fadliga Eebbe inoogu noqday xigmaddeenna iyo
xaqnimadeenna iyo qudduusnimadeenna iyo bad baadadeennaba, 31 Sidaa darteed sida qoran
Kii faanaya, Rabbiga ha ku faano.[214*]

### Xigmadda Dadka Iyo Muujinta Eebbe

**2** Oo Aniguna walaallayaal markaan idiin imid, lama imanin af tahanimo ama xigmad, markaan
Eebbe u marag furayay, 2 Waayo, waxaan go'aansaday inaanan dhexdiinna wax kale ku
ogaanin Ciise Masiix oo ah ka iskutallaabta lagu qodbay mooyee. 3 Oo waxaan idinkula joogay
tabardarri iyo cabsi iyo gariir badan. 4 Haddaba hadalkayga iyo wacdigayga toona ma ahayn
mid ku salaysan xigmadda banii aadanka, laakiinse waxay ku salaysnaayeen muujinta Ruuxa
iyo xoogga Eebbe, 5 Si uuna rumaysadkiinnu ugu salaysnaanin xigmadda dadka, laakiinse uu
ugu salaysnaado xoogga Eebbe.

### Xigmadda Eebbe

6 Waxaannu xigmadda kula hadalnaa kuwa indheer garadka ah, taasuna ma aha xigmadda
dunida ama xigmadda amiirrada dunida oo ah kuwo la baabbi'in doono, 7 laakiin waxaannu ku
hadalnaa xigmadda Eebbe ee qarsoon ee Eebbe dunida ka hor ugu tala galay ammaanteenna
aawadeed, 8 Taasoo uuna amiirrada dunidan midkoodna garanaynin, waayo, hadday taas
garan lahaayeen, iskutallaabta kumayna qodbeen Rabbiga ammaanta, 9 Laakiin sida qoran,
Wax ayna ilu arag oo ayna dhegu maqal Oo aan qalbiga dadka gelin, ayuu Eebbe u
diyaariyay kuwa isaga jecel.[215*] 10 Laakiin Eebbe ayaa annaga waxaas noogu muujiyay Ruuxa,
waayo, Ruuxu wuxuu baadhaa wax kasta, xataa waxyaabaha qotada dheer ee Eebbe.
11 Waayo, maxay dadku ka ogyihiin waxa qofka uurkiisa ku jira, ruuxta qofkaas ku jirta
mooyee? Sidaas oo kale ninna ma garanayo waxyaabaha Eebbe, Ruuxa Eebbe mooyee.
12 Haddaba annagu maanaan helin ruuxa dunida, laakiinse waxaynu helnay Ruuxa Eebbe ka

214 Yeremyaah 9:24
215 Ishacyaah 64:4

yimid, si aynu u fahanno waxyaabaha uu Eebbe nimcadiisa inagu siiyay. 13 Oo annagu
waxyaabahaas ugama hadalno hallo lagu barto xigmadda dadka, laakiinse waxa uu Ruuxu na
baro ayaannu ku hadalnaa, annaga oo waxyaabaha ruuxiga ah si ruuxi ah u macnayna.
14 Qofka dabiiciga ahu ma aqbalo waxyaabaha Ruuxa Eebbe, waayo, nacasnimo ayay ula
muuqataa, mana garan karo, maxaa yeelay, ruuxa ayaa lagu gartaa. 15 Laakiinse qofka ruuxiga
ahu wax walba wuu imtixaamaa, laakiinse isaga qudhiisa ninna ma imtixaamo. 16 Waayo, yaa
og maanka Rabbiga si uu wax baro isaga? Laakiin annagu waxaannu leennahay maanka
Ciise.

### Ka Fogaada Wax Walba Oo Kala Qaybsanaan Keena

**3** Anna, walaallayaal, idiinma hadli karin sidii dad xagga ruuxa ka dhisan, laakiin sida dad
jidhka ku jira, sidii idinkoo ilmo yaryar ah oo ku jira Masiixa. 2 Waxaan idinku quudiyay caanooo
idinma siinin cunto adag, waayo, weli maydaan cuni karteen, haddana weli ma kartaan.
3 Maxaa yeelay, weli jidhkaad ku jirtaan, waayo, intay xaasidnimo iyo af lagaaddo indin dhex
taallo miyaydaan jidhka ku jirin oo miyaydaan sida dadka caadiga ah u dhaqmaynin?
4 Waayo, markuu mid yidhaahdo Anigu Bawlos baan raacsanahay mid kale Anna Abolloos
miyaydaan dad caadi ah ahayn? 5 Haddaba muxuu yahay Abolloos? Bawlosna muxuu yahay?
Waa adeegayaashii aad iyaga rumaysadka ku rumaysateen, mid walba siduu Rabbigu ugu xil
saaray. 6 Anigu waan beeray, Abolloosna wuu waraabiyay, laakiin Eebbe ayaa koriyay. 7 Sidaa
aawadeed ka beeraa iyo ka waraabiya toona waxba ma aha, laakiin waa Eebbe ka koriya. 8 Ka
beeraa iyo ka waraabiyaba waa isku mid, laakiin mid kasta wuxuu heli doonaa abaalkiisa siday
hawshiisu ahayd. 9 Maxaa yeelay, waxaannu nahay shaqaalihii Eebbe, idinkuna waxaad tihiin
beertii Eebbe iyo dhismihii Eebbe. 10 Sidii ingineer khabiir ku u leh dhismaha ayaan aasaaska
ku dhigay nimcada Eebbe i siiyay, mid kalena wuu ka dul dhisaa. Laakiin mid kastaba ha ka
fiirsado siduu wax uga dul dhisayo. 11 Waayo, ninna ma dhigi karo aasaas kale kii la dhigay oo
ah Ciise Masiix mooyee. 12 Laakiin nin hadduu aasaaska ka dul dhiso dahab, ama lacag, ama
dhagaxyo qaali ah, ama qoryo, ama caws, ama bal, 13 nin kastaba shaqadiisa waa la muujin
doonaa. Waayo, maalinta ayaa caddayn doontaa, maxaa yeelay, dab ayaa lagu muujiyaa oo
nin walba shaqadiisu waxay tahay dabka ayaa tijaabin doona. 14 Haddaba qof alla qofkay
shaqadii uu qabtay waarto, abaal buu heli doonaa. 15 Qof alla qofkii ay shaqadiis uu qabtay
gubatana, wuu khasaari doonaa, isaga qudhiisuna wuu badbaadi doonaa, laakiin sidii wax dab
laga soo baxiyay oo kale ayuu u badbaadi doonaa. 16 Miyaydaan ogayn inaad tihiin macbudkii
Eebbe oo Ruuxa Eebbe idinku jiro? 17 Nin alla ninkii macbudka Eebbe burburiya, isagana
Eebbe ayaa burburin doona, waayo, macbudka Eebbe waa qudduus, waana idinka
macbudkaasu. 18 Ninna yuusan naftiisa khiyaamin. Hadduu mid idinka mid ahu u maleeyo inuu
dunidan xigmad ku leeyahay, doqon ha iska dhigo si uu xigmad u yeesho. 19 Waayo, xigmadda
dunidannu Eebbe aktiisa waa kan doqonimo. Waayo, waxaa qoran, Isagu kuwa xigmadda leh
makrigooda ayuu ku qaban doonaa[216*], 20 Haddana, Rabbigu wuu ogyahay fikirka kuwa
xigmadda leh inayna waxba tarin.[217*] 21 Sidaa aawadeed ninna yuusan dadka u faanin. Waayo,
wax walba idinkaa leh, 22 Hadduu yahay Bawlos, ama Abolloos, ama Keeyfas, ama dunida,
ama nolosha, ama dhimashada, ama waxyaabaha hadda jooga, ama waxyaabaha iman
doona, dhammaan idinkaa leh. 23 Idinkuna kuwa Masiixaad tihiin, Masiixuna waa kii Eebbe.

---

216 Ayuub 5:13
217 Sabuur 94:11

## Adeeggii Rasuullada

**4** Sidan hana loo qiimeeyo, inaannu nahay adeegayaashii Masiixa iyo wakiillada siraha
qarsoon ee Eebbe. 2 Haddaba waxaa laga doonayaa wakiillada inay aamin noqdaan.
3 Laakiinse aniga way ila yartahay inaad idinku i xukuntaan ama inay dad kale i xukumaan,
xataa aniga qudhaydu isma xukumo. 4 Waayo, waxba iskuma ogi, laakiinse taasu ma aha in
xaq la iga dhigay, waayo, Rabbiga ayaa i xukumi doona. 5 Sidaa aawadeed wakhtiga oon
gaadhin cidna ha xukumina ilaa iyo inta uu Rabbigu ka imanayo, ka waxyaabaha gudcurka ku
qarsoon iftiimin doona oo muujin doona qalbiga, oo markaas nin walba wuxuu ammaantiisa ka
heli doonaa Eebbe. 6 Haddaba, arrimahaas walaallayaal faa'iidadiinna ayaan qudhayda iyo
Abolloosba u soo qaaday, si aad nooga barataan inaydaan ka gudbin waxyaabaha qoran oo
uusan midkiinna midka kale ugu faanin. 7 Waayo, maxaad kuwa kale kaga duwan tahay?
Maxaad haysataa oo aan lagu siinin? Marka haddii lagu siiyay maxaad u faanaysaa sidii
adigoon lagu siinin? 8 Mar hore ayaabad horay u dharagteen ood hodan noqoteen! oo aad
boqorro wax xukuma noqoteen ood naga maaranteen. Waan jeclaan lahaa inaad xukunka wax
naga siisaan. 9 Waayo, waxaan u malaynayaa inuu Eebbe naga dhigay haddaannu rasuulladii
nahay kuwa ugu dambeeyay, sidii kuwo dhimashada lagu xukumay oo kale, maxaa yeelay,
wax ay nalaga dhigay wax ay dunida iyo malaa'igaha iyo dadkuba daawadaan. 10 Annagu
waxaannu nahay doqomo Masiixa aawadiis, laakiinse idinku caqli baad ku leedihiin xagga
Masiixa. Annagu waannu tabardarrin nahay, laakiinse idinku xoog baad leedihiin, idinku
ammaan baad leedihiin, laakiinse annaga waa nala quudhsadaa. 11 Saacaddan la taaganyahay
waannu gaajaysan nahay oo waannu harraadsan nahay oo waannu arradan nahay oo waa
nala garaacay oo meel aannu u hoyanno ma haysanno. 12 Oo waannu hawshoonnay annagoo
gacmahayaga ku shaqayna, markii nala caayo waannu ducaynaa oo markii nala dhibo waannu
u dulqaadannaa. 13 Markii nala xanto, si qabow ayaannu uga jawaabnaa oo waxaannu
noqonnay oonnu ilaa iyo hadda nahay uskagga dunida iyo wax kasta oo la iska tuuray. 14 Anigu
waxyaabahaas uma qorayo inaan ceeb idin dareensiiyo, laakiinse inaan idiin waaniyo sida
carruurtayda aan jeclahay oo kale. 15 In kastood leedihiin toban kun oo Masiixa idinku
rabbeeyay, aabbayaal badan ma lihidin, waayo, Ciise Masiix ayaan idinku dhalay xagga
Injiilka. 16 Haddaba waxaan idinka codsanayaa inaad igu dayataan. 17 Sidaas aawadeed
waxaan idiin soo diray Timoteyos oo wiilkayga xagga Rabbiga ah oo aan jeclahay oo aamin
ah. oo wuxuu idin xusuusin doonaa hab dhaqankayga xagga Masiixa, sidaan meel kasta wax
ugu baro kiniisad walba. 18 Qaar baa kibray sidii anigoo aan idiin imanaynin. 19 Laakiin dhawaan
ayaan idiin iman doonaa, hadduu Rabbigu yidhaahdo oo markaasaan arki doonaa kuwa kibray
hadalkooda ma ahee xooggooda. 20 Waayo, boqortooyada Eebbe hadal ma ahee waa xoog.
21 Maxaad filaysaan? Ma inaan ul idiinla imaaddo, mise jacayl iyo ruux qabow?

## Sino Aad U Xun

**5** Meel walba waxaa laga maqlay inay dhexdiinna sino ka jirto, sinada noocaas ahna xataa
dadka aan Yuhuudda ahayn ma sameeyaan, taasoo ah inuu midkiin xaaskii aabbihii u
galmoodo. 2 Weliba waad kibirsan tihiin, kamana murugootaan, si kii waxaas sameeyay
dhexdiinna looga cidhib tiro. 3 Waayo, runtii, in kastoo jidhkaygu idinka maqan yahay, ruuxaygu
wuu idinla joogaa, oo sidii anigoo jooga ayaan kii waxaa sameeyay ku xukumay. 4 magaca
Rabbigeenna Ciise. Markaad isugu timaaddaan xoogga Rabbigeenna Ciise ruuxayguna wuu
idinla joogaaye, 5 Waa inaad kaas oo kale Shaydaanka u dhiibtaan si jidhku u baabba'o, oo
ruuxiisu u badbaado maalinta Rabbiga. 6 Faankiinnu ma wanaagsana. Miyaydaan ogayn inay

in yar oo khamiir ahu qooshka oo dhan khamiiriso? 7 Khamiirkii hore iska safeeya si aad u noqotaan qoosh cusub sidii idinkoo aan khamiirsanayn. Waayo, Masiixaa ah Kormariddeenna waana lay noo sadaqeeyay. 8 Haddaba yaynaan ku ciidin khamiirkii hore ama khamiirka xumaanta iyo sharka, laakiinse aan ku ciidno furin khamiirka la' ee daacadda iyo runta ah.
9 Waxaan warqaddaydii idiinku soo qoray inaydaan kuwa sinaysta raacin. 10 Ulamana jeedo kuwa sinaysta ee dunidan, iyo kuwa damaca badan iyo kuwa wax dulma, iyo kuwa sanamka caabuda, waayo, hadday sidaas tahay waxay noqon lahayd inaad dunida ka baxdaan.[218*]
11 Laakiin hadda waxaan idiin soo qoray, Ha raacina qof walaal loogu yeedho hadduu sinaysto ama wax badan damco, ama sanam caabudo, ama wax caayo, ama sakhraamo, ama wax dulmo. Waa inaydaan kaasoo kale xataa wax la cunin. 12 Waayo, maxaa iigu jira inaan xukumo kuwa dibadda jira? Idinku miyaydaan xukumin kuwa gudaha ku jira? [219*] 13 Kuwa dibadda jira Eebbe ayaa xukuma. Idinkuse ka sharka leh dhexdiinna ka saara.

### Dacwado Masiixiyiinta Ka Dhan Ah

**6** Midkiin hadduu mid kale kiis ku haystu, miyuu ku dhacaa inuu ku dacweeyo kuwa aan xaqa ahayn hortooda halkii uu qudduusiinta hortooda ka dacwayn lahaa? 2 Mise miyaydaan ogayn inay qudduusiintu dunida xukumi doonaan? Marka haddaad dunida xukumaysaan, miyaydaan ahayn kuwo u qalma inay arrimaha yaryar xukumaan? 3 Miyaydaan ogayn inaynu malaa'igaha xukumi doonno? Intee ka badan ayaynu arrimaha noloshan ku saabsan xukumaynaa?
4 Haddaba haddii aad arrimo noloshan ku saabsan leedihiin, kuwa aan kiniisadda waxba ka ahayn ha xukumaan? 5 Waxaan sidaa u leeyahay inaan idinka yixyixiyo. Ma dhici kartaa inaan dhexdiinna laga helaynin mid xigmad leh oo karti u leh inuu u gar qaaado walaalihii! 6 Laakiin walaal ayaa walaalkii dacweeya oo weliba ka dacweeyo kuwa aan rumaysadka lahayn hortooda? 7 In midkiinba midka kale dacweeyo ayaaba nasiib darro idinku ah. Maad iska daysaan, ha laydin dulmiyee? Maad iskaba daysaan, ha laydin dhacee? 8 Laakiin idinka qudhiinnu xumaan baad samaysaan oo wax baad dulmidaan, xataa walaalihiin. 9 Mise miyaydaan ogayn in kuwa xaqdarrida ku dhaqma ayna boqortooyada Eebbe dhaxli doonin? Yaan laydin khiyaanin. Ama kuwa faasiqiinta ah, ama kuwa sanamka caabuda, ama kuwa sinaysta, ama khaniisiinta, 10 ama tuugada, ama kuwa damca xun, ama kuwa sakhraama, ama kuwa wax caaya, ama kuwa wax dulma, ma dhaxli doonaan boqortooyada Eebbe. 11 Qaarkiin sidaasoo kale ayay ahaan jirteen, laakiin waa laydinka maydhay oo qudduusiin xaq ah ayaa laydinkaga dhigay magaca Sayid Ciise Masiix iyo Ruuxa Eebbaheenna.

### Jidhkiinna Eebbe Ku Ammaana

12 Wax waliba waa ii xalaal, laakiin wax walba iima wanaagsana. Wax walba waa ii xalaal, laakiinse waxba ima addoonsan karaan.[220*] 13 Cuntada waxaa loogu tala galay caloosha, calooshana cuntada, laakiin Eebbe ayaa baabbi'in doona tan iyo taaba. Jidhka looma samaynin sinada ee waxaa loo sameeyay Rabbiga, Rabbigana jidhka. 14 Haddaba Eebbe ayaa sarakiciyay Rabbiga, innagana xooggiisa ayuu inagu sarakicin doonaa. 15 Miyaydaan ogayn in jidhadhkiinnu yahay xubnaha Masiixa? Haddaba ma xubnaha Masiixa intaan qaado ayaan

---

218 Kuwa sinaysta ee dunida wuxuu ka wadaa kuwa gaalada ah een wali rumaynin Injiilka.

219 Kuwa dibaddu waa kuwa Masiixa beeniyay, kuwa guduhuna waa muminiinta.

220 Balwadda dadka addoonsata ayuu ka hadlayaa sida jaadka, daroogada, khamrida, macsida, iwm.

xubno sino ka dhigaa? Ma dhici karto! [16] Ama miyaydaan ogayn in kii saaniyad la midooba la
jidh yahay? Waayo, Eebbe wuxuu leeyahay Labaduba waxay noqon doonaan isku jidh.[221*]
[17] Laakiin kii Rabbiga la midooba waa la ruux. [18] Ka carara sinada. Dembi kale qofkii fala jidhka
dibadda ah ayuu ka sameeyaa, laakiin kii sinaysta jidhkiisuu ku dembaabaa. [19] Ama miyaydaan
ogayn inuu jidhkiinnu yahay macbudka Ruuxa Qudduuska ah ee idinku jira ee aad Eebbe ka
hesheen Oo aydaan idinku islahayn? [20] Waayo, qiimo wayn ayaa laydinku soo iibsaday. Sidaa
aawadeed Eebbe jidhkiinna ku ammaana.

### Arrimaha Ku Saabsan Guurka Iyo Guurla'aanta Iyo Furitaanka

**7** Waxyaabaha aad ii soo qorteen xaggooda, Waxaa nin u habboon inuusan naagba taabanin.
[2] Laakiin si sinada looga hor tago, nin kastaba naagtiisa ha lahaado, naag walbana ninkeeda
ha lahaato. [3] Ninku xaaskiisa xaqqeeda ha siiyo, sidoo kale naagtuna ninkeeda xaqqiisa ha
siiso. [4] Naagtu jidhkeeda uma taliso, laakiin ninkeeda ayaa u taliya, sidoo kale ninkuna jidhkiisa
uma taliyo, laakiin naagtiisa ayaa u talisa.[222*] [5] Ha isdiidina, inaad wakhti go'an ood soon iyo
salaad ku heshiisaan go'aansataan mooyee, oo aad haddana isu timaadaan, si aan
Shaydaanku idiin duufsanin iscelin la'aantiinna aawadeed. [6] Laakiin taas fasax ahaan ayaan u
leeyahay oo idinma amrayo. [7] Oo waxaan jeclaan lahaa inay ragga oo dhan sidayda oo kale
noqdaan. Laakiin nin kastaba hadiyad gooni ah ayuu Eebbe siiyay, kan sidan, kaasna sidaas.
[8] Sidaa daraaddeed waxaan anigu kuwa aan guursanin iyo carmallada laga dhintay ku
leeyahay, Waxaa u wanaagsan inay sidayda oo kale ahaadaan, [9] Laakiin hadday iscelin kari
waayaan ha guursadeen, waayo, inay guursadaan baa u habboon intay himmad la guban
lahaayeen. [10] Kuwa xaasaska leh waxaan ku amrayaa, ka amraya aniga ma aha laakiin waa
Rabbigee, Naagtu yayna ninkeeda ka tegin. [11] Laakiin hadday ka tagto, ha iska guur la'aato
ama ninkeedii ha la heshiiso, ninkuna yuusan naagtiisa ka tegin. [12] Kuwa kale anigu waxaan ku
leeyahay Rabbiga ma ahee, Hadduu mid walaalaha ka mid ahu xaas aan muminad ahayn
leeyahay oo ay raalli ku tahay inay sii wada noolaadaan, yuusan ka tegin.[223*] [13] Oo naagtii nin
aan mumin ahaynu qabo oo uu isna raalli ku yahay inuu la sii noolaado, yayna ninkeeda ka
tegin. [14] Waayo, ninka aan muminka ahayn wuxuu qudduus ku noqdaa naagta, oo naagta aan
muminadda ahayna waxay qudduusad ku noqotaa ninkeeda muminka ah, haddii kale
carruurtoodu nijaas bay ahaan lahaayeen, laakiin hadda waa qudduus. [15] Laakiin hadduu ka
aan muminka ahayn iska tago, ha iska tago. Waxaas oo kale walaalka ama walaashu uma
xanibna. Eebbe nabad ayuu inoogu yeedhay. [16] Waayo, sideed ku ogaanaysaa naagyahay,
inaad ninkaaga badbaadin doonto? Ama sideed ku ogaanaysaa ninyahow, inaad naagtaada
badbaadin doonto?

### Ku Noolaada Xaaladdii La Idiinku Yeedhay

[17] Laakiin qof walba ha u noolaado siduu Rabbigu ugu tala galay iyo siduu Eebbe mid walba
ugu yeedhay. Oo sidaasaan kiniisadaha oo dhan ku amrayaa. [18] Nin baa isaga oo gudan loo
yeedhay? Yuusan mid aan gudnayn noqonin. Ama nin baa isaga oo gudnayn loo yeedhay?

221 Bilowgii 2:4
222 Waxaa jidhka qofka xaaska leh xaq u leh qofka ay isu dhaxeen.
223 Labada is qaba hadduu midkood Rabbiga aqbalo ka kalena aqbali waayo, hadduu kii aan muminka ahayn raalli ku ahaado inuu kii muminka ahaa la sii noolaado, ka muminka noqday waa inuusan furin oo uusan ka tegin.

Yuusan is gudin.[224*] [19] Gudniinku waxa ma taro, gudniin la'aantuna waxba ma tarto, laakiin
waxaa muhiim ah in lagu dhaqmo amarrada Eebbe. [20] Nin kastaba sidii loogu yeedhay, ha sii
ahaado. [21] Ma adigoo addoon ah baa laguu yeedhay? Dan ha ka gelin. Laakiin hadday kuu
suurta gasho inaad xor noqoto ka faa'iidayso. [22] Waayo, kii xagga Rabbiga loogu yeedhay
isagoo addoon ah, xagga Rabbiga xor buu ka yahay, sidoo kale kii isagoo xor ah loo yeedhay,
waa adeegihii Masiixa. [23] Qiimo wayn baa laydinku soo iibsada ee dadka addoomo ha
noqonina. [24] Walaallayaal, nin kastaba xaaladdii uu ku jiray markii loogu yeedhay Eebbe ha
kula joogo. [25] Haddaba amar bikradaha doonan ku saabsan kama hayo xagga Rabbiga, laakiin
waxaan kula talinayaa sidii mid Rabbigu ugu naxariistay inuu aamin ahaado. [26] Sidaa
daraaddeed waxay ila tahay dhibaata hadda taagan aawadeed inay qofka u wanaagsantahay
inuu sidayda oo kale sii ahaado. [27] Ma naag baa kugu mehersan? Ha ku dadaalin inaad furto.
Ma naag la'aan baad tahay? Ha ku dadaalin inaad naag mehersato. [28] Laakiin haddaad
guursato maadan dembaabin, bikraduna hadday guursato mayna dembaabin, laakiin kuwaas
oo kale xagga jidhka dhibaato ayay kala kulmi doonaan, aniguna dhibkaas ayaan idiin
diidanahay. [29] Laakiin waxaan leeyahay, walaallayaal, wakhtigu waa gabagabo, hadda laga
billaabo kuwa naagaha qabaa ha ahaadeen sidii iyagoon qabin, [30] Oo kuwa ooyayana sidii
iyagoon ooyaynin, kuwa farxsanna sidii iyagoon faraxsanayn, kuwa wax iibsanayana sidii
iyagoon waxba lahayn, [31] Kuwa dunidan ku mashquulsanna sidii iyagoon ku mashquulsanayn,
waayo, xaaladda dunidanu waa baa'ba.

[32] Waxaan jeclaan lahaa inaad welwel la'aataan. Kii aan xaas lahaynu wuxuu ka welwelaa
waxyaabaha Rabbiga iyo siduu Rabbiga uga farxin lahaa. [33] Laakiin kii xaas luhu wuxuu ka
welwelaa waxyaabaha dunida iyo siduu xaaskiisa uga farxin lahaa. [34] Naagta la qabo iyo taan
wali guursanu way kala duwanyihiin. Tii aan la qabin waxay ka welweshaa waxyaabaha
Rabbiga iyo siday qudduus uga ahaan lahayd xagga jidhka iyo xagga ruuxaba. Tii la qabana
waxay ka welweshaa waxyaabaha dunida iyo siday ninkeeda uga farxin lahayd. [35] Taas
waxaan idinku leeyahay faa'iidadiinna aawadeed oo ma aha inaan idin xidhxidho, laakiin in
wax wanaagsan la arko iyo inaad Rabbiga ugu adeegtaan qalbi midaysan. [36] Ninkii u maleeya
inuusan si habboon biraddiisa ula dhaqmaynin, markay xilligii dhalin yaranimada dhaafto oo ay
himmaddeedu kacdo waana qasab inay sidaa noqotee, sida la quman ha yeelo. Dembina ma
aha ee ha is guursadeen. [37] Kii qalbigiisa ka yaqiinsada, isaga oo aan la qasbin, laakiin naftiisa
ka adag oo niyadda ka go'aansada inuu bikranimadiisa iska sii ahaado, si wanaagsan buu
yeelaa. [38] Sidaa daraaddeed kii bikraddiisa ku guursada si wanaagsan buu yeelaa, kii
bikraddiisa aan ku guursanna si ka sii wanaagsan ayuu yeelaa.
[39] Naagtu waxay ku xidhan tahay ninkeeda inta uu noolyahay, laakiin hadduu ninku dhinto,
waxay xor tahay inay guursato kay doonto, laakiin xagga Rabbiga oo keliya. [40] Laakiin waxay
ka sii farxad badan tahay inay iska joogto, siday aniga ila tahay, oo anigu waxaan u
malaynayaa inaan Ruuxa Eebbe leeyahay.

224 Wuxuu ka hadlayaa Rasuulku xaaladda dhaqanka iyo qowmiyadda uu qofku markii loo yeedhay ku noolaa ama ka soo jeedo. Taas oo macnaheedu yahay waa inaadan dhaqankaaga, intii wanaagsan, iyo qowmiyaddaadaba ka bixin markaad Masiixi noqoto oo aadan Soomaalinimada ka tagin.

### Cuntada Sanamyada Loo Sadaqeeyo

**8** Haddaba waxyaabaha sanamyada loo sadaqeeyo, waxaynu ognahay inaynu dhammaanteen
aqoon u wada leennahay. Aqoontana kibir baa laga qaadaa, laakiinse jacaylku wax buu
dhisaa. [2] Hadduu qof isu maleeyo inuu wax yaqaanno, isagu weli sidii loo baahnaa wax uma
yaqaanno. [3] Laakiin qofkii Eebbe jeclaada, Eebbe wuu ogyahay isaga. [4] Haddaba xagga
cuntada waxyaabaha sanamyada loo sadaqeeyo, waxaynu ognahay inuusan sanam waxba
dunida ka ahayn oo aan Eebbe jirin mid keliya mooyee. [5] Waayo, in kastoo ay samada iyo
dhulkaba ka jiraan wax ilaahyo lagu sheego, sidii iyadoy ilaahyo badan iyo sayidyo badani
jiraan, [6] Laakiinse innagu waxaynu leennahay Eebbe keliya oo Aabbaha ah, ka ay wax waluba
ka yimaaddaan oo innagana isaga ayaa ina leh iyo Sayid keliya oo ah Ciise Masiix, ka ay wax
waluba ku ahaadeen oo innaguna isagaynu ku ahaannay. [7] Si kastaba ha ahaatee dadka oo
dhan aqoontaas ma wada laha, maxaa yeelay qaar ayaa sanamka ilaa iyo hadda u bartay,
waxay u haystaan waxa ay cunayaan sidii wax sanam loo sadaqeeyo, qalbigooda tabarta
daranna wuu nijaasoobay. [8] Cuntadu inagama hor istaagayso Eebbe. Haddaynan cuninna
waxba inagama dhacaan, haddaynu cunnana waxba inooma kordhaan. [9] Laakiin iska ilaaliya
inay xorriyaddaasu wax lagu turunturoodo ku noqon kuwa tabarta daran. [10] Waayo Hadduu qof
ku arko adiga aqoonyahanka ah oo cunto ku cunaya meesha sanamyada, hadduu qalbiga ka
tabardaran yahay, miyuusan ku dhiirranaynin inuu cuno waxa sanamyada loo sadaqeeyo?
[11] Waayo, waxaa aqoontaada aawadeed ku lumaya mid tabardaran oo ah walaalkaagii uu
Masiixu aawadiis u dhintay. [12] Markaad walaalaha sidaas u dembaajiso oo aad damiirkooda
tabarta daran dhaawacdo, waxaad dembi ka gashaa Masiix. [13] Sidaa aawadeed hadday
cuntadu walaalkay turunturrayso, hiliba weligay ma cunnayo, si aanan walaalkay u
turunturraynin.

### Xuquuqda Adeegayaasha Injiilka

**9** Miyaanan rasuul ahayn? Oo miyaanan xor ahayn? Oo Miyaanan Rabbigeenna Ciise arkin?
oo miyaydaan shaqadayda xagga Rabbiga ahayn? [2] Xataa haddaanan kuwa kale rasuul u
ahayn, idinka waan idiin ahay, waayo, waxaad tihiin shaambadda rasuulnimadayda xagga
Rabbiga. [3] Kanu waa difacayga aan kuwa i imtixaama iskaga daafaco. [4] Miyaannan annagu
xaq u lahayn inaannu wax cunno oo wax cabno? [5] Miyaannan xaq u lahayn inaannu xaas
walaal ah kaxaysanno sida rasuullada kale iyo walaalaha Rabbiga iyo Keeyfas ay sameeyaan?
[6] Mise aniga iyo Barnabas oo keliya ayay waajib nagu tahay inaannan shaqada ka joogsanin?
[7] Askarigee isagu kharashka iska bixiya? Yaa beer canab ah beera oo aan midhaheeda wax ka
cunin? Ama yaa adhi daajiya oo aan caanaha adhiga wax ka dhamin? [8] Waxyaabahaas ma
sida banii aadnka ayaan uga hadlayaa? Oo sharcigu miyuusan sidaas oo kale lahayn?
[9] Waayo, waxaa ku qoran sharciga Muuse, Waa inaadan dibiga afka ka xidhin markuu
sarreenka burburinayo.[225*] Eebbe ma dibida oo keliya ayuu daneeyaa? [10] Mise innagoo dhan
ayuu inoola jeeda? Hubaal, aawadeen ayaa loo qoray, waayo, ka beerta qoda waa inuu rajo ku
qodo, ka tumana waa inuu tumo isagoo rajaynaya inuu qayb ka heli doono. [11] Haddaannu
waxyaabaha ruuxiga ah idinku dhex beernay, ma wax wayn baa haddaannu waxyaabaha
maaddiga ah idinka goosanno? [12] Qaar kale hadday waxaas xaq idiinku leeyihiin, miyaannan
annagu in ka sii badan idiinku lahayn? Hase ahaatee, xuquuqdayada maanaan isticmaalin,
laakiin wax walba waannu u dulqaadannaa si aannan Injiilka Masiix caqabad ugu noqonin.

225 Sharciga Kunoqoshadiisa 25:4

[13] Miyaydaan ogayn kuwa adeegga qudduuska ah ka shaqeeyaa inay macbudka wax ka cunaan, kuwa meesha allabariga ka adeegana inay meesha allabariga qayb ku leeyihiin?
[14] Sidoo kale Rabbigu wuxuu amray in kuwa dadka Injiilka ku wacdiya inay Injiilka ku
noolaadaan. [15] Laakiin waxyaabahaa midkoodna maanaan isticmaalin. Haddana waxyaabahan uma qorayo in waxyaabahaa la ii yeelo, waayo, waxaa ii wanaagsan inaan dhinto intii uu qof faankayga ka dhigi lahaa wax aan waxba ka jirin. [16] Waayo, haddaan dadka Injiilka ku wacdiyo, wax aan ku faano ma aha, maxaa yeelay, waa waajib i saaran, waayo, halaag baa igu dhacay haddaanan dadka Injiilka ku wacdiyin. [17] Waayo, haddaan taas doonistayda aawadeed ku sameeyo, abaalgud baan helayaa, laakiin haddaanan doonistayda ku samaynin, weli wakiil la aaminay ayaan ahay. [18] Haddaba abaal gudkaygu waa maxay? Waa in markaan Injiilka dadka ku wacdiyo aan Injiilka ka dhigo lacag la'aan, si aanan xuquuqday xagga Injiilka u adeegsanin.

[19] Waayo, in kastoo aan xor ka ahaa dadka oo dhan, haddana dhammaantood adeege ayaan u noqday, si aan kuwo kale oo badan ugu guulaysto. [20] Yuhuudda waxaan u noqday sida Yuhuudi oo kale, si aan Yuhuud kale ugu guulaysto. Kuwa sharciga ka hooseeyana, sida mid sharciga ka hooseeya ayaan u noqday, aniga oo aan sharciga ka hoosayn, si aan kuwa sharciga ka hooseeya ugu guulaysto. [21] Kuwa aan sharciga lahaynna, sidii mid aan sharci lahayn ayaan u noqday, anigoo aan ahayn mid sharci laawe ah xagga Eebbe, laakiin sharciga Masiix leh, si aan ugu guulaysto kuwa aan sharciga lahayn. [22] Kuwa tabarta daranna waxaan u noqday sidii mid tabardaran, si aan kuwa tabarta daran ugu guulaysto. Dadka oo dhan ayaan wax walba u noqday si aan si kastaba qaar u badbaadiyo. [23] Wax kasta waxaan u sameeyaa Injiilka aawadii, si aan u noqdo mid Injiilka la qaybsada iyaga. [24] Miyaydaan ogayn inay tartamayaashu dhammaan wada ordaan, laakiin mid kelya ayaa billadda hela? Sidaas u wada orda si aad guusha u heshaan. [25] Ciyaartoyga dadaalka badan wax walba faruhuu ka qaadaa. Kuwaasu haddaba waxay sidaas u yeelaan si ay taaj dhammaanaya u helaan, innaguse waxaynu helaynaa mid aan dhammaanaynin. [26] Haddaba anigu uma ordo ujeeddo ila'aan, umana feedhtamo sidii mid dabaysha feedhaya. [27] Laakiin jidhkayga ayaan xakameeyaa oon edbiyaa, si markaan qaar kale Injiilka ku wacdiyo aanan aniga qudhaydu u noqonin mid aan u qalmin.

### Digniin Sanam Caabudidda Laga Digayo

**10** Anigu ma doonayo walaallayaal, inaad jaahiliin ka ahaataan siday awowayaasheen oo dhan
daruurta uga wada hooseeyeen, oo ay dhammaantood badda u wada dhex mareen, [2] Iyo sidii
dhammaantood Muuse daruurta iyo baddaba loogu wada biyo galiyay.[226*] [3] Iyo siday
dhammaantood cunto ruuxi ah u wada cuneen, [4] Oy dhammaantoodna u wada cabbeen cabbitaan ruuxi ah, waayo, waxay ka wada cabbeen dhagaxa ruuxiga ah oo ka daba imanayay iyaga, dhagaxuna wuxuu ahaa Masiixa. [5] Laakiin Eebbe kuma farxin intooda badan oo waxaa iyaga lagu baabi'iyay lama dagaanka. [6] Haddaba waxyaabahaasi waxay inoo noqdeen tusaale
si aynaan sharka u damcin siday u damceen.[227*] [7] Oo aydaan sanam u caabudin siday
qaarkood u caabudeen. Sida qoran Dadku waxay u fadhiisteen inay wax cunaan oy wax cabbaan, oo waxay u sarakaceen inay ciyaaraan.[228*]

226 Inay raacaan yo rumeeyaan Nebi Muuse ayaa dhammaantood lagu wada biyo galiyay.
227 Tirintii 11:4
228 Baxniintii 32:6

8 Oo yaynaan sinaysanin siday qaarkood u sinaysteen oo saddex iyo labaatan kun ay maalin
keliya u dhinteen.[229*] 9 Oo yaynan Masiixa jirrabin siday qaarkood u jirrabeen oo ay masasku u
baabbi'iyeen.[230*] 10 Oo ha gunuunicina siday qaarkood u gunuunaceen oo uu baabbi'iyuhu u
baabbi'iyay.[231*] 11 Waxyaabahaasi waxay iyaga ugu dhaceen tusaale ahaan, oo waxaa loo
qoray in laynagu waaniyo innaga oo xilliga gabagabada ah joogna. 12 Sidaa daraaddeed kii u
malaynaya inuu taaganyahay, ha is ilaaliyo yuusan dhicine. 13 Mana jirto jirrabaad idinka adag
ta dadka ku wada dhacda mooyee, laakiin Eebbe waa aamin, mana oggolaan doono in laydin
jirrabo intaad awooddaan in ka badan, laakiin markii laydin jirrabo wuxuu samayn doonaa jid
aad kaga baxsataan, si aad ugu adkaysan kartaan. 14 Sidaa daraaddeed, gacaliyashaasha aan
jecelahayow, sanam caabudidda ka carara. 15 Waxaan idiinla hadlayaa sidii dad caqli leh.
Idinkuba qiimeeya waxaan leeyahay. 16 Koobka barakaysan ee aynu u ducayno miyuusan
ahayn wadaagidda dhiigga Masiixa? Furinkuna miyuusan ahayn wadaagidda jidhka Masiixa?
17 Sababtoo ah in kastoo aynu badan nahay, waxaynu nahay jidh qudha, maxaa yeelay, waxaa
jira furin qudha, waayo, dhammaanteen waxaynu wada qaybsannaa furinka qudha. 18 Bal eega
reer banii Israa'iil xagga jidhka; kuwa allabaryada cuna miyayna la wadaagin meesha
allabariga? 19 Haddaba maxaan leeyahay? Wax sanam loo sadaqeeyo ayaa wax ah? Mise,
sanam ayaa wax ah? 20 Laakiin waxyaabaha ay dadka aan Yuhuudda ahayn sadaqeeyaan,
waxay u sadaqeeyaan shaydaanno oo Eebbe uma sadaqeeyaan. mana doonayo inaad
shaydaanno wax la wadaagtaan. 21 Iskuma wada cabbi kartaan koobka Rabbiga iyo koobka
shaydaanada. Kamana wada qayb geli kartaan miiska Rabbiga iyo miiska shaydaanada. 22 Ma
Rabbiga ayaynu ka hinaasinnaa? Miyaynu isaga ka xoog badan nahay? 23 Wax walba waa
xalaal, laakiin wax walba ma wanaagsana. Wax walbana waa xalaal, laakiin wax walba wax ma
dhisaan. 24 Ninna yuusan wixii isaga u dan ah doonin, laakiin mid kastaba danta ka kale ha
doono. 25 Wax kasta oo suuqa lagu iibiyo cuna, idinkoo aan damiirka wax iska waydiinaynin.
26 Waayo, Rabbiga ayaa dhulka iyo waxa ku jira oo dhanba leh. 27 Hadduu kuwa aan
rumaysadka lahayn midoood casuumad idiin diyaariyo oo aad doonaysaan inaad tagtaan, wax
kasta oo laydin soo hor dhigo cuna, idinkoo aan damiirka waxba iska wayddiinaynin. 28 Laakiin
haddii laydinku yidhaahdo Tan sanam ayaa loo sadaqeeyay, ha cunina, ka idiin sheegay iyo
damiirkiisa aawadeed. 29 Waxaan leeyahay, damiirka ka kale, ee ma aha kaaga. Waayo,
damiirka mid kale muxuu xorriyaddayda u xakamaynayaa? 30 Haddaan mahadnaq kaga qayb
galo, maxaa la iigu caayaa wixii aan ku mahadnaqo? 31 Haddaba haddaad wax cuntaan, ama
wax cabtaan, ama wax kastaba ood samaysaan, dhammaan Eebbe ammaantiisa u wada
sameeya. 32 Wax lagu turunturoodo ha u dhigina Yuhuudda ama Giriigta ama kiniisadda
Eebbe. 33 Sidaan aniguba ugu dadaalo inaan dadka oo dhan si kastaba ha ahaatee ka wada
farxiyo, aniga oo aan dantayda door bidaynin, laakiin danta inta badan, si ay u badbaadaan.

**11** Igu dayda sidaan aniguba Masiixa ugu daydo.

### Naaguhu Madaxooda Ha Astureen

2 Waxaan idinku ammaanayaa sidaad wax walba iigu xusuusataan oo aad u xajisataan cilmiga
sidaan idiin baray. 3 Laakiin waxaan jeclaan lahaa inaad ogaataan inuu Masiixu yahay madaxa

229 Tirintii 25:1-18
230 Tirintii 21:5-6
231 Tirintii 16:41-49

nin kasta, ninkuna yahay madaxa naagta, Eebbena yahay madaxa Masiixa. [4] Nin kasta oo
tukada ama wax sii sheega isagoo madaxa wax u saaran yihiin, madaxiisuu ceebeeyaa. [5] Oo
naag kasta oo tukata ama wax sii sheegta iyadoo aan gambaysnayn, madaxeeday ceebaysaa.
Waayo, waxay la mid tahay sidii iyadoo madax xiiran. [6] Naagtu haddanay masar xidhanayn
timaha ha laga xiiro, laakiin hadday ceeb ku tahay naagta in loo jaro ama in loo xiiro, ha
gambaysato. [7] Maxaa yeelay ninku waa inuusan madaxa asturanin, waayo, ninku waa u-
ekaanta iyo ammaanta Eebbe, naagtuna waa ammaanta ninka. [8] Waayo, ninka naagta lagama
abuurin, laakiin naagta ayaa ninka laga abuuray. [9] Maxaa yeelay, ninka looma abuurin naagta
aawadeed, laakiin naagta ninka aawadiis ayaa loo abuuray. [10] Sidaa aawadeed naagtu waa
inay madaxeeda ku lahaato astaanta amarka, malaa'igaha aawadood. [11] Hase ahaatee, xagga
Rabbiga naagtu ninka la'aantii waxba ma aha, ninkuna naagta la'aanteed waxba ma aha.
[12] Waayo, sida naagtu ninka uga timid ayuu ninkuna naagta uga dhashay, wax kastana xagga
Eebbe bay ka yimaaddeen. [13] Idinkuba ka fikira. Ma u habboontahay naagta inay Eebbe barido
iyadoo madax qaawan? [14] Dabiicadda qudheedu miyayna idin baraynin hadduu ninku timo
dheer leeyahay inay sharaf dhac ku tahay isaga? [15] Laakiin naagtu hadday timo dheer
leedahay, sharaf bay u tahay iyada. Waayo, timaha waxaa iyada loo siiyay inay asturaan.[232*]
[16] Laakiin qof edab darro u jeedu, dhaqankaas oo kale annagu ma lihin, kiniisadaha Eebbena
ma laha.

### Cashada Rabbiga Oon La Xurmaynin

[17] Haddaba Anigoo tan idin faraya, idinma ammaanayo, waayo, isuguma timaaddaan wanaag
ee xumaan baad isugu timaaddaan. [18] Waayo, marka ugu horraysa waxaan maqlay inaad
iskala qaybisaan markaad kiniisadda isugu timaaddaan, qayb ahaanna waan aaminsanahay
arrintaas. [19] Waayo, waa qasab inay idinka dhex jirto bidco, si ay kuwa toosan idinka dhex
muuqdaan. [20] Sidaa daraaddeed markaad isu timaaddaan, isuguma timaaddaan inaad
cashada Rabbiga cuntaan. [21] Waayo, mid kasta cashadiisa ayuu ka kale ka hor cunaa, mid
wuu baahan yahay, midna wuu sakhraansan yahay. [22] War waa sidee? Miyaydaan lahayn
guryo aad wax ku cuntaan oo wax ku cabtaan? Mise kiniisadda Eebbe ayaad
fududaysanaysaan, oo aad masaakiinta ku quudhsanaysaan? Maxaan idinku idhaahdaa? Ma
waxaasaan idinku ammaanaa? Idinkuma ammaanayo!

### Cashadii Rabbiga Ee Xusuusta Ahayd

[23] Waayo, wixii aan idin faray Rabbiga ayaan ka helay, taasoo ah, In Sayid Ciise habeenkii la
gacangaliyay uu furin qaaday, [24] Oo markuu ku mahadnaqay ayuu jejebiyay oo yidhi, Kanu waa
jidhkayga laydiin jejebiyay, U sameeya tan si aad iigu xusuusataan. [25] Sidoo kale cashada ka
dib koobkii ayuu qaaday, isagoo leh Koobkanu waa axdiga cusub ee dhiiggayga. U sameeya
tan si aad iigu xusuusataan mar alla markaad cabtaan. [26] Waayo, mar alla markaad furinkan
cuntaan oo aad koobkan cabtaan, waxaad muujinaysaan dhimashada Rabbiga ilaa uu
yimaado.

232 Quruxdeeda

## Waa Inaan Cashada Si Aan Istaahilin Loo Qaadan

[27] Sidaa aawadeed ku alla kii furinka u cuna ama koobka Rabbiga u cabba si aan habboonayn,
jidhka iyo dhiigga Rabbigu dushiisa ayay noqon doonaan. [28] Nin kastaba ha is-imtixaamo, oo
sidaa furinka wax ha uga cuno, oo koobka wax ha uga cabbo. [29] Waayo, kii isagoon jidhka
ogayn cuna oo cabba, xukun ayuu naftiisa u keenaa. [30] Sababtaas aawadeed ayay kuwo
badanu u tabardaran yihiin, oo ay u bukaan, oo qaar badanna u dhinteen. [31] Laakiin haddaynu
innagu dhexdeenna is xukumi lahayn, laynama xukumeen. [32] Markii layna xukumana, Rabbiga
ayaa ina edbiya, si aan dunida laynoola xukumin. [33] Sidaa aawadeed, walaallayaal, markaad
isugu timaaddaan inaad wax cuntaan, isa suga. [34] Oo hadduu qof baahanyahay, gurigiisa wax
ha ka soo cuno, si aydaan xukun isugu imanin. Arrimaha kale waxaan hagaajin doonaa
markaan imaaddo.

## Hadiyadaha Ruuxiga Ah

**12** Haddaba arrinta ku saabsan hadiyadaha Ruuxiga ah, ma doonayo walaallayaal, inaad
jaahiliin ka ahaataan. [2] Waad ogtihiin in, markaad cawaanka ahaan jirteen, laydin gayn jiray
sanamyo aan hadli karin, si kasta oo laydinku gayn jirayba. [3] Sidaa daraaddeed waxaan
doonayaa inaan fahantaan in ninkii Ruuxa Eebbe ku hadla uusan odhanaynin Ciise wuu
inkaaran yahay oo uusan ninna odhan karin Ciise waa Rabbi inuu Ruuxa Qudduuska ahu ku
hadlo mooyee. [4] Haddaba waxaa jira hadiyado kala duwan, laakiin Ruuxu waa mid keliya. [5] Oo
waxaana jira adeeg kala duwan iyo Rabbi kelya. [6] Oo waxaana jira shaqooyin kala duwan,
laakiinse Eebbe waa mid, ka dhammaan wax walba ka dhex shaqeeya. [7] Laakiin mid kasta
waxaa Ruuxa loogu muujiyay faa'iido. [8] Mid waxaa laga siiyaa xagga Ruuxa hadal xigmad ah,
mid kalena hadal aqoon ah, siduu isla Ruuxu doonayo. [9] Mid kalena isla Ruuxu wuxuu siiyay
iimaan, mid kalena hadiyadda wax lagu bogsiiyo ayuu isla Ruuxu siiyay. [10] Mid kalena inuu
mucjisooyin sameeyo, mid kalena wax sii sheegidda, mid kalena kala soocidda arwaaxda, mid
kalena afaf kala duwan, mid kalena afafka fasiraaddooda. [11] Laakiin waxaas oo dhan Isku Ruux
keliya ayaa ka shaqeeya, isagoo siday doonistiisu tahay mid mid wax ugu qaybiya.

## Jidhka Keliya Oo Xubno Badan Leh

[12] Haddaba sida jidhku mid keliya u yahay, ee uu xubno badan u leeyahay, oo xubnaha oo
dhan ee jidhkuna ay jidh keliya u yihiin, in kastoo ay badanyihiin, sidaasoo kale weeyaan
Masiixuna. [13] Waayo, Ruux keliya ayaa dhammaanteen jidh keliya inagu biyo galiyay,
haddaynu nahay Yuhuud ama Giriig, ama addoommo ama kuwa xor ah, oo waxaa laynaga
waraabiyay Ruux keliya. [14] Waayo, jidhku xubin keliya ma aha ee waa xubno badan. [15] Hadday
cagtu tidhaahdo Sababtoo ah anigu gacan ma ihi, sidaa aawadeed jidhka kama mid ihi taasu
sabab uma noqonayso inayna jidhka ka mid ahayn. [16] Hadday dhegtu tidhaahdo Sababtoo ah
anigu il ma ihi, sidaa daraaddeed jidhka kama mid ihi taasu sabab uma noqonayso inayna
jidhka ka mid ahayn. [17] Hadduu jidhka oo dhan il wada ahaan lahaa, away dhegihii wax lagu
maqli lahaana? Hadduu dhammaan dhego wada ahaan lahaana, away sankii wax lagu urin
lahaana? [18] Laakiinse Eebbe ayaa siday doonistiisu tahay xubnaha mid kastaba jidhka ugu
habeeyay. [19] Hadday dhammaantood ahaan lahaayeen xubin keliya aaway jidhkii? [20] Laakiinse
waa xubno badan oo haddana hal jidh isku ah. [21] Ishu gacanta kuma odhan karto Kuuma
baahni madaxuna cagaha kuma odhan karo Idiinma baahni [22] Xataa xubnaha jidhka ee loo
maleeyo inay u tabar yaryihiin, iyaga qudhooda ayaa loogu baahi badan yahay, [23] Oo kuwa

jidhka ee aynu u malayno inay u sharaf yaryihiin, kuwaas ayaynu aad u sharafnaa, oo xubnaheenna cawrada ah ayaa ka xurmo badan kuwa kale. [24] Waayo, xubnaheenna aan cawrada ahaynu waxba uma baahna. Laakiin Eebbe ayaa jidhka isku rakibay isagoo qaybta ugu yar aad u maamuusay, [25] Si uuna jidhku u kala qaybsamin, laakiin ay xubinba xubinta kale u daryeesho. [26] Hadday xubin keliya xanuunsato, xubnaha oo dhanna way la wada xanuunsadaan. Haddii xubin la sharfana, xubnaha oo dhan ayaa la farxa. [27] Marka idinku waxaad tihiin jidhka Masiixa iyo xubno ka mid ah. [28] Oo Eebbe marka hore kiniisadda qaar wuxuu ka dhigay rasuullo, mar labaadkiina qaar kale wuxuu ka dhigay nebiyo, mar saddexaadkiina qaar kale wuxuu ka dhigay macallimiin, ka dibna qaar wuxuu ka dhigay kuwo mucjisooyin sameeya, qaarna kuwo leh hadiyado wax lagu bogsiiyo, qaarna caawiyayayaal, qaarna hoggaamiyayaal iyo kuwo afaf kala duwan ku hadla. [29] Dhammaantoodna ma wada rasuullaa? Oo dhammaantood ma wada nebiyaa? Oo dhammaantood ma wada macallimiin baa? Oo dhammaantood ma wada mucjisooyin sameeyayaal baa? [30] Oo dhammaantood mayay wada leeyihiin hadiyado wax lagu bogsiiyo? Oo dhammaantood mayay ku hadlaan afaf kala duwan? Oo dhammaantood ma waxbay fasiraan? [31] Laakiin aad ugu dadaala inaad heshaan hadiyadaha u waawayn. Oo weliba waxaan idin tusayaa jid taas ka sii wanaagsan.

### Jacaylku Waa Hadiyadda U Wayn

**13** Haddaan ku hadlo afafka dadka iyo malaa'igaha, laakiinse aanan jacayl lahayn, waxaan noqday nuxaas dhawaaqaysa ama saxan bir ah oo sanqadhaya oo kale. [2] Oo haddaan leeyahay hadiyadda wax sii sheegidda, oo aan ogahay waxyaabaha qarsoon oo dhan iyo aqoonta oo dhan oo haddaan leeyahay iimaan oo dhan oo aan buuraha ku dhaqaajiyo, laakiinse aanan jacayl lahayn, waxba ma ihi. [3] Oo wax kasta oo aan leeyahay haddaan bixiyo oo masaakiinta ku quudiyo iyo haddaan jidhkayga u bixiyo si loo gubo, laakiinse aanan jacayl lahayn, waxba kama helayo. [4] Jacaylku wuu samir badanyahay, wuuna naxariistaa, jacaylku ninna ma xasdo, jacaylku ma faano, mana kibro, [5] Wax aan u ekaynna ma falo, nafsaddiisana wax uma doono, mana xanaaqo, sharna kuma fikiro, [6] xaqdarridana kuma farxo, laakiin wuxuu ku farxaa runta. [7] Jacaylku wax walba wuu u dulqaataa oo wax walba wuu rumaystaa oo wax walba wuu rajeeyaaoo wax walba wuu u adkaystaa. [8] Jacaylku weligii ma dhammaado. Hadday wax sii sheegid jirto, way baabbi'i doontaa oo hadday afaf jiraan way dhammaan doonaan oo hadday aqooni jirto way baabbi'i doontaa. [9] Waayo, waxaynu ognahay waa qabyo oo si qabyo ah ayaynu wax u sii sheegnaa. [10] Laakiin markay waxa kaamilka ahu yimaaddaan, waxa qabyada ahi way dhammaan doonaan. [11] Markaan ilmo yar ahaan jiray, sidii ilmo oo kale ayaan u hadli jiray oo sidii ilmo oo kale ayaan u fikiri jiray sidii ilmo oo kale ayaan u qiimayn jiray, laakiinse hadda waxaan noqday nin wayn oo waxyaabihii carruurnimada waan iska dhaafay. [12] Waayo Hadda si aan caddayn ayaynu muraayad wax ugu aragnaa, laakiin markaas fool ka fool ayaynu wax u arki doonnaa. Hadda si qabyo ah ayaan wax u ognahay, laakiin markaas waxaan u ogaan doonaa sidii la ii yaqaanno. [13] Haddaba waxaa waaraya waa saddexdan, rumaysadka iyo rajada iyo jacaylka; laakiin kuwan waxaa ugu wada wayn jacaylka.

### Hadiyadaha Wax Sii Sheegidda Iyo Kuhadalka Luuqado Kale

**14** Jacaylka raaca oo weliba hadiyadaha Ruuxiga ah ku dadaala, gaar ahaan wax sii sheegidda. [2] Waayo, qofkii luuqad uusan aqoonin ku hadla, banii aadan lama hadlo, laakiinse Eebbe ayuu la hadlaa, maxaa yeelay, cidna ma fahanto isaga, laakiinse erayo qarsoon ayuu

xagga Ruuxa kaga hadlaa. [3] Laakiin qofkii wax sii sheegaa dadka ayuu kula hadlaa erayo wax dhisa oo gargaar iyo qalbi qaboojis leh. [4] Qofkii luuqad uusan aqoonin ku hadla isagaa is-dhisa, laakiinse kii wax sii sheegaa wuxuu dhisaa kiniisadda. [5] Waxaan jeclaan lahaa inaad dhammaantiin luuqado ku wada hadashaan, laakiin waxaan ka sii jeclaan lahaa inaad wax sii sheegtaan. qofkii luuqad ku hadla hadduusan fasiraynin, waxaa ka sii wayn kii wax sii sheega, si ay kiniisaddu u hesho wax ay ku dhisanto. [6] Haddaba, walaallayaal, haddaan idiin imaaddo, anigoo luuqad ku hadlaya, maxaan idiin faa'iidaynayaa haddaanan idinkula hadlin muujin ama aqoon ama wax sii sheegid ama cilmi? [7] Xataa waxyaabaha maaddiga ah markay dhawaaqaan hadday yihiin turunbo ama gittaar, hadduusan dhawaaqoodu kala duwanayn sidee loo kala garanayaa waxa la yeedhiyo ama gitaarka laga dhawaajiyo? [8] Hadduu buunku ku dhawaaqo cod aan la fahmaynin, yaa dagaal u diyaar garoobi doona? [9] Sidoo kale idinkuna markaad erayo aan la garanaynin ku hadashaan, sidee wixii lagu hadlay loo fahmayaa? Waayo, dabaysha ayaad markaas la hadlaysaan. [10] Waxaa laga yaabaa inay dunida ka jiraan luuqado tiro badan oo kala duwan oo mid aan macno lahayn ma jiro. [11] Haddaba haddaanan fahmaynin macnaha luuqadda, waxaan qofka ku hadlay u noqon doonaa qof ajinabi ah, qofka hadlayana ajinabi ayuu ii ahaan doonaa. [12] Sidoo kale idinkuna, idinkoo xamaasad ruuxi ah leh, aad ugu dadaala inaad hadiyado badan u lahaataan kiniisadda dhisiddeeda. [13] Sidaa daraaddeed, qofkii luuqad ku hadla Eebbe ha ka baryo siduu u fasiro. [14] Waayo, haddaan Eebbe af aanan aqoonin ku baryo, ruuxa ayaa ka barya, laakiin xagga caqliga waxba ma faa'iido. [15] Maxaa jira haddaba? Xagga ruuxa ayaan Eebbe ku baryi doonaa, laakiinse sidoo kale waxaan isaga ku baryi doonaa garaadkayga. Ruuxa ayaan ku heesi doonaa oo maanka ayaan ku heesi doonaa. [16] Haddii kale haddaad xagga ruuxa ka mahadnaqdo qofkii meeshaa jooga oo aan fahmaynin siduu u odhan doonaa, Aamiin, markaad mahadnaqdo, hadduusan garanayninba waxaad leedahay? [17] Si fiican ayaad u mahadnaqdaa, laakiin qofka kalena ma dhisna. [18] Waxaan Eebbe ugu mahadnaqaa inaan luuqado ka badan kuwaad ku hadashaan ku hadlo, [19] Balsee kiniisadda dhexdeeda, halkii aan toban kun oo eray ku hadli lahaa, waxaan ka jeclaan lahaa inaan shan eray oo la fahmayo ku hadlo si aan kuwa kale wax baro. [20] Walaallayaal, carruur ha ka noqonina xagga fahanka, xagga sharka caruur ka ahaada, laakiinse xagga fahanka qaan gaadh ka ahaada. [21] Waxaa sharciga ku qoran Luuqado dad ajinabi ah iyo dibno kale ayaan dadkan kula hadli doonaa, oo xataa sidaas oy tahay ima maqli doonaan, ayuu Rabbigu leeyahay.[233*] [22] Haddaba luuqaduhu mucjiso uma aha kuwa muminiinta ah, laakiinse waxay mucjiso u yihiin kuwa aan muminiinta ahayn, wax sii sheegidduse mucjiso uma aha kuwa aan muminiinta ahayn, laakiin waxay mucjiso u tahay muminiinta. [23] Haddaba hadday kiniisadda oo dhan isu timaaddo oo ay ku wada hadlaan luuqado oo hadday dad aan aqoon fiican lahayn ama aan muminiin ahayn ay soo galaan, miyayna odhanaynin, Waad waalantihiin? [24] Laakiin hadday dhammaantood wax sii sheegaan oo uu u yimaado mid aan aqoon fiican lahayn ama aan mumin ahayn, waa la wada canaantaa, oo waa la wada xukumaa. [25] Siraha qalbigiisa ku qarsoon ayaa la wada muujiyaa, oo sidaa darteed sujuud ayuu la dhici doonaa, oo Eebbe ayuu caabudi doonaa isagoo leh, Runtii Eebbe ayaa idin dhex joogaa.

### Waa In Si Habboon Oo Nidaamsan Eebbe Loo Caabudo

[26] Maxaa jira haddaba, walaallayaal? Markaad isu timaaddaan, mid kasta qasiido u gaar ah ayuu leeyahay, midna wax barid ayuu leeyahay, midna muujin ayuu leeyahay, midna luuqad

233 Ishacyaah 28:11-12

ayuu leeyahay, midna wax fasirid ayuu leeyahay. Wax walba ha loo sameeyo si wax loo dhiso.
[27] Haddii ay jirto cid luuqado aan la aqoonin ku hadlaysa, ha ahaadeen laba, ama hadday u
bataan, saddex, oo mid walba markiisa ha hadlo, midna ha fasiro, [28] Laakiin hadduusan mid
fasiraa jirin, kiniisadda ha ka aamuso, oo isagu ha la hadlo naftiisa iyo Eebbe. [29] Nebiyaduna
laba ama saddex ha u hadleen, kuwa kalena ha qiimeeyeen waxay leeyihiin. [30] Laakiin haddii
mid meel fadhiya wax loo muujiyo, kii hore ha aamuso. [31] Waayo, dhammaantiin mid mid baad
wax u sii wada sheegi kartaan, si ay dhammaan wax u bartaan oo dhammaan loo wada dhiiri
galiyo. [32] Oo ruuxda nebiyada waxaa ma'uul ka ah nebiyada. [33] Waayo, Eebbe ma aha
Eebbaha nidaam darrida, laakiinse waa mid nabadda, sida Kiniisadaha qudduusiinta oo dhan
ka dhex jirta. [34] Dumarkiinnu markay kiniisadaha joogaan ha aamuseen, waayo, looma fasixin
inay hadlaan; laakiin ha hoggaansameen, sida uu sharcigu leeyahay. [35] Hadday doonayaan
inay wax bartaan, nimankooda ha ku wayddiiyeen guriga, maxaa yeelay, waa ku ceeb inay
naagu kiniisadda dhexdeeda ku hadasho. [36] Maxaa jira! Ma idinka ayuu erayga Eebbe idinku
soo dagay, mise keligiin ayuu idiin yimid? [37] Nin alla ninkii isu maleeya inuu nebi yahay ama qof
Ruuxi ah yahay, ha fahmo inay arrimahaan idiin soo qorayo yihiin amarka Rabbiga. [38] Laakiin
nin alla ninkii tan iska jaahil tira, isagu jaahil ha ahaado. [39] Sidaa aawadeed, walaallayaal, ku
dadaala inaad wax sii sheegtaan, hana diidina in afaf lagu hadlo, [40] Laakiin wax walba ha loo
sameeyo si habboon oo hagaagsan.

### Sarakicidda Masiixa

**15** Haddaba walaallayaal, waxaan idin xusuusinayaa injiilkii aan idinku wacdiyay ee aad
idinkuna aqbasheen, oo aad ku taagantihiin, [2] Oo aad ku badbaaddeen, haddaad xajisaan
hadalkii aan idinku wacdiyay, haddii uusan iimaankiinnu bilaash ahayn. [3] Waayo, markii ugu
horraysay waxaan idiin dhiibay wixii aan aniguba helay oo waxa weeye, inuu Masiixu u dhintay
dembiyadeenna sida Kitaabku leeyahay,[234*] [4] Oo la aasay isaga oo maalintii saddexaad la
sarakiciyay, siduu Kitaabku leeyahay.[235*] [5] Markaasuu Keeyfas u muuqday, markii dambena
laba iyo tobankii. [6] Ka dibna wuxuu mar keliya u muuqday in ka badan shan boqol oo walaalo
ah, oo ay weli intooda badan haddaba joogto, laakiin qaarkood waydhinteen.
[7] Dabadeedna Yacquub ayuu u muuqday, ka dibna rasuullada oo dhan. [8] Markii ugu
dambaysayna aniga oo dhicis oo kale ah ayuu ii muuqday. [9] Waayo, anigu waxaan ahay ka
rasuullada ugu liita oo ma istaahilo in loogu yeedho rasuul, waayo, kiniisadda Eebbe ayaan
dhibi jiray. [10] Laakiin Eebbe nimcadiisa ayaan ku ahay waxaan ahayba oo nimcadiisii lay
siiyayna khasaare mayna noqonin, laakiin anigu waxaan u hawshooday si ka badan
dhammaantood, anigana ma aha laakiin waa nimcada Eebbe ee ila jirtay. [11] Haddaba ha
ahaato aniga ama iyagee, sidaas ayaannu u wacdinnaa oo aad idinkuna ku rumaysateen.

### Sarakicidda Kuwii Dhintay

[12] Marka haddii dadka lagu wacdiyay in Masiixa kuwii dhintay laga sarakiciyay, siday qaarkiin u
yidhaahdaa, Sarakicidda kuwii dhintay ma jirto? [13] Haddayna jirin sarakicidda kuwii dhintay,
Masiixana lama sarakicinin. [14] Oo haddaan Masiixa la sarakicinin, markaas wacdigayagu waa
khasaare, rumaysadkiinnuna waa khasaare. [15] Dabadeedna markhaatiyaal beenaalayaal ah

234 Ishacyaah 53:5-12

235 Sabuur 16:8-10 iyo Hoosheeca 6:2

ayaannu xagga Eebbe ka noqonaynaa, waayo, waxaannu ka marag furnay inuu Masiixa
sarakiciyay, kaasoo aan sarakicin haddii aan kuwii dhintay la sarakicinaynin. [16] Haddii aan
kuwii dhintay la sarakicinaynin, Masiixana lama sarakicinin. [17] Oo haddii aan Masiixa la
sarakicinin, rumaysadkiinnu waa khasaare, oo weli dembiyadiinnii ayaad ku jirtaan. [18] Oo
weliba kuwii Masiixa rumeeyay ee dhintayna, way halaagmeen. [19] Haddaynu noloshan oo
keliya Masiixa ku rajayn lahayn, waxaynu ahaan lahayn kuwa ugu liita dadka oo dhan oo laga
noxo. [20] Laakiinse hadda Masiixa kuwii dhintay waa laga sarakiciyay, isagoo ah midhaha ugu
horreeya ee kuwii dhintay. [21] Maxaa yeelay maadaama oy geeridu nin ku timid, sidoo kale ayay
sarakicidda kuwii dhintayna nin ugu timid. [22] Sidaynu dhammaanteen Aadan ugu wada
dhimannay oo kale ayaynu dhammaanteen Masiixa ugu wada noolaan doonaa, [23] Laakiin mid
kastaba xilligiisa, midhaha ugu horreeya waa Masiixa, ka dibna kuwa Masiixa marka uu
yimaado. [24] Markaasuu dhammaadku iman doonaa, marka uu isagu boqortooyada u dhiibo
Eebbaha Aabbaha ah, ka dib marka uu baabbi'iyo madax walba iyo amar walba iyo xoog
walba. [25] Waayo, waa inuu xaakin noqdo ilaa iyo inta uu cadawgiisa oo dhan cagihiisa
hoostooda geliyo. [26] Oo cadawga ugu dambeeya ee la baabbi'in doonaa waa dhimasho.
[27] Waayo, Wax walba cagihiisa hoostooda ayuu galiyay. Laakiin marka uu leeyahay, Wax
walba isaga ayaa la hoos galiyay, way caddahay inuusan ku jirin ka wax walba hoostiisa
galiyay. [28] Haddaba markii wax walba isaga gacanta loo galiyo, markaas ayaa Wiilka laftiisa
ganta loo galin doonaa ka wax walba hoos galiyay isaga, si ay wax walba dhammaan Eebbe
ugu ahaadaan. [29] Haddii kale maxay samayn doonaan kuwa lagu biyo galiyay kuwii dhintay?
Haddii aan kuwii dhintayba la sarakicinayninba, maxaa haddana loogu biya galiyaa iyaga?
[30] Oo maxaynu saacad walba halista ugu jirnaa?

[31] Waxaan ku cabanayaa idinka oo ah faankayga xagga Rabbigeenna Ciise Masiix,
walaallayaal, inaan maalin walba dhinto. [32] Maxay ii taraysaa haddaan sida banii aadanka
dugaag ku la dagaallamay Efesos? Haddii aan kuwii dhintay la sarakicinaynin, maynu wax iska
cunno oo iska cabno, waayo, barri ayaynu dhimanaynaaye. [33] War yaan laydin khiyaamin,
kuwa xun xun la socodkoodu asluubta wanaagsan ayuu kharribaa. [34] Hurdada ka kaca oo hana
dembaabina, waayo, qaar ayaan Eebbeba aqoonin. Waxaan sidaa u leeyahay si aan idiinka
yixyixiyo.

### Jidhka Lagu Soo Sarakacayo

[35] Laakiin mid ayaa odhan doona Sidee kuwii dhintay loo sarakicinayaa? Oo jidh caynkee ah
ayay ku iman doonaan? [36] Doqon yahow, waxaad adigu beerto ma noolaado hadduusan
dhimanin. [37] Oo waxaad beerto ma aha ka jidhka noqonaya, laakiin iniinyahooda oo keliya, ha
ahaato iniin sarreen ama iniin nooc kale ah. [38] Laakiin Eebbe ayaa iniin walba jidh u siiya iyada
sida ay doonistiisu tahay. [39] Oo jidh oo dhanna isku jidh ma wada aha, laakiin waxaa jira jidhka
banii aadanka iyo jiidhka kale oo dugaaggu leeyahay, iyo jidhka kale oo ay shimbirruhu
leeyihiin iyo mid kale oo kalluunku leeyahay. [40] Oo waxaa jira jidhka samada iyo jidhka dhulka,
laakiin ammaanta kuwa samadu la mid ma aha ammaanta kuwa dhulka. [41] Waxaa jirta
ammaanta qorraxda iyo ammaanta kale oo uu dayuxu leeyahay iyo ammaanta kale oo ay
xiddiguhu leeyihiin, waayo, xiddigba xiddigta kale way ka ammaan duwantahay. [42] Sarakicidda
kuwii dhintayna waa sidaas oo kale. Waxaa la beeraa mid qudhmaya, oo waxaana la
sarakiciyaa mid aan qudhmaynin. [43] Waxaa la beeraa mid aan sharaf lahayn oo waxaana la
sarakiciyaa mid ammaan leh, waxaa la beeraa mid aan awood lahayn oo waxaa la
sarakiciyaana mid awood leh. [44] Waxaa la beeraa jidh maaddi ah, oo waxaana la sarakiciyaa

jidh ruuxiah. Hadduu jiro jidh maaddi ah, jidh ruuxi ahna wuu jiraa. [45] Haddaba waxaa qoran
Ninkii Aadan ahaa ee ugu horreeyay wuxuu noqday naf nool, Aadankii ugu dambeeyayna
wuxuu noqday ruux wax nooleeya.[236*] [46] Hase ahaatee, ka ruuxiga ahu ma aha kii ugu
horreeyay laakiinse ka maaddiga ah ayaa ugu horreeyay, ka dibna ka ruuxiga ah. [47] Ninkii ugu
horreeyay wuxuu ahaa ka dhulka oo cammuud ayuu ahaa, ninkii labaadna oo Rabbiga ahna
waa kan samada. [48] Sidii kii cammuudda oo kale ayay kuwa cammuudduna yihiin, oo sida ka
samada oo kale ayay kuwa samaduna yihiin. [49] Oo sidaynu ugu egnahay ka cammuudda ah,
ayaynu sidoo kale ugu ekaan doonnaa ka samada. [50] Waxaan leeyahay, walaallayaal, Jidhka
iyo dhiiggu ma dhaxli karaan boqortooyada Eebbe. wax Qudhmayana ma dhaxli karo wax aan
qudhmaynin. [51] Eega, waxaan idiin sheegayaa siro. Dhammaanteen ma wada dhiman doonno,
laakiin dhammaanteen waa layna beddeli doonaa. [52] In il bidhiqsi ka yar, markii buunka ugu
dambeeya la yeedhiyo; waayo, buunku ayaa dhawaaqi doonaa oo kuwii dhintay ayaa iyagoon
qudhmaynin la sarakicin doonaa, waana layna beddeli doonaa. [53] Waayo, kii qudhmayay waa
in la huwiyo mid aan qudhmaynin, oo ka dhimanayayna waa inuu mid aan dhimanaynin
huwado.[237*] [54] Markii ka qudhmaya uu huwado mid aan qudhmaynin, oo ka dhimanayana uu
huwado mid aan dhimanaynin ayuu erayga qoran ee leh, Dhimashadii waxaa liqday
guusha.[238*] [55] Dhimashoy, aaway guushaadii? Dhimashoy, aaway micidaadii? [56] Micida
dhimashadu waa dembiga, oo xoogga dembiguna waa sharciga. [57] Laakiin Eebbe ayaa mahad
leh kaasoo guusha inagu siiya Rabbigeenna Ciise Masiix. [58] Sidaa daraaddeed, walaalahayga
aan jeclahayow, noqda kuwa adag oo aan la dhaq dhaqaajin karin oo had iyo jeerba adeegga
Rabbiga si adag u qabta, idinkoo og in tacabkiinnu uusan khasaare ahayn xagga Rabbiga.

### Sadaqo U Uruurinta Qudduusiinta

**16** Haddaba arrinta ku saabsan sadaqo u uruurinta qudduusiinta, sidaan u amray kiniisadihii
Galatiya, idinkuna sidaas oo kale yeela. [2] Maalinta ugu horraysa ee toddobaadka midkiin
kastaba wax meel ha dhigo hadba siduu Eebbe wax u ugu manaystay, si markaan imaaddo
aan wax loo uruurin. [3] Oo markaan imaaddo, kuwaad u bogteen ayaan warqado u dhiibi
doonaa, oo waxaan u diri doonaa si ay hadiyaddiinna Quddus u geeyaan. [4] Oo hadday ila
noqoto inaan aniguna tago, way i raaci doonaan.

### Bawlos Arrimihiisii Iyo Nabadgelyaynta

[5] Haddaba markaan Makedoniya soo maro ka dib ayaan idiin iman doonaa, waayo,
Makedoniya ayaan soo mari doonaa. [6] Malaha cabbaar baan idinla joogi doonaa, xataa xilliga
qabowga oo dhan, si aad meel alla meeshaan tegi doono iigu amba bixisaan. [7] Waayo, ma
doonayo inaan hadda socodkaygan idin arko, maxaa yeelay, waxaan rajaynayaa inaan muddo
idinla joogo, haddii Rabbigu idmo. [8] Laakiin waxaan sii joogayaa Efesos ilaa iyo maalinta
Bentekoste. [9] Waayo, waxaa la ii furay albaab wayn oo adeeg ah, cadaw badanna wuu jiraa.
[10] Haddaba Timoteyos hadduu yimaado, ka taxaddara, oo cabsi la’aan ha idinkula joogo,
waayo, wuxuu ka shaqeeyaa shaqada Rabbiga sidayda oo kale. [11] Haddaba ninna yuusan
fududaysanin isaga. Laakiin nabad ku soo ambabbixiya, oo ha ii yimaado, waayo, waxaan
filayaa inuu walaalaha soo raaci doono.

236 Bilowgii 2:7
237 Ishacyaah 2:8
238 Hoosheeca 13:14

[12] Arrinta ku saabsan walaal Abolloos aad baan uga codsaday isaga inuu walaalaha sii raaco oo idiin yimaado, laakiin raalli muusan ka ahayn inuu hadda yimaado, laakiin wuu iman doonaa markuu fursad helo.

### Salaan Gabagabo Ah

[13] Soo jeeda, oo iimaanka ku adkaada oo rag iska dhiga. [14] Wax kasta ood qabataanba, jacayl ku sameeya. [15] Hadda waxaan idin kala dardaarmayaa walaallayaal, waad ogtihiin inay reer Istefanas yihiin midhihi ugu horreeyay ee Akhaya iyo inay u go'een inay qudduusiinta u adeegaan. marka waxaan idinka codsanayaa [16] Inaad ka dambaysaan kuwaas oo kale iyo mid walba oo la shaqeeya. [17] Waxaan ku faraxsa nahay imaatinka Istefanas iyo Fortunatos iyo Akhaykos, maxaa yeelay, wixii idin ka dhinnaa iyagaa dhammaystiray. [18] Waayo, ruuxayga iyo kiinnaba iyaga ayaa nasiyay. Sidaa daraaddeed ha u daymo la'aanina kuwaas oo kale.
[19] Kiniisadaha Aasiya way idin soo salaamayaan. Akula iyo Bariskillana aad bay idiin soo salaamayaan Rabbiga dartii, iyaga iyo kiniisadda gurigooda ka jirtaba. [20] Walaalaha oo dhanna way idin soo salaamayaan. Isku salaama dhunkasho qudduus ah. [21] Anigoo Bawlos ah ayaan salaantan gacantayda ku qoray. [22] Qof alla qofkii aan Rabbiga jeclayn, habaar ha ku dhoco. Rabbigeennu wuu imanayaa. [23] Nimcada Sayid Ciise Masiix ha idinla jirto. [24] Dhammaantiin jacaylkaygu ha idinla jiro magaca Ciise Masiix. Aamiin.

# WARQADDII LABAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER KORINTOS

### Salaan Iyo Mahadnaq

**1** Ka socota Bawlos oo Eebbe idinkiisa rasuulkii Ciise Masiix ah iyo walaalkeen Timoteyos, ku
socota kiniisadda Eebbe ee Korintos iyo dhammaan qudduusiinta Akhaya oo dhan. 2 Nimco ha
idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbeheen ah iyo Sayid Ciise Masiix. 3 Waxaa
barakaysan Eebbaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix, oo ah Aabbaha naxariista iyo
Eebbaha gargaarka oo dhan, 4 kaasoo naga caawiya dhibbaato kasta oo nagu dhacda, si
aannu kuwii ay wax dhibaato ahu ku dhacdo ugu caawin karno caawimaadda Eebbe na
caawiyay. 5 Waayo, siduu xanuunka Masiixu noogu badanyahay, oo kale ayuu gargaarka
Masiixuna noogu badanyahay. 6 Haddii nala dhibo waa gargaarkiinna iyo badbaadadiinna
aawadeed, haddii nala caawiyana waa gargaarkiinna aawadii, kaasoo yeesha dulqaad aad u
dulqaadataan isla xanuunkaas aannu annaguba ku xanuunsanno. 7 Oo rajada aannu idiin
qabno waa wax la hubo, annagoo og, inaad sidaad xanuunka noola wadaagteen aad sidoo
kale gargaarkana noola wadaagi doontaan. 8 Maxaa yeelay, ma doonayo walaallayaal, inaad
ogaan waydaan dhibaatooyinka xagga Aasiya nagaga dhacday oo aad ayaa naloo cadaadiyay
si awooddayada ka baxsan, sidaas aawadeed xataa waxaannu ka quusannay noloshayadii.
9 Laakiin waxaannu naftayada ka dareennay inaannu nahay kuwo geeri lagu xukumay, si
aanaan naftayada isugu hallaynin, laakiinse inaannu isku hallayno Eebbeha kuwii dhintay
sarakiciya. 10 Isaga ayaana naga samata bixiyay dhimasho aad u wayn, wuuna naga samata
bixin doonaa, isaga ayaanuna rajaynaynaa inuu weliba na samata bixin doono, 11 Idinkuna waa
inaad nagu caawisaan ducadiinna, si barakada lana siiyo darteed, ay kuwo badan u
mahadnaqaan aawadayo.

### Bawlos Oo Qorshihiisii Dib U Hakiyay

12 Maxaa yeelay, waxaannu ku faanaynaa markhaatifurka quluubtayada, si aannu dunida ugu
soconay qudduusnimo iyo alle ka cabsi oo ugumaanaan soconnin xigmadda jidhka laakiinse
nimcada Eebbe, gaar ahaan xaggiinna. 13 Wax kale idiinma soo qorayno, waxaad akhrideen
ood ogtihiin mooyee oo waxaan rajaynayaa inaad ogaataan ilaa iyo dhammaadka. 14 Sidaad
qayb ahaan noogu ogaateen, inaannu farxaddiinna nahay, sidoo kale idinkuna farxaddayada
ayaad tihiin maalinta Rabbigeenna Ciise. 15 Haddaba kalsoonidaas daraaddeed waxaan
doonayay inaan horta idiin imaaddo, si aad faa'iido labaad u heshaan, 16 Oo aan idiin sii maro
ilaa iyo Makedoniya oo haddana markaan Makedoniya ka imaaddo aan idinku soo noqdo, oo
aad idinkuna xagga Yahuudiya iigu sii amba bixisaan. 17 Haddaba markaan sidaas
go'aansaday miyaan degdegay? Ama miyaan sida banii aadanka wax u go'aansaday, taasu
xaggayga waa haah haa, iyo Maya, maya? 18 Laakiin ammaana Eebbe, hadalkayagu xaggiinna
ma aha, Haah, iyo Maya. 19 Waayo, Wiilka Eebbe oo ah Ciise Masiix, kaasoo aannu idinku
dhex wacdinay, xataa aniga iyo Silwanos iyo Timoteyos, ma ahayn Haah iyo Maya, laakiin
xaggiisa waa Haah. 20 Waayo, ballanqaadyada Eebbe oo dhan ee isaga ku jira xaggiisa waa
Haah, oo weliba xaggiisa waa, Aamiinta, si xaggeenna Eebbe looga ammaano. 21 Haddaba ka
ina wada xoogeeya xagga Masiixa ee ina subkay waa Eebbe, 22 kaasoo haddana ina
shaambadeeyay oo carbuunta Ruuxa inagu siiyay quluubteenna. 23 Laakiin Eebbe ayaan
markhaati iiga ah xagga naftayda, waxaan Korintos u iman waayay inaan idiin tudho. 24 Ee ma

aha inaannu dusha idinka qabsanno rumaysadkiinna, laakiinse waxaannu idiinla shaqeeynaa si aad u faraxdaan, waayo, rumaysad ayaad ku taagantihiin.

**2** Laakiin aniga qudhaydu waxaan go'aan ku gaadhay inaanan booqasho kale oo xanuun leh
idiinla imanin. [2] Waayo, haddaan idin murogo galiyo, yaa iga farxinaya kii aan murug galiyay
mooyee? [3] Haddaba farriintan waxaan u qoray inaanan markaan imaaddo murugo galinin kuwaan ku farxi lahaa, anigoo ku kalsoon inay farxaddaydu dhammaantiin farxaddiinna tahay.
[4] Waayo, anigoo aad u dhiban oo qalbiga ka taahaya ayaan idiin soo qoray anigoo aad u ilmaynaya, oo ma ahayn inaad murugootaan, laakiin inaad ogaataan jacaylka aadka u badan ee aan idiin qabo.

### Dembiilaha Toobadkeena Waa In La Aqbalo

[5] Laakiin qof alla qofkii dhibaato gaysta, aniga oo kaliya ima dhibaateeyo, laakiinse
dhammaantiin ayuu dhibaato idiin gaystaa, mana doonayo inaan idin culaysiyo. [6] Kaasoo kale
ciqaabta ay inta badanu saareen ayaa ku filan. [7] Marka waa inaad isaga iska cafidaan oo aad u
dajisaan si ayna murugo xad dhaaf ahu u liqin kaasoo kale. [8] Sidaa daraaddeed waxaan idinka
baryayaa inaad jacaylkiinna u xaqiijisaan isaga. [9] Waayo, sababtaas aawadeed ayaan u qoray
si aan idiin imtixaamo oon u xaqiijiyo inaad wax walba adeecaysaan. [10] Qofkii aad wax ka
cafidaan, aniguna waan ka cafiyay; waxaan anigu ka cafiyayna, haddaan wax ka cafiyay,
waxaan uga cafiyay aawadiin Masiix hortiisa, [11] Si uusan Shaydaanku inooga faa'iidaysanin,
waayo, innagu ma nihin kuwo xeeladihiisa jaahil ka ah.

### Dhibaatooyinka Iyo Guusha Masiixa

[12] Markaan Taroo'as imid si aan Injiilka Masiixa ugu wacdiyo, oo uu Rabbigu albaab ii furay,
[13] Ruuxaygu ma nasanin, waayo, ma helin walaalkay Tiitos, laakiin intaan iyaga sagootiyay
ayaan Makedoniyaan u kacay. [14] Haddaba Eebbe ayaa mahad leh, kaasoo had iyo jeerba
guusha inagu siiya Masiixa, oo meel walbaba udgoonka aqoontiisa gaadhsiiya, oo innaga
inagu gaadhsiiya. [15] Waayo, waxaynu Eebbe u nahay urta Masiixa hadday tahay kuwa
badbaadaya iyo kuwa halaagmayaba, [16] kuwo waxaynnu u nahay urta dhimasho dhimasho
lagu daray, kuwa kale urta nolol nolol lagu daray. Oo waa ayo kuwa u qalma waxyaabahan?
[17] Waayo, annagu la mid ma nihin kuwo badan oo erayga Eebbe ka ganacsada, laakiinse sidii kuwo daacad ah oo Eebbe u xil saaray ayaynu Eebbe hortiisa Masiixa uga hadalo.

### Adeegayaasha Axdiga Cusub

**3** Ma waxaannu billownaa inaannu haddana is-ammaanno? Ama miyaannu u baahan nahay
warqado ammaan ah in laydiin diro ama in laydiinka soo diro sida qaar kale? [2] Idinka laftiinna
ayaa ah warqaddayada quluubtayada ku qoran, taasoo ay dadka oo dhan garanayaan oy
akhriyaan, [3] Oo waxaad muujiseen inaad tihiin warqadda Masiixa ee aannu ku adeegno oo aan khad lagu qorin, laakiinse lagu qoray Ruuxa Eebbaha nool oo aan lagu qorin looxyo dhagax ah
dushooda laakiinse lagu qoray looxyo quluub jiidh ah dushood. [4] Yaqiintaas oo kalena Masiixa
ayannu ku leennahay Eebbe agtiisa [5] Mana aha inaannu isku filan nahay si aannu annaga
laftayadu wax u sheeganno, laakiin isku filnaanshahayagu xagga Eebbe ayuu ka ahaaday,
[6] Kasoo haddana naga dhigay kuwo u qalma inay ka adeegaan axdi cusub oo aan ku

salaysnaynin xuruuf, laakiinse ku salaysan ruuxa, waayo, xarafku wax buu dilaa, laakiinse
ruuxu wax buu nooleeyaa*[u]. 7 Laakiin hadduu adeegga dhimashada ee dhagaxa lagu
naqshadeeyay, ammaan lahaa, ilaa oy reer banii Israa'iil ku dhici waayeen inay wejiga Muuse
aad u eegaan nuurka wejigiisa ka baxaya aawadeed,nuurkaasoo dhammaanaya, 8 Sidee
buusan adeegga ruuxu uga sii ammaan badnaan doonin? 9 Waayo, hadduu adeegga xukunku
ammaan lahaa, adeegga xaqnimaduna aad buu uga sii ammaan badanyahay. 10 Waayo, wixii
mar ammaanta lahaan jiray, ammaan la'aan ayuu noqday, ammaanta ka sarraysa aawadeed.
11 Maxaa yeelay, hadduu wixii baaba'ayay ammaan lahaan jiray, intee ka badan ayuu waxa
waaraya ammaan leeyahay. 12 Haddaba maadaama oo aynu rajadaas oo kale haysanno waa
aynu si geesinimo leh u hadalnaa. 13 Mana nihin sidii Muuse, kaasoo wejiga dabooshay si ayna
reer banii Israa'iil aad ugu eegin dhammaadka waxa baaba'ya. 14 Laakiin garaadooda ayay
adkeeyeen. Waayo, tan iyo maalintaas markii axdiga hore la akhriyo, isla indha duubkaas oo
aan laga faydin ayaa dushooda ah, kaasna Masiixa oo keliya ayaa ka faydi kara. 15 Laakiin tan
iyo maalintaas mar alla markii Muuse wax laga akhriyo xijaab ayaa quluubtooda saaran.
16 Laakiin mar alla markii loo soo leexdo Rabbiga xijaabkaas waa la faydaa. 17 Haddaba
Rabbigu waa Ruux oo meeshuu Ruuxa Rabbigu joogo, xorriyad ayaa taalla.
18 Laakiin dhammaanteen weji aan daboollayn ayanu sida muraayadda ammaanta Rabbiga ku
eegnaa, oo isla suuraddaas ayaa ammaan lagu daray ammaan laynoo badalaa, taasuna
Rabbiga Ruuxa ah ayay ka timaaddaa.

## Iftiinka Injiilka

**4** Sidaas daraaddeed maadaama oo uu Eebbe naxariistiisa aawadeed adeegan noo xil saaray,
qalbi jabi mayno, 2 Laakiin waxaannu iska fogaynay waxyaabaha qarsoon ee ceebta aha iyo
aannu khiyaano ku dhaqanno ama erayga Eebbe qalloocino, laakiinse runta ayaannu si cad u
muujinaa oo dadka oo dhan ayaanu damiirkayaga Ilahay hortiisa ku ammaanaa. 3 Laakiin
Injiilkayagu hadduu daboolan yahay, wuxuu ka daboolan yahay kuwa halaagmaya. 4 Sababtoo
ah, Eebbaha dunidan ayaa garaadka kuwa aan rumaysadka lahayn ka daboolay iftiinka Injiilka
ammaanta Masiixa, kaasoo ah u-ekaanta Eebbe, si uusan ugu iftiimin iyaga. 5 Waayo, annaga
qudhayadu idinkuma wacdino wax annaga nagu saabsan, laakiin waxaannu idinku wacdinnaa
wax ku saabsan Ciise Masiixa Rabbiga ah, iyo annagoo ah adeegayaasha Ciise aawadii.
6 Maxaa yeelay, waa Eebbe ka yidhi, Iftiin ha ka iftiimo gudcurka[239*] ka quluubteenna iftiimiyay
ee iftiinka aqoonta ammaanta Eebbe inagu siiyay Ciise Masiix wejigiisa.

## Tabardarida Rasuulka Iyo Xoogga Eebbe

7 Laakiin khasnaddan waxaannu ku sidnaa weelal dhoobo ah, sidaa darteed xooggan la
yaabka leh mid aannu annagu leenahay ma aha ee waa kii Eebbe. 8 Dhan kasta waa nalaga
dhibay, laakiinse nalama burburinin, waannu qalbi jabnay, laakiinse maanaan quusanin, 9 Waa
nala ciqaabay, laakiinse nalama dayrinin, hoos baa naloo cadaadiyay, laakiinse nalama
baabbi'inin. 10 Mar walba jidhka ayaannu ku sidnaa dhimashada Ciise, si ay haddana nolosha
Ciise jidhkayaga uga muuqato. 11 Waayo, inkasta oonu noolnahay mar walba geeri ayaa naloo
gacan galiyaa Ciise aawadii, si ay haddana nolosha Ciise uga muuqato jidhkayaga dhimanaya.
12 Sidaa daraaddeed annaga dhimashada ayaa naga dhex shaqaysaa, laakiin noloshu idinkay
idinka dhex shaqaysaa. 13 Waxaannu leennahay isku ruux iyo isku rumaysad, sida qoran Waan

239 Bilowgii 1:3

rumeeyay, sidaa aawadeed ayaan u hadlay[240*] annaguna waanu rumaysannaa, sidaa
aawadeed waannu hadalnaa. [14] Annagoo og inuu ka sarakiciyay Sayid Ciise uu inala sarakicin
doono Ciise, oo hortiista uu ina wada keeni doono idinka iyo annagaba. [15] Waayo, wax walba
waa idinka aawadiin, si nimcada badan ee ay dad badanu heleen aawadeed uu mahadnaqu u
bato oo uu u ammaanmo Eebbe. [16] Sidaa daraaddeed qalbi jabi mayno, laakiin in kastoo
jidhkeenna dudhu uu baaba'ayo, haddana shakhsiyaddeenna guduhu maalinba maalinta ka
dembaysa ayay cusboonaanaysaa. [17] Waayo, dhibaatooyinka yar yar ee hadda nagu dhacaya
waxay noo diyaarinayaan ammaanta weligiis ah. [18] Ma eegayno waxyaabaha la arki karo,
laakiinse waxyaabaha aan la arki karin, waayo, waxyaabaha la arko in yar bay sii jiraan, laakiin
waxyaabaha aan la arkin weligood way waaraan.

## Gurigeenna Jannada

**5** Waayo, waxaynu ognahay, haddii gurigeenna dhulka ee taambuug ahu uu dumo, inaynu
Eebbe agtiisa ku leenahay dhismo, mana aha guri gacmo lagu sameeyay ee waa mid jannada
ku yaalla oo weligii waaraya. [2] Maxaa yeelay, Kan waynu ku dhex taahnaa innagoo ku
taamayna inaynu huwanno rugteenna jannada ku taalla. [3] Haddii aynu huwan lahayn laynama
heleen innagoo qaawan. [4] Haddaba kuweenna taambuuggan ku jira waynu taahnaa, innagoo
layna culaysiyay, mana aha inaynu doonayno in layna qaawiyo, laakiin in layna huwiyo, si ay
noloshu u liqdo waxa dhimanaya. [5] Haddaba, ka waxan inoo diyaariyay waa Eebbe, kaasoo
carbuunta Ruuxa ina siiyay. [6] Sidaa daraaddeed mar walba waynu isku kalsoon nahay innagoo
og in intaynu jidhka ku jirno inaynu Rabbiga ka maqanahay, [7] Waayo, waxaynu ku soconnaa
iimaan ee ma aha aragga. [8] Waynu isku kalsoon nahay oo waxaynu jecelaan lahayn inaynu
jidhka ka maqnaano oo aynu Rabbiga la joogno. [9] Sidaa daraaddeed haddaynu joogno iyo
haddaynu maqan nahayba waxaynu ku dadaalnaa inaynu isaga ka farxinno. [10] Waayo,
dhammaanteen waa inaynu ka hor muuqanno kursiga maxkamadda Masiixa, si uu qof kasta u
helo waxyaabihii uu jidhka ku sameeyay abaalkooda, hadday tahay wanaag ama shar.

## Adeegga Dib U Heshiisiinta

[11] Sidaa daraaddeed annagoo og cabsida Rabbiga, ayaannu dadka qancinnaa, laakiin Eebbe
waannu u muuqannaa, oo waxaanu rajaynaynaa inaannu damiirkiinnana u muuqanno. [12] Mana
aha inaannu Annagu haddana hortiinna isku ammaano, laakiin waxaannu idin siinaynaa wax
aad aawadayo ku faantaan, si aad u heshaan wax aad ugu jawaabtaan kuwa muuqaalka ku
faana ee aan qalbiga ku faanin. [13] Maxaa yeelay, haddii aannu waalan nahay waa Eebbe
aawadii, haddii aannu miyir qabnana waa idinka aawadiin. [14] Waayo, jacaylka Masiixa ayaa na
kantaroola, annagoo tan maskaxda ku hayna, hadduu mid dhammaan u dhintay inay
dhammaantood wada dhinteen. [15] Haddaba isagu wuxuu u dhintay dhammaan si ayna kuwa
nool mar dambe ugu sii noolaanin naftooda laakiin ay ugu noolaadaan ka aawadood u dhintay
ee u sarakacay. [16] Sidaa aawadeed hadda laga billaabo annagu cidna jidhka ku qiimayn
mayno, si kasta oo aannu mar Masiixa jidhka ku qiimayn jirnay, haddase mar dambe isaga
sidaa uma qiimayn doonno. [17] Sidaas daraaddeed hadduu qof Masiix ku jiro waa abuur cusub
oo waxyaabihii hore way dhammaadeen, bal eega, wax waluba way cusubyihiin.

240 Sabuur 116:10

[18] Wax walbana xagga Eebbe ayay ka ahaadeen, kaasoo inagula heshiiyay Masiixa, oo na
siiyay adeegidda heshiisiinta, [19] Taasu waxaa weeye, inuu Eebbe dunida Masiixa kula
heshiiyay, isagoo aan dembiyadooda u xisaabinin oo wuxuu na siiyay farriinta heshiisiinta.
[20] Sidaas daraaddeed waxaannu nahay safiirro Masiixa dartii, sidii iyadoo uu Eebbe idinku
baryay annaga, oo waxaannu idinku baryaynaa Masiixa aawadii ee la heshiiya Eebbe.
[21] Maxaa yeelay, mid aan dembi aqoonin ayuu dembiile uga dhigay aawadeen, si aynu isaga
ugu noqonno xaqnimada Eebbe.

**6** Maadaama oynu dhammaanteen la shaqaynayno isaga, waxaannu idinka codsanaynaa
inaydaan macna la'aan u aqbalin nimcada Eebbe, [2] Waayo, wuxuu leeyahay, Saacaddiii
ijaabada ayaan ku dhegaystay oo maalintii badbaadada ayaan ku caawiyay.[241*] Bal eeg, hadda
waa saacaddii ijaabada, bal eeg, hadda waa maalintii badbaadada. [3] Annagu ninna wax lagu
turunturroodo uma dhigno, si aan adeeggayaga wax looga sheegin. [4] Laakiinse sida
adeegayaasha Eebbe ayaannu si walba isugu muujinnaa dulqaad badan iyo dhibaatooyin iyo
baahi iyo cidhiidhi, [5] Iyo garaacid iyo xabsiyo iyo rabshado iyo hawlo iyo hurdo la'aan iyo soon,
[6] Annagoo isku muujinna daahirsanaan iyo aqoon iyo samir iyo naxariis iyo Ruuxa Qudduuska
ah iyo jacayl daacad ah, [7] Iyo hadalka runta ah iyo xoogga Eebbe iyo hubka xaqnimada xagga
midig iyo xagga bidixba, [8] Haddii nala maamuuso iyo haddii nala xaqiraba, iyo haddii war xun
nala sheego iyo haddii war wanaagsan nalaga sheegaba, sidii annagoo ah khaa'imiin laakiin
kuwa runta ah, [9] Sidii kuwo aan la garanaynin, laakiinse la yaqaanno, sidii kuwo dhimanaya,
laakiin bal eeg, waannu noolnahaye, sidii kuwo la edbinayo, laakiin aan la laynaynin, [10] Sidii
kuwo aad u murugaysan, laakiin haddana had iyo jeerba faraxsan, sidii kuwo faqiir ah,
laakiinse dad badan hodan ka dhigay, sidii kuwo aan waxba haysanin laakiinse wax walba leh.
[11] Si xor ah ayaannu idiinla hadallaa reer korintosow, qalbigayaguna si wayn buu idiinku furan
yahay. [12] Annaga maydaan naga qalbi jebin, laakiinse idinkaa is qalbi jebiyay. [13] Haddaba
idinkuna sidaas oo kale noogu qalbi furnaada. (Waxaan idiinla hadlayaa sida carruutayda oo
kale.)

### Waxaad Tihiin Guriga Eebbaha Nool

[14] Ha noqonina kuwo hoos gala harqoodka kuwa aan iimaanka lahayn, waayo, xaqnimada iyo
dembiga maxaa ka dhexeeya, ama iftiinka iyo gudcurka maxaa ka dhexeeya? [15] Oo maxaa
Masiix iyo Iblays ka dhaxayn kara? Ama mumin iyo mid aan mumin ahayn maxaa ka
dhexeeya?

[16] Oo maxaa ka dhexeeya macbudka Eebbe iyo sanamyo? Waayo, innagu waxaynu nahay
macbudka Eebbaha nool, sida uu Eebbe yidhi,
Iyaga waan dhex joogi doonaa, waanan dhex socon doonaa oo Eebbahooda ayaan ahaan
doonaa, iyaguna dadkayga ayay ahaan doonaan. [17] Sidaa daraaddeed, Ka soo baxa
dhexdooda oo ka soocma, ayuu Rabbigu leeyahay, Oo ha taabanina wax aan daahir ahayn,

241 Ishacyaah 49:8

Waan idin aqbali doonaaye.[242*] [18] Waxaan idiin ahaan doonaa Aabbe, Oo idinkuna waxaad ii ahaan doontaan wiilal iyo gabdho, ayuu Rabbiga Qaadirka ahu leeyahay.[243*]

**7** Haddaba, maadaama oo aynu ballanqaadyadan haysanno kuwiinna la jecelyahayow, aan iska daahirino nijaas kasta oo xagga jidhka iyo ruuxa ku jirta, innagoo qudduusnimada ku kaamilayna cabsida Eebbe.

### Bawlos Oo Ku Farxay Toobadkeenidda Kiniisadaha

[2] Quluubtiinna noo fura. Ninna maanaan si xun ula dhaqmin, oo ninna maanaan ku xadgudbin
oo ninna wixiisa maanaan damcin. [3] Sidaa uma lihi inaan idin xukumo, waayo, mar hore ayaan
idhi, Quluubtayada ayaad ku jirtaan oo geeri iyo nolo midna kuma kala hadhayno. [4] Aad baan
idiinku dhiirranahay oo aad baan idiinku faanaa, oo kalsooni baa iga buuxda. oo mar kasta oo
aan dhibaataysannahay farxad ayaa iga badata. [5] Waayo, markaannu Makedoniya nimid
jidhkayagu ma nasanin, laakiin dhinac walba dhibaato ayaa naga haysatay dagaallo ayaa
dibadda naga haystay oo cabsi ayaa gudaha naga haysatay. [6] Laakiin Eebbaha dhiirri geliya
kuwa is-hoosaysiiya ayaa nagu dhiirri geliyay imaatinka Tiitos, [7] Mana aha imaatinkiisa oo
keliya, laakiinse wuxuu nagu dhiirri galiyay dhiirri gelintii aad isaga dhiirri geliseen. Wuxuu noo
sii sheegay hilowga iyo murugada iyo xamaasadda aad ii qabtaan, si aan weliba aad ugu sii
farxo. [8] Waayo, in kastoo aan warqaddaydii idin murugo galiyay, kama qoomamaynayo, in
kastoo aan markii hore ka qoomameeyay, waayo, waxaan gartay warqaddaas inay idin murugo
gelisay, wakhti yarba ha ahaatee. [9] Haddana waan ku farraxsanahay, mana aha inaad si kale u
murugooteen, laakiin inaad u murugooteen si aad u toobadkeentaan, waayo, waxaad u
murugooteen si doonista Eebbe waafaqsan, si ayna xaggayaga wax dhibaato ahu idiinka soo
gaadhin. [10] Maxaa yeelay, inaad dar Eebbe u murugootaan waxay keentaa toobad lagu
badbaado oo aan laga qoomamayn, laakiin adduunyada oo loo murugoodo waxay keentaa
dhimasho. [11] Bal eega, murugadii aad dar Eebbe u murugooteen waxay xamaasad iyo is celin
iyo cadho iyo cabsi iyo dadaal iyo qiiro iyo is edbin idinka soo saartatay. Bale wax walba
waxaad ku muujiseen sidaad bari u tihiin.

[12] Haddaba in kastoo aan idiin soo qoray, uma soo qorin ka xadgudbay iyo ka lagu xad gubay
toona, laakiinse in xamaasadda aad noo qabtaan lagu muujiyo Eebbe hortiis. [13] Sidaa
aawadeed waa nala dhiirri galiyay dhiirri gelintiinna aawadeed, oo waxaannu aad ugu sii
faraxnay farxaddii Tiitos aawadeed, waayo, dhammaantiin ruuxiisa ayaad nasiseen. [14] Waayo,
haddii aan wax faan ah oo idinku saabsan u sheegay kama yaxyaxayo, laakiin siday wax
walba oonnu idinkula hadalnay run u ahaayeen, sidaas oo kale ayuu faankayagii aan Tiitos u
sheegayna run u ahaa. [15] Haddaba Jacaylka uu idiin qabo wuu sii badanayaa, maxaa yeelay,
wuxuu xusuustaa dhammaantiin addeeciddiinna iyo sidaad idinkoo cabsanaya oo gariiraya u
soo dhawayseen. [16] Waan faraxsanahay, sababtoo ah si walba waan idiinku kalsoonahay.

242 Laawiyiintii 26:12 iyo Yexesqeel 37:27

243 Samuu’eel Labaad 7:14 iyo Boqorrada Kowaad 17:13

## Qudduusiinta Quddus Oo Wax Loo Uruuriyay

**8** Haddaba, walaallayaal, waxaad ogtihiin nimcada Eebbe siiyay kiniisadaha Makedoniya,
[2] Sidii dhibaatooyin badan oo lagu tijaabiyay ay farxaddoodii badnayd iyo baahidoodii aadka
uga badnaydba isugu baddaleen hodantinimo deeqsinimo ku jirto. [3] Waayo, waxaan ka marag
furayaa inay intii karaankooda ah wax u bixiyeen oo ay weliba iyagoo ikhtiyaarkooda ku
bixinaya awooddooda dhaafiyeen, [4] Iyagoo aad nooga baryaya inaannu ka guddoonno
hadiyadda ay kaga qayb qaadanayaan u gargaaridda qudduusiinta, [5] Oo tanuna ma aha wax
aannu filaynay, laakiinse hore ayayba naftooda Rabbiga iyo annagaba u siiyeen si Eebbe
doonistiisa waafaqsan. [6] Sidaas daraaddeed Tiitos waxaannu ka codsannay in siduu markii
horeba u billaabay, sidaas oo kale idiinku dhammeeyo nimcadan. [7] Laakiinse sidaad wax kasta
hodan ugu tihiin hadday tahay xagga iimaank iyo af tahannimada iyo aqoonta iyo xamaasadda
iyo jacaylka aad noo qabtaan, waa inaad nimcada wax bixintana hodan ku ahaataan.
[8] Taasuna ma aha wax aan waajib idinkaga dhigayo, laakiinse si aan xamaasadda kuwa kale
ugu muujiyo daacadnimada jacaylkiinna. [9] Maxaa yeelay, waad ogtihiin nimcada Rabbigeenna
Ciise Masiix, siduu isagoo hodan ah uu aawadiin faqiir ugu noqday, si aad miskiinnimadiisa
hodan ugu noqotaan. [10] Oo sidan ayaan idinkula talinayaa, waayo, tanu uma habboona inay
kuwii sannad ka hor billaabay inay sameeyaan oo keliya, laakiin inay doonaan. [11] Laakiin
hadda shaqada dhammeeya si sidaad diyaarka ugu ahaydeen aad haddana ugu dhammays
tirtaan waxaad awooddaan. [12] Waayo, haddii uu qofku diyaar yahay wixii uu bixiyo ayaa la
aqbalaa, ee ma aha wixii uusan heli karin. [13] Waayo, tan uma lihi in kuwa kale la daayo oo
idinka culays laydin saaro, [14] Laakiin si sinnaan loo helo, wax ka bixiya waxa badan ee aad
wakhtigan xaadirka ah heli kartaan, waayo, way baahanyihiin, si ay waxooda badan wax idinka
siiyaan markaad baahataan, si sinnaan loo helo, [15] Sida qoran Kii wax badan soo gurtayna,
waxba uma hadhin, kii wax yar soo gurtayna, waxba uma baahna.[244*]

## Ammaantii Tiitos

[16] Laakiin Eebbe ayaa mahad leh, kaasoo qalbiga Tiitos galiyay daryeelka xamaasadda leh ee
aannu idiin qabno oo kale. [17] Waayo, codsigayaga oo keliya ma uusan aqbalin, laakiin isaga
qudhiisu aad buu u doonayaa inuu idiin yimaado, maxaa yeelay, wuu idiin hiloobay. [18] Oo
waxaannu isaga la soo dirnay walaaka ay siduu Injiilka ugu adeego ammaantiisu kiniisadaha
oo dhan caanka ka noqotay. [19] Intaasoo keliyana ma aha, laakiin isagu waa kii ay kiniisaduhu u
xil saareen inuu nala safro oo uu hadiyaddan Rabbiga qudhiisa lagu ammaanayo nagala
adeego oo la arko sidaad diyaarka ugu tihiin. [20] Annaguna waxaannu iska ilaalinaynaa inuusan
qofna nagu eedaynin adeegan deeqsinimada leh ee aannu u adeegayno, [21] Waayo, waxaannu
ku dadaalnaa inaanaan Rabbiga hortiisa oo keliya aamin ku ahaanin, laakiinse aannu sidoo
kale dadka hortoodana aamin ku ahaanno. [22] Oo waxaannu iyaga la dirnay walaalkeen, kaasoo
aannu marar badan caddaynay sida uu waxyaabo badan xamaasad ugu leeyahay, haddana
weliba aad buu ugu xamaasadaysanyahay sida wayn ee uu idiinku kalsoonyahay aawadeed.
[23] Tiitosna waa wehelkayga iyo ka xaggiinna igala adeega, walaaleheenna kalana waa kuway
kiniisaduhu idiin soo direen, waana ammaanta Masiixa. [24] Sidaa daraaddeed kiniisadaha
hortooda ku muujiya sidaad iyaga u jeceshihiin iyo sidaannu idiinku faanayno.

244 Baxniintii 6:18

## Gargaarkii Loo Uruuriyay Kinisadda Quddus

**9** Marka arrinta ku saabsan u gargaaridda qudduusiinta, looma baahna inaan wax idiinka soo
qoro, 2 Waayo, waan ogahay sidaa diyaarka ugu tihiin taasoon reer Makedoniya idinku
faaniyay, anigoo leh: dadka Akhaya sannad ka hor ayay diyaar ahaayeen, oo
xamaasaddiinuna aad bay u sii kicisay intooda badan. 3 Laakiinse walaalaha ayaan diray, si
faanka aannu idinku faanayno ee arrintanu uusan macna la'aan u noqonin, oo aad sidaan
horayba u sheegay diyaar ahaataan, 4 Waxaaaba laga yaabaa hadday kuwo reer makedoniya
ahu isoo raacaan oo ay arkaan inaydaan weli diyaar ahay in faankan aannu idinka ma ahee
annagu ku ceebowno. 5 Sidaa daraaddeed waxaan u arkay inay lagama maarmaan tahay
inaan walaalaha ka codsado inay horay idiinku yimaaddaan oo ay horay u sii diyaariyaan
gargaarka aad ballanqaaddeen, qasabna ma aha.

## In Si Deeqsinimo Leh Wax Loo Bixiyo

6 Laakiin tan ogaada: Kii wax yar beera wax yar buu goostaa, kii wax badan beeraana, wax
badan buu goostaa. 7 Qof kastana sida niyaddiisa ku jirta wax ha u bixiyo oo yuusan ku bixinin
isagoo ka xun ama qasab, waayo, Eebbe wuxuu jecelyahay qofkii farxad wax ku bixiya. 8
Oo Eebbe wuxuu awooddaa inuu nimca kasta hodan idinkaga dhigo, si aad mar walba wax
kasta isku filaansho uga gaadhaan oo ay qabashada shaqooyinka wanaagsan idinku bataan,
9 Sida qoran, Isagu si deeqsinimo leh ayuu wax u qaybiyay, masaakiintana wax buu siiyay,
Xaqnimadiisuna way sii jirtaa weligeedba.[245*] 10 Ka beeralayda abuur iyo cunto la cuno siiya,
wuu siin doonaa wuuna badin doonaa abuurkiinna aad abuuraysaan, wuuna badin doonaa
midhaha xaqnimadiinna. 11 Si walba hodan baa laydiinka dhigi doonaa deeqsinimadiinna
aawadeed, taasoo anaga dhexdayada Eebbe loogu mahadnaqo. 12 Waayo, shaqada adeeganu
ma aha oo keliya inuu baahiida qudduusiinta daboolo, laakiin waxaa kale oo ka imanaya in
Eebbe aad loogu mahadnaqo. 13 Markay arkaan sidaad adeegan u qabateen Eebbe ayay
ammaanaan waao, sidaad u addeecdeen qirashada Injiilka Masiixa iyo deeqsinimadiinnii aad
la wadaagteen iyaga iyo dadka kale oo dhanba. 14 Wayna idiin duceeyaan, oo waxay u
hiloobeen nimcada aadka u badan ee Eebbe idinku mannaystay. 15 Eebbe ayaa mahad leh,
hadiyaddiisa aan la qiyaasi karin awgeed.

## Bawlos Oo Adeeggiisa Iyo Rasuulnimadiisa Difaacay

**10** Haddaba Aniga Bawlos ah qudhaydu waxaan idinku baryayaa qabownaanta iyo naxariista
Masiixa, anigoo is-hoosaysiiya markaan idin dhex joogo, laakiin xaggiinna geesi ku ah markaan
idinka maqnahay. 2 Laakiin waxaan idinka baryayaa in markaan idinla joogo inaanan
kalsoonidan oo kale layhayn, sida layga filayo inaan geesi ugu ahaado xagga kuwa nagu
eedeeya inaannu sida jidhka u soconno. 3 Maxaa yeelay, in kastoo aannu jidhka ku soconno
haddana sida jidhka uma dagaallanno, 4 Waayo, hubka dagaalkayagu ma aha xagga jidhka,
laakiinse xoog ayay xagga Eebbe ku leeyihiin si dhufaysyo xoog leh loogu burburiyo.
5 Waxaannu baabbi'innaa doodaha iyo wax kasta oo sarreeya oo aqoonta Eebbe iska
sarraysiiya oo fikir kasta ayaannu maxbuus ka dhignaa si uu Masiix u addeeco, 6 Annagoo
diyaar u ah inaannu ka aargudanno caasinimo dhammaanteed markay addeeciddiinnu kaamil
noqoto. 7 Ma xagga daahirka ayaad siday wax u muuqdaan ka eegaysaan? Hadduu qof isku

---

245 Sabuur 112:9

hubo inuu ka midyahay kuwa Masiixa, kaasu mar kale naftiisa ha xusuusiyo in siduu isagu uga
midyahay kuwa Masiixa inaannu annaguna uga midnahay. [8] Waayo, in kastoo aan siyaabo
badan u faanayo awoodda uu Rabbigu noo siiyay inaannu idinku dhisno oo uusan noo siinin
inaannu idinku burburino, haddana ma ceeboobi doono. [9] Taas uma lihi inaan u muuqdo sidii
anigoo waraqadahayga idinku cabsiinaya. [10] Waayo, waxay yidhaahdaan Warqadihiisu culays
iyo xoog bay leeyihiin, laakiinse muuqaalkiisa jidhku wuu tabardaran yahay, oo hadalkiisana
waxba lagama soo qaado. [11] Kaasoo kale ha ogaado in sidaannu xagga hadalka warqaddaha
ku nahay markaannu maqannahay, aannu xagga ficilkana ku nahay markaannu joogno.
[12] Waayo, kuma dhacno inaannu is barbar dhigno ama isu ekaysiinno kuwa is-ammaana.
Laakiin iyagu markay qudhooda ku qiyaasayaan oo uu badhkoodba badhka kale isku qiyaaso
oo is barbar dhigo kuwo caqli leh ma aha. [13] Laakiin si xad dhaaf ah isuma faanino, laakiin sida
ay tahay qiimaynta sharciga ah ee Eebbe noogu tala galay, si aannu xataa idinka idiin soo
gaadhno. [14] Waayo, annaga qudhayadu isuma buun buunino sidii annaga oon idin soo
gaadhin; waayo,waxaannu ahayn kuwii ugu horreeyay ee xataa idinka idin soo gaadhsiiyay
Injiilka Masiixa, [15] Annaga oon si qiimayntayada ka baxsan ugu faanaynin hawshii dadka kale,
laakiinse waxaannu ku rajo waynahay markuu iimaankiinnu koro, inaannu aad iyo aad ugu
waynaan doonno dhexdiinna sida uu sharcigayagu noo xadeeyay, [16] Si aannu Injiilka ugu
wacdinno gobollada idinka shisheeya oo aanan ugu faanin shaqo ay dad kale qabteen
qiimaynteeda. [17] Qofkii faanaya, Rabbiga ha ku faano. [18] Maxaa yeelay, ma aha ka qudhiisa
ammaana ka loo bogaa, laakiinse waa kan uu Rabbigu ammaano.

### Bawlos Iyo Kuwa Rasuulnimada Beenta Ah Sheegta

**11** Waxaan jeclaan lahaa inaad iigu dulqaadataan doqonnimadayda yar. dhab ahaantiina waad
ii dulqaadataan. [2] Waxaan idiinku masayraa dar Eebbe, waayo waxaan idiin doonay nin keliya,
si aan Masiixa idiinku dhiso idinkoo ah bikrad daahir ah. [3] Laakiin waxaan ka cabsanayaa in
maankiinna laga kharribo daacadnimada iyo daahirsanaanta xagga Masiixa, siday abeesadu
xeeladdeeda Xaawa ugu khiyaantay oo kale. [4] Waayo, hadduu mid kale idiin yimaado oo idinku
wacdiyo Ciise kale oo aanan idinku wacdiyin, ama haddaad heshaan ruux ka duwan kii aad
hesheen, ama injiil ka duwan kii aad aqbasheen, si wanaagsan ayaad ugu dulqaadataan.
[5] Waxaan filayaa inaanan sinaba uga liidanin rasuulladaas aadka u sarreeya. [6] Laakiin in
kastoo aanan cod kar ahayn, haddana aqoonta kuma liito oo taasaana si walba waannu idiinku
muujinnay dadka oo dhan hortiisa. [7] Ma khalad baan sameeyay markaan is-hoosaysiiyay si
idinka laydin sarraysiiyo, maxaa yeelay, Injiilka Eebbe ayaan idinku wacdiyay isagoo lacag
la'aan ah? [8] Kiniisado kale ayaan dhacay, anigoo taageero ka qaatay, si aan idiinku adeego.
[9] Markaan idinla joogay ee aan wax u baahnaana, ninna culays kuma hayn, waayo, walaalihii
Makedoniya ka yimid ayaa waxaan u baahnaa oo dhan ii keenay, si kasta waan isu
xakameeyay si aanan idiin culaysinin, waanan is xakamayn doonaa. [10] Maadaama oo ay runta
Masiixu igu jirto, cidna faankan igama joojin karto gobolka Akhaya. [11] Waayo? Miyaanan idin
jeclayn? Eebbe wuu ogyahay. [12] Laakiin waxaan samaynayo, waan sii wadi doonaa, si aan u
baabi'iyo fursaddii ay kuwa doonaya inay faanaan oo ay ku faafaan inay annagoo kale yihiin ku
faani lahaayeen. [13] Kuwaas oo kale waa rasuullada beenta iyo shaqaalaha khayaanada, iyagoo
isu ekaysiinaya rasuullada Masiixa. [14] Oo layaab ma laha, waayo, Shaydaanka qudhiisu wuxuu
isu ekaysiiyaa malaa'igaha iftiinka. [15] Haddaba wax wayn ma aha hadday adeegayaashiisuna
isu ekaysiiyaan adeegayaasha xaqnimada, iyagoo u dhammaan doono sida camalkooda.

### Bawlos Oo Rasuulnimadiisa Darteed U Rafaaday

[16] Mar kale waxaan leeyahay, Qofna yuusan doqon ii malaynin, laakiin xataa haddaad ii
malaysaan, sidii doqon ii aqbala, si aan aniguna in yar u faano. [17] Waxaan ku hadlayo uguma
hadlayo sida Rabbigu doonayo, laakiinse waa faankayga geesinimada iyo doqonimada leh.
[18] Maadaama oy kuwa badan sida jidhka u faanaan, ayaan aniguna ugu faani doonaa.
[19] Waayo, idinku si farxad leh ayaad doqonnada ugu dulqaadataan idinkoo isu haysta kuwo
caqli leh. [20] Maxaa yeelay, waad u dulqaadataan nin hadduu idin addoonsado, ama hadduu
wixiinna cuno, ama hadduu wax idinka qaato, ama hadduu isa iska kiin sarraysiiyo, ama
hadduu wejiga idinka dhurbaaxo. [21] Ceebtay, waaban ka xishoonayaa inaan idhaahdo,
Waannu tabardaran nahay!

Si kastaba ha ahaatee, wax walba oo uu qof kale ku dhiirradu inuu ku faano (sida doqonkaan
u hadlayaaye) Aniguna waan ku dhiirranayaa inaan ku faano. [22] Iyagu ma Cibraaniyiin baa?
Anna waan ahay. Ma reer banii Israa'iil baa? Anna waan ahay. Ma farcankii Ibraahim baa?
Anna waan ahay. [23] Iyagu ma Masiixay u adeegaan? (Sidii nin waalan ayaan u hadlayaaye)
Anigaa ka adeeg fiican. Waan ka hawlo badnaa, oo waan ka xabsi badnaa oo shaabuug aan la
tirin karin ayaa laygu garaacay, marar badanna geeri ayaan ku dhawaaday. [24] Shan jeer ayay
Yuhuuddu waxay i karbaasheen afartan mid la'. [25] Saddex jeerna ul baa laygu garaacay, marna
waa lay dhagaxeeyay, saddex jeerna doonni baa ila jabtay, habeen iyo maalinna waxaan ku
jiray badda. [26] Marar badan ayaan safray oo aan galay khatar xagga daadadka ah, ama khatar
xagga budhcad ah ama khatar xagga dadkayaga ah ama khatar xagga ajinabiga ah ama
khatar xagga magaalada ah ama khatar xagga baadiyaha ah ama khatar xagga badda ah ama
khatar xagga walaalo been ah. [27] Waxaanna ku jiray hawl iyo daal iyo hurdo la'aan badan iyo
gaajo iyo harraad, marar badan cunto la'aan iyo qabow iyo arrad. [28] Arrimahaas dibadda ahna
waxaa ii dheeraa, maalin walba culayska ay leeday daryeelka iyo ka welwelidda kiniisadaha oo
dhan. [29] Kumaan tabar beelay oo aanan aniguna la tabar beelin? Kumaa xumaan ku dhacay oo
aanan ka gubanin? [30] Hadday tahay inaan faano waxaan ku faanayaa waxyaabaha ku saabsan
tabardarridayda. [31] Eebbaha ah Aabbaha Sayid Ciise, ka barakada leh weligiis, wuu ogyahay
inaanan been sheegaynin. [32] Xagga Dimishaq guddoomiyihii ka hooseeyay boqor Aretas ayaa
gaadh ka qabtay magaalada Dimishaq si uu ii qabto. [33] Markaas anigoo salad ku jira ayaa
daaqad derbiga ku taalla hoos layga dejiyay oo aan gacmihiisii ka baxsaday.

### Riyadii Bawlos

**12** Waa inaan faano in kastoo aana waxba ka helaynin, laakiin waxaan u iman doonaa riyadii
iyo waxyigii uu Rabbigu ii muujiyay. [2] Waxaan ogahay nin Masiixa ku jira oo afar iyo toban
sannadood ka hor kor loo qaaday ilaa iyo samada saddexaad. Inuu jidhka ku jiray iyo inuusan
jidhka ku jirin ma garanayo, Eebbe ayaase og. [3] Oo waxaan ogahay ninkaas, laakiin inuu jidhka
ku jiray iyo inuusan jidhka ku jirin ma garanayo, Eebbe ayaase garanaya. [4] Sidii isaga Firdoosa
kor loogu qaaday oo wuxuu maqlay erayo aan lagu hadlin oo aan nin loo idmin inuu ku hadlo.
[5] Kaasoo kale waan ku faani doonaa, laakiinse anigu laftayda kuma faani doono,
tabardarridayda mooyee. [6] Waayo, haddaan doono inaan faano, doqon ma ahaan doono,
waayo, runta ayaan ku hadli doonaa; laakiinse waan isxakameeya si uusan qofna iigu
malaynin mid ka wayn wuxuu igu maqlo ama igu arko. [7] Haddaba si aanan isugu sarraysiinin
waxyiga wayn ee la ii muujiyay aawadeed, waxaa laygu salliday qodax jidhkayga mudda oo ah

mid Shaydaan soo diray si uu ii dhibo oo uu iiga hor istaago inaan isa sarraysiiyo. [8] Taas aawadeedna saddex jeer ayaan Rabbiga ka baryay inuu waxaas iga fogeeyo. [9] Laakiin wuxuu igu yidhi, Nimcadayda ayaa kugu filan, maxaa yeelay, xooggaygu wuxuu ku dhammays tirmaa tabardarridaada. Sidaa aawadeed anigoo ku faraxsan ayaan ku faanayaa tabardarridayda, si xoogga Masiixu igu soo dego. [10] Sidaa daraaddeed, Masiixa aawadii, waxaan ku farxaa tabardarridayda iyo af lagaaddada iyo baahida iyo ciqaabta iyo dhibaatooyinka, waayo, markaan tabardaranahay, ayaan xoog badnahay. [11] Doqon baan noqday; idinkaase igu qasbay. Waxay ahayd inaad i ammaantaan, waayo, sinaba ugama liidan rasuulladii ugu wada waawaynaa, in kastoo aanan waxba ahayn. [12] Hubaal calaamadihii rasuulnimada ayaa si dulqaad leh dhexdiinna lagu sameeyay, hadday tahay calaamado iyo waxyaabo la yaab leh iyo shaqooyin xoog leh. [13] Maxaa idinka dhiman oo aad uga liidataan kiniisadaha kale, inaanan culays idin saarin mooyee? Gaftaasna ka raalli ahaada.

### Bawlos Wuxuu Qorshaystay Inuu Mar Saddexaad Korintos Booqdo

[14] Bal eega, waa markii saddexaad oo aan u diyaar garoobo inaan idiin imaaddo, idinmana culaysin doono, maxaa yeelay, idinkaan idin doonayee ma doonayo wixiinna, waayo, ma aha inay carruurtu waalidkood wax u kaydiyaan, laakiinse waa inuu waalidku carruurta wax u kaydiyo. [15] Aniguna si farxad leh ayaan isu dabari doonaa oon naftayda u biili doonaa. Haddaan aad idiin jeclahay, ma in yar baa lay jecelaanayaa? [16] Habase ahaatee anigu idinma culaysinin, laakiin waan idin khayaamay oo waan idin kashifay. [17] Ma wax faa'iido ah buu idiinka helay kuwii aan idiin soo diray midkoodna?

[18] Waxaan Tiitos ku waaniyay inuu tago, walaalkeenna waan la diray isaga. Tiitos ma wax faa'iido ah buu idiinka qaatay? Miyaannan isku ruux ku soconin? Miyaannan isku tallaabo ku soconin? [19] Haddana waxaad u malaynaysaan inaannu aktiinna isku daafacayno. Eebbe hortiisa waxaannu u hadlaynaa sida kuwo Masiixa oo la jecelyahay, wax kastaba waxaannu u samaynaa si aad u dhisantaan. [20] Waayo, waxaan ka cabsanayaa in, markaan imaaddo, aan idinka waayo sidaan filayay inaad ahaataan, idinkuna aad iga waydaan sidaad iga filayseen inaan ahaado oo waxaaba laga yaabaa inay idinka dhex jiraan muran iyo hinaase iyo xanaaq iyo kala qaybsanaan iyo cay iyo xan iyo kibir iyo rabshad, [21] Oo waaba intaasoo markaan mar kale imaaddo uu Eebbe hortiinna igu hoosaysiiyaa oo aan u ooyaa kuwo badan oo hadda ka hor dembaabay oo aan ka toobadkeenin faasiqnimadii iyo sinadii iyo nejaastii ay faleen.

### Digniintii U Dambaysay

**13** Tanu waa markii saddexaad oo aan idiin iman doono. Laba ama saddex markhaati afkooda waa in arrin walba lagu xaqiiqiyo. [2] Horaybaan idiinku digay markaan idin la joogay markii labaad, haddana mar labaad waxaan leeyahay anigoo maqan, markaan imaaddo kuwii horay u dembaabay iyo inta kale toona uma turi doono, [3] Maadaama ood doonaysaan wax muujinaya in Masiixu iga dhex hadlayo, ka aan xaggiinna ku awood yarayn, laakiinse dhexdiinna ku xoogga badan. [4] Waayo, isagoo tabardaran ayaa iskutallaabta lagu qodbay, laakiin wuxuu ku noolyahay xoogga Eebbe. Annaguna sidoo kale isaga waannu la awood yarrahay, laakiin xaaladdiinna isaga ayaannu xoogga Eebbe kula noolaan doonaa. [5] Is tijaabiya inaad iimaanka ku jirtaan iyo in kale oo bal is-itixaama. miyaydaan is-ogayn in Ciise Masiix idinku jiro haddaydaan ahayn kuwo tijaabada ku fashilmay? [6] Laakiin waxaan ku kalsoonahay inaad ogaan doontaan inaannan ahayn kuwo fashilmay. [7] Hadda waxaannu Eebbe ka baryaynaa

inaydaan wax shar ah samaynin, mana aha inaannu annagu u muuqanno sidii kuwo tijaabada
ku guulaystay, laakiinse waa inaad idinku wax waanaagsan samaysaan, in kastoo aannu
nahay sidii kuwo guul darriystay. 8 Waayo, annagu ma samayn karno wax runta ka soo hor
jeeda, laakiinse runta oo keliya ayaannu samaynaa. 9 Waayo, waannu ku faraxnaa markaannu
tabar yaraanno oo aad idinku awood badnaataan oo inaad kaamil noqotaan ayaannuba Eebbe
ka baryaynaa. 10 Sababtan aawadeed ayaanan farriintan u qoray maraan idinka maqnaa, si
markaan idiin imaaddo aanan idiinla dhaqmin si adag oo waafaqsan amarkii uu Rabbigu i
siiyay inaan idinku dhiso oo aanan idinku duminin.

### Dhammaadka

11 Ugu dambaysta, walaallayaal, waxaan idinku leeyahay, Nabadgelyo. Kaamil ahaada oo
geesinimo lahaada oo isku fikir ahaada oo nabad ku wada noolaada, oo Eebbaha jacaylka iyo
nabaddu wuu idinla jiri doonaa. 12 Dhunkasho qudduus ah midkiinba midka kale ha ku salaamo.
13 Qudduusiinta oo dhanna way idin soo salaamayaan. 14 Nimcada Sayid Ciise Masiix iyo
jacaylka Eebbe iyo wehelnimada Ruuxa Qudduuska ahu dhammaantiin ha idinla jireen.

# WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER GALATIYA

## Salaan

**1** Ka socota Bawlos, oo ah rasuul aan xagga dadka ka imanin, oo aan doonista dadka ku
imanin, laakiinse ku yimid Ciise Masiix iyo Eebbaha Aabbaha ah oo isaga ka sarakiciyay kuwii
dhintay. 2 Aniga iyo dhammaanba walaalaha ila jooga waxaannu warqaddan u qoraynaa
kiniisadaha Galatiya. 3 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbaha ah iyo
Rabbigeenna Ciise Masiix, 4 Kaasoo naftiisii u bixiyay dembiyadeenna aawadood, si uu inooga
samata bixiyo dunidan la joogo ee sharka leh, sida ay tahay doonista Eebbaheenna oo ah
Aabbaheen. 5 Isagaa ammaanu ha u ahaato weligeed iyo weligeedba. Aamiin.

## Injiil Kale Ma Jiro

6 Waxaan la yaabay sida deg degga leh ee aad uga baydheen kii nimcada Masiixa idiinku
yeedhay oo aad ugu baydheen injiil kale, 7 Mana aha inuu mid kale jiro, laakiin waxaa jira kuwo
idin dhibaya oo doonaya inay Injiilka Masiixa idinka leexiyaan. 8 Laakiinse ha ahaato annaga
ama malaag samada ka yimid ha ahaadee, ciddii idinku wacdida injiil aan ahayn kaannu idinku
wacdinay, habaar ha ku dhaco. 9 Sidii aannu horayba u nidhi, waxaannu haddana leeyahay,
Haddii nin idinku wacdiyo injiil kale oo aan ahayn kii aad aqbasheen, habaar ha ku dhaco.
10 Ma raalli ahaanshaha dadka ayaan ku dadaalayaa hadda mise ka Eebbe? Mise waxaan
doonayaa inaan dadka ka farxiyo? Haddaan weli doonayo inaan dadka ka farxiyo, ma
ahaadeen adeegihii Masiixa.

## Bawlos Waxyiga Injiilka Wuxuu Ka Helay Masiixa

11 Laakiin waxaan idiin caddaynayaa walaallayaal, in Injiilka aan idinku wacdiyay uusan ka
imanin xagga banii aadanka. 12 Waayo, kamaan helin xagga banii aadanka, laymana barin,
laakiin waxaa ii waxyooday Ciise Masiix. 13 Waayo, waad maqasheen hab nololeedkaygii hore
sidaan diinta Yuhuudda ku ahaa iyo sidaan kiniisadda Eebbe aadka ugu ciqaabi jiray oo aan u
burburin jiray. 14 Iyo sidaan kuwo badan oo da'dayda ah xagga diinta Yuhuudda ugaga
horreeyay, anigoo aad iyo aad ugu adag xeerarkii awowayaashay. 15 Laakiin Eebbahaygii
uurka hooyaday igu doortay ee ku farxay inuu nimcadiisa iigu yeedho, 16 Si uu Wiilkiisa iiga
dhex muujiyo si aan dadka aan Yuhuudda ahayn ugu wacdiyo isaga warkiisa, isla markiiba
lamaanan tashanin banii aadan. 17 Oo uma kicin xagga Quddus iyo kuwii aniga hortay
rasuullada ahaa, laakiinse waxaan u kacay dalka Carabta, ka dibna waxaan ku soo noqday
Dimishiq. 18 Deedna saddex sannadood ka dib ayaan Quddus u kacay, si aan Keeyfas u soo
barto oo shan iyo toban maalmood ayaan la joogay isaga. 19 Laakiin rasuulladii kale midna
kama arag, Yacquub oo ah Sayidka walaalkiis mooyee. 20 Haddaba farriintaan idiin soo qorayo,
bal eega, Eebbe hortiisa been kuma sheegayo. 21 Markaa ka dib waxaan imid dalalka Suuriya
iyo Kilikiya, 22 Oo weli si shakhsi ah laygama aqoonin kiniisadaha Masiixa ee Yahuudiya.
23 Laakiinse waxay maqleen oo keliya in la yidhi, Kii markii hore ina ciqaabi jiray, hadda wuxuu
wax ku wacdiyaa iimaankii uu markii hore inuu baabi'iyo ku dadaali jiray. 24 Oo Eebbe ayay
sababtay u ammaaneen.

### Adeeggii Bawlos Baa Quddus Lagu Aqoonsaday

**2** Haddaba afar iyo toban sannadood dabadood ayaan mar kale Quddus u kacay, Barnabasna
wuu ila socday oo Tiitosna waan kaxaystay. [2] Oo inaan tago ayaa la ii waxyooday oo waxaan
iyaga hor dhigay Injiilka aan dadka aan Yuhuudda ahayn ku wacdiyo, laakiinse waxaan si gaar
u tusay kuwii sharafta lahaa, si aanan u noqonin mid orodkiisu khasaare yahay ama faa'iido
bilaash isaga orday. [3] Laakiin xataa Tiitos oo ila socday, isagoo Giriig ah, laguma qasbin in la
gudo. [4] Marka walaalo been ah oo si qarsoodi ah lanoogu soo galiyay, kuwaasoo noogu soo
galay inay basaasaan xorriyaddeenna aynu Ciise Masiix ku haysanno, si ay noo
addoonsadaan. [5] Kuwaas marnaba maanaan iyaga hoos gelin in yarnna ha ahaatee, Si ay
runta injiilku idiinku waarto. [6] Laakiinse kuwii u muuqday inay sharaf leeyihiin (wax kastoy
ahaayeenba, waxba igama geline, waayo, Eebbe dadka wejigiyadooda ma qiimeeyo) Waxaan
leeyahay, kuwii sharafta lahaa waxba igumayna darin. [7] Laakiinse markay arkeen in laygu
aamminay Injiilka kuwa aan gudnayn, sida Butros ba loogu aamminay Injiilka kuwa gudan,
[8] Waayo, kii Butros u adeegsaday rasuulnimada kuwa gudan ayaa anigana ii adeegsaday
inaan dadka aan Yuhuudda ahayn rasuul u ahaado, [9] Oo markay Yacquub iyo Keeyfas iyo
Yooxanaa oo u muuqda inay tiirar ahaayeen arkeen nimcada nala siiyayay ayay aniga iyo
Barnabas gacanta midig ee midnimada nagu aqbaleen, si aannu annagu u tagno dadka aan
Yuhuudda ahayn, iyaguna kuwa gudan. [10] Waxa keliya ee ay nagu boorriyeen inaannu
masaakiinta xusuusanno, taasoo aan ku dadaalayay inaan sameeyo.

### Bawlos Wuxuu Antiyokh Ku Canaantay Butros

[11] Laakiinse Keeyfas markuu Antiyokh yimid, si fool ka fool ah ayaan uga hor jeedsaday,
maxaa yeelay, in la dhaleeceeyo ayuu mudnaa. [12] Maxaa yeelay, intayna qaarkood Yacquub
ka imanin, Keeyfas wuxuu wax la cuni jiray dad aan Yuhuud ahayn, laakiinse markay
yimaaddeen, wuu ka joogsaday oo gaar buu uga baxay, isagoo kuwa gudan ka cabsanaya.
[13] Yuhuudda inteedii kalena sidaas oo kale ayay labawejiilanimada ugu taageereen isaga,
xataa Barnabas labawejiilanimadoodii ayaa la tagtay. [14] Laakiin markaan arkay inayna si
habboon ugu dhaqmaynin runta Injiilka, ayaan dhammaantood hortooda Keeyfas ku idhi Haddii
inkastoo aad Yuhuudi tahay aad sida dadka aan Yuhuudda ahayn u dhaqmayso oo aadan sida
Yuhuudda u dhaqmaynin, sideed ugu qasbaysaa dadka aan Yuhuudda ahayn inay u
dhaqmaan sida Yuhuudda?

### Ku Camalfalidda Shareecada Xaq Laguma Noqdo

[15] Innagu Yuhuud dhalad ah ayaynu nahay oo ma nihin dembilayaal aan Yuhuud ahayn, [16] Oo
waxaynu weliba ognahay inuusan nin xaq ku noqonaynin ku dhaqanka sharciga, rumaysad uu
Ciise Masiix rumayo mooyee, xataa innagu waxaynu rumaysannay Ciise Masiix, si aynu xaq
ugu noqonno rumaysadka Masiix oo ayna ahayn ku camalfalka sharciga, maxaa yeelay, ku
dhaqanka sharciga ninna xaq kuma noqon doono. [17] Laakiinse haddii innagoo doonayna
inaynu Masiixa xaq ku noqono layna arko innagoo innaga lafteennu dembilayaal ah, Masiixu
markaas ma adeegaha dembigaa? Ma dhici karto! [18] Waayo, haddaan mar kale dhiso wixii aan
dumiyay, waxaan isku caddaynayaa inaan ahay mid xadgudbay. [19] Maxaa yeelay, anigu xagga
sharciga mayd baan u ahay sharciga, si aan Eebbe ugu noolaado. [20] Oo waxaa iskutallaabta
laygula qodbay Masiixa oo aniga ma aha ka hadda nool, laakiin Masiixa ayaa igu dhex nool, oo
nolosha aan hadda jidhka ku dhex noolahay waxaan ku noolahay rumaysadka Wiilka Eebbe,

kaasoo i jeclaaday oo naftiisa u bixiyay daraadday. 21 Nimcada Eebbena ma burayso, waayo,
haddii xaqnimo sharciga lagu gaadhi lahaa, Masiixu macna la'aan ayuu u dhintay.

## Waxaa Xaq Lagu Noqdaa Rumaysad

**3** Doqomada reer Galatiyow, yaa idin sixray, kuwiinna indhahooda lagu hor sifeeyay Ciise
Masiix oo iskutallaabta lagu qodbay? 2 Waxa keliya een idinka doonayo inaad i fahansiisaan,
Ruuxa ma waxaad ku hesheen ku dhaqanka shareecada mise maqlidda rumaysadka? 3 Ma
sidaasaad u garaad la'dihiin? Oo Idinkoo Ruuxa ku billaabay miyaad hadda jidhka kaamil ku
noqonaysaan? 4 Ma bilaash baad in badan ugu xanuunsateen hadday faa'iido darro ahayd?
5 Haddaba ka Ruuxa idin siiya oo mucjisooyinka xoogga leh idinku dhex sameeya ma wuxuu ku
sameeyaa ku dhaqanka shareecada mise maqlidda rumaysadka? 6 Sidoo kale Ibraahim Eebbe
ayuu rumeeyay oo waxaa isaga lagu tiriyay mid xaq ah.[246*] 7 Haddaba ogaada inay kuwa
rumaysadka leh wiilashii Ibraahim yihiin.

8 Kitaabku wuxuu horay u sheegay inuu Eebbe ummadaha xaq kaga dhigi doono rumaysad,
haddaba Injiilka ayuu horay ugu sii sheegay Ibraahim isagoo leh, Ummadaha oo dhan adigay
kugu barakoobi doonaa.[247*] 9 Sidaas daraaddeed kuwa rumaysadka luhu waxay la barakaysan
yihiin Ibraahimkii rumaysadka lahaa. 10 Maxaa yeelay, dhammaanba kuwa tala saarta ku
dhaqanka shareecadu way habaaran yihiin, waayo, waxaa qoran, Habaar baa ku dhacay cid
kasta oo aan ku dhaqmin wax kasta oo ku qoran kitaabka shareecada.[248*] 11 Marka way iska
caddahay inuusan ninna Eebbe hortiisa shareecada xaq ku noqonaynin, waayo, Ka xaq ahu
rumaysad buu ku noolaan doonaa. 12 Shareecadu kuma salaysna rumaysadka, laakiinse, qofkii
camalfala waxyaabaha ay shareecadu farayso wuu ku noolaan doonaa. 13 Masiixu wuxuu
inaga furtay habaarkii shareecada, isagoo aawadeen u habaarmay, waayo, waxaa qoran, Mid
kasta oo geed lagu deldelay wuu habaaranyahay.[249*] 14 Marka barakadii Ibraahim ayaa
ummadaha ugu timid Ciise Masiix, si aynu ballankii Ruuxa ugu helno rumaysad.
15 Walaallayaal, sida banii aadanka ayaan u hadlayaaye, in kasta oy xataa heshiiska ay dadku
galaan mar haddii la xaqiijiyo aan la burin karin waxna lagu dari karin. 16 Haddaba waxaa
Ballanqaadka loo sameeyay Ibraahim iyo farcankiisa. Lama odhanin, Kuwa ka soo farcamay
sidii kuwo badan, laakiinse sidii mid keliya oo ah midka ka soo farcamay, kaasoo ah Masiixa.
17 Waxaan leeyahay, Eebbe axdi ayuu horay u galay oo shareecadii afar boqol iyo soddon
sannadood ka dib timid ma burinayso axdigaas oo ballanqaadkaas ma baabbi'inayso.
18 Waayo, haddii dhaxalka lagu helo shareecada, ballanqaad laguma heleen, laakiinse Eebbe
Ibraahim ayuu ku siiyay ballanqaad.

## Ujeeddada Shareecada Loo Soo Dejiyay

19 Haddaba ujeeddada shareecadu maxay tahay? Waxaa loogu tala galay in lagu xakameeyo
xadgudubyada ilaa iyo inta farcankii loo ballanqaaday ka imanayo, oo waxaa dhaqan galiyay
malaa'igaha oo adeegsanaya dhexdhexaadiye. 20 Dhexdhexaadiyuhuna mid keliya ma aha,

246 Bilowgii 15:6 iyo Rooma 4:3
247 Bilowgii 12:3
248 Sharciga Kunoqoshadiisa 27:26
249 Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23

laakiinse Eebbe waa mid keliya. [21] Haddaba shareecadu miyay ka hor imanaysaa ballanqaadii
Eebbe? Ma dhici karto! Waayo, haddii shareecada nolol lagu heli lahaa, sida runta ah waxaynu
xaq ku noqon lahayn shareecada. [22] Laakiin Kitaabku wuxuu muujinayaa inay wax walba dembi
u xakamaysan yihiin, si ballanqaadka rumaysadka Ciise Masiix loo siiyo kuwa rumaysta leh.
[23] Laakiinse rumaysadka ka hor waxaynu ku hoos jirnay shareecada, innagoo ku xakamaysan,
ilaa iyo inta rumaysadka laga muujinayo. [24] Sidaa daraaddeed shareecadu waxay ahayd
edbiyeheenna intuu Masiixu imanayo, si aynu xaq ugu noqonno rumaysadka. [25] Laakiinse
rumaysadkii wuu yimid, oo sidaa daraaddeed mar dambe edbiye kuma hoos jirno. [26] Waayo,
dhammaantiin waxaad wiilashii Eebbe ku tihiin rumaysad idinkoo ku jira Ciise Masiix. [27] Maxaa
yeelay, dhammaantiin kuwiinna Masiixa lagu biyo galiyay, waxaad huwateen Masiixa. [28] Mana
jiro Yuhuud ama Giriig, addoon ama xor, lab ama dhaddig, waayo, kulligiin mid baad ku tihiin
Ciise Masiix. [29] Haddaad tihiin Masiixa kuwiisa, waxaad tihiin farcankii Ibraahim oo ah kuwa
dhaxalka leh sida ballanqaadku leeyahay.*

## Rumaysad Ayaa Lagu Noqdaa Carruurta Eebbe

**4** Laakiin waxaan leeyahay, Inta midka dhaxalka leh uu ilmo yar yahay, waxba kama duwana
addoon in kasta uu yahay ka wax walba iska leh, [2] Laakiinse wuxuu ka hooseeyaa kuwa
ilaaliya iyo maamulayaasha ilaa iyo xilliga uu aabbihii xadiday. [3] Sidaas oo kale innagu
markaynu carruur ahayn, waxaa ina addoonsan jiray mabaa'diida aasaasiga ah ee dunida;
[4] Laakiinse markii uu wakhtigu gaadhay, Eebbe wuxuu soo diray Wiilkiisa, isagoo naag ka
dhashay oo shareecada ku hoos dhashay, [5] Si uu u furto kuwii shareecada ku hoos jiray si
carruur la inooga dhigo. [6] Haddaba maadaama oo aad wiilal tihiin, Eebbe wuxuu Ruuxa
Wiilkiisa u soo diray quluubtiinna, isagoo ku dhawaaqaya Aabbow! [7] Si aadan mar dambe
addoon u ahaanin, laakiinse aad u noqoto wiilkiisa, oo haddaad wiilkiisa tahay, waxaad tahay
ka dhaxalka ku leh xagga Eebbe.

## Waxaa Laga Digay In Addoonimadii Dib Loogu Noqdo

[8] Laakiinse markii aydaan Eebbe aqoonin, waxaad addoommo u ahaydeen kuwo aan si dabiici
ah ilaahyo u ahayn. [9] Laakiin hadda maadaama ood Eebbe garateen ama Eebbe idin gartay,
sideed mar kale ugu noqotaan mabaa'diida tabarta daran ee aan macnaha lahayn ee dunida,
taasoo aad jeceshihiin inaad mar kale addoommo u noqotaan? [10] Waxaad ilaalisaan maalmo
iyo bilo iyo xilliyo iyo sannado. [11] Waxaan ka baqayaa inaan bilaash idiinku hawshooday.
[12] Waxaan idinka baryayaa, walaallayaal, inaad noqotaan sida aan ahay, waayo, aniguba
waxaan ahay sidiinna. Wax khalad ah iguma aydaan samaynin. [13] Waad ogtihiin sidaan markii
ugu horraysay anigoo xagga jidhka ka liita Injiilka idiinku wacdiyay. [14] Oo in kastoo ay arrinta
jidhkayga imtixaan idinku ahayd, haddana ima aydaan quudhsanin, imana aydaan nicin, laakiin
waxaad ii aqbasheen sidii malagii Eebbe iyo xataa sida Ciise Masiix. [15] Haddaba aaway
farxaddiinnii? Waayo, waxaan idiinka marag furayaa inaad indhihiinna ii bixin lahaydeen ood i
siin lahaydeen hadday suurta gal ahaan lahayd. [16] Haddaba ma cadowgiinnii ayaan noqday
runta aan idiin sheego aawadeed? [17] Aad bay idiinku hinaasaan, laakiin ma fiicna, oo waxay
doonaan inay idin xidh xidhaan, si aad iyaga taageerayaal ugu noqotaan. [18] Way fiicantahay in
wixii fiican mar walba aad loogu xamaasoodo, oo ayna ahayn markaan idinla joogo oo keliya.
[19] Carruurtaydii aan mar kale ku fooshay ilaa iyo inta suuradda Masiixu idinku dhex

daabacmayso! [20] Waxaan jeclaan lahaa inaan hadda idinla joogo oo aan codkayga beddelo, waayo, waan idinka shakisanahay.

## Tusaale Ku Saabsan Haagar Iyo Saaray

[21] Kuwiinna doonaya inay shareecada ku hoos jiraanow, ii sheega. Shareecada miyaydaan
maqlin? [22] Waayo, waxaa qoran in Ibraahim laba wiil lahaa, kii uu addoonta ka dhalay iyo kii uu
naagta xorta ah ka dhalay. [23] Laakiin wiilka addoontu xagga jidhka ayuu ka dhashay, wiilka
naagta xorta ahna ballanqaad ayuu ku dhashay. [24] Tan si tusaale ahaan ah ayaa loo macnayn
karaa, waayo, dumarkanu waxay ka dhiganyihiin laba axdi, midu waa kii Buurta Siinay, kaasoo
dhalay carruurtii addoonnimada, taasu waa Haagaar. [25] Haagartaasu waa Buurta Siinay ee
Carabiya ku taalla, oo waxay ka dhigantahay Qudduusta hadda joogta; waayo, waa la
addoonsaday iyada iyo carruurteedaba. [26] Laakiinse Quddusta sare waa xor, waana
hooyadeen. [27] Waayo, waxaa qoran Farax, madhalaysta aan dhalinay; Kala bax oo mashxarad,
taada aan foolaninay; Waayo, ta la dayriyay carruurteedu way ka badanyihiin tan ninka leh
kuweeda. [28] Innaguna, walaallayaal, waxaynu nahay carruurtii ballanka sida Isxaaq oo kale.
[29] Laakiin waagaas ka jidhka ka dhashay ayaa dhibi jiray ka Ruuxa ka dhashay, haddana waa
sidaas oo kale. [30] Laakiinse muxuu Kitaabku leeyahay? Addoonta iyo wiilkeedaba eri, waayo,
wiilka addoontu dhaxal lama wadaagi karo wiilka naagta xorta ah. [31] Sidaas daraaddeed,
walaallayaal, innagu ma nihin addoonta carruurteeda, laakiinse waxaynu nahay naagta xorta
ah carruurteeda.

## Xorriyadda Ku Fara Adayga

**5** Maxaa yeelay, Xorriyad ayuu Masiixu inagu xoreeyay Haddaba adkaada oo mar dambe yaan
laydinku qaban harqoodka addoonnimada. [2] Bal eega, aniga oo Bawlos ah waxaan idinku
leeyahay, Haddii laydin gudo, Masiixu waxba idiin tari maayo. [3] Waxaan haddana u
xaqiijinayaa, nin kasta oo la gudo, waxaa waajib ku ah inuu shareecada oo dhan ku dhaqmo.
[4] Shaqo kuma lihidin Masiixa, kuwiinna shareecada xaq ku noqonayow, nimcadiina waad ka
dhacdeen. [5] Waayo, xagga Ruuxa ayaynu rumaysad ku sugnaa rajada xaqnimada. [6] Maxaa
yeelay, xagga Ciise Masiix gudniinka iyo buurya qabnimada midna waxba ma tarto, laakiinse
waxaa wax tara rumaysadka ku shaqeeya jacayl. [7] Si wanaagsan baad u ordayseen, ee yaa
idinka hor istaaagay inaydaan runta addeecin?

[8] Qalqaalintaasi kama imanin ka idiin yeedhaya. [9] In yar oo khamiir ah ayaa qooshka oo dhan
khamiirisa. [10] Waxaan ku kalsoonahay Rabbiga dartii inaydaan wax kale ka fikiraynin, laakiin kii
idin dhiba, xukunkiisa ayuu heli doonaa cidduu doonaba ha ahaadee. [11] Haddaba walaallayaal,
haddaan anigu weli gudniinka wax ku wacdiyo, maxaa weli la ii ciqaabayaa? Hadday sidaa
ahaan lahayd caqabadda iskutallaabtu meesha way ka bixi lahayd. [12] Waxaan jeclaan lahaa
inay kuwa idin wareerinaya isgooyaan.[250*] [13] Waayo, walaallayaal, waxaa laydiinku yeedhay
xorriyad, laakiin xorriyaddiinna jidhka fursad ha ku siinina, laakiin midkiinba midka kale
kalgacayl ha ugu adeego. [14] Waayo, shareecada oo dhan eray keliya ayaa lagu soo koobay
Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sidaad naftaada u jeceshahay. [15] Laakiin haddaad
isqaniintaan ood iscuntaan, iska jira yaydaan is dhammaynine.

250 Hanjafaha ama balagta ama buuryada iska jaraan.

### Midhaha Ruuxa

[16] Laakiin waxaan leeyahay, Ruuxa ku socda, markaas damaca jidhka ma yeelaysaane.
[17] Waayo, damaca jidhku wuu ka soo horjeedaa Ruuxa, Ruuxuna wuu ka soo hor jeedaa
jidhka, maxaa yeelay, kuwanu way iska soo hor jeedaan, si aydaan u samaynin waxyaabaha
aad doonaysaan. [18] Laakiinse haddii uu Ruuxu idin hoggaamiyo, shareecada kuma hoos
jirtaan. [19] Haddaba camallada jidhku way muuqdaan, waana kuwan, sino iyo nijaas faasiqnimo,
[20] Iyo sanam caabudid iyo sixir iyo cadaawad iyo dagaal iyo masayr iyo xanaaq iyo af lagaaddo
iyo kala jab iyo bidcinimo, [21] Iyo xaasidnimo iyo sakhraannimo iyo rabshad iyo wixii la mid ah.
Kuwaasna waan idiinka digayaa, sidaan markii horeba idiinku sheegay, in kuwa waxyaabaha
noocaas ah sameeyaa ayna dhaxli doonin boqortooyada Eebbe. [22] Laakiinse midhaha Ruuxu
waa jacayl iyo farxad iyo nabad iyo dulqaad iyo naxariis iyo wanaag iyo daacadnimo,
[23] Daganaan iyo is celin, waxa noocaas ahna sharci ka soo horjeeda ma jiro. [24] Haddaba kuwa
Ciise Masiix waxay iskutallaabta ku qodbeen jidhka iyo doonistiisa iyo damacyadiisa sharka ah.
[25] Haddaynu Ruuxa ku noolnahay, aynu Ruuxa ku soconno. [26] Oo yaynaan iskibrinin, oo iska
xanaajinin oo isxaasiinin.

### Waano

**6** Walaallayaal, haddii qof xadgudub lagu qabto, kuwiinna xagga Ruuxa ka korayow kaasoo
kale si dagan u soo celiyaan, idinkoo is ilaalinaya, si aan idinkana laydiin jirrabin. [2] Midba midka
kale culayskiisa ha qaado oo sidaas ku dhaqan galiya sharciga Masiixa. [3] Maxaa yeelay,
hadduu nin isu maleeyo inuu waynyahay isagoo aan waxba ku filnayn, naftiisa ayuu
khiyaamaa. [4] Laakiin nin walba camalkiisa ha tijaabiyo, dabadeedna sabab uu ku faano hadduu
helo isaga keligii ayay khusaysaa. [5] Waayo, nin kastaba waa inuu culayskiisa qaato. [6] Kii
erayga la baro wax walba oo wanaagsan wax ha ka siiyo kii wax baray. [7] Yaan laydin
khiyaamin, Eebbe laguma majaajuloodo, waayo, nin kastaba wax alla wuxuu beerto ayuu
goosan doonaa. [8] Waayo, kii jidhkiisa wax u beerta wuxuu jidhka ka goosan doonaa wax xun,
laakiin kii Ruuxa wax ku beerta, wuxuu Ruuxa ka goosan doonaa nolosha weligeed ah.
[9] Haddaba yaynaan sama falka ka daalin, waayo, wakhtigeeda ayaynu wax ka goosan
doonnaa haddaynaan ka daalin. [10] Sidaas daraaddeed mar kasta oynu fursad helno, aynu
sama falno cid kasta, gaar ahaan muminiinta.

### Dhammaadka

[11] Bal eega xuruufta waawayn ee aan gacantayda idiinku soo qoray. [12] Kuwa doonaya inay
dadka istusaan inay xagga jidhka wanaagsan yihiin waxay idinku qasbaan in laydin gudo, si
aan iskutallaabta Masiixa aawadeed loo ciqaabin iyaga. [13] Xataa kuwa gudanu shareecada ma
xajiyaan, laakiin waxay u doonayaan in laydin gudo si ay jidhkiinna ugu faanaan. [14] Laakiinse
ma dhici karto inaan wax kale ku faano iskutallaabta Rabbigeenna Ciise Masiix mooyee,
taasoo dunida isku tallaab igaga qodobtay, anigana dunida mid isku tallaab lagu qodbay iga
dhigtay. [15] Waayo, gudniinka iyo buurya qabnimada midna waxba ma taro, laakiinse waxaa
wax tara abuurka cusub. [16] In alla inta mabda’an ku dhaqanta iyo Israa’iilka Eebbe, nabad iyo
naxariisu dushooda ha ahaadeen. [17] Hadda dabadeed ninna yuusan i dhibin, waayo, waxaa
jidhkayga ku yaalla sumadihii Ciise. [18] Walaallayaal, nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix
ruuxiinna ha la jirto. Aamiin.

# WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER EFESOS

### Salaan

**1** Anigoo Bawlos ah, oo rasuulkii Ciise Masiix ku ah doonista Eebbe, waxaan warqaddan u
qorayaa qudduusiinta Efesos joogta iyo kuwa aaminka ah ee Ciise Masiix ku jira. [2] Nimco ha
idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbeheenna ah iyo Sayid Ciise Masiix.

### Barakooyinka Ruuxiga Ah Ee Ciise Masiix Ku Jira

[3] Ammaanu ha u ahaato Eebbaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Wuxuu innagu
barakeeyay Masiixa barako kasta oo Ruuxi ah oo meelaha jannada ku jirta, [4] Siduu isaga
dhexdiisa horay inoogu doortay intaan dunida la aasaasin ka hor, si aynu isaga hortiisa
qudduusiin aan iin lahayn ugu ahaanno isagoo ina jecel, [5] Isaga oo horay u sii qorsheeyay in
carruurtiisii xagga Ciise Masiix inaga dhigo sida ay doonistiisu tahay ee uu ku farxay, [6] Si loo
ammaano sharafta nimcadiisa ee uu inagu siiyay ka uu jecelyahay. [7] Kaasoo dhiiggiisa laynagu
furtay, oo aynu ku helnay dembi dhaafka xadgudubyadeennii, sida ay hodantinimada
nimcadiisu tahay. [8] Nimcadaasoo uu inaga haqab tiray oynu xigmad iyo fahmo walba ku
helnay, [9] Oo wuxuu ina ogaysiiyay siraha doonistiisa, si waafaqsan doonistiisa farxadda leh,
[10] Oo wuxuu qorshaystay markii wakhtiga la gaadho, inuu Masiixa ku soo uruuriyo wax kasta
oo samooyinka ku jira iyo waxa dhulka joogaba. [11] Isaga ayaynu dhaxal ku helnay innagoo
laynagu doortay sida uu yahay qorshaha ka wax kasta kaga shaqeeya doonistiisa, [12] Si
kuweenna horayba Masiixa isugu halleeya aynu u ahaanno sababta ammaanta Eebbe.
[13] Kaasoo aad weliba aaminteen ood maqasheen markii aad ereyga runta ah maqasheen, kaas
oo ah Injiilka badbaadadiinna kaasoo markaad rumayseen laydinku shaabadeeyay Ruuxa
Qudduuska ah ee la ballanqaaday, [14] oo ah carbuuntii dhaxalkeenna xagga furashada
hodantinimada Eebbe si loo ammaano cisadiisa.

### Mahadnaq Iyo Duco

[15] Anigu waxaan maqlay rumaysadkiinna Sayid Ciise, iyo jacaylka aad qudduusiinta oo dhan u
qabtaan, oo sidaas daraaddeed [16] Ma joojiyo inaan Eebbe idiinku mahadnaqo. ducadayda
ayaan idinku soo xusuusanayaa, [17] Si Eebbaha Rabbigeenna Ciise Masiix oo ah Aabbaha
ammaantu uu ruuxa xigmadda iyo muujinta idinku siiyo aqoonta aad isaga taqaanaan. [18] Oo
waxaan Eebbe ka baryayaa in indhaha quluubtiinna la iftiimiyo, si aad u ogaataan waxa ay
tahay rajada laydiin ku yeedhay iyo waxa ay tahay ammaanta hodanka ah ee la dhaxalsiiyay
qudduusiinta, [19] Iyo waxa ay tahay awoodda wayn ee aan la koobi karin ee uu u hayo
kuweenna rumaysan, sida ay tahay wax shaqadiisa xoogga leh; [20] Taasoo uu ku qabtay
Masiixiia, markii uu kuwii dhintay ka soo sarakiciyay, oo uu fadhiisiyay xaggiisa midig ee
jannada. [21] Oo wuxuu isaga ka sarreeysiiyay madax kasta iyo amar kasta iyo xoog kasta iyo
sayidnimo kasta iyo magac kasta oo la magacaabay, mana aha wakhtigan oo keliya, laakiinse
xataa mustaqbalka iman doona. [22] Wax kasta wuxuu ka hoosaysiiyay cagihiisa oo wuxuu isaga
madax uga dhigay wax kasta xagga kiniisadda, [23] Taasoo ah jidhkiisa kaamilka ah ee ah
kaamilnimada ka wax kastaba iyo meel walba buuxiya.

## Nimcada Eebbe Ayaa Lagu Badbaadaa

**2** Idinku waxaad ku dhimateen xadgudubyadiinna iyo dembiyadiinna, [2] kuwaas oo aad markii hore ugu dhaqmi jirteen siday dunidu hadda ugu dhaqanto iyo sida madaxda xoogga hawada oo ah ruuxa hadda ka dhex shaqaynaya carruurta caasinimada. [3] Kuwaasoo aynu dhammaanteen mar kula dhex dhaqmi jirnay damacyada jidhkeenna, innagoo samaynayna waxyaabaha jidhka iyo maanku ay doonayaan oo waxaynu xagga dabiicadda ka ahaan jirnay carruurtii cadhada sida dadka kale. [4] Laakiinse Eebbaha naxariista hodanka ka ahu wuxuu innagu jeclaaday jacaylkiisa wayn, [5] Xataa markii aynu xadgudubyadeenna ku dhimannay wuxuu inala soo noolaysiiyay Masiixa. [6] Oo isaga ayuu inala soo sarakiciyay, oo wuxuu isaga inala fadhiisiyay meelaha jannada xagga Ciise Masiix, [7] Si uu mustaqbalka imanaya u muujiyo hodantinimada nimcadiisa naxariista leh ee aan la qiyaasi karin ee uu xagga Ciise Masiix inoogu hayo. [8] Waayo, nimco ayaad iimaanka aad ku badbaaddeen ku hesheen, mana aha wax xaggiinna ka yimid, [9] Laakiinse waa hadiyadda Eebbe oo ma aha camalkiinna, si uusan ninna ugu faanin. [10] Waayo, innagu waxaynu nahay shaqaalihiisa, oo waxaa laynoogu abuuray Ciise Masiix camallo wanaagsan, taasoo uu Eebbe horay u diyaariyay,si aynu ugu camalfalno.

## Masiixa Ayaad Ku Midowdeen

[11] Haddaba sidaas daraaddeed idinku xusuusta inaad waa hore xagga jidhka ka ahaan jirteen dad ajinabi ah oo waxaa laydiinku yeedhi jiray Buurya qab Waxaa loo yaqaanno gudniinka, kaasoo xagga jidhka gacmaha laga sameeyo. [12] Waagaas Masiixa waad ka go’naydeen, oo shisheeye ayaad ka ahaydeen ummadda reer banii Israa’iil, oo ajanabi ayaad ka ahaydeen axdiyada ballanka, idinkoo rajo la’aan ah, oo dunida Eebbe la’aan ku ah. [13] Laakiinse hadda Ciise Masiix ayaad ku jirtaan kuwiinnii markii hore fogaan jiray, oo waxaa laydinku soo dhaweeyay dhiigga Masiixa. [14] Waayo, isagu waa nabaddeenna oo waa kan labadaba mideeyay oo wuxuu dumiyay derbigii ina dhexyaallay, [15] Isagoo jidhkiisa ku burburiyay cadaawadii, xataa shareecadii amarrada, si uu naftiisa ugu abuuro qof cusub halkay laba ka ahaayeen, isagoo sidaas nabad ku samaynaya, [16] Oo labadeennaba Eebbe inala heshiisiiyay innagoo isku jidh ah, xagga iskutallaabta, isagoo halkaas ku dilay cadaawaddii. [17] Oo intuu yimid ayuu nabad ku wacdiyay kuwiinnii fogaa, kuwii dhawaana nabad buu ku wacdiyay,
[18] Waayo, labadeennuba isaga ayaynu Ruux keliya ugu galnaa Aabbaha. [19] Sidaas daraaddeed idinku mar dambe ma tihidin ajaanib iyo shisheeye, laakiinse qudduusiinta ayaad muwaadiniin la tihiin, oo waxaad ka mid tihiin qoyska Eebbe, [20] Oo waxaa laydinka dul dhisay aasaaskii rasuullada iyo nebiyada oo waxaa udub dhexaad idiin ah Ciise Masiix qudhiisa.
[21] Kaasoo dhismaha oo dhan isku haya oo wuxuu Rabbiga u noqdaa macbud qudduus ah.
[22] Idinkana isaga ayaa waliba laydinka wada dhisay si aad u ahaataan gurigii Eebbe ee Ruuxiga ah.

## Asraarta Injiilka Ee La Muujiyay

**3** Sababtaas daraaddeed anigoo Bawlos ah oo maxbuuskii Ciise Masiix ah oo kuwiinna ajinabiga ah aawadood u xidhan. [2] Waxaan filayaa inaad maqasheen nimcada Eebbe ii xilsaaray ee uu idinka aawadiin ii siiyay, [3] Iyo sida siraha qarsoon laygu muujiyay, sidii aan mar horeba si kooban dhawr jeer idiinku soo qoray. [4] Taasoo markaad akhridaan aad garan kartaan sidaan u ogahay siraha Masiixa, [5] Taasoo aan qarniyadii kale la ogeysiinin banii aadanka sida uu hadda Ruuxu ugu muujiyay rasuulladiisa iyo nebiyadiisa qudduuska ah. [6] Sirahaasuna waa

in hadda ay ajinabigu yihiin kuwo wax inala dhaxla, oo aan isku jidh nahay, oo ay inala
wadaagayaan ballanqaadkii Ciise Masiix ee Injiilka, [7] kaasoo aniga layga dhigay adeege sida
ay tahay hadiyadda nimcada Eebbe ee laygu siiyay xooggiisa iga dhex shaqeeya. [8] Aniga oo
qudduusiinta oo dhan ugu liita waxaa nimcadan la ii siiyay inaan dadka ajinabiga ah ku
wacdiyo hodantinimada Masiixa ee aan la qiyaasi karin, [9] Iyo inaan dadka oo dhan daaha uga
qaado qorshaha Eebbe ee tan iyo wakhtigii dunida la uumay qarsoonaa. [10] Sidaa darteed waa
in hadda madaxda iyo kuwa amarka leh ee samooyinka ku jira loogu muujiyo kiniisadda
xigmadda Eebbe ee wajiyada badan, [11] Sida uu yahay qorshaha weligiis ah ee uu isagu ka
leeyahay Rabbigeenna Ciise Masiix, [12] kaasoo aynu ku helno geesinimo iyo jid kalsooni leh oo
aynu ku helno rumaysadka aynu isaga rumaysannahay. [13] Sidaas daraaddeed waxaan idinka
codsanayaa inaydaan ku qalbi jabin dhibaatooyinkayga aan daraaddiin u maray, waayo, taasu
ammaan bay idiin tahay.

## Ducadii Bawlos

[14] Sababtaas daraaddeed waxaan ugu jilba joogsadaa Aabbaha hortiisa, [15] kaasoo magiciisa
lagu magacaabay qoys walba oo samada iyo dhulkaba jooga, [16] Si uu idiinku hibeeyo sida ay
tahay hodantinimada ammaantiisa xoog Ruuxiisu idinka siiyo xagga gudaha, [17] Iyo in Masiixu
ku dago quluubtiinna rumaysad, [18] Si aad jacayl xidid iyo aasaas ugu yeelataan oo aad karti u
yeelataan sida qudduusiinta kaleba waxa ay tahay baaxadda iyo ltaalka iyo dheererka kor iyo
hoosba, [19] Iyo inaad ogaataan jacaylka Masiixa ee aqoonta ka sarreeya, si ay idiinka
buuxsanto Eebbe buuxnaantiisa oo dhan. [20] Haddaba ka awooda inuu inoo sameeyo wax aad
iyo aad uga sii badan waxa aynu wayddiisanno ama ku fikirno oo dhan sida u yahay xoogga
inaga dhex shaqeeya, [21] Isaga ammaanu ha ugu ahaato kiniisadda iyo Ciise Masiixba tan iyo
qarniyada oo dhan iyo weligeed iyo weligeedba. Aamiin.

## Midnimada Ruuxiga Ah

**4** Haddaba sidaas daraaddeed anigoo Rabbiga dartii maxbuus u ah, waxaan idinka
codsanayaa inaad dacwadda laydiinku yeedhay ugu dhaqantaan si istaahisha, [2] Idinkoo is-
hoosaysiin iyo daganaan oo iyo samir oo dhan leh, oo midkiinba midka kale jacayl ha ugu
dulqaato. [3] Ku dadaala inaad midnimada Ruuxiga ah ku ilaalisaan xidhiidhka nabadda.
[4] Haddaba waxaa jira jidh keliya iyo Ruux keliya, xataa sida idinka laydiinkugu yeedhay rajo
keliya. [5] Oo waxaa jira Rabbi keliya iyo iimaan keliya iyo biya galin keliya, [6] Iyo Eebbe keliya oo
dhammaan Aabbe u wada ah oo ah ka wax walba ka sarreeya, oo wax walba ka dhex
shaqeeya oo wax walba ku jira. [7] Laakiinse midkeen kastaba nimcada waxaa laynoo siiyay sida
ay tahay qiyaasta hadiyadda Masiixa. [8] Sidaas daraaddeed wuxuu yidhi,

Markuu kor u baxay wuxuu qabtay oo kaxeeyay kuwii maxaabiista ahaan jiray, wuxuuna dadka siiyay hadiyado.[251*]

[9] Haddaba Kor buu u baxay Macneheedu waa maxay haddayna ahayn inuu isagu hoos ugu
degtay meelaha dhulka ugu hooseeya? [10] Waa isla kii hoos u degtay ka haddana kor u baxay
oo samooyinka oo dhan ka sara maray si uu isagu u buuxiyo wax kastaba. [11] Oo qaar wuxuu
siiyay rasuulnimo, qaarna nebiyo, qaarna wacdiyayaal, qaarna kuwo kiniisadda dhaqaaleeya,

251 Sabuur 68:18

iyo macallimiin. [12] Si uu qudduusiinta ugu diyaariyo shaqada adeegidda iyo dhisidda jidhka Masiixa, [13] Ilaa oynu ka gaadhno midnimada rumaysadka iyo aqoonta wiilka Eebbe oo aynu noqonno dad qaan gaadh ka ah xagga koritaanka ilaa iyo heerka buuxnaanta Masiixa. [14] Waa inaynaan mar dambe noqonin carruur is bedbedalaysa oo lagu duufsado dabayl kasta oo cilmi huwan oo ay dadku wax ku khiyaanaan. [15] Laakiinse innagoo si jacayl leh runta ugu hadlayna waa inaynu si walba ugu korno xaggiisa, ka madaxa ah oo ah Masiixa, [16] Kaasoo jidhka oo dhan isku wada haya oo isku wada xidhan shaqada ay xubin walba qabato sida ay xubin kastaba ugu shaqayso habkii loogu tala galay, oo uu u koro jidhku oo uu si jacayl leh ugu dhismo.

### Noloshii Hore iyo Ta Cusub

[17] Haddaba sidaas daraaddeed, Rabbigaa markhaati iiga ah, oo waxaan idinku leeyahay, Mar dambe ha u dhaqmina sida ay dadka ajinabiga ahu ugu dhaqmaan fikirkooda khariban.
[18] garaadkoodu wuu madoobaaday oo jaahilnimada iyaga ku jirta aawadeed iyo qalbi engegnaantooda aawadeed ayay ajinabi ka noqdeen nolosha Eebbe. [19] Iyagoo xishood beelay waxay isu dhiibeen nijaasta oo si hamumyo leh ayay wax walba oo fasiqnimo ah u sameeyaan.
[20] Laakiinse idinku sidaa kama aydaan baranin Masiixa, [21] Waa haddaaad isaga maqasheen oo laydin baray runta ku jirta Masiixa. [22] Waa inaad iska tuurtaan dabiicaddii hore eed ku dhaqmi jirteen, taasoo ku kharribantay damacyada khiyaanada; [23] Oo waa inaad masgax cusub yeelataan, [24] Oo aad huwataan dabiicadda cusub ee loo abuuray u ekaanshaha Eebbe xagga xaqnimada iyo qudduusnimada runta ah. [25] Sidaas daraaddeed beenta iska fogeeya oo midkiin walba deriskiisa run ha kula hadlo, waayo, innaga midkeenba midka kale wuxuu u yahay xubnihiisa. [26] Haddaad cadhootaan, ha dembaabina, oo yayna qorraxdu idinka dhicin idinkoo cadhaysan. [27] Iblayskana meel ha siinina. [28] Kii wax xadi jirayna yuusan mar dambe wax xadin, laakiinse ha shaqaysto oo muruqiisa ha maalo, isagoo oo wax wanaagsan samaynaya si uu u helo wax uu siiyo kuwa baahan. [29] Hadal qudhun ahu yuusan afkiinna ka soo bixin, laakiinse ku hadla wax wanaagsan oo wax dhisa oo nimco u leh kuwa maqla. [30] Ha murugo galinina Ruuxa Qudduuska ah ee Eebbe ee laydiinku shaabadeeyay maalinta madax furashada. [31] Haddaba cuqdad iyo xanaaq iyo cadho iyo qaylo iyo cay iyo xumaan oo dhanba iska fogeeya. [32] Oo midkiinba midka kale ha u roonaado, oo ha u dabacsanaado, idinkoo isu cafinaya siduu Eebbe Masiixa idiinku cafiyay.

### U Dhaqma Sida Carruuta Iftiinka

**5** Haddaba ku dayda Eebbe idinkoo ah sida carruur la jecelyahay. [2] Oo Jacayl ku dhaqma, siduu Masiixuba idiin jeclaa, oo uu nafsaddiisa inoogu bixiyay si uu Eebbe ugu ahaado qurbaan iyo allabari caraf udgoon leh. [3] Laakiinse sida qudduusiinta u qalanta sino iyo faasiqnimo oo dhan iyo damac yaan marnaba dhexdiinna laga sheegin, [4] Iyo qudhun iyo hadal doqonimo ah iyo kaftan bilaash ah oo aan idinku habboonayn, laakiinse waxaa idinku wacan mahadnaq. [5] Waayo, tan waad ogtihiin inuusan saani ama najis ama mid damac xun oo sanam caabudid ahu innaba dhaxal ku lahayn boqortooyada Masiix iyo Eebbe. [6] Ninnaba yuusan idinku khiyaamin hadal aan macno lahayn; waayo, waxyaabahaas daraaddood ayay cadhada Eebbe ugu soo degtaa carruurta caasinimada. [7] Sidaas daraaddeed ha ahaanina kuwa iyaga waxyaabahaas la wadaaga, waayo, mar baad ahaydeen gudcur, [8] Laakiinse hadda Rabbiga ayaad ku iftiimaysiin; haddaba u dhaqma sida carruurta nuurka, [9] Waayo, midhaha nuurku

waxay ku wada jira wanaag iyo xaqnimo iyo run oo dhan. [10] Tijaabiya waxa Rabbigu ku farxo,
[11] Oo innaba xidhiidh ha la yeelanina camallada aan midhaha lahayn ee gudcurka, laakiinse
kashifa; [12] Waayo, wax ay qarsoodiga ku sameeyaan waa wax in laga hadlo ay ceeb tahay.
[13] Laakiinse wax walba oo iftiinka lagu kashifo waa la ogaadaa, waayo, wax alla wixii nuurka la
soo dhigo waa la ogaadaa. [14] Sidaas daraaddeed isagu wuxuu yidhi, Kaaga hurdow toos, oo
kuwii dhintay ka sarakac oo Masiixa ayaa ku iftiimin doonaa.[15] Haddaba u fiirsada sidaad u
dhaqmi lahaydeen, oo ha u dhaqmina sida kuwo aan caqliga lahayn, laakiinse u dhaqma sidii
kuwo caqli leh. [16] Wakhtiga ka faa'iidaysta, maxaa yeelay, maalmuhu shar bay leeyihiin.
[17] Sidaas daraaddeed nacasyo ha ahaanina, laakiinse garta waxa ay doonista Rabbigu tahay.
[18] Ha ku sakhraamina khamriga rabshadda leh, laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. [19] Iskula
hadla sabuurro iyo qasiidooyin ammaan ah iyo gabayo ruuxi ah, idinkoo gabyaya oo Rabbiga
quluubtiinna ka ammaanaya. [20] Mar kasta Eebbaha Aabbaha ah wax kasta ugu mahadnaqa
magaca Rabbigeenna Ciise Masiix. [21] Midkiinba midka kale ha iska hoosaysiiyo idinkoo
Masiixa ka cabsanaya.

## Nolosha Qoyska Masiixiga Ah

[22] Dumaryahow, nimankiinna ka dambeeya sidaad Rabbiga uga dambaysaan. [23] Waayo, ninku
waa madaxa afada sida Masiixuba u yahay madaxa kiniisadda isagoo ah badbaadiyaha jidhka.
[24] Laakiinse sida kiniisaddu uga dambayso Masiixa, afooyinkuna ha uga dambeeyeen
nimankooda si walba. [25] Nimankow, idinkuna afooyinkiinna u jeclaada siduu Masiixuba u
jeclaaday kiniisadda ee uu nafsaddiisii ugu bixiyay iyada aawadeed, [26] Si uu qudduus uga
dhigo oo uu ugu nadiifiyo uguna maydho biyaha xagga erayga, [27] Si uu kiniisadda ula soo
xaadiro iyadoo qurux badan oo aan lahayn ceeb ama bar ama jacdad ama wax la mid ah,
laakiinse ah mid qudduus ah oo aan iin lahayn. [28] Haddaba sidaas oo kale nimanka waxaa ku
waajib ah inay afooyinkooda u jeclaadaan sida jidhkooda oo kale. Waayo, kii afadiisa jeclaadaa
wuxuu jeclaadaa nafsaddiisa; [29] Maxaa yeelay, ninna weligiis jidhkiisa ma nebcaado, laakiinse
wuu quudiyaa, wuuna xannaaneeyaa, sida Masiixuba u xannaaneeyo kiniisadda, [30] Waayo,
innagu waxaynu nahay xubnihii jidhkiisa. [31] Oo sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa
aabbihii iyo hooyadii oo wuxuu la midoobayaa naagtiisa, oo labaduba waxay noqonayaan isku
jidh. [32] Tanuna waa sir wayn, laakiinse waxaan ka hadlayaa Masiixa iyo kiniisadda. [33] Habase
yeeshee idinka midkiin walba afadiisa ha u jeclaado sida naftiisa oo kale, oo afaduna ninkeeda
ha maamuusto.

## Carruurta Iyo Waalidka

**6** Carruurtay, waalidkiinna ku addeeca Rabbiga dartiis, waayo, taasu way habboontahay.
[2] Aabbahaa iyo hooyadaa karaamee[252*] waa amarka kowaad ee ballanqaadka la socda, [3] Si
aad wanaag u hesho oo cimrigaagu ugu dheeraado dhulka. [4] Aabbayaashow, carruurtiinna ha
ka cadhaysiinina, laakiinse waxaad ku korisaan edaabta iyo jidka Rabbiga. [5] Addoommadow,
kuwa xagga jidhka sayidyadadiinna ah ku addeeca cabsi iyo gariir iyo qalbi daacad ah sidaad
Masiixa uga cabsataan oo kale. [6] Ha ahaanina kuwo markii loo jeedo oo keliya shaqeeya sida
kuwa dadka ka farxiya, laakiinse ahaada sida adeegayaasha Masiixa, idinkoo doonista Eebbe
xagga qalbiga ka samaynaya. [7] Niyad wanaagsan ku adeega sidii idinkoo Rabbiga u adeegaya

252 Baxniintii 20:12 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:16

oo aan dad u adeegaynin, [8] Idinkoo og in wax kasta oo wanaagsan oo mid kasta sameeyo uu Rabbiga isla waxaas ka helayo, addoon iyo xor midkuu doonaba ha ahaadee. [9] Sayiddaadow, idinkuna isla waxaas iyaga u sameeya, oo caga juglaynta iska daaya, waayo, waad ogtihiin inuu ka iyaga iyo idinkaba Sayidka u ah jannada ku jiro, oo uusan dadka u kala eexanin.

### Hubka Masiixiyiinta

[10] Ugu dambaysta waxaan idinku leeyahay, Ku xooganaada Rabbiga iyo xoogga awooddiisa.
[11] Oo hubka Eebbe oo dhan wada qaata, si aad u awooddaan inaad sirta Iblayska hor
istaagtaan. [12] Waayo, innagu lama legdamayno banii-aadan, laakiinse waxaynu la
legdamaynaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo
arwaaxda sharka ah ee samooyinka ku jira. [13] Haddaba sidaas daraaddeed hubka Eebbe
qaata si aad u awooddaan inaad maalinta sharka iyaga is-hor taagtaan, oo markaad waxaas
oo dhan yeeshaan aad awooddaan inaad istaagtaan. [14] Haddaba istaaga idinkoo runta dhexda
ku xidhan oo laabtana ku xidhan gaashaanka xaqnimada, [15] Oo cagahana gashan isu-
diyaarinta Injiilka nabadda, [16] Oo weliba waxaa kaloo aad qaadataan gaashaanka rumaysadka,
kaasoo aad ku awoodaysaan inaad ku wada demisaan ka sharka leh fallaadhihiisa ololaya oo
dhan. [17] Oo waxaad qaadataan koofiyada badbaadada iyo seefta Ruuxiga ah oo ah erayga
Eebbe. [18] Mar kastana ku barya oo ku ducaysta duco walba oo Ruuxi ah, oo taas ku dhawra
dulqaad oo dhan iyo baryada qudduusiinta oo dhan. [19] Oo anigana iigu soo duceeya in lay siiyo
hadal aan afka ku furo si aan cabsi la’aan ugu muujiyo sirta Injiilka, [20] Kaasoo aan u ahay
safiirka silsiladda ku xidhan, si aan cabsi la’aan ugu hadlo sida waajibka igu ah.

### Gabagabadii

[21] Haddaba xaaladdayda iyo sidaan ahayba, waxaa idiin wada warrami doona Tukhikos oo
xagga Rabbiga ku ah walaalkayga aan jecelahay iyo adeege aamin ahba. [22] Sababtaas
ayaanan isaga idiinku soo diray, si aad xaaladdayada u ogaataan oo uu quluubtiinna u dhiirri
geliyo. [23] Walaalaha ha u ahaato nabad iyo jacayl rumaysad leh oo ka yimaadda Eebbaha
Aabbaha ah iyo Sayid Ciise Masiix. [24] Dhammaanba inta Rabbigeenna Ciise Masiix jacaylka
daacad ah ku jecel nimco ha la jirto.

## WARQADDII RASUUL BAWLOS U QOAY DADKII REER FILIBOY

### Salaan

**1** Ka socota Bawlos iyo Timoteyos, oo ah adeegayaashii Ciise Masiix, ku socota dhammaan
qudduusiinta Ciise Masiix ee magaalada Filiboy la jooga hoggaamiyayaasha kiniisadda iyo
kalkaaliyayaasha. 2 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbeheenna ah iyo
Sayid Ciise Masiix. 3 Mar kasta oo aan idin xusuustaba Eebbe ayaan u mahad celiyaa, 4 Oo
mar kastaba oon dhammaantiin idiin duceeyo, farxad ayaan idiinku soo duceeyaa, 5 Sababtoo
ah Injiilka ayaad igala qayb qaadateen maalintii ugu horraysay ilaa hadda. 6 Anigoo aaminsan
in kii shaqadan wanaagsan idinka dhex billaabay uu dhammays tiri doono ilaa iyo maalinta
Ciise Masiix. 7 Haddaba sidaas daraaddeed waxaan xaq u leeyahay inaan dhammaantiin
sidaas idiinka fikiro, waayo, qalbigayga ayaan ku hayaa, maxaa yeelay, dhammaantiin waxaad
tihiin kuwii nimcada igala qayb qaatay, hadday tahay xagga xadhigayga iyo xagga difaaca iyo
xaqiijinta Injiilkaba. 8 Maxaa yeelay Eebbe ayaa markhaati iiga ah sidaan dhammaantiin
idinkugu hiloobay jacaylka Ciise Masiix dartiis. 9 Waxaan Eebbe ka baryayaa in jacaylkiinnu
aad iyo aad ugu sii bato xagga aqoonta iyo wax garashada oo dhanba, 10 Si aad waxyaabaha
wanaagsan u tijaabisaan, oo aad daacad iyo ceeb la'aan u ahaataan ilaa iyo maalinta Masiixa,
11 Idinka oy midhaha xaqnimadu idinka buuxaan, kuwaasoo Ciise Masiix lagu helo, oo Eebbe
ammaan iyo mahad u ah. 12 Haddaba, walaallayaal, waxaan jeclaan lahaa inaad ogaataan in
waxyaabihii igu dhacay ay Injiilka horumar u noqdeen, 13 Sidaas daraaddeed waxaa askartii
boqorka iyo kuwa kale oo dhanba u wada caddaatay inaan Ciise Masiix aawadii u xidhnahay.
14 Oo weliba walaalaha xagga Rabbiga intooda badanna iyagoo xabsigayga dhiirri galinku
helay ku ayay aad iyo aad ugu dhiirradeen erayga Eebbe si geesinimo leh. 15 Runtii waxaa jira
qaar Masiixa wax ugu wacdiya si xaasidnimo iyo khilaaf ku jiro, qaarna waxay wax ugu
wacdiyaan si niyad wanaagsan.

16 Qaar waxay ugu wacdiyaan si jacay leh, iyagoo og in la ii doortay Injiilka difaaciisa,
17 Laakiinse kuwa kale waxay Masiixa wax ugu wacdiyaan si ay dadka u kala qaybqaybiyaan,
iyagoo aan daacad ahayn oo ku fikiraya inay dhibaato igu kiciyaan anigoo xabsi ku jira.
18 Haddaba waa sidee? Hadday iska yeelyeel tahay iyo hadday dhab tahayba, Masiixa ayaa si
kastaba wax loogu wacdiyaa, aniguna taas ayaan ku faraxsanahay, oo weliba waan ku farxi
doonaa. 19 Waayo, waxaan ogahay inay taasu sii dayntayda gacan ka gaysan doonto,
ducadiinna iyo caawimaadda Ruuxa Ciise Masiix aawadood, 20 Sidaan aad iyo aadka ugu filayo
oon ugu rajo waynahay, inaanan waxba ku ceeboobi doonin, laakiinse siday horayba u ahaan
jirtay in haddana Masiixu si dhiiranaan leh uu ugu ammaano jidhkayga, hadday tahay geeri
ama nololba. 21 Waayo, aniga waxaa nolosha ii ah Masiixa, oo dhimashaduna waa ii faa'iido.
22 Laakiinse inaan jidhka ku sii noolaado hadday tahay, waa mid midho u leh hawshayda,
waxaan doortana ma aqaan. 23 Laakiinse anigu labadaas dhexdooda ayaaan ku dhibanahay oo
waxaan jecelahay inaan tago oon Masiixa la joogo, waayo, taasu aad bay iigu
wanaagsantahay, 24 Laakiinse inaan jidhka ku sii jiro ayaa looga sii baahi badanyahay idinka
aawadiin. 25 Haddaba anigoo taas ku kalsoon, waxaan ogahay inaan sii joogi doono oo aan
kulligiin idinla sii joogi doono horumarkiinna iyo farxadda rumaysadkiinna aawadood, 26 Si
faankiinnu Ciise Masiix ugu sii bato joogidda aan mar kale idinla joogo aawadeed. 27 Laakiinse
dabiicaddiinnu ha ahaato mid istaahisha Injiilka Masiixa, si haddii aan imaaddo oo aan idin
arko, ama haddii aan maqnahay aan u maqlo inaad isku ruux keliya ku taagantihiin, idinkoo

isku maan ah oo ku dadaalaya iimaanka Injiilka, 28 Oo idinku innaba ha ka cabsanina
cadawgiinna, taas oo iyaga u ah calaamada halaagga, laakiinse waxay idiin tahay calaamada
badbaadadiinna, taasuna waxay ka timaaddaa xagga Eebbe. 29 Maxaa yeelay, waxaa laydinku
siiyay Masiixa aawadiis, mana aha inaad isaga rumaysataan oo keliya, laakiinse waa inaad
isaga daraaddii u xanuunsataan, 30 Idinkoo ku dadaalaya dadaalkii aad igu aragteen oo aad
haddana igu maqashaan.

### Is-Hoosaysiinta Masiixa Iyo Ammaantiisa

**2** Haddaba haddii ay Masiixa ku jiraan dhiirri gelin iyo qalbi qabow jacayl ah iyo haddii ay ku
jirto walaalnimo xagga Ruuxa ah iyo haddii ay ku jiraan turid iyo naxariis, 2 farxaddayda
buuxiya, si aad isku maan u ahaataan oo aad isku jacayl u lahaataan, idinkoo isku niyad ah oo
isku maan ah. 3 Idinku waxba ha ku samaynina iskala-qaybqaybin iyo faan bilaash ah, laakiinse
wax walba ku sameeya is-hoosaysiin, idinkoo midkiinba midka kale ku tirinayo inuu ka kale
isaga ka wanaagsanyahay. 4 Midkiin walba yuusan fiiro u lahaanin danihiisa, laakiinse midkiin
walba fiiro ha u lahaado danaha kuwa kale. 5 Fikirkaas oo kii Ciise Masiix ah ha idinku jiro.
6 Isagu in kastoo uu muuqaalkii Eebbe lahaa, haddana inuu Eebbe la mid ahaado kumuusan
tirin inay taasu tahay boob, 7 Laakiinse wuu ismadhiyay oo wuxuu qaatay qaabkii adeegenimo
oo wuxuu noqday mid banii aadan u eg, 8 Oo markuu qaab banii aadan yeeshay, ayuu is-
hoosaysiiyay oo addeecay inuu dhinto, xataa inuu iskutallaabta ku dhinto. 9 Haddaba sidaas
daraaddeed Eebbe isaga aad buu u sarraysiiyay oo wuxuu isaga siiyay magaca magac kasta
ka sarreeya, 10 Si uu magaca Masiixa ugu sujuudo jilib kasta oo samada iyo dhulka iyo dhulka
hoostiisaba jooga, 11 Iyo in carrab kastaba qirto in Ciise Masiix yahay Rabbiga si Eebbaha
Aabbaha ah lagu ammaano.

12 Haddaba, kuwiinna aan jecelahayow, sidaad weligiinba u addeeci jirteen, iyadoo ayna ahayn
markaan idinla joogay oo keliya, laakiinse hadda markaan idinka maqnahayna si sidii hore aad
uga sii badan badbaadadiinna ugu camalfala si cabsi iyo gariir leh, 13 Waayo, waa Eebbe ka
idin karsiiya doonista iyo ku dhaqanka labadaba farxaddiisa wanaagsan aawadeed. 14 Haddaba
wax walba ku sameeya gunuunac iyo muran la’aan, 15 Si aad ceeb iyo eed la’aan u ahaataan,
idinkoo ah carruurtii Eebbe oo aan iin lahayn, oo ku dhex jira qarni lunsan oo faasiq ah, kaasoo
aad ka dhex iftiintaan sida iftiika dunida ku dhex jira, 16 Idinkoo horay u sii xajinaya erayga
nolosha, si aan anigu u helo wax aan ku faano maalinta Masiixa, taasoo ah inaanan macno
la’aan u ordin oo aanan macno la’aan u hawshoonin. 17 Oo weliba haddii laygu dul sadaqeeyo
alla bariga iyo adeegga rumaysadkiinna, waan farxayaa, oo dhammaantiin waan idinla
farxayaa, 18 Oo sidaasoo kale idinkuna waa inaad faraxdaan ood aad ila
riyaaqdaan.19 Laakiinse waxaan Sayid Ciise ka rajaynayaa inaan dhawaan idiin soo diro
Timoteyos si aan aniguna ugu farxo markaan xaaladdiinna ogaado. 20 Waayo, ma hayo nin
isaga la mid ah oo xaaladdiinna si dhab ah uga welwelaya. 21 Waayo, dhammaantood waxay
doonayaan danahooda, mana aha danaha Ciise Masiix. 22 Laakiinse idinku waad taqaanaan
xaqiiqadiisa in sida uu ilmuhu aabbihiis ugu adeego oo kale inuu isagu iigala adeegay Injiilka.
23 Sidaas daraaddeed waxaan rajaynayaa inaan sida ugu dhakhso badan isaga idiinku soo diro
markaan arko sida ay xaalkaygu noqdo. 24 Laakiinse Rabbigaan ku kalsoonahay inaan aniga
qudhaydu dhawaan idiin iman doono. 25 Waxaan u arkay inay qasab tahay inaan idiin soo diro
Ebafroditos oo ah walaalkay iyo mid ila shaqeeya oo askari ah, oo ah kii aad soo dirteen iyo
adeegaha baahidayda, 26 Maxaa yeelay, isagu wuu u hiloobay dhammaantiin, oo aad buu u
tiiraanyooday, waayo, idinku waxaad maqasheen inuu bukay, 27 Dhab ahaantii isagu wuu

bukay oo dhimasho ayuu qarka u gaadhay, laakiinse Eebbe ayaa u naxariistay isaga, mana
aha isaga oo kaliya, laakiinse anigana wuxuu iigu naxariistay si aanan aad ugu murugoonin.
28 Sidaas daraaddeed waxaan aad ugu dadaalaya inaan isaga idiin soo diro, si aad u faraxdaan
markaad mar kale aragtaan, oo ay anigana murugadu iga yaraato. 29 Sidaas daraaddeed
idinkoo aad u faraxsan isaga Rabbiga dartii ku aqbala, oo kuwa isaga la midka ahna
maamuusa, 30 Maxaa yeelay, shaqada Masiixa aawadeed ayuu dhimasho ku dhawaaday,
markuu naftiisa halis u galiyay si uu u dhammays tiro wixii ka dhinnaa adeegiinnii aad ii qaban
jirteen.

### Xaqnimada Runta Ah

**3** Ugu dambaysta waxaan idinku leeyahay walaallayaal, Rabbiga ku farxa. Sida xaqiiqada ah
anigu inaan isla farriintii idiin soo qoro dhib iguma aha, laakiinse idinka nabad galyadiinna ayaa
ku jirta. 2 Ayda iska jira, oo iska jira kuwa xuma falayaasha ah, oo iska jira gudniinka beenta ah,
3 Waayo, innagu waxaynu nahay kuwo gudan oo Ruuxa Eebbe ku caabuda, oo Ciise Masiix ku
faana, oo aan jidhka isku hallaynin.

4 In kastoo aan aniga qudhayduba jidhka ku kalsoonahay, hadduu nin u malaynayo inuu jidhka
ku kalsoonyahay anigaa ka sii daran. 5 Aniga waxaa lay guday maalintii siddeedaad, oo
waxaan ahay qowmiyadda reer banii Israa'iil, oo waxaan ka ahay qabiilka reer Benyaamiin, oo
waxaan ahay Cibraani ka mid ah Cibraaniyada; oo xagga shareecada waxaan ahay Farrisi;
6 Xagga qiiradana waxaan ahaa kii ciqaabi jiray kiniisadda, xagga xaqnimada shareecada ku
dhaqankeeda waxaan ahaa mid aan iin lahayn. 7 Laakiinse waxyaabihii guusha ii ahaa een
lahaa, Masiixa aawadiis khasaare ayaan ku tiriyay. 8 Runtii anigu wax kasta khasaare ayaan ku
tirinayaa wanaagga aqoonta aan Rabbigayga Ciise Masiix aqaanno aawadeed, kaasoo aan
aawadii wax kasta ugu khasaaray, oo haddana waxaan ku tirinayaa inay yihiin qashin si aan
Masiixa u helo, 9 Oo isaga layga dhex helo, anigoo aan lahayn xaqnimo tayda ah oo
shareecada laga helo, laakiinse anigoo leh ta laga helo iimaanka Masiixa, taasoo ah
xaqnimada xagga Eebbe ee iimaanka ku salaysan, 10 Si aan u ogaado isaga iyo xoogga
sarakiciddiisa oon uga qayb qaato xanuunkiisa iyo inaan uga ekaado isaga xagga
dhimashadiisa, 11 Si kasta oy u suurta gashaba si aan u gaadho sarakicidda kuwii dhintay.
12 Mana aha inaan horay u helay ama aan mar hore kaamil noqday, laakiinse waan ku
dadaalayaa inaan helo wixii uu Ciise Masiix ii qabtay. 13 Walaallayaal, anigu iskuma tirinayo
inaan guusha helay, laakiinse wax keliya ayaan samaynayaa, waxa iga dambeeyay intaan
illoobo ayaan xoogga saaraa waxa iga horreeya. 14 Anigu waxaan xoogga saaraa ujeeddada i
hor taalla iyo abaal gudka dacwadda sare ee Eebbe inoogu yeedhayo xagga Ciise Masiix.
15 Sidaas daraaddeed in alla inteenna kaamil ahu aan sidaas u fikirno, oo haddii aad si ka
duwan wax uga fikirtaan, xataa taas Eebbe ayaa idiin muujin doona. 16 Haddaba aynu
xajisanno runta aynu horay u haysannay. 17 Walaallayaal, idinku dhammaantiin igu wada
dayda, oo u fiirsada kuwa sidaas u socda xataa sidaad annaga tusaale nooga qaadateen.
18 Waayo, waxaa jira kuwo badan oon marar badan idiin sheegay, oo aan haddana anigoo
ilmaynaya idiin sheegayo oo ah cadawga iskutallaabta Masiixa, 19 Oo kuwaas dhammaantood
way halaagmeen, ilaahooduna waa calooshooda, ammaantooduna waxay ku jirtaa ceebtooda,
oo waxay ka fikiraan waxyaabaha dunida. 20 Laakiinse innaga waddaninimadeennu waxay ku
jirtaa jannada halkaasoo aynu weliba ka sugayno Badbaadiye kaasoo ah Sayid Ciise Masiix.

[21] Isagu wuxuu baddeli doonaa jidhkeenna liita si uu ugu ekaado jidhkiisa ammaanta leh, oo
wuxuu ku baddelayaa xoogga uu isagu ku awoodo inuu wax kastaba isaga hoosaysiiyo.

## Waano

**4** Sidaas daraaddeed walaalahayga aan jecelahay oo aan u hiloobayow, waxaad tihiin
farxaddayda iyo taajkayga. Rabbiga ku adkaada kuwayga aan jecelahayow. [2] Waxaan ka
codsanayaa Yu'odiya, oo waxaan ka codsanayaa Suntukhee inay xagga Rabbiga isku maan
ahaadaan. [3] Haa, ka ila shaqeeya oo runta ahow, waxaan kaa codsanayaa inaad dumarkaas
caawiso, waayo, iyaga iyo Kaleemeentos iyo kuwa kale ee ila shaqeeyaba oo ay
magacyadoodu ku qoranyihiin kitaabka nolosha, waxay igula hawshoodeen Injiilka aawadii.
[4] Mar kasta Rabbiga ku faraxsanaada, oo weliba waxaan idin leeyahay, Farxa.
[5] Qabownimadiinna dadka oo dhan ha ogaadeen, waayo, Rabbigu wuu soo dhawyahay.
[6] Waxba ha ka welwelina, laakiinse wax kastaba Eebbe ku ogeysiiya tukasho iyo duco mahad
leh. [7] Oo nabadda Eebbe ee fahan kasta ka sarraysa ayaa qalbiyadiinna iyo fikirkiinna ku
dhawri doontaa Ciise Masiix. [8] Ugu dambaysta, walaallayaal, waxaan idinku leeyahay, Wax
kasta oo run ah, iyo wax kasta oo sharaf leh, iyo wax kasta oo xaq ah, iyo wax kasta oo daahir
ah, iyo wax kasta oo la jeclaysto, iyo wax kasta oo ammaan mudan, hadduu wanaag ku jiro iyo
hadday ammaanu ku jirto, waxyaabahaas ka fikira. [9] Wixii aad barateen oo aad hesheen oo
aad maqasheen oo aad aniga igu aragteen ku dhaqma, oo Eebbaha nabadduna wuu idinla jiri
doonaa.

## Bawlos Wuxuu Dadka Filiboy Ugu Mahadnaqay Hadiyaddoodii

[10] Laakiin Rabbiga aad baan ugu faraxsanahay inaad hadda ugu dambaysta mar kale iga
fikirteen, taasoo aad ka fikiri jirteen laakiin aad fursad u waydeen. [11] Kama hadlayo baahi,
waayo, waxaan bartay inaan ku qanacsanaado hadba xaaladdii aan ku jiro. [12] Waxaan
aqaanaa saboolnimada, oo weliba waxaan aqaannaa barwaaqada. si kastaba iyo xaalad walba
waxaan bartay dharagta iyo gaajadaba, barwaaqada iyo baahidaba. [13] Wax walba waan ku
samayn karaa ka i caawiya gargaarkiisa. [14] Hase yeeshee si wanaagsan baad yeesheen
markaad dhibaatadayda ila qaybsateen. [15] Idinka qudhiinnuba waad taqaanaan, reer Filiboyow,
in Injiilka bilowgiisii markii aan Makedoniya ka soo kacay aan kiniisaduna ila qaybsanin wax
bixinta iyo ka guddoomidda, idinkoo keliya mooyee. [16] Waayo, xataa markii aan Tesaloniika
joogay, idinku mar iyo labo ayaad ii soo dirteen waxaan u baahnaa. [17] Mana aha inaan hadiyad
doonayo, laakiin waxaan doonayaa midhaha xaggiinna ku kordhaya. [18] Laakiinse anigu wax
walba iyo ka badanba waan haystaa. Waan dheregsanahay, waayo, waxaan Ebafroditos ka
helay wixii aad ii soo dirteen, kuwaasoo ah allabari Eebbe aqbali karo oo uu aad ugu farxo oo
caraf udgoon leh. [19] Eebbana wuu idin siin doonaa waxaad u baahantihiin oo dhan, sida ay
tahay hodantinimadiisa xagga ammaanta Ciise Masiix ku jirta. [20] Haddaba ammaanu ha u
ahaato Eebbaha Aabbeheenna ah weligeed iyo weligeed. Aamiin.

## Nabad Gelyaynta

[21] Igu salaama mid kasta oo ka mid ah qudduusiinta Ciise Masiix. Walaalaha ila joogana way
idin soo salaamayaan. [22] Qudduusiinta oo dhanna way idin soo salaamayaan, gaar ahaan
kuwa guriga Kaysar jooga. [23] Nimcada Sayid Ciise Masiix ha la jirto ruuxiinna.

## WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER KOLOSAY

### Salaan

**1** Ka socota Bawlos, oo ah rasuulkii Ciise Masiix doonista Eebbe ku ah, iyo walaalkeen
Timoteyos, 2 Ku socota qudduusiinta iyo walaalaha aaminka ah ee Masiixa ku jira ee Kolosay
jooga. Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaadda Eebbaha Aabbeheenna ah.

### Mahadnaq Iyo Duco

3 Waxaannu ku mahadnaqaynaa Eebbaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix, annagoo
had iyo jeerba idiin soo ducaynayna. 4 Waxaannu maqalnay rumaysadkiinna xagga Ciise
Masiix iyo jacaylka aad qudduusiinta oo dhan u haysaan, 5 Rajada jannada laydiin dhigay
aawadeed, taasoo aad horay ugu maqasheen hadalka runta ah ee Injiilka. 6 Kaasoo idin soo
gaadhay, siduu dhab ahaantii u gaadhay dunida oo dhan isagoo midho dhalaya oo kobcaya,
sida uu idiinka midho dhalayo oo idiinku kobcayo, tan iyo maalintii aad maqasheen oo aad
ogaateen nimcada Eebbe si run ah. 7 Sidaad ka barateen Ebafraska aan jecelahay oo adeege
nala ah, oo Masiixa u ah adeege aamin ah aawadiin, 8 Kaasoo weliba noo caddeeyay
jacaylkiinna Ruuxiga ah. 9 Sababtaas daraaddeed tan iyo maalintii aannu taas maqalnay
maanaan joojinin inaannu idiin soo ducayno. Waxaannu Eebbe idiinka baryaynaa inay idinka
buuxsanto aqoonta doonistiisa xigmadda iyo wax garashada Ruuxiga ah oo dhan leh, 10 Si aad
ugu dhaqantaan si Rabbiga istaahisha oo aad wax kasta isaga kaga farxisaan, idinkoo midho
ku soo saaraya camal kasta oo wanaagsan oo ku sii koraya aqoonta Eebbe. 11 Weliba
waxaannu Eebbe ka baryaynaa inaad ku xoogaysataan xoog walba sida ay tahay awoodda
ammaantiisu si aad dulqaad farxad leh u yeelataan.

12 Mahad baannu u celinayaa Aabbaha inaga dhigay kuwa istaahila inay ka qayb qaataan
dhaxalka qudduusiinta nuurka ku jirta. 13 Isagu wuu inaga samata bixiyay xoogga gudcurka, oo
wuxuu inoo baddelay boqortooyadii Wiilka uu jecelyahay, 14 kaasoo aynu ku leennahay
madaxfurasho ah dembi dhaafka. 15 Isagu waa suuraddii Eebbaha aan la arki karin iyo curadka
uunka oo dhan; 16 Waayo, wax kastaba isaga ayaa uumay, waxyaabaha samooyinka ku jira,
iyo waxyaabaha dhulka joogaba iyo waxyaabaha la arki karo iyo waxyaabaha aan la arki
karinba, hadday yihiin carshiyo ama sayidnimo ama madaxnimo ama maamul, wax walba
isaga ayaa uumay oo loo uumay. 17 Isagu wax kastaba wuu ka horreeyaa, oo wax kastaba
isagaa ayay isku haystaan. 18 Oo isagu waa madaxa jidhka, kaasoo ah kiniisadda, oo isagu
waa Bilowgii iyo curadka kuwii dhintay ka kacay, si uu uga horreeyo wax kastaba. 19 Waayo,
waxaa Aabbaha ka farxisay in buuxnaanta oo dhan ay isaga ku jirto*[k], 20 Iyo inuu isaga wax
kastaba xaggiisa kula heshiiyo, isagoo kula heshiiyay dhiiga iskutallaabtiisa, hadday yihiin
waxyaabaha dhulka jooga ama hadday yihiin waxyaabaha samooyinka ku jiraba. 21 Idinku
waagii hore waxaad ahaydeen kuwo ajanabi laga dhigay, oo fikirkiinnu cawdu buu ahaa
camalkiinna sharka leh awgeed, 22 Laakiinse hadda isagu wuxuu idinkula heshiiyay jidhkiisii
banii aadanka ahaa, si uu isagu hortiisa idiin soo xaadiriyo idinkoo qudduus ah oo aan iin iyo
eed midna lahayn, 23 Waa Haddaad ku sii jirtaan iimaanka oo aad gun iyo xidid adag ku
yeelataan, oo aydaan ka fogaanin rajadii Injiilka aad maqasheen, kaasoo lagu wacdiyay uunka
samada ka hooseeya oo dhan, oo anigan Bawlos ah layga dhigay adeege.

## Adeeggii Uu Bawlos Ka Qabtay Kiniisadaha

24 Hadda waxaan ku faraxsanahay xanuunkayga aan aawadiin u xanuunsaday, oo waxaan
dhammays tiraa dhibaatooyinka Masiixa jidhkiisa kaasoo ah kiniisadda. 25 Taasoo la iiga dhigay
adeege wakiilnimada Eebbe ii wakiishay aawadeed, aniga oo aawadiin la ii siiyay inaan
dhammays tiro erayga Eebbe. 26 Kaasoo ahaa wax qarsoon oon la garanaynin tan iyo weligeed
iyo qarni kastaba, laakiinse hadda ayaa daaha looga qaaday qudduusiintiisa. 27 Kuwaasoo uu
Eebbe ku farxay inuu iyaga ogeysiiyo waxa ay tahay hodantinimada ammaanta qarsoon ee ku
dhex jira ummadaha, kaasoo ah Masiixa idinku jira oo ah rajada ammaanta. 28 taasoo aanu
wax ku wacdino, annaga oo nin kasta waaninayna oo nin kasta wax ku barayna xigmad oo
dhan, si aannu nin walba u hor keenno isaga oo Masiixa kaamil ku ah. 29 Taas ayaanan u
hawshoodaa anigoo aad u dadaalaya sida ay tahay awooddiisa sida xoog leh igaga dhex
shaqeeyaa.

**2** Waxaan jeclaan lahaa inaad ogaataan sida wayn ee aan idiinku dadaalayo idinka iyo kuwa
La'odikiya jooga iyo in alla intii aan arag wejigayga aniga oo nool, 2 Si ay quluubtoodu u
dhiirranaato, iyagoo si jacayl leh isugu xidhan, oy si hodantinimo leh u gaadhaan yaqiinta
garashada iyo garashada siraha Eebbe, taasoo ah Masiixa. 3 Kaasoo ay ku wada qarsoonyihiin
qasnadaha xigmadda iyo aqoonta oo dhan. 4 Waxaan taas u leeyahay inuusan ninna idinku
khiyaamin hadal sasabasho ah. 5 In kastoo aan idinka maqnahay xagga jidhka, haddana waan
idinla joogaa xagga ruuxa, anigoo ku faraxsan markaan arko hab dhaqankiinna iyo adkaanta
rumaysadkiinna ee Masiixa.

## Masiixa Oo Lagu Noolaado

6 Haddaba sidaad u aqbasheen Sayid Ciise Masiix, ku socda isaga, 7 Idinkoo isaga ku
xididaystay oo ku dhismay, oo iimaankiinnu ku adkaaday, sidii laydiin baray, oo aad u
mahadnaqa. 8 Iska jira oo yuusan ninna idinku af duubin falsafadiisa iyo khiyaanadiisa
bilaashka ah ee ku salaysan hab dhaqanka dadka iyo aragtida dunida ee aan ka imanin xagga
Masiixa, 9 Waayo, Eebbenimada oo dhan ayaa ka buuxday jidhkiisa, 10 Oo idinka isaga ayaa
laydinka buuxiyay, isagoo ah madaxa taliye kasta iyo maamul kasta. 11 Oo isaga xaggiisaa
ayaa laydiinka guday gudniin aan gacmo lagu samayn markii aad gudniinka Masiixa ku
tuurteen jidhka aadmiga. 12 Idinka waxaa isaga laydinkula aasay biya galinta, kaasoo isaga
laydinkula soo sarakiciyay rumaysadka aad u qabtaan xoogga Eebbe ee ka shaqeeya isaga oo
kuwii dhintay ka soo sarakiciyay. 13 Idinka oo ku dhitay xadgudubyadiinnii iyo buurya
qabnimadii jidhkiinna ayuu isagu idin soo noolaysiiyay, isagoo inaga cafiyay
xadgudubyadeennii oo dhan. 14 Wuxuuna baabbi'iyay dacwadii inoogu qornayd shareecada ee
inaga dhanka ahayd, oo weliba intuu fogeeyay ayuu ku qodbay iskutallaabta. 15 Isagu hubkii
ayuu ka qaaday taliyayaasha iyo kuwa amarka leh, oo si bayaan ah ayuu u ceebeeyay, isagoo
iyaga ka adkaaday.

## Ninna Yuusan Idin Qiima Tirin

16 Haddaba ninna yuusan idinku xukumin wax ku saabsan cunto ama cabbid ama maalin ciid
ah ama bil dhalatay ama maalmaha Sabtida, 17 kuwaas oo ah hooska waxyaabaha iman
doona, laakiinse jidhka waxaa iska leh Masiixa. 18 Ninna yuusan abaal gudkiinna idinka
dulminin isagoo idin oggolaysiinaya is-hoosaysiinta iyo malaa'igaha oo la caabudo, oo la dhex

gelayay riyooyin, taasoo uu aqoon la'aan ugu kibray maankiisa aadmiga, [19] Isaga oo aan
xajisanaynin Madaxa jidhka oo dhan amarka siiya oo xubnaha iyo seedaha isku wada haya, oo
koridda Eebbe ku kora. [20] Haddii aad idinkoo Masiixa ku jira aragtida dunida kala dhimateen,
maxaad sidii idinkoo dunida ku nool ugu dhaqmaysaan sharciyo, [21] kuwaas oo leh Ha qabanin,
Ha dhadhamin, Ha taabanin? [22] Kuwaasoo dhan waxay wada khuseeyaan waxyaabaha wada
baabba'aya. sharciyadaas iyo amarradaas oy dadku dajiyeen. [23] Waxyaabahaasu dhab
ahaantii waxay leeyihiin muuqaal xigmadeed xagga cibaadada iyo edbinta nafta iyo is dullayn
iyo xakamaynta jidhka, laakiinse xoog ay damaca jidhka ku joojiyaan ma laha.

**3** Haddaba haddii laydinla soo sarakiciyay Masiixa, doondoona waxyaabaha xagga sare jira,
meesha uu Masiixu joogo, isagoo fadhiya midigta Eebbe. [2] Ka fikira waxyaabaha xagga sare
jira, hana ka fikirina waxyaabaha dhulka dul yaalla. [3] Waayo, idinku waad dhimateen, oo
noloshiinnuna Masiixa ayay kula qarsoontahay Eebbe. [4] Masiixa oo ah nolosheenna, marka uu
soo muuqdo ayaad idinkuna ammaan kula soo muuqan doontaan. [5] Haddaba dila xubnihiinna
dhulka yaalla, kuwaasoo ah sino, iyo faasiqnimo iyo himmad xaaraan ah, iyo damac shar ah,
iyo hunguri xumi, taasoo ah sanam caabudid, [6] Waxyaabahaas oy daraaddood cadhada Eebbe
ugu soo degto carruurta caasinimada. [7] Kuwaas ood waagii hore ku socon jirteen markii aad
waxyaabahaas ku dhaqmi jirteen. [8] Laakiinse hadda iska fogeeya waxyaabahan oo dhan,
kuwaasoo ah xanaaq, iyo cadho, iyo xumaan, iyo cay, iyo hadalka ceebta ah oo afkiinna ka
baxa. [9] Been ha isu sheegina, waayo, idinku waad iska xoorteen dabiicaddii hore iyo hab
dhaqankeediiba, [10] Oo waxaad huwateen dabiicad cusub taasoo lagu cusboonaysiiyay sida ay
tahay aqoonta u-ekaanshaha kii iyada abuuray. [11] Halkaas oyna jirin Giriig ama Yuhuudi, mid
gudan ama mid balag leh, Barbari, ama Iskutees, addoon ama xor; laakiinse Masiixu waa wax
walba, oo wax walba wuu ku jiraa. [12] Haddaba sidaas daraaddeed idinku sidii kuwo Eebbe
doortay oo qudduusiin ah oo la jecelyahay, huwada qalbi leh naxariis iyo turid iyo is-hoosaysiin
iyo qabownaan iyo dulqaad. [13] Midkiinba midka kale ha u dulqaato oo ha cafiyo, hadduu mid ka
cabanayo mid kale; xataa sida Rabbiguba idiin cafiyay, idinkuna sidaas oo kale yeela, [14] Oo
waxyaabahaas oo dhan waxaad ka dul huwataan jacayl, kaasoo ah xidhiidhka kaamilnimada.
[15] Oo nabadda Masiixuna ha u taliso quluubtiinna, taasoo laysugu kiin yeedhay isku jidh keliya;
oo mahadnaqa. [16] Oo erayga Masiixu ha idiinku jiro si hodan ah, idinkoo wax isbaraya oo isku
waaninaya sabuurro iyo qasiidooyin ammaan ah iyo heeso ruuxi ah, idinkoo Eebbe ugu
heesaya nimcada quluubtiinna ku jirta. [17] Oo wax alla wixii aad ku samaysaan hadal ama ficil,
magaca Sayid Ciise ku wada sameeya oo Eebbaha Aabbaha ah ugu mahadnaqa isaga.

### Nolosha Qoysaska Masiixiyiinta Ah

[18] Dumarkow, nimankiinna ka dambeeya sida ku habboon xagga Rabbiga. [19] Nimankow,
idinkuna xaasaskiinna jeclaada oo ha u darrianina. [20] Carruurtay, waalidkiinna wax kastaba ku
addeeca, waayo, taasu waxay ka farxisaa Rabbiga. [21] Aabbayaashow, carruurtiinna ha ka
cadhaysiinina, yaysan qalbi jabine. [22] Adeegayaashow, wax kastaba ku addeeca kuwa xagga
jidhka sayidadiinna ah; hana ahaanina kuwo markii la arkayo oo keliya shaqeeya sida kuwa
dadka ka farxiya, laakiinse ku adeega qalbi daacad ah, idinkoo Rabbiga ka cabsanaya. [23] Wax
alla wixii aad samaysaanba, niyad ku sameeya, sidii idinkoo Rabbiga dartiisa u samaynaya oo
aan dad aawadiis u samaynayn, [24] Idinkoo og inaad xagga Rabbiga ka heli doontaan abaal
gudka dhaxalka. Waxaad u adeegtaan Rabbiga Masiixa ah. [25] Waayo, kii xumaan falaa wuxuu
dib u heli doonaa xumaantii uu falay, waayo, dadka looma kala eexdo.

**4** Sayidadow, adeegayaashiinna siiya xuquuqda ay xaqa u leeyihiin, idinkoo garanaya inaad
jannada Sayid ku leedihiin.

### Duco Ku Saabsan Faafinta Injiilka

2 Haddaba ducada ku sii adkaada, idinkoo ku soo jeeda oo mahadnaqaya. 3 Oo weliba
annagana noo soo duceeya in Eebbe noo furo albaabka hadalka, si aannu uga hadalno siraha
Masiixa, kaasoo aan u xidhnahay, 4 Si aan u caddeeyo oon sida waajibka igu ah uga hadlo.
5 Kuwa dibadda jooga xaggooda si xigmad le ula dhaqma, oo wakhtiga ka faa'iidaysta. 6 Mar
kasta hadalkiinnu nimco ha lahaado isagoo cusbo lagu daray, si aad u ogaataan sidii aad ugu
waajibi lahaydeen qof walba.

### Salaanta Iyo Gabagabo

7 Xaaladahayga oo dhan waxaa idiin sheegi doona walaalkeen Tukhikos oo ah walaal qaali ah
iyo adeege aamin ah oo igala adeega xagga Rabbiga. 8 Isaga ayaan idiinku soo diray sababtan
daraaddeed, si aad u ogaataan xaaladdayda iyo inuu quluubtiinna dhiirri geliyo, 9 Oo weliba
waxaan isaga la soo diray walaalkeen Oneesimos, kaasoo ah mid aamin ah iyo walaal qaali
ah, waxayna idiinka warrami doonaan waxa meeshan ka dhacay oo dhan. 10 Waxaa idin soo
salaamaya Aristarkhos oo ila xidhan, iyo Markos oo Barnabas abti u yahay, kaasoo isaga
arrintiisa laydin kala dardaarmay, hadduu idiin yimaado aqbala. 11 Weliba waxaa idin soo
salaamaya Ciise oo la yidhaahdo Yuustos. Kuwaasoo ka mid ah kuwa gudan ayaa ah kuwa
keliya ee igala shaqeeya boqortooyada Eebbe, iyagoo ii noqday kuwo i dhiirri geliya. 12 Waxaa
kaloo idin soo salaamaya Ebafras, oo idinka mid ah, oo ah adeegihii Ciise Masiix. Mar walba
ducadiisa ayuu idinku xusaa, si aad u istaagtaan, idinka oo kaamil ah oo aad u yaqiinsan
doonista Eebbe oo dhan. 13 Waxaan ugu markhaati kacayaa inuu u hawshoodo idinka aawadiin
iyo kuwa La'odikiya jooga iyo kuwa Hi'erabolis jooga aawadood. 14 Waxaa idin soo salaamaya
Luukos oo ah dakhtar qaali ah iyo Deemaas. 15 Walaalaha La'odikiya jooga iyo Numfas, iyo
kiniisadda gurigiisa ku kulanta. 16 Warqaddan markii laydinka dhex akhriyo, haddana ha laga
dhex akhriyo kiniisadda reer La'odikiya, oo idinkuna akhrista warqadda aad La'odikiya ka heli
doontaan. 17 Oo Arkhibbos waxaad ku tidhaahdaan, Adeeggii aad Rabbiga dartii ku heshay, ku
dadaal sidii aad u dhammays tiri lahayd. 18 Anigoo Bawlos ah ayaa salaantan gacantayda ku
qoraya. Xusuusta xadhigayga. Nimco ha idinla jirto.

# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER TESALONIIKA

### Salaan Iyo Mahadnaq

**1** Annagoo ah Bawlos iyo Silwanos iyo Timoteyos waxaannu warqaddan u qoraynaa kiniisadda
Tesaloniika ee ku jirta Eebbaha Aabbaha ah iyo Sayid Ciise Masiix. Nimco ha idinla jirto iyo
nabadu. 2 Had iyo jeerrba Eebbe ayaannu idiinku mahadnaqnaa dhammaantiin, annagoo
ducadayada idinku xusuusanna. 3 Waxaannu si aaan kala go' lahayn Eebbaheenna oo ah
Aabbeheenna hortiisa ku xusuusannaa wax qabadka rumaysadkiinna iyo hawshiinna jacaylka
leh iyo dulqaadka rajadiinna ku jirta Rabbigeenna Ciise Masiix. 4 Annagu waannu ognahay,
walaalaha Eebbe jecelyahayow inuu Eebbe idin doortay, 5 Waayo, Injiilkayagu idinkuma soo
gaadhin hadal oo kaliya, laakiinse wuxuu idinku soo gaadhay xoog iyo Ruuxa Qudduuska ah
iyo yaqiin badan. Waad garanaysaan sidaannu dhexdiinna ku ahayn idinka aawadiin. 6 Oo
waxaad noqoteen kuwo nagu dayda annaga iyo Rabbigaba, idinkoo erayga ku helay dhib
badan iyo farxadda Ruuxa Qudduuska ah. 7 Sidaas daraaddeed tusaale ayaad u noqoteen
muminiinta Makedoniya iyo Akhaya jooga oo dhan. 8 Waayo, eraygii Rabbiga ayaa idinka
dhawaaqay, mana aha Makedoniya iyo Akhaya dhexdooda oo keliya, laakiinse rumaysadkiinna
Eebbe wuxuu gaadhay meel kasta; oo sidaas daraaddeed uma baahnin inaannu wax
nidhaahno. 9 Waayo, iyaguba waxay ka warbixiyaan arrintayada taasoo ah sidaannu idiinku
soo gaadhnay iyo sidaad sanamyadii uga jeedsateen ood Eebbe ugu soo jeedsateen, si aad
ugu adeegtaan Eebbaha nool ee runta ah, 10 Oo aad samada ka sugaysaan Wiilkiisa uu kuwii
dhintay ka soo sarakiciyay oo ah Ciisaha inaga samata bixinaya cadhada imanaysa.

### Adeeggii Bawlos Ee Tesaloniika

**2** Waayo, walaallayaal, waxaad ogtihiin imaatinkayagii aannu idiin nimid inuusan noqonin mid
aan faa'iido lahayn. 2 Laakiinse annagoo mar horeba aad ugu xanuunsannay oo si ceeb leh
naloola dhaqmay Filiboy sidaad idinkuba ogtihiin, waxaannu dhiirranaan ku helnay
Eebbaheenna si aannu Injiilka Eebbe idiinku sheegno annagoo dhibaato badan ku jirna.
3 Waayo, wacdigayagu kama imanin baadinimo ama nijaas ama khiyaano, 4 laakiinse sidii uu
Eebbe noogu ogolaaday oo uu noogu aaminay Injiilka ayaannu u hadalnaa, mana aha si
aannu dadka uga farxinno, laakiinse si aannu uga farxinno Eebbaha quluubtayada imtixaama.
5 Maxaa yeelay, marnaba maanaan adeegsanin erayo sasabasho ah sidaad ogtihiinba ama
damac qarsoon oo taas Eebbe baa marag ka ah. 6 Dadka xaggoodana ammaan kamaaanaan
doonaynin, hadday tahay xaggiinna ama xagga dad kale, in kasta oo aannu culays idinku
noqon kari lahayn, annagoo ah rasuulladii Masiixa. 7 Laakiin waxaannu dhexdiinna ku ahayn
kuwo u turra siday hooyo carruurteeda nuujisa ugu turto. 8 Sidaas daraaddeed, annagoo aad
idiin jecel, ayaannu ku faraxnay inaannu idinla wadaagno ma aha Injiilka Eebbe oo keliya,
laakiinse xataa naftayada, maxaa yeelay, waxaad noo noqoteen kuwo qaali ah. 9 Waayo, waad
xusuusataan, walaallayaal, sidaannu dhib iyo daal ugu shaqaynay habeen iyo maalinba, si
aannan midkiinna u culaysinin, oo waxaannu idinku wacdinnay Injiilka Eebbe. 10 Idinkuna
markhaati baad ka tihiin, Eebbana wuu ka yahay, sidaannu daahir iyo xaq iyo ceeb la'aan kula
dhaqannay kuwiinna muminiinta ah. 11 Sidaad ogtihiin waxaannu midkiin walba ula dhaqannay
siduu aabbe carruurtiisa ula dhaqmo, annagoo idin waaninayna oo idin dhiiri gelinayna oo idiin
markhaatifurayna, 12 Si aad ugu socotaan si istaahisha Eebbaha idiinku yeedhay
boqortooyadiisa iyo ammaantiisa. 13 Oo sababtaas daraaddeed ayaannu si aan kala go lahayn

Eebbe ugu mahadnaqnaa si, markii aad naga aqbashaan eraygii Eebbe oo aad naga
maqasheen aydaan u aqbalin sidii dad hadalkiis laakiin sida uu run ahaantii u yahay eraygii
Eebbe oo ka dhex shaqaynaya kuwiinna muminiinta ah. [14] Waayo, walaallayaal, waxaad
noqoteen kuwo ku dayda kiniisadaha Eebbe ee Yahuudiya, kuwaasoo ah kuwa Ciise Masiix,
maxaa yeelay, idinkana waxaa dadkiinna idinka soo gaadhay dhibtaas oo kale, siday iyagaba
uga soo gaadhay Yuhuudda, [15] Kuwaasoo ah kuwii dilay Sayid Ciise iyo nebiyadiiba oo
annagana dibadda noo eryay oo aan Eebbe raalli galinin, dadka oo dhanna ka soo hor jeeda.
[16] Oo waxay naga hor istaageen inaannu dadka aan Yuhuudda ahayn la hadalno si ay u
badbaadaan. Sidaasay mar walba dembiyadooda u dhammays tiraan, laakiin ugu dambaysta
cadho ayaa ku dul dhici doonta.

### Bawlos Wuxuu Doonayay Inuu Mar Kale Kiniisadda Soo Booqdo

[17] Laakiin, walaallayaal, annagoo wakhti yar nalaga kiin qaaday, xagga jidhka oo ayna ahayn
xagga qalbiga, aad iyo aad baannu ugu dadaalnay inaannu wejigiinna aragno, annagoo xiiso
wayn u qabna, [18] Waayo, waannu jeclaan lahayn inaannu idiin imaanno, anigan Bawlos ah mar
iyo lababa waan jeclaa, laakiinse Shaydaan ayaa naga hor joogsaday. [19] Maxaa yeelay, waa
ayo rajadayada iyo farxaddayada iyo taajka faankayga Rabbigeenna Ciise Masiix hortiisa
markuu yimaado? Saw idinka ma aha? [20] Waa idinka faankayaga iyo farxaddayaduba.

### Wixii Timoteyos Loo Soo Diray

**3** Sidaas daraaddeed markii aannu is-hayn kari waynay, waxaa nala wanaagsanaatay inaannu
keliyahaantayo Athens ku hadhno, [2] Oo waxaannu idiin soo dirnay walaalkayo Timoteyos oo ah
adeegaha Eebbe ee Injiilka Masiixa, si uu idiin xoogiyo oo idiinka dhiirri geliyo xagga iimaanka,
[3] Si ayna dhibaatooyinkani ninna u gilgilin, waayo, idinka qudhiinnu waad ogtihiin in tan
naloogu tala galay. [4] Waayo, markii aannu idinla joognay, horay ayaannu idiinku sii sheegnay
inaannu dhibaatooyin la kulmayno, waana sida ay u dhacday, sidaad ogtihiinba. [5] Sababtaas
daraaddeed markii aannu is-hayn kari waayay, waxaan idiinku soo cid diray inaan
rumaysadkiinna ogaado, waaba intaasoo uu jirrabihii idin jirrabo oo ay hawshayadii wax aan
faa'iido lahayn noqotaa.

### Warbixintii Timoteyos Ee Dhiirri Galinta Lahayd

[6] Laakiinse hadda markii uu Timoteyos oo idinka yimid noo yimid, wuxuu noo keenay war
wanaagsan oo ku saabsan rumaysadkiinna iyo jacaylkiinna iyo inaad mar kasta si wanaagsan
noo xusuusataan idinkoo xiiso u qaba inaad na aragtaan sidaannu annaguba xiiso ugu qabno
inaannu idin aragno, [7] sababtaas daraaddeed, walaallayaal, dhibkayagii iyo qaxarkayagii
xaggiinna naga haystay waxaannu kaga qalbi qabownay rumaysadkiinna aawadiis, [8] Maxaa
yeelay, hadda annagu waannu noolnahay haddaad xagga Rabbiga ku xoogaysataan. [9] Waayo,
mahad intee le'eg baannu Eebbe u celin karnaa idinka aawadiin iyo farxaddii aannu ku
faraxnay Eebbahayga hortiisa idinka aawadiin? [10] Habeen iyo maalinba aad iyo aad baannu
Eebbe u baryaynaa inaannu wejigiinna aragno oo aannu dhammays tirno inta ka dhiman
rumaysadkiinna. [11] Haddaba Eebbaha ah Aabbeheenna iyo Rabbigeenna Ciise qudhiisu
jidkayaga xaggiinna ha ku soo toosiyo. [12] Rabbigu ha idin koriyo oo ha idiin badiyo jacaylka
midkiinba midka kale u qabo iyo dadka kale oo dhanba, sidaannu annaguba idiin jecelnahay,

[13] Si uu u xoojiyo quluubtiinna iyadoo aan ceeb lahayn oo qudduus ku ah Eebbaheenna oo ah
Aabbeheenna hortiisa, markii uu Rabbigeenna Ciise la yimaado qudduusiintiisa oo dhan.

### Waano

**4** Ugu dambaysta, walaallayaal, waxaannu idinka baryaynaa oonnu idinku waaninaynaa Sayid
Ciise dartii, inaad sidii aad nooga aqbasheen sida waajibka idinku ah inaad u dhaqantaan ood
Eebbe uga farxisaan sidii aad horayba ugu dhaqmi jirteen oo aad si ka badan ugu dhaqantaan.
[2] Waayo, amarradii aan Sayid Ciise idinku siinnay waad ogtihiin. [3] Maxaa yeelay, doonista
Eebbe waxaa weeyaan inaad qudduus ahaataan oo aad sino ka fogaataan, [4] Iyo inuu mid
kastoo idinka mid ahuba ogaado siduu jidhkiisa ugu hayn lahaa qudduusnimo iyo sharaf,
[5] Mana aha inuu himmadda damaca xaaraanta ah ugu socdo sida dadka aan Eebbe aqoonin,
[6] Si uusan ninna u xadgudbin oo uusan walaalkii arrintan ugu xumaynin, maxaa yeelay,
Rabbigu waa mid ka aarguta waxyaabahan oo dhan sidaannu mar horeba idiinku dignay
oonnu idiinku sheegnay. [7] Waayo, Eebbe faasiqnimo inooguma yeedhin, laakiinse wuxuu
inoogu yeedhay qudduusnimo. [8] Sidaas daraaddeed qofkii tan diida, dad ma uusan diidin,
laakiinse wuxuu diidaa Eebbaha idin siiya Ruuxiisa Qudduuska ah. [9] Laakiinse xagga jacaylka
walaalaha loo qabo uma baahnidin in wax laydiinkaga soo qoro, maxaa yeelay, idinka
qudhiinnuba Eebbe ayaa idin baray inuu midkiinba midka kale jeclaado. [10] Waayo, sidaasaad u
jeceshihiin dhammaan walaalaha Makedoniya jooga oo dhan. Laakiin waxaannu idinku
waaninaynaa, walaalayaal, inaad intaas aad uga sii badisaan, [11] Oo aad ku dadaashaan inaad
nabad ku noolaataan, oo aad dantiinna ku ekaataan oo aad gacmihiinna ku shaqaysataan,
sidaannu idinkugu amarnay, [12] Si aad si habboon ugula dhaqantaan xagga kuwa dibadda
jooga, oo aydaan cidna waxba uga baahnaanin.

### Imaatinka Rabbiga

[13] Laakiin walaallayaal, ma doonayo inaad jaahil ka ahaataan arrinta ku saabsan kuwii dhintay
oo waxaannu doonaynaa inaydaan u walaacin sida kuwa kale ee aan rajada lahayn. [14] Waayo,
haddaynu rumaysannahay in Ciise dhintay oo haddana soo sarakacay, marka kuwii iyagoo
Ciise rumaysan dhintayna sidoo kale Eebbe ayaa la soo xaadirin doonaa isaga. [15] Waayo, tan
waxaannu idiinku soo daliilshanaynaa erayga Rabbiga in kuweenna nool ee hadhay ilaa iyo
imaatinka Rabbiga aynaan sinaba uga hor mari doonin kuwii dhintay. [16] Maxaa yeelay, Rabbiga
qudhiisu samada ayuu kala soo degi doonaa dhawaaq iyo codka malaa'igaha sare iyo buunka
Eebbe, markaasay kuwii Masiixa rumaysnaa ee dhintay horta soo sarakici doonaan, [17] Ka
dibna kuweenna nool ee hadhay ayaa iyaga kor loola qaadi doonaa xagga daruuraha
dhexdooda si aynu Rabbiga hawada ugula kulanno, oo sidaasaynu Rabbiga weligeen ula joogi
doonnaa. [18] Sidaas daraaddeed hadalladan midkiinba midka kale ha ugu qalbi qaboojiyo.

### Maalinta Rabbiga

**5** Haddaba arrinta ku saabsan wakhtiyada iyo xilliyada, uma baahnidin walaallayaal in wax
laydiinka soo qoro. [2] Waayo, idinka qudhiinnuba si fiican baad u garanaysaan inay maalinta
Rabbigu u imanayso sida tuug habeenkii u yimaado. [3] Maxaa yeelay, markay leeyihiin, Waa
amni oo nabad galyo ayaa jirta, ayuu halaaggu ugu soo kadin doonaa siday fooshu naag uur
leh ugu soo kadiso, iyaguna sinaba ugama baxsan doonaan. [4] Laakiinse idinku, walaallayaal,

cudcur daar ma lihidin inay maalintaasu sidii tuug idiinku soo kadiso. [5] Waayo, kulligiin waxaad
tihiin carruurta nuurka iyo carruurta maalinta, oo innagu ma nihin kuwa habeenka iyo gudcurka,
[6] Sidaas daraaddeed yaynaan seexanin sida kuwa kale yeelaan, laakiinse aynu soo jeedno oo
aan feejignaanno. [7] Waayo, kuwa seexdaa habeenkii ayay seexdaan, kuwa sakhraamana
habeenkay ayay sakhraamaan. [8] Laakiin innagu maadaama oynu kuwa maalinta nahay aynu
feejignaanno, oo gashanno hubka laabta ee iimaanka iyo jacaylka ah iyo koofiyadda rajada
badbaadada. [9] Waayo, Eebbe inooma dooranin cadhada, laakiinse wuxuu inoo doortay inaynu
ku badbaadno Rabbigeenna Ciise Masiix, [10] Kaasoo inoo dhintay, si aynu ula wada noolaanno
isaga, haddaynu noolnahay iyo haddaynu dhimannaba. [11] Sidaas daraaddeed midkiinba midka
kale ha dhiirri geliyo oo ha dhiso sidaad haddaba yeeshaan.

**Waanada Iyo Gabagabo**

[12] Laakiinse waxaannu idinka baryaynaa, walaallayaal, inaad maamuustaan kuwa idinku dhex
hawshooda oo Rabbiga doonistiisa hoggaamiyayaal idiin ah oo idinla taliya, [13] Oo iyaga aad iyo
aad si jacayl leh ku maasuusa adeeggooda aawadii. Nabad ku wada noolaada. [14] Oo
waxaannu idinku waaninaynaa, walaallayaal, Kuwa si aan habboonayn u dhaqma la taliya oo
kuwa qalbi jabay dhiiri geliya, oo kuwa itaalka yar garab siiya, oo dadka oo dhanna u dulqaata.
[15] Iska jira inuusan midkiinna midka kale sharkiisa ugu abaal gudin shar, laakiinse mar walba
ku dadaala inuu midkiinba midka kale wax wanaagsan u sameeyo iyo dadka oo dhanna. [16] Had
iyo jeerba farxa. [17] Oo si aan kala go lahayn u tukada. [18] Xaalad walbana ku mahadnaqa,
waayo, taasu waa doonista Eebbe xagga Ciise Masiix. [19] Ruuxa ha daminina. [20] Wax sii
sheegiddana ha quudhsanina. [21] Wax walbana tijaabiya oo waxa fiican xajista. [22] Ka fogaada
shar walba qaabkuu doono ha lahaadee. [23] Oo Eebbaha nabadda qudhiisu gabi ahaanba
qudduusiin ha idinka wada dhigo, oo ruuxiinna iyo naftiinna iyo jidhkiinna dhammaanba ha
wada ilaaliyo, iyagoo aan ceeb lahayn markuu Rabbigeenna Ciise Masiix yimaado. [24] Ka idiin
yeedhaa waa aamin, wuuna samayn doonaa. [25] Walaalayaal, noo soo duceeya. [26] Walaalaha
oo dhanna dhunkasho qudduus ah ku wada salaama. [27] Rabbigaan idinku dhaarinayaaye,
Warqaddan ha loo akhriyo walaalaha oo dhan. [28] Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla
wada jirto.

# WARQADDII LABAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII REER TESALONIIKA

### Salaan

**1** Annagoo ah Bawlos iyo Silwanos iyo Timoteyos waxaannu warqaddan u qoraynaa kiniisadda
Tesaloniika ee ku jirta Eebbaha Aabbaha ah iyo Sayid Ciise Masiix. [2] Nimco ha idinla jirto iyo
nabad ka timaadda Eebbaha Aabbaha ah iyo Sayid Ciise Masiix.

### Xukunka Dhici Doona Markuu Ciise Masiix Yimaado

[3] Waxaa waajib nagu ah, walaallayaal, inaannu mar walba aawadiin Eebbe ugu mahadnaqno,
sida munaasibka ah, maxaa yeelay, rumaysadkiinnu aad buu u koray, jacaylka aad kulligiin isu
qabtaanna wuu batay. [4] Sidaas daraaddeed waxaannu idinku faannaa kiniisadaha Eebbe
dhexdooda, taasuna waxay ku timid dulqaadkiinna iyo iimaankiinna aad u adkaysateen
cadaadiska iyo dhibaatooyinka oo dhanba. [5] Taasoo muujisa xukunka xaqa ah ee Eebbe, si
laydinku tiriyo kuwo istaahila boqortooyada Eebbe, taasood daraaddeed u xanuunsataan.
[6] Waayo, caddaaladda Eebbe waxaa weeye inuu dhib ugu abaal gudo kuwii idin dhibay, [7] Iyo
inuu kuwiinna la dhibay nala kiin nasiyo markuu Sayid Ciise samada ka muuqdo, isagoo wata
malaa'igaha xoogga leh [8] Oo dab ololaya ku jira, oo wuxuu ka aargudanaya kuwa aan Eebbe
aqoonin iyo kuwa aan addeecin Injiilka Rabbigeenna Ciise Masiix. [9] Waxaa lagu ciqaabi
doonaa halaag weligiis ah, oo waxaa laga goyn doonaa Rabbiga hortiisa iyo ammaanta
xooggiisa, [10] Markuu yimaado maalintaas si isaga loogu ammaano qudduusiintiisa oy ula wada
yaabaan kuwa rumaystay oo dhan, maxaa yeelay, markhaatifurkayagii aannu idiin sheegnay
waa la rumaystay. [11] Sababtaas daraaddeed mar walba waannu idiin ducaynaa si Eebbeheen
idiinka dhigo kuwo istaahila yeedhistiisa oo uu si xoog leh ku dhammeeyo doonis kasta oo
wanaag ah iyo shaqada rumaysadka, [12] Si magaca Sayid Ciise dhexdiinna loogu ammaano,
idinkana la idiinku dhex ammaano isaga, sida nimcada Eebbaheenna iyo Sayid Ciise Masiix ay
tahay.

### Ninka Dijaalka Ah

**2** Haddaba arrinta ku saabsan Sayid Ciise Masiix imaatinkiisa iyo kulanka aynu isaga la wada
kulmi doonno, waxaannu idinka codsanaynaa, walaallayaal, [2] Inuusan fikirkiinnu degdeg ugu
qasmin ama ugu wareerin ruux ama hadal lagu hadlay, ama warqad la moodo inaannu annagu
soo dirnay, sidii iyadoy maalintii Rabbigu hadda joogto. [3] Sinaba yaan laydiin khiyaanayn,
waayo, maalintaasu ma iman doonto ilaa iyo inta Eebbe laga fallaagoobayo, oo uu ka soo
baxayo ninka dijaalka ah oo ah wiilka halaagga, [4] kaasoo ka soo hor jeeda oo iska sarraysiiya
wax alla wixii Eebbenimo ah oo dhan iyo waxa la caabudo oo dhan, oo macbudka Eebbe ayuu
dhex fadhiisan doonaa isagoo qudhiisu Eebbe iska dhigaya. [5] Miyaydaan xusuusnaynin inaan
waxyaalahan idiin sheegay markaan wali idinla joogay? [6] Haddana waad ogtihiin waxa
joojinaya in isaga wakhtigiisa la muujiyo. [7] Waayo, fallaaganimadu iyadoo si qarsoon u
shaqaynaysa ayay billaabatay, laakiin ka hadda joojinayaa wuxuu joojinayaa ilaa iyo inta isaga
jidka laga qaadayo. [8] Markaas waxaa la muujin doonaa ka fallaagada ah, kaasoo uu Sayid
Ciise ku dili doono neefta afkiisa iyo iftiinka ammaanta muuqaalkiisa. [9] Kaas imaatinkiisuna waa

shaqo Shaydaan oy la socdaan awood iyo mujisooyin been ah iyo waxyaabo la yaab leh, 10 Iyo
khiyaanada xaqdarrida oo dhan. Waxaana ku lumi doona kuwa halaagga, maxaa yeelay,
waxay diideen inay runta jeclaadaan oo ay sidaas ku badbaadaan. 11 Oo sababtaas
daraaddeed ayuu Eebbe ugu soo dirayaa baadinimo wax duufsata si ay been u rumaystaan,
12 Si kuwa aan runta rumaynin balse xaqdarrida ku farxay dhammaantood loo wada xukumo.

### Waxaa Laydiin Doortay Badbaado

13 Laakiin waxaa waajib nagu ah inaannu mar walba aawadiin Eebbe ugu mahadnaqno,
walaalaha Rabbigu jecelyahayow, waayo, wuxuu Eebbe Bilowgiiba idiin doortay badbaado ka
timaadda Ruuxa qudduuska ah iyo iimaan dhab ah, 14 Taasoo uu idiinku yeedhay Injiilkayaga si
aad u heshaan ammaanta Rabbigeenna Ciise Masiix. 15 Sidaas daraaddeed, walaallayaal,
xoog yeesha, oo aqoontii aannu idin barnay xajista, ha ahaato wixii hadal laydinku baray ama
waxaad warqahayaga ka barateen. 16 Rabbigeenna Ciise Masiix qudhiisa iyo Eebbaha
Aabbeheen ah, ka ina jeclaaday oo nimcadiisa inagu siiyay dhiirri galin weligeed ah iyo rajada
wanaagsan, 17 quluubtiinna ha ku dhiirri geliyo oo ha ku xoogiyo wax qabad kasta iyo hadal
walba oo wanaagsan.

### Noo Soo Duceeya

**3** Ugu dambaysta, walaallayaal, Noo soo duceeya si erayga Rabbigu deg deg ugu faafo oo loo
ammaano sida dhexdiinna loogu ammaano, 2 Oo nalooga badbaadiyo dadka xun xun ee
sharka leh, waayo, iimaanka lama wada aaminsana. 3 Laakiinse Rabbigu waa aamin; wuuna
idin xoojin doonaa, sharkana wuu idinka ilaalin doonaa. 4 Xaggiinnana Rabbiga ayaannu ku
kalsoonnahay inaad samaysaan oo aad samayn doontaan wixii aannu idinku amarnay.
5 Rabbigu quluubtiinna ha ku hanuuniyo jacaylka Eebbe iyo dulqaadka Masiixa.

### Waxaa Waajib Ah In La Shaqaysto

6 Hadda walaallayaal, waxaannu magaca Rabbigeenna Ciise Masiix idinku amraynaa inaad ka
fogaataan walaal kasta oo si aan habboonayn u dhaqmaya oo aan ku camalfalin aqoontii ay
naga heleen. 7 Waayo, idinka qudhiinnuba waad ogtihiin siday waajib idinku tahay inaad nagu
dayataan, waayo, si aan habboonayn umaannan dhaqmin markaannu idin dhex joognay.
8 Ninna kama aanaan cunin cunto aannan wax ka bixinin, laakiin dhib iyo daal ayaannu ku
shaqaysannay habeen iyo maalinba si aannan midkiinna u culaysinin, 9 Mana aha inaannan
xaq u lahayn, laakiinse waa inaannu tusaale idiin noqonno oo aad nagu dayataan. 10 Waayo,
xataa markaannu idinla joognay, waxaannu idinku amarnay, qofkii aan shaqaysanin inuusan
waxba cunin. 11 Laakiin waxaannu maqalnay inay idin dhex joogaan kuwo si aan habboonayn u
dhaqmaya oo aan innaba shaqaysanin, laakiin arrimaha dadka kale fara geliya. 12 Kuwa
noocaas ah waxaannu Sayid Ciise Masiix dartii faraynaa oonnu ku waaninaynaa inay si dagan
u shaqaystaan oo ay nolol maalmeedkooda shaqystaan. 13 Idinkuna, walaallayaal, wanaag
fallidda ha ka niyad jabina. 14 Oo hadduu nin addeeci waayo waxaannu warqaddan ku soo
qornay, ninkaas iska jira oo ha raacina si uu isugu yaxyaxo. 15 Weliba sida cadowga ha ula
dhaqmina, laakiin sida walaalkiin u waaniya.

**Duco**

16 Haddaba Rabbiga nabadda qudhiisu mar walba si kasta nabad ha idiin siiyo. Rabbigu
dhammaantiin ha idinla jiro. 17 Anigoo Bawlos ah ayaa salaantan gacantayda ku qoray, waana
calaamdda warqad kasta oon leeyahay. Waana sidaan wax u qoro. 18 Nimcada Rabbigeenna
Ciise Masiix ha idinla jirto kulligiin.

# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY TIMOTEYOS

## Salaan, Iyo Ka-Digidda Cilmiga Beenta Ah

**1** Ka socota Bawlos oo rasuulkii Ciise Masiix ku ah amarka Eebbaha Badbaadiyaheenna ah iyo
Ciise Masiix oo rajadeenna ah, 2 Ku socota Timoteyos oo xagga iimaanka ku ah wiilkayga runta
ah. Nimco iyo naxariis iyo nabadu ha kaaga yimaaddeen Eebbaha Aabbaha ah iyo
Rabbigeenna Ciise Masiix. 3 Sidaan kuugu waaniyay markaan Makedoniya tegayay ayaan
haddana kuugu waaninayaa inaad Efesos sii joogto ood kuwo ku amartid inayna cilmi kale
dadka barin, 4 Ama ayna dhegaysanin sheekooyin iyo abtirsiin aan dhammaad lahayn oo
keena su'aalo intay horu marin lahaayeen qorshaha Eebbe ee rumaysadka ku jira. 5 Laakiin
ujeeddada dardaaranku waa jacayl ka soo baxa qalbi daahir ah iyo niyad wanaagsan iyo
rumaysad aan labaweji lahayn. 6 Kuwaas oy qaar seegeen, markay ku leexdeen hadal aan
macno lahayn, 7 Oo waxay doonayaan inay noqdaan macallimiinta shareecada in kastoo ayna
garanaynin waxay leeyihiin ama si ay u xaqiijiyaan. 8 Laakiinse waynnu ognahay in sharcigu
wanaagsanyahay haddii loo adeegsado si sharci ah. 9 Sidaynu ognahayba, shareecada looma
soo dajinin qof xaq ah, laakiin waxaa loo soo dajiyay kuwa sharci darrida ah iyo caasiyiinta iyo
kuwa aan Eebbe ka cabsanin iyo dembileyaasha iyo kuwa aan qudduuska ahayn iyo kuwa
nijaasta ah iyo kuwa aabbahood dila, iyo kuwa hooyadood dila, iyo gacan ku dhiiglayaasha,
10 Iyo kuwa sinaysta iyo khaniisiinta iyo kuwa dadka xada iyo beenaalayaasha iyo kuwa beenta
ku dhaarta iyo wixii kale ee ka hor yimaadda cilmiga runta ah, 11 Kaasoo waafaqsan sida Injiilka
ammaanta Eebbaha barakada leh ee laygu aaminay.

## Bawlos Oo Naxariista Eebbe Ka Mahad Celiyay

12 Waxaan ku mahadnaqayaa ka xoogga i siiyay oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix, waayo,
wuxuu igu tiriyay mid aamin ah oo wuxuu ii doortay adeeggiisa, 13 In kastoon mar hore ahaan
jiray mid dadka caaya oo silciya, oo dhiba, laakiin waa la ii naxariistay, waayo, jaahilnimo
ayaan ku sameeyay, anigoon mumin ahayn. 14 Nimcada Rabbigeenna waxay aad iyo aad ugu
badatay iimaanka iyo jacaylka ku jira Ciise Masiix. 15 Odhaahduna waa run, waana mid
istaahisha in la wada aqbalo, in Ciise Masiix dunida u yimid inuu badbaadiyo dembiilayaasha
aan anigu ugu daranahay. 16 Laakiin sababtaas daraaddeed waa la ii naxariistay, si anigoo ah
ka ugu daran uu Ciise Masiix iga muujiyo dulqaadkiisa oo dhan, si aan tusaale ugu noqdo
kuwa hadda ka dib isaga rumayn doona si ay nolol weligeed ah u helaan. 17 Boqorka daa'imka
ah, ee aan dhimanin, ee aan la arki karin, ee ah Eebbaha keligiis ah, maamuus iyo ammaanu
ha u ahaadeen weligeed iyo weligeed. Aamiin.

18 Wiilkaygii Timoteyosow, waxaan kugu ammaanaynayaa amarkan oo ah sidii waxyaalihii hore
laguugu sheegay, inaad iyagana dagaal wanaagsan ku dagaallantid, 19 Adigoo xajisanaya
iimaan iyo qalbi wanaagsan. Waxyaabahaas oy dadka qaarkood iska tuureen, iyagoo
iimaankooda ka dhigay sidii markab burburay. 20 Waxaana ka mid ah Humenayos iyo
Aleksanderos, oo aan Shaydaan u dhiibay si ay u bartaan inayna wax caayin.

## Habka Loo Tukado

**2** Sidaas daraaddeed marka ugu horraysa waxaan kugu waaninayaa in Eebbe aad loo baryo
oo aad ducaysaan oo aad mahadnaq dadka oo dhan ku saabsan, [2] Gaar ahaan boqorrada iyo
kuwa amarka lehba, si aynu nolol dagan oo nabad galyo ah ugu noolaanno, innagoo alla ka
cabsi iyo sharaf leh. [3] Taasu waa mid wanaagsan, waana mid Eebbaha Badbaadiyeheenna
ahu aqbali karo. [4] Kaasoo doonaya inay dadka oo dhan badbaadaan oy runta gartaan.
[5] Waayo, waxaa jira Eebbe keliya iyo dhexdhexaadiye keliya oo u dhexeeya Eebbe iyo dadka,
waana ninka Ciise Masiix ah, [6] Oo naftiisa dadka oo dhan furashadooda u bixiyay oo wakhtiga
ku habboon loo markhaatifuray. [7] Sidaa daraaddeed waxaa layga dhigay inaan noqdo mid wax
wacdiya oo rasuul ah oo macallin iimaan iyo run leh u ah dadka aan Yuhuudda ahayn. Taasu
waa runtay, oo been ma sheegayo. [8] Sidaa daraaddeed waxaan doonayaa inay raggu meel
walba ku duceeyaan iyagoo gacmo qudduus ah kor u qaadaya oo aan cadho iyo muran
lahayn. [9] Sidaas oo kale dumarkuna waa inay xishood iyo feejignaan yeeshaan oy isku
qurxiyaan dhar qof xushmad leh ku habboon oo ayna isku qurxinin timo tidcan iyo dahab ama
luul ama dhar qaali ah. [10] Laakiinse ha isku qurxiyeen shaqo wanaagsan oo ku habboon
dumarka alla ka cabsiga leh. [11] Naagtu si aamusan wax ha u barato iyadoo hoggaansan.
[12] Laakiin naag uma fasaxayo inay nin wax barto ama ay ka xukun sarrayso, laakiinse ha
aamusnaato. [13] Waayo, markii hore Aadan ayaa la abuuray, ka dibna Xaawo. [14] Aadan lama
khayaanayn, laakiin naagta ayaa intii la khayaanay waxay noqotay mid xadgudubtay.
[15] Laakiinse waxay ku badbaadi doontaa inay ubad dhasho, hadday ku sii socdaan rumaysad
iyo jacayl iyo qudduusnimo iyagoo digtoon.

## Hoggaamiyayaasha Kiniisadda

**3** Hadalku waa run, Haddii uu nin doonayo shaqada hoggaaminta kiniisadda, shaqo
wanaagsan ayuu doonayaa. [2] Sidaas daraaddeed hoggaamiyaha kiniisaddu waa inuu ahaado
mid aan ceeb lahayn oo naag keliya qaba oo feejigan oo digtoon oo sharaf leh oo martida soo
dhaweeya oo ku wanaagsan waxbaridda, [3] Oo waa uusan sakhraan noqonin oo uusan gacan
fududaanin, laakiin waa inuu noqdo mid tudhid badan oo uusan noqonin mid dagaal badan oo
waa uusan lacag jeclaanin. [4] Waa inuu ahaado mid gurigiisa si wanaagsan ugu maamula, oy
carruurtiisu ka dambeeyaan oy maamuusaan. [5] Laakiin nin hadduusan garanaynin si uu
gurigiisa u maamulo, siduu kiniisadda Eebbe u maamuli doonaa? [6] Waana inuusan ahaanin
mid dhawaan rumaystay, waaba intaasoo intuu kibro uu Iblayska xukunkiisa ku dhacaaye.
[7] Weliba waa inuu markhaati wanaagsan ku leeyahay kuwa dibadda ah, waaba intaasoo uu ku
dhacaa cay iyo dabinka Iblayska.[253*] [8] Sidoo kale kalkaaliyayaasha kiniisaddu waa inay
ahaadaan dad la maamuuso oo ayna noqonin kuwo kala hadla, oo waa inayna khamri badan
cabbin, oo ayna faa'iidada ceebta ah jeclaanin. [9] Waana inay siraha iimaanka qalbi daahir ah
ku xajistaan. [10] Oo waa in kuwaas marka hore la tijaabiyo, ka dibna waa inay iyagoo
kalkaaliyayaasha kiniisadda ha adeegaan hadday eed la'yihiin. [11] Sidoo kale dumarkuna waa
inay digtoonaadaan oo ayna ahaanin kuwo wax xanta. Waa inay feejignaadaan oo ay wax
walba aamin ku ahaadaan. [12] Kalkaaliyayaasha kiniisadda mid walba naag keliya ha guursado,
hana noqdeen kuwo si wanaagsan u maamula carruurtooda iyo guryahooda. [13] Waayo, kuwa
sidii iyagoo kalkaaliyayaasha kiniisadda ah si wanaagsan u adeega, waxay naftdooda u helaan
darajo wanaagsan iyo kalsooni badan oo ay iimaanka Ciise Masiix ku kalsoonyihiin.

253 Dadka dibaddu waa kuwa aan wali Masiixa aqbalin.

[14] Waxaan rajaynayaa inaan dhawaan kuu imaaddo, laakiin waxaan waxyaabahan kuugu soo
qoray, [15] In haddii aan in badan raago, aad u ogaato sida waajibka ah ee looga adeego guriga
Eebbe dhexdiisa, oo ah kiniisadda Eebbaha nool iyo tiirka iyo aasaaska runta ah. [16] Oo muran
la'aan siraha alla ka cabsigu wuu waynyahay. Isaga jidh ayaa lagu muujiyay oo ruux ayaa
caddeeyay oo malaa'igaha ayaa arkay, ummadahana waa laga dhex wacdiyay, dunidana waa
laga rumeeyay, ammaanna kor baa loogu qaaday.

## Macallimiin Been Ah

**4** Laakiin Ruuxu si cad ayuu u sheegayaa in wakhtiga ugu dambaysta ay qaar ka fogaan doono
iimaanka, iyagoo dhegaysan doona ruuxyada khiyaanada iyo wax baridda shaydaanada, [2] Wax
bariddaas oy fidinayaan labawejiilayaal beenaalayaal ah oo quluubtooda lagu laxaamaday bir
kulul. [3] Waxay diidaan in la guursado, oo waxay amar ku bixiyaan in laga fogaado cuntooyinka
Eebbe u abuuray inay kuwa runta yaqaanna ee rumaysan mahadnaq ku aqbalaan. [4] Waayo,
wax kasta oo Eebbe abuuray wuu wanaagsanyahay, waana inaan waxba la diidin haddii
mahadnaq lagu aqbalo, [5] Waayo, waxaa quddus lagaga dhigaa erayga Eebbe iyo ducada.

## Adeegaha Wanaagsan Ee Ciise Masiix

[6] Haddaad walaalaha waxyaabahan xusuusiso waxaad ahaan doontaa adeegaha wanaagsan
ee Ciise Masiix, adigoo ku koraya hadallada iimaanka iyo aqoonta wanaagsan ee aad ku
socoto. [7] Laakiin ka fogow sheekooyinka habraha ee nijaasta ah, oo naftaada bar alla ka
cabsiga, [8] Waayo, jidhka oo la dhiso faa'iido yar bay leedahay, laakiinse alla ka cabsigu si
walba waxtar buu u leeyahay isagoo ballan u leh nolosha haatan joogta iyo tan imanaysaba.
[9] Hadalku wuu u faa'iido badanyahay, waana mid istaahila in la wada aqbalo. [10] Sababtan
daraaddeed ayaannu u hawshoonnaa oo u dadaalnaa, maxaa yeelay, waxaannu ku rajo
waynnahay Eebbaha nool oo ah Badbaadiyaha dadka oo dhan, gaar ahaan muminiinta.
[11] Waxyaabahan dadka ku amar oo bar. [12] Ninna yuusan quudhsan dhallin yaranimadaada,
laakiinse kuwa muminiinta tusaale ugu noqo xagga hadalka iyo xagga dabiicadda iyo xagga
jacaylka iyo xagga rumaysadka iyo xagga daahirsanaantaba. [13] Ilaa iyo intaan ka imanayo, ku
dadaal akhridda Kitaabka iyo waaninta iyo wax bariddaba. [14] Ha dayicin hibadaada, taasoo
lagugu siiyay farriintii wax sii sheegidda markay odayaashu gacmahooda ku saareen.
[15] Waxyaabahan ku dadaal oo gabi ahaanba u go' si horumarkaaga ay dadka oo dhan u
arkaan. [16] Naftaada iyo aqoontaada u feejignow. Oo waxyaabahan ku sii soco, waayo,
haddaad sidaa yeesho, naftaddaada iyo kuwa ku dhegaystaba waad badbaadin doontaa.

## Mas'uuliyadda Kiniisadda

**5** Nin oday ah ha canaananin, laakiin u waani sida aabbe oo kale; dhallin yaradana u waani
sida walaalo oo kale, [2] dumarka da'da wayna sida hooyooyin oo kale u waani, dumarka da'da
yarna sida walaalo oo kale, adigoo daahir ah. [3] Maamuus carmallada Kiniisadda ee carmallada
runta ah ee ay nimankoodii ka dhinteen, [4] Laakiin hadday naag carmal ahu carruur leedahay
ama carruur ayay u tahay, iyagu marka hore ha barteen inay dadkooda alla ka cabsi tusaan,
waalidkoodna u abaal celiyaan, waayo taasu way wanaagsantahay, waana mid Eebbe aqbali
karo. [5] Haddaba, tii carmali run ah oo kaligeed laga tagay, waxay rajadeeda dul saartaa Eebbe
oo habeen iyo maalinna ducada iyo tukashada ayay sii waddaa. [6] Laakiin tii inay iska

raaxaysato u noolaata waa meyd inkastoy nooshahay. 7 Arrimahan kula dardaaran, si ay u eed la'aadaan. 8 Laakiin qof hadduusan dadkiisa dhaqaalayn, gaar ahaan kuwa qoyskiisa ah, kaasu iimaankii wuu dafiray, wuuna ka sii liitaa mid aan rumaysad lahayn. 9 Ha la diiwaan galiyo carmali haddii ay lixdan jir tahay oo ay nin keliya naag u ahaan jirtay, 10 Oo looga marag furay shaqo wanaag, hadday carruur korisay oo ay shisheeyaha marti soori jirtay oo ay qudduusiinta cagaha u maydhay, oo ay kuwa dhibaataysan u gargaartay, oo ay shaqo kasta oo wanaagsan aad ugu dadaashay.

11 Laakiinse carmallada dhallintayar diid, waayo, markay qooqaan ayay ka jeedsadaan Masiixa,
oo waxay doonaan inay guursadaan. 12 Oo xukun ayaa ku dhaca, waayo, Iimaankoodii hore
way ka jeedsadaan. 13 Waxaa kale oy weliba bartaan inay caajisiin noqdaan, iyagoo iska
warwareega oo guriba guri uga baxa, caajisiin oo keliyana ma ahee, weliba way warsheeko
badanyihiin, oo arrimaha dadka kale ayay fara geliyaan, iyagoo ku hadla waxyaabo aan waajib
ku ahayn. 14 Haddaba waxaan doonayaa inay carmallada dhallinta da'yarta ahu guursadaan oo
ay carruur dhalaan oo ay gurigooda maamulaan, oo ayna cadowga fursad u siinin inuu
sumcaddooda wax u dhimo. 15 Waayo, mar horeba qaar baa xagga Shaydaanka u leexday.
16 Haddii uu qof mumin ah rag iyo dumar kuu doonaba ha ahaadee leeyahay camali ha u
gargaaro iyaga, oo kiniisadda yaan culays la saarin, si ay u gargaarto kuwa carmallada runta
ah. 17 Odayaashow, si wanaagsan wax u hoggaamiya ha lagu tiriyo kuwo istaahila in labanlaab
loo xurmeeyo, gaar ahaan kuwa ku hawshooda wacdiga iyo wax baridda. 18 Waayo, Kitaabku
wuxuu leeyahay Waa inaadan dibiga af xidhin markuu sarreenka burburinayo sidoo kale wuxuu
leeyahay Shaqaalahu wuu istaahilaa abaal gudkiisa.[254*] 19 Nin oday ah eed ha ku qaadin, inay
laba ama saddex qof ku markhaatifuraan mooyee. 20 Kuwa dembaaba inta kale oo dhan
hortooda ku canaano si ay kuwa kale ay ugu cibra qaataan. 21 Waxaan Eebbe iyo Ciise Masiix
iyo malaa'igaha la doortay hortooda kugu waaninayaa inaad waxyaabahan ugu dhaqanto si
aan eex lahayn, oo aadan wax aad dadka ugu kala eexato samaynin. 22 Ninna gacmaha
degdeg ha u saarin, dad kale dembiyadoodana ha ka qayb gelin. Naftaada daahirsanaan ku
ilaali. 23 Hadda ka dib biyo oo keliya ha cabbin, laakiinse wax yar oo khamri ah u cab
calooshaada iyo cudurradaada mararka badan kugu soo noq noqda daraaddood.[255*] 24 Dadka
qaarkood xadgudubyadoodu way iska cadyihiin intaan xukunba la gaadhin, qaarna
xadgudubyadoodu mar dambe ayay soo baxaan. 25 Sidoo kale gaarbaa camallo wanaagsan oo
iska cad sameeya, kuwa aan noocaas ahaynna lama qarin karo.

**6** In alla intii addoommo ah oo ka hoosaysa harqoodka addoonnimada, sayiddadooda ha ku
tiriyeen kuwo xurmo oo dhan istaahila, si aan magaca Eebbe iyo wax baridda loo caayin.[256*]
2 Kuwii sayiddo muminiin ah leh yayna quudhsanin, maxaa yeelay, waa walaalo, laakiin ha u
adeegeen, maxaa yeelay, kuwa shaqadooda wanaagsan ka faa'iidaa waa muminiin la jecel
yahay. Dadka waxyaabahan bar oo ku waani. 3 Haddii uu nin dadka mad-hab kale baro oo
uusan u waafaqin hadalka runta ah ee Rabbigeenna Ciise Masiix iyo wax baridda alla ka
cabsiga, 4 kaasu wuu kibirsanyahay oo waxba ma garanayo. Wuxuuna u jeellanyahay su'aalo

254 Sharciga Kunoqoshadiisa 25:4 iyo Matayos 10:10 iyo Luukos 10:7.

255 Alkoolku wuxuu ahaan jiray wax laysku daweeyo oo bakteeriyada layskaga daweeyo intaan dawada caabuqa la dirirta aan la soo saarin. Wadaddadii farriinta Injiilka meelaha fog fog gaadhsiiyay waxay qaadan jireen khamrida weynta (canabka ka samaysan) ah si ay iskugu daweeyaan hadday xanuunsadaan.

256 Injiilka.

iyo inuu erayada ka doodo, taasoo dhalisa hinaase iyo dagaal iyo cay iyo tuhun xun, [5] Iyo muran dadka maskaxda ka kharriba oo runta ka fogeeya, iyagoo u malaynaya inuu alla ka cabsigu yahay wax faa'iido laga helo. [6] Laakiin alla ka cabsigu faa'iido wayn ayuu leeyahay markii waxa la haysto raalli lagu yahay,[257*] [7] Waayo, dunida waxba lamaynaan iman, waxbana kalama tagayno. [8] Marka haddaynu haysanno dhar iyo dhuuni, way inagu fillaan doonaan.
[9] Laakiin kuwa doonaya inay taajir noqdaan, waxay ku dhacaan jirrabaad iyo dabin iyo damacyo badan oo nacasnimo ah kuwaasoo dadka ku hafiya halaag iyo burbur. [10] Waayo, jacaylka lacagtu waa xididka shar oo dhan, oo qaar baa intay higsanayeen iimaankiiba ka ambaday, oo waxay naftooda ku dureen xanuun badan.

## Si Wanaagsan Iimaanka Ugu Dadaal

[11] Laakiinse adigu, ninkii Eebbow, waxyaabahan ka carar, oo raac xaqnimadda iyo alla ka cabsiga iyo iimaanka iyo jacaylka iyo dulqaadka iyo qabownaanta. [12] Dagaalka wanaagsan ee iimaanka dagaallan oo qabso nolosha weligeed ah ee laguugu yeedhay ee aad markhaatiyaal badan si wanaagsan ugu hor qiratay. [13] Eebbe hortiisa ka wax kasta nooleeya iyo Ciise Masiix hortiisa ka Bontiyos Bilaatos hortiisa qirashada wanaagsan ku qirtay, waxaan kugu amrayaa
[14] Inaad amarkan ku xajiso eed la'aan iyo ceeb la'aan ilaa iyo inta uu Rabbigeenna Ciise Masiix ka soo muuqanayo, [15] Muuqashadaas oo uu wakhtiga ku habboon soo muuqan doono, ka ammaanta leh ee keligii xoogga leh oo ah Boqorka boqorrada iyo Sayidka sayiddada, [16] ka keligii aan dhimanaynin ee ku dhex jira nuurka aan loo dhawaan karin oo aan ninna arag, lana arki karin ammaanu ha u ahaato waligeed. Aamiin. [17] Kuwa dunidan hadda la joogo hodanka ku ah waani inayna iskibrinin oo ayna maalka aan la hubin isku hallaynin, laakiinse ay isku halleeyaan Eebbaha wax kasta si deeqsinimo leh inoo siiya si aynu ugu raaxaysanno. [18] Oo waani inay sama falaan oo ay camalka wanaagsan hodan ku ahaadaan oo ay deeqsi ahaadaan oo ay dadka kale wax siiyaan, [19] iyagoo wakhtiga imanaya u kaydsanaya aasaas wanaagsan, si ay nolosha runta ah u qabsadaan. [20] Timoteyosow, wixii laguu dhiibay ilaali oo ka leexo hadalka aan macnaha lahayn ee nijaasta ah iyo muranka aqoon ku sheega beenta ah, [21] Oo qaar qirashadeeda aawadeed ay iimaanka ku gafeen. Nimco ha idinla jirto.

257 Geeridiisa ayuu ka hadlayaa.

# WARQADDII LABAAD EE RASUUL BAWLOS U QORAY TIMOTEYOS

### Salaan Iyo Mahadnaq

**1** Ka socota Bawlos oo rasuulkii Ciise Masiix ku ah doonista Eebbe, sida uu leeyahay ballanka
nolosha Ciise Masiix ku jirta, 2 Ku socota Timoteyos oo ah wiilkayga aan jeclahay. Nimco iyo
naxariis iyo nabadu ha kaaga yimaaddeen Eebbaha Aabbaha ah iyo Rabbigeenna Ciise
Masiix.

### Ilaali Ammaanada Laguu Dhiibay

3 Waxaan ku mahadnaqayaa Eebbaha aan damiir daahir ah ugu adeego siday awowayaashay
ugu adeegi jireen, anigoo habeen iyo maalinba si aan kala go' lahayn ducadayda kuugu
xusuusta. 4 Markaan ilmadaadii xusuusto waxaan aad u doonaa inaan ku arko, si aan aad ugu
farxo. 5 Waxaan xusuustay iimaankaaga daacadda ah ee kugu jira, oo horayba ugu jiray
ayaydaa Lowis iyo hooyadaa Yunikee, adigana waxaan aaminsanahay inuu kugu jiro. 6 Sidaa
daraaddeed waxaan ku xusuusinayaa inaad sarakiciso hadiyadda Eebbe ee kugu jirta eed
heshay markaan gacmaha ku saaray. 7 Waayo, Eebbe inama siinin ruuxa cabsida, laakiinse
wuxuu ina siiyay ruuxa xoogga iyo jacaylka iyo fahmada. 8 Sidaas daraaddeed ha ka xishoonin
inaad u markhaatifurto Rabbigeenna ama aniga oo isaga dartii maxbuus u ah, laakiinse
dhibaatada Injiilka kaga qayb qaado xoogga Eebbe. 9 Kaasoo ah ka ina badbaadiyay oo inoogu
yeedhay dacwadda qudduus ah, mana aha xagga camalkeenna, laakiinse waa xagga
qorshihiisa iyo nimcadiisa, taasoo uu dunida ka hor inagu siiyay Ciise Masiix, 10 Laakiinse
hadda lagu muujiyay soo bixidda Badbaadiyeheenna Ciise Masiix, kaasoo dhimashada
baabbi'iyay, oo nolosha iyo waaritaan iftiinka ugu soo saaray xagga Injiilka, 11 kaasoo la ii
doortay inaan ka noqdo wacdiye iyo rasuul iyo macallinka ajinabiga. 12 Sababtaas aawadeed
ayaan waxyaabahan ugu xanuunsanayaa; laakiinse kama yaxyaxsani, waayo, waan ogahay ka
aan rumaystay, oo waxaan aaminsanahay inuu awoodo inuu dhawro wixii aan ku aaminay ilaa
iyo maalintaas. 13 Ku soco tusaalaha hadalka runta ah ee aad iga maqashay oo ku xaji
iimaanka iyo jacaylka Ciise Masiix ku jira. 14 Ammaanadii wanaagsanayd ee laguu dhiibayna ku
ilaali Ruuxa Qudduuska ah ee inagu dhex jira. 15 Waad ogtahay inay kuwii Aasiya joogay oo
dhan iga wada tageen, waxaana ka mid ah Fugelos iyo Hermogenees. 16 Rabbigu ha u
naxariisto qoyskii Oneesiforos; waayo, marar badan ayuu i nasiyay, kamana uusan xishoonin
silsiladdayda. 17 Laakiinse markuu Rooma joogay wuxuu ku dadaalay inuu i daydayo, wuuna i
helay. 18 Rabbigu ha ugu naxariisto maalintaas inuu Rabbiga naxariis ka helo. Oo adiguna si
fiican baad u ogtahay siduu waxyaabo badan iigu adeegay Efesos.

### Askariga Wanaagsan ee Masiixa

**2** Haddaba, wiilkaygiiyow, ku xoogayso nimcada Ciise Masiix ku jirta. 2 Oo waxyaabihii aad
markhaatiyaal badan dhexdood igaga maqashay ku ammaanee niman aamin ah oo awooda
inay kuwa kale baraan. 3 Dhibaatada ka qayb qaado sida askari wanaagsan oo Ciise Masiix.
4 Ninka askari ahu, si uu uga farxiyo kii isaga askari ahaanta u qortay, iskuma mashquuliyo
arrimaha noloshan, 5 Oo weliba orodyahanku billad ma helo hadduusan sida sharciga ah u
tartamin. 6 Ninka beerta leh ee ku hawshoodaa waa inuu ahaado ka ugu horreeya ee midhaha
wax ka hela. 7 Waxaan leeyahay u fiirso, waayo, Rabbigu wuxuu ku siin doonaa wax walba

fahankooda. 8 Bal xusuuso Ciise Masiix, kii kuwii dhintay ka soo sarakacay, oo Daa'uud ka soo
farcamay, sida uu leeyahay Injiilka aan idinku wacdiyo, 9 Ee aan dhibaatada u maray ee aan u
xidhanahay sida dembiilaha, laakiinse erayga Eebbe ma xidhna. 10 Haddaba wax walba
waxaan ugu adkaystaa kuwa la doortay aawadood si ay iyaguna u helaan badbaadada
ammaanta weligeeda leh ee ku jirta Ciise Masiix. 11 Hadalkanu waa dhab, Haddaynu isaga la
dhimannay, haddana waynu la noolaan doonnaa, 12 Haddii aynu adkaysanana, haddana wax
baynu la xukumi doonnaa, haddii aynu isaga inkirnana, isna wuu ina diidi doonaa, 13 haddii
aynu kuwo aan daacad ahayn noqonana, isagu weli waa aamin, waayo, isagu isma burin karo.

### Ka Digidda Muranka

14 Waxyaabahan iyaga xusuusi oo Rabbiga hortiisa ku amar inayna hadal ku murmin, waayo,
taasu faa'iido ma laha, laakiinse kuwa maqla ayay sii kharribtaa. 15 Ku dadaal inaad
shakhsiyaddaada ka dhigto mid Eebbe raalli ka yahay, adigoo ah adeege aan dadka ka
xishoonin, oo hadalka runta ah si habboon u wada. 16 Laakiinse ka fogow hadalka aan
macnaha lahayn, ee nijaasta ah, waayo, taasu waxay dadka u siyaadinaysaa caasinimo, 17 Oo
hadalkoodu sida caabuqa u faafo ayuu u sii faafi doonaa, iyaga waxaa ka mid ah Humenayos
iyo Fileetos, 18 Oo ah kuwo xagga runta ka leexday iyagoo leh, Sarakicidda waa hore ayaa la
soo dhaafay, oo qaar bay iimaanka ka buriyaan. 19 Hase yeeshee aasaaskii adkaa ee Eebbe
dhigay wuu taaganyahay, isagoo leh astaanta Rabbigu wuu yaqaannaa kuwiisa Haddaba Mid
kasta oo magaca Rabbiga xanbaarsan xaqdarrida ha ka tago. 20 Haddaba guri wayn kuma
jiraan oo kaliya weelal dahab iyo lacag ah, laakiinse waxaa kale oo ku jira kuwo qoryo iyo
dhoobo ah, oo qaarkood wax sharaf leh ayaa loo adeegsadaa, qaarna wax aan sharaf lahayn.
21 Sidaas daraaddeed haddii uu qof iska daahirsho waxyaabaha aan sharafta lahayn, kaasu
wuxuu ahaan doonaa weel sharaf leh, oo qudduus laga dhigay, oo sayidka wax u tara, oo
camal kasta oo wanaagsan loogu talagalay.

22 Haddaba ka fogow damacyada xunxun ee dhallinyaronimada, oo ku dadaal xaqnimo iyo
iimaan iyo jacayl iyo nabad adiga iyo kuwa Rabbiga uga yeedha qalbi daahir ah. 23 Ka fogow
su'aalaha nacasnimada iyo jaahilnimada ah, adigoo og inay khilaaf dhaliyaan. 24 Adeegaha
Rabbigu waa inuusan noqonin mid dood badan, laakiin waa inuu ahaado mid dadka u wada
dabacsan oo wax baridda ku wanaagsan oo dulqaad badan, 25 Oo si dagan u toosiya kuwa
isaga ka soo horjeeda, waxaaba laga yaabaa inay Eebbe u toobadkeenaan oy runta gartaan,
26 Oo ay ka baxsadaan dabinka Iblayska ee iyaga lagu qabtay, si ay doonistiisa u yeelaan.

### Maalmaha Ugu Dambeeya

**3** Haddaba tan ogow, maalmaha ugu dambeeya waxaa iman doona wakhtiyo dhib badan.
2 Maxaa yeelay, dadku waxay noqon doonaan kuwo naftooda jecel oo lacag jecel oo faan
badan oo kibir badan oo af lagaaddo badan oo waalidkood caasiya oo aan mahadnaqin oo aan
qudduus ahayn, 3 Oo aan naxiirs lahayn oo aan wax cafiyin oo wax ku been abuurta oo aan
iscelin karin oo daran oo aan wanaagga jeclayn, 4 Oo khaa'iminiin ah oo degdeg badan oo isla
wayn oo raaxada jecel intay Eebbe jeclaan lahaayeen. 5 Waxay leeyihiin muuqaal alla ka cabsi,
laakiinse xooggeeday diidaan, kuwaas ka leexo. 6 Waayo, kuwaas waxaa ka mid ah kuwa
guryaha gala ee lumiya naagaha caqliga la' ee ay dembiyadu ku raran yihiin oo ay damacyada
kala duduwanu la tageen, 7 Weligood wax bay bartaan, laakiinse marnaba ma awoodaan inay

runta gartaan. 8 Siday Yannees iyo Yambarees isu hor taageen Muuse, sidaas oo kale ayay
kuwanna runta isu hor taagaan, waana niman fikirkoodu kharribmay oo xagga iimaankana laga
nacay. 9 Laakiinse horu mar ma samayn doonaan, waayo, nacasnimadoodu dhammaanba way
u wada caddaan doontaa sida ay labadaas nin tooduba u caddaatay.

### Kitaabka Qudduuska Ah Oo Dhan Waa Waxyigii Eebbe

10 Laakiinse adigu waxaad raacday wax bariddayda iyo hab dhaqankayga iyo ujeeddadayda iyo
rumaysadkayga iyo dulqaadkayga iyo jacaylkayga iyo samirkayga, 11 Iyo ciqaabtayda iyo
xanuunkii igu dhacay markaan Antiyokh iyo Ikoniyon iyo Lustara joogay! ciqaabtii badnayd ee
aan u adkaystay! Oo dhammaantood Rabbigaa iga samata bixiyay. 12 Runtii, dhammaan inta
doonaysa inay si alla ka cabsi leh Ciise Masiix ugu noolaadaan waa la dhibi doonaa.
13 Laakiinse dadka sharka leh iyo khaa'imiintu way ka sii dari doonaan, iyagoo wax khiyaana
lana khiyaani doono. 14 Laakiinse adigu ku sii soco waxyaabihii aad baratay oo aad xaqiiqsatay,
adigoo garanaya kuwii aad ka baratay, 15 Ilaa iyo yaraantaadii waxaad taqaannay kitaabka
qudduuska ah, kaasoo awooda inuu kaa dhigo mid fahmo u leh xigmadda badbaadada
iimaanka ee ku jirta Ciise Masiix. 16 Kitaab oo dhan waa waxyigii Eebbe oo wuxuu faa'iido u
leeyahay wax baridda iyo canaanta iyo sixidda iyo edbinta xaqa ah, 17 Si qofka Eebbe u
ahaado mid dhammays tiran oo diyaar u ah camal kasta oo wanaagsan.

**4** Waxaan kugu amrayaa Eebbe iyo Ciise Masiix oo xukumi doona kuwa nool iyo kuwa
dhintayba hortiisa iyo bixiddiisa iyo boqortooyadiisa, 2 Inaad erayga dadka ku wacdido.[258*]
Wakhti habboon iyo wakhti aan habboonaynba, oo toosi oo canaano oo waani, adigoo dulqaad
wax ku baraya. 3 Waayo, waxaa iman doona wakhti ayna dadku u adkaysan doonin cilmiga
runta ah, laakiinse ay raacayaan damacooda waxay uruursan doonaan macallimiin
dhagahooda u raaxeeya, 4 Oo inay runta dhagaystaan ayay ka leexin doonaan oo waxay u
jeedin doonaan sheeko baralay. 5 Laakiinse adigu mar kasta feejignow oo dhibaatada u
adkayso oo shaqada wacdiga qabo oo adeeggaaga dhammee. 6 Waayo, hadda ayaa sida alla
bariga la ii bixinayaa oo wakhtigii aan tegi lahaa wuu yimid.[259*] 7 Dagaal wanaagsan ayaan
dagaallamay oo tartankii waan dhammeeyay, iimaankiina waan ilaaliyay. 8 Haddaba waxaa la ii
diyaariyay taajkii xaqnimada, kaasoo uu Rabbiga ah xaakinka xaqa ahu i siin doono
maalintaas, kaligayna ma aha, laakiin kuwa soo bixiddiisa jecel oo dhan ayuu siin doonaa.

### Dardaarankii Ugu Dembeeyay

9 Ku dadaal inaad degdeg iigu timaaddo, 10 Waayo, Deemaas intuu dunidan hadda la joogo
jeclaaday ayuu iga tegey oo wuxuu aaday Tesaloniika, Kereeskeesna wuxuu aaday Galatiya,
Tiitosna wuxuu aaday Dalmatiya. 11 Hadda Luukos oo kaliya ayaa ila jooga. Markaas soo
kaxee oo ha ku soo raaco, waayo, faa'iido ayuu ii leeyahay xagga adeegga. 12 Laakiinse
Tukhikos waxaan u diray Efesos. 13 Markaad soo kacdo ii soo qaad koodhkayga aan kaga
tegay Karboska Taroo'as jooga, buuggaagtiina ii soo qaad, gaar ahaan kuwa haragga ah.
14 Aleksanderoskii nuxaaslaha ahaa aad buu ii dhibay, Rabbigu wuxuu ugu abaal gudi doonaa
siday camalladiisu yihiin. 15 Adiga laftaadu iska jir isaga, waayo, aad buu farriintada uga hor

258 Injiilka.
259 Geeridiisa ayuu ka hadlayaa.

yimid. [16] Is-difaacaygii hore ninna isma kay hor taagin, laakiinse dhammaan waa layga wada
tegay. Allow yaan taas loo qabsanin. [17] Laakiinse Rabbiga ayaa iskay garab taagay, oo xoog i
siiyay, si aan farriinta dadka oo dhan u wada gaadhsiiyo oo ay dadka aan Yuhuudda ahayn oo
dhan u wada maqlaan oo waxaa layga samata bixiyay af libaax. [18] Oo Rabbiguna wuu iga
samata bixin doonaa wax kasta oo shar ah, oo wuxuu igu nabad gelin doonaa boqortooyadiisa
jannada ah. Isaga ammaanu ha u ahaato weligeed iyo weligeed. Aamiin. [19] Igu salaan Bariska
iyo Akula iyo qoyskii Oneesiforos. [20] Erastos wuxuu ku hadhay Korintos, laakiinse Torofimos oo
buka ayaan Mileetos uga soo kacay. [21] Ku dadaal inaad wakhtiga qabowga ka hor ii timaaddo.
Waxaa ku soo salaamaya Yubulos iyo Budees iyo Liinos iyo Kalawdiya iyo walaalaha oo dhan.
[22] Rabbigu ruuxaaga ha la jiro. Nimco ha kula jirto. Aamiin.

# WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY TIITOS

### Salaan

**1** Ka Socota Bawlos oo adeegihii Eebbe rasuulkii Ciise Masiixna ah, sida uu yahay iimaanka
kuwa Eebbe doortay iyo aqoonta runta ah ee alla ka cabsiga, [2] Iyagoo rajaynaya nolosha
weligeed ah, taasoo uu ballanqaaday Eebbaha aan beenta sheegin intaan dunida la uumin,
[3] Laakiinse wakhtigii ku habboonaa ku muujiyay wacdigii laygu ammaaneeyay sida Eebbaha
Badbaadiyeheenna ahu u amray, [4] Ku socota Tiitos oo ah wiilkayga runta ah ee xagga
iimaanka inaga dhexeeya. Nimco iyo nabadu ha kaaga yimaaddeen Eebbaha Aabbaha ah iyo
Badbaadiyeheenna Ciise Masiix.

### Waayeellada La Doorto

[5] Sababtaas daraaddeed ayaan Kereetee kaaga dhex tegay si aad u dhammayso waxyaabaha
hadhay oo aad odayaal magaalo walba ugu doorato sidaan kugu amray, [6] hadduu mid walba
yahay nin aan ceeb lahayn oo naag kaliya qaba oo leh carruur muminiin ah oo aan rabshad iyo
caasinimo lagu eedaynin. [7] Waayo, hoggaamiyaha kiniisaddu waa inuu ceeb la'aado sida
wakiilka Eebbe, oo uusan madax adkaan oo uusan camal fududaan oo uusan sakhraan
noqonin oo uusan gacan fududaan oo uusan faa'iidada ceebta ah jeclaanin, [8] laakiinse waa
inuu ahaado mid martida soo dhaweeya oo wanaag jecel oo feejigan oo xaq ah oo qudduus ah
oo iscelin kara, [9] Isagoo xajinaya hadalka aaminka ah sidii loo baray, si uu u awoodo inuu
cilmiga runta ah ku waaniyo oo ku canaanto kuwa muranka miidhan. [10] Waayo, waxaa jira
caasiyiin badan iyo kuwo hadal xun ku hadla iyo khaa'imiin, gaar ahaan kuwa gudan.
[11] Kuwaas afkooda waa in la xidho, maxaa yeelay, waa kuwa reero dhan gembiya iyagoo
faa'iidada ceebta ah aawadeed u baraya waxyaabo aan waajib ahayn inay baraan. [12] Mid iyaga
ka mid ahaa oo nebigooda ahaa ayaa wuxuu yidhi, Reer Kereetee weligood waa beenaalayaal
iyo dugaag xun iyo kuwo cir wayn oo caajisiin ah. [13] Markhaatigaasu waa run. Sababtaas
aawadeed aad u canaano iyaga si ay iimaanka si run ah ugu socdaan [14] Oo ayna indhaha u
taagin sheekooyinka Yuhuudda iyo amarrada dadka runta ka leexanaya. [15] Kuwa daahirka ah
wax waluba waa u daahir, laakiin kuwa nijaasaysan oo aan rumaysadka lahayn waxba daahir
uma aha, laakiinse garaadkooda iyo damiirkooduba way nijaasoobeen. [16] Waxay afka ka
qirtaan inay Eebbe yaqaanaan, laakiin camalladooday isaga kaga hor yimaaddaan, iyagoo
karaahiyo iyo caasiyiin ah, oo xagga camalka wanaagsan oo dhan laga nacay.

### Dabeecadda Masiixiyiinta

**2** Laakiinse adigu ku hadal wixii waafaqsan wax baridda saxda ah. [2] Odayaashu waa inay
feejignaadaan oo dhug yeeshaan oo digtoonaadaan oo ay si run ah ugu dhaqmaan iimaanka
iyo jacaylka iyo dulqaadka. [3] Sidoo kale dumarka da'da waynu waa inay asluub qudduus ah
lahaadaan, oo ayna noqonin kuwo wax xanta, oo ayna khamri badan addoommo u noqonin,
laakiinse ay noqdaan kuwo wax wanaagsan dadka bara. [4] Oo waa inay naagaha da'yarta ah
baraan inay jeclaadaan nimankooda iyo carruurtooda, [5] Oo ay digtoonaadaan oo ay daahir
noqdaan oo ay gurigooda ka shaqeeyaan oo ay wanaagsanaadaan, iyagoo nimankooda ka
dambeeya, si aan erayga Eebbe loo caayin. [6] Ragga dhallinyarta ahna sidoo kale ku waani
inay digtoonaadaan. [7] Si walba u muuji inaad noqoto tusaale xagga camalka wanaagsan, oo

cilmigaaga ku muuji sharaf iyo hufnaan, [8] Iyo hadal run ah oo aan ceeb lahayn, si ka kaa hor yimaadda u ceeboobo oo uusan u helin wax xun oo uu inaga sheego. [9] Addoommaduna waa inay sayiddadooda ka dambeeyaan oo ay si walba uga farxiyaan oo ayna la murmin, [10] Oo ayna wax ka xadin, laakiinse waa inay daacadnimo walba oo dhan muujiyaan, si ay si walba cilmiga Eebbaha Badbaadiyeheenna ah ammaan ugu soo jiidaan. [11] Waayo, nimcada Eebbe ee badbaadada keenta dhammaanba way u muuqataa, [12] Taasoo ina baraysa inaynu caasinimada iyo damacyada dunida diidno, oo aynu wakhtigan hadda la joogo feejignaan iyo xaqnimo ku noolaanno, [13] Innagoo sugayna rajada barakaysan iyo soo muuqashada ammaanta Eebbaheenna wayn iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. [14] Isagu naftiisa ayuu u bixiyay aawadeen, si uu dembi oo dhan inooga furto oo uu inaga dhigo dadkiisa daahirka oo uu isagu leeyahay oo ku dadaalaya camalka wanaagsan. [15] Waxyaabahan dadka kula hadal oo ku waani oo ku canaano, adigoo amar oo dhan leh oo uusan ninna ku quudhsanaynin.

## Diyaar U Ahaada Camal Kasta Oo Wanaagsan

**3** Xusuusi iyaga inay madaxda iyo kuwa amarka leh ka dambeeyaan oo ay dhego nuglaadaan oo ay camal kasta oo wanaagsan diyaar u ahaadaan, [2] Oo ayna ninna caayin oo ayna noqonin kuwo khilaaf badan, laakiinse dadka oo dhan dabacsanaan iyo qaboobaan u muujiya. [3] Waayo, innaguba mar baynu ahaan jirnay nacasyo iyo caasiyiin iyo kuwo baadi ah oo addoommo u ah damacyada xaaraanta ah iyo ku raaxaysiga balwaddo kala duduwan oo waxaynu ku dhaqmi jirnay xumaan iyo xaasidnimo, oo waxaynu ahaan jirnay kuwo la necebyahay oo iyaguna midba midka kale necebyahay. [4] Laakiinse markii naxariista Eebbaha Badbaadiyeheenna ah iyo jacaylkii uu dadka u qabay la muujiyay,

[5] Ayuu ina badbaadiyay. mana uusan inagu badbaadinin camal suuban oo aynu samaynay, laakiinse naxariistiisa aawadeed wuxuu inagu badbaadiyay ku maydhidda dhalashada labaad iyo ku cusboonaysiinta Ruuxa Qudduuska ah, [6] Oo uu si hodan ah inoogu shubay oo uu inoogu soo dhiibay Badbaadiyeheenna Ciise Masiix, [7] Si aynu innaga oo qudduus laynagaga dhigay nimcadiisa u noqonno kuwo dhaxla nolol weligeed ah. [8] Hadalkanu waa run, oo waxaan doonayaa inaad waxyaabahan ku adkaysato si kuwa Eebbe rumaysan ay u feejignaadaan oo ay camal wanaagsan ku dadaalaan. Waxyaabahanu way wanaagsanyihiin, dadkana faa’iiday u leeyihiin. [9] Laakiin ka fogow su’aalaha nacasnimada ah iyo abtirsiinta iyo muranka iyo khilaafka shareecada ku saabsan, waayo, faa’iido iyo macno toona ma leh. [10] Bidciga haddaad mar iyo labo waaniso, faraha ka qaad, [11] Odigoo og inuu ninka noocaas ahu kharribanyahay oo uu dembiile xukun isku riday yahay.

## Dardaaran Iyo Gabagabadii

[12] Markaan kuu soo diro Artemaas ama Tukhikos ku dadaal inaad iigu timaaddo Nikobolis, waayo, waxaan go’aansaday inaan xilliga qabow halkaas ku dhammaysto. [13] Ku dadaal inaad Seenaaska sharci yaqaanka ah iyo Abolloos soo amba bixiso si ayna waxba ugu baahanin. [14] Dadkeennuna ha barteen inay shaqo wanaagsan ku dadaalaan si ay kaalmo degdeg ah markii loo baahdo ayna u noqonin kuwo aan midho lahayn. [15] Kuwa ila jooga oo dhan way ku soo salaamayaan. Igu salaan kuwa iimaanka nagu jecel. Nimco ha idinla wada jirto.

# WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY FILEMON

## Salaan Bilowga Warqaddan

**1** Ka socota Bawlos oo maxbuuskii Ciise Masiix ah, iyo walaalkeen Timoteyos; ku socota
Filemon oo ah mid aannu jecelnahay oo nala shaqeeya, 2 Iyo walaashayo Afiya iyo Arkhibbos
oo askar nala ah iyo kiniisadda gurigaaga ku kulanta. 3 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka
timaadda Eebbaha Aabbeheenna ah iyo Sayid Ciise Masiix.

## Jacaylkii Iyo Rumaysadkii Filemon

4 Had iyo jeerba Eebbe baan kuugu mahadnaqayaa, anigoo ducadayda kugu xusuusanaya,
5 Waayo, waxaan maqlay jacaylka aad qudduusiinta oo dhan u qabto iyo rumaysadka aad
Sayid Ciise ku rumaysay. 6 Aniga oo ka ducaynaya in iimaankaaga aad qaybta ka heshay uu si
fiican ugu kori doono aqoonta wax kasta oo wanaagsan oo inoogu jira Masiixa. 7 Waayo,
jacaylkaaga aawadii waxaan ku helay farxad iyo dhiirri galin badan, maxaa yeelay, qalbiga
qudduusiinta adaa qabowjiyay, walaalkayow.

## Oneesimos Oo Ahaa Addoon Cararay

8 Sidaas daraaddeed, in kastoo aan Masiixa ku leeyahay geesinimo badan si aan kugu amro
waxa kugu waajibka ah, 9 Haddana waxaan ka jeclaan lahaa inaan ku baryo jacaylka aawadiis,
anigoo odaygii Bawlos oo maxbuuskii Ciise Masiix ah. 10 Waxaan kaala hadlayaa wiilkayga
Oneesimos oo aan anigoo xabsiga ku jira dhalay, 11 Oo markii hore mid aan faa'iido lahayn
ahaan jiray, haddase adiga iyo anigaba faa'iido inoo leh. 12 Kaasoo aan kuu soo celinayo,
isagoo qalbigayga ah. 13 Waxaanan jeclaan lahaa inaan sii hayo si uu aawadaa iigu adeego
inta aan Injiilka u xidhanahay. 14 Laakiinse ma doonayo inaan sameeyo wax aadan ila ogayn, si
uuna wanaaggaagu u noqonin qasab laakiinse uu u noqdo ikhtiyaar. 15 Mindhaa wuxuu
cabbaar kaaga maqnaa si aad weligaa u haysatid, 16 Laakiinse aadan mar dambe u haysanin
sida adeege, laakiinse si mid adeege ka wanaagsan oo ah walaal aan gaar ahaan anigu
jeclahay, laakiinse adigu aad iga sii jeceshahay, xagga jidhka iyo xagga Rabbigaba.
17 Haddaba haddaad igu tirinayso inaan ahay saaxiibkaaga wax kula wadaaga, isaga u aqbal
sidaad ii aqbali lahayd. 18 Oo hadduu ku xumeeyay ama wax kaa qabo, aniga igu xisaabi.
19 Anigoo Bawlos ah waxaan gacantayda ku qorayaa, Anigaa bixin doona. mana odhanayo,
Wax baan kugu leeyahay xataa naftaadaba ha noqotee. 20 Haah, walaalow, xagga Rabbiga
farxad aan kaa helo, qalbigaygana xagga Masiixa ku qabowji. 21 Waxaan aaminsanahay
addeeciddaada, oo sidaas daraaddeed ayaan warqaddan kuugu soo qorayaa, anigoo
garanaya inaad samaynayso wax ka sii badan waxaan leeyahay. 22 Isla markaasna ii diyaari
meel aan ku hoydo; waayo, waxaan rajaynayaa in baryadiinna laygu kiin siiyo.

## Dhammaadka

23 Waxaa ku soo salaamaya Ebafras oo Ciise Masiix dartiisa ila xidhan, 24 Iyo Markos, iyo
Aristarkhos, iyo Deemaas, iyo Luukos, kuwaas oo ila shaqeeya. 25 Nimcada Rabbigeenna Ciise
Masiix ruuxiinna ha la jirto. Aamiin.

# WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY DADKII CIBRAANIYADA

### Bilowga Kitaabkan

**1** Eebbe wuxuu waagii hore siyaabo badan oo kala duduwan awowayaasheen kula hadlay
nebiyada, [2] Laakiin maalmahan ugu dambaysta ah wuxuu inagula hadlay Wiilkiisa uu ka dhigay
ka wax walba dhaxla, kaasoo uu dunida ku abuuray.
[3] Oo isagu waa iftiinka ammaantiisa iyo muujinta ka uu yahay, oo wax walba wuxuu ku hayaa
erayga xooggiisa oo markuu dembiyadeenna daahiriyay ka dib ayuu wuxuu fadhiistay
Waynaha xagga sare midigtiisa, [4] Isagoo aad uga sarreeya malaa'igaha, maadaama oo uu
dhaxlay magac ka sii wanaagsan kooda.

### Wiilka Eebbe Wuu Ka Sarreeyaa Malaa'igaha

[5] Malaggee ayuu marnaba ku yidhi, Adigu waxaad tahay Wiilkayga oo Maanta ayaan ku
dhalay? Oo weliba, Waxaan isaga u noqon doonaa Aabbe, isaguna wuxuu ii noqon doonaa
Wiil?[260*] [6] Oo weliba, markuu curadka dunida dhex keenay, wuxuu yidhi, Malaa'igaha Eebbe oo
dhan isaga ha u sujuudeen.[261*] [7] Oo xagga malaa'igahana wuxuu ka yidhi, Wuxuu
malaa'igihiisa ka dhigaa dabaylo, Kuwa u adeegana dab ololaya.[262*] [8] Laakiin Wiilka wuxuu ka
yidhi, Carshigaagu, Eebbeow, waa weligii iyo weligii, Oo usha xaqnimadaadu waa usha
boqortooyadaada. [9] Adigu xaqnimada waad jeclayd, dembigana waad necbayd, Sidaas
daraaddeed Eebbaha Eebbahaaga ahu wuxuu kuugu subkay Saliidda farxadda, oo kuwa ku
weheliyana wuu kaa sarraysiiyay. [10] Oo, Adigu Rabbiyow, bilowgii dhulkaad aasaastay,
Samooyinkuna waa shaqada gacmahaaga, [11] Iyagu way baabbi'i doonaan, adiguse waad
waartaa, Oo kulligood sida dhar bay u duugoobi doonaan, [12] Oo sida go' baad u laallaabi
doontaa, Sida dhar bayna u baddelmi doonaan, Adiguse sidaadii baad tahay Sannadahaaguna
ma dhammaan doonaan. [13] Malaggee ayuu marnaba ku yidhi, Midigtayda fadhiiso Ilaa oon
cadawgaaga cagahaaga hoostooda geliyo? [14] Miyayna kulligood ahayn arwaax adeega oo loo
soo diray inay caawiyaan kuwa badbaadada dhaxli doona?

### Badbaado Aad U Wayn

**2** Sidaa aawadeed waa inaynu aad u dhegaysanno waxaynu maqalnay, waaba intaasoo ay
inaga fakadaane. [2] Waayo, hadday farriintii ay malaa'iguhu ku hadleen xaqiiqo noqotay, oo mid
kasta oo xadgudub iyo caasinimo sameeyay uu helay abaalgud xaq ah, [3] Sidaynu u baxsan
doonnaa haddaynu dayacno badbaadada wayn ee uu Rabbigu mar hore ku hadlay oo ay kuwii
maqlay inoo xaqiijiyeen? [4] Eebbena wuxuu ugu marag furay mucjisooyin iyo waxyaabo la yaab
leh, iyo mucjisooyin kala duduwan, iyo hadiyado Ruuxa Qudduuska ahu u qaybiyay siduu
doonayay.

260 Samuu'eel Labaad 7:14
261 Baxniintii 32:43
262 Sabuur 104:4

## Badbaadada Waxaa Lagu Aasaasay Xanuun Iyo Silic

5 Waayo, dunida iman doonta oo aynu ka hadlayno malaa'igaha muusan u dhiibin. 6 Laakiin
mid baa meel ka marag furay isagoo leh, Dadku muxuu yahay ood u xusuusataa? Ama ina
aadan muxuu yahay oo aad u soo booqataa?[263*] 7 Waxaad isaga in yar ka hoosaysiisay
malaa'igaha. Waxaanad taaj uga dhigtay ammaan iyo sharaf, Oo wax walba isagaad gacmaha
u galisay, 8 Wax walbana cagihiisaad ka hoosaysiisay. Isagoo wax walba isaga ka
hoosaysiiyay, wax uu dhaafay oo uusan isaga ka hoosaysiinin ma jiraan, laakiin hadda weli ma
aragno wax walba oo isaga laga hoosaysiiyay. 9 Laakiin waxaynu aragnaa Ciise, kaasoo in
muddo ah malaa'igaha laga hoosaysiiyay, isagoo xanuunka dhimashada aawadeed ammaan
iyo sharaf taaj looga dhigay, si uu nimcada Eebbe aawadeed qof walba badalkiisa dhimashada
u dhadhamiyo. 10 Waayo, waxaa munaasib ku ahayd ka ay wax walba u ahaadeen, oo ay wax
walba ka yimaaddeen, markuu carruur badan ammaan u keeno, inuu aasaaska
badbaadadooda xanuun ku kaamilo. 11 Waayo, ka qudduus ka dhiga iyo kuwa qudduus laga
dhigaba dhammaan mid keliya ayay ka yimaaddaan, sidaa aawadeed isagu kama xishoodo
inuu iyaga ugu yeedho walaalo, 12 Isagoo leh,
Magacaaga waxaan u sheegi doonaa walaalahay, Oo ururka dhexdiisa ayaan kugu ammaani
doonaa.[264*] 13 Oo haddana, Isagaan aamini doonaa oo haddana,
Bal eega, aniga iyo carruurta Eebbe i siiyay. 14 Carruurtu waxay qayb ka heleen jidh iyo dhiig,
taas aawadeed isaguna sidaas oo kale ayuu uga qayb qaatay, si uu dhimasho ugu baabbi'iyo
kii xoogga dhimashada lahaa, oo ah Iblayska, 15 Iyo inuu furo dhammaan kuwii cimrigooda oo
dhan addoonnimo ugu hoos jiray cabsida dhimashada. 16 Waayo, runtii, muusan qaadanin
suuradda malaa'igaha, wuxuuse qaatay ta dhashii Ibraahim. 17 Haddaba waxaa isaga
munaasib u ah inuu si walbaba ugu ekaado walaalihiis, si uu wadaad sare oo naxariis iyo
aamin badan leh u noqdo xagga adeegga Eebbe, si uu kafaaragud ugu noqdo dembiyada
dadka. 18 Waayo, isaga qudhiisu wuu xanuunsaday isagoo la jirrabay, sidaa aawadeed wuu
karaa inuu caawiyo kuwa la jirrabo.

## Ciise Masiix Wuu Ka Sarreeyaa Muuse

**3** Haddaba walaalaha qudduusiinta ah ee qaybta ku leh dacwaddiisa samaawiga ahow, u
fiirsada Ciise oo ah Rasuulka iyo Wadaadka sare ee iimaanka aynu qiranno. 2 Kaasoo aamin u
ahaa kii doortay, siduu Muuseba gurigiisii oo dhan aaminka ugu ahaa. 3 Waayo, waxaa isaga
lagu tiriyay inuu istaahilo ammaan ka badan tii Muuse, sida ka guriga dhisa uga sharaf
badanyahay guriga. 4 Waayo, guri walba mid baa dhisay, laakiin ka wax walba dhisa waa
Eebbe. 5 Oo runtiina Muuse gurigiisa oo dhan aamin buu u ahaa sida adeege, si uu markhaati
ugu ahaado waxyaabaha mar dambe laga hadli doono. 6 Laakiin Masiixu aamin buu u yahay
sida wiil gurigiisa u maamulo, gurigiisuna waa innaga haddaynu ilaa ugu dambaysta
kalsoonideenna iyo farxaddeennaba xajinno.

263 Sabuur 8:4-6
264 Sabuur 22:22

## Ha Qalbi Adkayninna

7 Haddaba sidan Ruuxa Qudduuska ahu leeyahay, Maanta haddaad codkiisa maqashaan,
8 Quluubtiinna ha adkaynina sidii waagii fallaaganimada, Sidii maalintii jirrabaadda ee cidlada
dhexdeeda, 9 Markay awowayaashiin i jirrabeen, oy i tijaabiyeen, Oo ay afartan sannadood
shaqadayda ku arkeen. 10 Sidaa daraaddeed qarnigaas waan u cadhaysnaa, Oo waxaan idhi,
Had iyo jeerba quluubtay ka baadiyoobaan, Oo iyagu ma yaqaanaan jidadkayga. 11 Sidaas
daraaddeed anigoo cadhaysan ayaan waxaan ku dhaartay, inayna Iyagu nasashadayda
marnaba geli doonin.[265*] 12 Iska jira, walaallayaal oo uusan qalbi shar leh oon rumaysad lahayn
midkiinna ku jirin, idinkoo Eebbaha nool ka dheeraanaya. 13 Laakiin maalin kasta iswaaniya,
intii la odhanayo, Maanta, si uusan midkiinna ugu engegin khiyaanada dembiga. 14 Waayo,
Masiixa aynu qayb ka qaadanaynaa, haddaynu kalsoonideennii billowga ilaa iyo dhammaadka
xajinno, 15 Sida ay leedahay, Maanta haddaad codkiisa maqashaan, Quluubtiinna ha adkaynina
sidii waagii fallaaganimada.[266*] 16 Waayo, yay ahaayeen kuwii markay maqleen, Eebbe ka
cadhaysiiyay? Miyayna ahayn dhammaan kuwii Masar ka tagay ee uu Muuse waday? 17 Oo
yuu afartan sannadood u cadhaysnaa? Miyayna ahayn kuwii dembaabay ee meydkoodu
cidlada ku dhacay? 18 Oo yuu ku dhaartay inayna meeshuu ku nasto gelin doonin, kuwii isaga
addeeci waayay mooyee? 19 Oo waxaynu aragnaa inayna geli karin rumaysad darro
aawadeed.

## Nasashada Eebbe Dadkiisa Siiyo

**4** Sidaas daraaddeed aynu cabsanno, inta ballanka meesha uu ku nasto lagu gelayo jiro, oo
yuusan midkiinna u muuqanin mid gaadhi waayay. 2 Waayo, innagaba war wanaagsan baa
laynagu wacdiyay sidooda oo kale, laakiin hadalkay maqleen waxba uma tarin iyaga, maxaa
yeelay, kuwii maqlay rumaysad kumayna darin. 3 Waayo, kuweenna rumeeyay meesha
nasashada waynu gali doonaa, siduu u yidhi, Sidaas daraaddeed anigoo cadhaysan ayaan
waxaan ku dhaartay, Iyagu nasashadayda ma geli doonaan, in kastoy shaqadiisu dhammaatay
aasaaskii dunida. 4 Waayo, isagu meel ayuu maalintii toddobaad sidan ka yidhi,
Maalintii toddobaad Eebbe shaqadiisii oo dhan wuu ka nastay.[267*] 5 Mar kalena wuxuu yidhi,
Iyagu nasashadayda ma geli doonaan.[268*] 6 Haddaba waxaa hadhay qaar gelaya, oo kuwii
markii hore warkii wanaagsanaa lagu wacdiyay way geli waayeen caasinimo aawadeed.
7 Sidaa daraaddeed haddana mar kale maalin buu gooni u cayimay, isagoo wakhti dheer
dabadeed kitaabka Daa'uud ku leh, Maanta haddaad codkiisa maqashaan, ha qalbi
adkaynina.[269*] 8 Waayo, hadduu Yashuuca iyaga nasiyay, Eebbe markaa ka dib kama hadleen
maalin kale. 9 Sidaas daraaddeed waxaa dadka Eebbe u hadhay nasasho. 10 Waayo, kii
nasashadiisa galay, isaga qudhiisu wuu ka nastay shaqadiisa siduu Eebbe tiisa uga nasiyay.
11 Haddaba aynu ku dadaalno si aynu nasashadaas u galno oo uusan ninna caasinimadaas oo
kale ugu dhicin. 12 Waayo, hadalka Eebbe wuu noolyahay, wuuna shaqeeyaa oo wuu ka af
badanyahay seef kasta oo laba af leh, isagoo ka dhex dusaya oo kala soocaya nafta iyo
ruuxda iyo xubnaha iyo dhuuxaba, wuuna kala gartaa fikradaha iyo waxyaabaha qalbiga ku

---

265 Sabuur 95:7-11
266 Sabuur 95:7-8
267 Bilowgii 2:2
268 Sabuur 95:11
269 Sabuur 9:7-8

jira. [13] Oo Uun aan hortiisa muuqanin ma jiro, laakiinse wax walba waa bayaan oo si cad bay indhaha ka ina xisaabin dooona uga hor muuqdaan.

### Ciise Waa Wadaad Ka Sarreeya Haaruun

[14] Haddaba innagoo leh wadaad sare oo wayn, kaasoo samooyinka sii dhex maray, kaasoo ah Ciise oo Wiilkii Eebbe ah, aynu shahaadadeenna xajinno. [15] Waayo, ma lihin wadaad sare oo aan tabardarrideenna ka nixi karin, laakiin waxaynu leennahay mid si walba loo jirrabay sideenna oo kale, oo aan weliba dembi lahayn. [16] Haddaba aynu carshiga nimcada si geesinimo leh ugu soo dhawaanno si aynu naxariis u gaadho oo aynu u helno nimco wakhtiga dhibaatada ina caawisa.

**5** Maxaa yeelay Wadaad sare oo kasta, oo dadka laga dhex doorto, waxaa dadka loogu doortaa inuu dadka wakiil uga ahaado adeegga Eebbe, oo uu hadiyado iyo allabaryaba u bixiyo dembiyada aawadood. [2] Isagu waa inuu si naxariis leh ula dhaqmo kuwa aan aqoonta lahayn iyo kuwa lunsan, maxaa yeelay, isaga laftiisuba wuu tabardaranyahay. [3] Oo sidaa daraaddeed waa inuu isaga laftiisa kafaaragud u bixiyo dembiyadiisa aawadood, sida uu dadka kaleba kafaaragud ugu bixiyo. [4] Ninna sharaftan iskama qaato, laakiinse waa kii Eebbe ugu yeedho sidii uu Haaruun ugu yeedhay. [5] Sidoo kale Masiixu isma ammaanin si uu u noqdo wadaad sare, laakiin waxaa doortay ka ku yidhi, Adigu waxaad tahay Wiilkayga oo Maantaan ku dhalay.[270*] [6] Meel kalena wuxuu ka yidhi, Adigu weligaaba wadaad baad tahay Sidii derejadii Malkisadaq.[271*] [7] Masiixu maalmihii uu jidhka lahaa wuxuu salaad iyo duco uu kor u dhawaaqayay oy ilmo ku dheehantahay u bixiyay ka awooda inuu isaga dhimashada ka badbaadiyo, waana la aqbalay cibaadadiisa aawadeed. [8] In kasta oo uu wiil ahaa, haddana wuxuu addeecid ku bartay waxyaabihii uu ku xanuunsaday, [9] Oo markuu kaamil noqday wuxuu kuwa isaga addeeca oo dhan u noqday sababta badbaadada weligeed ah. [10] Oo Eebbe wuxuu isaga ku magacaabay wadaad sare sidii derejadii Malkisadaq.

### Waa In Bidcada Iyo Baadinimada Laga Digtoonaado

[11] Waxaa jira wax badan oo aannu arrintaas ka sheegi karno, laakiin way adagtahay in la fasiro fahmo darridiinna aawadeed. [12] Wakhtigii aad macallimiin noqon lahaydeen ayaad haddana u baahantihiin in laydin baro waxyaabaha asaasiga ah ee Erayada Eebbe, oo waxaad noqoteen sidii kuwa caano u baahan oo aan cunto adag qaadan karin. [13] Waayo, mid kasta oo ay cuntadiisu caano tahay aqoon uma laha hadalka xaqnimada, waayo, waa ilmo yar. [14] Laakiin cuntada adag waxaa qaadan kara dadka waawayn ee waaya aragnimadooda ku kala garta wanaagga iyo xumaanta.

270 Sabuur 2:7
271 Sabuur 110:4

**6** Sidaa daraaddeed aynu iska dayno mabaadii'dii ugu horreesay ee Masiixa, oo horay aynu ugu soconno kaamilnimada, oo yaynaan mar kale dhigin aasaaska ka toobadkeenidda camallada dhintay iyo rumaysadka Eebbe, [2] Iyo wax baridda biya galinta iyo gacmo dul saaridda iyo sarakicidda kuwii dhintay iyo xukunka daa'imka ah. [3] Oo tan ayaynu samayn doonnaa hadduu Eebbe idmo. [4] Maxaa yeelay, suurta gal maha in toobadda loo cusboonaysiiyo kuwii mar hore iftiinka helay ee hadiyaddii jannada dhadhamiyay ee ka qayb galay Ruuxa Qudduuska ah, [5] Ee dhadhamiyay wanaagga uu leeyahay erayga Eebbe iyo xoogga wakhtiga iman doona. [6] Hadday riddoobaan, maadaama oy mar kale Wiilka Eebbe iskutallaabta ku qodbayaan oo si cad u ceebaynayaan. [7] Waayo, dhulka cabbay roobka marar badan ku dul da'a, oo midho wanaagsan kuwii beeray u soo bixiya, wuxuu xagga Eebbe ka helaa barako, [8] Laakiin hadduu dhalo qodax iyo yamaarug, faa'iido ma laha, oo wuxuu halis u yahay in la habaaro, ugu dambaystana waa in la gubo. [9] Laakiin saaxiibbada qaaliga ahow, inkasta oo aannu sidaa u hadlaynu, haddana arrintiinna waxaannu ku kalsoonnahay inaad wax fiican qabateen, wax fiican oo badbaadada ku saabsan. [10] Waayo, Eebbe ma aha mid xaqdaran, mana illoobayo camalkiinna iyo jacaylka aad magiciisa u qabtaan, maxaa yeelay, qudduusiinta ayaad u adeegteen ood weli u adeegtaan. [11] Oo annaguna waxaannu jecelnahay inuu mid kasta oo idinka mid ahuba muujiyo dadaalkaas oo kale, kaasoo ku saabsan rajada la hubo ilaa iyo kama dambaysta, [12] Si aydaan caajisiin u noqonin, laakiinse aad u noqotaan kuwo ku dayda kuwa iimaanka iyo dulqaadka ku dhaxla ballanqaadyada.

### Ballanqaadka Eebbe Waa Hubaal

[13] Markii uu Eebbe ballan u qaaday Ibraahim, maadaama oo mid isaga ka wayn oo uu ku dhaarto uusan jirin, isaga ayaa isku dhaartay, [14] isagoo leh, Hubaal waan ku barakayn doonaa, oo waan ku badin doonaa.[272*] [15] Oo sidaas ayuu markuu dulqaatay u helay wixii loo ballanqaaday. [16] Waayo, dadku waxay ku dhaartaan ka iyaga ka wayn, oo waxaa muran kasta oy galaan ugu dambeeya dhaar si loo aamino, [17] sidaas daraaddeed, Eebbe, isagoo aad u doonaya inuu kuwa ballanka dhaxla tuso qorshihiisa aan is badalka lahayn, ayuu dhaar ku galay, [18] Marka laba qodob oon is badal lahayn, oo ayna suurta gal ahayn inuu Eebbe ka been sheego, kuweenna u soo cararay magangalyada waxaynu helaynaa geesinimo xoog leh, si aynu u xajisanno rajada ina hor taalla, [19] Taasoo aynu sida barroosinka nafta u haysanno, taasoo gelaysa meesha daaha ka shishaysa, [20] meeshii uu Ciise sida ceelalyada inoo sii galay isagoo noqday wadaad sare oo daa'im ah la darajo ah Malkisadaq.

### Ciise Wuxuu Ahaa Wadaad Sare Sidii Malkisadaq Oo Kale

**7** Malkisadaqan, oo boqorkii Quddus iyo wadaadka Eebbaha ugu sarreeya ahaa, wuxuu la kulmay Ibraahim oo ka soo noqday layntii boqorrada, wuuna barakeeyay. [2] Oo Ibraahim wuxuu isaga wax kasta ka siiyay tobankii meeloodba meel. Malkisadaq marka hore waxaa magiciisa lagu fasiray, Boqorka Xaqnimada, ka dibna, Boqorka Quddus, oo ah Boqorka Nabadda.
[3] Aabbana ma lahayn, hooyana ma lahayn, abtirsiinyana ma lahayn, oo isagoo aan lahayn billowga maalmaha ama dhammaadka nolosha laakiin loo ekaysiiyay Wiilka Eebbe, ayuu weligii wadaad sii ahaanayaa.

272 Bilowgii 22:16-17

[4] Haddaba ka fiirsada ninkanu siduu u waynaa, ka Ibraahim oo madaxda awowayaashii ahaa
meel tobnaad ka siiyay bililiqadii. [5] Oo runtii kuwii reer Laawina oo helay adeegga
wadaadnimada waxay haystaan amar ay dadka kaga qaataan meel tobnaadka sida sharcigu
leeyahay, kuwaasoo ah walaalahood in kastoy kuwanu ka farcameen Ibraahim. [6] Laakiin mid
aan iyaga ku abtirsanin ayaa wuxuu Ibraahim ka qaatay meel tobnaadyo, oo barakeeyay kii
ballanqaadka lahaa. [7] Laakiin muran la'aan ka laga sarreeyo ayaa barakeeyay midka ka
sarreeya. [8] Oo halkan waxaa meel tobnaadyada qaata dad dhimanaya, laakiin halkaas mid loo
markhaatifuray inuu nool yahay. [9] Waxaa la odhan kara, Laawiga meel tobnaadyada qaataana,
Ibraahim meel tobnaadyo ayuu ku bixiyay. [10] Waayo, isagu wali aabbihii ayuu ku jiray markuu
Malkisadaq la kulmay.[11] Haddaba hadduu adeegga wadaadnimada Laawiyiinta kaamilnimo ku
jirtay, waayo, iyada ayuu dadku sharciga ku helay, maxaa weli loogu baahnaa inuu ka soo
boxo wadaad kale oo darajadii Malkisadaq leh oo aan lagu magacaabin darajadii Haaruun?
[12] Waayo, wadaadnimada markii la beddalo waa lagama maarmaan in sharcigana la beddalo.
[13] Waayo, kii waxyaabahan laga sheegay waa qabiil kale oo aan waligii meeshii allabariga ka
shaqaynin. [14] Waayo, way iska caddahay inuu Sayidkeennu ka soo baxay Yahuudah, oo ah
qabiil uusan Muuse kaga hadlin wax wadaaddnimo ku saabsan. [15] Waxaana taas sii
caddaynaya, hadduu wadaad kale oo Malkisadaq u egi kaco, [16] Kaasoo aan wadaad lagaga
dhigin sharciga abtirsiinyada xagga jidhka, laakiin xagga xoogga nolosha aan dhammaadka
lahayn. [17] Waayo, isaga waxaa loogu markhaatifuray, Adigu weligaaba wadaad baad tahay la
darajo ah Malkisadaq.[273*] [18] Waayo, amarkii hore waxaa loo buriyay tabardarridiisa iyo faa'iido
la'aantiisa, [19] Maxaa yeelay, sharcigu cidna kaamil kama dhigo. Oo waxaa la keenay rajo ka
wanaagsan oo aynu Eebbe ugu dhawaanno. [20] Oo isagu dhaar la'aanteed wadaad kumuusan
noqonin. [21] Iyagu dhaar la'aanteedbay wadaaddo ku noqdeen, laakiin isagu wuxuu ku noqday
dhaarta ka ku yidhi, Rabbigu wuu dhaartay, kamana soo noqonayo, Adigu weligaaba wadaad
baad tahay.[274*] [22] Oo sidaasuu Ciise ku noqday dammiinka axdiga ka wanaagsan. [23] Iyaguna
waxay noqdeen wadaaddo tiro badan, maxaa yeelay, geerida ayaa ka hor istaagtay inay sii
jiraan, [24] Isaguse wuxuu haystaa wadaadnimadiisa aan beddelmi karin, waayo, weligii wuu sii
waarayaa. [25] Sidaa daraaddeed badbaado kaamil ah ayuu u keeni karaa kuwa Eebbe ugu
dhawaada isaga, maxaa yeelay, isagu weligii wuu noolyahay si uu ugu shafeeco qaado iyaga.
[26] Waayo, wadaad sare oo noocan ah ayaa inagu habboon, mid qudduus ah oo aan khiyaano
iyo wasakh toona lahayn, oo dembilayaasha ka soocan, oo samooyinka laga sarraysiiyay,

[27] Kaasoon u baahnayn inuu maalin walba allabari u bixiyo sida wadaaddadii sare, marka hore
dembiyadiisa aawadood, ka dibna kuwa dadka aawadood, tan mar keliya ayuu sameeyay
markuu isbixiyay. [28] Waayo, sharcigu banii aadan tabardaran ayuu wadaaddo sare ka dhigaa,
laakiin erayga dhaarta ee sharciga ka dambeeyay wuxuu ka dhigaa Wiil weligii kaamil ah.

### Ciise Wadaadnimadiisa Iyo Axdiga Cusub

**8** Waxyaabihii aan ka hadalnay tan ayaa ugu muhimsan, Waxaynu leennahay wadaad sare oo
noocaas ah, kaasoo fadhiya midigta carshiga Waynaha jannada ku jira, [2] Kaasoo ka adeega
waxyaabaha qudduuska ah iyo taambuugga runta ah ee Rabbigu dhisay oo ayna dad dhisin.
[3] Waayo, wadaad kasta oo sare waxaa loo doortay inuu hadiyado iyo allabaryo bixiyo, sidaa

273 Sabuur 110:4
274 Sabuur 110:4

daraaddeed waa lagama maarmaan inuu wadaadkan sare haysto wax uu bixiyo. 4 Haddaba hadduu dhulka joogi lahaa, wadaad muusan ahaadeen, maxaa yeelay, waxaa jira kuwo alla bari u bixiya sida sharcigu leeyahay, 5 kuwaasoo u adeega wax u ek oo la moodo hooska waxyaabaha jannada, sidii Muuse loogu digay markuu doonayay inuu taambuugga dhiso. Waayo, wuxuu yidhi, Aad ugu fiirso si aad wax walba ugu samayso si u ek tusaalihii buurta lagugu tusay.[275*] 6 Laakiin hadda wuxuu helay adeeg aad uga wanaagsan sida uu u yahay dhexdhexaadiyaha axdiga wanaagsan oo lagu dhisay ballanqaadyo ka wanaagsan. 7 Waayo, hadduusan axdigii hore iin lahayn, mid labaad meella looma dooneen. 8 Wuxuu yidhi, isagoo iyaga eedaynaya, Bal eega, maalmo ayaa iman doona, ayuu Rabbigu leeyahay, Oo anigu axdi cusub ayaan la dhigan doonaa reer Israa'iil iyo reer Yahuudah, 9 Oo aan ahayn axdigii aan awowayaashood la dhigtay oo kale Maalintii aan iyaga gacanta qabtay ee aan ka kaxeeyay dalka Masar, Waayo, iyagu kumayna dhaqmin axdigaygii, Aniguna farahaan ka qaaday, ayaa Rabbigu leeyahay. 10 Waayo, kanu waa axdiga aan la dhigan doono reer Israa'iil Maalmahaas ka dib, ayaa Rabbigu leeyahay, sharciyadayda ayaan gelin doonaa maankooda, quluubtoodana waan ku qori doonaa, Oo Eebbe baan u ahaan doonaa, Iyaguna dadkayga ayay ahaan doonaan, 11 Oo iyagu ma bari doonaan mid walba deriskiisa Iyo mid walba walaalkii, iyagoo leh, Rabbiga garo, Waayo, dhammaantood way i garan doonaan, Ka ugu yar ilaa iyo ka ugu wayn. 12 Maxaa yeelay, iyagoo xaqdaran ayaan u naxariisan doonaa, Dembiyadoodana mar dambe ma xusuusan doono.[276*] 13 Markuu yidhi, Axdi cusub, kii hore ayuu duug ka dhigay. marka wixii duugoobaya ee dhammaanaya waxay u dhawyihiin inay baaba'aan.

### Meeshii Qudduuska Ahayd Ee Hore Waxay Ka Dhigantahay Mid Cusub

**9** Xataa axdigii hore wuxuu lahaa sharci ku saabsan cibaadada, iyo meel qudduus ah oo dhulka ku taalla. 2 Waayo, waxaa la dhisay taambuug; qaybta hore waxay ka koobnayd laambadaha isku yaalla iyo miiska iyo furinka tusniinta, oo waxaa la odhan jiray Meesha Qudduuska ah. 3 Qaybta labaad ee daaha ka shishaysana waxay ahayd taambuuggii la odhan jiray, Qudduuskii Qudduusyada, 4 Kaasoo leh girgire dahab ah oo foox lagu shido iyo sanduuqii axdiga oo dhammaantiiba dahab lagu dahaadhay, dhexdiisana waxaa ku jiray weel dahab ah oo maannadii ku jirto iyo ushii Haaruun oo magooshay, iyo looxyadii axdiga, 5 Dushiisana waxaa ku yaallay Keruubiimtii ammaanta oo hadhaynaya kursigii naxariista, waxyaabahaas oo aannan hadda si faahfaahsan uga hadli karin. 6 Haddaba markii waxyaabahan sidaas loo diyaariyo, wadaaddadu waxay had iyo jeerba galaan taambuugga kowaad iyagoo adeegaya. 7 Laakiin ka labaad waxaa sannadkiiba mar gala wadaadka sare oo keliya, isagoo aan galaynin inuu dhiig wato mooyee, dhiiggaasoo uu u bixiyo naftiisa iyo dembiyada ay dadku si aan ula kac ahayn u galaan. 8 Ruuxa Qudduuska ahu wuxuu tilmaamayaa inaan jidkii Qudduuska Qudduusyada weli la muujinin, inta uu taambuuggii hore weli taaganyahay. 9 Taasu wakhtigan xaadirka ah waa tusaale ku saabsan sida loo bixiyo sadaqooyinka iyo allabaryada, kuwaasoo aan kaamil ka dhigi karin qalbiga caabudayaasha, 10 Laakiinse waxay ku saabsanyihiin oo kaliya wax la cono iyo wax la cabbo iyo qaabab kala duwan oo loo maydho, kuwaasoo ah amarro jidhka oo keliya loo dajiyay ilaa iyo wakhtiga is badalku ka imanayo.

275 Baxniintii 25:40

276 Yeremyaah 31:31-34

## Madax Furashada Ku Timaadda Dhiigga Masiixa

[11] Laakiin markuu Masiixu yimid, isagoo ah wadaadka sare ee waxyaabaha wanaagsan ee iman doona. Taasoo ah Taambuug ka wayn oo ka kaamilsan oo aan gacmo lagu samaynin, kaasoo la odhan karo, dunidan kama mid aha. [12] Isagu mar buu galay meeshii qudduuska ahayd, isagoo aan orgi iyo dibi dhiiggooda wadin, laakiin wuxuu waday dhiiggiisa, sidaas ayuu madax furasho weligeed ah inoogu helay. [13] Waayo, haddii orgi iyo dibi dhiiggooda iyo qaalin dambaskeeda lagu rusheeyo kuwa nijaasoobay, ay qudduus ka dhigaan si jidhka loo nadiifiyo,
[14] Intee ka badan ayuu dhiigga Masiixa, ka Ruuxa daa'imka ah naftiisa u bixiyay Eebbe isagoo aan eed lahayn, niyadiinna ka nadiifin kara camallada maydka ah si aad ugu adeegtaan Eebbaha nool? [15] Sidaa daraaddeed isagu waa shafeecaha axdiga cusub, waayo, wuxuu u dhintay si uu kafaaragud ugu noqdo xadgudubyadii lagu sameeyay axdigii hore, si kuwii loo yeedhay ay u helaan dhaxalka weligii ah ee la ballanqaaday. [16] Waayo, meeshuu dardaaran jiro waa lagamamaarmaan inuu kii dardaarmay dhinto. [17] Waayo, dardaaranka waxaa la fuliyaa marka uu kii tardaamay dhinto, mana dhaqan galo inta uu kii dardaarmay noolyahay.
[18] Haddaba xataa axdigii hore laguma gelin dhiig la'aantii. [19] Waayo, markii uu Muuse amarradii shareecada oo dhan dadka dhammaantood u wada akhriyay, wuxuu qaaday dhiiggii dibida iyo orgida iyo biyo iyo dhogor guduudan iyo geed husob la yidhaahdo, oo wuxuu ku rusheeyay kitaabka qudhiisa iyo dadkii oo dhan, [20] Isagoo leh, Kanu waa dhiiggii axdiga oo Eebbe idinku amray. [21] Sidoo kalena wuxuu dhiiggii ku rusheeyay taambuugga iyo weelasha lagu adeego oo dhan. [22] Inta badan wax walba waxaa lagu nadiifiyaa dhiig sida sharcigu leeyahay, oo dhiig daadin la'aanteed dembidhaaf ma jiro.

## Waxaa Dembiga Lagu Dhaafaa Qurbaanka Masiixa

[23] Haddaba lagama maarmaan bay ahayd in si u-ek waxyaabaha jannada ku jira kuwan lagu nadiifiyo, laakiin waxyaabaha jannada qudhooda waa in lagu nadiifiyo allabari kuwan ka wanaagsan. [24] Maxaa yeelay, Masiixu ma gelin meel qudduus ah oo gacmo lagu sameeyay, oo u eg midda runta ah, laakiin wuxuu galay jannada qudheeda, taasoo uu hadda Eebbe hortiisa innagu matalo. [25] Weliba uma uusan gelin si uu marar badan isu bixiyo, sida uu wadaadka sare meesha qudduuska ah sannad walba ula galo dhiig aan kiisa ahayn. [26] Haddii kale lagama maarmaan bay ahayd inuu marar badan xanuunsado tan iyo markii dunida la abuuray, laakiin hadda ayuu markay dunidu sii dhammaanaysay, yimid, si uu dembiga ugu baabbi'iyo qurbaankiisa. [27] Sida ay tahay inuu banii aadanku hal mar dhinto, deedna la xukumo, [28] Sidoo kale Masiixu hal mar ayuu qurbaan isugu bixiyay, si uu u qaado dembiyada kuwo badan, ka dibna wuu soo muuqan doonaa, mana aha inuu dembi qaado, laakiinse si uu u badbaadiyo kuwa aadka u sugaya isaga.

## Ciise Masiix Hal Mar Ayuu Dhammaanba U Wada Dhintay

**10** Waayo, maadaama oo uu sharcigu lahaa hooska waxyaabaha wanaagsan ee iman doona, oo ayna ahayn suuradda waxyaabahaas qudhooda, marnaba kaamil kagama dhigi karto allabaryo sannad walba had iyo jeer la bixiyo. [2] Haddii kale miyaan la joojiyeen in allabaryo la bixiyo? Maxaa yeelay, cibaadaystayaasha haddii hal mar la nadiifiyo mar dambe niyadda kamayna dembaabeen. [3] Laakiin allabaryadaas waxaa sannad walba lagu xusuustaa dembiyada. [4] Waayo, ma suurta gasho in dibi iyo orgi dhiiggoodu dembiyo qaado. [5] Sidaa daraaddeed markuu Masiixu dunida soo galay wuxuu yidhi,

Allabaryo iyo qurbaan ma doonaysid, Laakiin jidh baad ii diyaarisay. [6] Qurbaannada la bixiyo
ee la gubo oo dhan iyo allabaryada dembiga kuma faraxdid.[277*] [7] Markaasaan idhi, Bal eeg,
waxaan u imid Inaan sameeyo doonistaada, Eebbow. sida ay bogaga Kitaabku iga qoreen.[278*]
[8] Siduu horay u yidhi, Allabaryo iyo qurbaan iyo sadaqooyin la bixiyo oo la gubo iyo qurbaan
dembi ma doonaysid kumana faraxdid kuwaas oo loo bixiyo sida shareecada waafaqsan.
[9] Markaasuu yidhi, Bal eeg, waxaan u imid inaan sameeyo doonistaada. Wuxuu baabi'yay kii
kowaad si uu ka labaad u taago. [10] Sida doonistaasu tahay, waxaa qudduusiin laynagaga
dhigay bixinta jidhka Ciise Masiix oo mar kaliya la bixiyay. [11] Wadaad walba maalin kasta
wuxuu istaagaa isagoo adeegaya oo marar badan bixinaya allabaryo isku mid ah, kuwaas oon
marnaba dembiyo qaadi karin, [12] Laakiin isagu markuu hal mar allabari kaliya dembiyada u
bixiyay wuxuu fadhiistay midigta Eebbe, [13] Isagoo markaas dabadeed sugaya ilaa iyo inta
cadawgiisa cagihiisa hoostooda la galinayo. [14] Maxaa yeelay, qurbaan kaliya ayuu kaamil kaga
dhigay kuwa qudduusiinta laga dhigay waligood. [15] Oo taas Ruuxa Qudduuska ah ayaa
markhaati ka ah, markuu yidhi, [16] Kanu waa axdiga aan la dhigan doono iyaga Maalmahaas ka
dib, ayuu Rabbigu leeyahay, oo Sharciyadayda ayaan gelin doonaa quluubtooda,
Maankoodana waan ku qori doonaa.[279*] [17] Markaasuu wuxuu ku daray, Dembiyadooda iyo
xadgudubyadoodana mar dambe ma xusuusan doono. [18] Markii waxyaabahan la cafiyo, wax
dambe oo dembi loo bixiyo ma jirayo.

### Dhiirri Galinta Iyo Digniin

[19] Sidaa daraaddeed, walaallayaal, waxaynu haysannaa kalsooni aynu meesha qudduuska ah
kula galno dhiigga Ciise, [20] Taasoo ah waddo cusub oo nool oo uu inooga banneeyay daaha,
kaasoo ah jidhkiisa. [21] Oo waxaynu leenahay wadaad wayn oo ka sarreeya guriga Eebbe.
[22] Sidaa daraaddeed aynu ugu soo dhawaanno qalbi run ah iyo rumaysad dhab ah, iyadoo
quluubteenna laga nadiifiyay niyo shar leh, jidhkeennana lagu maydhay biyo daahir ah. [23] Oo
aynu aad u xajinno qirashada rajadeenna si aan liiq liiqasho lahayn, maxaa yeelay, ka inoo
ballanqaaday waa aamin. [24] Oo midkeenba midka kale ha ka fikiro si aynu isugu guubaabinno
jacayl iyo camal wanaagsan. [25] Oo yaynaan ka caajisin isku imaatinkeenna sida ay dadka
qaarkood caadaysteen, laakiin aan is dhiirri galinno, gaar ahaan markaad aragtaan inay
Maalintu soo dhawaanayso. [26] Maxaa yeelay, haddaynu si badheedh ah u dembaabno
markaynu aqoonta runta helnay ka dib, allabari dambe oo dembiyada loo bixiyo ma hadhin.
[27] Laakiin waxaa hadhay filasho cabsi leh oo xukun iyo dab kulul oo baabbi'in doona kuwa
Eebbe ku fallaagoobay. [28] Ninkii diida shareecadii Muuse markii ay laba ama saddex nin ku
markhaatifuraan ayuu si aan naxariis lahayn u dhiman jiray. [29] Ciqaab intee le'eg oo ka sii xun
ayaad u malaynaysaan inuu mutaysan doono kii Wiilka Eebbe ku joogjoogsada oo dhiiggii
axdiga ee isaga qudduuska lagaga dhigay ku tiriya wax aan quddduus ahayn, oo caayay
Ruuxa nimcada? [30] Waayo, innagu waynu naqaannaa ka yidhi, Aargudasho anigaa leh, oo
waan ka abaal marin doonaa.[280*] Mar kalena waxaa la yidhi, Rabbigu dadkiisa wuu xukumi
doonaa. [31] Waa wax aad u cabsi badan in lagu dhaco gacmaha Eebbaha nool. [32] Laakiin
xusuusta maalmihii hore, markii laydin iftiimiyay ka dib waxaad u adkaysateen dagaal adag oo
xanuun badan. [33] Mar waxaa idinka hor timid cay iyo bah dilaad, marna waxaad wax la

277 Waa qurbaanada dembi dhaafka loo bixiyo
278 Sabuur 40:6-8
279 Yeremyaah 31:33-34
280 Sharciga Kunoqoshadiisa 32:35-36

wadaagteen kuwii sidaas loola dhaqmay. [34] Waayo, waad u naxariisateen kuwii xidhnaa oo
farxad baad ku aqbasheen in hantidiinna la dhaco, maadaama ood ogtihiin inaad idinka
qudhiinnu jannada ku leedihiin maal ka wanaagsan oo ka waaritaan badan. [35] Sidaa
daraaddeed ha iska tuurina kalsoonidiinna, abaal gudka wayn leh. [36] Waayo, dulqaad baad u
baahantihiin, si aad u hanataan wixii laydiin ballanqaaday markaad doonista Eebbe yeeshaan
ka dib. [37] Maxaa yeelay, Wakhti yar ka dib Kii iman lahaa wuu iman doonaa, mana raagi doono.
[38] Laakiin kayga xaqa ahu rumaysad ayuu ku noolaan doonaa, Oo hadduu dib u noqdo,
naftaydu kuma farxi doonto isaga.[281*] [39] Innagu ma nihin kuwa halaagga dib ugu noqda, laakiin
waxaynu nahay kuwo iimaan leh si nafteennu u badbaaddo.

## Rumaysad

**11** Rumaysadku waa hubaasha waxyaabaha la rajeeyo, iyo aaminaadda waxyaabaha aan la
arkin. [2] Waayo, sidaasaa loogu markhaatifuray dadkii inaga horreeyay. [3] Rumaysad ayaynu ku
ogaanaynaa in dunida lagu abuuray erayga Eebbe, sidaas daraaddeed waxa la arko lagama
samaynin waxa muuqda. [4] Haabiil rumaysad ayuu Eebbe ugu bixiyay allabari aad uga
wanaagsan kii Qaabiil, sidaa daraaddeed waxaa loogu markhaatifuray inuu xaq ahaa,
Eebbena uga markhaatifuray hadiyadihiisii. Sidaas daraaddeed inkastoo uu dhintay weli wuu
hadlaa. [5] Enoogna rumaysad ayaa kor loogu qaaday si uusan dhimasho u arag, lamana helin,
maxaa yeelay, Eebbe ayaa isaga qaaday, waayo, intaan kor loo qaadin ka hor ayaa looga
marag furay inuu Eebbe raalli galiyay. [6] Marka rumaysad la'aantii suurta gal ma aha in isaga la
raalli galiyo, sidaas aawadeed qofkii Eebbe u yimaadda waa inuu rumaysto inuu jiro oo uu
yahay mid u abaal guda kuwa isaga doonaya. [7] Nuux oo uu Eebbe uga digay waxyaabo aan
weli la arkin ayaa cabsaday, oo rumaysad ayuu ku dhisay doonni si reerkiisu ugu badbaado,
sidaas ayuuna dunida u xukumay oo ku noqday mid dhaxla xaqnimada rumaysadka ku
timaadda. [8] Ibraahimna markii loo yeedhay, rumaysad ayuu ku addeecay si uu tago dhulkii uu u
heli lahaa dhaxalka, wuuna tagay isagoo aan garanaynin meeshuu ku socdo. [9] Rumaysad
ayuuna ku degay dhulkii loo ballanqaaday sidii dhul ajinabi, wuxuuna taambuugyo la degganaa
Isxaaq iyo Yacquub oo ahaa kuwii la dhaxlay ballanqaadka. [10] Waayo, wuxuu filayay magaalo
aasaas leh oo midka dhisay ee sameeyay uu Eebbe yahay. [11] Saarah qudheedu rumaysad
ayay ku heshay xoog ay ku uuraysato, oo iyadoo dhaaftay wakhtigii dhalmada ayay dhashay,
waayo, waxay ku tirisay mid aamin ah kii u ballanqaaday. [12] Sidaas daraaddeedna waxaa nin
kaliya oo sidii nin mayd ah oo kale ahaa ka dhashay shacab u badan sida xiddigaha cirka iyo
sida cammuudda badda xeebteeda ee aan la tirin karin. [13] Kuwaasu dhammaantood rumaysad
ayay ku wada dhinteen, iyaga oo aan helin waxyaabihii loo ballanqaaday, laakiin meel fog ayay
ka arkeen oo way aqbaleen, oo waxay qirteen inay dhulka ku yihiin ajinabi iyo dad socoto
ah.[282*] [14] Waayo, kuwa sidaas oo kale leh waxay muujinayaan inay doonayaan waddan ay
iyagu leeyihiin. [15] Oo hadday ka fikirayaan waddankii ay ka baxeen way heli lahaayeen wakhti
ay dib ugu noqdaan. [16] Laakiin hadda waxay aad u doonayaan waddan ka wanaagsan oo ah
jannada, sidaa daraaddeed Eebbe kama xishoodo in loogu yeedho Eebbahooda, waayo,
wuxuu iyaga u diyaariyay magaalo. [17] Ibraahimna markii la jirrabay, rumaysad ayuu Isxaaq
allabari ahaan ugu bixiyay. Kii ballanqaadyada helay ayaa wuxuu sadaqeeyay wiilkiisii

281 Xabaquuq 2:4

282 Wax ay meesha fog ka arkeen ee loo ballanqaaday oo ayna wali helin waa abaalgudka ay aakhiro jannada ku heli doonaan.

keliyaha, [18] In kastoo lagu yidhi, Kuwa Isxaaq ka farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi doonaa. [19] Wuxuu aaminay inuu Eebbe ka sarakicin karo xataa kuwii dhintay, oo sidii tusaale oo kale ayuu isaga uga helay kuwii dhintay. [20] Isxaaqna rumaysad ayuu ugu duceeyay Yacquub iyo Ceesaw wax ku saabsan mustaqbalka iman doona. [21] Yacquubna markuu dhimanayay rumaysad ayuu ugu duceeyay mid kasta oo wiilashii Yuusuf ka mid ah, isagoo Eebbana u sujuudaya oo cuskanaya bakooraddiisa madaxeeda. [22] Yuusufna markay dhimashadiisii soo dhawaatay rumaysad ayuu kaga hadlay bixitaanka reer banii Israa'iil, wuxuuna ka dardaarmay lafihiisa. [23] Muusena markuu dhashay, waalidkiisu rumaysad ayay ku qariyeen saddex bilood, maxaa yeelay, waxay arkeen inuu ilmo wanaagsan yahay, kamana ayna cabsanin amarkii boqorka. [24] Muuse markuu waynaaday rumaysad ayuu ku diiday in loogu yeedho wiilkii gabadha Fircoon. [25] Oo wuxuu ka doortay in lala ciqaabo dadka Eebbe intuu wakhti yar dembi ku raaxaysan lahaa; [26] isagoo ku tirinaya cayda lagu caayo Masiixa aawadiis inay ka qiimo wayn tahay maalka Masar, waayo, wuxuu filayay abaal gudka. [27] Oo rumaysad ayuu kaga tagay Masar isagoo aan ka cabsanaynin boqorka cadhadiisiia, waayo, wuxuu u adkaystay sidii mid eegaya ka aan la arkaynin. [28] Oo rumaysad ayuu ku sameeyay Kormaridda iyo taxaliisha dhiigga si uusan kii curadyada halaagayay iyaga u taabanin. [29] Oo rumaysad ayay ku dhex mareen Badda Cas sidii dhul engegan, laakiin markay Masriyiintu sidaas isku dayeen, way qaraqmeen. [30] Derbiyadii Areexana rumaysad ayay ku dumeen markii toddoba maalmood lagu wareegay dabadeed. [31] Raxabtii jidhkeeda ka ganacsan jirtayna rumaysadkeedii aawadiis lamayna halaagmin kuwii caasiyiinta ahaa, maxaa yeelay, basaasyadii ayay nabad ku soo dhawaysay.

[32] Oo ma wax intaa ka badan ayaan odhan karaa? Waayo, wakhtigu igu filan ma haysto, oon kaga sheekeeyo Gidcoon iyo Baaraaq iyo Samsoon iyo Yeftaah iyo Daa'uud iyo Samuu'eel iyo nebiyadiiba. [33] Kuwaasoo rumaysad kaga adkaaday boqortooyooyin oo xaqnimo ku sameeyay oo ballanqaadyo ku helay oo afafka libaaxyada ku awday, [34] Oo xooggii dabka ku demiyay oo seefta afkeed kaga baxsaday oo tabardarridii kaga xoogaystay oo dagaal ku awood batay oo xoogaggii shisheeyaha ku eryay. [35] Dumarna waxay heleen kuwii ka dhintay iyagoo loo sarakiciyay, qaar kalena waa la xanuujiyay ilaa ay ka dhinteen iyagoo aan aqbalin in la badbaadiyo, si ay ku gaadhaan sarakicid ka wanaagsan. [36] Qaar kalena waxaa lagu dhibay majaajulo iyo garaacis iyo weliba ciqaab iyo jeel. [37] Waana la dhagxeeyay, miinshaarna waa lagu kala jeexay, waana la jirrabay, seefna waa lagu gowracay, wayna qaxeen iyagoo qaba harkaha idaha iyo harkaha riyaha oo caydh ah oo la dhibay oo la ciqaabay. [38] Duniduna mayna istaahilin iyaga. Waxayna u qaxeen lama dagaanka iyo buuraha iyo boholaha iyo godadka dhulka. [39] Kuwaas oo dhan inkastoo loo markhaatifuray rumaysadkooda aawadii, mayna helin wixii loo ballanqaaday, [40] Maadaama oo uu Eebbe inoo diyaariyay wax wanaagsan, innaga la'aanteen iyaga kaamil lagama dhigayo.

### Ciise Asaasaha Iyo Dhammeeyaha Rumaysadkeenna

**12** Sidaas daraaddeed, maaddaama oy jiraan markhaatiyaal badan oo sida daruur wayn inoogu wareegsan aynu dhinac iska dhigno culays kasta iyo dembiga sida fudud inoogu dhegaya oo aynu si adkaysi leh ugu orodno tartanka ina hor yaalla, [2] innagoo eegayna Ciise oo ah asaasaha iyo Dhammeeyaha rumaysadkeenna, kaasoo farxaddii hor taallay daraaddeed u adkaystay iskutallaabta, isagoon waxba ka soo qaadin ceebta, oo wuxuu fadhiistay midigta carshiga Eebbe.

## Edbinta

[3] Haddaba ka fikira kii u adkaystay cadaawaddii ay kala hor yimaaddeen dembilayaashu si aynaan u daalin oo ayna nafitiinnu u tabar beelin. [4] Dadaalka aad ku jirtaan si aad dembi isaga ilaalisaan weli maydaan gaadhsiinin heer uu dhiig idinka daato. [5] Waxaad illowdeen waanada idinla hadasha sida wiilal oo kale. Wiilkaygiiyow, ha fududaysanin Rabbiga edbintiisa, Hana niyad jabin markuu ku canaanto. [6] Waayo, kii uu Rabbigu jecelyahay ayuu edbiyaa, Wuuna garaacaa wiil kasta oo uu aqbalo.[283*] [7] Eebbe wuxuu idiinla dhaqmaa sida wiilal oo kale, waayo, waa wiilkee kii uusan aabbihii edbin? [8] Laakiin haddaan laydinku edbin edbinta laga wada qayb galo, haddaba waxaad tihiin garacyo, oo wiilashiisa ma tihin. [9] Oo weliba waxaynu lahayn aabbayaal xagga jidhka ah, oo ina edbiya oo waynu maamuusi jirnay. Miyaynaan intaas in ka badan u hoggaan sami karin Aabbaha arwaaxda iyo nolosha? [10] Waayo, iyagu muddo yar ayay inoo edbiyeen sidii la qumanaatay, laakiin isagu wuxuu inoo edbiyaa si faa'iido leh si aynu uga qayb galno qudduusnimadiisa. [11] Edbintaa wakhtigan xaadirka ah uma eka mid lagu farxo, laakiin waxay u muuqataa mid xanuun badan, balse markaas ka dib waxay kuwii la edbiyay u keentaa midhaha nabadda iyo xaqnimada. [12] Sidaas daraaddeed xoogeeya gacmaha taagta daran iyo jilbaha tabarta yar. [13] Cagihiinnana waddooyin toosan u sameeya si uusan ka naafada ahu u kufin, laakiinse uu u bogsado. [14] Ku dadaala inaad nabad kula noolaataan cid kasta iyo qudduusnimada aan la'aanteed ninna Rabbiga arki doonin. [15] U feejignaada si uusan ninna u gaadhi waayin nimcada Eebbe, waaba intaasoo xidid khadhaadh soo baxaa oo uu idin dhibaa oo ay kuwo badan ku nijaasoobaan, [16] Si uuna idiinku dhex jirin saani ama qof caasi ah sidii Ceesawgii curadnimadiisii siistay wax yar oo cunto ah. [17] Waayo, waad la socotaan markaa ka dib markuu damcay inuu dhaxlo barakada, in loo diiday, in kastoo uu doonay isagoy ilmo ka da'ayso, waayo, ma jirin meel uu ka soo noqdo.

## Boqortooyada Aan Liiqliiqadka Lahayn

[18] Waayo, ma aydaan imanin buurtii aan la taaban karin, ee ololaysay iyo gudcurkii iyo mugdigi iyo duufaankii, [19] Iyo dhawaaqii buunka iyo codkii erayada oo ahaa codkii ay kuwii maqlay Muuse ka baryeen inaan mar dambe lagula hadlin. [20] Waayo, umayna adkaysan karin wixii lagu amray, markii lagu yidhi, Xataa hadduu neef buurta taabto, waa in dhagax lagu dilo. [21] Muuqaalkii cabsida lahaa ilaa oo uu Muuse ka yidhahdo, Aad iyo aad baan u cabsanayaa oo waan gariirayaa.[284*] [22] Laakiin idinku waxaad timaaddeen Buurtii Siyoon iyo magaaladii Eebbaha nool oo ah Quddustii jannada, oo waxaad u timaaddeen guutooyin malaa'igo ah oo isu soo uruuray, [23] Iyo kiniisadda curadyada ee ku qoran jannada iyo Eebbaha ah Xaakinka wax kasta iyo arwaaxda kuwii xaqa ahaa ee kaamilka laga dhigay, [24] Iyo Ciise oo ah dhexdhexaadiyaha axdiga cusub iyo dhiigga taxaliisha ah ee u hadlaya si ka wanaagsan kii Haabiil. [25] Ka digtoonaada inaydaan diidin ka hadlaya; waayo, hadday baxsan waayeen kuwii diiday kii dhulka ku waaniyay, si ka badan innaguna ma baxsan doonno haddaynu ka jeedsanno ka jannada ka hadlaya, [26] Ka codkiisu wakhtigaas gilgilay dhulka, laakiin hadda wuxuu ballanqaaday isagoo leh, Weliba mar kale ayaan gilgili doonaa dhulka, dhulka oo keliyana ma ahee xataa samadana waan gilgili doonaa. [27] Erayga ah, Weliba mar kale macnihiisu waxaa weeye in la baabi'in doono waxyaabihii la gilgilay ee la abuuray, si ay waxyaabihii aan gilgilanin u waaraan.

---

283 Ayuub 5:17 iyo Maahmaahyadii 3:11-12
284 Baxniintii 9:19

[28] Sidaas daraaddeed maadaama oo aynu leenahay boqortooyo aan la gilgili karin, aynu mahadnaqno si aynu Eebbe ugu raalli galino alla ka cabsi iyo cibaado, [29] Waayo, Eebbaheennu waa dab wax baabbi'iya

### Waano

**13** Jacaylka walaalnimadu ha sii jiro. [2] Ha illoobina inaad shisheeyaha marti qaaddaan, waayo, sidaasay qaar malaa'igo u marti qaadeen iyagoo aan ogayn. [3] U xusuusta kuwa xidhan sidii idinkoo iyaga la xidhan iyo kuwa la silciyay sidii idinkoo isku jidh ah. [4] Guurka hala wada maamuuso, oo sariirtuna yaysan nijaasoobin, maxaa yeelay, faasiqiinta iyo kuwa jidhkooda ka ganacsadaba Eebbe wuu xukumi doonaa. [5] Dabeecaddiinnu ha ahaato mid aan lacag jeclayn, oo waxaad haysataan raalli ku ahaada, waayo, isaga qudhiisu wuxuu yidhi, Sinaba kuu illaawi maayo, oo sinaba kuu dayrin maayo.[285*] [6] Sidaas daraaddeed innagoo ku kalsoon waxaynu nidhaahnaa, Rabbigu waa caawiyahayga oo anigu ma cabsanayo, Bal maxay dadku igu samayn karaan?

### Waa In Hoggaamiyayaasha Daacad Loo Ahaado

[7] Xusuusta hoggaamiyayaashiinna idiin sheega erayga Eebbe. Oo u fiirsada hab dhaqankooda, oo iimaankooda ku dayda. [8] Ciise Masiix waa kii shalay iyo maanta iyo weligiiba. [9] Mad-habyo kala duwan oon la garanaynin yayna idinla tagin, waayo, way wanaagsantahay inuu qalbigu nimco ku xoogaysto oo uusan ku xoogaysanin cunto, taasoo kuwii ku dhaqmayba ayna ka faa'iidin. [10] Waxaynu leennahay meel allabari, oo kuwa taambuugga ka adeega ayna amar u lahayn inay wax ka cunaan. [11] Waayo, xoolaha qurbaanka dembiga ah ee uu dhiiggooda wadaadka sare keeno meesha qudduuska ah jidhkooda waxaa lagu gubaa xerada dibaddeeda. [12] Sidaas daraaddeed Ciisena si uu dadka qudduus ugaga dhigo dhiiggiisa wuxuu ku xanuunsaday iridda dibaddeeda. [13] Haddaba aynu isaga ugu tagno xerada dibaddeeda, innagoo xanbaarsan caydii isaga la caayay. [14] Waayo, innagu halkan kuma lihin magaalo sii raagaysa, laakiin waxaynu doonaynaa mid iman doonta. [15] Haddaba xaggiisa aynu had iyo jeer Eebbe ugu bixinno allabariga ammaanta, kaasoo ah dibnaha magiciisa qirta midhahooda.
[16] Laakiinse inaad wax wanaagsan fashaan oo wax wada wadaagtaan ha illoobina; waayo, allabaryada noocaas ah Eebbe aad buu ugu farxaa. [17] Hoggaamiyayaashiinna addeeca oo ka dambeeya, waayo, iyagu waxay ilaaliyaan naftiinna sidii iyagoo jawaab ka bixin doona, si ay hawshooda ugu gutaan si farxad leh oo aan murugo ku jirin, waayo, inay murugoodaan faa'iido idiinkuma jirto.

### Farriin Iyo Duco

[18] Noo soo duceeya; waayo, waxaannu hubnaa inay niyaddayadu nadiif tahay, annagoo doonayna inaannu wax kasta si habboon ugu soconno. [19] Oo aad baan idiinka codsanaynaa inaad tan samaysaan, si durba laygu soo kiin celiyo. [20] Haddaba Eebbaha nabadda oo ka soo sarakiciyay kuwii dhintay Rabbigeenna Ciise oo ah Adhijirka wayn ee idaha, oo ku soo celiyay dhiigga axdiga weligiis ah, [21] kaamil ha idinkaga dhigo wax kasta oo wanaagsan si aad u

285 Sharciga Kunoqoshadiisa 31:6-8

samaysaan doonistiisa oo uu wax isaga ka farxiya innaga dhex sameeyo Ciise Masiix, ka ammaanta leh weligiis iyo weligiis. Aamiin.

22 Walaallayaal, waxaan idinka codsanayaa inaad u dulqaadataan hadalka waanada ah,
waayo, waxaan idiin soo qoray dhawr eray. 23 Ogaada in walaalkeen Timoteyos la sii daayay,
kaasoo hadduu degdeg u yimaado, aan idin arki doonno. 24 Igu salaama
hoggaamiyayaashiinna oo dhan, iyo qudduusiinta oo dhan. Kuwa talyaaniga ahu way idin soo
salaamayaan. 25 Nimco ha idinla jirto kulligiin. Aamiin.

# WARQADDII RASUUL YACQUUB

## Rumaysadka Iyo Is-Hoosaysiinta

**1** Yacquub, oo ah adeegihii Eebbe iyo Sayid Ciise Masiix, wuxuu salaan gaadhsiinayaa laba
iyo tobanka qabiilo ee kala firidhsan. 2 Walaallayaal, markaad jirrabaado kala duwan la
kulantaan wax lagu farxo ku tiriya, 3 idinkoo og tijaabinta rumaysadkiinnu inay dulqaad keento.
4 Dulqaadkuna ha idinku dhammays tirmo si camalkiinnu uu kaamil u ahaado, oo ayna waxba
idinka dhinmin. 5 Laakiin haddii uu midkiin xigmad u baahanyahay, ha ka baryo Eebbe, ka
dhammaanba si deeqsinimo leh u siiya isagoo aan canaanan, oo waa la siin doonaa. 6 Laakiin
rumaysad ha ku baryo, isagoo aan shakiyaynin, waayo, kii shakiyaa wuxuu la mid yahay hirka
badda ee ay dabayshu kiciso oy rogrogto. 7 Kaasu yuusan u malaynin inuu Rabbiga wax ka
heli doono. 8 Waana nin fikirkiisu kala qaybsanyahay oo ayna sugnayn go'aamadiisa oo dhan.
9 Walaalkii meel hoose jooga ha ku faano in la sarraysiinayo.[286*] 10 Kii hanti lehna ha ku faano
inuu is-hoosaysiiyo, waayo, wuxuu u idlaan doonaa sida ubaxa cawska. 11 Qorraxda oo kulul
ayaa soo baxda, wayna engejisaa cawska, ubaxiisuna wuu daataa, quruxda midabkiisuna way
baaba'daa' sidaasoo kale ayuu qofka hodanka ahu u baabi' doonaa isagoo mashquulsan.

## Waa In Jirrabaadda Loo Adkaysto

12 Waxaa barakaysan ninka jirrabaadda u adkaysta, waayo, markuu jirrabaadda u adkaysto,
wuxuu heli doonaa taajka nolosha ee uu Eebbe u ballanqaaday kuwa isaga jecel. 13 Qofna
yuusan odhanin markii la jirrabo, Xagga Eebbe ayaa layga jirrabay. Waayo, Eebbe laguma
jirrabo shar, isaguna midna ma jirrabo. 14 Mid kasta waxaa jirraba damaciisa sharka ah isagoo
la jiidanayo oo la fidnaynayo. 15 Ka dibna damacu markuu uuraysto wuxuu dhalaa dembi,
dembiguna markuu kobco wuxuu keenaa dhimasho. 16 Yaan laydin khiyaanin, walaalahayga
aan jeclahayow. 17 Hadiyad kasta oo wanaagsan iyo hibo kasta oo kaamil ah kor bay ka
timaaddaa iyadoo ka soo degaysa xagga Aabbaha nuurarka kaasoo aan lahayn is badbadal
ama sida hoosku isu badbadala. 18 Kaasoo sida ay doonistiisu tahay inagu dhalay hadalka
runta ah, si aynu u noqonno midhaha ugu horreeya ee uunkiisa.

## Cibaadada Runta Ah

19 Sidaa darteed, walaalahayga aan jeclahayow; nin walba degdeg wax ha u dhagaysto, oo si
dagan ha u hadlo, cadhada yuusan ku dagdagin, 20 Waayo, banii aadanka cadhadiisu ma
keento xaqnimada Eebbe.
21 Sidaas daraaddeed iska fogeeya xumaan walba iyo sharka, oo si qabow ku qaata hadalka
laydinku beeray, kaasoo naftiinna badbaadin kara. 22 Ahaada kuwo hadalka yeela, oo ha
ahaanina kuwa maqla oo keliya oo naftooda khiyaana. 23 Waayo, hadduu mid yahay ka
hadalka maqla oo keliya, oo uusan ahayn mid ku dhaqma, wuxuu la mid yahay nin sida
wejigiisa loo abuuray muraayad ku eegay. 24 Waayo, intuu is eegay ayuu iska tagay, oo isla
markiiba wuu illoobay siduu u ekaa. 25 Laakiin kii eega sharciga kaamilka iyo xorriyadda ah oo
ku dhaqma, kaasoon aan ahayn midka maqla ee illooba laakiin mid ku camalfala, kaasu wuu

286 Walaalkii meel hoose bulshada kaga jira xag dhaqaale ama xag bulsho ha ku faano inuu Eebbe agtiisa sharaf ku leeyahay.

ku barakoobi doonaa addeeciddiisa. [26] Hadduu mid isu maleeyo inuu diin leeyahay, oo uusan
afkiisa xakamaynin, laakiin uu qalbigiisa khiyaano, kaas diintiisu faa'iido ma laha. [27] Diinta
daahirka ku ah Eebbaha Aabbaha ah hortiisa waa in la xannaaneeyo agoonta iyo carmallada
markay dhib ku jiraan, iyo in layska dhawro fisqiga dunida yaalla.

### Ka Digidda Kala-Eexashada

**2** Walaallayaal, cidna ha u kala eexanina maadaama ood rumaysantihiin Rabbigeenna Ciise
Masiix ka ammaanta leh. [2] Maxaa yeelay hadduu nin fargashi dahab ah iyo dhar qurux badan
qabaa shirkiinna soo galo, oo uu sidoo kale mid kale oo miskiin ah oo dhar uskag leh qabaa
soo galo, [3] Oo aad xurmaysaan ka dharka quruxda badan qaba oo aad ku tidhaahdaan, Adigu
kaalay oo halkan wanaagsan fadhiiso, oo aad ku tidhaahdaan ka miskiinka ahna, Adigu
xaggaas istaag ama halkan cagahayga ag fadhiiso, [4] Miyaydaan kala soocin oo miyaydaan
noqonin kuwo fikrado shar leh wax ku xukuma? [5] I dhegaysta, walaalahayga aan jeclahayow.
Miyuusan Eebbe u dooranin kuwa dunida masaakiinta ku ah inay ahaadaan kuwo hodan ku ah
rumaysadka oo dhaxla boqortooyada uu u ballanqaaday kuwa isaga jecel? [6] Laakiinse idinku
waad sharaf tirtaan miskiinka. Maal qabeennadu miyayna idin dulmiyin oo miyayna idiin jiidin
maxkamadda? [7] Miyayna caayin magaca wanaagsan ee laydiinku yeedhay? [8] Haddaba
haddaad oofisaan qodobka sharciga boqorka u ah siduu Kitaabku leeyahay, Waa inaad
deriskaaga u jeclaataa sida naftaada, si wanaagsan baad yeeshaan. [9] Laakiin haddaad dadka
u kala eexataan waad dembaabtaan, oo sharcigu wuu idinku caddeeyay inaad tihiin kuwo
xadgudbay. [10] Ku alla kii sharciga oo dhan ku dhaqma oo qodob kaliya ku gafa, dhammaan
wuu ku wada dambaabaa. [11] Waayo, kii yidhi, Ha sinaysanin wuxuu kaloo yidhi, Cidna ha dilin.
Haddaadan sinaysanin laakiin aad qof disho, waxaad noqotay mid sharciga ku xadgudbay.
[12] Haddaba u hadla sidii kuwo shareecada xorriyadda lagu xukumi doono. [13] Xukun aan
naxariis lahayn ayaa ku dhici doona kii aan dadka u naxariisanin, naxariistu way ka gacan
sarraysaa xukunka.

### Rumaysadka Iyo Camalfalka

[14] Maxay taraysaa, walaallayaal, hadduu nin yidhaahdo, Rumaysad baan leeyahay, laakiinse
uusan camalfalin? Rumaysadku ma badbaadin karaa isaga? [15] Walaal wiil iyo gabadh midkuu
doonaba ha noqdee hadday arradanyihiin oo uusan maalintaas biil haysan, [16] Oo uu midkiin ku
yidhaahdo iyaga, Nabad gal, oo dhaxantu ha kaa duusho oo dherga idinkoon waliba siinin
waxa jidhku u baahanyahay, maxay taraysaa? [17] Haddaba sidaas oo kale rumaysadku
hadduusan camalfal lahayn kali ahaantiisu waa meyd. [18] Laakiin qofbaa odhan kara, Adigu
waxaad leedahay rumaysad, anna waxaan leeyahay camal suuban. I tus rumaysadkaaga aan
cibaadada lahayn, anna rumaysadkayga camal suuban ayaan kugu tusiye. [19] Waad
rumaysantahay in Eebbe yahay mid kaliya. Taas waad ku saxsantahay. Xataa shayaaddiintuba
sidaas way rumaysanyihiin, wayna gariiraan. [20] Doqonow, ma doonaysaa inaad garato in
rumaysadka aan camalka lahaynu uusan waxba tarin? [21] Miyaan awowgeen Ibraahim camal
lagu caddaynin inuu xaq yahay markuu wiilkiisii Isxaaq meeshii allabariga ku bixiyay? [22] Waad
arkaysaa in rumaysadka ku dhaqnkiisu la socdo, oo rumaysadku kaamil ku noqday ku
camalfalkiisa. [23] Waxaa dhab noqday aayadda leh, Ibraahimba Eebbe ayuu rumeeyay oo

waxaa isaga lagu tiriyay mid xaq ah oo waxaa loogu yeedhay saaxiibkii Eebbe.[287*] [24] Waxaad arkaysaan in nin camalkiisa lagu muujiyo inuu xaq yahay oo aan lagu muujinin rumaysadka oo kaliya. [25] Sidoo kale miyaan Raxabtii jidhkeeda ka ganacsan jirtay camalfalkeeda lagu caddaynin inay xaq tahay markay soo dhawaysay basaasyadii oo ay jid kale marisay? [26] Sida jidhka aan ruux lahayn uu meyd u yahay, sidaas oo kale ayuu rumaysad aan camalfal lahaynna meyd u yahay.

## Carrabka Waa In La Xakameeya

**3** Walaallayaal, in badan oo idinka mid ah inay macallimiin noqdaan ma aha, waayo, waxaad ogtihiin inaynu dadka ka xukun adagnahay. [2] Maxaa yeelay, dhammaanteen wax badan baynu ku gafnaa. Hadduu nin ku gafi waayo hadalka, kaasu waa nin kaamil ah, wuuna xakamayn karaa jidhka oo dhan. [3] Haddaba haddaynu fardaha afkooda xakame gelinno si ay inoo addeecaan, jidhkooda oo dhanna waynu jahaynnaa. [4] Bal eega, xataa maraakiibta, in kastoy waawayn yihiin, oy dabaylo xoog badan kaxeeyaan, haddana shukaan aad u yar ayaa loogu jaheeyaa meeshii kabtanka wada uu doonayo. [5] Sidaas oo kalena carrabku waa qayb yar, waxyaabo waawayn ayuuna qabtaa. Bal eega dab yar intuu kayn wayn ololiyo. [6] Carrabkuna waa dab, waana dunida xaqdarrida. Carrabku wuxuu ku dhex jiraa xubnaheenna, waana ka wasakheeya jidhka oo dhan ee ololiya habsami u socodka dabiiciga ah, jahannama ayaana isagaa ololisa. [7] Nooc kasta oo dugaag iyo haad iyo waxa bogga ku gurguurta iyo waxa badda ku jiraba waa la rabbeeyaa, oo waxaa lagu rabbeeyaa dabeecadda dadka. [8] Laakiin ninna ma rabbayn karo carrabka oo waa shar aan la xakamayn karin oo waxaa ka buuxa sunta wax disha. [9] Isla isagaynu ku ammaannaa Rabbiga iyo Aabbaha, oo isla isagaynu ku habaarnaa dadka uu Eebbe u ekaantiisa ka abuuray. [10] Isku af baa waxaa ka soo baxa ammaan iyo habaar. Walaallaal, waxyaabahanu waa inayna sidaa noqonin. [11] Ishu miyay meel kaliya ka soo wada daysaa biyo macaan iyo kuwo khadhaadh? [12] Walaallaal, geed berde ahu miyuu dhali karaa saytuun, ama geed canab ahu miyuu dhali karaa midho berde ah? Sidaas oo kalena biyo dhanaan macaan ma noqon karaan.

## Xigmadda Beenta Ah Iyo Tan Runta Ah

[13] Kumaa dhexdiinna xigmad ku leh oo indheer garad ah? Camalkiisa suuban ha ku muujiyo dabeecaddiisa wanaagsan, isagoo leh qabowga xigmadda. [14] Laakiin haddaad xaasidnimo khadhaadh iyo kala qaybsanaan ku haysataan quluubtiinna, ha faanina, runtana been ha ka sheegina. [15] Xigmaddaasu ma aha mid kor ka soo degtay, laakiin waa ta dhulka iyo nafta iyo shayaaddiinta. [16] Waayo, meeshay xaasidnimo iyo kala qaybsanaan ka jiraan, meeshaas waxaa ka jira nadaam darro iyo wax kasta oo shar ah. [17] Laakiin xigmadda kor ka timaaddaa horta waa daahir, ka dibna waa nabad iyo qabow iyo mid si dhib yar loola heshiiyo, oo waxaa ka buuxa naxariis iyo midho wanaagsan, mana laha eex ama labawejiilanimo. [18] Midhaha xaqnimadana waxaa nabad ku beeraa kuwa nabadda ka shaqeeya.

287 Bilowgii 15:6

## Ka-Digidda Saaxiibnimada Dunida

**4** Maxaa keenay Dagaallada iyo muranka idinka dhex oogan? Miyayna ka imanin
damacyadiinna ku dhex dagaallamaya xubnihiinna? 2 Waad damacdaan, mana heshaan,
markaasaad wax dishaan ood wax xaasiddaan, mana heli kartaan, waayo, ma wayddiisataan.
3 Waad wayddiisataan, mana heshaan, waayo, si xun baad u wayddiisataan si aad ugu
bixisaan damacyadiinna aawadood. 4 Kuwiinna sinada caadaystayow, miyaydaan garanaynin
in dunida oo lala saaxiibo ay Eebbe la col tahay? Sidaas daraaddeed mid kasta oo doonaya
inuu dunida la saaxiibo, Eebbe ayuu la colloobaa. 5 Mise waxaad u malaynaysaan in Kitaabku
macna la'aan ku hadlo, Ruuxa uu ka dhigay inuu ina dhex joogo ayaa aad iyo aad inoo jecel
isagoo inoo masayra? 6 Laakiin isagu wuxuu bixiyaa nimco badan oo badan. Haddaba
Kitaabku wuxuu leeyahay, Eebbe wuu hor istaagi doonaa kuwa kibra, laakiin kuwa is-
hoosaysiiya ayuu nimco siiyaa.[288*] 7 Haddaba Eebbe addeeca, Iblayskana hor istaaga, wuu
idinka carari doonaaye. 8 U soo dhawaada Eebbe, isaguna wuu idiin soo dhawaan doonaa.
Dembiileyaal yahow, gacmihiinna nadiifiya. Labawejiilayaal yahow, quluubtiinna daahiriya.
9 Dhibtooda oo baroorta oo ooya. Qosolkiinnu oohin ha isu badalo, farxaddiinnuna murugo.
10 Is-hoosaysiiya Rabbiga hortiisa, isna wuu idin sarraysiin doonaaye. 11 Xumaan ha iska
sheegina, walaallayaal. Kii xumaan walaalkii ka sheega ama walaalkii xukuma, sharciga ayuu
xumaan ka sheegaa, sharcigana wuu xukumaa. Haddaad sharciga xukunto uma
haggaansamid sharciga, laakiin waxaad tahay mid isaga xukuma. 12 Waa mid keliya ka
sharciga soo dajiyay oo wax xukumaa, oo waa kan kara inuu wax badbaadiyo oo uu wax
baab'iyo. Laakiin adigu maxaad tahay, ka deriskiisa xukumow?

## Faanka Bilaashka Ah

13 Bal kaalaya hadda, kuwiinnan yidhaahda, Maanta ama barri waxaannu tegi doonaa magaala
heblaayo, oo halkaas ayaannu sannad joogi doonnaa, waannu ka ganacsan doonnaa oo
faa'iido ayaannu ka heli doonnaa 14 Idinka oon garanaynin waxa barri dhici doona. Noloshiinnu
maxay tahay? Waayo, waxaad tihiin dhado in yar muuqata ka dibna la waayo. 15 Waa inaad
tidhaahdaan, Hadduu Rabbigu doonayo, waannu noolaan doonnaa oo waxaannu samayn
doonnaa waxan ama waxaas. 16 Laakiin idinku hadda waxaad ku faanaysaan isla
waynaantiinna. Faanka noocaas ah oo dhan waa shar. 17 Haddaba kii garanaya inuu wax
wanaagsan sameeyo oon samaynin, wuu dembaabaa.

## Ka Digidda Dulmiga Maal Qabeennada

**5** Bal kaalaya hadda, kuwiinnan maal qabeennada ahow, ooya oo ka baroorta dhibaatooyinka
idinku soo degaya. 2 Hantidiinnii way baaba'day, dharkiinniina aboor baa cunay. 3 Dahabkiinnii
iyo lacagtiinnuba way mirdheen, miridhkooduna markhaati buu idinku noqon doonaa, wuxuuna
jidhkiinna u cuni doonaa sida dabka oo kale. Maal baad u kaydsataan maalmaha ugu
dambeeya. 4 Shaqaalihii beerihiinna idiin gooyay mushaharkoodii aad dulmiga uga reebateen
way dhawaaqayaan, qaylada kuwii beeraha gooyayna waxay galeen dhegaha Rabbiga
Ciidamada. 5 Dhulkaad ku barwaaqawdeen ood ku raaxaysateen, oo quluubtiinna waxaad u
naaxiseen maalinta gowracidda. 6 Waad xukunteen oo waad disheen kii xaqa ah. Isaguna isma
kiin hor taago.

---

288 Maahmaahyadii 3:34

## Waano Ku Saabsan Dulqaadashada

7 Haddaba, walaallayaal, dulqaata ilaa iyo imaatinka Rabbiga. Bal ogaada, ninka beeralayda
ahu wuxuu sugaa midhaha qiimaha leh ee dhulka, isagoo u dulqaata ilaa uu helo roobka hore
iyo ka dambaba. 8 Idinkuna dulqaata, quluubtiinnana xoogeeya, waayo, imaatinka Rabbigu wuu
dhawyahay. 9 Ha iska cabanina, walaallayaal, yaan laydin xukumine. Bal ogaada, xaakinku
albaabbada hortooduu taaganyahaye. 10 Walaallayaal, u qaata tusaale dhibaatadii iyo
dulqaadkii nebiyadii ku hadlay magaca Rabbiga. 11 Bal ogaada! Waxaynu ugu yeedhnaa kuwo
barakaysan kuwii adkaystay. Waad maqasheen adkaysigii Ayuub oo waad aragteen
dhammaadkii qasdiga Rabbiga, waayo, Rabbigu wuu raxmad badanyahay, naxariisna wuu
leeyahay. 12 Laakiin wax walba ka hor, walaallayaal, ha dhaaranina; ha ku dhaaranina jannada,
ama dhulka, ama dhaar kale; haahdiinnu haah ha ahaato, mayadiinnuna maya ha ahaato,
yaydaan ku dhicin xukun hoostiis.

## Xoogga Ducada

13 Mid dhibaataysanu ma idinku dhex jiraa? Ha ducaysto. Mid faraxsanu ma jiraa? Qasiido Ha
ku gabyo. 14 Mid bukaa ma idinku dhex jiraa? Ha u yeedho odayaasha kiniisadda, oo iyagu ha
u duceeyeen, oo saliid ha ku mariyeen magaca Rabbiga. 15 Ducadii rumaysad lahu way bogsiin
doontaa kii buka, oo Rabbigu wuu sarakicin doonaa, oo hadduu dembaabay waa loo
dembidhaafi doonaa. 16 Midkiinba midka kale dembiyadiisa ha u qirto oo ha u duceeyo si aad u
bogsataan. Nin xaq ah baryadiisu wax badan bay qabataa. 17 Eliyaasba wuxuu ahaa nin caadi
ah oo innagoo kale ah. Eebbe ayuu aad u baryay si uusan roob u di'in, roobna saddex
sannadood iyo lix bilood dhulka kuma di'in. 18 Oo mar kale ayuu Eebbe baryay, oo cirku roob
buu soo daayay, dhulkuna midhihiisii ayuu soo saaray. 19 Walaallayaal, hadduu midkiin runta
gees maro, oo mid soo celiyo isaga, 20 Ha ogaado in kii dembiile jidka khaldan ee uu ku socdo
ka soo celiya inuu dembiilaha naftiisa dhimasho ka badbaadin doono oo uu dembiyo badan
asturi doono.

# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS

### Salaan

**1** Ka socota Butros oo ah rasuulkii Ciise Masiix,
Ku sosocota qurba joogta ku kala firidhsan Bontos iyo Galatiya iyo Kabbadokiya iyo Aasiya
iyo Bituniya, [2] Kuwaasoo lagu doortay aqoontii uu Eebbaha Aabbaha ahu hore u sii ogaa, oo
qudduus lagaga dhigay Ruuxa, si ay u addeecaan Ciise Masiix oo dhiiggiisa lagu rusheeyo.
Nimco iyo nabad badan ha idinla jireen.

### Rajada Masiixiyiinta Iyo Badbaadadooda

[3] Ammaanu ha u ahaato Eebbaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Naxariistiisa badan
aawadeed wuxuu inaga dhigay kuwo mar kale dib ugu dhasha rajo nool oo aynu ku helnay
sarakiciddii Ciise Masiix ka soo sarakacay kuwii dhintay, [4] Oo inagu siiyay dhaxal aan
dhammaanaynin oo aan nijaasoobaynin oo aan baabba'aynin oo jannada laydiinku kaydiyay.
[5] Kuwiinna lagu ilaaliyay xoogga Eebbe iyo rumaysadka ilaa iyo inta ay ka imanayso
badbaadada diyaarka u ah in wakhtiga ugu dambaysta ah la muujiyo. [6] Taas ayaad ku
faraxsantihiin in kasta oy hadda waajib tahay inaad wakhti yar ku murugootaan jirrabaado
badan oo kala duwan. [7] Si loo tijaabiyo rumaysadkiinna oo aad uga sii qaalisan dahabka oo ah
wax baabba'a in kastoo dab lagu tijaabiyo. Markaasaa laga helayaa mahad iyo ammaan iyo
sharaf markii Ciise Masiix la muujiyo. [8] Isaga maydaan arkin, balse waad jeceshihiin hadda in
kastoo aydaan arkin oo waad rumaysantihiin oo waxaad ku faraxdaan farxad aan la qiyaasi
karin oo ammaan leh. [9] Waxaadna helaysaan natiijada rumaysadkiinna oo ah badbaadada
naftiinna. [10] Taasoo ay nebiyadii sii sheegay nimcada idiin imanaysa baadheen oy aad u
raadiyeen arrinta badbaadadaas. [11] Waxayna baadheen qaabkii iyo wakhtigii uu Ruuxa Masiixa
ee iyaga ku jiray u tilmaamay markuu horay uga sii markhaatifuray sida uu Masiixu u
xanuunsan doono iyo ammaanta taas ka daba iman doonta. [12] Oo waxaa iyaga loo muujiyay
inayna taasu iyaga khusaynin, laakiinse idinka idin khusayso, taaso ay hadda idin soo
gaadhsiiyeen kuwii Injiilka idinku wacdiyay iyagoo uu ku jiro Ruuxa Qudduuska ah ee samada
laga soo diray, arrintaasoy malaa'iguhu jecelaan lahaayeen inay arkaan.

### Waa in Si Qudduus Ah Loo Noolaado

[13] Haddaba isku giijiya guntiga maankiinna oo feejignaada oo aad u rajeeya nimcada laydiin
keeni doono markii Ciise Masiix la muujiyo. [14] Idinkoo ah carruur addeecid leh, hana raacina
damacyadiinnii hore ee aad ku dhaqmi jirteen wakhtigii jaahilnimada, [15] Laakiinse sida uu ka
idiin yeedhay qudduuska u yahay, idinkuna sidaas oo kale hab dhaqankiinna oo dhan qudduus
ha ahaado, [16] Maxaa yeelay, waxaa qoran, Idinku waa inaad qudduus ahaataan, waayo,
aniguba qudduus baan ahay.[289*] [17] Haddaad Aabbe ugu yeedhaan ka nin walbaba u xukuma si
aan eex lahayn iyo sida camalkiisu yahay, cabsida Eebbe isku dhaafiya wakhtiga aad qariibka
tihiin. [18] Idinkoo og inaan dabeecaddiinnii bilaashka ahaa ee aad awowayaashiin ka
dhaxasheen laydinkaga soo furanin waxyaabo baabba'aya sida lacagta iyo dahabka,
[19] Laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa ee Masiix oo ah sidii wan yar oo

289 Laawiyiintii 11:44-45

aan wax iin ah iyo ceed toona lahayn. [20] Isaga horay baa loo yaqaannay intaan dunida la aasaasin, laakiinse wakhtida ugu dambeeya ayaa loo muujiyay idinka aawadiin, [21] Kaasoo aad isaga ku rumayseen Eebbaha isaga ka soo sarakiciyay kuwii dhintay oo ammaanay isaga, si rumaysadkiinna iyo rajadiinnuba ay Eebbe ugu xidhnaadaan. [22] Sidaad naftiinna u daahiriseen markaad addeecdeen runta xagga jacaylka walaalnimada oo aan iska yeelyeel ahayn, aad iyo aad jacayl qalbi ah isu jeclaada. [23] Idinka oon mar kale ku dhalanin abuur baabba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baabba'ayn oo ah erayga Eebbaha nool ee daa'imka ah.
[24] Waayo, Wax kasta oo jiidh lahu waa sida caws oo kale, Oo quruxdiisa oo dhan waa sida ubaxa duurka oo kale, Haddaba cawsku wuu engegaa, ubaxuna wuu dhacaa, [25] Laakiinse erayga Rabbigu weligiiba wuu waaraa. Haddaba kaasu waa eraygii warka wanaagsan ee laydinku wacdiyay.

### Dhagaxa Nool Iyo Ummadda Qudduuska Ah

**2** Haddaba sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan, iyo khiyaano oo dhan iyo labawejiilanimo iyo hinaase iyo af lagaaddo oo dhan, [2] Oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah, si aad ugu kortaan xagga badbaadada, [3] Haddii aad dhadhamiseen in Rabbigu wanaag badanyahay, [4] Kaasoo aad u imanaysaan oo ah dhagax nool oo ay dadku diideen, laakiin xagga Eebbe laga doortay oo qaali ah. [5] Idinkuna sida dhagaxyo nool ayaa waxaa laydinka dhisayaa guri ruuxi ah si aad u noqotaan wadaaddo qudduus ah oo aad xagga ruuxa uga bixisaan allabariyo uu Eebbe ku aqbalo Ciise Masiix.
[6] Maxaa yeelay, waxaa Kitaabku leeyahay, Bal eega, waxaan Siyoon dhex dhigayaa dhagax tiir dhexaadka ah oo wayn oo la doortay oo qaali ah Oo kii isaga rumaysta ma ceeboobi doono.[290*]
[7] Haddaba sidaas daraaddeed waxaa sharaf leh idinkoo ah kuwa rumaysan, laakiinse xagga kuwa aan rumaysnayn, Dhagaxii kuwa wax dhisa ay diideen, Wuxuu noqday tiir dhexaadka
[8] Iyo Dhagax lagu turunturoodo oo ah dhagax lagu kufo, Waayo, waxay ku turunturoodaan ereyga, maxaa yeelay, ma addeecsana; taas oo ah sababta loo xugmay.[291*] [9] Laakiinse idinku waxaad tihiin jinsi la doortay iyo wadaaddada boqorka iyo ummad qudduus ah iyo dad Eebbe iska leeyahay, si aad u ogaysiisaan wanaagga ka gudcurka idiinka yeedhay ee idiinku yeedhay xagga nuurkiisa yaabka leh. [10] Idinku waagii hore dad maydaan ahayn, laakiinse hadda waxaad tihiin dadkii Eebbe, idinku markii hore naxariis maydaan helin, laakiinse hadda naxariis baad hesheen. [11] kuwiinna la jecelyahayow, waxaan idinka baryayaa idinkoo ah sidii qariib iyo dad musaafir ah, inaad ka fogaataan damacyada jidhka ee nafta la dagaallama. [12] Ummadaha dhexdooda dabeecad wanaagsan ku dhaqma, si meeshii ay wax xun idinkaga sheegi lahaayeen sidii idinkoo ah kuwo xumaan falayaal ah ay camalkiinna wanaagsan ee ay arkaan Eebbe ugu ammaanaan maalinta booqashada.

### Amarka Dawladda Waa In Loo Hoggaansamo

[13] Rabbiga daraaddiis u addeeca maamul kasta oy dadku dhisteen, ha ahaado boqorka ka sarreeya dadka oo dhan, [14] Ama taliyayaasha uu isagu u xilsaaray inay ka aargutaan kuwa xumaanta sameeya oo ay ammaanaan kuwa wanaagga fala. [15] Waayo, Eebbe doonistiisu waxay tahay inaad wanaag falidda ku aamusiisaan jaahilnimada nacasyada, [16] idinkoo xor ah

290 Ishacyaah 28:16
291 Sabuur 118:22

oo aan xorriyaddiinna u adeegsanaynin sida jubbad aad xumaanta ku qarisaan, laakiinse sidii
idinkoo ah adeegayaashii Eebbe. 17 Dadka oo dhan maamuusa, walaalahana jeclaada,
Eebbana ka cabsada, oo boqorka ciseeya.

## Adeegidda Macnaheeda

18 Shaqaalahow, ka cabsada oo ka dambeeya madaxdiinna, mana aha kuwa wanaagsan ee
idiin roon oo keliya, laakiinse xataa kuwa nacabka ah. 19 Waayo, tanu waa wax loo bogo
hadduu qof niyadda Eebbe dartiis ugu adkaysto dhibaatooyinka, isagoo xaqdarro ku
xanuunsanaya. 20 Markii aad dembaabtaan oo laydin garaaco, haddii aad u dulqaadataan,
maxay ammaan leedahay? Laakiinse markaad wanaag fashaan oo aad xanuunsataan, haddii
aad u dulqaadataan, taasu waa wax Eebbe u bogo. 21 Waayo, taasu waa wixii laydiinku
yeedhay, maxaa yeelay, Masiixa ayaa idiin xanuunsaday, oo wuxuu idiinka tagay tusaale si
aad tallaabooyinkiisa u raacdaan. 22 Isagu ma uusan dembaabin, khiyaanana afkiisa lagama
helin. 23 Oo isagu markii la caayay, dadkii caayay cay uma uu celinin. Markuu xanuunsadayna
ninna ma uusan u hanjabin, laakiinse wuxuu isu dhiibay ka xaqnimada wax ku xukuma. 24 Oo
isagu dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii geedka saarnaa, si innagoo dembi kala
dhimannay aynu xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku bogsateen dildillaacii garaaciddiisa.
25 Waayo, waxaad u habowdeen sida ido oo kale, laakiinse hadda waxaad u soo noqoteen
Adhijirka iyo Hoggaamiyaha naftiinna.

## Nimanka Iyo Naagahooda

**3** Sidaas oo kalena, dumarkow, nimankiinna ka dambeeya si xataa hadday kuwa aan erayga
addeecin yihiin ay erayga la'aantii ugu soo hanuunaan dabeecadda dumarkooda, 2 Markay
arkaan dabeecaddiinna daahirka ah ee alla ka cabsiga leh. 3 Isqurxintiinnu yayna ahaanin ta
dibadda ee ah iyo dahab layska lulo ama dhar lagu xarragoodo, 4 laakiinse ha ahaato
shakhsiyadda qalbiga ku qarsoon, taasoo ah quruxda aan baabba'ayn ee ah shakhsiyadda
qabow ee aamusan, taasoo Eebbe hortiisa qiimo badan ku leh. 5 Waayo, sidaasoo kale ayay
waagii hore dumarkii qudduuska ahaa ee Eebbe wax ka rajayn jiray isu qurxin jireen, iyagoo
nimankooda ka dambeeya. 6 Saarahba sidaasoo kale ayay Ibraahim u addeeci jirtay oo ay ugu
yeedhi jirtay, Sayidow, marka idinkuna haddaad wanaag samaysaan oo aydaan waxba ka
cabsanin waxaad tihiin carruurteeda. 7 Nimankow, idinkuna sidoo kale dumarkiinna isfahan kula
dhaqma sidii iyagoo ah weel tabardaran oo iyaga maamuusa sida kuwa idinla dhaxla nimcada
nolosha, si aan salaaddiin loo aqbali waayin.

## Xaqnimada Aawadeed Oo Loo Xanuunsado

8 Ugu dambaysta, waxaan idinku leeyahay, Kulligiin isku fikir ahaada, oo isu danqada oo sidii
walaalo isu jeclaada oo isu naxariista oo is-hoosaysiiya. 9 Shar ha ugu abaal gudina shar, af
lagaadana af lagaaddo, laakiinse duco kaga jawaaba, maxaa yeelay, sidaas aawadeed waxaa
laydiinku yeedhay inaad barako dhaxashaan, waayo, 10 Kii doonaya inuu nolol jeclaado, Oo uu
arko maalmo wanaagsan, Carrabkiisa shar ha ka ilaaliyo, dibnihiisuna yayna khiyaano ku
hadlin. 11 Oo ha ka leexdo shar oo wanaag ha sameeyo, Nabad ha doono oo ha raadiyo,
12 Waayo, Rabbiga indhihiisu waxay eegaan kuwa xaqa ah, Dhegihiisuna waxay u furanyihiin
baryadooda, Laakiinse wajiga Rabbigu wuu ka soo hor jeedaa kuwa sharka sameeya.

[13] Haddaad waxa wanaagsan ku dadaashaan, bal yaa wax idin yeeli doona? [14] Laakiinse xaqnimada darteed haddaad u xanuunsataan, waad barakaysantihiin. Haddaba ha ka cabsanina caga juglayntooda, hana welwelina. [15] Rabbiga Masiixa ah quluubtiinna qudduus kaga dhiga oo mar kasta diyaar u ahaada inaad u jawaabtaan cid alla ciddii wax idinka wayddiisa sababtan rajada aad leedihiin, laakiinse si dagan oo xurmo leh ugu jawaaba, [16] Idinkoo niyad wanaagsan leh, si markii xumaan laydinka sheego ay u ceeboobaan kuwa dhaleeceeya hab dhaqankiinna wanaagsan ee xagga Masiixa ah. [17] Waayo, waxaa wanaagsan inaad wanaag falidda u xanuunsataan hadduu Eebbe ogolaado intaad u xanuunsan lahaydeen shar falidda. [18] Maxaa yeelay, Masiixuba mar ayuu u xanuunsaday dembiyada. Isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood si uu inoogu keeno Eebbe. Xagga jidhka waa laga dilay, laakiinse xagga ruuxa ayaa laga nooleeyay. [19] Ruuxiyan ayuu u tagay oo wuxuu wacdiyay arwaaxdii xabsiga ku jiray, [20] kuwaasoo waagii hore caasiyiin ahaa, markuu Eebbe si dulqaad u sugayay ilaa iyo maalmihii Nuux ee la diyaarinayay doonnida, taasoo ay biyihii kaga badbaadeen dhawr qof oo ah siddeed qof oo keliya. [21] Biyahaasoo tusaale u ahaa biya galinta hadda laydinku biyo galiyay sarakicidda Ciise Masiix, taasoon ahayn jidhka oo wasakhda laga maydho, laakiinse ah jawaab ka timaadda niyad wanaagsan oo ku aaddan sarakicidda Ciise Masiix. [22] Kaasoo jannada aaday oo jooga gacanta midigta ee Eebbe, oo malaa'igaha iyo maamullada iyo kuwa xoogga leh oo dhanba isagaa gacanta loo galiyay.

### Qofka Muminka Ah Iyo Akhlaaqdiisa

**4** Mar haddii uu Masiixu aawadeen jidhka uga xanuunsaday, idinkuna taas oo kale isu diyaariya, idinkoo isku fikir ah, maxaa yeelay, qofkii jidhka ka xanuunsada wuu ka joogsadaa dembiga, [2] Si wakhtiga u hadhay uusan mar dambe damaca jidhka ugu noolaanin, laakiinse uu ugu noolaado doonista Eebbe. [3] Waayo, waxaa idinku filan wakhtigii hore ee aad doonista dadka aan Eebbe aamininsanayn ku jirteen, markii aad ku dhaqmi jirteen fisqiga iyo damacyada jidhka iyo sakhraannimada iyo rabshadda iyo xafladaha lagu sakhraamo iyo sanam caabudidda xaaraanta ah. [4] Oo waxay hadda la yaabanyihiin inaad u raaci waydaan fisqigaas faraha badan, oo way idin caayaan. [5] Waxaa la xisaabtami doonaan ka diyaarka u ah inuu xukumo kuwa nool iyo kuwa dhintayba. [6] Waayo, sababtaas aawadeed ayaa Injiilka loogu wacdiyay xataa kuwii dhintay si iyaga xagga jidhka looga xukumo sida dadka, laakiinse ay ruuxiyan u noolaadaan sida Eebbe. [7] Wax walba gabagabo ayay joogaan, sidaas daraaddeed digtoonaada oo salaadda u feejignaada. [8] Wax walba ka horraysiiya inaad idinku aad isu jeclaataan, maxaa yeelay, jacaylku wuxuu asturaaa dembiyo faro badan. [9] Isu martiqaada si aan cabasho lahayn. [10] Siduu mid walba u helay hadiyad, idinku isugu adeega sidii wakiillo wanaagsan oo helay nimcada Eebbe ee badan ee kala duwan. [11] Mid kasta oo wax wacdiyaya ha ku wacdiyo erayga Eebbe, mid kasta oo adeegana, ha u adeego siduu Eebbe u karsiiyay, si wax walbaba Eebbe ugu ammaanmo Ciise Masiix, kaasoo iska leh ammaanta iyo maamulkaba wiligeed iyo waligeed. Aamiin.

### Xanuuka Ay Masiixiyiintu U Xanuunsadaan Masiixinimada Darteed

[12] Saaxiibbayaal, ha la yaabina jirrabaadda aad dhex maraysaan si laydiin tijaabiyo sidii iyadoo ay idinku dhacday wax la yaab leh. [13] Laakiinse sidii kuwo ka qayb qaatay xanuunka Masiixa farxa, si aad ugu faraxdaan marka ammaantiisa la muujiyo. [14] Haddii magaca Masiixa aawadii laydiin caayo, waad barakaysantihiin, maxaa yeelay, waxaa idin dul jooga Ruuxa ammaanta oo

ah Ruuxa Eebbe. [15] Haddaba midkiinna yuusan u xanuunsan sida isagoo ah gacan kudhiigle ama tuug ama shar fale ama mid faraggeliya arrimaha dadka kale. [16] Laakiin haddii uu qof u xanuunsado Masiixinimadiisa yuusan ceeb u arkin, laakiinse Eebbe ha ku ammaano magacan. [17] Waayo, waxaa la gaadhay wakhtigii dadka Eebbe xukunka laga bilaabi lahaa, oo haddii innaga marka hore laynaga billaabo, kuwa aan Injiilka Eebbe addeecin muxuu xaalkoodu noqon doonaa? [18] Haddaba haddii ka xaqa ahu si dhib leh ku badbaado, xaggay ka muuqan doonaan faasiqa iyo dembiilaha? [19] Sidaas daraaddeed kuwa doonista Eebbe u xanuunsada, iyagoo samafalaya, naftooda ammaano ha ugu dhiibeen abuuraha aaminka ah.

### Waano Odayaasha Ku Saabsan

**5** Anigoo anba oday la ah oo marag ka ah xanuukii Masiixa oo weliba ka qayb gali doona ammaanta la muujin doono, waxaan ku waaninayaa odayaasha idinku dhex jira, [2] Ilaaliya idaha Eebbe ee idin dhex jooga, idinkoo aan qasab ku ilaalinaynin, laakiinse raalli ka ah sida Eebbe doonayo. [3] Oo weliba ha u ilaalinina faa'iido ceeb ah daraaddeed, laakiinse ku ilaaliya niya dhab ah, hana u xukumina sidii idinkoo sayidyo u ah kuwaad hoggaamisaan, laakiinse idaha tusaale u noqda. [4] Oo marka Adhijirka sare la muujiyo, idinku waxaad heli doontaan taajka ammaanta ee aan baabba'ayn. [5] Sidaasoo kale dhallinyaraday, odayaasha ka dambeeya oo kulligiinba is-hoosaysiiya, si midkiinba midka kale ugu adeego, maxaa yeelay, Eebbe wuu hor istaagaa kuwa kibra, laakiinse kuwa is-hoosaysiiya ayuu nimco siiyaa. [6] Haddaba sidaas daraaddeed gacanta xoogga leh ee Eebbe iska hoosaysiiya, si uu wakhtigiisa idiin sarraysiiyo. [7] Welwelkiinna oo dhan isaga saara, maxaa yeelay, isagaa idin daryeela. [8] Feejignaada oo soo jeeda, waayo, cadowgiinna Iblayska ahu sida libaax ciyaya ayuu u wareegaa oo u doon doonaa cid uu liqo. [9] Isaga hor istaaga, idinkoo iimaankiinna ku adag, oo garanaya in isla dhibaatooyinkaasu ay ku dhacaan walaalahiinna dunida dacalladeeda jooga. [10] Haddaba Eebbaha leh nimcada oo dhan oo idiinku yeedhay ammaantiisa daa'imka ah ee Masiixa ku jirta, markii aad in yar xanuunsataan ka dib isagu kaamil buu idinka dhigi doonaa, oo wuu idin adkayn doonaa oo idin xoogayn doonaa. [11] Weligiis iyo weligiisba xoogga isagaa leh. Aamiin.

### Mac Salaamayn

[12] Waxaan warqad yar idiinku soo qoray gacanta walaalkeen Silwanos oo aan ku tirinayo inuu aamin yahay. Oo waxaan idinku waaninayaa oo marag ahaan idiinku sheegayaa inay tanu tahay nimcada Eebbe ee runta ah. Taas ku adkaada [13] Waxaa idin soo salaamaya ta Baabuloon joogta oo laydinla doortay iyo wiilkayga Markos. [14] Isku salaama dhunkasho jacayl ah. Oo intiinna Masiixa kuwiisa ah oo dhan nabaddu ha u ahaato.

## WARQADDII LABAAD EE RASUUL BUTROS

### Salaan

**1** Ka socota Simoon Butros, adeegihii iyo rasuulkii Ciise Masiix,
Ku socota kuwa helay iimaan qaali ah oo keenna la mid ah oo ku helay xaqnimada
Eebbaheenna iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. 2 Nimco iyo nabadu ha idiinku bateen
aqoonta Eebbe iyo Rabbigeenna Ciise.

### Masiixiyiinta Dabeecaddooda

3 Maxaa yeelay, Eebbe xooggiisu wuxuu ina siiyay wax kasta oo ku saabsan nolosha iyo alla
ka cabsiga oo wuxuu inagu siiyay aqoonta ka inoogu yeedhay ammaantiisa iyo wanaaggiisa.
4 Wuxuu kuwaas inagu siiyay ballanqaadyadiisa qaaliga ah ee aadka u waawayn, si aad
kuwaas ugu noqotaan kuwo ka qayb qaata dabeecadda Eebbe, idinkoo ka baxsaday fasaadka
dunida ku jira ee ka yimid damaca jidhka. 5 Sababtaas daraaddeed, aad u dadaala oo
rumaysadkiinna ku dara wanaag, wanaagana aqoon, 6 aqoontana iscelin, iscelintana dulqaad,
dulqaadkana cabsida Eebbe, 7 Cabsida Eebbena kalgacayl walaaltinimo, kalgacaylka
walaaltinimada jacayl. 8 Haddaad sifooyinkaas yeelataan oo ay idinku bataan waxay inka
ilaalinayaan inaad noqotaan waxma tarayaal aan midho lahayn xagga aqoonta Rabbigeenna
Ciise Masiix. 9 Waayo, kii ay sifooyinkaasu ka maqanyihiin wuu indha la’ yahay oo arag
gaabanyahay oo wuxuu illoobay in dembiyadiisii hore laga safeeyay. 10 Sidaas daraaddeed,
walaallayaal, aad ugu dadaala si aad u xaqiijisaan in laydiin yeedhay oo laydin doortay, waayo,
haddaad waxyaabahaas samaysaan, weligiin ma turunturoon doontaan. 11 Sidaa daraaddeed
aad baa laydiinku soo dhawayn doonaa galidda boqortooyada daa’imka ah ee Rabbigeenna
Ciise Masiix oo Badbaadiyeheenna ah. 12 Sidaas daraaddeed anigu had iyo jeerrba diyaar
baan u ahaan doonaa si aan waxyaabahan idin xusuusiyo, in kastoo weliba aad taqaanaan oo
laydinku adkeeyay runta aad haysataan. 13 Waxaa ila habboon in intaan jidhkan ku jiro aan wax
idin xusuusiyo oon idin guubaabiyo. 14 Waayo, waan ogahay inay durba imanayso wakhtigii aan
jidhkan ka tagi lahaa siduu Rabbigeenna Ciise Masiix ii ogaysiiyay. 15 Waxaan ku dadaali
doonaa markaan tago ka dib inaad mar walba waxyaabahan xusuusataan.

### Markhaatifurka Butros Iyo Kii Nebiyada

16 Annagu maanaan raacin sheeko baralay khiyaano lagu allifay, markaannu idin ogaysiinnay
xoogga iyo imaatinka Rabbigeenna Ciise Masiix, laakiinse waxaannu ahayn goob joogayaal
indhaha ku arkay waynaantiisa. 17 Waayo, isagu wuxuu xagga Eebbaha Aabbaha ah ka helay
sharaf iyo ammaan, oo cod ayaa xagga ammaanta sare uga yimid kaaso leh, Kanu waa
Wiilkayga aan jeclahay ee aan ku faraxsanahay. 18 Oo codkaas samada ka yimid waxaannu
maqalnay markaannu buurta qudduuska ah isaga la joognay. 19 Oo waxaynu haysannaa oo
intaa dheer yaqiin kale, taasoo ah waxyigii ay nebiyadu sii sheegeen, kaasoy idiin wanaagsan
tahay inaydaan u dayma la’aanin hadalkaas sida laambad meel gudcur ah ka ifaysa, ilaa iyo
intuu waagu ka baryayo oo ay xiddigta waabari quluubtiinna ka soo baxayso, 20 Idinkoo ugu
horraystaba tan og, inuusan jirin waxyi kitaabka ku jira oo ku yimid doonista qofka. 21 Waayo,
waxyigii ay nebiyadu sii sheegeen weligii kuma imanin dadka doonistooda, laakiinse niman uu
Ruuxa Qudduuska ahu hagayo ayuu Eebbe la hadlay.

## Nebiyo Iyo Macallimiin Been Ah

**2** Laakiinse waxaa dadka ka dhex kacay nebiyo been ah, siday idinkaba idiinka dhex kici doona
macallimiin been ah, kuwaasoo si qarsoon idiinku dhex fidin doona bidcinimo wax halaagta,
iyagoo dafiraya xataa Sayidkii soo iibsaday, oo waxay dushooda ku soo dajinayaan halaag deg
deg ah. 2 Oo kuwo badan baa raaci doona hab dhaqankooda nijaasta ah, oo iyaga sababtood
ayaa loo caayi doonaa jidka runta ah. 3 Damac xumaantooda awgeed waxay inku baadhan
donaan khuraafaad ay iyagu allifeen, kuwaas oo xukunkoodii mar hore lagu xukumay uusan
hadda raagaynin, halaaggooduna ma seexan doono. 4 Maxaa yeelay, hadduusan Eebbe u
tudhin malaa'igihii dembaabay, balse uu iyaga ku tuuray cadaabta oo uu ku riday godad
gudcur ah inta laga xukumayo. 5 Oo hadduusan dunidii hore u tudhin, laakiinse uu badbaadiyay
Nuux oo xaqnimada wax ku wacdiya iyo toddoba qof oo kale, markuu daad ku soo daayay
dunidii kuwa aan alle ka cabsiga aqoonin. 6 Oo magaalooyinkii Sodom iyo Gomorana wuxuu ka
dhigay dambas, oo intuu afgembi ku xukumay, ayuu tusaale digniin ah uga dhigay kuwa alle
caasiyi doona, 7 Oo wuxuu ka samatabbixiyay Luudkii xaqa ahaa oo aad ugu dhibtooday
dabeecaddoodii nijaasta ahayd. 8 Waayo, ninkaas xaqa ahu iyaguu ku dhex noolaa, oo waxay
naftiisa xaqa ahu maalinba maalinta ka dambaysa ku xanuunsan jirtay falalkooda sharci
darrida ah ee uu arkayo ama maqlayo. 9 Rabbiguna wuu yaqaannaa sida kuwa xaqa ah
jirrabaadda looga samata bixiyo iyo sida kuwa aan xaqa ahayn loo ciqaabo ilaa iyo maalinta
xisaabta, 10 Gaar ahaan, kuwa damaca jidhka raaca ee dawladda quudhsada. Iyaguna aad bay
u indha adagyihiin oo kama xishoodaan inay kuwa darajada leh caayaan. 11 Malaa'iguhuna in
kastoy iyaga awood iyo xoogba ka badanyihiin, iyaga dacwo cay ah Rabbiga hortiisa kagama
dacwayn karaan. 12 Laakiinse kuwanu waa sida xayawaan aan caqli lahayn oo u dhashay in la
qabto oo la dilo, oo waxay caayaan wax ayna garanaynin. Hubaal iyagu halaaggooday ku
baab'i doonaan. 13 Oo Sharkooda abaal gudkiisa sharka ah ayay helaan, oo waxaa iyaga la
wanaagsan inay maalintii raaxaystaan. Iyagu waa waskh faasiqiin ah, oo markay xafladaha
idinkala qayb galaan waxay ku raaxaystaan khiyaanadooda. 14 Waxay leeyihiin indho sino
miidhan ah oo aan dembi ka joogsan karin, oo kuwa aan adkayn ayay sasabtaan, waxayna
leeyihiin qalbi damacyada xunxun caadaystay, oo waa dad nacladu ku dhacday. 15 Jidkii
qummanaa ayay ka leexdeen oo way baadiyoobeen, waxayna raaceen jidkii Balcaam ina
Becoor oo jeclaaday abaal gudka xaqdarrida. 16 Laakiinse isaga waxaa lagu canaantay
xadgudubkiisii aawadiis. Dameer aan hadli karin ayaa ku hadlay cod banii aadan oo joojiyay
waallidii nebiga. 17 Kuwanu waa ilo aan biyo lahayn iyo ceeryaamo ay duufaan kaxeeyo oo
waxaa iyaga loo diyaariyay gudcurka. 18 Waayo, iyagu waxay ku hadlaan hadal faan ah oo aan
macno lahayn oo kuwa in yar kaga baxsanaya kuwa baadiyaysan ayay ku sasabtaan
damacyada jidhka ee nijaasta ah. 19 oo waxay iyaga u ballanqaadaan xorriyad, laakiinse iyaga
qudhooduba waa addoommadii fasaadka. Waayo, wixii ka adkaada qofka ayaa isaga
addoonsada. 20 Waayo, haddii markii ay fisiqa dunida kaga baxsadeen aqoonta Rabbiga iyo
Badbaadiyeheenna Ciise Masiix ay haddana ku dhex wareeraan oo laga adkaado, xaalkooda
dambe way ka sii darantahay markii hore. 21 Maxaa yeelay, waxaa iyaga u wanaagsanaan
lahayd inayna aqoonba jidka xaqnimada, intay dib uga riddoobi lahaayeen amarka qudduuska
ah ee iyaga la siiyay. 22 Wixii maahmaahda runta ah lagu yidhi, ayaa iyaga ku dhaboobay:
Eeygu wuxuu ku noqdaa mantaggiisa. Doofaar maydhatayna waxay dib ugu noqotaa galgalinta
dhoobada.

## Maalinta Rabbigu Imanayo

**3** Saaxiibbayaal, tanu waa warqaddii labaad ee aan idiin soo qoray, oo labadoodaba waxaan
maankiinna daacadda ah ku guubaabinayaa xusuusta, 2 Si aad u xusuusataan erayadii ay
nebiyadii qudduuska ahaa horay ugu hadleen iyo amarkii Rabbiga Badbaadiyaha ah oo ay
rasuulladiinnu ku hadleen. 3 Marka ugu horraysa waxaad ogaataan inay maalmaha ugu
dambeeya iman doonaan kuwo jeesjeesaya oo majaajillaystayaal ah oo damacyadooda daba
raacaya, 4 Oo waxay odhan doonaan, Ballanqaadkii imaatinkiisu meeyay? Waayo, tan iyo
maalintii ay awowayaashayo dhinteen wax walba waxay u socdaan siday ahaayeen tan iyo
Bilowgii uunka. 5 Waayo, iyagu ogaan bay u illoobaan in waagii hore samooyinku jireen
dhulkana erayga Eebbe biyaha lagaga dhex abuuray, 6 kuwaasuna ay dunidii waagaa jirtay ay
ku baabba'een iyadoo daad qaaday.

7 Laakiinse samooyinka hadda jira iyo dhulkaba isla eraygaas ayaa dab loogu kaydiyay oo
waxaa loo kaydiyay maalinta xisaabta iyo halaagga dadka caasiyiinta ah. 8 Laakiinse,
saaxiibbayaal, tan ha illoobina inay maalin kaliya Rabbiga la tahay sida kun sannadood, kun
sannadoodna la tahay sida maalin kaliya. 9 Rabbigu kama raago inuu ballankiisa oofiyo sida
dadka qaarkiis la tahay raagid, laakiinse idinkuu idiin dulqaadanayaa, oo ma doonayo inuu
qofnaba halaagmo, laakiinse wuxuu doonayaa in dhammaanba la wada toobadkeeno.
10 Laakiinse maalinta Rabbigu waxay u iman doontaa sida tuug oo kale; maalintaas oo ay
samooyinku baabbi'i doonaan iyagoo shanqadh wayn ka yeedhayso, oo waxyaabaha
abuuranna iyagoo gubanaya ayay baabbi'i doonaan.

11 Haddaba maadaama oo ay waxyaabahan oo dhan sidaa u baabbi'i doonaan, muxuu yahay
waajibka idin saaran si aad u noqotaan dad qudduusiin ah oo alle ka cabsi leh, 12 idinkoo
sugaya oo aad ugu dadaalaya imaatinka maalinta Eebbe, taasoo samooyinku iyagoo ololaya
ay baabbi'i doonaan, waxyaabaha abuuranna iyagoo gubanaya ayay dhalaali doonaan.
13 Laakiinse sidii uu inoo ballanqaaday, waxaynu sugaynaa samooyin cusub iyo dhul cusub oo
xaqnimo dhex taallo. 14 Sidaa daraaddeed, saaxiibbaayaal, idinkoo waxyaabahaas sugaya, ku
dadaala in laydin helo idinkoo nabad ah oo aan wasakh iyo eed lahayn Eebbe hortiisa. 15 Siduu
walaalkeen Bawlos idiinku soo qoray xigmaddii la siiyay, ku tiriya in dulqaadka Rabbigeennu
yahay badbaado, 16 Siduu warqadihiisii oo dhan waxyaabahan ugaga hadlay. Kuwaasoo ay ku
jiraaan waxyaabo in la fahmo ay adagtahay oo ay jaahiliinta iyo kuwa aan adkayn si khaldan u
macneeyaan, siday Kitaabka kaleba ugu sameeyaan si ay u halaagmaan. 17 Sidaas
daraaddeed, saaxiibbayaal, idinkoo waxyaabahan hore u og, is ilaaliya oo yaan laydinku
duufsanin baadinimada kuwa sharka leh oo ka dhicina adkaantiinna. 18 Laakiinse ku kora
nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. Isaga ammaanu ha u
ahaato hadda iyo weligeedba. Aamiin.

# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL YOOXANAA

## Erayga Nolosha Weligeed Ah

**1** Waxaannu idiin soo gudbinay wax ku saabsan wixii tan iyo Bilowgii jiray oo aannu maqalnay
oo aannu indhahayaga ku aragnay oo aannu eegnay oo ay gacmahayagu taabteen oo Erayga
nolosha ah. 2 Nolosha waa la muujiyay oo waannu aragnay oo waanan u marag furaynaa oo
waxaannu idiinka warramaynaa nolosha weligeed ah, taasoo Aabbaha la jirtay oo lanoo
muujiyay. 3 Wixii aannu aragnay oo aannu maqalnay ayaannu idiinka warramaynaa, si aad
idinkuna xidhiidh noola yeelataan, dhab ahaantiina xidhiidhkayagu waa mid la jira Aabbaha iyo
Wiilkiisa Ciise Masiix ah. 4 Oo waxaannu tan idiinku soo qoraynaa si ay farxaddiinnu u
dhammays tiranto.

## Eebbe Waa Nuur

5 Tanu waa farriintii aannu ka maqalnay isaga oo aannu idiinka warramayno, waxayna tahay,
inuu Eebbe nuur yahay oo ayna isaga innaba wax gudcur ah ku jirin. 6 Haddaynu nidhaahno,
xidhiidh baynu la leenahay isaga oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa oo
runta kuma soconno. 7 Laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba nuurka ugu jiro,
xidhiidh ayaynu isla wada leenahay oo dhiigga Ciise Wiilkiisa ayaa inaga nadiifiya dembi oo
dhan. 8 Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin, nafteenna ayaynu khiyaanaynaa oo runtuna
inaguma jirto. 9 Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin oo waa caaddil si uu
dembiyadeenna inooga cafiyo oo uu inooga nadiifiyo xaqdarrida oo dhan. 10 Haddaynu
nidhaahno, Ma dembaabno, waxaynu Eebbe ka dhignaa beenaale, oo eraygiisu inaguma jiro.

## Masiixa Ayaa Inoo Shafeeca Qaada

**2** Carruurtaydiiyay, waxaan tan idiinku soo qorayaa si aydaan u dembaabin, oo hadduu qof
dembaabo, waxaynu xagga Aabbaha ku leennahay shafeece, waana Ciise Masiix ka xaqa ah.
2 Oo isagu waa kafaaragudka dembiyadeenna, kuweenna oo keliyana ma ahee weliba wuxuu u
yahay dembiyada dunida oo dhan. 3 Oo sidan ayaynu ku garanaynaa inaynu naqaanno isaga,
haddaynu amarradiisa xajinno. 4 Kii yidhaahda, Waan aqaannaa isaga oo aan amarradiisa
xajinin, waa beenaale oo runtu kuma jirto isaga. 5 Laakiin ka eraygiisa adkeeya runtii Eebbe
jacaylkiisu wuu ku dhanyahay isaga. Taas aynuna ku garanaynaa inaynu isaga ku jirno. 6 Kii
yidhaahda, Isagaan ku jiraa, waa inuu u socdaa siduu isagu u socdo.

## Amarka Cusub

7 Saaxiibbayaal, amar cusub idiinma soo qorayo, laakiin waxaan idiin soo qorayaa amar hore
oo aad tan iyo Bilowgii haysateen. Amarkii horena waa eraygii aad Bilowgii maqasheen. 8 Isla
markaasna amar cusub ayaan idiin soo qorayaa, kaasoo isaga iyo idinkaba run idinku dhex ah,
maxaa yeelay, gudcurku wuu dhammaanayaa oo nuurka runta ah ayaa hadda iftiimaya. 9 Kii
yidhaahda, Nuurkaan ku jiraa oo walaalkii neceb, ilaa hadda wuxuu ku jiraa gudcurka. 10 Ka
walaalkii jecel, nuurka ayuu ku jiraa oo wax lagu turunturroodo kuma jiraan isaga. 11 Laakiin kii
walaalkii neceb, gudcurka ayuu ku jiraa oo gudcurka ayuu ku socdaa oo ma garanayo
meeshuu ku socdo, waayo, gudcurka ayaa indha tira. 12 Wax baan idiin soo qorayaa,

carruurtiiyay, maxaa yeelay, dembiyadiinnii waa laydinka cafiyay magiciisa aawadii.
[13] Aabbayaashow, wax baan idiin soo qorayaa, maxaa yeelay, waad garanaysaan ka tan iyo
Bilowgii jira. Ragga dhallinyarada ahow, wax baan idiin soo qorayaa, maxaa yeelay, idinku ka
sharka ah ayaad ka adkaateen. Carruurtaydiiyay, wax baan idiin soo qorayaa, maxaa yeelay,
Aabbaha ayaad garanaysaan. [14] Aabbayaashow, wax baan idiin soo qorayaa, maxaa yeelay,
waad garanaysaan ka tan iyo Bilowgii jira. Ragga dhallinyarada ahow, wax baan idiin soo
qorayaa, maxaa yeelay, xoog baad leedihiin, oo erayga Eebbe ayaa idinku jira oo ka sharka ah
ayaad ka adkaateen.

### Dunida Iyo Waxa Ku Jira Toona Ha Jeclaanina

[15] Dunida iyo waxa dunida ku jira toona ha jeclaanina. Qofkii dunida jeclaado, jacaylka
Aabbuhu kuma jiro isaga. [16] Maxaa yeelay, waxaa dunida ku jira oo dhan oo ah damaca jidhka
iyo damaca indhaha iyo nolosha oo lagu faano, xagga Aabbaha kama yimaaddaan ee waxay
ka yimaaddaan xagga dunida. [17] Oo dunida iyo damaceeduba way dhammaan doonaan,
laakiin kii doonista Eebbe yeelaa wuu waari doonaa weligii.

### Ka Digtoonaanta Kuwa Masiixa Ka Soo Hor Jeeda

[18] Carruurtiiyay, waa saacaddii u dambaysay oo sidaad maqasheen ka Masiixa ka soo
horjeeda ayaa imanaya, weliba hadda kuwo badan oo Masiixa ka soo horjeeda ayaa kacay,
tan ayaynuna ku garanaynaa inay saacaddii u dambaysay tahay. [19] Way inaga baxeen, laakiin
kuweenna mayna ahayn, hadday kuweenna yihiin way inala joogi lahaayeen, laakiin way inaga
baxeen oo taasaa caddaynaysa inayna kulligood inaga mid ahayn. [20] Laakiin idinku waxaa
laydiinku subkay karaamo ka timid Ka Qudduuska ah, oo wax walba waad ogtihiin. [21] Wixii aan
idiin soo qoray uma soo qorin inaad runta ka aqoon la’dihiin, laakiin waxaan u soo qoray runta
aad taqaaninn iyo inaydaan beenina runta aawadeed. [22] Waa kuma beenaaluhu, ka dafira inuu
Ciise yahay Masiixa mooyaane? Isagu waa kan Masiixa ka horjeeda, waana ka dafira Aabbaha
iyo Wiilkaba. [23] Ku alla kii Wiilka inkiraa, malaha Aabbaha; laakiin kii Wiilka qirtaa Aabbuhuu
leeyahay.

[24] Haddaba idinku waxaad tan iyo Bilowgii maqlayseen ha idinku jiraan. Haddii wixii aad tan iyo
bilowgii maqlayseen idinku jiro, idinkuna waxaad ku jiri doontaan Wiilka iyo Aabbaha. [25] Oo
kanu waa ballankii uu inoogu ballanqaaday oo ah nolosha weligeed ah. [26] Waxaan idiin soo
qoray waxyaabo ku saabsan kuwa idin khiyaamaynaya. [27] Karaamada laydiinku subkay eed ka
hesheen isaga way idinku jiri doontaa oo uma baahnidin inay cidina wax idinku wacdido, laakiin
sida karaamada laydiinku subkay ay wax walba idiin barto, oo ay run u tahay, beenna ayna u
ahayn, waa inaad siday wax idiin bartay ugu jirtaan. [28] Oo hadda carruurtaydiiyay, ku jira isaga,
si markuu soo muuqdo aynu kalsooni u helno oo aynaan wakhtiga uu imanayo ka xishoonin
inaynu is hor taagno. [29] Haddaad ogtihiin inuu xaq yahay, waxaad weliba ogaataan in mid
walba oo xaqnimo ku dhaqma uu isaga ka dhashay.

### Jacaylka Eebbaha Aabbaha Ah

**3** Bal eega siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyay, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta
Eebbe, oo saasaynu nahay. Sidaa aawadeed dunidu inama garanayso, maxaa yeelay, isagaba

mayna garanaynin. [2] Saaxiibbayaal, hadda waxaynu nahay carruurta Eebbe, oo wali waxa
aynu noqon doonno lama muujinin, laakiin waxaynu ognahay in markuu soo muuqdo aynu
noqon doonno sidiisa oo kale, waayo, waxaynu arki doonnaa isaga sida uu yahay. [3] Oo mid
kasta oo taas ka rajeeya isaga naftiisuu daahiriyaa siduu isaguba daahir u yahay. [4] Mid kasta
oo dembi falaa wuxuu ku xadgudbaa sharciga, maxaa yeelay, dembigu waa xadgudub. [5] Oo
idinku waxaaad ogtihiin inuu isagu u muuqday si uu dembiyadeenna inooga qaado isagoon
dembi lahayn. [6] Ku alla kii isaga ku jiraa, ma dembaabo, ku alla kii dembaabana muusan arkin
isaga, oo waliba ma yaqaanno isaga. [7] Carruurtiiyay, yayna cidna idin khiyaanin, kii xaqnimo
falaa waa xaq siduu isaguba xaq u yahay. [8] Mid kasta oo dembi falaana waxaa leh Iblayska,
Iblaysku tan iyo Bilowgii ayuu dembiile ahaa. Sidaa aawadeed ayuu Wiilka Eebbe u soo
muuqday si uu u baabbi'iyo shaqada Iblayska. [9] Ku alla kii Eebbe ka dhashay dembi ma falo;
maxaa yeelay, dabeecaddii Eebbe ayaa ku jirta isaga oo ma dembaabi karo, waayo, wuxuu ka
dhashay Eebbe. [10] Tan ayaynu ku kala soocayna carruurta Eebbe iyo carruurta Iblaysku, ku
alla kii aan xaqnimo falin ma aha kii Eebbe, kii aan walaalkii jeclaaninna waa la mid. [11] Maxaa
yeelay, kanu waa warkii aad tan iyo Bilowgii maqlayseen, kaasoo ah inaynu isjeclaanno, [12] oo
aynaan noqonin sidii Qaabiilkii sharka lahaa ee walaalkii dilay. Oo muxuu ku dilay? Waayo,
camalkiisu wuxuu ahaa shar, oo kuwa walaalkiina xaq bay ahaayeen. Is-Jeclaada
[13] Walaallayaal, ha la yaabina hadday dunidu idin necdo. [14] Waxaynu ognahay inaynu
dhimashadii ka soo gudubnay oo aynu u soo gudubnay nolosha, maxaa yeelay, walaalaha
ayaynu jecelnahay. Oo kii aan walaalkii jeclayn, dhimashaduu ku hadhaa.

[15] Ku alla kii walaalkii neceb waa gacan ku dhiigle, idinkuna waad ogtihiin inuusan gacan ku
dhiigle helaynin nolosha weligeed ah ee waaraysa. [16] Tan ayaynu ku garanaynaa jacaylka
Eebbe, waayo, isagu naftiisa ayuu u bixiyay aawadeen, innaguna waa inaynu nafteenna u
bixinno walaalaheen. [17] Laakiin kii dhaqaale ku haysta dunidan, oo arka walaalkii oo baahan,
oo qalbiga ka xidha, siduu jacaylka Eebbe ugu jiraa isaga? [18] Carruurtaydiiyay, yaynaan wax ku
jeclaanin hadal iyo af toona, laakiin camal iyo run aan ku jeclaanno. [19] Oo taas ayaynu ku
garan doonnaa inaynu kuwa runta nahay, oo ay quluubteennu isaga hortiisa yaqiin ku heli
doontaa. [20] Maxaa yeelay, mar kasta oo ay quluubteennu ina eedayso, Eebbe wuu ka
waynyahay quluubteenna, oo wax walba wuu ogyahay. [21] Saaxiibbayaal, haddayna
quluubteennu ina eedayn, kalsooni ayaynu ku leennahay Eebbe agtiisa. [22] Oo wax kastoo aynu
ka barino waynu ka helaynaa, maxaa yeelay, amarradiisa ayaynu xajinnaa, oo waxaynu
samaynaa wax isaga ka farxiya. [23] Oo kanu waa amarradiisa, waa inaynu rumaysanno magaca
Wiilkiisa Ciise Masiix ah, oo aynu isjeclaanno, siduu inagu amray. [24] Oo kii xajiya amarradiisa
wuxuu ku jiraa isaga, isaguna wuu ku jiraa. Oo waxaynu ku garanaynaa inuu isagu inagu jiro
Ruuxa uu ina siiyay.

### Ruuxa Runta Ah Iyo Ka Beenta Ah

**4** Saaxiibbayaal, ha rumaysanina ruux walba, laakiin arwaaxda tijaabiya si aad u ogaataan inay
kuwa Eebbe yihiin, waayo, nebiyo badan oo been ah ayaa u soo baxay dunida. [2] Sidan ayaad
ku ogaanaysaan Ruuxa Eebbe; ruux walba oo qirta in Ciise Masiix jidhka ku yimid, waa kii
Eebbe. [3] Ruux walba oo aan qiranin Ciise Masiixna kii Eebbe ma aha; kaasuna waa ruuxa
Masiixa ka soo horjeeda eed maqasheen inuu imanayo, haddana dunida ayuu ku jiraa.
[4] Carruurtaydiiyay, kuwii Eebbe baad tihiin, oo iyaga waad ka adkaateen; maxaa yeelay, Ka
idinku jira ayaa ka wayn ka dunida ku jira. [5] Iyagu waa kuwa dunida oo sidaa aawadeed waxay
ka hadlaan arrimaha dunida oo duniduna way dhagaysataa. [6] Innaguna kuwii Eebbe ayaynu

nahay; kii Eebbe yaqaanna wuu ina dhagaystaa oo kii aan ka Eebbe ahaynna inama
dhagaysto. Taas ayaynu ku garanaynaa ruuxa runta ah iyo ruuxa baadida ah.

### Eebbe Waa Jacayl

[7] Saaxiibbayaal, aynu isjeclaanno; waayo, jacaylku Eebbe ayuu ka yimaaddaa oo mid walba oo
wax jecel wuxuu ka dhashay Eebbe, Eebbena wuu yaqaannaa. [8] Oo kii aan wax jeclaanin
Eebbe ma yaqaanno; waayo, Eebbe waa jacayl. [9] Oo sidan ayuu Eebbe jacaylkiisa inoogu
dhex muujiyay; maxaa yeelay, Eebbe Wiilkiisa kaliya ayuu dunida u soo diray si aynu ugu
noolaanno isaga, oo sidaasaa jacaylka Eebbe laynoogu muujiyay. [10] Oo wakaa jacaylku, mana
aha inaynu Eebbe jeclaanay, laakiinse isagaa ina jeclaaday oo Wiilkiisa u soo diray si uu
kafaaragudka dembiyadeenna ugu noqdo. [11] Saaxiibbayaal, hadduu Eebbe sidaa inoo
jeclaaday, waa inaynu isjeclaanno. [12] Nina Eebbe ma arag marnaba. Haddaynu isjeclaanno
Eebbe wuu inagu jiraa oo jacaylkiisu wuu inagu dhanyahay. [13] Oo sidan ayaynu ku garanaynaa
inaynu isaga ku jirno isaguna inagu jiro, maxaa yeelay, ruuxiisa ayuu ina siiyay. [14] Oo waynu
aragnay oo waxaynu markhaati ka nahay inuu Aabbuhu Wiilka soo diray si uu Badbaadiyaha
dunida u noqdo. [15] Ku alla kii qirta inuu Ciise yahay Wiilka Eebbe, Eebbe ayaa ku jira isaga,
isaguna Eebbe ayuu ku jiraa. [16] Oo innagu waxaan ognahay oon rumaysannahay jacaylka
Eebbe inoo qabo. Eebbe waa jacayl; oo kii ku jiraa jacaylka, Eebbe ayuu ku jiraa, Eebbana
isaguu ku jiraa. [17] Sidan ayuu jacaylku kaamil inoogu noqday si aynu kalsooni u lahaanno
maalinta xisaabta; maxaa yeelay, siduu isagu yahay ayaynu innaguna dunidan ku nahay.
[18] Jacaylka cabsi kuma jirto, laakiin jacaylka kaamilka ahu cabsida ayuu dibadda u saaraa,
waayo, cabsidu waa qayb ciqaabta ka mid ah. Oo kii cabsada kaamil kuma noqdo jacaylka.
[19] Waynu jecelnahay isaga, waayo, isagaa marka hore ina jeclaaday. [20] Hadduu qof yidhaahdo,
Eebbe baan jeclahay oo uu walaalkii nebcaado waa beenaale, maxaa yeelay, kii aan jeclayn
walaalkiisa uu arko siduu u jeclaan karaa Eebbaha uusan arkin? [21] Oo waxaynu isaga ka
haysannaa amarkan: Kii Eebbe jecel, walaalkiina ha jeclaado.

### Iimaanka Masiixiyiinta

**5** Ku alla kii rumaysta inuu Ciise yahay Masiixa, Eebbe ayuu ka dhashay; oo ku alla kii jecel
aabbaha, kii isaga ka dhashayna wuu jecelyahay. [2] Taas ayaynu ku garanaynaa inaynu
carruurta Eebbe jecelnahay, markaynu Eebbe jeclaanno oo aynu amarradiisa xajinno.
[3] Waayo, waa sidan jacaylka Eebbe, waa inaynu amarradiisa xajinno; amaradiisuna ma cusla.
[4] Maxaa yeelay, ku alla kii ka dhashay Eebbe, wuxuu ka adkaadaa dunida, oo guusheenna
dunida ka adkaatana waa rumaysadkeenna. [5] Waa kuma ka dunida ka adkaadaa, ka rumaysta
inuu Ciise yahay Wiilka Eebbe mooyaane?

### Wiilka Ku Saabsan

[6] Kanu waa kii biyo iyo dhiig ku yimid, oo ah Ciise Masiix; biyo kaliya kuma imanin, laakiin
wuxuu ku yimid biyo iyo dhiig, waana ruuxa ka marag fura, waayo, ruuxu waa runta [7] Oo waxaa
jira saddex markhaati [8] Ruuxa iyo biyaha iyo dhiigga, oo saddexdaasuna waa isku mid.
[9] Haddaynu markhaatifurka dadka aqbalno, markhaatifurka Eebbe baa ka wayn, waayo,
markhaatifurka Eebbe waa kann oo ah inuu Wiilkiisa u markhaatifuray. [10] Ku alla kii Wiilka

Eebbe rumeeya markhaati ayuu ku haystaa naftiisa, kii aan Eebbe rumaysanna, wuxuu isaga ka dhigay beenaale; maxaa yeelay, muusan rumaysanin maraggii uu Eebbe u marag furay Wiilkiisa. [11] Maragguna waa kann, kaas oo ah inuu Eebbe ina siiyay nolosha weligeed ah, oo ay noloshanu Wiilkiisa ku jirto. [12] Kii Wiilka haystaa, nolosha ayuu leeyahay. Kii aan Wiilka Eebbe haysanna nolol ma laha.

**Dhammaadka**

[13] Waxyaabahan waxaan u soo qoray kuwiinka rumaystay magaca Wiilka Eebbe, si aad u ogaataan inaad nolosha weligeed ah leedihiin. [14] Oo taasuna waa kalsoonida aynu isaga u qabno, taasoo ah haddaynu wax uun doonistiisa ku barinno, isagu wuu inaga aqbalaa, [15] oo haddaynu ognahay inuu inaga aqbalo wax alla wixii aynu ka barinno, waxaynu ognahay inaynu helayno waxaynnu isaga ka barinay. [16] Hadduu qof arko walaalkii oo samaynaya dembi aan dhimasho dilaa ah ahayn, waa inuu Eebbe baryo; kuwaas samaynaya dembi aan dhimashada dilaa ah ahayn nolosha ayuu siin doonaa. Waxaa jira dembi dilaa ah. Oo anigu ma odhanayo, Kaas ha ka duceeyo. [17] Xaqdarrida oo dhan waa dembi; oo waxaa jira dembi aan dilaa ahayn. [18] Waan ognahay in ku alla kii Eebbe ka dhashay uusan dembaabin. Maxaa yeelay, kii Eebbe ka dhashay naftiisa ayuu ilaaliyaa oo ka sharka lehu ma taaban karo. [19] Waxaynu ognahay inaynu kuwii Eebbe nahay, oo ay dunida oo dhan ku jirto gacanta ka sharka leh. [20] Oo waxaynu ognahay inuu Wiilka Eebbe yimid, oo uu ina siiyay garasho, si aynu ugu garanno ka runta ah; innaguna waxaynu ku jirnaa ka runta ah, oo ah Wiilkiisa Ciise Masiix. Kanu waa Eebbaha runta ah iyo nolosha weligeed ah. [21] Carruurtaydiiyay, sanamyada iska ilaaliya.

# WARQADDII LABAAD EE RASUUL YOOXANAA

## Runta Iyo Jacaylka

**1** Aniga odayga ahu waxaan salaamayaa marwada la doortay iyo carruurteeda aan runta ku
jeclahay, kaligayna ma aha, laakiinse xataa waxaa jecel kuwa runta yaqaanna oo dhan, 2 runta
inagu dhex jirta, weligeedna inagu dhex jiri doonta aawadeed. 3 Nimco iyo naxariis iyo nabad
ka yimaadda Eebbaha Aabbaha ah iyo Ciise Masiix oo ah Wiilka Aabbaha ha indinla jirto
xagga runta iyo jacaylka. 4 Aad baan ugu farxay markaan arkay carruurtaadii qaarkood oo
runta ku socda, waana siduu Aabbuhu inagu amray. 5 Oo hadda waxaan kaa codsanayaa,
marwooy, sidii anigoon kuu soo qoraynin amar cusub laakiinse kii aynu tan iyo Bilowgii
haysannay, kaasoo ah inaynu isjeclaanno. 6 Waana sidan jacaylku, waa inaynu amarradiisa ku
dhaqanno. Amarkiina waa kann, waana sidaad tan iyo Bilowgii u maqli jirteen si aad ugu
dhaqantaan. 7 Waayo, khaa'imiin badan ayaa dunida ka soo baxay, waana kuwa aan qiranin
inuu Ciise Masiix jidh ku yimid. Kaasuna waa khaa'in iyo mid Masiixa ka soo horjeeda. 8 Is jira
si aydaan ugu khasaarinin wixii aanu qabanay, laakiinse si aad abaalgud dhammays tiran u
heshaan. 9 Mid kasta oo ku xadgudba caqiidada Masiixa oo aan ku dhaqmin, kaasu Eebbe
agtiisa waxba kuma laha; laakiin kii ku dhaqma caqiidada, Aabbaha iyo Wiilka labadaba
agtooda nasiib ayuu ku leeyahay. 10 Hadduu nin idiin yimaado oo uusan caqiidadan idiin
keenin, gurigiinna ha soo galinina, hana salaamina, 11 Waayo, kii salaamaa, wuxuu ka qayb
galaa camalkiisa sharka ah. 12 In kastoo aan hayo wax badan oo aan idiin soo qoro, ma jecli
inaan warqad iyo khad idiinku soo qoro; laakiinse waxaan rajaynayaa inaan idiin imaaddo oo
aan fool ka fool idiinla hadlo, si ay farxaddiinnu u dhammays tiranto. 13 Carruurtii walaashaada
la doortay way ku soo salaamayaan.

## WARQADDII SADDEXAAD EE RASUUL YOOXANAA

### Gayos Waa Loo Bogay

**1** Aniga odayga ah waxaan warqaddan u qorayaa saaxiib Gayos oo aan runta ku jeclahay.
[2] Saaxiib, waxaan kuugu duceeyaa inaad wax kasta ku liibaanto oo aad caafimaad qabto si ay
naftaadu u liibaanto. [3] Waayo, aad baan ugu farxay markay walaaluhu yimaaddeen oo ay ka
markhaati kaceen runtaada iyo sidaad runta ugu socoto. [4] Maba lihi farxad tan iiga wayn inaan
maqlo in carruurtaydu ay runta ku dhaqmaan. [5] Saaxiibow, daacadnimo ayaad ku qabataa
shaqo kasta oo aad u samayso walaalaha iyo shisheeyahaba. [6] Iyagu jacaylkaaga ayay
kiniisadda horteeda kaga markhaatifureen. Wayna wannaagsan tahay haddaad iyaga u
ambaba bixiso si Eebbe u qalanta. [7] Maxaa yeelay, magiciisa aawadii ayay u ambaba baxeen
iyagoon waxba ka qaadanin dadka aan Yuhuudda ahayn. [8] Sidaas daraaddeed waxaa waajib
inagu ah inaynu kuwaas oo kale soo dhawayno, si aynu u noqonno kuwa runta kala shaqeeya
iyaga.

### Khilaaf Baa Kiniisadda Ku Jiray

[9] Waxbaan kiniisadda u soo qoray, laakiinse Diyotrefees oo jecel inuu iyaga ka sarreeyo,
muuna na aqbalin. [10] Sidaas daraaddeed, haddaan imaaddo, waxaan xusuusin doonaa
shaqadiisa uu sameeyo isagoo hadallo xun xun naga sheega. Intaana waxaa dheer, ma
aqbalo walaalaha, kuwii aqbali lahaana wuu u diidaa, kiniisaddana wuu ka eryaa. [11] Saaxiibow,
ha ku dayanin waxa sharka ah, laakiinse ku dayo waxa wanaagsan. Ku alla kii wanaag
sameeya waa kii Eebbe, kii shar falaana Eebbe muusan arag. [12] Dadka oo dhan way u
markhaatifuraan Deemeetriyos, runta qudheedu way u markhaatifurtaa, annaguna waannu u
markhaatifurraa, waanad ogtahay in markhaatifurkayagu run yahay. [13] Waxaan hayay
waxyaabo badan oo aan kuu soo qoro, laakiinse ma doonayo inaan qalin iyo khad kuugu soo
qoro. [14] Laakiin waxaan rajaynayaa inaan dhawaan ku arko, oo aynu waji ka waji u wada
hadalno. [15] Nabadu ha kula jirto. Saaxiibbaa way ku soo salaamayaan. Saaxiibbada intaad mid
kasta magiciisa ugu yeedho igu wada salaan.

# WARQADDII RASUUL YUUDAS

### Salaan

**1** Anigoo Yuudas ah oo ah adeegihii Ciise Masiix iyo Yacquub walaalkii, waxaan warqaddan u
qorayaa kuwa loo yeedhay ee Eebbaha Aabbaha ahu jeclaaday oo Ciise Masiixna lagu
dhawray. 2 Naxariis iyo nabad iyo jacayl ha idinku bateen.

### Ciqaabta Ku Dhici Doonta Macallimiinta Beenta

3 Saaxiibbayaal, inkastoon aad u doonayay inaan idiin soo qoro wax ku saabsan badbaadada
inaga dhexaysa, waxaa qasab igu noqotay inaan idiin soo qoro oo aan idinku waaniyo inaad
aad u difaacdaan iimaankii mar la wada siiyay qudduusiinta oo dhan. 4 Waayo, waxaa jira
niman si qarsoodi ah idiinku soo galay, waana kuwii waa hore xukunkan loo qoray, oo ah kuwa
aan alle ka cabsi lahayn, oo nimcada Eebbaheenna ku beddela nijaas, oo inkira Ciise Masiix
oo ah Sayidkeenna iyo Rabbigeenna kaliya. 5 Hadda, in kastoo aad horay u ogaydeen wax
kasta, waxaan jeclahay inaan idin xusuusiyo sidii uu Rabbigu dad uga badbaadiyay dalka
Masar, ka dibna u baabbi'iyay kuwii aan rumaysanin isaga, 6 Oo uu malaa'igihii aan dhawrin
madaxtinimadooda, laakiinse jagadoodii ka tagay, wuxuu ilaa xukunka maalinta wayn ku hayaa
silsilado weligood ah iyagoo gudcur ku hoos jira. 7 Si taas la mid ahna Sodom iyo Gomora iyo
magaalooyinkii kale ee ku wareegsanaa ee sinada iyo wax dabeecadda khilaafsan caadaystay
wuxuu ka dhigay tusaale, iyagoo ciqaabta dabka weligii ah ku silcaya. 8 Sidaas oo kale ayay
kuwan riyoodana jidhkooda u nijaaseeyaan, dawladnimadana u nacaan, oo ay madaxda u
caayaan. 9 Laakiin Mikaa'iil oo ah malag sare markuu Iblayska kula murmayay maydkii Muuse
aawadii, kumuusan dhicin inuu xukun cay ah ku xukumo, laakiinse wuxuu ku yidhi, Rabbigu ha
ku canaanto. 10 Haddaba kuwanu wax kastoo ayna garanaynin ayay caayaan, oo waxay ku
baabba'aan waxay dabeecadda abuurka ku garanayaan sida xayawaanka aan caqliga lahayn.
11 Halaag baa ku dhacay kuwaas, waayo, waxay raaceen jidkii Qaabiil, oo faa'iido aawadeed
ayay Balcaam baadinimadiisii ugu yaaceen, oo waxay ku halaagmeen fallaaganimadii
Qorax.[292*] 12 Kuwanu waa caqabad qarsoon oo ku dhex jira cashooyinkiinna jacaylka markay
idinla faysteeyaan iyagoo aan cabsanaynin; waana danaystayaal iyo daruuro aan biyo lahayn
oo ay dabayluhu kaxeeyaan, iyo geedo diraaceed oo aan midho lahayn, oo laba jeer dhintay,
oo la rujiyay, 13 Waana hirarka badda kacsan oo ay fadeexaddoodu xumbaynayso iyo xiddigo
lumay oo madowga gudcurka weligood lagu hayo.

14 Enoog oo ahaa farcankii toddobaad ee Aadan isna kuwanuu wax ka sii sheegay isagoo leh,
Bal eega, Rabbigu wuxuu yimid isagoo wata quddduusiintiisa aan la tirin karin, 15 Si uu xukun
ugu rido dhammaanba oo uu kuwa aan alle ka cabsiga lahayn oo dhan ugu caddeeyo
camalladooda caasinimada ahaa oo ay caasinimada ku sameeyeen, iyo waxyaabihii
qallafsanaa oo dhan oo ay dembilayaasha aan alle ka cabsiga lahaynu ay isaga ka sheegeen.
16 Kuwanu waa kuwo gunuunaca, oo cawda, oo damacyadooda xaaraanta ah ka daba orda,
afkooduna wuxuu ku hadlaa hadallo isla wayni ah, dadkana way u kala eexdaan si ay faa'iido
uga helaan aawadeed. 17 Laakiinse idinku, saaxiibbayaal, xusuusta hadalladii ay rasuulladii
Rabbigeenna Ciise Masiix horay idinku sheegeen. 18 Waxay idinku yidhaahdeen, Ugu

292 Bilowgii 4:3-8 iyo Tirintii 22:1-35, 16:1-35

dambaysta waxaa jiri doona kuwo wax ku jeesjeesa, oo daba socda damacyadooda aan alle
ka cabsiga lahayn. [19] Kuwanu waa kuwa dadka kala erya, waana dadka dunida oo aan Ruux
lahayn. [20] Laakiinse, saaxiibbayaal, naftiinna ku dul dhisa rumaysadkiinna aad qudduuska u ah,
oo Ruuxa Qudduuska ah ku tukada, [21] Naftiinna ku xifdiya jacaylka Eebbe, idinkoo sugaya
naxariista Rabbigeenna Ciise Masiix oo idin gaadhsiinaysa nolosha weligeed ah. [22] Kuwa
shakisan u naxariista, [23] Badbaadiya qaar oo dabka ka dhufta, qaarna u naxariista idinkoo
cabsanaya oo nacaya xataa dharka jiidhka ku wasakhoobay.

### Duco

[24] Oo ka awooda inuu turunturada idinka ilaaliyo oo uu ammaantiisa idin hor geeyo, idinkoo aan
iin lahayn oo aad u faraxsan, [25] Kaasoo ah Eebbaha kaligii ah ee Badbaadiyeheenna ah,
ammaan iyo waynaan iyo xoog iyo amar ha u ahaadeen xagga Rabbigeenna Ciise Masiix,
wakhtiga oo dhan ka hor iyo hadda iyo weligeedba. Aamiin.

# MUUJINTII RASUUL YOOXANAA

## Billowga Kitaabkan Iyo Salaan

**1** Tanu waa muujintii Ciise Masiix oo Eebbe isaga siiyay si uu u tuso adeegayaashiisa
waxyaabaha waajibka ah inay dhawaan dhacaan. Oo isagu malaggiisa ayuu u soo diray
adeegihiisa Yooxanaa, 2 Kaasoo ka markhaatifuray erayga Eebbe iyo markhaatifurka Ciise
Masiix iyo wixii uu isagu arkay oo dhan. 3 Waxaa barakaysan qofka akhriya iyo kuwa maqla
erayadii wax sii sheegidda, oo xajiya waxyaabaha ku qoran, waayo, wakhtigu wuu dhawyahay.

## Salaanta Toddobada Kiniisadood

4 Anigoo Yooxanaa ah waxaan waxyaabahan u soo qorayaa toddobada kiniisadood ee Aasiya
ku yaalla. Nimco iyo nabadu ha idiinka yimaaddeen ka jira ee jiray oo iman doona iyo xagga
toddobada arwaax ee carshigiisa hor jooga, 5 Iyo xagga Ciise Masiix oo ah markhaatiga
aaminka ah iyo curadka kuwii dhintay iyo amiirka boqorrada dhulka. Kaasoo ina jecel oo dem
biyadeenna dhiiggiisa inagaga furay, 6 Oo inaga dhigay boqortooyada wadaaddada Eebbahiisa
ah Aabbihii, isaga ammaan iyo awoodba ha u ahaato weligeed iyo weligeedba. Aamiin. 7 Bal
eega, wuxuu la imanayaa daruuraha, oo waxaa isaga arki doona il kasta iyo kuwii isaga
waranka galiyay, oo qabiilooyinka dhulka oo dhanna isagay u barooran doonaan. Haah, saas
ha ahaato. Aamiin. 8 Rabbiga Eebbaha ahu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan ahay Alfa iyo
Oomeega oo ah ka jira ee jiray ee iman doona iyo Qaadirka.

## Riyadii Masiixa Lagu Arkay

9 Anigoo ah Yooxanaa oo ah walaalkiinna idinkala qayb galay dhibaatada iyo boqortooyada iyo
dulqaadka ku jira Ciise, waxaan jasiiradda Batmos la yidhaahdo u joogay erayga Eebbe iyo u
markhaatifuridda Ciise aawadeed. 10 Maalintii Rabbiga waxaa igu jiray Ruuxa, oo waxaan meel
iga dambaysa ka maqlay cod wayn oo sidii buun oo kale ah oo leh, 11 Waxaad aragto buug ku
qor, oo u kala dir toddobada kiniisadood ee ku kala yaalla, Efesos iyo Simurna iyo Bergamos
iyo Tu'ateyra iyo Sardis iyo Filadelfiya iyo La'odikiya. 12 Markaasaan dib u jeedsaday si aan u
arko codka ila hadlay, oo markaan dib eegay waxaan arkay toddoba laambadood oo dahab ah.
13 Oo laambadaha badhtankooda waxaan ku arkay qof u eg banii aadan, kaasoo qaba khamiis
dheer oo laabtana waxaa ugu xidhnaa suun dahab ah. 14 Madaxiisa iyo timihiisuna waxay u
caddaayeen sida suuf cad iyo sida baraf oo kale; oo indhihiisuna waxay ahaayeen sida dab
ololaya oo kale, 15 cagihiisuna waxay u ekaayeen nuxaas dhalaalaysa oo foorno lagu safeeyay
oo kale, codkiisuna wuxuu u ekaa codka biyo badan. 16 Oo gacantiisa midig wuxuu ku haystay
toddoba xiddigood, oo afkiisana waxaa ka soo baxay seef soofaysan oo laba af leh,
muuqaalkiisuna wuxuu u ekaa qorraxda oo xoog u iftiimaysa. 17 Oo markaan arkay ayaan ku
hor dhacay sidii qof mayd ah. markaasuu gacantiisa midig i saaray oo wuxuu igu yidhi, Ha
cabsanin. Anigu waxaan ahay ka ugu horreeyay iyo ka ugu dambeeya, 18 Iyo ka nool. Anigu
waan dhintay, oo bal eeg, waan noolahay tan iyo weligayba oo waxaan haystaa furayaasha
dhimashada iyo Haawiya. 19 Haddaba qor waxyaabaha aad aragtay iyo waxyaabaha hadda jira
iyo waxyaabaha hadda ka dib dhici doonaba. 20 Toddobada xiddigood eed ku aragtay
gacantayda midig iyo toddobada laambadood ee dahabka ah macnahooda qarsoon waa sidan,

toddobada xiddigood waxaa weeyaan malaa'igaha toddobada kiniisadood, toddobada laambadoodna waa toddobada kiniisadood.

### Warqaddii Kiniisadda Efesos Loo Diray

**2** Kiniisadda Efesos ku taalla malaa'igteeda waxaad u qortaa, Kan toddobada xiddigood
gacantiisa midig ku haya ee toddobada laambadood ee dahabka badhtankooda ku socdaa
wuxuu kugu leeyahay sidan: [2] Waan ogahay shaqadaada iyo hawshaada iyo dulqaadkaaga iyo
inaadan u adkaysan karin kuwa sharka leh iyo inaad tijaabisay kuwa rasuullada isku sheega
iyagoon ahayn, oo waxaad ogaatay inay beenaalayaal yihiin. [3] Waad dulqaadataa, oo dhibaato
ayaad u adkaysatay magacayga aawadiis, mana aadan daalin. [4] Laakiin tan ayaan kugu
haystaa, waayo, jacaylkaagii hore waad dayacday. [5] Haddaba xusuuso meeshii aad ka
dhacday, oo toobadkeen oo shaqadaadii hore ku noqo, haddii kale anigu waan kuu iman
doonaa oo laambaddaada ayaan ka qaadi doonaa meesheeda haddaadan toobadkeenin.
[6] Laakiinse tan ayaad leedahay, waxaad necebtahay dadka Nikolas raaca shaqadooda oo aan
aniguba necbahay. [7] Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. Kii
guulaysta waxaan siin doonaa amar uu wax kaga cuno geedka nolosha ee ku dhex yaalla
Firdoosada Eebbe.

### Warqaddii Kiniisadda Simurna Loo Diray

[8] Kiniisadda Simurna ku taalna malaa'igteeda waxaad u qortaa, Ka ugu horreeyay ee ugu
dambeeya ee dhintay soona noolaaday, wuxuu kugu leeyahay sidan, [9] Waan ogahay
dhibaatadaada iyo faqiirnimadaada (laakiin taajir baad tahay) iyo cayda ay kugu caayaan kuwa
Yuhuudda isku sheegaa ee aan ahayn, laakiinse ah kuwa sunagogga Shaydaanka. [10] Ha ka
cabsanin waxyaabaha aad dhawaan ku xanuunsan doonto. Bal eega, in laydin tijaabiyo
aawadeed, Iblaysku qaarkiin ayuu dhawaan xabsi ku tuuri doonaa oo idinku muddo toban
maalmood ah waxaa idinku dhici doona dhibaato. Ilaa dhimashada aamin ahow, anna waxaan
ku siin doonaa taajka nolosha. [11] Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha.
Kii guulaysta dhimashada labaad waxba yeeli mayso.

### Warqaddii Kiniisadda Bergamos Loo Diray

[12] Kiniisadda Bergamos ku taalna malaa'igteeda waxaad u qortaa; Kan haysta seefta
soofaysan ee labada af leh wuxuu kugu leeyahay sidan, [13] Waan ogahay meeshaad
deggantahay inay tahay meesha carshiga Shaydaanku yaallo oo aad magacayga xajiso oo
aadan inkirin iimaankayga xataa waagii Antibas joogay, kaasoo ahaa markhaatigaygii iyo
kaygii aaminka ahaa ee dhexdiinna lagu dilay meesha Shaydaanku degganyahay. [14] Laakiinse
dhawr arrimood ayaan kugu haystaa, maxaa yeelay, halkaas waxaad ku haysataa kuwo
waxbariddii Balcaam haysta, kaasoo baray Baalaaq inuu reer banii Israa'iil hortooda ku tuuro
dhagax lagu turunturoodo, si ay u cunaan cunto sanamyo loogu alla baryay iyo inay
sinaystaan. [15] Waliba waxaa kale ood haysaa kuwo sidaas oo kale u xajiya waxbariddii dadka
Nikolas raaca. [16] Haddaba sidaas daraaddeed toobadkeena, haddii kale degdeg ayaan idiinku
iman oo iyaga waxaan kula dagaallami doonaa seefta afkayga. [17] Kii dheg lahu ha maqlo waxa
Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. Kii guulaysta waxaan wax ka siin doonaa maannada qarsoon,

oo waxaan siin doonaa dhagax cad, dhagaxa dushiisana waxaa ku qoran magac cusub oo uusan ninna aqoonin, kii hela mooyaane.

## Warqaddii Kiniisadda Tu'ateyra Loo Diray

18 Kiniisadda Tu'ateyra ku taalna malaa'igteeda waxaad u qortaa, Wiilka Eebbe ee indhihiisu u
egyihiin dab ololkiis, cagihiisuna u egyihiin nuxaas dhalaalaysaa wuxuu kugu leeyahay sidan,
19 Waan ogahay shaqadaada iyo jacaylkaaga iyo rumaysadkaaga iyo sidaad u adeegto iyo
samirkaaga iyo inay shaqadaada dambe ka badantahay tii hore.
20 Laakiinse tan ayaan kuu haystaa, waayo, waxaad oggoshahay naagta Yesebeel la yidhaahdo oo nebiyadda isku
sheegta; oo waxay adeegayaashayda bartaa inay sinaystaan oo ay cunaan wax sanamyo
loogu ala baryay.
21 Oo waxaan iyada siiyay wakhti ay ku toobadkeento, iyaduse ma doonayso
inay ka toobadkeento sinadeeda.
22 Bal eeg, haddaba iyada sariir ayaan ku dul tuurayaa oo
kuwii iyada la sinaystana waxaan ku dhex tuurayaa dhibaato wayn, haddii ayna ka
toobadkeenin shaqadeeda.
23 Oo waxaan carruurteeda ku dili doonaa dhimasho, kiniisadaha
oo dhanna waxay ogaan doonaan inaan ahay ka baadha fikradaha iyo quluubtaba oo anna
midkiin walbaba waxaan ku abaal marin doonaa sida camalkiisu yahay.
24 Laakiinse intiinna
kale ee Tu'ateyra jooga, in alla intiinna aan waxbariddan haysan ee sida ay iyagu yidhaahdaan
aan garanaynin asraarta qoddada dheer ee Shaydaanka, idinka waxaan idinku leeyahay,
Dushiinna culays kale ma saarayo.
25 Hase yeeshee waxaad haysataan xajiya ilaa oon ka
imaaddo.
26 Kii guulaysta ee shaqadayda xajiya tan iyo ugu dambaysta, waxaan siin doonaa
amar uu ku xukumo ummadaha.
27 Oo wuxuu ku xukumi doonaa ul bir ah, sida weelasha dhari
sameeyuhu ay u burburaan; sida aan aniguba Aabbahay uga helay;
28 Oo waliba waxaan siin
doonaa xiddigta waaberi.
29 Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha

## Farriintii Kiniisadda Sardis Loo Diray

**3** Kiniisadda Sardis ku taalla malaggeeda waxaad u qortaa; Ka haysta toddobada Arwaax ee
Eebbe iyo toddobada xiddigood, wuxuu kugu leeyahay sidan: Waan ogahay shaqadaada, oo
magac baad leedahay sida wax nool, laakiinse meyd baad tahay.
2 Haddaba soo jeed, oo
adkee waxyaabaha hadhay ee dhimashada ku dhaw; waayo, shaqadaadu Eebbe hortiisa
kaamil kuma aha.
3 Haddaba xusuuso sidaad u heshay eed u maqashay oo xaji, oo
toobadkeen. Laakiinse haddaad soo jeedi waydo, waxaan u iman doonaa sida tuug oo kale,
mana ogaan doontid saacadda aan kuu iman doono.
4 Laakiinse waxaad Sardis ku leedahay
dhawr qof oo aan dharkooda nijaasaynin; oo anigay ila socon doonaan iyagoo dhar cad qaba;
maxaa yeelay, way istaahilaan.
5 Kii guulaysta sidaas oo kale ayuu dhar cad u xidhan doonaa;
oo anna sinaba magiciisa ugama tirtiri doono kitaabka nolosha, oo waxaan magiciisa ka qiran
doonaa Aabbahay hortiisa iyo malaa'igihiisa hortooda.
6 Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku
leeyahay kiniisadaha.

## Farriintii Kiniisadda Filadelfiya Loo Diray

7 Kiniisadda Filadelfiya ku taalla malaggeeda waxaad u qortaa; Ka qudduuska ah ee runta ah
ee furihii Daa'uud haysta ee wuxuu furo uusan ninna xidhi karin, wuxuu xidhana uusan ninna
furi karin, wuxuu kugu leeyahay,
8 Waan ogahay shaqadaada oo bal eeg, waxaan ku hor
dhigay albaab furan oo uusan ninna xidhi karin, waayo, waxaad leedahay waxoogaa xoog ah,

oo eraygaygiina waad dhawrtay, oo magacaygana maadan inkirin. [9] Bal eeg, kuwa sunagogga Shaydaanka ee Yuhuud baanu nahay leh ee aan ahayn, laakiinse beenaalayaasha ah, oo bal eeg, iyaga waxaan ka dhigi doonaa inay yimaaddaan oo ay cagahaaga hortooda ku sujuudaan oo ay ogaadaan inaan anigu ku jeclahay. [10] Waayo, adigu eraygaygaad ku dhaqantaa oo waad dulqaadataa, sidaas daraaddeed waxaan kaa ilaalin doonaa saacadda jirrabaadda ee dhawaan u imanaysa dunida oo dhan si ay u jirrabto kuwa dhulka deggan. [11] Anigu degdeg baan u imanayaa. Haddaba xaji waxaad hayso, si uusan ninna taajkaaga kaaga qaadin. [12] Kii guulaysta waxaan ka dhigi doonaa tiir ku yaalla guriga Eebbaha, halkaasna mar dambe kama bixi doono, oo waxaan dushiisa ku qori doonaa magaca Eebbe, iyo magaca magaalada Eebbahayga, taas oo ah Quddusta cusub ee samada iyo xagga Eebbahayga ka soo degaysa iyo xataa magacayga cusub. [13] Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha.

### Farriintii Kiniisadda La'odikiya Loo Diray

[14] Kiniisadda La'odikiya ku taalla malaggeeda waxaad u qortaa; Ka Aamiinka ah ee markhaatiga daacadda iyo runtaba ah, oo ah madaxa uunka Eebbe, wuxuu kugu leeyahay, [15] Waan ogahay shaqadaada iyo inaadan qabow iyo kulayl midna ahayn. Waxaan jeclaan lahaa inaad ama qabowdahay ama kulushahay. [16] Haddaba waad diirrantahay oo mana qabowbid mana kululid, sidaas daraaddeed afkaygaan kaa tufi doonaa. [17] Waxaad tidhaahdaa, Hodan baan ahay oo hanti baanleeyahay oo waxba uma baahni, mana ogid inaad tahay mid balaayo ku dhacday oo laga naxo oo faqiir ah oo indhaha la' oo qaawan. [18] Sidaas daraaddeed waxaan kugula talinayaa inaad iga iibsato dahab dab lagu safeeyay, si aad maal qabeen u noqoto iyo dhar cad oo aad qaawanaantaada ka xidhato, si ayna cawradaadu u muuqan, iyo indhakuul aad indhaha u marsato si aad wax u aragto. [19] In alla inta aan jeclahay waan canaantaa oo waan edbiyaa, sidaas daraaddeed qiiro yeelo oo toobadkeen. [20] Bal eeg, albaabkaan taaganahay oon garaacayaa; haddaba hadduu nin codkayga maqlo oo uu albaabka iga furo, waan u soo gelayaa, oo waan la cashayn, isna wuu ila cashayn. [21] Kii guulaysta, waxaan siin doonaa amar uu carshigayga igula fadhiisto, sidaan aniguba u guulaystay ee aan Aabbahay ugula fadhiistay carshigiisa. [22] Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha.

### Riyadii Jannada Lagu Arkay

**4** Waxyaabahaas ka dib kor baan eegay oo waxaan arkay albaab samada ka furmay, oo codkii horay ee aan maqlay ayaa sidii buun oo kale ila hadlay oo wuxuu igu yidhi, Halkan soo fuul oo waxaan ku tusi doonaa waxyaabaha ay qasabka tahay inay hadda ka dib dhacaan. [2] Isla markiiba waxaa igu soo dagay Ruuxa, oo bal eeg, waxaa jiray carshi samada qotoma, oo mid baa carshiga ku fadhiyay, [3] Oo kii fadhiyay midabkiisu wuxuu u ekaa dhagax yasbid iyo dhagax sardiyos, oo carshigana waxaa ku wareegsanaa qaansoroobaad midabkeedu u eg yahay dhagax sumurud. [4] Oo carshiga hareerihiisana waxaa yaallay afar iyo labaatan carshi oo kale; oo carshiyada dushoodana waxaan ku arkay afar iyo labaatan oday oo ku fadhiya, oo dhar cad qaba; madaxana waxaa u saarnaa taajaj dahab ah. [5] Oo carshigana waxaa ka soo baxay hillaac iyo codad iyo onkod. Oo waxaa jiray toddoba laambadood oo dab ah oo carshiga hortiisa ka ololaya, kuwaasoo ah toddobada Arwaax ee Eebbe. [6] Oo carshiga hortiisana waxaa yaallay wax la mid ah bad muraayad ah oo u eg quruurad, oo carshiga badhtankiisa iyo

carshiga hareerihiisa waxaa joogay afar xayawaan oo xagga horay iyo xagga dambaba indho miidha ka buuxaa.

[7] Xayawaanka kowaad wuxuu u ekaa libaax, xayawaanka labaadna wuxuu u ekaa dibi,
xayawaankii saddexaadna wuxuu lahaa weji u eg weji banii aadanka, xayawaankii afraadna
wuxuu u ekaa gorgor duulaya. [8] Oo afarta xayawaan mid walba wuxuu lahaa lix baal, oo
hareerahooda iyo gudahoodaba wada indho ah; oo habeen iyo maalin midna ma nastaan, oo
waxay yidhaahdaan, Qudduus, qudduus, qudduus waxaa ah Rabbiga ah Eebbaha Qaadirka
ah, ee jiray ee jira oo iman doona. [9] Oo markay xayawaanku ammaanaan oo ciseeyaan oo
mahad u naqaan ka carshiga ku fadhiya oo ah ka nool weligii iyo weligiiba, [10] Ayay afar iyo
labaatanka oday ku hor sujuudaan ka carshiga ku fadhiya, oo waxay caabudaan ka nool weligii
iyo weligiiba, oo taajajkoodana waxay ku tuuri doonaan carshiga hortiisa, iyagoo leh,
[11] Rabbigayagow, Eebbahaygow, adigaa mudan inay kuu ahaato ammaanta iyo sharaf iyo
xooggba, waayo, wax kasta adigaa abuuray, maxaa yeelay, doonistaada aawadeed ayay ku
ahaadeen oo loo abuuray.

**Buugga Iyo Wanka**

**5** Oo anna kii carshiga ku fadhiyay gacantiisa midigta ah waxaan ku arkay kitaab ay kor iyo
hoosba wax kaga qoranyihiin, oo waxaa ku shaabadaysnaa toddoba shaabadood. [2] Oo
waxaan arkay malag xoog wayn oo ku dhawaaqaya cod wayn, oo leh, Bal yaa istaahila inuu
kitaabka kala bixiyo oo uu furo shaabadihiisa? [3] Oo laguma arag samada iyo dhulka dushiisa
iyo dhulka hoostiisa cid awoodda inay kitaabka kala furto ama eegto. [4] Markaasaan aad u
ooyay, maxaa yeelay, lama helin mid istaahila inuu kitaabka kala furo ama eego. [5] Marka
odayaasha midkood ayaa igu yidhi, Ha ooyin, bal eeg, Libaaxa qabiilka reer Yahuudah ka mid
ah oo ah xididkii ka yimid Daa'uud ayaa wuxuu ku guulaystay inuu furo kitaabka iyo
toddobadiisa shaabadoodba. [6] Oo inta u dhaxaysa carshiga iyo afarta xayawaan iyo
odayaasha waxaan ku arkay Wan taagan oo ah sida mid la gowracay oo toddoba gees iyo
toddoba indhood leh kuwaasoo ah toddobada Arwaax ee Eebbe, ee loo soo diray dunida oo
dhan. [7] Oo isna intuu yimid ayuu kitaabkii ka qaatay gacanta midig ee kii carshiga ku fadhiyay.
[8] Oo markuu kitaabkii qaatay afartii xayawaan iyo afar iyo labaatankii odayba waxay ku
dhaceen Wanka hortiisa iyagoo mid walba wato giitaar iyo suxuun dahab ah oo uu foox ka
buuxo oo ah baryadii qudduusiinta. [9] Haddaba waxay ku gabyeen qasiido cusub iyagoo leh,
Adigu waxaad istaahishaa inaad kitaabka qaadato oo aad shaabadihiisa furto; waayo, waa
lagu gowracay, oo waxaad Eebbe dhiiggaaga ugu soo furatay dad ka tirsan qabiil kasta iyo af
kasta iyo qowmiyad kasta iyo ummad kasta, [10] Marka waxaad iyaga ka dhigtay inay
Eebbaheenna u ahaadaan boqorrro iyo wadaaddo; oo iyana dhulka ayay wax ku xukumi
doonaan. [11] Oo anna carshiga iyo xayawaanada iyo odayaasha hareerahooda ayaan eegay,
waxaan ku maqlay malaa'igo fara badan codkood, oy tiradoodu gaadhayso malaayiin iyo
kumaan kun, [12] Oo waxay cod wayn ku lahaayeen, Wanka la gowracay wuxuu istaahilaa inuu
helo xoog iyo hodantinimo iyo xigmad iyo awood iyo sharaf iyo ammaan iyo mahad. [13] Oo wax
kasta oo la abuuray oo ku jira samada iyo dhulka dushiisa iyo dhulka hoostiisa iyo badda
gudaheeda iyo waxyaabaha iyaga ku jira oo dhan ayaa waxaan maqlay iyagoo leh, Ka
carshiga ku fadhiya iyo Wanka ha u ahaadeen mahad iyo sharaf iyo ammaan iyo xoog
weligood iyo weligoodba! [14] Markaasay afartii xayawaan waxay yidhaahdeen, Aamiin.
Odayaashiina way dhaceen oo way sujuudeen.

## Shaabadihii Waa La Furay

**6** Oo waxaan arkayay marku Wanku furay toddobadii shaabadood middood, oo waxaan
maqlay afartii xayawaan midkood oo codkiisa la moodo onkod oo leh, Kaalay oo arag. 2 Oo bal
eeg, waxaan arkay faras cad oo kii fuushanaana wuxuu haystay qaanso, oo waxaa isaga la
siiyay taaj; oo wuxuu soo baxay isagoo guulaysanaya, wuxuuna u soo baxay inuu guulaysto.
3 Oo haddana markuu furay shaabaddii labaad waxaan maqlay xayawaankii labaad oo leh,
Kaalay oo arag. 4 Markaasaa waxaa soo baxay faras kale oo midab casaan ah leh; oo kii
fuushanaana waxaa la siiyay amar uu dunida nabadda kaga qaado si ay dadku midba midka
kale dilo; oo waxaa la siiyay seef wayn. 5 Oo haddana markuu shaabaddii saddexaad furay
waxaan maqlay xayawaankii saddexaad oo leh, Kaalay oo arag. Oo bal eeg, waxaan arkay
faras madow; oo kii fuushanaana wuxuu gacanta ku haystay miisaan. 6 Oo waxaan afartii
xayawaan dhexdooda ka maqlay wax cod la moodo oo leh, Koombo sarreen ah qiimaheedu
waa dinaar, saddex koombo oo qabandi ahna qiimahoodu waa dinaar, saliidda iyo khamrigana
wax ha yeelin. 7 Oo haddana markuu shaabaddii afraad furay waxaan maqlay xayawaankii
afraad codkiisii oo leh, Kaalay oo arag. 8 Oo bal eeg, waxaan arkay faras madow oo kii
fuushanaana magiciisu wuxuu ahaa Dhimasho; oo waxaa la socday Haawiya. Oo waxaa iyaga
la siiyay amar ay ku xukumaan dunida afarteeda dacal oo ay ku laayaan seef iyo abaar iyo
dhimasho iyo dugaagga dhulka. 9 Oo haddana markuu furay shaabaddii shanaad waxaan
meeshii allabariga hoosteeda ku arkay nafihii kuwii loo dilay erayga Eebbe aawadii iyo
markhaatigii ay fureen aawadii, 10 Oo iyaguna waxay ku dhawaaqeen cod wayn iyagoo leh,
Sayidkayaga qudduuska ah ee runtahow, ilaa goormaadan xukumaynin oo aadan dhiigayaga
nooga aargudaynin kuwa dhulka jooga?

11 Oo mid walba waxaa la siiyay khamiis cad; oo waxaa loo sheegay inay wakhti yar nastaan
ilaa iyo inta kuwa adeegayaasha iyagoo kale ah ee walaalahooda ah dhawaan sidooda oo kale
loo dilayo oo ay ka soo dhammaadaan. 12 Oo haddana markuu shaabaddii lixaad furay, waxaa
dhacay dhulgariir wayn; oo qorraxduna waxay u madoobaatay sidii joonyad dhogor ah, oo
dayaxii oo dhanna wuxuu noqday sidii dhiig oo kale; 13 Oo xiddigihii cirkuna waxay ku soo
daateen dhulka sida geedka berdu u tuuro midhihiisa aan bislaan markay dabayl waynu ruxdo.
14 Oo samadiina waxaa loo duuduubay sida kitaab oo kale, oo buur walba iyo jasiirad walbaba
meeshoodii waa laga dhaqaajiyay. 15 Oo boqorradii dunida iyo amiirrada iyo saraakiisha sare
iyo maal qabeennada iyo kuwa awoodda wayn leh iyo addoon kasta iyo mid kasta oo xor ahba,
waxay ku dhuunteen godadka iyo dhagaxyada buuraha; 16 Oo waxay ku yidhaahdeen buuraha
iyo dhagaxyada, Nagu soo dhaca oo naga qariya ka carshiga ku fadhiya wejigiisa iyo cadhada
Wanka, 17 Waayo, waxaa timid maalintii waynayd ee cadhadooda oo bal yaa awoodi kara inuu
istaago?

## Waxaa La Shaabadeeyay Boqol Iyo Afar Iyo Afartan Kun Oo Qof

**7** Markaas dabadeed waxaan arkay afar malag oo taagan afarta gees ee dhulka, oo waxay
hayaan afarta dabaylood, si ayna dabaylu ugu dhicin dhulka ama badda ama dhirta. 2 Oo
waxaan arkay malag kale oo ka soo baxaya xagga qorrax ka soo baxa oo haysata shaabadda
Eebbaha nool; oo cod wayn ayuu ugu dhawaaqay afartii malag ee amarka lagu siiyay inay wax
yeelleeyaan dhulka iyo badda, oo wuxuu ku tidhi, 3 Waxba ha yeelina dhulka iyo badda iyo
dhirta toona, ilaa oon adeegayaasha Eebbahayga wejiga ka shaabadayno. 4 Oo waxaan

maqlay tirada la shaabadeeyay oo waxay ahaayeen boqol iyo afar iyo afartan kun oo intaas
ayaa laga shaabadeeyay qabiilooyinka reer bani Israa'iil oo dhan.
5 Qabiilka reer Yahuudah waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Ruubeenna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Gaadna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
6 Qabiilka reer Aasheerna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Naftaalina waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Manasehna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
7 Qabiilka reer Simecoonna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Laawina waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Isaakaarna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
8 Qabiilka reer Sebulunna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Yuusufna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Benyaamiinna waxaa laga shaabadeeyay laba iyo toban kun.

### Riyadii Lagu Arkay Kuwii Rabbigu Soo Madaxfurtay

9 Oo bal eeg, waxyaabahaas ka dib waxaan arkay dad faro badan, oo aan ninna tirin karin, oo
ka soo jeeda ummad walba iyo qabiil kasta iyo qowmiyad kasta iyo af kasta, oo waxay
taagnaayeen carshiga hortiisa iyo Wanka hortiisa, iyagoo qaba khamiisyo cadcad, gacmahana
ku haysta caleemo timireed. 10 Oo waxay ku dhawaaqeen cod wayn, iyagoo leh,
Badbaado waxaa leh Eebbahayga carshiga ku fadhiya iyo Wanka. 11 Oo malaa'igihii oo
dhanna waxay taagnaayeen carshiga hareerihiisa iyo odayaasha iyo afarta xayawaan
hareerahooda; oo carshiga hortiisii ayay ku dhaceen oo intay sujuudeen ayay Eebbe
caabudeen, 12 Iyagoo leh, Eebbahayga ha u ahaato barako iyo ammaan iyo xigmad iyo mahad
iyo sharaf iyo xoog iyo awood waligeed iyo waligeed! Aamiin. 13 Oo odayaasha midkood ayaa ii
jawaabay oo wuxuu igu yidhi, Kuwan khamiisyada cadcad qabaa miyaad garanaysaa, xaggay
ka yimaaddeen? 14 Oo waxaan ku idhi, Mudane adigaa og. Marka wuxuu igu yidhi, Kuwanu
waa kuwii ka soo badbaaday dhibaatadii waynayd oo waxay khamiisyadoodii ku maydheen oo
ku caddeeyeen dhiigga Wanka. 15 Sidaas daraaddeed waxay joogaan carshiga Eebbe hortiisa
oo waxay isaga uga adeegaan gurigiisa habeen iyo maalinba oo ka carshiga ku fadhiyana
wuxuu dushooda ka dhisan doonaa taambuuggiisa. 16 Oo iyaguna mar dambe ma gaajoon
doonaan, mana harraadi doonaan mar dambe, cadceed iyo kulaylna ma arki doonaan.
17 Waayo, Wanka carshiga dhexdiisa jooga ayaa u ahaan doonaa adhijirkooda oo wuxuu iyaga
u hoggaamin doonaa ilaha biyaha nolosha oo Eebbana indhahooda ilmo kasta ayuu ka tirtiri
doonaa.

### Shaambaddii Toddobaad

**8** Oo haddana markuu furay shaabaddii toddobaad, in saacad badhkeed ah waxaa samada ka
dhacday aamusnaan. 2 Markaasaan waxaan arkay toddobadii malag ee Eebbe hortiisa
taagnaa, oo waxaa la siiyay toddoba buun. 3 Oo haddana waxaa yimid malag kale, oo wuxuu
is-ag taagay meesha allabariga, isagoo haysta idan dahab ah, oo waxaa la siiyay foox badan si
uu ugu daro ducada qudduusiinta oo dhan oo uu ugu shiddo meesha allabariga ee dahabka
ahayd oo carshiga hortiisa ku taalla. 4 Oo qiiqii fooxa oo ay ducada qudduusiintu la socoto ayaa
wuxuu ka baxay gacantii malagga oo wuxuu kor ugu baxay Eebbe hortiisa. 5 Marka malagii

wuxuu qaaday idankii, oo wuxuu ka buuxiyay dabkii meesha allabariga, markaasuu dhulka ku
tuuray; marka waxaa dhacay onkod iyo codad iyo hillaac iyo dhulgariir. [6] Deedna toddobadii
malag ee toddobada buun haystay waxay isu diyaariyeen inay afuufaan. [7]

Malagii kowaad ayaa afuufay, marka waxaa soo dhacay roob dhagaxyaale ah iyo dab dhiig ku
dhex qasanyahay, oo waxaa lagu tuuray dhulka; markaasay dunida saddex meeloodow meeli
gubatay, oo dhirtana saddex meeloodow meel ayaa gubatay, oo cawskii qoyanaa oo dhanna
wuu gubtay. [8] Oo haddana waxaa afuufay malaggii labaad, marka waxaa badda lagu tuuray
wax le'eg buur wayn oo dab ka ololayo; markaasay baddii saddex meeloodow meel dhiig
noqotay; [9] Oo waxaa halkaas ku dhintay uunkii badda ku jiray ee noolaa saddex meeloodow
meel, oo maraakiibtiina saddex meeloodow meel ayaa la baabbi'iyay. [10] Oo haddana waxaa
afuufay malaggii saddexaad, marka waxaa samada ka soo dhacday xiddig wayn oo sidii
laambadeed u ololaysa, oo waxay ku dul dhacday webiyaasha saddex meeloodow meel iyo
ilihii biyaha ahaa, [11] Xiddigta magaceedana waxaa la yidhaahdaa khadhaadh oo biyihii saddex
meeloodow meel ayaa khadhaadh noqotay; dad badanna waxay ku dhinteen biyihii, maxaa
yeelay, khadhaadh baa laga dhigay. [12] Oo haddana waxaa afuufay malaggii afraad, oo wuxuu
wax ku dhuftay qorraxda saddex meeloodow meel iyo dayaxa saddex meeloodow meel iyo
xiddigaha saddex meeloodow meel, oo saddex meeloodow meeli way madoobaadeen, oo
maalinta saddex meeloodow meeli ayuu iftiinkeedu madoobaaday, habeenkuna sidaasoo kale
ayuu noqday. 1 [3] Haddana waxaan arkay oon maqlay gorgor dhex duulaya samada kaasoo
cod wayn ku leh, Wuxuu hoog iyo halaag ku dhacay kuwa dhulka deggan, sababtoo ah waa
buunanka hadhay oo ay saddexda malag dhawaan afuufi doonaan!

**9** Oo haddana waxaa afuufay malaggii shanaad, marka waxaan arkay xiddig samada ka soo
dhacday oo dhulka ku soo dhacday; oo waxaa isaga la siiyay furihii haawiyada aan salkeeda la
gaadhi karin.[293*] [2] Marka wuxuu furray haawiya, oo waxaa kor uga soo baxay qiiq u eg qiiqa
foorno wayn; oo qiiqa aawadii qorraxdii iyo hawadiiba gudcur bay noqdeen. [3] Markaasaa qiiqii
waxaa ka soo baxay oo dhulka ku soo degay ayax; oo waxaa iyaga la siiyay xoog sida
hangarallayaasha dhulka oo kale. [4] Oo waxaa loo sheegay inayna waxba yeelina cawska
dhulka iyo wax cagaar ah iyo geednaba, dadka aan shaabadda Eebbe wejiga ku lahayn
mooyee. [5] Oo haddana waxaa lagu amray inayna dadka dilin, laakiinse inay muddo shan bilood
ah xanuujiyaan, xanuunkooduna wuxuu ahaan doonaa xanuunka hangarallahu markuu qof
qaniino oo kale. [6] Oo ayaamahaas dadku waxay dooni doonaan dhimasho, oo sinaba uma heli
doonaan, oo waxay jeclaan doonaan inay dhintaan, laakiinse dhimashadu way ka carari
doontaa iyaga. [7] Oo ayaxa qaabkiisuna wuxuu u ekaa fardo dagaal loo diyaariyay; oo
madaxana waxaa u saarnaa taajaj dahab wax u eg, oo wejiyadooduna wuxuu u ekaa wejiyo
dad. [8] Oo waxay lahaayeen timo u eg timo dumar; ilkahooduna waxay u ekaayeen ilko libaax.
[9] Oo waxay lahaayeen laabdhawr u eg laabdhawr bir ah; oo sanqadha baallahooduna waxay u
ekayd sanqadh fardo badan oo dagaal ku yaacaya. [10] Oo waxay lahaayeen dabo u eg
hangarallayaasha dabadooda iyo miciyo; oo dabadoodana waxay ku lahaayeen xoog ay dadka
wax ku yeelaan muddo shan bilood ah. [11] Oo waxaa iyaga boqor u ah malagga haawiya; oo
magiciisana afka Cibraaniga waxaa lagu yidhaahdaa Abaddoon; afka Gariiggana magiciisa
waxaa lagu yidhaahdaa Abolyoon. [12] Balaayadii kowaad way dhammaaday; oo bal eeg, weli
waxaa dhiman oo hadda ka dib imanaya laba balaayo oo kale. [13] Oo haddana waxaa afuufay
malaggii lixaad, marka waxaan maqlay cod ka dhawaaqaya afarta gees ee meesha allabariga

293 Naarta Haawiya een salkeeda la gaadhi karin.

ee dahabka ahayd oo Eebbe hor taalla, 14 Oo wuxuu malagii lixaad ee buunka haysatay ku
yidhi, Fur afarta malag ee ku ag xidhan webiga wayn ee Yufraad. 15 Marka waxaa la furay
afartii malag ee loo diyaariyay saacadda iyo maalinta iyo bisha iyo sannadda si ay u laayaan
dadka saddex meeloodow meel. 16 Oo tirada ciidanka fardooleyda wuxuu ahaa laba boqol oo
malyan; oo anigu waan maqlay tiradooda. 17 Oo sidaasaa ayaan riyadii ku arkay fardihii iyo
kuwii fuushanaa oo qaba laabdhawr u eg dab iyo dhagax yakintos iyo baaruud; oo fardaha
madaxyadooduna waxay u ekaayeen madaxyo libaax; oo afafkoodana waxaa ka soo baxayay
dab iyo qiiq iyo baaruud. 18 Oo dadka saddex meeloodow meel waxaa lagu laayay saddexdan
belaayo oo ah dabka iyo qiiqa iyo baaruudda afkooda ka soo baxay. 19 Waayo, fardaha
xooggoodu wuxuu ku jiray afkooda iyo dabadooda, waayo, dabadoodu waxay u ekayd
abeesooyin, oo waxay lahaayeen madaxyo, oo kuwaasay dadka wax ku yeeli jireen. 20 Oo
dadkii hadhay oo aan lagu laynin saddexdaas belaayo, kamayna toobadkeenin shaqadii
gacmahooda, si ayna u caabudin shaydaanno iyo sanamyo dahab ah iyo kuwo lacag ah iyo
kuwo nuxaas ah iyo kuwo dhagax ah iyo kuwo qoryo aan waxba arkin waxna maqli karin ah,
soconna karin; 21 Kamana ayna toobadkeenin gacan ku dhiiglanimadooda iyo saaxirnimadooda
iyo sinadooda iyo tuugnimadooda.

### Malagga Iyo Buugga Yar

**10** Oo haddana waxaan arkay malag kale oo xoog wayn oo samada ka soo degaya, isagoo
daruur huwan, madaxiisana waxaa u saarnaa qaansoroobaad, wejigiisuna wuxuu u ekaa
qorraxda oo kale, cagihiisuna waxay u ekaayeen tiirar dab ah, 2 Oo wuxuu gacanta ku haystay
buug yar oo furan. Oo cagta midig wuxuu saaray badda, ta bidixna wuxuu saaray dhulka,
3 Deedna wuxuu ku dhawaaqay cod wayn oo u eg libaax ciyaya, oo markuu qayliyay ayay
toddobadii onkad onkadeen. 4 Oo markay toddobadii onkad onkadeen, waxaan ku dhawaaday
inaan wax qoro; markaasaan maqlay cod samada ka leh, Shaabad ku xidh waxyaalaha
toddobada onkad ay ku onkadeen, oo ha qorin. 5 Marka malaggii aan arkay ee ku taagnaa
badda iyo dhulka ayaa gacantiisa midig samada kor ugu taagay, 6 oo wuxuu ku dhaartay
inuusan wakhti mar dambe jiraynin ka weligii iyo weligiiba nool ee abuuray samada iyo
waxyaabaha ku dhex jira, iyo dhulka iyo waxyaabaha ku dhex jira, iyo badda iyo waxyaalaha
ku dhex jiraba. 7 Laakiinse wakhtiga codka malagga toddobaad markuu ku dhawaado inuu
afuufo waxaa dhammaan doona qarsoonaanta Eebbe sida uu ugu bishaareeyay nebiyadii
adeegayaashiisa ahaa. 8 Oo haddana waxaan mar kale maqlay codkii aan samada ka maqlay
oo igu leh, Tag oo qaado buugga furan oo ku jira gacanta malagga ku taagan badda iyo
dhulka. 9 Marka malaggii ayaan u tagay oo waxaan ku idhi, Buugga yar i sii. Markaasuu igu
yidhi, Qaado oo cun; oo wuxuu calooshaada ka dhigi doonaa khadhaadh, laakiin intuu afkaaga
ku jiro wuxuu u macaanaan doonaa sida malab oo kale. 10 Markaasaan buuggii yaraa ka
qaatay malagga gacantiisa, waanan cunay oo intuu afkayga ku jiray wuxuu u macaanaa sida
malab oo kale; oo markii aan cunay ayay calooshaydu khadhaadh noqotay. 11 Oo isna waxaa
lagu yidhi, Waa inaad mar kale wax ka sii sheegto dad badan iyo ummado badan iyo afaf
badan iyo boqorro badan.

## Labada Markhaati

**11** Marka waxaa lay siiyay wax ul u eg oo malaggii ayaa istaagay oo igu yidhi, Sarakac, oo
qiyaas guriga Eebbe iyo meesha allabariga iyo kuwa Eebbe ku caabuda meeshaas. 2 Lakiin
barxadda guriga dibaddiisa ku taalla iska daa, oo ha qiyaasin; waayo, iyada waxaa la siiyay
ummadaha; oo magaalada qudduuska ahna waxay ku tuman doonaan laba iyo afartan bilood
ah. 3 Oo labadayda markhaati waxaan siin doonaa xoog ay wax ku sii sheegaan kun iyo laba
boqol iyo lixdan maalmood, iyagoo jawaanno qaba. 4 Oo kuwanu waa labada geed ee
saytuunka ah iyo labada laambadood ee hor taagan Rabbiga dhulka. 5 Oo hadduu qof damco
inuu wax yeelo, dab baa afkooda ka soo bixi doona oo gubi doona cadawgooda; oo hadduu
qof damco inuu wax yeelo, waa in sidaa loo dilo. 6 Kuwanu waxay leeyihiin awood ay samada
ku xidhaan, si aan roob u di'in inta ay wax sii sheegayaan, oo waxaa kale oy leeyihiin awood
ay biyaha dhiig kaga dhigaan oo ay dhulkana ugu soo dejiyaan balaayo kasta mar alla markay
doonayaan. 7 Oo markay dhammeeyaan markhaatifurkooda waxaa la diriri doonaa bahalka
haawiya ka soo bixi doona, oo wuu ka adkaan doonaa, wuuna dili doonaa iyaga.[294*] 8 Oo
meydadkoodu wuxuu oolli doonaan jidka magaalada wayn ee lagu matalo Sodom iyo Masar,
halkaas oo Sayidkooda iskutallaabta lagu qodbay.

9 Oo saddex maalmood iyo badh ayaa waxaa meydadkooda daawan doona dad ka yimid
qowmiyadaha iyo qabiilooyinka iyo afafka iyo ummadaha; oo umana oggolaan doonaan in
meydadkooda qabri la geliyo. 10 Oo kuwa dhulka degganna way ku farxi doonaan oo way
rayyaaqi doonaan oo midba midka kale wuxuu u diri doonaa hadiyado; maxaa yeelay, labadan
nebi waxay ciqaabi jireen kuwa dhulka deggan. 11 Oo saddex maalmood iyo badh ka dib waxaa
iyaga soo gashay neeftii nolosha oo xagga Eebbe ka timid, markaasay cagahooda ku
istaageen; oo kuwii iyaga daawanaya cabsi wayn baa ku soo degtay. 12 Oo waxay samada ka
maqleen cod wayn oo ku leh, Halkan soo fuula. Markaasay samada tageen iyagoo daruur ku
dhex jira, oo cadawgoodiina way arkeen. 13 Oo isla saacaddaas waxaa dhacay dhulgariir wayn,
oo magaaladii toban meeloodow meel ayaa duntay; oo dhulgariirkii wuxuu dilay toddoba kun
oo qof, oo intii hadhayna cabsi ayaa gashay, oo waxay ammaaneen Eebbaha samada. 14 Oo
musiibadii labaadna way dhammaatay; oo bal eeg, musiibadii saddexaadna dhakhso ayay u
iman doontaa.

## Buunka Toddobaad

15 Marka waxaa afuufay malaggii toddobaad, oo waxaa samada ka yeedhay codad waawayn,
oo waxay yidhaahdeen, Boqortooyadii dunidu waxay noqotay boqortooyadii Rabbigeenna iyo
Masiixiisa, oo isna boqor buu ahaan doonaa weligii iyo weligiiba. 16 Oo afar iyo labaatankii oday
ee carshiyadooda ku fadhiyay Eebbe hortiisa way dhaceen, oo intay sujuudeen ayay Eebbe
caabudeen, iyagoo leh, 17 Rabbiyow Eebbaha Qaadirka ah ee jira ee jirayow, mahad baannu
kuu celinaynaa; maxaa yeelay, waxaad qaadatay xooggaagii waynaa, oo wax baad xukuntay.
18 Oo ummadihiina way cadhoodeen, oo waxaa yimid cadhadaadii iyo wakhtigii kuwii dhintay la
xukumi lahaa iyo wakhtigii abaal gudkooda la siin lahaa nebiyada adeegayaashaada ah iyo
qudduusiinta iyo kuwa magacaaga ka cabsada, yar iyo waynba, oo la baabbi'in lahaa kuwa
dhulka baabbi'iya. 19 Marka waxaa samada laga furay gurigii Eebbe; oo waxaa gurigiisa

294 Naarta Haawiya.

gudihiisa ka muuqday sanduuqii axdigiisa; marka waxaa dhacay hillaac iyo codad iyo onkad
iyo dhulgariir iyo roob dhagaxyaale ah oo wayn.

### Naagtii Iyo Masduulaagii

**12** Marka waxaa samada ka muuqatay calaamo wayn, taasoo ah naag qorraxda huwan oo
dayaxu cagaheeda hoos yaallo, madaxana waxaa u saarnaa taaj laba iyo toban xiddigood ah,
[2] Oo uur bay lahayd; wayna qaylinaysay iyadoo foolanaysa oo xanuunsanaysa oo doonaysa
inay umusho. [3] Oo haddana samada waxaa ka muuqatay calaamo kale; oo bal eeg, waxaa la
arkay masduulaa wayn oo cas, oo wuxuu lahaa toddoba madax iyo toban gees, oo
madaxyadiisa waxaa u saarnaa toddoba taaj. [4] Oo dabadiisuna waxay soo jiidday xiddigihii
samada saddex meeloodow meel, oo waxay ku soo tuurtay dhulka; marka masduulaagii wuxuu
is-hor taagay naagtii ku dhawayd inay umusho, si uu ilmaha uga liqo markay umusho. [5] Oo
waxay umushay ilmo lab ah, kaasoo loo xugmay inuu ummadaha oo dhan ul bir ah ku xukumo,
oo ilmaheediina waxaa kor loogu qaaday xagga Eebbe iyo carshigiisa. [6] Oo naagtiina waxay u
carartay xagga cidlada, halkaasoo Eebbe iyada ugu diyaariyay meel lagu quudiyo kun iyo laba
boqol iyo lixdan maalmood.

### Shaydaankii Dhulkaa Lagu Soo Tuuray

[7] Marka samada waxaa ka dhacay dagaal, oo Mikaa'iil iyo malaa'igtiisu waxay u soo baxeen
inay la dagaallamaan masduulaagii, oo masduulaagii iyo malaa'igtiisuna way la dagaallameen,
[8] Waana laga adkaaday oo samada mar dambe mayl kumay yeelanin. [9] Oo masduulaagii
waynaa ee ahaa maskii duqa ahaa hoos baa loo soo tuuray, kaasoo la yidhaahdo Iblays iyo
Shaydaan, kaasoo dunida oo dhan khiyaana. Waxaa isaga lagu soo tuuray dhulka, oo
malaa'igtiisiina hoos baa loola soo tuuray isaga. [10] Oo haddana waxaan samada ka maqlay cod
wayn oo leh, Hadda waxaa yimid badbaadadii iyo xooggii iyo boqortooyadii Eebbaheenna iyo
amarkii Masiixiisa; maxaa yeelay, kii walaalaheen dacwayn jiray hoos baa loo tuuray, kaasoo
iyaga ku dacwayn jiray Eebbaheenna hortiisa habeen iyo maalinba. [11] Oo waxay isaga kaga
adkaadeen dhiigga Wanka iyo erayga markhaatifurka oo iyagu naftooda mayna lexejeclaysan
ilaa iyo heerka dhimashada. [12] Haddaba samooyinka iyo kuwa dhex degganow, reyreeya.
balse wuxuu halaag ku dhacay badda iyo dhulka, maxaa yeelay, waxaa idiin soo degay
Iblayskii oo aad u cadhaysan oo weliba garanaya in wakhtigu ku yaryahay. [13] Oo
masduulaagiina markuu arkay in hoos loogu tuuray xagga dhulka ayuu wuxuu ciqaabay naagtii
ilmaha lab dhashay. [14] Oo waxaa naagtii la siiyay laba baal oo gorgor wayn si ay uga duusho
maska ilaa meesheedii cidlada ahayd, halkaasoo iyada lagu quudiyo wakhti iyo wakhtiyo, iyo
wakhti badhkii. [15] Oo maskiina wuxuu afkiisa ka tufay oo naagtii ka daba tuuray biyo ah sidii
webi, si uu daadku u qaado. [16] Marka dhulkii ayaa naagtii caawiyay oo afka kala qaaday oo
wuxuu liqay webigii masduulaagu afkiisa ka soo tuuray. [17] Oo masduulaagii aad buu ugu sii
cadhooday naagta oo wuxuu u soo kacay inuu dagaal la galo farcankeeda kale ee hadhay ee
amarrada Eebbe ku dhaqma oo Ciise u markhaatifuro.

### Xawayaanka

**13** Oo waxaan arkay bahal badda ka soo baxaya, oo wuxuu lahaa toban gees iyo toddoba
madax, oo geesihiisana waxaa u saarnaa toban taaj, oo madaxyadiisiina waxaa ugu qornaa

erayo gaalnimo ah. [2] Oo bahalkii aan arkay wuxuu u ekaa shabeel, oo cagihiisuna waxay u
ekaayeen cago dubi, afkiisuna wuxuu u ekaa af libaax; marka masduulaagii wuxuu isaga siiyay
xooggiisii iyo carshigiisii iyo amar wayn. [3] Deedna waxaan arkay madaxyadiisa midkood oo la
moodo inuu dhaawac dilaa ah leeyayahay, dhaawiciina wuu bogsaday; oo dunida oo dhan
waxay la yaabtay bahalkii; [4] Marka masduulaagii ayay caabudeen, maxaa yeelay, wuxuu
amarkiisa siiyay bahalkii; dadkuna waxay caabudeen bahalkii, waxayna yidhaahdeen, Bal yaa
bahalka la mid ah, Oo yaa awooda inuu la dagaallamo? [5] Marka waxaa isaga la siiyay af ku
hadlaya waxyaalo waawayn iyo gaalnimo; oo haddana waxaa la siiyay amar uu ku sii
shaqeeyo laba iyo afartan bilood. [6] Markaasuu afkiisa kala qaaday si uu Eebbe u caayo oo uu
magiciisa iyo gurigiisa iyo xataa kuwa samada degganba u af lagaaddeeyo. [7] Oo haddana
waxaa isaga la siiyay amar uu kula dagaallamo qudduusiinta oo uu kaga adkaado; oo haddana
waxaa la siiyay amar uu ku xukumo qabiil kasta iyo qowmiyad kasta iyo af kasta iyo ummad
kastaba. [8] Oo waxaa isaga caabudi doona inta dhulka deggan oo dhan oo aan magacooda
lagu qorin kitaabka nolosha ee Wanka la gowracay waagii dunida la aasaasay. [9] Hadduu jiro
nin dheg lahu ha maqlo. [10] Haddii cid xabsi loogu tala galay, xabsi bay aadaysaa, oo haddii cid
seef lagu dilayo waa in seef lagu dilo. Wana kaa samirka iyo rumaysadka qudduusiintu. [11] Oo
haddana waxaan arkay bahal kale oo dhulka ka soo baxaya, oo wuxuu lahaa laba gees oo
geeso wan u eg, oo wuxuu u hadlayay sidii masduulaaga oo kale. [12] Oo wuxuu bahalkii kowaad
hortiisa wax ku sameeyay amarkiisa oo dhan. Oo dunida iyo kuwa degganba wuxuu ku qasbay
inay caabudaan bahalkii kowaad oo dhaawicii uu u dhiman lahaa ka bogsaday. [13] Oo wuxuu
sameeyay mucjisooyin waawayn, wuuna karay xataa inuu dab samada ka soo dejiyo oo dhulka
ku soo tuuro dadka hortiisa. [14] Oo kuwa dhulka deggan wuxuu ku khiyaanay mucjisooyinkii
isaga loo siiyay inuu ku sameeyo bahalka hortiisa; isagoo kuwa dhulka deggan ku leh, Waa
inaad sanam u samaysaan bahalka seefta nabarkeedu ku yaallo ee haddana nool. [15] Oo
haddana waxaa isaga la siiyay xoog uu neef ku geliyo sanamka bahalka, si sanamka bahalku
u hadlo oo uu ka dhigo in la dilo in alla inta aan u sujuudin sanamka bahalka. [16] Oo haddana
wuxuu ka dhigay in dhammaan yar iyo wayn iyo taajir iyo faqiir iyo xor iyo addoonba sumad
lagaga dhigo gacanta midig ama wejiga, [17] Iyo inaysan cidna awood u yeelan inay wax iibiso
ama iibsato, qofkii sumadda leh mooyee, taasoo ah magaca bahalka ama nambarka magiciisa.
[18] Xigmaddu waa tan. qofkii wax garanaya ha tiriyo nambarka bahalka; waayo, waa nambar
banii aadan, nambarkiisuna waa lix boqol iyo lix iyo lixdan.

## Wanka Iyo 144,000

**14** Oo bal eeg, waxaan arkay Wankii oo ku dul taagan Buurta Siyoon, oo waxaa isaga la jiray
boqol iyo afar iyo afartan kun oo qof, oo waxaa wejiga ugu qornaa isaga magiciisa iyo magaca
aabbihii. [2] Marka waxaan samada ka maqlay cod u eg biyo badan codkood iyo onkad wayn
codkii. oo codkii aan maqlayna wuxuu u ekaa gitaarlayaal garaacaya gitaaradahooda,
[3] Markaasay carshiga hortiisa iyo afartii xayawaan iyo odayaasha hortooda waxay ku qaadeen
qasiido cusub oo qasiidadaas ninna ma baran karo, boqol iyo afar iyo afartanka kun ee dunida
laga soo madax furtay mooyee. [4] Kuwaasoo ah kuwii aan naagaha ku nijaasoobin; waayo,
iyagu waa daahir oo waa kuwa Wanka u raaca meel alla meeshuu tagaba. Kuwan waxaa laga
soo madax furtay dadka si ay u noqdaan midhaha ugu horreeya ee Eebbe iyo Wankaba. [5] Oo
afkooda innaba been laguma helin, iinna ma laha.

### Farriintii Saddexda Malag

6 Oo haddana waxaan arkay malag kale oo samada dhex duulaya isagoo wata injiil daa'im ah
si uu ugu wacdiyo kuwa dhulka deggan iyo ummad kasta iyo qabiil kasta iyo af kasta iyo
qowmiyad kastaba, 7 Kuwaasoo cod wayn ku leh, Eebbe ka cabsada oo isaga ammaana,
waayo, saacaddii xukunkiisu way timid. Oo caabuda kii sameeyay samada iyo dhulka iyo
badda iyo ilaha biyaha ah. 8 Oo malag kale oo labaad ayaa soo raacday, oo waxay lahaayeen,
Waxaa dhacday oo dhacday Baabuloontii waynayd, taasoo ummadaha oo dhan ka waraabisay
khamrida fisqigeeda cadhada keena. 9 Oo haddana waxaa soo raacay malag kale oo
saddexaad, isagoo cod wayn ku leh, Hadday cidu caabuddo bahalka iyo sanamkiisa, ama ay
aqbasho sumad in lagaga dhigo wejiga ama gacanta, 10 Waxay ka cabbi doontaa khamrida
cadhada Eebbe ee lagu shubay koobka cadhadiisa aan badhxanayn oo waxaa isaga lagu
ciqaabi doonaa dab iyo baaruud malaa'igaha qudduuska ah hortooda iyo Wanka hortiisa. 11 Oo
qiiqa cadaabkoodu kor buu u baxayaa weligii iyo weligii, oo kuwa caabuda bahalka iyo
sanamkiisa iyo ku alla kii aqbala sumadda magiciisa nasasho ma helayaan habeen iyo maalin
toona. 12 Oo halkaasuu ka caddaanayaa samirka qudduusiinta, kuwaasoo ah kuwa xajiya
amarrada Eebbe iyo iimaanka Ciise. 13 Oo haddana waxaan samada ka maqlay cod igu leh,
Qor, Waxaa barakaysan kuwa hadda ka dib dhimanaya iyagoo Rabbiga rumaysan, Ruuxu
wuxuu leeyahay, Haah, iyagu waa inay ka nastaan hawshoodii, waayo, waxaa iyaga la socda
camalkoodii.

### Beergooyska Dunida

14 Oo bal eeg, haddana waxaan arkay daruur cad, oo waxaan daruurta dusheeda ku arkay mid
fadhiya oo u eg banii aadan, oo waxaa madaxa u saarnaa taaj dahab ah, oo gacantana wuxuu
ku haystay manjo af badan. 15 Oo haddana malag kale ayaa ka soo baxay guriga Eebbe, oo
wuxuu cod wayn ugu dhawaaqay kii daruurta ku fadhiyay, isagoo leh, Manjadaada soo dir oo
beerta goo; waayo, saacaddii beergooysku way timid; maxaa yeelay, midhihii dhulka ee la
gooyn lahaa way bislaadeen. 16 Marka kii daruurta ku fadhiyay wuxuu manjadiisii ku soo tuuray
dhulka, oo midhihii dhulkana waa la gooyay. 17 Oo haddana malag kale ayaa ka baxay guriga
Eebbe ee samada ku yaalla, oo isaguna wuxuu haystay manjo af badan. 18 Oo haddana malag
kale oo dabka xukuma ayaa ka soo baxay meesha allabariga; oo cod wayn ayuu ugu
dhawaaqay kii manjada afka badan haystay isagoo ku leh, Manjadaada afka badan soo daa,
oo waxaad uruurisaa canabka dhulka rucubyadiisa; maxaa yeelay, canabkii wuu bislaaday.
19 Marka malagii wuxuu manjadiisii ku soo tuurtay dhulka, oo waxay soo uruurisay canabka
dhulka, oo waxay ku tuurtay macsaraddii canabka ee waynayd ee cadhada Eebbe. 20 Oo
canabkiina waxaa lagu tumay magaalada dibaddeeda, oo waxaa macsaraddii ka soo baxay
dhiig, wuxuuna gaadhay tan iyo fardaha xakamahooda, ilaa kun iyo lix boqol oo istaadiyon[a].

### Toddobadii Malag Iyo Toddobadii Belaayo

**15** Oo haddana waxaan samada ku arkay calaamo kale oo wayn oo cajaa'ib ah, waxayna
ahayd toddoba malag oo haysta toddoba musiibo, kuwaasoo ah kuwii ugu dambeeyay, waayo,
waxaa iyaga ku dhex dhammaatay cadhadii Eebbe. 2 Marka waxaan arkay wax u eg bad
muraayad ah oo uu dab ku dhex jiro iyo kuwii iyagoo soo guulaystay ka yimid xagga bahalka
iyo xagga sanamkiisa iyo xagga nambarka magiciisa, oo ku dul taagan badda muraayadda ah

iyagoo haysta gitaarkii Eebbe. [3] Oo iyaguna waxay qaadayeen adeegihii Eebbe ee Muuse
qasiidadiisii iyo qasiidadii Wanka iyagoo leh,
Rabbiyow Eebbaha Qaadirka ahow, shaqadaadu waynaa, oo yaab ahaa. Boqorka
ummadahow, jidadkaagu waa xaq oo waa run!

[4] Rabbiyow, bal yaan kaa cabsan doonin oo aan magacaaga ammaani doonin? Waayo, adiga
keligaa ayaa qudduus ah; maxaa yeelay, ummadaha oo dhan way iman doonaan oo hortaada
ayay ku sujuudi doonaan; waayo, falalkaagii xaqa ahaa waa la muujiyay.
[5] Oo waxyaabahaas ka dib waxaan arkay gurigii Eebbe ee taambuugga markhaatifurka ee
samada ku jira oo la furay. [6] Marka gurigii Eebbe waxaa ka soo baxay toddobadii malag oo
haystay toddoba belaayo, oo waxay qabeen dhar daahir ah oo dhalaalaya, oo laabtana waxaa
ugu xidhnaa suuman dahab ah. [7] Oo afartii xayawaan midkood ayaa wuxuu toddobadii malag
siiyay toddoba fijaan oo dahab ah oo ay ka buuxdo cadhadii Eebbaha weligii iyo weligiiba nool.
[8] Marka guriga Eebbe waxaa ka buuxsamay qiiq ka yimid xagga ammaanta Eebbe iyo xagga
xooggiisa; oo ninna ma geli karin gurigii Eebbe ilaa iyo inta laga dhammeeyo toddobadii
belaayo ee ay toddobada malag haysteen.

### Toddobadii Dibi Ee Cadhada Eebbe

**16** Marka waxaan maqlay cod wayn oo guriga Eebbe ka yeedhaya, oo toddobadii malag ku leh,
Taga, oo toddobada fijaan ee ay cadhada Eebbe ku jirto dhulka ku shuba. [2] Marka waxaa
tagay kii kowaad, oo wuxuu fijaankiisii ku shubay dhulka, deedna dadkii sumadda bahalka
lahaa ee sanamka caabuday waxaa ku dhacay furuq xun oo halis ah. [3] Deedna kii labaad ayaa
fijaankiisii badda ku shubay, marka baddii waxay noqotay sidii nin dhintay dhiiggiisa oo kale, oo
waxyaabihii ku noolaa oo dhann way wada dhinteen. [4] Marka kii saddexaad ayaa fijaankiisii
webiyada iyo durdurradii biyaha ahaa ku shubay, ka dibna waxay noqdeen dhiig. [5] Marka
waxaan maqlay malaggii biyaha oo leh, Ka jira ee jirayow, adigu xaq baad tahay oo Qudduus
baad tahay, maxaa yeelay, sidaasaad wax u xukuntay [6] Waayo, iyagu waxay daadiyeen
dhiiggii qudduusiinta iyo nebiyada oo adna waxaad ka waraabisay dhiig; waayo, way
istaahilaan. [7] Oo haddana waxaan maqlay meeshii allabariga oo leh, Haah, Rabbiyow Eebbaha
Qaadirka ahow, xukunkaagu waa run oo waa xaq. [8] Oo kii afraadna wuxuu fijaankiisii ku
shubay qorraxda; oo waxaa qorraxda la siiyay awood ay dadka ku gubto. [9] Marka dadka waxaa
lagu gubay kulayl wayn, oo waxay nacalad dusha uga tuureen magaca Eebbaha
belaayooyinka gacanta ku haya oo mayna toobadkeenin, si ay isaga u ammaanaan. [10] Oo kii
shanaadna wuxuu fijaankiisii ku shubay carshigii bahalka; boqortooyadiisiina way
madoobaatay, dadkiina xanuun aawadii ayay carrabkooda ruugeen, [11] Oo Eebbe samada ayay
nacladeen xanuunkoodii iyo nabrahooda aawadood oo camalkoodiina kamayna toobadkeenin.
[12] Oo kii lixaadna wuxuu fijaankiisii ku shubay webiga wayn ee Yufraad; oo biyihiisiina way
engegeen, si jidka loo diyaariyo boqorrada ka imanaya xagga bari.
[13] Marka waxaan arkay saddex jinni oo nijaas ah oo ka soo baxaya masduulaagii afkiisa iyo
bahalka afkiisa iyo nebigii beenta ahaa afkiisa oo waxay u ekaayeen rahyo, [14] Waayo, waxay
ahaayeen arwaax jinniyo oo calaamooyin samaynaya, kuwaasoo u taga boqorrada dunida oo
dhan si ay u soo uruuriyaan dagaalka maalinta wayn ee Eebbaha Qaadirka ah. [15] (Oo bal eeg,
Anigu waxaan u imanayaa sida tuug oo kale. Haddaba waxaa barakaysan kii soo jeeda oo

dharkiisa dhawra sii uusan qaawanaan ugu socon oo aan cawradiisa loo arag.[295*] [16] Oo
iyaguna waxay boqorradii ku soo uruuriyeen meesha afka Cibraaniga lagu yidhaahdo
Armageddoon. [17] Oo kii toddobaadna wuxuu fijaankiisii ku shubay hawada; marka guriga
Eebbe waxaa ka soo baxay cod wayn oo ka yimid carshiga xaggiisa, kaasoo leh, Way
dhammaatay. [18] Marka waxaa dhacay hillaac iyo codad iyo onkad oo waxaa dhacay dhulgariir
wayn oo aan weligii isagoo kale la arag intay dadku dhulka joogeen, oo wuxuu ahaa dhulgariir
aad u wayn oo aad u xoog badan. [19] Oo magaaladii waynaydna waxaa loo kala qaybiyay
saddex meelood, oo magaalooyinkii ummaduhuna way wada burbureen; oo Baabuloontii
waynaydna waxaa laga xusuustay Eebbe hortiisa si iyada la siiyo koobkii khamriga cadhadiisa
xanaaqiisa. [20] Oo jasiirad kasta way carartay, buurihiina lama helin. [21] Oo waxaa samada ka
soo daatay oo dadka ku soo dul daatay roob dhagaxyaale ah, oo dhagax kastaba miisaankiisu
le'egyahay talanti; markaasay dadkii Eebbe nacaladeen balaayadii roobka dhagaxyaalaha
aawadeed, maxaa yeelay, balaayadiisu aad bay u waynayd.

## Riyadii Lagu Arkay Faasiqaddii Iyo Bahalkii

**17** Marka waxaa yimid mid ka mid ah toddobadii malag ee toddobada fijaan watay, oo wuxuu
igu yidhi, Kaalay halkan, waxaan ku tusi doonnaa xukunka faasiqadda wayn ee biyaha badan
ku dul fadhidee, [2] Taasoo ay boqorrada dunidu ka wada sinaysteen, oo kuwa dunida degganna
ay khamriga sinadeeda ku wada sakhraameen. [3] Markaasuu xagga Ruuxa kor iigu qaaday, oo
wuxuu i geeyay lama dagaanka; markaasaan arkay naag fuushan bahal guduudan oo ay ka
buuxaan magacyo gaalnimo ah, oo wuxuu lahaa toddoba madax iyo toban gees. [4] Oo
naagtuna waxay qabtay dhar midabkiisu yahay casaan iyo guduud, oo waxaa kaloo ay ku
labisnayd dahab iyo dhagaxyo qaali ah iyo luul, oo waxay gacanta ku haysatay koob dahab ah
oo ay ka buuxaan waxyaabo qudhun iyo wasakh ah, kuwaasoo ahaa nijaastii sinadeeda, [5] Oo
waxaa wejiga ugu qornaa magac macno qarsoon leh, kaasoo ah Baabuloonta wayn oo ah
hooyadii faasiqnimada iyo xumaanta dunida.

[6] Ka dibna waxaan arkay naagtii oo ku sakhraantay dhiiggii qudduusiinta iyo dhiiggii kuwii Ciise
u markhaatifuray. Oo markaan iyadii arkay ayaan aad ula yaabay. [7] Deedna malaggii wuxuu
igu yidhi, War maxaad la yaabantahay? Waan kuu fasiri doonaa sirta naagta iyo sirta bahalka
toddobada madax iyo tobanka gees leh ee iyada sida. [8] Bahalkii aad aragtay ee jiray hadda ma
jiro; oo wuxuu dhawaan ka soo bixi doonaa haawiya {Naarta aan salkeeda la gaadhi karin}, oo
wuxuu tegi doonaa halaag. Oo kuwa dhulka jooga ee aan magacooda lagu qorin kitaabka
nolosha waagii dunida la aasaasay, markay bahalka arkaan waxay la yaabi doonaan siduu
markii hore u jiray, ee uusan hadda u jirin ee uu hadda ka dib u jiri doono. [9] Halkanna waxaa
loo baahanyahay maskax xigmad leh. Toddobada madax waa toddoba buurood oo ay naagtu
ku fadhiisato; oo waana toddoba boqor, [10] Shan ka mid ahu way dhaceen, midna wuu joogaa,
midkii kalena weli ma iman; oo markuu yimaado, in yar ayuu sii jiri doonaa. [11] Oo bahalkii
markii hore jiray balse aan hadda jirin, isaga qudhiisu waa mid siddeedaad oo toddobada ayuu
ka mid yahay, oo wuu burburi doonaa. [12] Oo tobanka gees ee aad aragtayna waa toban boqor,
oo aan weli helin boqortooyo; laakiinse muddo saacad ah waxay awoodda la wadaagi doonaan
bahalka sida boqorro oo kale. [13] Kuwaasu hal ujeeddo ayay wada leeyihiin, taasoo ah inay

295 Matayos 24:43-44 iyo Luukos 12:39-40 iyo Muujintii 3:3

xooggooda iyo awooddoodaba bahalka siiyaan. [14] Kuwaasoo la dagaallami doonaan Wanka,
oo Wankuna wuu ka adkaan doonaa, maxaa yeelay, isagu waa Sayidka sayiddada iyo
Boqorka boqorrada, oo haddana kuwa isaga la jirana waa kuwa loo yeedhay, oo la doortay, oo
aamin ah. [15] Markaasuu igu yidhi, Biyihii aad aragtay ee ay faasiqaddu ku dul fadhidayna waxa
weeyaan shucuub iyo dad wayne aad u fara badan iyo ummado iyo afaf. [16] Oo tobankii gees
eed aragtay iyo bahalkuba waxay nici doonaan faasiqadda, oo iyada way bi'in doonaan oo way
qaawin doonaan, oo hilibkeedana way cuni doonaan, oo gabi ahaanteedaba waxay ku gubi
doonaan dab. 17 Waayo, Eebbe wuxuu quluubtooda galiyay inay isku fikir ahaadaan, oo oo ay
boqortooyadooda bahalka siiyaan ilaa iyo inta ay erayada Eebbe dhacayaan. [18] Oo naagtii aad
aragtayna waa magaalada wayn ee u talisa boqorrada dhulka.

### Waxaa Dhacday Magaaladii Waynayd

**18** Waxyaabahaas ka dib waxaan arkay malag kale oo samada ka soo degaya, wuxuuna lahaa
amar wayn, dhulkuna wuxuu la iftiimay ammaantiisa. [2] Marka wuxuu ku dhawaaqay cod dheer,
oo wuxuu yidhi, Waxaa dhacday oo dhacday Baabuloontii waynayd, oo waxay noqotay hoygii
shaydaannada iyo rugta jinni kasta oo nijaas ah iyo rugta shimbir kasta oo nijaas ah oo la
necebyahay. [3] Waayo, Ummadihii oo dhan waxay ku dhaceen khamrigii cadhada sinadeeda,
oo boqorradii dhulka oo dhanna iyaday ka sinaysteen, oo ganacsatadii duniduna waxay ku
taajireen xooggii barwaaqadeeda. [4] Oo haddana waxaan maqlay cod kale oo samada ka
dhawaaqaya oo leh, Dadkaygiiyow, iyada ka soo baxa, yaydaan dembiyadeeda la qaybsanine,
oo yayna musiibooyinkeedu idinku dhicine, [5] waayo, dembiyadeedu waxay gaadheen xataa
samada, oo Eebbana wuu xusuustay xaqdarrideeda, [6] Iyada wax u siiya sidii ay wax idiin siisay
oo kale, oo weliba u laban laaba siduu camalkeedu ahaa, oo koobkii ay wax idiinku qastay,
laban laab ugu qasa. [7] Oo intay isfaanisay iyo intay raaxaysatay oo kale, waxaad iyada siisaan
cadaab iyo murug, waayo, iyadu waxay qalbigeeda iska tidhaahdaa, Anigoo boqorrad ah
ayaan iska fadhiyaa, oo carmalna ma ihi, oo sinaba murug u arki maayo. [8] Sidaas daraaddeed
maalin keliya waxaa iyada u iman doona mussbooyinkeeda, kuwaasoo ah dhimasho iyo murug
iyo abaar, oo iyada gabi ahaanba waxaa lagu gubi doonaa dab, waayo, Rabbiga Eebbaha ah
oo iyada xukumay wuu xoog badanyahay. [9] Oo boqorradii dunida oo iyada ka sinaystay oo la
raaxaystay ayaa u ooyi doona oo u barooran doona markii ay arkaan qiiqa gubashadeeda,
[10] Iyagoo meel fog la taagan cabsida ciqaabteeda, oo waxay odhan doonaan, Waxaa
halaagsantay oo halaagsantay magaalada wayn ee Baabuloon, taasoo ah magaalada xoogga
badan! Waayo, xukunkaagu saacad keliya ayuu ku yimid. [11] Oo ganacsatada duniduna iyaday
u ooyaan oo u baroortaan, waayo, ninna hadda ka dib ma iibsan doono badeecadahooda,
[12] Badeecadahaas oo ah dahab iyo lacag iyo dhagaxyo qaali ah iyo luul iyo dhar wanaagsan
iyo dhar guduudan iyo xariir iyo dhar cas iyo alwaax kasta oo tu'inos ah iyo weel kasta oo
foolmaroodi laga sameeyay iyo weel kasta oo alwaax qaali ah laga sameeyay iyo kuwa laga
sameeyay nuxaas iyo bir iyo marmar, [13] Iyo qorfe iyo xawaash iyo uunsi iyo barafuun iyo foox
iyo khamri iyo saliid iyo bur wanaagsan iyo sarreen iyo lo', iyo ido iyo fardo iyo gaadhi fardood
iyo addoommo iyo nafaha dadka. [14] Oo midhihii ay naftaadu damacday way kaa tageen oo
waxyaabihii fiicanaa oo dhalaalayay oo dhanna way kaa baabba'een oo mar dambena lama
heli doono. [15] Oo ganacsatadii alaabtaas lahaa oo iyada ku taajiray waxay meel fog la istaagi
doonaan cabsida ciqaabteeda iyagoo ooyaya oo barooranaya, [16] oo waxay odhan doonaan,
Waxaa halaagsantay oo halaagsantay magaalada wayn, tii qabi jirtay dhar wanaagsan iyo dhar
guduudan iyo dhar cas oo ku labisan jirtay dahab iyo dhagaxyo qaali ah iyo luul. [17] Waayo,

hantidii sidaas u badnayd saacad keliya ayay ku baabba'day. Oo waxaa meel fog istaagay
naakhude kasta iyo kabtanada maraakiibta raaca iyo ragga bad bareenada ah iyo in alla inta
badda ka faa'iidaysata, [18] Deedna way qayliyeen markii ay arkeen qiiqii gubashadeeda,
waxayna yidhaahdeen, Bal magaaladee la mid ah magaalada wayn? [19] Oo iyana intay madaxa
boodh ku shubteen ayay qayliyeen oo ooyeen oo baroorteen oo waxay yidhaahdeen, Waxaa
halaagsantay oo halaagsantay magaaladii waynayd oo dhammaanba inta badda maraakiib ku
luhu ay dhexdeeda kaga taajireen hantideeda, waayo, iyadu saacad keliya ayay baabba'day.
[20] Haddaba iyada ku farxa, samaday iyo qudduusiinta iyo rasuullada iyo nebiyadow, waayo,
Eebbe xukunkiinnii ayuu iyada ku xukumay. [21] Marka malag xoog wayn ayaa kor u qaaday
dhagax u eg dhagaxshiid waynaa oo wuxuu ku dhex tuuray badda, oo wuxuu yidhi, Magaalada
wayn ee Baabuloon sidan oo kale ayaa xoog hoos loogu tuuri doonaa oo hadda ka dibna lama
heli doono. [22] Oo codka gitaaralayda iyo muusikalayda iyo kuwa turunbada afuufa innaba
dhexdaada lagama maqli doono,farsama yaqaanna dhexdaada mar dambe lagama heli
doono,wuxuu doonaba ha yaqaannee, oo shanqadha dhagax shiidkana dhexdaada innaba
lagama maqli doono mar dambe, [23] oo laambad iftiinkeedna mar dambe dhexdaada innaba
kama iftiimi doonto, oo codka arooska iyo aroosaddana dhexdaada innaba mar dambe lagama
maqli doono, waayo, ganacsatadaadu waxay ahaayeen amiirradii dhulka, maxaa yeelay,
saaxirnimadaada ayaa ummadaha oo dhan lagu khiyaaneenay. [24] Oo dhexdeeda waxaa laga
helay dhiiggii nebiyada iyo qudduusiinta iyo dhiiggii kuwii dhulka lagu dilay oo dhan.

### Farxadda Iyo Guusha Samada Ka Dhacday

**19** Oo waxyaabahaas ka dib waxaan maqlay wax u eg cod dheer oo maqluuq badan oo
samada ku jira, oo waxay lahaayeen, Halleeluuya! badbaado iyo ammaan iyo xoog waxaa leh
Eebbahayga; [2] Waayo, xukummadiisu waa xaq iyo caddaalad, maxaa yeelay, isagu wuu
xukumay faasiqaddii waynayd ee dhulka ku hallaysay sinadeeda; oo dhiiggii
adeegayaashiisana wuu usoo aar duday. [3] Oo haddana mar labaad ayay yidhaahdeen, Eebbe
ayaa mahad leh! qiiqeedu kor buu u baxaa weligeed iyo weligeedba. [4] Marka afar iyo
labaatankii oday iyo afartii xayawaan ayaa sujuuday, oo waxay caabudeen Eebbaha carshiga
ku fadhiya iyagoo leh, Aamiin, Eebbe ayaa ammaan leh [5] Marka cod ayaa ka soo yeedhay
carshiga, oo wuxuu yidhi, Eebbaheenna ammaana, adeegayaashiisa oo dhanow, kuwiinna
isaga ka cabsadow, yar iyo waynba. [6] Oo haddana waxaan maqlay wax u eg maqluuq badan
codkood iyo biyo badan codkood iyo onkod xoog badan codkiisa, oo waxay lahaayeen, Eebbe
ammaanu ha u ahaato, waayo, waxaa wax xukuma Rabbiga Eebbahayga ee Qaadirka ah.
[7] Aynu rayrayno oo aad u faraxno, oo aynu ammaanno isaga; waayo, arooskii Wanku wuu
yimid, oo aroosaddiisuna way is-diyaarisay. [8] Oo waxaa iyada lagu amray inay xidhato dhar
wanaagsan oo dhalaalaya oo daahir ah; dharka wanaagsanna waa cibaadadii xaqa ahayd ee
qudduusiinta. [9] Oo malaggii wuxuu igu yidhi, Waxaad qortaa, Waxaa barakaysan kuwa loogu
yeedhay cashada arooska Wanka.! Oo wuxuu kaloo igu yidhi, Kuwanu waa erayadii Eebbe oo
run ah. [10] Markaasaan lugihiisa ku hor sujuuday si aan isaga u caabudo. Deedna wuxuu igu
yidhi, ha samaynin sidan! Anigu waxaan ahay adeege la mid ah adiga iyo walaalahaaga u
markhaatifura Ciise. Eebbe u sujuud, waayo, markhaatifurka Ciise waa ruuxa wax sii
sheegidda.

## Ka Faraska Cad Fuushan

[11] Oo bal eeg, waxaan arkay samadii oo furantay iyo faras cad, oo kii fuushanaana waxaa la
odhan jiray Aamin iyo Run; oo isagu xaqnimo ayuu wax ku xukumaa oo uu ku dagaallamaa.
[12] Oo indhihiisu waxay u ekaayeen ololka dabka, madaxiisana waxaa u saarnaa taajaj badan;
oo waxaa ugu qornaa magac uusan ninna aqoonin isaga mooyaane. [13] Oo isagu wuxuu qabay
dhar dhiig la dhex galiyay, magiciisana waxaa la odhan jiray erayga Eebbe. [14] Oo ciidammadii
samada ayaa isaga soo raacay iyagoo fuushan fardo cadcad oo qaba dhar wanaagsan oo cad
oo daahir ah. [15] Oo afkiisana waxaa ka soo baxday seef af badan si uu ugu laayo ummadaha;
oo wuxuu iyaga ku xukumi doonaa ul bir ah, oo wuxuu tumi doonaa macsarada canabka ee ah
cadhada Eebbaha Qaadirka ah. [16] Oo dharkiisa iyo bowdadiisana waxaa ugu qornaa magac,
kaas oo ah BOQORKA BOQORRADA IYO SAYIDKA SAYIDDADA. [17] Ka dibna waxaan arkay
malag qorraxda dhex taagan; oo intuu cod dheer ku dhawaaqay ayuu haadda hawada dhex
duusha oo dhan ku yidhi, Kaalaya oo u soo uruura cashada wayn ee Eebbe, [18] Si aad u
cuntaan hilibka boqorrada iyo hilibka kabtannada iyo hilibka ragga xoogga badan iyo hilibka
fardaha iyo kuwa fuushan iyo hilibka dadka oo dhan, xor iyo addoon, iyo yar iyo waynba. [19] Oo
marka waxaan arkay bahalkii iyo boqorradii dhulka iyo ciidammadoodii oo isu soo bahaystay si
ay ula dagaallamaan kii faraska fuushanaa iyo ciidankiisa. [20] Marka waxaa la qabtay bahalkii
iyo nebigii beenta ahaa ee mucjisooyinka hortiisa ku samayn jiray, kuwaasoo uu ku duufsan
jiray kuwii aqbalay sumaddii bahalka iyo kuwii u sujuuday sanamkiisa, oo labadoodiiba iyagoo
nool ayaa waxaa lagu dhex tuuray baddii dabka ahayd ee ay baaruuddu ka ololaysay; [21] Oo
intoodii kalena waxaa lagu laayay kii faraska fuushanaa seefta afkiisa ka soo baxday, oo
haaddii oo dhanna waxay ka dhergeen hilibkooda.

## Shaydaanka Waxaa La Xidhay Kun Sannadood

**20** Ka dibna waxaan arkay malag samada ka soo degaya, oo wuxuu gacanta ku haystay furihii
haawiya iyo silsilad wayn.[296*] [2] Oo wuxuu qabtay masduulaagii ahaa maska duqa ah, kaasoo
ah Iblayska iyo Shaydaanka, oo muddo kun sanno ah ayuu xidhay, [3] Oo wuxuu ku ridday
haawiya, markaasuu xidhay oo shaabad ku awday si uusan ummadaha mar dambe u
khiyaanin ilaa oy kunka sanno ka dhammaadaan; oo markaas ka dib waa in isaga la sii daayo
wakhti yar. [4] Oo markaasaan arkay carshiyo, oo waxaa kuwa ku fadhiyay la siiyay amar ay wax
ku xukumaan; oo haddana waxaan arkay nafihii kuwii madaxa looga jaray markhaatigii ay Ciise
u fureen aawadiis, iyo erayga Eebbe aawadiis iyo kuwii aan caabudin bahalka iyo sanamkiisa
toona, oo aan aqbalin in sumadda lagaga dhigo wejigooda iyo gacantooda; wayna soo
noolaadeen oo kun sanno ayay Masiix wax la xukumeen. [5] Oo dadkii dhintay intoodii kalena
mayna soo noolaanin ilaa oy kunkii sanno dhammaadeen. Tanu waa sarakicidda kowaad.
[6] Waxaa barakaysan oo qudduus ah qofkii ka qayb gala sarakicidda kowaad; kuwaas
dhimashada labaadi amar kuma laha, laakiinse waxay wadaaddo u ahaan doonaan Eebbe iyo
Masiixa, oo waxay isaga wax la xukumi doonaan kun sannadood.

## Furitaanka Shaydaanka Iyo Dagaalka Ugu Dambeeya

[7] Oo markay kunkii sanno dhammaadaan ayaa Shaydaanka laga sii dayn doonaa xabsiga lagu
xidhay, [8] Oo wuxuu u soo bixi doonaa inuu khiyaano ummadaha deggan dhulka afartiisa gees,

296 Haawiya waa cadaabta aan salkeeda la gaadhi karin.

kuwaasoo ah Juuj iyo Maajuuj si uu iyaga ugu soo uruuriyo dagaalka; oo tiradooduna waa sida
ciidda badda. [9] Oo way soo baxeen iyagoo dhulka oo dhan qariyay, oo waxay hareereeyeen
xaruntii qudduusiinta iyo magaaladii la jeclaa; marka waxaa samada ka soo degay dab, wuuna
baabi'iyay iyaga. [10] Oo Iblayskii iyaga khiyaanayn jirayna waxaa lagu dhex tuuray baddii dabka
iyo baaruudda ahayd, halkaas oo ay ku jiraan bahalkii iyo nebigii beenta ahaa, oo iyaga waa la
cadaabi doonaa habeen iyo maalinba weligood iyo weligoodba.

### Sarakicidda Kuwii Dhintay Iyo Xukunka Ugu Dambeeya

[11] Deedna waxaan arkay carshi wayn oo cad iyo kii ku fadhiyay oo wejigiisa dhulka iyo
samaduba ay ka carareen, oo iyagiina meel looma helin. [12] Ka dibna waxaan arkay kuwii
dhintay, yar iyo waynba, iyagoo taagan carshiga hortiisa, marka waxaa la furay kutubtii; oo
haddana waxaa la furay kitaab kale oo ah kii nolosha; oo kuwii dhintay waxaa lagu xukumay
waxyaalihii kutubta ku qornaa, siduu camalkoodu ahaa.

[13] Marka baddii waxay soo tuftay kuwii dhintay ee ku dhex jiray; oo dhimashadii iyo Haawiyana
waxay sii daayeen kuwii dhintay ee ku dhex jiray; marka iyaga waxaa laga xukumay nin walba
siduu camalkiisu ahaa. [14] Oo mowdkii iyo Haawiyaba waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd.
Oo taasu waa dhimashada labaad oo ah badda dabka ah. [15] Oo ku alla kii aan kitaabka
nolosha laga helin isagoo ku qoran, waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd.

### Samada Cusub Iyo Dhulka Cusub

**21** Oo waxaan arkay samo cusub iyo dhul cusub; waayo, samadii hore iyo dhulkii hore way
dhammaadeen; oo baddna mar dambe ma jirayso. [2] Oo aniga oo Yooxanaa ah waxaan arkay
magaaladii qudduuska ahayd, taasoo ah Quddusta cusub ee samada ka soo degaysa xagga
Eebbe, iyadoo loo diyaariyay sidii aroosad ninkeeda u labisatay. [3] Markaasaan maqlay cod
dheer oo carshiga ka yeedhaya oo leh, Bal eeg, rugta Eebbe daganyahay waa dadka
dhexdooda, oo isna wuxuu la degganaan doonaa iyaga, oo iyaguna waxay ahaan doonaan
dadkiisa, oo Eebbe qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga, oo wuxuu ahaan doonaa
Eebbahood; [4] Oo isaguna indhahooda ayuu ilmo kasta ka tirtiri doonaa, oo dhimashana mar
dambe ma jiri doonto, oo mar dambana ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona,
waayo, waxyaalihii hore way dhammaadeen. [5] Marka kii carshiga ku fadhiyay wuxuu yidhi, Bal
eeg, wax walba cusayb baan ka dhigayaa. Oo wuxuu igu yidhi, Qor, waayo, erayadanu waa
aamin iyo run. [6] Oo wuxuu igu yidhi, Way dhammaatay! Anigu waxaan ahay Alfa iyo Oomeega,
iyo Bilowgii iyo dhammaadka. Oo kii harraadsan waxaan hadiyad ahaan uga waraabin doonaa
isha biyaha nolosha. [7] Oo kii guulaysta wuxuu dhaxli doonaa waxyaalahan, oo anna waxaan
isaga u ahaan doonaa Eebbe, isaguna wuxuu ii ahaan doonaa wiil. [8] Laakiinse kuwa fulayada
ah iyo kuwa aan muminiinta ahayd iyo kuwa la karaahiyaysto iyo gacan kudhiiglayaasha iyo
kuwa sinaysta iyo saaxiriinta iyo kuwa sanamyada caabuda iyo beenaalayaasha oo dhan
waxay qayb u heli doontaa badda ay dabka iyo baaruuddu ka ololayaan, oo taasuna waa
dhimashada labaad.

## Quddusta Cusub ee Samada Ka Soo Degaysa

[9] Ka dibna waxaa yimid mid ka mid ah toddobadii malag ee wattay toddobada fijaan ee ay ka
buuxeen toddobada musiibo ee ugu dambeeyay; oo isaguna wuu ila hadlay, oo wuxuu igu
yidhi, Bal kaalay waxaan ku tusayaa aroosadda ah Wanka xaaskiisa. [10] Oo wuxuu iga qaaday
xagga Ruuxa, oo wuxuu i geeyay buur wayn oo dheer, oo wuxuu i tusay magaalada Quddus
ee qudduuska ah ee samada ka soo degaysa xagga Eebbe, [11] Oo magaaladuna waxay lahayd
ammaanta Eebbe; oo nuurkeedu wuxuu u ekaa dhagax aad u qaali ah, oo sidii dhagaxa
yasbidka oo u dhalaalaya sidii quruurad oo kale; [12] Oo waxay lahayd derbi wayn oo dheer; oo
waxay kaloo lahayd laba iyo toban albaab, oo albaabadana waxaa ka taagnaa laba iyo toban
malag; oo waxaa ku qornaa magacyo, kuwaas oo ah magacyada laba iyo tobanka qabiil ee
reer banii Israa'iil; [13] Oo xagga bari waxay ku lahayd saddex albaab, woqooyina waxay ku
lahayd saddex albaab, koonfurna waxay ku lahayd saddex albaab, galbeedna waxay ku lahayd
saddex albaab. [14] Oo derbiga magaaladuna wuxuu lahaa laba iyo toban aasaas, oo dushooda
waxaa ku qornaa laba iyo tobankii rasuul ee Wanka laba iyo tobankoodii magac. [15] Oo malaggii
ila hadlay wuxuu watay ul dahab ah si ugu qiyaaso magaalada iyo albaabadeeda iyo
derbigeeda. [16] Oo magaaladuna waxay u dhisnayd afar gees, oo dhererkeeduna wuxuu le'ekaa
ballaadhkeeda; oo wuxuu magaalada ku qiyaasay ushii, oo waxay noqotay laba iyo toban kun
oo istaadiyon; oo dhererkeeda iyo ballaadhkeeda iyo sara jooggeeduba way isla ekaayeen.
[17] Oo wuxuu qiyaasay derbigeedii oo wuxuu noqday boqol iyo afar iyo afartan dhudhun, oo
dhudhunka banii aadanka ah, kaasoo ah qiyaasta malagga. [18] Oo derbigeediina waxaa laga
dhisay yasbid, oo magaaladuna waxay ahayd dahab saafi ah oo u eg muraayad saafi ah. [19] Oo
derbigii magaalada aasaaskiisiina waxaa lagu sharraxay dhagaxyo qaali ah oo cayn kasta ah.
Aasaaska kowaad wuxuu ahaa yasbid, ka labaadna wuxuu ahaa safayr, ka saddexaadna
wuxuu ahaa khalkedoon, ka afraadna wuxuu ahaa sumurud, [20] Ka shanaadna wuxuu ahaa
sardonug, ka lixaadna wuxuu ahaa sardiyos, ka toddobaadna wuxuu ahaa khirusolitos, ka
siddeedaadna wuxuu ahaa berullos, ka sagaalaadna wuxuu ahaa tobasiyos, ka tobnaadna
wuxuu ahaa khirusobrasos, ka koob iyo tobnaadna wuxuu ahaa yakintos, ka laba iyo
tobnaadna wuxuu ahaa ametustos. [21] Oo laba iyo tobanka albaabna waxay ahaayeen laba iyo
toban luul, oo mid kastoo albaabada ka mid ahaba wuxuu ahaa luul, oo magaalada
albaabkeeduna wuxuu ahaa dahab saafi ah oo u eg muraayad wax laga dhex arko. [22] Oo
dhexdeedana macbud kuma arag; waayo, Rabbiga ah Eebbaha Qaadirka ah iyo Wanka ayaa
waxay yihiin macbudkeeda. [23] Oo magaaladuna uma baahna qorrax iyo dayax toona si ay
dusheeda u iftiimiyaan; waayo, ammaanta Eebbe ayaa iftiimisa, oo laambadeeduna waa
Wanka. [24] Oo ummaduhuna waxay ku dhex socon doonaan iftiinkeeda, oo boqorrada dhulkuna
ammaantooda iyaday soo gelin doonaan. [25] Oo albaabadeedana sinaba looma xidhi doono
maalinta (waayo, halkaas habeen ma jiri doono); [26] Oo waxay iyada soo gelin doonaan
ammaanta iyo sharafta ummadaha; [27] Oo gudaheedana marnaba ma geli doonaan wax nijaas
ah amase kii sameeya wax karaahiyo iyo been ah; laakiinse waxaa keliya oo geli doona kuwa
ku qoran kitaabka nolosha ee Wanka.

## Webiga Nolosha

**22** Markaasuu malaggii i tusay webi ah biyaha nolosha, oo u dhalaalaya sida quruurad oo kale,
oo ka soo baxaya carshiga Eebbe iyo Wanka, 2 Oo maraya jidka magaalada dhexdeeda.
Webiga labadiisa dhinacba waxaa ku yaalla geedka nolosha oo dhalaya laba iyo toban nooc
oo midho ah, oo wuxuu midho dhalaya bil kasta; oo geedka caleemihiisuna waxay ummadaha
u ahaayeen bogsiin. 3 Oo mar dambena nacladu ma jiri doonto, oo waxaa halkaas ku jiri doona
Eebbe iyo Wanka carshigooda; oo adeegayaashiisuna way u adeegi doonaan, 4 Oo wejigiisay
arki doonaan, oo magiciisuna wuxuu ugu qornaan doonaa wejigooda. 5 Oo mar dambe habeen
ma jiri doono, oo iyaguna uma baahnaan doonaan laambad iftiinkeed iyo iftiinka qorraxda
toona; waayo, waxaa iyaga iftiimin doona Rabbiga Eebbaha ah, oo iyaguna waxay talin
doonaan weligood iyo weligood.

## Imaatinka Masiixa

6 Ka dibna malaggii wuxuu igu yidhi, Erayadanu waa aamin iyo run; oo Rabbiga ah Eebbaha
arwaaxda nebiyada ayaa malaggiisa u soo diray si uu adeegayaashiisa ugu muujiyo
waxyaabaha waajibka ah inay dhawaan dhacaan. 7 Oo bal eeg, anigu durba waan imanayaa.
Haddaba waxaa barakaysan qofkii xajiya erayada wax sii sheegidda ee kitaabkan ku qoran.
8 Anigoo Yooxanaa ah waxaan ahay ka maqlay ee arkay waxyaabahan. Oo markii aan maqlay
ee aan arkay, ayaan ku hor dhacay cagihii malaggii i tustay waxyaabahan, si aan ugu sujuudo.
9 Deedna wuxuu igu yidhi, Iska jir oo saas ha yeelin! waayo, aniguba waxaan ahay adeege la
mid ah adiga iyo nebiyada walaalaha ah iyo kuwa xajiya erayada kitaabkan, marka Eebbe u
sujuud. 10 Ka dibna wuxuu igu yidhi, Ha shaambadaynin erayada wax sii sheegidda kitaabkan
ku qoran, waayo, wakhtigu wuu dhawyahay. 11 Oo kii xaqdaranu xaqdarridiisa ha sii sameeyo,
kii nijaas ahuna nijaas ha iska sii ahaado, kii xaq ahuna xaqnimo ha sii sameeyo; kii qudduus
ahuna qudduus ha sii ahaado. 12 Bal eeg, anigu dhakhsaan u imanayaa, oo abaal gudkaygiina
waan wataa si aan qof walba ugu abaal mariyo siduu camalkiisu ahaa. 13 Anigu waxaan ahay
Alfa iyo Oomeega, kii ugu horreeyay iyo ka ugu dambeeya, Bilowgii iyo dhammaadka.
14 Haddaba waxaa barakaysan kuwa khamiisyadooda maydha, si ay u awoodaan inay u
yimaaddaan geedka nolosha, oo ay magaalada albaabada ka soo galaan. 15 Haddaba dibadda
waxaa jooga eeyda iyo saaxiriinta iyo kuwa sinaysta iyo gacan ku dhiiglayaasha iyo kuwa
sanamyada caabuda iyo ku alla kii beenta jecel ama sheega. 16 Oo anigoo Ciise ah ayaan
malagaygii u soo diray si uu waxyaabahan idiinku markhaatifuro kiniisadaha aawadood. Anigu
waxaan ahay xidiggii iyo farcankii Daa'uud iyo xidigga waaberi ee dhalaalaya.

17 Ruuxa iyo aroosadduba waxay yidhaahdaan, Kaalay! Oo qofkii maqlana ha yidhaahdo,
Kaalay. Oo qofkii harraadsanna ha yimaado. Oo qofkii doonaya biyaha nolosha hadiyad ahaan
ha u qaato. 18 Aniguna waxaan uga digayaa qof kasta oo maqla erayada wax sii sheegidda
kitaabkan ku qoran, Hadduu qof wax ku daro iyaga, Eebbe wuxuu isaga ku sii dayn doonaa
musiibooyinka kitaabkan ku qoran; 19 Oo hadduu qof wax ka jaro erayada kitaabka wax sii
sheegiddan, isagana Eebbe ayaa nasiibkiisa ka jari doona geedka nolosha iyo magaalada
qudduuska ah iyo waxyaabaha kitaabkan ku qoran. 20 Haddaba ka waxyaabahan ka
markhaatifuraya, wuxuu ku leeyahay, Anigu dhakhsaan u imanayaa. Aamiin, Rabbi Ciisow,
kaalay. 21 Nimcada Sayid Ciise ha la jirto qudduusiinta oo dhan.
Aamiin.